

# ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA

## DOONDOON QARSOODIGA
## BILOW SOCDAALKA

P.D. Bramsen

To: **Sidan oo kale miyaad u fekertaa?**

CC:

Subject: the bible

Salaan. Ciise waa Masiixa, taasna waan rumaysanahay, laakiinse isagu weligiis Ilaahnimo muu sheegan. Marna iskutallaabta laguma qodbin. Xataa haddii Ciise iskutallaabta lagu qodbay, taas macnaheedu maaha in arrintaas daraaddeed dadka dembiyadooda lagaga saamaxay. Arrinta dembiileyaasha ku saabsan oo dhammi wax macno ah iima samaynayso. Waxaan kale oo ogahay oo rumaysanahay inuu Baybalka badankiisu been yahay oo meelo badan laga beddeley...

Nabad, Ahmed

- *Miyaan buugga adduunka ugu caansan la aammini karin?*
- *Maxaa qisada iyo akhbaarka kitaabkan ku qoran ka dhigay mid aad u soo jiidasho badan, laakiinse muran badan dhalisa?*
- *Adduun ay 10,000 oo diimood ka jiraan, ma inaad ku wareerto oo keliya ayaa kuu bannaan?*

*Adiguba raadi. Socdaal dheer oo ilaa aakhiro soconaya bilow — inta aadan dhiman ka hor.*



**"Buuggani wuxuu ka jawaabayaa su'aalo adadag. Oo xoojinayaa rumaysiga. Oo ku siinayaa socdaal ruuxiyan ah oo kaamil ah. Wuxuuna kuu keenayaa inuu Ilaahay nafteenna si qoto dheer u taabto."** ***— Akhriste Maraykan ah***

**"Aad buu kuu soo jiidanayaa. Sida uu u qeexayo Ilaahay oo nolosha akhiro lala joogo waa mid yaab leh. Isla hadda ayaanba jannadaa rabaa."** ***— Akhriste Bariga Dhexe ku nool***

**P. D. Bramsen** iyo xaaskiisu waxay muddo dheer ku noolaayeen oo carruurtooda ku koriyeen waddan saxaraha qarka ku haya oo dadka badankiisu Muslimiin yihiin. Qoraallada Bramsen waxaa aasaas u ah jacayl weyn oo uu u qabo Qorniinka Quduuska ah iyo kumanyaal sheeko oo dhex maray isaga iyo asxaabtiisa, deriskiisa, iyo kuwa wax u soo qora ee Muslimiinta ah. Wuxuu kale oo qoray Boqorka Ammaanta, oo ah buug sawireed iyo filin da' kasta loogu talaggalay iyo Jidka Xaqnimada, oo ah 100-barnaamij oo raadiyaha loogu talaggalay kuwaas oo taxane ah oo luuqado badan oo Afrika, Aasiya, iyo Bariga Dhexe lagaga hadlo lagu turjumay laguna baahiyey.

ISBN 978-1-62041-021-9

www.one-god-one-message.com

# ILAAH KELIYA
# IYO KITAAB KELIYA



DOONDOON QARSOODIGA
BILOW SOCDAALKA

# ILAAH KELIYA
# IYO KITAAB KELIYA



**P.D. Bramsen**

**Farshaxanka:**
**D.C. Bramsen**

Relief Opportunity & Care for Kids

ROCK INTERNATIONAL

Resources Of Crucial Knowledge

**Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya**
by P. D. Bramsen
Somali Translator: Abdi Duale

Copyright © 2022 ROCK International
Xuquuqda buugga oo dhan baa dhowrsan.

Somali Edition of
ONE GOD ONE MESSAGE
Copyright © 2007, 2022 by ROCK International

ISBN 978-1-62041-021-9

Daabacaadda
ROCK International


ROCK INTERNATIONAL

• *Samafal, Caawimaad & Daryeelka Carruurta*
• *Cilmi Dhaxalgal ah oo Muhiim ah*
P.O. Box 4766, Greenville, SC 29608
www.rockintl.org • resources@rockintl.org

Aayadaha Baybalka ee la soo xigtay waxaa laga soo qaatay Kitaabka Quduuska ah ee af Soomaaliga ku turjuman ee ay Bible Society of Kenya u daabacday, hay'adda la yidhaahdo, Society for International Missions (SIM), sannadkii 2008, Nayroobi, Kiiniya.

*Naqshadaynta jaldiga iyo farshaxanka D. C. Bramsen*

Buuggan, Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya waxaa la heli karaa isaga oo luuqado kale ku turjuman.
**www.one-god-one-message.com**
Oggolaansho aad buuggan ku turjuntid, kala xidhiidh
pdbramsen@rockintl.org


"Warkii wanaagsan oo
dal fog ka yimaadaa,
Waa sida biyo qabow
ay naf harraadsan
u yihiin oo kale."
(Maahmaahyadii 25:25)



# Tusmada Buugga


Erayo hordhac ah. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1

## QAYBTA 1-AAD :
## ISU DIYAARINTA SOCDAALKA
*WAJAHAADA CAQABADAHA*

1. Iibso Runta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 7
2. Ka Guuleysiga Caqabadaha. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 19
3. Beddelaad mise Xafidaad? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 35
4. Sayniska iyo Baybalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 49
5. Saxiixa Ilaahay . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 60
6. Markhaatifur Aamin ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 73
7. Aasaaska. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 84

## QAYBTA 2-AAD
## SOCDAALKA
*OGAANSHAHA QARSOODIGA*

8. Waa Kuma Ilaahay? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 93
9. Mid La Mid Ahi Ma Jiro . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 110
10. Abuuritaan Khaas ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 126
11. Bilowgii Sharka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 140
12. Qaynuunka Dembiga iyo Dhimashada . . . . . . . . . . . . . 151
13. Naxariis iyo Caddaalad . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 161
14. Habaarkii . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 169
15. Dhibaato Laba-Jibbaaran . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 178

16. Farcanka Naagta. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 192
17. Waa Kuma Kani? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 203
18. Qorshaha Abadiyanka ah ee Ilaahay. . . . . . . . . . . . . . 224
19. Qaynuunka Allabariga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 233
20. Allabari Muhiim Ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 244
21. Dhiig Dheeraad ah oo la Daadiyey . . . . . . . . . . . . . . . 256
22. Wanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 268
23. Kaamilaadda Qorniinka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 281
24. Waa La Wada Bixiyey . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 292
25. Dhimashada Waa Laga Adkaaday . . . . . . . . . . . . . . . . 305
26. Ehlu-Diin Ilaahay Ka Fog . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 319

## Qaybta 3-aad
## Dhammaadka Socdaalka
*FASAQAADDII HABAARKA*

27. Heerka 1-aad: Qorshihii Hore ee Ilaahay. . . . . . . . . . 341
28. Heerka 2-aad: Qorshaha Hadda ee Ilaahay. . . . . . . . 364
29. Heerka 3-aad: Qorshaha Ilaahay ee Mustaqbalka. . 386
30. Sii Qooraanso Jannada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 409
Erayo Gunaanad ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 426
Qoraallo Gunaanad ah. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 429
Dib Uga: Fekerka Socdaalkeenii . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 469



# ERAYO HORDHAC AH

"Camalka wanaagsan ee aad samaysay daraaddiis, waxaad u qalantaa inaad jannada tagto, laakiinse akhbaarka aad ku wacdidid dartiis, waxaad u qalantaa inaad naarta tagto!" Beeldaajiye aan saaxiib nahay ayaa sidan igu yidhi.

Saaxiibkay iyo xaaskiisu waxay tobankii sanno ee la soo dhaafay ku noolaayeen ninkan tuuladiisa qarka u saaran Lama-Degaanka Saxaraha. Waxay aasaaseen mashruuc beer-qodasho ah iyo cisbitaal yar. Waxa kale oo ay qof kasta oo daneeya inuu iyaga dhegeysto u sheegi jireen qisada nebiyada.

Sida uu beeldaajiyaha tuuladaasi aaminsanaa maxay ahayd shaqadii uu saaxiibkay qabtay ee uu darteed ugu "qalmay inuu jannada galo?" Isagu camalo wanwanaagsan ayuu sameeyey.

## XAGGEE?

Waxaan ku dhashay Maraykanka, laakiinse buuggani Afrika ayuu ku dhashay.

*Gobolka:* Saaxil[1] ee waddanka Sinigaal, ee Galbeedka Afrika ku yaalla.

*Xaaladdii:* Salaaddii subax ayaa laga soo baxay. Shucaacii cadceedda soo baxaysa ayaa soo muuqday. Weli hawadu qabow fiican bay ahayd, laakiinse mar dhow bay is beddeli doontay. Gurigeena tuulada hortiisa ayaan kumbuyuutarkayga la fadhiyaa. Dameer ama diiq marmar ciyaya mooyaane tuulada inteeda kale way aammusan tahay. Hadda, sanqadha keliya ee aan maqlayaa waa kumbuyuutarka aan garaacayo, oo fekeradaydii aaya erayo isu beddelaya erayadaydiina waxay isu beddelayeen qoraal.

## SABAB?

Wax baan qorayaa, waayo Kan nolosha, farxadda, nabadda, iyo qiimaha igu barakeeyey ayaa i siiyey arrin aan wax ka qoro.

Waxaan ku qorayaa qalbi leh tixgelin iyo jacayl aan u qabo saaxiibbadayda Muslinka ah, gaar ahaan kuwa reer Sinigaal, halkaas oo aanu aniga iyo xaaskaygu ku koriney saddexdayadii cunug, oo aanu muddo dheer ku noolayn.

Wax baan qorayaa, waayo sannadihii ugu dambeeyey Muslimiin kun ka badan oo adduunka dacalladiisa ku nool ayaa emaillo ii soo qoray. Ma ahayn in fikradahoodii iyo su'aalahoodii la iska dhego tiro.

Wax baan qorayaa, waayo waxaan ka naxayaa wadaadada daalay ee aan hayn wax aan ka ahayn inay yidhaahdaan, "Baybalku waa run maadaama uu sidan sheegayo!" ama, "Quraanku waa run maadaama aan kitaab isaga oo kale ah la qori karin!"

Waan qorayaa, waayo qalbiga bini'aadanka ah ee ay u badan tahay inuu wax kastoo kale rumeeyo, oo aan ka ahayn akhbaarka aan is bedbedelka lahayn ee Ilaaha keliya ee runta ah.

## MAXAY?

Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya wuxuu bixinayaa fursad nolosha mar ku soo marta: inuu qunyar ku dhex socodsiiyo Kitaabka Quduuska ah oo aad heshid akhbaarka nebiyadu qoreen. Kuwa socdaalkan ka qayb qaata waxaa la siinayaa fursad ay caqabado badan kaga gudbaan (Qaybta 1-aad), ku dhex galaan marxaladdo qarsoodi ah (Qaybta 2-aad), oo ay aakhirka gudaha u galaan boqortooyo qurux badan oo ammaan leh, iyo run lagu qancayo (Qaybta 3-aad).

## KUMA?

Socdaalkan waxaa ugu horraynta loogu talogalay dadka aaminsan hal Ilaah oo keliya. Sidaas oo ay tahay, dadka ilaahyo badan aaminsan iyo dadka aaminsan inay bii'adu guud ahaan ilaahiyan tahay, kuwa bini'aadanimada keliya aaminsan, iyo kuwa aan Ilaahay aaminsanayn[2] iyagana waa lagu soo dhoweynayaa. Wuxuu khuseeyaa qof kasta oo qiyaasaya inay aakhiradiisu u

qalanto dhowr saacadood, oo ah wakhtiga buuggan akhrintiisa lagu dhammayn karo.

Asalkaagu meel kasta ha ka soo jeedee, haddaad Ilaahay aaminsan tahay ama aadan aaminsanaynba, waxaa lagugu martiqaadayaa inaad nala gashid socdaalkan aanu Kitaabka Quduuska ah ee ay kuwo badani sharfaan, oo kuwo tiro yari fiiro gaar ah siiyaan ku dhex marayno.

Saddex kun oo sannadood ka hor, nebi ayaa sidan Abuuraha iyo Mulkiilaha adduunka ka baryey, *"Indhahayga fur si aan waxyaalo yaab badan sharcigaaga uga arko."* (Sabuurradii 119:18)

In kasta oo laga yaabo inaadan jeclaysan wax kasta oo aynu arki doono, haddana yaanay ku dhaafin inaad aragtid.

Ka socdaalka kugula jira,
*P. D. Bramsen*

# QAYBTA 1AAD: ISU DIYAARINTA SOCDAALKA

## WAJAHAADA CAQABADAHA




1 - Iibso Runta

2 - Ka Guuleysiga Caqabadaha

3 - Beddelaad mise Xafidaad?

4 - Sayniska iyo Baybalka

5 - Saxiixa Ilaahay

6 - Markhaatifur Aamin ah

7 - Aasaaska



# 1

# Iibso Runta

*"Runta soo iibso, oo ha sii iibin…."*
— Nebi Sulaymaan (Maahmaahyadii 23:23[3])

Mala-awaal adiga oo dhex socda suuq weyn oo ay joogaan bilyamaad qof.

Haa, bilyamaad.

Inta ishaadu qabato waxaa taxan tobanaan kun oo dukaan. Dhinac kasta oo aad eegtid dukaanleyda ayaa si xamaasad leh u qaylinaya, murmaya, baayactamaya, yeedhaya, baryootamaya—qaarkood si deggan, qaarkood samaacaddo, iyada oo uu midkood kastaa sheegayo inuu hayo waxa aad dooneyso inaad iibsato:

***Runta!***

Ha qoslin. Madbacadda Jaamacadda Oxford ayaa soo saartay liisto ay ku qoran yihiin toban kun oo diimood oo adduunka ka jira. Kuwan kuma jiraan kumanyaal mad-habood iyo firqo oo diimahaasi u sii kala baxaan.[4]

Markaa, maxaynu iibsanaa? Yaynu rumaynaa?

Haddii uu jiro hal Ilaah oo keliya oo run ahi, oo uu Kaasi xaqiiqada ama runta Isaga ku saabsan iyo qorshaha uu bini'aadanka u hayo uu muujiyey, sidee ayaynu taas ku garan karnaa?

Afar kun oo sanno ka hor, nebi Ayuub ayaa su'aal tan oo kale ah is weydiiyey:

> *"Laakiinse waa xaggee meesha xigmadda laga helaa? Oo waxgarashada meesheeduse waa xaggee? Dadku qiimaheeda ma yaqaan… Dahab laguma heli karo, lacagna looma miisaamo… Hubaal xigmadda qiimaheedu waa ka sii sarreeyaa luul."* (Ayuub 28:12-13,15,18)

Ma inaynu innaga oo wareersan oo aan hubaal haysan nolosha dhex lugaynaa? Mise waxaynu ogaan karnaa xigmadda iyo runta Ilaaha keliya ee runta ah?

Bal waynu arki doonaa siday noqoto inta aynu socdaalkan ku jirno.

## KITAABKA KITAABBADA

Erayga *Baybal* asalkiisu waa erayga af-Giriigga ah ee *Biblia*, oo micnihiisu yahay *Kitaabka Kitaabbada* ama *maktabad*.

Muddo ka badan laba kun oo sanno ayuu Ilaahay bini'aadanka kula hadlayey nimanka ay ka midka yihiin Aadan, Nuux, iyo Ibraahim, Ilaahay wuxuu aakhirkii isticmaalay 40 nin muddo ka badan 15 qarni si akhbaarkiisa loo qoro. Nimankan Ilaahay akhbaarka u soo dhiibay waxaa loogu yeedhaa nebiyo ama rasuullo. Erayga *nebi* macnihiisa tooska ahi waa *af hayeen ama ka hadalka tebiya, Rasuul* macnihiisuna waa *akhbaar-wade*. Maanta waxaynu haysanaa wixii ay kuwaasi qoreen oo ah hal buug ah—Baybalka. Erayada sida *Qorniinka Quduuska ah* iyo *Qoraallada Nebiyada,* iyo *Erayga Ilaahay* ayaa iyagana la isticmaalaa iyada oo Baybalka loola jeedo. *Towreedda, Sabuurrada,* iyo *Injiilku* waa qaybo khaas ah oo ka mid ah Baybalka. Qorniinka waxaa afka Carabiga loogu yeedhaa *al-Kitaab-al-Muqaddas,* oo macnaheedu yahay *Kitaabka Quduuska* ah.



Qarniba qarniga uu ka dambeeyo, Baybalku wuxuu ahaa kitaabka adduunka loogu iibsi badan yahay. Ilaa maantadan, qayb ahaan iyo gebi ahaantiisaba, waxaa Qorniinka Baybalka lagu turjumey in ka badan 2,400 oo luuqadood, haddana waxaa turjumaaddoodu socotaa 1,940 luuqadood oo kale.[5] Ma jiro kitaab kale oo kan ku soo dhowaan karaa.

In kasta oo uu sidaas ugu caansan yahay, haddana Baybalku waa kitaab keliya ee taariikhda bini'aadanka ee loogu baqdin badan yahay, aadkana looga soo horjeesto. Qarniyaal badan dhexdooda, dowladaha adduunka iyo hoggaamiyeyaashoodu, ha ahaadeen kuwo aan diin aaminsanyn ama kuwo diin aaminsanba, waxay kitaabkan adduunka ugu loogu iibsi badan yahay ka dhigeen mid sharcidarro ah oo aan la oggolayn, iyaga oo silcinaya ama xataa laynaya dadka lagu arko iyaga oo haysta.[6] Ilaa iyo maantadan, dowlado ayaa sharcigan weli meel-mariya. Xataa waxaa jira waddamo "Masiixiyiin" ah,[7] oo ay ka mamnuuc tahay in Baybalka laga akhriyo iskuullada iyo hay'adaha dowladda.

## JIDH-DILAAD

Markii aan anigu korayey, waxaa saaxiibbo ahaa aabbahay iyo nin Richard la odhan jirey kaas oo afar iyo toban sanno ku xidhnaa xabsiyadii shuuciga ee Bariga Yurub, meeshaas oo isaga marar badan loo diidi jirey hurdada, raashinka, oo silic iyo jidh-dilaad badan oo kalena loogu geystey. Indhahayga ayaan ku arkay dhaawacyadii jidhkiisa oo dhan ku yaalley. Xaaska Richard iyadana waa la xidhay oo lagu khasbay inay xabsiga ka shaqayso iyada oo loo haysto inay qayb ka ahayd "ficilladii dembiga ahaa"[8] ee ninkeedu ku lugta lahaa.

Muxuu ahaa dembiga ay ka galeen waddankaa bilaa diinta ah?

Waxaa iyaga lagu qabtay iyaga oo Baybalka dad kale baraya.

## TAKOORID

Saaxiibkay Cali dhib badan baa haysatey! Aabbihiis baa qorsheeyey inuu la kulmo odayaal qaraabo ah.

Adeerkiisa aabbihiis ka weyn ayaa odayaashaas ka mid ahaa.

Walaalkiisa ka yar ayaa loo yeedhay.

Cali oo curadka ahaa ayaa dhexda la fadhiisiyey.

Cali aabbihiis ayaa hadal qiiro leh jeediyey, oo ku soo gunaanadey sidan oo kale, "Ceeb baad reerka u soo jiiddey! Waa inaad guriga ka baxdaa oo aadan dib dambe ugu soo laaban. Ma doonayo inaan mar dambe wejigaaga arko!"

Adeerkii oo taageeraya ayaa intaas ku daray, “Waa run, haddii aadan ilaa beri guriga ka bixin, alaabtaada oo dhan jidka dhexdiisa ayaan ku qubayaa!”

War maxay kuwani cadhaysnaayeen?

Kaddib markii uu sannad ku dhowaad Baybalka baranayey, Cali wuxuu go’aansaday inuu kaas rumeeyo.

## ERAYGA NOOL

Maxaa Baybalka ka dhigay kitaab sidaas sare saamayn weyn u leh, khilaafna dhaliya?

Maxaa dowladaha ku khasba inay kan mamnuucaan iyo inay waalidiintu carruurtooda dayriyaan kaddib marka ay kitaabkaa rumeeyaan?

Maxaa malyuumaad qof oo hal Ilaah rumaysan ku khasba inay la saftaan kuwa aan Ilaahay rumaysnayn si ay Baybalka uga soo wada horjeestaan?

Ma waxaa sidan sababay sheegashada Baybalka ee ah inuu yahay Erayga Ilaahay ee nool, ee shaqeeya, ee saamaynta leh, ee xukuma?

> *“Waayo, hadalka Ilaah wuu **nool** yahay, waana **shaqeeyaa**, oo waa ka af badan yahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka dhex dusayaa ilaa kala soocniinta nafta iyo ruuxa, iyo xubnaha iyo dhuuxaba, waana kala gartaa fikirrada iyo waxyaalaha qalbiga ku jira.”* (Cibraaniyada 4:12)

## KU ADKAYSASHADA KITAABKA

Aniga, xaaskayga iyo carruurtayada oo hadda koray waxaanu shan iyo labaatankii sanno ee la soo dhaafay intooda badan ku noolayn waddanka Sinigaal, ee Galbeedka Afrika ku yaalla. Deriskayagu waxay rumaysan yihiin diinta Islaamka. Macnaha erayga *Islaam* waa *is-dhiibid*. Qofka *Muslinka* ahi waa kii *is-dhiibey*. Kitaabka ay Muslimiintu aadka u xurmeeyaan waa *Quraanka*. Waxa aan qorayaa wuxuu salka ku hayaa kumanaankii jeer ee aan xidhiidh iyo wada-hadal la yeeshay asxaabtaydii iyo kuwii kale ee ila soo xidhiidhay ee Muslimiinta ahaa ee ku nool Sinigaal iyo meelo badan oo kale oo adduunka ah.

In kasta oo aan Baybalka iyo Quraanka labadaba bartay, haddana buuggan ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA wuxuu diirradda saarayaa Baybalka. Sannado badan ka hor, aniga saaxiibkay oo Sinigaali ah ayaa luuqadda Wolof-ka ee Sinigaal[9] lagaga hadlo ku soo saaray 100-barnaamij raadiyeed oo taxane ah. Barnaamij kastaa wuxuu ku saabsan yahay qisada iyo akhbaarka nebiyada Baybalka ku qoran. Qaar dhegeystayaasha ka mid ah ayaa i soo weydiiyey, "Maxaad sidoo kale Quraanka wax uga bari weydey?" Sidan ayaan iyaga ugu jawaabey:

> Waddankan, carruurtu waxay Quraan akhriska bilaabaan marka ay saddex ama afar sanno jiraan. Iskuullada iyo macallimiinta Quraanka xaafad kasta waa laga helayaa. Laakiinse, yaa awooda ama doonaya inuu wax ka baro qisooyinka iyo akhbaarka ku jira Towreedda, Sabuurrada, iyo Injiilka? Sida aad og tihiin, Quraanku wuxuu sheegayaa in kitaabbadaa Baybalka ku jira uu Ilaahay siiyey ama u soo diray bini'aadanka oo dhan, si ay ugu noqdaan, *"**hannuun** iyo **iftiin**… iyo **cannaanasho**."* (Suuradda 5:46[10]) Waxa kale oo uu Quraanku barayaa, *"Haddii aad ka shakidid waxa Aanu kuu muujinay, markaa weydii kuwii **adiga hortaa Kitaabka*** [Baybalka] ***akhriyayey**.*" (Suuradda 10:94[11]) Kuwa Baybalka rumaysanna wuxuu Quraanku ka odhanayaa: *"**Dadka Ehlu-Kitaabka ahow!** Waad lunsan tihiin, ilaa aad **Qaynuunka*** [Towreedda], ***Injiilka,** iyo **dhammaan waxyiga** Ilaahay ka yimid **ku dheganaataan** mooyee."* (Suuradda 5:71) Maadaama aan ka mid ahay dadkaa Ehlu-Kitaabka ah, oo aan Kitaabka muddo dheer baranayey oo rumaysnaa muddo soddon sanno ka badan, waa ii sharaf inaan qisooyinka iyo akhbaarka nebiyada kuwaas oo aydaan wax badan ka aqoon idinka idiin sheego. Qorniinnadan, oo qaarkood la qoray 2,000 oo sanno Quraanka hortiis, waxaa ku jira run aan meel kale laga helayn.

## QISADIISA

Laga yaabee inay waalidaantaadu ku bareen, "weligaa qof qalaad ha rumaysan." Waxay ogaayeen in inta aadan qof qalaad

aaminin ka hor, aad marka hore barato qofkaasi ka uu yahay ama taariikhdiisa.

Ka feker dhowr qof aad ku kalsoon tahay.

Maxaad kuwaas ugu kalsoon tahay?

Waad ku kalsoon tahay iyaga waayo muddo markaad iyaga taqaaney waxaad ku baratay inay dad la aamini karo yihiin. Wanaag baad iyaga ku taqaanaa, ee xumaan kuma taqaanid. Haddii ay kuu sheegeen inay wax samaynayaan, way sameeyeen. Haddii ay kuugu ballanqaadeen inay wax ku siinayaan, way ku siiyeen. Waad og tahay inay aamin yihiin, waayo taariikhdooda ayaad taqaan.

Baybalka waxaa ku qoran qisooyin badan oo taariikhdii ah oo ku saabsan sidii uu Ilaahay bini’aadanka ula xidhiidhay. Qiso kastaa waxay ina siinaysaa fursad khaas ah oo aynu Abuuraha samada iyo dunida kula kulmayno, oo Erayadiisa ku maqlayno oo ku arkayno camalladiisa uu sameeyey kumanyaalkaa sanno ee taariikhda bini’aadanka ah. Yuu yahay Isagu? Haa, Isagu wuu weyn yahay, laakiinse, sidee buu u weyn yahay? Ma lagu kalsoonaan karaa Isaga? Miyuu is bedbeddelaa? Ballammadiisa ma oofiyaa? Miyuu ina khiyaameeyaa? Ma la aamini karaa Isaga?

Qisadiisa ayaa ka jawaabeysa su’aalahan oo dhan iyo kumanyaal kale.

Baybalku waa Kitaabka taariikhda Ilaahay, kan oo aan keliyoo sawir weyn inaga siinayn taariikhda bini’aadanka, laakiinse sidoo kale inoo sheegaya qisada ILAAHAY.

## QISADA UGU WANAAGSAN

Qof kastaa wuu jecel yahay sheeko macaan.

Baybalku wuxuu ku saabsan yahay boqolaal qiso kuwaas oo dhammaantood hal qiso isugu soo ururaya, oo sheega—qisada ugu macaan ee abid la sheegay. Qisada Baybalka ku qoran ee ku saabsan Ilaahay iyo bini’aadanku waa mid ay ka buuxaan qarsoodi, jacayl iyo nacayb, wanaag iyo shar, khilaaf iyo guul. Bilowgii ilaa iyo mustaqbalka, waxay jawaabo caqli-gal ah oo aynu ku kalsoonaan karo inaga siinaysaa su’aalaha waaweyn ee nolosha ku saabsan. Gunaanadkeedana mid la barbardhigi karaa ma jiro.

Dhowr sannadood ka hor, waxaan dhammeeyey inaan qisada Ilaahay u sheego koox rag iyo dumar isugu jira oo gurigeena

Sinigaal joogey, mid haweenkii ka mid ah, oo ilmo indhaheeda ku soo taagan tahay, ayaa tidhi, “Waa qiso cajiib ah! Xataa haddii aanay dadku Ilaahay rumaysnayn, waa inay ugu yaraan rumeeyaan inuu Isagu yahay Kan ugu sheeko macaan!” Haweeneydani waxay in yar uun ka fahantey sida ay qaybo badan oo Kitaabka Quduuska ahi isugu xidhan yihiin oo u sheegayaan dhacdooyin uu Ilaahay Laftiisu ka yahay Qoraaga iyo Geesiga.

## AKHBAARKA UGU WEYN

Baybalku maaha oo keliya qisadii abid la sheegay ee ugu macaanayd oo keliya. Laakiinse, waxaa qisadaa bilow ilaa dhammaad ka dhex buuxa akhbaarka ugu muhiimsan ee abid bini’aadanku helo—akhbaarkaas oo Ilaahay ka yimid.

Sannado badan gudahood, waxaan akhbaarka Baybalka kala hadlay kumanyaal Muslimiin ah. Kuwo badani waa saaxiibbo aanu isku dhownahay, kuwo kale email oo keliya ayaanu isku naqaanaa. Labadan kooxoodba, wada-hadalkayaga badankiisu wuxuu isugu soo biyo-shubtaa hal su’aal:

Waa maxay akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ahi?

## EMAIL LA SOO DIRAY

Su’aashani siyaalo kala duduwan bay ku timaaddaa.

Email-kan soo socda waxaa Bariga Dhexe iiga soo diray nin aynu magaciisia ugu yeedhayno Axmed.[12]

Mowduuca: Email la soo diray

Salaan. Ciise wuxuu ahaa Masiixa taas oo aan rumaysanahay, laakiinse isagu marna Ilaahnimo muu sheegan. Intii aanu Maxamed (scw[13]) imaan ka hor isaga ayaa Ilaahay loo mari jirey, laakiinse markaa kaddib, waxay tahay inay Masiixiyiinta oo dhammi Muslimiin noqdaan waayo marka uu Masiixu soo noqdo Maalinta qiyaamaha, isagu Quraanka ayuu wax ku xukumayaa ee kuma xukumayo Axdiga Cusub.

Masiixa marna iskutallaabta laguma qodbin. Haddii aad si caqli ah u hadlayso, xataa haddii Ciise la iskutallaabay, taas macnaheedu maaha in arrintaas daraadeed dadka

dembiyadooda lagaga saamaxay. Tani macne iima samaynayso aniga. Taas marka laga soo tago, haddii aad ii sheegeysid inuu Ilaahay allabari u bixiyey wiilkiisa keliya ee ugu qaalisan, markaa waxaan kuugu jawaabayaa: miyaanu Ilaahay awoodin inuu bini'aadanka oo dhan u sheego waxa uu doonayo iyo inuu dembiyadooda ka tirtiro Isaga oo aan allabari ahaan u qalin oo dilin "wiilkiisa qaaliga ah???!" Arrinta dembiileeyaasha ku saabsan oo dhammi aniga caqligal ilama aha.

Islaamku waa diinta ugu kaamilsan ee abid adduunka loo soo diray, waana sababtaa ta aan ugu malaynayo inay run tahay, waana diintii ugu dambeysey ee uu Ilaahay soo dejiyo. Waa diinta keliya ee xaalad kasta oo nolosha ku saabsan xalka u haysa. Ma jiro wax uusan Ilaahay diintan kaga hadlin.

Quraanku waa mucjisada ugu weyn ee abid nebi loo soo dhiibo! Haddaad kartid, bal hal aayad oo isaga oo kale ah samee, ama xataa ku dhow aayadaha Quraanka!! Weligaa taas ma awoodeysid xataa haddaad tahay qofka adduunka ugu af Carabi fiican…

Marka intaas laga soo tago, Baybalkiina waxaa ku jira waxyiyo, waa kii hore ee saxda ahaaye, kuwaas oo ku saabsan imaanshaha Maxamed…

Waxaan rumaysanahay oo aan ogahay inuu Baybalka intiisa badani been yahay oo aan la aaminin karin, maadaama buuggaagtiisa intooda badan la beddeley…

Saaxiibow, aan war kuu sheego, anigu waan akhriyaa Axdiga Cusub, mana aha inaan run ka raadinayo, laakiinse anaa si khaas ah u xiisaynaya, oo mar kastaba waxaan ogaadaa inaanu adduunka jirin wax gaadhaya weynaanta Quraanka, oo run ahaantii ah erayada Ilaahay, oo Maxamed loogu soo dhiibey malag, haddaad taas dood ka qabtana caddayn keen. [*sic*[14]]

Nabadey,
"Axmed"

Fikradahan iyo eedaymahan Axmed maaha in la iska indhotiro.

Abuuraheennu arrimaha noocaas oo kale ah ma yaraysto, innaguna inaynu sidaas samayno maaha. Qorniinadii hore ee nebiyada dhexdooda, Ilaahay jawaab buu kaga dhex bixinayaa arrimaha uu Axmed ka hadlay oo dhan, kuwaas oo dhammaantood la xidhiidha su'aal muhiim ah oo weligeed la is weydiiyo:

***Waa maxay** akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ahi?*

Nebi Ayuub baa is weydiiyey ilaa laba su'aalood oo tan oo kale ah:

*"Laakiinse waa **xaggee** meesha xigmadda laga helaa?"* (Ayuub 28:12)

*"Laakiinse **sidee** baa nin xaq ugu noqon karaa Ilaah hortiisa?"* (Ayuub 9:2)

## SOCDAALKA

Ula jeeddadaydu maaha uun inaan fikrahayga ku soo darsado adduun wareersan oo ay ka buuxaan boqollaal fikraddood oo is burinaya. Laakiinse, waxaan kugu martiqaadayaa inaad ila gashid socdaal aynu ku dhex marayno Kitaabka kitaabbada, si aynu jawaabo ugu helno su'aalaha ugu muhiimsan ee nolosha. Inta aynu socdaalkan iskula jirno, waxaynu arki doonaa runta Qorniinka ku salaysan oo waxaynu kale oo eegi doonaa jawaabaha ay nebiyadu ka bixiyeen su'aalaha ay Axmed iyo kuwo badan oo kale keenaan.

Marka hore wakhtiyadii dhacdooyinka ayaynu wax ka baraynaa (Qaybta 1-aad: cutubyada 1-7), dabadeedna socdaalkeena dhabta ahi wuxuu ka bilaabmayaa meesha uu Baybalku ka bilowdo: bilowgii taariikhda adduunka. Wakhtiga ayaynu sii raacaynaa ilaa aynu ka gaadheyno aakhiro (Qaybaha 2 & 3: cutubyada 8-30).

Socdaalkan waxaa ku jira booqasho aynu ku tegeyno Jannada lafteeda.

## WADDOOYINKA SOCDAALKA

Buuggan Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya waxaa loo arki karaa saddex buug oo mid laga dhigay. Qaybta 1-aad waxay weerareysaa caqabadaha dadka badankiisa ka hor istaaga inay Baybalka akhriyaan. Qaybta 2-aad waxay daaha ka rogeysaa akhbaarka udub-dhexaadka u ah qisadan oo ah ta ugu fiican oo abid la sheego. Qaybta 3-aad si qoto dheer bay u sii qaadaa-dhigaysaa qorshaha cajiibka ah ee uu Ilaahay dadka u hayo.

Kuwa socdaalkan gelaya badankooda faa'iido ayay u tahay

inay socdaalka isu diyaariyaan. Sidaas oo ay tahay, haddii aad horeba u ogaatey inay Qorniinada nebiyadu run yihiin ama aad si degdeg ah u dooneyso inaad qisada Ilaahay maqashid, oo aad akhbaarkiisa fahantid, waad u fasaxan tahay inaad toos qaybta 2-aad ugu gudubtid. Marka aad socdaalka dhammeysid, ayaad ku soo laaban kartaa qaybta 1-aad.

Haddii aad dooneyso inaad si deggan oo quryar-socod ah u socdaasho, waxaad 30-ka cutub ee uu buuggani ka kooban yahay ku baran kartaa ilaa hal bil, adiga oo maalintiiba hal cutub si qoto dheer u baranaya. Haddii aad Muslin tahay, waxaad socdaalkan geli kartaa inta lagu jiro 30-ka maalmood ee Ramadaanka. Haddii aad awooddo inaad si isku kalsooni leh u sii socoto, maadaama uu Quraanku odhanayo: *"Khasab maaha diinta geliddeedu, hanuunku wuu ka cad yahay baadida,"* iyo *"Muslimiintay dhaha: waxaanu rumaysannahay Ilaahay iyo wixii lanoo muujiyey iyo wixii loo muujiyey Ibraahim, iyo Ismaaciil, iyo Yacquub, iyo qabiilladii [reer binu-Israa'iil], oo Muuse iyo Ciisena lagu soo dejiyey, ee ay nebiyadii kalena Ilaahay ka heleen. Kuwaas kala dooran mayno. Isaga ayaanu talo saarannay."* (Quraaanka, Suuradda 2:256, 136 Pickthall[15])

Waddadii aad qaadidba, aan taladan muhiimka ah ku siiyo: Marka aad bilowdid, socdaalkan qaybna ha ka boodin.

Waddaba waddo ayay kuu dhiibeysaa. Xataa haddii aadan isla markiiba wax kasta oo aad aragto fahmin, sii akhri oo ka feker ilaa aad bogga ugu dambeeya ka gaadhid. Qaybo socdaalka ah ayaa kaaga yaabin kara oo kugu adkaan kara, laakiinse, waxaad jidka ka heleysaa meelo barwaaqo ah oo biyo fadhiyaan.

Si kastaba caqabado badani ha kaaga hor yimaaddeene, socdaalka ha joojin.

## RUNTA

Dad aad u faro badan oo adduunka ku nool ayaa u maleeya inaanu qofna dhab ahaan u ogaan karin runta ku saabsan su'aalaha muhiimka ah ee nolosha la xidhiidha, sida: Xaggee ayuu bini'aadanku ka yimid? Maxaan adduunka u joogaa? Xaggee ayaan ku dambayn doonaa dhimashada kaddib? Maxaa sax ah maxaase khalad ah?

Wakhtigan, waddamada Reer Galbeedka, waxaa caan noqday

hal-haysyadan oo kale: "Arrini inay khalad ama sax tahay, waa hadba sida uu qofkaasi u arko uun," ama: "Waa khalad in loo qaato inuu qof runta kama dambaysta ah ogaan karo." Uma baahnin inaynu shahaadada PhD haysano si aynu u aragno sida ay labadaas odhaahood isu burinayaan. Haddii aan run kama dambays ahi jirin, sidee ayay kuwa fikradan qabaa "wax kasta" uga hadli karaan ama ugu adkaysan karaan inay wax uun "khalad" yihiin.

Waxa aynu ku mahadniqi karnaa inuu Abuuraha adduunku, kaas oo Runtiisa u muujiyey bini'aadanku, aanu fikraddaas dadka badani qabaan iyaga ku raacsanayn. Qof kasta oo Isaga ku doondoona qalbi daacad ah, wuxuu ku leeyahay:

> *"Waxaad* ***garan doontaan runta****, runtiina waa idin xorayn doonta."* (Yooxanaa 8:32)

**DOORASHADA SAXDA AH**

Laba sanno ka hor, Muuse, oo ah nin 79 sanno jir ah oo jirroole ah, ayaa iga codsaday inaan toddobaadkii saddex maalmood isaga booqdo si aan Baybalka ugu akhriyo. Muuse, noloshiisii oo dhan Quraanka ayuu baranayey, laakiinse, weligiis kama uusan fekerin inuu akhriyo ama barto Towreedda nebi Muuse, Sabuurrada Daa'uud, iyo Injiilka Ciise Masiix — kitaabbadan oo uu Quraanku ku guubaabinayo Muslimiinta inay aqbalaan oo rumeeyaan.[16]

Si wanaagsan ayuu Muuse u dhegeystey intii aanu annagu qisooyinka ugu muhiimsan ee furaha ah u wada akhriyeyney sida ay isugu xigxigaan oo aanu ku baraneyney sida uu Abuurahooda iyo Xaakinkoodu dembiileyaasha ugu xunxun uga dhigi karo kuwo xaq ah oo iyaga u saamixi karo. Mar kale ayuu Muuse igu yidhi, "Marka aynu wax wada akhrino oo kala tagno wixii aan wada akhrinay halkaa kagama tago ee waan kasii *fekeraa*."

Maalin maalmaha ka mid ah, kaddib markii uu run kale oo muhiim ah oo Qorniinka lagu muujiyey ogaadey, ayuu Muuse inta uu cadhooday xaaskiisii iyo gabadhiisii ku yidhi, "Maxaa waxyaalahan nalooga qariyey oo mar hore naloogu bari waayey?"

Mar dambe, kaddib markii ay Muuse deriskiisii ogaadeen inuu Baybalka la barto nin qalaad, waxaa bilowday xan. Culayskii deriskiisu saaray buu u adkaysan kari waayey, oo wuxuu ugu

dambaystii saaxiibkaygaa da'da ahi ii sheegay inaan intii muddo ah joojiyo inaan gurigiisa tago, wuxuuna intaa ku daray, "Runta ma diidayo, laakiinse khilaafka qoyskayga soo dhex galay baa aad u batay."

Lix toddobaad baan sugey (inta ay xantu ka qaboobeyso), dabadeedna aniga iyo xaaskayga ayaa Muuse iyo qoyskiisa booqanay. Si diirran ayuu noo soo dhoweeyey oo na weydiiyey su'aalo caqligal ah. Intii aanan ka tegin ayuu yidhi, "Arrinta muhiimka ahi waa inaan doorashada saxda ah sameeyo inta aanan dhiman ka hor."

Muuse wuxuu fahansanaa sida ay muhiimka u tahay *"Runta soo iibso ... oo ha sii iibin."*[17] Afar bilood kaddib ayuu saaxiibkayagii qaaliga ahaa dhintay.

Markaan xasuusto wakhtiyadii aanu isla qaadanay, weligey ma ilaawayo sidii uu uga jawaabey markii aan isaga weydiiyey, "Muusow, haddii aad caawa dhimatid, xaggee ayaad aakhiro tegi doontaa?"

Cabbaar buu ka fekerey, markaasuu yidhi, "Jannada ayaan tegi doonaa."

"Sidee baad ku ogaatey?" ayaan weydiiyey.

Kitaabkii Baybalka ayuu labada gacmood ku qabtay, markaasuu yidhi, "Waayo kan ayaan rumaysanahay."

## BALLANQAADKA

Socdaalkan waxaan u hibeynayaa dhammaan kuwiina sida Muuse doonaya inay doorasho sax ah sameeyaan ka hor inta aanay dhiman. Ilaaha keliya ee runta ahi gacanta ha ku qabto adiga, ha kugu caawiyo inaad caqabad kasta ka gudubtid, oo ha kuu gudbiyo fahan cad oo sax ah oo ku saabsan ka uu Isagu yahay iyo waxa uu adiga kuu ka qabtay.

> *"Oo waad i doondooni doontaan, waanad i heli doontaan markaad qalbigiinna oo dhan igu doondoontaan."*
>
> (Yeremyaah 29:13)

Kani waa ballanqaad la hubo oo Ilaahay *adiga kuu* sameeyey.



# 2

# Ka Guuleysiga Caqabadaha

*"Adiga oo aan is ogeyn, ayay jaahilnimadu ku dishaa."*
— Maahmaah, qabiilka Wolof ee Sinigaal

Muddo saddex kun oo sanno ka hor ah, ayuu Ilaahay yidhi, *"Dadkaygu waxay u baabba'aan aqoondarro daraadeed."* (Hoosheeca 4:6) Ilaa maantadan, dadka intooda badan, oo ay ku jiraan kuwa jaamacadaha ka qalin jebiyey aqoondarro ayaa ka haysa waxa ay nebiyada Baybalka lagu sheegay qoreen.

Marka la eego taariikhda soo jireenka ah iyo saamaynta weyn ee uu Baybalku adduunka ku leeyahay, run ahaantii qof ma odhan karaa cilmi buu leeyahay isaga oo aan waxba ka garanayn waxa Baybalka ku qoran?

Markii ay dadka adduunka ku nooli kumanaan diimood samaysteen, waxay kaloo yeesheen kumanyaal sababood oo ay Qorniinka isaga indho-tiraan. Cutubkan iyo ka ku xiga waxaynu ku eegi doonaa toban sababood oo ay tan u aaneeyaan. Isla marka aynu socdaalkeena bilownayna, waa inaynu filano inay caqabado inaga hor imaan doonaan oo aynu kuwaas ka guuleysan doono.

## TOBAN "SABABOOD" OO AY DADKU KU DIIDAAN BAYBALKA:

### 1. "KU-TIRI-KUTEEN"

Waddamada reer Galbeedka ee diinta ka fogaadey iyo qarammada reer Yurub, dad badan ayaa ku andacooda inuu Baybalku yahay uun sheekooyin ku-tiri-kuteen ah oo la isu soo uruuriyey iyo odhaaho qurux badan oo ay dad sheegeen. Badankoodu fikraddan ayay qabaan iyaga oo aan runtii si caqliyan ah oo bilaa cuqdad ah u baadhin Qorniinka.

Ninka la yidhaahdo Sir Arthur Doyle, ee qoray buugga mala-awaalka ah ee la yidhaahdo, *The Celebrated Cases of Sherlock Holmes*, ayuu ninka dembi-baadhaha la shaqeeya ee Dr. Watson wax ka weydiinayaa su'aal ku saabsan dembi ay markaa baadhayeen:

"Maxaad arrintan ka ogaatey?"

Holmes wuxuu ku jawaabey, "Xogta arrintan ku saabsan oo dhan weli ma soo wada uruurin," wuxuu kaloo ku daray, "Waa khalad weyn in fikrad la iska sheego ka hor inta aanu mid xogta arrintaas ku saabsan oo dhan helin. Hadday sidaasi dhacdo, aakhirka runta lama ogaanayo." [18]

Dad badani "khalad weyn" ayay Qorniinka ku sameeyaan. Go'aan bay iska qaataan iyaga oo aan xog ku filan ogaan oo xaqiiqooyinka ayay qallooociyaan si aanay kuwaasi fekerkooda iyo hab nololeedka uga hor imaan.

### 2. "FASIRAADO TIRO BADAN"

Dad badan ayaan Qorniinka akhriyin, waayo waxay maqlaan hal koox oo leh, "Baybalku sidan buu odhanayaa!" iyada oo ay kuwo kalena ka soo hor jeesanayaan oo odhanayaan, "Maya, macnaheedu sidaas maaha! Ee sidan buu odhanayaa!" Markaa inay dad badani u qaataan inaan Qorniinka la fahmi karin maaha mid lala yaabo.

In kasta oo uu Baybalku oggol yahay in arrimaha qaarkood oo nolosha ku saabsan laga qabi karo fikrado kala duduwan,[19] marka ay arrimuhu ku saabsan yihiin Ilaahay iyo hawlihiisa abadiyanka ah Baybalku ma oggola in sidii la rabo loo turjunto. Kitaabka Ilaahay waa la fahmi karaa, laakiinse waa inaynu dhug u lahaanaa waxa uu inoo sheegayo.

Ninka caanka ah ee Sherlock Holmes ayaa sidoo kale Watson u sheegay, “Waad aragtaa, laakiinse uma fiirsatid. Kala duwanaanshuhu waa mid cad. Tusaale ahaan, marar badan baad aragtay raad qolkan weyn ka soo baxaya oo kaa yar gelaya.”

“Marar badan.”

“Ilaa intee?” ayuu Holmes weydiinayaa.

“Ilaa boqolaal jeer,” ayuu Watson ku jawaabey.

“Markaa immisa ayay noqonayaan?”

“Immisa aa! Ma garanayo.”

“Waa sidaas! Umaad fiirsan! Adiga oo haddana eegayey oo arkay. Tan ayaan maanta oo dhan doonayey inaan ku fahansiiyo. Bal eeg, waxaan arkaa inay toddoba iyo toban raad yihiin, waayo waan arkay oo haddana u fiirsaday.”[20]

Sidoo kale, dad badan ayaa odhaaho kala duduwan Baybalka ku arka, laakiinse kuwo tiro yar baa runtii u fiirsada macnahooda dhabta ah. Sidaas daraadeed, wax lala yaabo maaha inay siyaallo kala duduwan u fasirtaan.

Su’aal cad oo aynu is weydiin karnaa waa: Anigu ma doonayaa inaan akhbaarka Ilaahay ka yimid fahmo? Diyaar miyaan u ahay inaan runta Ilaahay u raadiyo isla sida dadaalka leh ee aan doondoono dheeman ama dahab dhulka hoostiisa ku duugan? Boqor Suleymaan baa qoray, *“Haddaad wax-kala-garashada ka daba qaylisid, oo aad codkaaga waxgarashada kor ugu qaaddid; haddaad iyada u raadisid sida lacagta oo kale, oo aad u doondoontid sida maal qarsoon, markaas waxaad heli doontaa aqoonta Ilaah.”* (Maahmaahyadii 2:3-5)

## 3. “MASIIXIYIINTA”

Dad badan ayaa Baybalka u diida sharka ay kuwa sheegta inay kaas rumaysan yihiin sameeyaan dartiis. “Bal ka fikir kuwii la odhan jirey saalibiinta (Crusades) oo ahaa Masiixiyiin iyaga oo ay iskutallaabtu calaamad u tahay dagaal ku qaaday qaar ay u haysteen ‘gaalo’?” “Ka warran dhibaatadii xasuuqa iyo silcintaba lahayd oo ay sameeyeen kuwa sheegta inay Baybalka rumaysan yihiin?” Runtu waxa weeye in mid kasta oo magaca Masiixi sheegta (micneheedu waa u ekaanta Masiixa) oo aan haddana samayn jacaylkii iyo naxariistii Masiixa uu lidi ku yahay wixii

uu Masiixu sameeyey oo baray. Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi: *"Waad maqasheen in la yidhi, 'Waa inaad deriskaaga jeclaatid oo cadowgaaga necbaatid', laakiin waxaan idinku leeyahay, Cadowyadiinna jeclaada, oo u duceeya kuwa idin silciya."* (Matayos 5:43-44)

Kuwo kale ayaa sidan su'aala, "Ka warran Masiixiyiinta sameeya khiyaanada, khamri-cabka badan, iyo sinada?" Mar kale, qofka dunuubta noocan ah sameeyaa wuxuu toos uga soo horjeedaa waxa uu Baybalku barayo: *"Ama miyeydnaan ogayn in kuwa xaqa darani ayna dhaxlayn boqortooyadii Ilaah? Yaan laydin khiyaanayn. Ama dhillayaasha, ama kuwa sanamka caabuda, ama kuwa sinaysta, ama khaaniisiinta, ama tuugagga, ama kuwa wax badan damca, ama kuwa sakhraama, ama kuwa wax caaya, ama kuwa wax dulma, ma dhaxli doonaan boqortooyadii Ilaah. Qaarkiin sidaas oo kale baad ahaan jirteen, laakiin waa laydinka maydhay, quduus baa laydinka dhigay, xaq baa laydinka dhigay."* (1 Korintos 6:9-11) Goor dambe ayaynu ku eegi doonaa sida ay dembiileyaashu saamaxaad ku heli karaan oo looga dhigi karo kuwo xaq ah.

Weliba, dad kale ayaa su'aala, "Ka warrama Masiixiyiinta u sujuuda sanamada ee u tukada Maryan iyo awliyada?" Anoo soo gaabinaya, qof kasta oo sidan sameeyaa wuxuu raacaa caadada kaniisaddooda, ee ma adeeco Erayga Ilaahay, oo odhanaya: *"Waa inaydaan sanamyo samaysan, ama aydaan qotonsan ekaan la qoray amase tiir, oo waa inaydaan dalkiinna dhagax la qoray u dhex dhigin inaad u sujuuddaan, waayo, aniga ayaa ah RABBIGA Ilaahiinna ah."* (Laawiyiintii 26:1) Sanamyo oo loo sujuudo, iyadoo qof laga sarraysiiyo Ilaahay, iyo salaad beenbeen ah oo la tukado iyada aan la fahansanayn Ilaaha keliya ee runta ah, dhammaantood waa bidcinimo. Dad badan baa wareersan waayo waxay u maleeyaan inay erayada Masiixi iyo Kaatolig isku mid yihiin. Isku mid maaha. Sida aanay xerada geela oo aad gasho oo ka soo baxdaa adiga geel kaaga dhigayn ayaanay kaniisad la galaa oo laga soo baxaa qof Masiixi uga dhigi karin.

**4. "LABA WEJIILEYAASHA"**

Sabab kale oo ay dadku ka bixiyaan inaanay Baybalka akhrin waa, "Laba wejiileyaasha badan daraaddood." Nasiibdarro, dad badan oo sheegta inay Baybalka rumaysan yihiin baa si ka duwan u dhaqma. Akhbaarka Ilaahay ayay qaloociyaan oo magaciisa ayay u isticmaalaan si naf jeclaysi ah oo khaldan. Wadaado badan ayaa lagu qabtay iyagoo ku dhex jira nolol dembi leh. Kuwan qaarkood ayaa dadka u sheega in haddii ay iyaga lacag siiyaan, ay markaa helayaan caafimaad iyo taajirnimo. Baybalku wuxuu kuwan laba wejiilayaasha ah ka odhanayaa: *"murannada dadka maankoodu kharribmay oo runta waayey, iyagoo u malaynaya in cibaadadu tahay wax faa'iido laga helo."* (1 Timoteyos 6:5)

Ciise Masiix na sidan ayuu wadaadadaa beenta ah ee calooshooda uun u shaqaysta ka yidhi,

> *"Labawejiilayaalow, Isayos aad buu wax idiinka sii sheegay markuu yidhi, dadkanu bushimahooda ayay igu maamuusaan, Laakiin qalbigoodu waa iga fog yahay. Si aan micne lahayn ayay ii caabudaan, Iyagoo dadka wax ku baraya amarrada dadka."* (Matayos 15:7-9)

Xertiisiina Ciise wuxuu ku yidhi,

> *"Oo goortaad tukanaysaan, ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo, waxay jecel yihiin inay tukadaan iyagoo taagan sunagogyada iyo meesha jidadku isku gooyaan si ay dadka ugu muuqdaan."* (Matayos 6:5)

Maadaama uu midkeen kastaa ilaa heer laba wejiilenimo ku eedaysan yahay, (oo aynu wax aynaan ahayn iska dhigno), markaa, miyay tahay in laba wejiilenimadu inaga hor joogsato inaynu Abuuraheena si fiican u baranno oo uu Ereygiisa inoo beddelo sida uu doonayo inaynu noqono?

**5. "MIDAB TAKOOR"**

Dadka qaarkiis ayaa Baybalka diida waayo waxay u arkaan inuu qolooyin gaar ah u eexdo oo kuwa kale ka sarraysiiyo. In

kasta oo aynu badankeennu ilaa heer ku eedaysannahay midab takoor ama qabyaalad, Baybalku meel adag buu arrintan iska taagay: *"Ilaahay dadka uma kala eexdo."* (Falimaha Rasuullada 10:34)

Tusaale ahaan, miyaad og tahay inuu nebi Muuse guursadey haweeney Itoobiyaan ah?[21] Miyaad akhriday sidii uu Ilaahay, Isaga oo isticmaalaya nebi Eliiyaah u nadiifiyey oo u bogsiiyey sarkaalkii Siiriyaanka ahaa ee cudurka baraska qabey, kaas oo Ilaahay baryey oo hortiisa isku hoosaysiiyey?[22] Ama sidii uu Ilaahay nebigii Yuhuudda ahaa ee Yoonis ugu amray inuu Erayga Ilaahay ee toobadkeenka iyo badbaadada gaadhsiiyo magaalladii Nineweh (Ciraaq)? Yoonis aad buu u nebcaa reer Nineweh oo wuxuu doonayey inuu Ilaahay iyaga halaago, laakiinse Ilaahay iyaga wuu jeclaa oo wuxuu tusay naxariistiisa.[23] Miyaadse og tahay doorka muhiimka ah ee ay Beershiya (Iiraan) ka qaadatay qorshihii dheeraa ee Ilaahay ee badbaadada bini'adanka?[24] Miyaadse weli ka fekertey qisada qiirada leh ee uu Ciise Masiix akhbaarka nolosha weligeed ah ugu sheegay haweeneydii dembiga miidhan ahayd ee reer Samaariya, xataa iyada oo ay wakhtigaas Yuhuudu yasi jireen oo aanay u dhowaan jirin Samaariyiinta, oo ay xataa u haysteen inay iyagu "fadare" ahaayeen?[25]

Adduunka aynu ku noolnahay waxaa aafeeyey midab takoor, laakiinse, Abuuraheennu sidaas maaha. Isagu wuxuu aaminsan yahay inay hal qolo uun jirto—waana bin'aadanka:

> *"Ilaaha sameeyey dunida iyo waxyaalaha ku jira oo dhanba, oo ah Rabbiga samada iyo dhulka, ma deggana macbudyo gacmo lagu sameeyey, gacmo dadna looguma adeego sidii isagoo wax u baahan, maxaa yeelay, dhammaan isagaa siiya nolosha iyo neefta iyo wax walbaba; oo quruun kasta oo bini-aadmi ah ayuu isaga mid dhigay inay dunida dusheeda oo dhan degganaadaan isagoo gooyay xilliyaduu hore u diyaarshay iyo xadadka degmooyinkooda; inay Ilaah doondoonaan, in kastoo uusan ka fogayn midkeen kasta; maxaa yeelay, isagaynu ku nool nahay, kuna soconnaa, kuna jirnaa; sidaasoo kuwo ka mid ah."* (Falimaha Rasuullada 17:24-28)

In bini'aadanka oo dhammi "isku hayb yihiin" oo hal waalid ka soo wada jeedaan xataa waxaa qiray sayniska casriga ah: "Firka ama hiddaha ama farcanka (genetic code) ee bini'aadanka oo dhammi boqolkiiba 99.9 waa isku mid adduunka oo dhan. Kala duwanaansha shakhsiyaadka waxaa sababa DNA-da uun—tusaale ahaan midabka indhaha, iyo haddii uu qof cudur daciif u yahay iyo haddii kale."[26]

Ilaahay, Abuuraha iyo Mulkiilaha *"cirka iyo dhulka,"* kaas *"oo aan midkeena inaga fogeyn,"* adiga iyo anigaba daryeel shakhsiyan ah buu inoo hayaa oo wuxuu doonayaa inaynu *"Isaga doondoono"* oo aynu akhbaarkiisa fahanno. Isaga ayaa dhalashadeennii si faahfaahsan u qorsheeyey. Isagu wuu jecel yahay dadka o odhan, qaran, luuqad, dhaqan, iyo midab kasta ha lahaadeene, oo wuxuu iyaga ku martiqaadayaa inay Magaciisa u yeedhaan oo isaga ku caabudaan afkooda hooyo.

## 6. "ILAAHA BAYBALKU DILKA AYUU FASAXAY"

Email-kan waxaa ii soo diray qof aan Ilaahay aaminsanayn:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Baybalku wuxuu odhanayaa, *"Waxaan ahay Rabbiga, Rabbiga, oo ah Ilaah raxmad iyo roonaan badan, oo cadho u gaabiya, oo naxariis iyo run badan."* Waa erayo fiican oo faanfaan ah, laakiinse sida uu isagu u dhaqmo iyo erayadani isma qaabilayaan. Ilaahay mid naxariis leh umuu ekayn markii uu oggolaaday in ilaa rubuc malyuun qof ku dhintaan sunaamigii 2004 ku dhuftay Koonfur-Bari Aasiya… Gelitaankii dhulka loogu magac daray Kancaan, Ilaaha Baybalku wuxuu oggolaaday in la laayo rag, dumar, iyo carruur aan waxba galabsan oo nabad ku nool…. Markaa, sidee baan aniga oo bini'aadan ah uga naxariis badnaan karaa kan la sheego inuu "abuurahayga" yahay? Anigu marna ma oggolaadeen khilaafaad, nacayb, dagaallo, dilal, aafooyin, faqiirnimo, gaajo, cudurro, xanuun, murugo, iyo dhib noocay tahayba, waa haddii aan awood aan waxyaalahaas ku joojiyo lahaan lahaaye. Isla hadda ayaan joojin lahaa dhibaatooyinkaas oo dhan!

Dad badan ayaa su'aala, "Haddii uu Ilaahay wanaagsan yahay oo isla markaana ugu awood badan yahay, muxuu sharka u joojin waayey?" Laakiinse tiro yar ayaa is weydiiya, "Haddii uu Ilaahay wanaagsan yahay oo isla markaana weyn yahay, muxuu aniga ii joojin waayey marka aan shar sameeyo?" Waxaynu jecellahay inuu Ilaahay sharka xukumo, laakiinse ma dooneyno inuu innaga ina xukumo.

In kasta oo aynu fikraddan is khilaafaysa aragnay, haddana ninkaa aan Ilaahay aaminsanayn su'aal adag buu ina weydiiyey. In kasta oo aan jawaabo sahlani jirin, haddana waxaa jira jawaabo lagu qancayo. Mar dambe oo socdaalkeena aynu Qorniinka ku dhex marayno ah, markaas oo aynu si toos ah u abaari doono dabeecadda Ilaahay, sida uu dembigu cawaaqibka weyn ugu leeyahay, jawaabaha Ilaahay way inoo caddaan doonaan. Haddase, kuwani waa saddex qaynuun oo inaga hor joogsanaya inaynaan Abuuraheena xukumin marka uu Isagu oggolaado ama xataa amro inay aafooyin kala duduwani dilaan rag, dumar, iyo carruur.

**1) Bini'aadanku wax yar buu og yahay, laakiinse Ilaahay wax walba wuu og yahay.**

Waxa ay dadku ugu yeedhaan "caddaaladdarro" taas oo ay dad "aan waxba galabsan" ku dhintaan "wakhtigooda ka hor," Ilaahay wuxuu u arkaa si qaabilsan abadiyan oo ballaadhan. Wuxuu Isagu caddaynayaa in nolosha gaaban ee uu qofkaasi adduunka ku nool yahay ay hordhac u tahay dhacdo muhiim ah.[27] Noloshu way ka ballaadhan tahay waxa ay isheennu qabato. Bal ka feker ilmo carjow ah oo caloosha hooyadiis ku jira. Wuxuu isaga oo caqligiisa kooban ka duulaya ku doodi karaa, oo Ilaahay weydiin karaa, "Sidee baan aniga iyo carruur kale oo weli caloosha jiraa ugu qalanay inaanu sidii xabis ku xidhnaano ilmo-galeenka? Carruur baan dibedda ku aragnaa iyaga oo qoslaya oo cayaaraya, halkana kiish biyo ka buuxaan baanu ku jiraa? Taasi xaq maaha! Sidee baan anniga oo carjow oo kale ah uga naxariis badnaan karaa Abuurahayga?"

Carruurta aan dhalani sidan oo kale Ilaahay ulama murmaan, laakiinse dadka waaweyn baa sidan sameeya. *"Laakiinse, nin yahow, kumaad tahay kaaga Ilaah u jawaabayow? Wixii la sameeyey miyey kii sameeyey ku odhan doonaan, Maaxad sidan noogu samaysay?"* (Rooma 9:20)

**2) Khasab maaha in waxa qofka la khaldani ay Ilaahay la khaldanaadaan.**

Maadaama uu yahay Abuuraha iyo Nooleeyaha nafta, haddana wuxuu xaq u leeyahay inuu naftaas dilo. Nebi Ayuub, kaas oo aafooyin ku dhacay daraaddood ku waayey hantidiisii oo dhan iyo toban carruurtiisii ah ayaa yidhi, *"Anigoo qaawan baan uurkii hooyaday ka soo baxay, oo haddana anigoo qaawan baan halkaas ku noqon doonaa. RABBIGAA wax i siiyey, oo haddana RABBIGAA iga qaatay, ammaan waxaa leh magaca RABBIGA. Oo waxyaalahaas oo dhan Ayuub innaba kuma uu dembaabin, oo Ilaahna eed kama uu sheegin."* (Ayuub 1:21-22)

Socdaalkeena dhexdiisa waxaynu ku arki doonaa arrimo dahsoon oo yaab leh oo haddana tusaya qorshaha xigmadda leh ee Ilaahay.[28] Waxaynu la kulmi doonaa Ilaah Weyn oo ah Ka Keligiis Maamula adduunka, kaas oo aan bini'aadanka ku khasbin inay Isaga jeclaadaan ama addeecaan. Waxaynu kale oo arki doonaa sababta uu adduunku ugu sugan yahay xaaladdan aadka u xun.

**3) Ugu dambaysta, Ilaahay caddaalad ugu fiican oo kama dambays ah buu dhammaan siin doonaa.**

Inta aynu la legdameyno inaynu fahanno dhacdooyinkii hore iyo kuwa maanta, waxaa ina caawin kara inaynu xasuusano in naf kastaa Abuuraheena gacantiisa ku jirto, laakiinse gacanteena kuma jirto. Ilaahay kuma shaqeeyo sida ay innaga inala tahay, laakiinse sida uu Isagu rabo. Innagu uma sheegno Ilaahay waxa saxda ah iyo waxa khaladka ah; Isaga ayaase inoo sheega. In kasta oo uu Ilaahay u oggolaado inay dadku galaan khaladaad kuwa kale si xun u saameeya, haddana Isagu sharka indhaha kama xidhanayo. Maalin qiyaame baa imaan doona, markaas oo uu Ilaahay xukumi doono nin, haweeney, iyo cunug kasta, xukunkaas oo ay xaqnimadiisu saldhig u tahay. Weynaanta jacalkiisa iyo caddaaladdiisu waa kuwo abadiyan ah,[29] *"RABBIGU waa Ilaah caddaalad badan, oo waxaa barakaysan kuwa isaga sugaya oo dhan."* (Ishacyaah 30:18)

Haddii aad tahay, sida ninkaa email-ka noo soo diray, oo aad isu haysato *"inaad ka naxariis badan tahay Ilaahaaga,"* sii akhri buuggan. Ilaahay wuxuu qarsoodigiisa u muujiyaa kuwa is hoosaysiiya ee leh dulqaad ku filan oo ay Isaga ku dhegeystaan.

*"Waxyaalaha qarsoon waxaa iska leh RABBIGA Ilaaheena ah, laakiinse waxyaalaha la muujiyey waxaa iska leh innaga iyo carruurteena weligeenba inaan sharcigan erayadiisa oo dhan yeelno."*

(Sharciga Ku Noqoshadiisa 29:29)

## 7. "MAY AHAYN INAY KITAABKA ILAAHAY KU QORNAADAAN ..."

Dadka qaarkiis ayaa Erayga Ilaahay diida iyaga oo leh, "Haddii uu Baybalku ka yimid Ilaahay may ahayn inay ku qornaadaan qisooyin ceeb ah oo ku saabsan dad sinaysanaya, dad ehel ah oo isu galmoonaya, xasuuq, isa sirid, sanam-caabudid, iyo wixii la mid ah." Sida ay dadkaasi waxyiga iyo muujinta u arkaan, waa inuu Kitaabka Ilaahay ku koobnaadaa odhaaho Isaga laga soo xigtey oo keliya.

Laakiinse, maadaama Qorniinka loogu talogalay inuu dadka ku dhex baro Abuurahooda geedi socodka taariikhda, miyay mid la yaab leh noqonaysaa inuusan keliyoo qorin erayada iyo camallada Ilaahay, laakiinse uu sidoo kale qoro dunuubta iyo iinaha bini'aadanka? Miyuusan Ilaahay xaq u lahayn inuu tuso ammaantiisa, saafinimadiisa, caddaaladdiisa, naxariistiisa, iyo aaminimadiisa iyo sida ay kuwaasi liddiga ugu yihiin oo uga duwan yihiin dembi badnaanta bini'aadanka? Miyaynu ku dhacnaa inaynu Ilaaha Weyn u yeedhino sida ay tahay inuu isugu-keen muujiyo ama waxyigiisa inagu soo gaadhsiiyo?

*"Waa sidee qalloocnaantiinnu! Dheryasameeyaha ma in lagu tiriyaa dhoobada, si wixii la sameeyey, uu kii sameeyey ka yidhaahdo, Isagu ima uu samayn, wixii la suubbiyeyna uu kii suubbiyey ka yidhaahdo, Isagu waxba garan maayo?"* (Ishacyaah 29:16)

Baybalku wuxuu sheegayaa dhacdooyin badan oo taariikhi ah oo uu Ilaahay oggolaaday inay dhacaan laakiinse aanu oggalaan ama raalli ka ahayn. Ilaaha runta ah ee nooli waa Ka awooda ee ku farxa inuu xaalad aad u xun u beddelo mid wanaagsan. Laga yaabee inaad akhriday qisada macaan ee aan laga dhergeyn ee

nebi Yuusuf, wiilkii koob iyo tobnaad ee Yacquub (Bilowgii 37-50). Tobankii wiil ee walaalihiis ee ka da'da weynaa ayaa isaga aad u nebcaaday oo si xun ula dhaqmay oo dabadeedna sidii addoon ahaan uga iibiyey socoto reer Ismaaciil ah. Yuusuf si xaqdarro ah ayaa loo xabbisay, laakiinse dhibaatadan darteed ayuu Yuusuf u dalacay ilaa booska ugu sarreeya ee Masar, oo uu gaajo uga badbaadiyey walaalihiis, Masaaridii, iyo qarammadii kale ee ku hareeraysnaa. Mar dambe, kaddib markii ay walaalihiis dembigoodii ka toobadkeeneen, Yuusuf wuxuu iyaga ku yidhi, *"Idinku xumaan baad ila damacsanaydeen, laakiinse Ilaah wuxuu damacsanaa wanaag si uu u sameeyo siday maantaba tahay oo uu dad badan badbaadiyo."* (Bilowgii 50:20)

## 8. "IS KHILAAF BAA KA BUUXA"

Dad badan ayaa ku dooda inuu is khilaaf ama kala hadal badani Baybalka ka buuxo, laakiinse dad tiro yar ayaa kaas si dhab ah u barta oo baadhis ku sameeya. *Ma xaq baa in Qorniinka lagu xukumo wax qof kale yidhi?* Buug uun miyaad wax ka sheegi kartaa adiga oo dhowr odhaahood oo keliya ka akhriyey? Miyay tahay in kitaab aad loo akhriyo oo keliya si looga helo qoraallo aan is lahayn iyo erayo higgaadooda la khalday? Sidaas oo ay tahay dad badan baa Baybalka sidan u akhriya.

Sannado badan ka hor, waxaan helay email ay ku qoran yihiin liisto dheer oo ku saabsan khaladdo iyo is khilaaf uu mid ila soo xidhiidhaa ku andacooday inay Baybalka ku jiraan, kuwaas oo uu isaguba website kale ka soo minguuriyey.

Qaybahan ayaan qoraalkiisii ka soo qaadanayaa:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Baybalku wuu is khilaafayaa. Tusaale ahaan:

- Maalintii ugu horreysey Ilaahay wuxuu abuuray iftiin, dabadeedna iftiinkii buu ka soocay mugdigii (Bilowgii 1:3-5). Qorraxda oo habeenka iyo maalinta kala soocda lama abuurin ilaa maalintii afraad (Bilowgii 1:14-19).
- Waxay ahayd inuu Aadan dhinto isla maalintii uu midhihii laga xaaraameeyey cunay (Bilowgii 2:17). Aadan wuxuu noolaa 930 sanno (Bilowgii 5:5).

- Ciise Masiix wax ma xukumo (Yooxanaa 3:17; 8:15; 12:47). Ciise Masiix wax buu xukumaa (Yooxanaa 5:22,27-30; 9:39; Falimaha Rasuullada 10:42; 2 Korintos 5:10).
- Iyo wixii la mid ah.

Hadda, waxaan jecelahay inaan su'aal ku weydiiyo: Diintaadu ma ii oggoshahay inaan su'aalo ku weydiiyo oo aan caqligayga isticmaalo ka hor inta aanan taa aqbalin, mise waxay iga dooneysaa inaan indhahayga iyo maskaxdayda ka xidho inay su'aalo keenaan? Waayo, waxaan is weydiinayaa inay suurtoggal tahay inuu Ilaahay khaladaad badan ku sheegay Kitaabkiisa, jawaabtayduna waxay noqonaysaa maya!?

Haa, isla Ilaahaas odhanaya, *"Haatan kaalaya oo aynu u wada **garannee**."* (Ishacayaah 1:18), wuxuu aniga iga doonayaa "inaan su'aalo keeno oo aan caqligayga isticmaalo." Ilaahay wuxuu midkeen kasta ku martiqaadayaa inuu Eraygiisa shakhsi ahaan aad ugaga fekero. In liisto "is khilaaf ama kala hadal" ah oo uu qof kale sameeyey la iska soo koobiyeeyo oo la iska aamino ma soconayso. Nebi Suleymaan ayaa yidhi, *"Kii garaaddaranu eray kasta wuu rumaystaa, Laakiinse kii miyir lahu socodkiisa aad buu u fiiriyaa."* (Maahmaahyadii 14:15)

"Is khilaafka" Baybalka ku jira ee uu ninkaas nala soo xidhiidhay sheegay xal ayaa loo heli doonaa inta aynu Qorniinka baranayno oo ka fekerayno.[30] Laakiinse, hadda, waxaa suurtoggal ah inaynu isku raacno middan: Noloshu waa gaaban tahay, oo aakhiraduna waa dheer tahay, sidaas daraadeed waa muhiim inuu qof kastaa si shakhsiyan ah oo daacad ah wax u baadho.

Haddii aad hore u cuntay canbe macaan, waad og tahay inay adkaanayso inaad qof kale si dhab ah ugu qeexdo macaankiisa. Markuu dhadhamiyo uun si fiican u fahmayaa. Sidaas oo kale, inaad iska aqbasho wax uu qof kale Erayga Ilaahay ka sheegay kuguma filla. Waa inaad adigu si shakhsiyan ah u dhadhamisaa.

> *"Bal dhadhamiya oo arka in RABBIGU wanaagsan yahay, waxaa barakaysan ninkii isaga isku halleeya."*
> (Sabuurradii 34:8)

Qof kasta ayay si shakhsiyan aakhiradiisa ugu wanaagsan tahay inuu noqdo arday si deggan oo qoto dheer Erayga Ilaaha

u barta, noqo *"shaqeeye aan dadka ka xishoonin, oo hadalka runta ah si hagaagsan u wada."* (2 Timoteyos 2:15) Way khaldan tahay inaad qayb yar uun Erayga Ilaahay ka akhridid adiga oo aan qisada oo dhan wada akhriyin, dabadeedna aad ku andcootid inuu kala hadlayo.

Si aan sawir uga bixiyo, waxaa jira odhaaho Baybalka ku qoran oo inagu amraya inaynaan dadka xukumin, iyada oo meelo kalena la inagu amrayo inaynu xukuno.[31] Labadan aayadood miyay is khilaafayaan? Maya, way is kaamilaayaan. Marka dhinac laga eego, Kitaabka Ilaahay wuxuu i barayaa, inaanan aniga oo ah bini'aadan ay aqoontiisu xadidan tahay aanan xukumin (eedayn) ujeeddooyinka ama ficillada anigoo iska dhigaya inaan kaas ka xaqsanahay, oo Ilaahay uga dhowahay. Haddii dhinac kale laga eego, waxaa la inagu amray inaynu xukuno (kala garano) saxda iyo khaladka oo aynu runta iyo beenta kala garanno sida uu Erayga Ilaahay ina barayo.

Markaa, maxaa ka run ah is khilaafaadka lagu andacoodey inay Baybalka ku jiraan?

Shakhsi ahaan, jawaaabo lagu qanci karo ayaan u hayaa dhammaan is khilaafyada lagu andacooday inay Baybalka ku jiraan. Waxaan kale oo ogaadey inay muhiim tahay inuu qofku marka horeba Qorniinka ula yimaaddo qalbi fahankiisu furan yahay oo aan cuqdad qabin.[32]

Miyaad adigu dooneysaa inaad akhbaarka Baybalka fahanto? Markaa, Kitaabka Ilaahay ha ula tegin fikradahaaga; laakiinse raadi fikradaha Ilaahay. Mid mid u baro qaybaha uu Baybalku ka kooban yahay. Aad ha isugu mashquulin inaad fasirto waxa aad akhridid. Laakiinse isagu ha isu kaa fasiro. Qorniinka, oo nebiyaal badan lagu soo dejiyey ama ay qoreen qarniyaal badan dhexdooda, isaga ayaa sida ugu fiican isugu fasira.[33]

> *"Wuu muujiyaa waxyaalaha fog iyo qarsoodigaba; wuuna yaqaan waxa gudcurka ku jira, nuurkuna isaguu la joogaa."* (Daanyeel 2:22)

## 9. "ANIGU MA AAMINSANI AXDIGA CUSUB"

Muddo hore, ayaan email-kan ka helay haweeney:

> Mowduuca: Email la soo diray
>
> Anigu ma aaminsani Axdiga Cusub. Waxaan keliya oo rumaysanahay axdigii qadiimiga ahaa. Ma rumaysni in erayada Ilaahay ka yimid la hagaajin karo ama marar badan dib loo qori karo.

Sida kuwo badan oo kale, haweeneydani weli may fahmin sababta uu Kitaabka Ilaahay uga kooban yahay Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub. Labadan qaybood ee uu Qorniinku u kala baxo macnaheedu maaha in Erayga Ilaahay la "hagaajiyey ama dib loo qoray," laakiinse, macnaheedu waa inuu jirey qorshe uu Ilaahay bini'aadanka u hayey, oo hore looga sii waxyoodey kaas oo la *kaamiley*.

Xataa dhacdooyinka taariikhda waxaa loogu magac daraa wakhtigii ay dheceen. Tusaale ahaan, waxaa la qiyaasaa inuu nebi Ibraahim dhashay qiyaastii 2000 **Ciise Kahor**, laakiinse, daarihii daadheeraa ee New York ku yaalley ee Twin Towers waxaa la dumiyey 2001[34] **Ciise Kaddib**. Markaa, taariikhda waxaa loo kala qaybiyaa laba qaybood. Kitaabka Ilaahayna waa sidaas.

Baybalku wuxuu ka kooban yahay Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub. *Axdi waa qoraal sharciyan ah, heshiis ama cahdi—heshiis laba kooxood ka dhexeeya.*[35] Haddase, aynu si kooban u eegno labada qaybood ee uu Qorniinku ka kooban yahay. Inta aynu Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub dhex marayno, waxaa inoo caddaanaya ujeeddada iyo awoodda labadaa qaybood.

**Qaybta 1: Axdigii Hore.** Waxaa lagu qoray luuqadaha Cibraaniga iyo Aramaa'ik-ga. Axdigii Hore wuxuu ka kooban yahay *"Sharciga Muuse* [oo sidoo kale loogu yeeedho Towreedda] *iyo Nebiyadii iyo Sabuurrada."* (Luukos 24:44) Qoraalladan, oo uu Ilaahay ku soo dejiyey soddon nebi muddo ka badan kun sannadood dhexdooda, waxay inoo sheegayaan sidii uu Ilaahay uga dhex shaqaynayey taariikhda bini'aadanka—laga soo bilaabo abuuritaankii Aadan ilaa laga soo gaadhey Imbiraadooriyaddi Beershiya (qiyaastii 400 Ciise Kahor).

Marka waxyi ahaan loo eego, Axdigii Hore wuxuu wax ka sheegayaa ilaa dhammaadka adduunka, oo wuxuu ka sii waxyoonayaa boqolaal dhacdo ka hor intaanay kuwaasi dhicin.[36]

Axdigii Hore wuxuu qeexayaa cahdi uu Ilaahay la dhigtay dadka, ka hor intaanu Ciise Masiix dhalan (Masiixa Kahor). Masiix waa eray af Cibraani ah oo macnihiisu yahay *Kii Subkanaa* ama *Kii Dooranaa.* Qorniinku wuxuu ka sii waxyoodey dhacdooyin muhiim ah oo dhici dooney, oo wuxuu inoo sii tilmaamay Masiixa adduunka imaan doona si uu dadka uga badbaadiyo dembiga iyo cawaaqibaadkiisa xunxun. Axdigii Hore waxaa ku jira ballanqaad muhiim ah:

> *"Bal eega, maalmihii waa imanayaan, ayaa RABBIGU leeyahay, oo anigu axdi cusub baan idinla dhigan doonaa ...."* (Yeremyaah 31:31)

**Qaybta 2: Axdiga Cusub.** Waxaa markii ugu horreysey lagu qoray af Giriig. Qorniinka Axdiga Cusub waxaa kale oo loogu yeedhaa *Injiilka*, kaas oo macnihiisu yahay "Akhbaarka Wanaagsan." Ilaahay wuxuu isticmaalay inay kan qoraan siddeed nin qarnigii ugu horreeyey ee Ciise Kaddib. Axdiga Cusubi wuxuu ka hadlayaa imaanshihii Masiixa ee adduunka. Wuxuu kale oo fasirayaa waxyiyadii uu Ilaahay ku sheegay Qorniinka Axdigii Hore, ee ku saabsanaa sida uu adduunku u soo gabagaboobi doono. Waxyiyada lagu sheegay Axdiga Cusub waxay si buuxda u kaamilayaan oo u qaabilayaan waxyiyadii lagu sheegay Axdigii Hore.

Axdiga Cusubi wuxuu qeexayaa barako weyn oo uu Ilaahay bini'aadanka ku siinayo imaanshihii Masiixa darteed (Ciise Kaddib). Qorniinadani waxay dib ugu noqonayaan oo tusayaan boqollaal dhacdo oo muhiim ah oo ay nebiyadu ka sii waxyoodeen.

Sida Axdigii Hore oo kale, Axdiga Cusubi wuxuu inoo tilmaamayaa waxa dhici doona mustaqbalka, ilaa maalinta uu Masiixu adduunka ku soo laaban doono. Sabab fiican buu Masiixu u yidhi, *"Ha u malaynina inaan u imid inaan sharciga ama qorniintii nebiyada* [Axdigii Hore] *baabbi'iyo; uma aan iman inaan baabbi'iyo, laakiin waxaan u imid inaan wada oofiyo."* (Matayos 5:17)

Ma jiro wax is khilaaf ah oo ka dhex jira Axdigii Hore iyo ka Cusub. Sida ay iniin dhulka ugu bacrinto oo geed weyn u noqoto, qorshaha Ilaahay ee qadiimiga ahi wuxuu ku xiddidaystay Axdigii Hore, wuxuuna ku koray oo ku qaangaadhey Axdiga Cusub. Qayb kasta oo Kitaaabka Ilaahay ah wuxuu Ilaahay inoogu sheegayaa waxa uu innaga doonayo inaynu fahanno.

Haweeneyda email-ka ii soo qortay way ku saxsan tahay fikraddeeda ah inaan, "erayada Ilaahay ka yimid loo hagaajin karin ama dib loogu qori karin wakhtiyada cusub." Waxayse garan weydey in "erayada Ilaahay ka yimid" la oofin doono oo ay siduu u yidhi u dhici doonaan.

**10. "WAA LA BEDDELEY"**

Ilaa iyo hadda waxaynu soo aragnay sagaal caqabadood oo dadka ka hor joogsada inay akhriyaan oo rumeeyaan Baybalka. Laakiinse, caqabada ama diidmada ugu weyn ee aan asxaabtayda Muslinka ah ka maqlo weli kamaynu hadlin. Axmed ayaa hore email-kiisii tan ku sheegay:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Waxa aan anigu rumaysanahay oo ogahay waa in Baybalka intiisa badani been yahay oo la kharribey maadaama kitaabada intooda badan wax laga beddeley…

Axmed miyuu saxsan yahay? Qorniinka sidiisii hore miyaa laga beddeley?

Qaybtan ku xigta ayaynu su'aalahan kaga jawaabi doonaa.



# 3

# Beddelaad mise Xafidaad?

*"Cawsku wuu engegaa, ubaxuna wuu dhacaa, laakiinse erayga Ilaaheennu weligiisba wuu waari doonaa." — Nebi Ishacyaah* (Ishacyaah 40:8)

Emaillada soo socda waxaynu ka soo xullanay kuwo nalooga soo qoray afar qaybood oo adduunka ka tirsan oo waxay ka turjumayaan fikirka in ka badan afar bilyan oo qof oo adduunka ku nool:

Mowduuca: Email la soo diray

Waxaanu rumaysanahay Qorniinka uu Ilaahay soo dejiyey oo dhan, laakiinse kii qadiimiga ahaa.

Mowduuca: Email la soo diray

Ha ilaawin inaad idinku haysataan Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub kuwaas oo wax laga beddeley. Quraanka quduuska ah weligiis waxba lagama beddelin.

Mowduuca: Email la soo diray

Baybalka waa la kharribey oo wax baa laga beddeley, si loo qaabilsiiyo doonista bini'aadanka ee xun.

Mowduuca: Email la soo diray

Waxaan ku adkaysanayaa in qarniyaashii la soo dhaafay oo dhan Baybalka wax laga beddelayey, oo Axdiga Cusub intiisa badani waa been uu abuuray Nebi been ah oo uu magaciisu ahaa Bawlos. Sidaas daraadeed, marka aan Baybalka wax ka soo xiganayo waa wakhti lumis.

Andacooyinkani ma sax baa? Ilaaha weyn ee abadiyanka ahi ma wuxuu u oggolaaday inuu bini'aadan yar oo daciif ahi beddelo ama kharribo Eraygiisa uu waagii hore ku soo dejiyey nebiyadiisa?

## ERAYO AAN SHAKHSIYAN MUSLIMIINTA U SHEEGAYO

Haddana waxaan doonayaa inaan si toos ah ula hadlo akhristaha tixgelinta mudan ee Muslinka ah.

Sida laga yaabo inaad og tahay, Quraanku wuxuu si cad u sheegayaa in Qorniinka—waa Towreedda, Sabuurka iyo Injiilka e—uu Ilaahay u soo dejiyey si ay dadka ugu noqdaan *"**hanuun iyo iftiin.**"* (Suuradda 5:44-51) Waxa kale oo uu Quraanku odhanayaa, *"Adiga* [Maxamedow] *waxaanu* [Ilaahay] *ku siinay Qorniin* [Quraanka] *oo run ah,* ***si uu u xoojiyo Erayga Ilaahay*** [Baybalka] ***oo ka horreeyey, kaas oo la xafiday.**"* (Suuradda 5:48) iyo, *"**Nebiyadii** aanu soo dirnay waxay keliyoo ahaayeen dad,* ***kuwaas oo aanu akhbaar siinay:*** *haddii aadan rumaysnayn taas* [Maxamedow] ***weydii kuwa haysta Kitaabka*** [Baybalka]." (Suuradda 21:7) Quraanku wuxuu kale oo bixinayaa digniintan: *"Kuwa diida **Kitaabka** aanu ku soo dejiney rasuulladii ... naarta ayay gelayaan."* (Suuradda 40:70-72)

Quraanku wuxuu si celcelis ah u sheegayaa in Baybalka uu Ilaahay soo dejiyey ama muujiyey iyo in kuwa kaas diida la cadaabayo. Sidaas ayuu Quraanku odhanayaa.[37]

Aayadahan Quraanka ah ee cadcadi wareer iyo isku kalsoonaan la'aan bay ku dhaliyaan Muslimiinta meel kasta oo ay joogaanba, waayo Baybalka iyo Quraanku waxay qorayaan laba akhbaar oo aad u kala duwan oo ku saabsan dabeecadda Ilaahay iyo qorshihiisa uu bini'aadanka u hayo. Waa sababta ay Muslimiinta

badankoodu u doorteen inay isku maaweeliyaan xalka ugu sahlan ee ah in Baybalka wax laga beddeley.

Su'aalahan soo socda ayaa Muslimiin badan ka caawiyey inay si caqliyan arrintan uga fekeraan.

## SU'AALO MUSLIMIINTA BADANKOODA KU SOCDA

- Ma u malaynaysaa inuu Ilaahay *awoodo* inuu Eraygiisa ilaaliyo?
- Haddii ay sidaas tahay, ma kula tahay adiga inuu Ilaahay *doonayo* inuu Eraygiisa ilaaliyo?
- Haddii aad aaminsan tahay in Qorniinkii nebiyada la beddeley, markaa:
  - *Goorma* ayaa iyaga la beddeley?
  - *Xaggee* ayaa iyaga lagu beddeley?
  - *Kuma* ayaa Erayga Ilaahay beddeley? Haddii ay kula tahay inay Masiixiyiinta ama Yuhuuddu beddeleen Qorniinnada, maxay haddana iyagu u kharibeen kitaabaddaa quduuska ah ee ay daraaddood kuwo badan oo iyaga ahi diyaarka u ahaayeen inay u dhintaan?[38]
  - *Waa maxay* caddaymaha aad arrintan u haysaa?
  - *Muxuu* Ilaaha Qaadirka ahi ugu oggolaaday inay bini'aadan daciif ahi beddelaan ama kharibaan Eraygiisa quduuska ah ee uu bini'aadanka ugu talogalay?
- Haddii uu Ilaahay oggolaaday inay bini'aadanku beddelaan kitaabbadii Muuse iyo Daa'uud, *miyaanay kula ahayn* inay bini'aadanku beddeleen kitaabka aad adiga laftaadu hadda aaminsan tahay, *sideese* kaas ku aamini kartaa?

Ujeeddada su'aalahani maaha in dadka la wareeriyo, laakiinse waa maadaama ay Muslimiin badani ku dacwoodaan in Baybalka la beddeley, arrintan oo cawaaqib xun ku leh aakhiradooda, su'aal kalena aynu ku darno:

- Ma waxay kula tahay in Erayga Ilaahay ee Baybalka la beddeley Quraanka *kahor* mise *kaddib?*

Inta aadan akhriskaaga sii wadin, su'aashan ku saabsan Quraanka kahor ama kaddib si fiican uga feker. Xataa isku day inaad jawaabtaada xaashi ku qortid.

## QURAANKA KAHOR?

Haddii ay jawaabtaadu tahay in Baybalka wax laga bedddeley intaan Quraanka la qorin kahor, muxuu haddaba Quraanku u qirayaa inuu Baybalku bini'aadanka u yahay *"hanuun"* ee uusan luminayn, oo haddana u qirayaa inuu u yahay *"iftiin"* ee aanu ahayn mugdi? Muxuu Quraanku u odhanayaa, *"Dadka Injiilka aaminsani markhaati ha ka noqdeen waxa aanu kuu muujinay"*? (Suuradda 5:46-47) Oo muxuu kale oo Quraanku u odhanayaa: *"Ma jiro wax is beddel ah oo erayada Ilaahay lagu sameeyey"*? (Suuradda 10:64)

Haddii Qorniinka Ilaahay ee Baybalka aan la aamini karin, muxuu Quraanku sidan u amrayaa: *"Haddii aad ka shakidid waxa aan kuu muujinay, weydii kuwa Kitaabka haysta ee kaa horreeyey"*? (Suuradda 10:94)[39], iyo *"Soo qaata Towreedda oo barta, waa haddaad dad run aaminsan tihiine"*? (Suuradda 3:93)

In kasta oo dadka qaarkiis lagu eedeeyey *"inay Kitaabka ku kharibeen carrabadooda"* (Suuradda 3:78), haddana waxaa la qiray inaan Erayga Ilaahay laftiisa waxba laga beddelin oo uu sidiisii yahay.

## QURAANKA KADDIB?

Haddiise ay jawaabtaadu noqoto in Erayga Ilaahay ee Baybalka la wax laga beddeley qoritaankii Quraanka kaddib, waa muhiim inaad ogaatid in Baybalka maanta jira laga soo turjumey kitaabbadii ku qornaa luuqadihii qadiimka ahaa ee horraantii Erayga Ilaahay lagu qoray, kuwaas oo qarniyo badan Quraanka hortiis la qoray.

Markii Quraanka la qoray, Qorniinku mar hore ayuu gaadhey Yurub, Aasiya, iyo Afrika oo waxaa lagu turjumey luuqado badan sida Laatiin, Siiriyaan-kii qadiimka ahaa, Kobtiga, Gootic-ga, Ethiopian-kii (Ge'es) qadiimaka ahaa iyo Armeeniyaanka.[40]

Bal tan is weydii. Sidee ayay koox dad ahi war been ah ugu dari karaan kitaab sidaas caan u ah, oo luuqado badan lagu turjumey, oo boqollaal kun oo koobi laga qaybiyey, oo si degdeg ah loogu faafiyey adduunka oo dhan? Shaqo aad u badan ayay noqonaysaa in boqollaalkaa kun ee luuqadahaas badan lagu turjumey dib loo soo uruuriyo oo loo beddelo halka Baybal ee aynu maanta haysano. Waa hawl aan suurtaggal ahayn.

Markaa, waxaa cad:

- Haddii lagu andacoodo in Baybalka la beddeley intaan Quraanka la qorin *kahor* ay taasi burinayso oo ay markaa beenoobayaan aayado badan oo Quraanka ahi.[41]
- Haddii lagu andacoodo in Baybalka la beddeley qorintaankii Quraanka *kaddib*, markaa tani waxay ka hor imaanaysaa caddaymo taariikhi ah iyo kuwo ku salaysan kumanyaal qoraal oo qadiim ah oo dhulka hoostiisa laga soo saaray oo tusaya inaan Erayga Ilaahay waxba laga beddelin.

Xaggee ayay ka yimaadeen kumanyaalkan qoraal ee Baybalka ah iyo turjumaadahoodu?

Meeye qoraalladii qadiimka ahaa (Baybalkii saxda ahaa ee aan waxba laga beddelin)?

## QORAALLADII QADIIMKA AHAA IYO "FARCANKOODII"

Maadaama ay wax kastoo adduunka yaallaa, oo ay buuggaagtuna ku jiraan gaboobaan oo jeexjeexmaan, qoraalladii qadiimka ahaa ee Baybalka laftoodu maanta ma jiraan. Laakiinse, waxaa masxafyada adduunka ee taariikhda lagu kaydiyo iyo laybareeriyo badan oo jaamacado leeyihiin lagu hayaa kumanyaal koobi oo si toos ah ugu salaysan qoraalladaa qadiimka ah ee duuggoobey ee ay nebiyadu qoreen.

Haddii ay tahay Towreedda, Injiilka, Aristootal-kii falasoofka ahaa, Flavus Josephus-kii taariikh-yaqaanka ahaa, ama xataa markii dambe Quraanka[42] laftiisa, kitaabbadoodii ugu horreeyey waa duuggoobeen oo baaba'een. Sidaas daraadeed, sida qoraalladii qadiimka ah oo kale, waxaa maanta la hayaa waa "farcankii" qoraalladaa qadiimka ah oo keliya.

Waddanka Sinigaal, dadka badankoodu waxay ka rumaysan yihiin in Baybalka la kharibey oo ma aaminsana. Ta yaabka lahi waa inay isla dadkaasi aaminsan yihiin griot-yada. Griot waa dad ku xeeldheer taariikhda afka laga sheego oo ay shaqadooda ugu weyn tahay inay qaybaan haybta iyo taariikh-afeedka reeraha, qabiillada, ama deggaanka. Dadkaa taariikhda qabiilka ama qoyska qaybsani dadaal dheeraad ah bay u galaan inay taariikhdaa si fiican u sheegaan, laakiinse waxaa hubaal ah in taariikhdaa inteeda badani lunto muddo kaddib. Si kastoo dadku wax u

qaybaan, haddana marna taasi ma gaadhi karto sida waxa la qoraa u saxsan yihiin.

Maxay dad badani diyaar ugu yihiin inay aaminaan wax sidaas afka looga sheegay ee ay uga madax adaygayaan inay rumeeyaan markhaatifurka Ilaahay ee qoran?

Taasi ma xigmad baa?



*"Haddii aynu maragfurka dadka aqbali lahayn, maragfurka Ilaah baa ka weyn ... kii aan Ilaah rumaysanna, wuxuu isaga ka dhigay beenaaleh; maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan maraggii uu Ilaah ka marag furay."*

(1 Yooxanaa 5:9-10)



## QORAALLADII HORE EE QADIIMKA AHAA IYO QORAYAASHOODII

Erayga Ilaahay waxaa la qoray muddo badan ka hor intaan waraaqda ama xaashida, daabacaadda iyo kumbuyuutarada la soo saarin. Nebiyadii waxay Erayga Ilaahay ku qoraan harag ama xaashiyo waaweyn oo laga sameeyey geedaha babyrus-ka loo yaqaano. Qorayaashaasi waxay ahaayeen kuwo sharaf leh oo awooda inay wax akhriyaan, qoraan, sawiraan, oo qoraal ay akhriyeen isla kii gacantooda si sax ah ugu koobiyeeyaan. "Marka uu qoraalka gacantiisa ku koobiyeeyo, wuxuu qorahaasi bogga ugu dambeeya ku qori jirey inta eray ee qoraalkaasi yahay, si qore kasta oo isaga ka dambeeyaa uu u tiriyo oo uusan erayna uga tegin erayna ugu darin." [43]

Dadaal kasta oo ay bini'aadanku sameeyaan, waxaa la helayaa meelo yaryar oo kooban oo eray si kale loo higgaadiyey ama lambar laga tegey.[44] Sidaas oo tahay, runta ama xaqiiqada kama dambaysta ah ee qoraalkaasi gudbinayo marna ismay beddelin.

Aqoonyahanadu marna dhib umay arag khaladaadka yaryar ee dhacay markii ay dadkii hore gacanta ku koobiyayn jireen qoraalladii hore ha ahaadeen kuwo diiniyan ah ama kuwo aan

ahayne. Run ahaantii, qoraalladaa hore ee gacanta lagu qoray ee Baybalka ku saabsan waxay tusayaan inaan marna Qorniinka Baybalka la beddelin, xataa hadday jiraan khaladaad kooban oo il-duuf ku dhacay. Wuxuu Baybalku kaga duwan yahay Quraanka inaan marna la isku deyi jirin in "koobi kii hore u eg" oo la sameeyo, dabadeedna kii hore la gubo.[45]

Ilaahay ayaa Eraygiisa inoo dhowray. Sidee ayaynu ku hubin karnaa inuu Qorniinka maanta jiraa runtii yahay kii ay nebiyadii iyo rasuulladii qoreen?

## QORAALLADDII QADIIMKA AHAA EE LAGA HELAY BADDA DHIMATAY (The Dead Sea Scrolls)

Ilaa iyo muddo dhow, qoraallada la og yahay ee ugu da'da weyn ee Qorniinka Axdigii Hore ah (oo ay nebiyadu qoreen 1500 iyo 400 Ciise Kahor dhexdooda) waxaa la qoray ilaa 900 Ciise Kaddib. Muddada dheer u dhexeysey kuwii qadiimka ah ee ugu horreeyey iyo koobiyadii kuwaas laga sameeyey daraadeed, iyo maadaama qoraalladaa gacanta lagaga sameeyey koobiyaal badan qarniyaal badan dhexdooda, kuwa shakiyaa waxay ku andacoodaan inaan hubaal loo ogaan karin waxa ay nebiyadii qoreen.[46]

Iyada oo sidaas tahay ayaa la helay Qoraallada Qadiimka ah ee Badda Dhimatay (tog cusbo keliya ah oo Israa'iil iyo Urdun u dhexeeya).

> Sannadku wuxuu ahaa: 1947.
>
> Meeshuna waxay ahayd: Khirbet Qumran oo u dhow Badda Dhimatay.
>
> War Cusub: Wiil adhi la jooga oo ah qolada Bedawiyiinta loo yaqaano ayaa isaga oo doondoonaya ri' ka luntay bohol ka helay ashuun ay ku jiraan qoraallo qadiimi ah oo xaashi weyn oo duudduuban ku qoran oo ah afafka Cibraaniga, Aramaa'ig-ga, iyo Giriigga.

Intii u dhexeysey 1947 iyo 1956, waxaa in ka badan kow iyo toban boholood laga helay 225 qoraallo qadiimi ah oo Baybalka ah. Aqoonyahanadu waxay qoraalladaa taariikhdooda ku qiyaaseen sannadadii 250 Ciise Kahor iyo 68 Ciise Kaddib. Qoraalladan badankoodu waxay jiraan in ka badan 2000 oo sanno. Waa helitaan mucjiso ah!

Qoraalladan xaashiyaha geedaha laga sameeyey ku qoran ee laga helay Qumraan waxaa la qariyey qiyaastii 70 sanno Ciise Kahor (waa sannadkii ay boqortooyadii Rooma magaaladii Yeruusaalem dumisey), oo waxaa qariyey firqo Yuhuud ah oo la odhan jirey Eseeniyiintii (Essenes). Nimankan waxaa ka go'naa in wax kasta iyaga shakhsi ahaan ha ugu dheceene, ay qoraalladaa u kaydiyaan facyaasha soo socda. Iyada oo Yuhuuddii berigaa ama la laayey ama ay kula qaxeen qarammadii kale ee berigaa jirey, Qorniinka waa la dhowray oo la kaydiyey. Muddo 1,900 oo sanno ku dhow ayaa qoraalladda Erayga Ilaahay ah ee ku qoran xaashiyaha waaweyn ee geedka babyrus-ka iyo haraggu ku qarsoonaayeen ashuuno dhoobo ah, cimiladaa qalalan ee Badda Dhimatay agagaarkeeda ah.

Markii uu warkan cusub ee in qoraalladaa qadiimka ah la helay ku saabsani adduunka gaadhey, dad badan ayaa rajeynayey inay wax badan kaga beddelaan doonaan qoraallada hadda jira, oo kumanyaal sannadood ka da' yar. Qaar baa u maleeyey in sheegashada ah in "Baybalka wax laga beddeley," ay hadda rumoobi doontey!



Qoraalladii Qadiimka ahaa ee Badda Dhimatay (Dead Sea Scrolls): 250 Ciise Kahor ilaa 68 Ciise Kaddib.



Markaa ka hor-qoraallada ugu da'da weyn ee la yaqaaney waxay jireen 900 Ciise Kaddib.



Baybalka aynu maanta haysano: Isma beddelin.

Laakiinse kuwaas shakiga qabey way hungoobeen. Kala duwanaanshaha keliya ee la helay wuxuu noqday higgaadda erayo. Qoraalladaa qadiimka ah ee Baybalka ku saabsan ee kumanyaalka sanno ka hor la qoray erayadooda, macnahooda, iyo akhbaarkooduba wuxuu la mid noqday isla Baybalka aan maanta haysano.

Haddaba, waa maxay jawaabta kama dambaysta ah ee ay bixiyeen aqoonyahanadu ee ku aaddan Qoraallada Badda Dhimatay laga helay, ee ku saabsan in Baybalka wax laga beddeley iyo in kale? *"Waxaa ilaa iyo hadda caddaymuhu tusayaan inaan marna Baybalka wax laga beddelin."*[47]

## KITAABKA KELIYA EE TAARIIKHDA SIDA UGU FIICAN LOO XAFIDAY

Haddii aynu Axdiga Cusub u jeesonana, waxaa jira in ka badan 24,000 oo ah qoraalladiisii hore ee qadiimka ahaa, kuwaas oo ay 5,300 afka Giriigga ku qoran yihiin, 230 ka mid ahna la qoray ka hor qarnigii 6-aad Ciise Kaddib. Tani waxay Axdiga Cusub ka dhigaysaa qoraalka taariikhda adduunka ugu tixraaca fiican.

Tusaale ahaan, haddii la barbardhigo qoraalladii filasoofigii Giriigga ahaa ee Aristootal la odhan jirey oo noolaa intii u dhexeysey 384 iyo 322 Ciise Kahor, kaas oo ahaa nimanka fikirkoodu adduunka saamaynta ugu weyn ku yeeshay. Sidaas oo ay tahay, wax kasta oo aynu ilaa iyo hadda ninkaa ka naqaano waxay ka yimaaddeen qoraallo kooban oo kuwa ugu horreeya taariikhdoodu tahay 1100 Ciise Kaddib—1,400 oo sanno ayaa dhexda ka maqan. Sidaas oo ay tahay qofna su'aal kama keeno saxsanaanta iyo xafidaada fekeradii iyo erayadii Aristootal.

Kumanyaalkaa qoraal ee qadiimka ah ee Axdigii Hore ku salaysan yahay waxaa soo raaca, inay aqoonyahanadu qoraallo kale oo qadiim ah oo la qoray 325 (buugga kaamilka ah ee Axdiga cusub ah ee ilaa iyo hadda qoraalkiisii qadiimka la hayo da'diisa) Ciise Kaddib ka heleen kumanyaal aayadood oo laga soo xigtey Axdiga Cusub. Xigashooyinkani aad bay u badan yihiin oo haddii la isu soo uruuriyo waxay noqonayaan kitaabka Axdiga Cusub oo kaamil ah.[48]

Caddayntu waxay tusaysaa in Axdiga Cusub yahay qoraallada taariikhiga ka ugu xafidaad fiican.

## BAYBALLO KALA DUDUWAN?

Laga yaabee inaad maqashay dad ku andacoonaya, "Laakiinse waxaa jira bayballo badan oo kala duduwan! Noocee baa sax ah markaa?"

Waxaa muhiim ah in la fahmo kala duwanaanshaha qoraalka Baybalku ku salaysan yahay ee qadiimka ah iyo turjumaadaha kala duduwan ee qoraalladaas laga sameeyey. Qoraalladaa qadiimka ah qorayaal ayaa muddo hore koobiyeeyey si ay dadka u gaadhsiiyaan ama uga ilaaliyaan inaanay lumin, qarniyaal badan ka hor intaan xataa Quraanka la qorin. Bayballada maanta la daabacaa waxay ku salaysan yihiin qoraalladaa qadiimka ah.[49] Baybalka guud ahaan iyo qayb ahaanba waxaa laga soo turjumey luuqadihii ugu horeeyey ee lagu qoray (af Cibraani, Aramaa'ig, iyo Giriig) oo loo turjumey in ka badan 2,400 oo ah luuqado kala duduwan.

Mid luuqadahaas ka mid ahi waa af Ingiriiska.

Dhowr iyo toban siyaalood oo saxsan ayaa Baybalka af Ingiriis ahaan loogu turjumey, kuwaas oo loogu yeedho *noocyo (versions).* Nooc kasta oo af Ingiriis ahi si ka yara duwan ka kale ayaa loo akhrin karaa, taas oo caadiyan dhacda marka qoraal laga soo turjumo luuqad kale. Erayada uu turjumaanku dooranayo ayaa kala duwanaan kara, laakiinse micnaha ama akhbaarka ay gudbinayaan isma beddelayo.

Buuggan markii af Ingiriiska lagu qorayey waxaa aayadaha laga soo qaatay nooca turjumaadda Baybalka ah ee la yidhaahdo *New King James Version* (NKJV), kan oo Baybalka eray eray af Ingiriiska maanta lagu hadlo loogu turjumey. Meelaha qaarkoodna waxaa la isticmaalay New International Version, kan oo mararka qaarkood fuddudahay in la fahmo. In kasta oo ay erayadu kala duwanaan karaan micnuhu waa isku mid.

Aayadaha Baybalka ee la soo xigtay ee turjumaadan loo isticmaalayna waxaa laga soo qaatay Kitaabka Quduuska ah ee af Soomaaliga ku turjuman ee ay Bible Society of Kenya u daabacday, hay'adda la yidhaahdo, Society for International Ministries (SIM), sannadkii 2008, Nayroobi, Kiiniya.

Af Ingiriiska ama af kaleba, lahjaddu noocay noqotoba, erayadu waa kala duwanaan karaan micnuhuse waa isku midkii.

## ILAAHAY WAA WEYN YAHAY

Midda bilcaksiga ahi waa, in arrinta ugu fiican ee tusaysa inay been tahay in Erayga Ilaahay la beddeley maalinta oo dhan lagaga dhex dhawaaqo masaajidada adduunka ku yaalla oo dhan.

Isla saakadan waxaan maqlay.

*“Alaahu Akbar! Alaaaa-hu Akbar!”*
(Ilaah baa weyn, Ilaah baa ugu wvada weyn!)

Haa, *Ilaahay waa weyn yahay*—oo ka weyn yahay bini’aadanka iyo adduunka oo dhan. Si uu bini’aadanka u barakeeyo oo uu sharaftiisana u dhowro, Ilaaha runta ah ee xayiga ahi wuxuu akhbaarkiisa ama Eraygiisa u xafiday fac kasta.

Ilaahay maaha oo keliya Abuuraha iyo Nooleeyaha adduunkiisa; Waana Qoraaga iyo Xafidaha Eraygiisa.

*“RABBIYOW, eraygaagu weligiisba wuxuu taagan yahay samada.”* (Sabuurrada 119:89)

## CAQABADO AAN LA SOO KOOBI KARIN

Ilaa iyo hadda meeshaynu marayno laga yaabee inaad ku fekereyso in qof kasta oo socdaalkan isu diyaarinayaa uu ka gudbey caqabadaha ka hor istaagaya inuu Erayga Ilaahay aamino. Laakiinse khibraddeenu si kale ayay ina baraysaa. Kuwo badan, waxaa iyaga mar kasta waddada runta ka hor istaagaya caqabad kale, iyo mid kale, iyo mid weliba mid kale.[50] Maalin dhoweyto ayaa email-kan la ii soo diray:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Waad ku mahadsan tahay jawaabahaaga. Waxaan xasuustaa meel uu Ilaahay ku yidhi, ‘Bini’aadanka waxaanu ka samaynaynaa U EKAANSHAHAYAGA.’ Waxaan marar badan is weydiiyey sababta uu Ilaahay ‘jamac’ ahaan isagaga hadlayo. Miyaanay jirin turjumaado badan oo Baybalka ahi? Turjumaaddee baa saxsan? Miyaanay diimihii adduunka ku badnaan? Haddii aan diin jirin daarihii dhaadheeraa ee Maraykanka (twin towers) ma la burburin lahaa? Miyaanay Masiixinimadu dhimashada dad badan mas’uul ka ahayn?

> Maxaad ugu adkaysanaysaa waxa aad rumaysan tahay? **Sabab, sabab, sabab, sabab?** Su'aalaha aan sheeko-baraleydan u haynaa ma joogsanayaan. Adiguna jawaabaha ha joojin ileyn sidaas bay wadaadadu lacagta ku helaane. Horta, yaa Ilaahay abuuray? Ayaan ilaawey. Mahadsanid.

Iyada oo uu Kitaabka Ilaahay jawaabo lagu qancayo ka bixinayo su'aalaha ugu adadag ee bini'aadanka, waa inay kuwa runta doonayaa meel uun ku joojiyaan ***su'aalaha*** *bini'aadanka* ee wax kasta sababta u doonaya oo u bilaabaan inay si dhab ah ***erayada*** Ilaahay uga fekeraan.

## SABABAHA RUNTA AH EE DADKU KU DIIDAAN BAYBALKA

Baybalka ayaa inoo caddaynaya sababaha runta ah ee ay dadku runta Ilaahay ku diidaan.

Saddexdan ayaynu ka soo qaadanaynaa:

### 1. QULUUB KHARRIBAN

Dadka qaarkiis ayaan marna Qorniinka ka fekerin, waayo, iyagu dhab ahaantii ma doonayaan inay gartaan Abuurahooda iyaga Leh.

Marka aynu qalbiga bini'aadanka ka hadallo, wuxuu Erayga Ilaahay ka odhanayaa: *"Iyagu way kharriban yihiin, ... Rabbigu samaduu ka soo fiiriyey binu-aadmiga, Inuu arko haddii ay jiraan kuwo wax garanaya, Oo Ilaah doondoona. Dhammaantood gees bay u wada leexdeen ...."* (Sabuurrada 14:1-3)

Sababta dhabta ah ee bini'aadanku Baybalka ku diidaa maaha in Erayga Ilaahay la beddeley; laakiinse waxay ku saabsan tahay qalbiyo kharriban.

Boqor Suleymaan ayaa qoray: *"Ilaah wuxuu binu-aadmiga sameeyey iyagoo qumman, laakiinse waxay doondooneen hindisooyin badan."* (Wacdiyahii 7:29) Haddii dabeecaddeena dhabta ah la inoo daayo, innaga ayaa caqligeena ku soconayna, oo waxaan rabno samaynayna oo ku dhimanayna diintii waalidkeen inagu dhaleen. Sababo aynaan Ilaahay ku rumayn ayaynu mar kasta raadineynaa. Muddo yar kaddib marka aynu socdaalkeena

Qorniinka dhexdiisa bilowno ayaynu ogaanaynaa sababta aynu sidan u nahay ama ugu dhaqano. Haddase, ogow inuu Ilaahay sabab fiican u hayo marka uu digniintan Kitaabkiisa ku qoran ku celcelinayo: *"Kan dhego wax lagu maqlo lahu ha maqlo."* (Matayos 13:9) [51]

## 2. WELWELKA IYO TAAJIRNIMADA

Dad badan ayaan Erayga Ilaahay fahmin waayo waxay gebi ahaanba mudnaanta koowaad siiyaan adduunkan iyo wakhtigan la joogo. *"Ka welwelidda dunidan iyo sasabidda maalka ayaa hadalka ceejiya."* (Matayos 13:22)

Ciisihii reer Naasared wuxuu ka sheekeeyey nin taajir ah oo intuu noolaa oo dhan iska indho tiray Qorniinka nebiyada. Laga yaabee inuu ninkani isku maaweelin jirey inaan Erayga Ilaahay la isku hallayn karin. Si kastaba ha ahaatee, aakhirkii ninkii wuu dhintay oo wuxuu is arkay isaga oo naarta ku jira. Si uu digniin cad u bixiyo ayuu Ilaahay oggolaaday inuu wakhti kooban la hadli karo nebi Ibraahim oo jannada ku jira. Ninkaa taajirka ahaan jirey ayaa weydiistey dhibic biyo ah oo uu carrabkiisa ku qaboojisto, laakiinse lama siin. Markii uu ninkaasi fahmey inuu weligiis sidaas rajo la'aan u ahaanayo, ayuu Ibraahim ka baryey inuu dadkan dhintay midkood adduunkii dib ugu diro si uu shan wiil oo walaalihiis oo noolaa digniin ugu geeyo, *"inaanay iyaguna meeshan silaca leh iman."*

Ibraahim jawaabtan cad buu kaas siiyey.

> *"Laakiin Ibraahim wuxuu ku yidhi, 'waxay haystaan [Erayga Ilaahay] ee ay ka maqleen Muuse iyo nebiyada. Iyaga ha dhegeysteen.' markaasuu wuxuu ku yidhi, 'maya, Aabbe Ibraahimow, laakiin haddii qof kuwii dhintay uga tago, way toobadkeeni doonaan.' Wuxuuse ku yidhi, 'haddii ay maqli waayaan Muuse iyo nebiyada, in kastoo qof kuwii dhintay ka soo sara kaco, la oggolaysiin kari maayo inay rumaystaan.'"* (Luukos 16:27-31)

Ilaahay wuxuu sheegay inay runtiisa oo dhammi ku dhan tahay Eraygiisa oo qoran oo uu fahan inoogu filan yahay, oo

ka awood badan yahay mucjisooyinka iyo calaamadaha yaabka leh noocay noqdaanba. Isagu wuxuu ina siiyey oo inoo xafiday Qorniinka nebiyada oo wuxuu inaga doonayaa inaynu kaas *"maqallo"* oo addeecno.

## 3. CABSIDA BINI'AADANKA

Dadka qaarkiis marna Erayga Ilaahay ma bartaan waayo waxay ka cabsanayaan sida ay dadka kale taas u arki doonaan.

Qof aanu deris ahayn ayaa beri hore igu yidhi, "Haddii aanay reerkayga ahayn Baybalka waan akhrin lahaa!" Ogow inuu Baybalka laftiisuna sidan odhanayo, *"Dadka ka cabsashadiisu wax bay dabtaa, laakiinse kii RABBIGA isku halleeyaa wuu nabad geli doonaa."* (Maahmaahyadii 29:25)

Bal adigu iska warran? Ma waxaad ka cabsataa waxa ay qoyskaaga iyo asxaabtaadu odhan doonaan, ama kaaga fekeri doonaa, ama samayn doonaan haddii ay kugu qabtaan adiga oo akhrinaya qoraallada nebiyada ee ay isla iyagu sheegtaan inay sharfaan?

Ha cabsan. *"Kii RABBIGA isku halleeyaa wuu nabad geli doonaa."*

Sida ay Ilaahay la tahay, marna ma jirto sabab sax ah oo akhbaarkiisa la isaga indho tiri karo.



# 4

# SAYNISKA IYO BAYBALKA

*"Oo dhulkana wuxuu ka laalaadshaa wax aan waxba ahayn."* — Nebi Ayuub (Ayuub 26:7)

Dhowr sanno ka hor, aniga iyo xaaskaygu waxaanu dalxiis ahaan u tagnay bohol weyn oo dhulka hoostiisa aad ugu libdhaysa. Haweeneydii na hoggaamineysey ayaa noo tilmaantay waxa dhagxaanta u eg ee cajiibka ah ee ka samaysmay macdanta biyaha ku jirta ee qaar bohosha gudaheeda ka laalaadaan qaarna gunteeda ka soo bexeen, oo sidan oo kale bay u hadashay "waxay ka bilaabmeen dhibic biyo ah. 330 milyan oo sanno ayay bohoshan weyn ee dheer ee biyuhu ku jiraan ku daboolaayeen oo biyaha ayaa macdantooda si tartiib tartiib ah ugu reebayey ilaa ay adkaadeen oo dhagax jilicsan oo kale noqdeen…"

Waxay u hadashay sidii saynisyahanad, sidii uu bini'aadanku ilaa bilowgii arrintaa ka war hayey oo la socdey. Intii ay hadleysey, waxaa niyaddayda ku soo dhacday Erayada uu Ilaahay kaga dhex hadlay nebi Ayuub: *"Markaan dunida aasaaskeeda dhigay xaggee baad joogtay? Haddaad waxgarad tahay, taas ii sheeg."* (Ayuub 38:4) Markii aanu socdaalkii boholaha ka soo noqonay, ayaan anigu haweeneydaa gadh-wadeenka noo ahayd u mahad celiyey oo aan weydiiyey sida ay kuwa waxyaalaha dhulka hoostiisa iyo dhagxaanta ku xeeldheeri ku ogaadeen inay bohoshaasi jirto intaas oo malyuun oo sanno. Waxay qiratay inaanay runtii taas ogeyn, oo intaas ku dartay, "waxaan keliya oo kuu sheegay wixii la igu soo tababbaray inaan idiin sheego."


## SAYNISKA RUNTA AH

Erayga *Saynis* wuxuu ka soo jeedaa magaca afka Laatiinka ah ee *scientia*, oo uu macnihiisu yahay *aqoon.*[52] *In wax la ogaado waa in waxaas runnimadiisa loo caddeeyo si aan shaki ku jirin.* In kasta oo ay saynisyahannadu wax ay mala-awaaleen ku sheegaan saynis, taasi runtii saynis ma noqonayso.

Badhtimihii 1970-aadkii, Dhakhtarka Faransiiska ah ee la odhan jirey Maurice Bucaille, oo ahaa dhakhtarka khaaska ah ee Boqor Faysal, wuxuu qoray buug la yidhaahdo *Baybalka, Quraanka iyo Sayniska (The Bible, the Qur'an and Science)*. Buuggan waxaa si baahsan loo dhigay dukaanada buuggaagta lagu iibiyo iyo masaajidada adduunka Islaamka oo dhan, maadaama uu buuggani ku andacoonayo inuu Baybalku ka soo horjeedo sayniska casriga ah. Ninkaas Bucaille la odhan jirey wuxuu sheegay in qisada abuuritaankii adduunka ku saabsan ee Baybalka ku qorani ay tahay "mid ay u badan tahay inay sheeko baraley hore ku salaysan tahay," waayo taasi ma qaabilayso fikradaha bini'aadanka ah ee is bedbeddela ee ku saabsan meesha uu adduunku ka yimid.[53] Sida kuwo badan oo kale, Bucaille wuxuu fikradda in adduunku, oo ay bini'aadankuna ku jiraan si tartiib ah uga yimid malyuumaad sanno uga abuurmay unugyo aad u yaryar oo muddo malyuumaad ah isa soo bedbeddelayey (evolutionary theory)[54] kala mid dhigay sayniska saxda ah.

Waxaa muhiim ah in la fahmo inaan Qorniinka loo soo dejin in dadka la baro sayniska ku saabsan waxyaalaha la arki karo, laakiinse loo soo dejiyey in dadka la baro sayniska ruuxiyanka ah. Ilaahay wuxuu Kitaabkiisa inoo siiyey si uu inoo tuso Ka uu Isagu yahay, Dabeecaddiisa, iyo wixii uu Isagu inoo sameeyey. Sababta kale ee uu Kitaabkaa inoo siiyeyna waa inuu ina baro meesha aynu ka nimid, sababta aynu adduunka u joogno, iyo meesha aynu ku dambayn doono. Warka noocan oo kale ah inta shaybaadh la geeyo saxsanaantiisa ama khaldanaantiisa laguma baadhi karo. Sidaas oo ay tahay, maadaama uu Baybalku wax kasta oo nolosha ku saabsan ka hadlayo, la yaab maaha inay ku qoran yihiin warar ku saabsan bii'addii ay dadku ku noolaayeen wakhtigii Baybalka la qoray.

**ILAAHAY BAA UGU HORRAYNTII SHEEGAY**



Aynu hadda eegno toddoba tusaale oo ku saabsan warka sayniska ah ee lagu qoray Kitaabka Ilaahay muddo dheer ka hor intii aanay kuwaas saynisyahanada maantu ogaan. Mar dambe, inta aynu Qorniinka ku dhex jirno oo ka fekereyso, waxaynu la kulmi doonaa tusaalayaal cadcad oo ku saabsan sayniska Baybalka ku jira.

1. ADDUUN WAREEGSAN: Buuggaagta taariikhda ah ee casriga ah intooda badani waxay qoraan inay Giriiggu 1,500 sanno Ciise ka hor ahaayeen, "kuwii ugu horreeyey ee ka fekera inuu Adduunku wareegsan yahay…. Filasoofiyiintii Giriigga ayaa iyaguna go'aansaday inuu adduunkani lahaan karo oo keliya qaabka wareegga oo kale, waayo, sida ay iyaga la ahayd, waa qaabka 'ugu fiican.'"[55] Laakiinse, kun sanno markaa ka hor ayuu nebi Ayuub sidan ka yidhi Ilaahay, ***"Oo dhulkana wuxuu ka laalaadshaa wax aan waxba ahayn….*** *Biyaha dushooda wuxuu ku* ***wareejiyey soohdin*** *kala xidha nuurka iyo gudcurka."* (Ayuub 26:7,10) 400 oo sanno Giriigga ka hor, nebi Suleymaan ayaa sheegay inuu Ilaahay *"Xariijin ku* ***wareejiyey*** *moolka dushiisa."* (Maahmaahyadii 8:27) Sidoo kale 700 oo sanno Ciise ka hor, oo ku beegan intii aan filasoofiyiinta Giriiggu soo bixin horteed, ayuu Ishacyaah sheegay: *"Waa isaga [Ilaahay] kan wareegga dhulka dul fadhiya."* (Ishacyaah 40:22) Marka afkii Cibraaniga ahaa ee horraan Axdigii Hore lagu qoray dib loogu noqdo erayga wareeg macnihiisu waa kubbad oo kale ama goobaabin. Markaa, yaa ugu horrayntii sheegay inuu adduunku leeyahay qaab wareegsan—ma Giriigga mise Ilaahay? Haa, waxaa ugu horrayntii arrintaa sheegay Ilaahay, Qaabeeyaha Adduunka.

2. MEERTADA (IS BEDBEDDELKA) BIYAHA Kitaabka Ayuub wuxuu kale oo qeexayaa is bedbeddelka biyaha, *“**Waayo, isagu wuxuu kor u jiitaa dhibicyaha biyaha,** oo wuxuu ka dhigaa ceeryaamo roob noqota, oo daruuraha ka soo da’a, oo binu-aadmiga aad ugu dul shubma. Ninna miyuu garan karaa daruuraha kala faafintooda, iyo onkodyada taambuuggiisa?”* (Ayuub 36:27-29) Markaa, Baybalku wuxuu qeexayaa sida uu roobku u samaysmo, taas oo ay ceeryaamadu noqoto sayax, dabadeedna isu beddesho biyo dhibic ah oo daruuraha ku jirta, oo ay haddana isu beddesho dhibco waaweeyn oo aanay daruurtu qaadi karin oo ugu dambaysta soo da’da. Waxa kale oo uu Ayuub ka hadlayaa biyaha aadka u badan ee ku dhex jira daruuraha: *“Biyaha wuxuu ku xidhaa daruurihiisa qarada waaweyn, oo daruurtuna hoostooda kama dillaacdo.”* (Ayuub 26:8)[56]

3. ISKU FARAC Saddex kun iyo shan boqol oo sanno ka hor, nebi Muuse ayaa qoray: *“Ninkiina wuxuu naagtiisii u bixiyey Xaawa, maxaa yeelay, **waxay ahayd hooyadii waxa nool oo dhan**.”* (Bilowgii 3:20) Sida Baybalka ku qoran, bini’aadanka oo dhammi waxay ka soo jeedaan hooyo keliya. Saynisyahannada aaminsan inuu bini’aadanku unugyo yaryar oo isa soo bedbeddelayey ka soo jeedo (evolutionary scientists) xaqiiqadan waa laga dhaadhicin kari waayey ilaa laga soo gaadhayey 1987. Baadhitaan baahsan oo qoto dheer oo lagu sameeyey mandheeraha hooyooyinka oo adduunka oo dhan ah oo ku saabsan qaybta isirka ah ee ay hooyada keliya u gudbin karto cunuggeeda (mitochondrial DNA), wuxuu baadhitaankan gabagabadiisii noqday inay bini’aadanka oo dhammi isku hooyo ka soo farcameen.[57] Dhowr sanno markaa kaddib, ayaa baadhitaano kale caddeeyeen inay bini’aadanku ka soo farcameen isku aabbe.[58] Aqoonyahannadu tirada kumay darin inay baadhitaanadaas badan ee kharashka badani kaga baxay caddayn doonaan runimada ama saxsanaanta Baybalka.

4. NOLOSHU WAXAY KU JIRTAA DHIIGGA Nebi Muuse ayaa sidoo kale qoray: *“jiidhka noloshiisii waxay **ku dhex jirtaa dhiigga**.”* (Laawiyiintii 17:11) Bulshada caafimaadku waxay xaqiiqadan fahmeen muddo aan sidaa u fogeyn, kuwani waxay ilaa intii qarnigii 19-aad la soo gaadhayey dadka ku daaweyn jireen dhiig-bixinta, taas oo nafta bini’aadanka khatarta u keeni kara.[59]

5. ADDUUNYO GABOOBAYSA **Saddex kun oo sanno ka hor**, nebi Daa'uud ayaa qoray inuu adduunku maalin uun ***"baabbi'i"*** doono oo u *"**duugoobi** doono sida dhar oo kale."* (Sabuurradii 102:26) Sayniska casriga ahi wuxuu oggolaaday inuu adduunka aynu ku noollahay gaabinayo, oo uu aasaaskiisu gaboobayo, oo korkana ka sii khafiifayo. Tan oo macniheedu yahay inuu guud ahaan gaboobayo.

6. CILMIGA BADAHA Nebi Daa'uud ayaa sidoo kale qoray wax ku saabsan *"**waddooyinka** badaha."* (Sabuurradii 8:8) Waa odhaah gaaban oo ah ta dhiirriggelisey ninkii la odhan jirey Admiral Matthew Fontaine Maury (1806-1873) ee tan daraadeed naftiisa ugu hibeeyey inuu baadho oo wax ka qoro hirarka badda. Wuxuu dadka u sheegay inuu Ilaahay ka hadlay *"waddooyinka"* badaha, oo uu markaa isagu awoodo inuu waddooyinkaasi meelaha ay maraan qoritaan ku sameeyo oo calaamadiyo. Maury isla sidaas ayuu sameeyey oo waxaa isaga loo aqoonsaday "aabbaha cilmiga badaha."[60]

7. XIDDIGISKA Muddo ku dhow ilaa 2,000 oo sanno ka hor, ayuu rasuul Bawlos qoray: "Waxaa jirta ammaanta qorraxda iyo ammaanta kaloo dayaxa iyo ammaanta kaloo xiddigaha, waayo, xiddiguba xiddigta kale way ka ammaan duwan tahay." (1 Korintos 15:41) Indhaheena caadiga xiddiga oo dhammi isku mid bay inala yihiin. Laakiinse, maanta, cilmiga aynu ku korodhsanay diiradaha awoodda badan ee cirka lagu eego iyo baadhitaanka ileyska daraaddood, waxay xidiggiyeyaashu (astronomers) inoo sheegayaan, "xiddiguhu aad bay ugu kala duwan yihiin midabka iyo dhalaalka. Xiddigaha qaarkood ayaa jaalle, ah, sida qorraxda. Qaarna waxay soo daayaan iftiin buluug ama casaan ah."[61] "Xiddig kastaa waa mid khaas ah oo kuwa kale ka duwan."[62] Sidee ayuu rasuul Bawlos tan ku ogaadey qarnigii koowaad Ciise Kaddib?

## RUMAYSI INDHO LA?

In kasta oo aayado badan oo kale oo ku saabsan sayniska Baybalka ku dhex jira la soo xigan karo, casharka sahlan ee toddobadaa tusaale laga baranayo waa: In kasta oo aan Baybalka

loogu talogelin inuu noqdo buug-sayniseed, uu haddana ku saxsan yahay mar kasta oo uu wax sayniska ku saabsan ka hadlo.

Dadka qaarkiis ayaa rumaysiga Baybalka ku tilmaama "rumaysi indho la'aan ah." Ma sidaas baa? Mise waa rumaysi caqli badan ku dhisan oo ku salaysan war aan la beenayn karin? Maadaama ay caddaymuhu si joogto ah u aqbalayaan waxa Baybalka ku qoran, ma nacasiin baynu nahay inaynu Erayga Ilaahay rumayno — xataa marka aynaan si buuxda u sharrixi karin ama caddayn ugu keeni karin waxa ay ina barayaan?

Ilaahay inagama rabo inaynu naf-haligaad ama dilid caqliyan ah isku samayno. Wuxuu Isagu ina siiyey *"waxyaalo badan oo la hubo"* (Falimaha Rasuullada 1:3) kuwaas oo muujinaya runimada Kitaabkiisa.

## TAARIIKHDA, JUQURAAFIGA, IYO WAXYAALIHII QADIIMKA AHAA

Cutubkeenii ugu dambeeyey waxaynu ku soo aragnay caddaymo dhidibada u aasaya in Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub ay yihiin kitaabada qadiimka ah kuwa ugu xafidaada fiican. Ka warran akhbaarka Qorniinka ku qoran laftiisa? Ma la aamini karaa?

Baybalku wuxuu aqoonyahannada iyo kuwa ka shakisanba siinayaa kumanyaal fursadood oo ay ku baadhaan saxsanaantiisa, maadaama oo uu bog kasta oo uu ka kooban yahay sheegayo magacyo dad, meelo ama dhacdooyin taariikhi ah.

Haddaba, maxay taariikhda, juquraafiga, iyo cilmiga waxyaalihii qadiimka ahaa ee dhulka korkiisa ama hoostiisa laga soo saaray ku saabsani muujinaan?

Qarniyaal badan, niman badan ayaa isku deyey inay beeneeyaan saxnaanta taariikhiga ah ee Baybalka. Mid ka mid ah nimankaa shakiga ka qabey wuxuu ahaa Sir William Mitchell Ramsay (1851–1939), oo ahaa mid ka mid ah cilmi-baadhayaa adduunka ugu caansan ee cilmiga baadhitaanka waxyaalihii hore ee qadiimka ahaa. Isaga oo jaamacad arday ka ah ayuu Ramsay ka shakiyey saxsanaanta Baybalka. Waxyaalihii qadiimka ahaa ee uu baadhitaanada ku helay ayaa markii dambe si tartiib tartiib ah fekerkisii u beddeley, oo ku khasbay inuu baadhitaan uu 30 sanno wadey kaddib yidhaahdo, "Luukos [qoraha Injiilka

Luukos] waa taariikhyahan ka ugu darajada sarreeya; kuma fila in erayadiisa loo qaato xaqiiqooyin run ah… laakiinse sidoo kale waa in qoraagan lala simo taariikhyahannadii ugu muhiimsanaa ee adduunka soo mara.”[63]

Luukos wuxuu ahaa dhakhtar, taariikhyahan, iyo mid ka mid ah xawaariyiintii (xertii) Ciise, iyo qoraha *Injiilka sida uu Luukos u qora*y iyo *Falimaha Rasuullada*. Labadan kitaab ee Baybalka ka tirsani waxay juquraafi ahaan wax ka sheegayaan 95 meelood (32 waddan, 54 magaalo, iyo 9 jasiiradood), iyo shakhsiyaad iyo dhacdooyin faro badan oo taariikhi ah. Kuwa Baybalka dura ayaa isku deyey inay helaan is khilaaf ka dhexeeya waxa uu Luukos qoray iyo cilmiga baadhista qadiimiga dhulka laga qodo, juquraafiga, iyo taariikda uu Baybalku meelo kale ku sheegay. Qoraallada Luukos waxaa la caddeeyey inay run yihiin markii dhinac kasta laga imtixaamay.

Mid ka mid ah odhaahaha Injiilka Luukos ku qoran ayaa qodobkan sharaxaya. Waa odhaah loogu talogalaay inay aasaas taariikhiyan ah u dhigto adeeggii adduunkan ee Ciisihii reer Naasared.

> *“Waxay ahayd sannaddii shan iyo tobnaad oo **Tiberiyas Kaysar** boqranaa, markii **Bontiyos Bilaatos** xukumi jiray Yahuudiya, oo Herodos taliye u ahaa Galili, walaalkiis Filibosna taliye u ahaa Ituraya iyo dalkii Tarakhoonitis, oo **Lusaniyas** taliye u ahaa Abilene, oo Annas iyo **Kayafas** wadaaddadii sare ahaan jireen, markaasaa ereygii Ilaah cidlada ugu yimid Yooxanaa ina Sakariyas.”* (Luukos 3:1-2)

## LUUKOS MIYUU SAXSANAA?

Magacyada iyo faahfaahinada badani waxay caadiyan inoo keenayaan inaynu su’aashan is weydiino, “Luukos miyuu saxsanaa?” Imtixaan ahaan, aynu qaadaa-dhigno afar qof oo uu magacaabay—oo magacyadooda lagu sheegay aayadihii aynu hadda soo xiganey.

Ugu horrayn, Luukos wuxuu magacaabayaa boqorkii Roomaanka ah ee la odhan jirey Tiberiyas Kaysar iyo guddoomiye goboleedkii la odhan jirey Bontiyos Bilaatos. Nimankani

ma jireen? Ma isku wakhti bay madax ahaayeen? 1961 meesha uu ku yaallo tiyaatarka boqorkii Heerod ee dib loo habeeyey ee ku yaalla magaalada Kaysariya (tan oo iyana uu Luukos ku sheegay [Falimaha Rasuullada 12:19-24]), waxaa laga helay dhagax uu jooggiisu yahay hal mitir oo ay ku dul qoran tahay inuu run ahaantii Bontiyus Bilaatos guddoomiye goboleed ahaa, markii uu Tiberiyas Kaysar Boqorka ahaa. Ninkii aan Baybalka shaqada ku lahayn ee taariikhyahanka ahaa ee la odhan jirey Josefesus (37–101 Ciise Kaddib) ayaa isna wax ka qoray isla dadkaas, meelahaas, iyo dhacdooyinkaas.[64]

Luukos wuu saxsanaa.

Luukos wuxuu kaloo magacaabayaa Lusaniyas oo ay isaga iyo nin kale guddoomiyaal ka ahaayeen Abileene oo ahayd gobol Siiriya ka tirsan. Sannado badan ayay aqoonyahannadu xaqiiqadan u haysteen mid uu Luukos ku khaldanaa waayo Lusaniyos-ka keliya ee ay taariikhyahannadu yaqaanaan wuxuu xukumi jirey Kaalsis, oo Giriigga ah, oo waxaa la diley 60 sanno ka hor wakhtiga uu Luukos wax qorayo (qiyaastii 27 Ciise Kaddib). Taariikhyannadu waxba kamay aqoon Lusaniyas kale oo Abileene guddoomiye u ahaa, ilaa Dimishiq agteeda laga helay qoraal isaga ku saabsan oo taariikhdiisu u dhexaysey 14 iyo 29 Ciise Kaddib. Waxaa ku kor qoran magaca *Lusaniyas Tarakhoonitis*[65] Markaa, waxaa jira laba qof oo Lusaniyas la odhan jirey.

Luukas taasna wuu ku saxsanaa.

Luukos wuxuu kaloo wax ka qoray Kayfas oo ay isaga iyo nin kale wadaaddo sare ka ahaayeen macbudkii Yuhuudda markii uu Ciise adduunka joogey. Diseember 1990, ayaa shaqaale dhisaya jidka jid ku yaalla koonfurta Yeruusaalem dhinaceeda qadiimka ah si lama-filaan ah u heleen xabaashii Kayfas iyo reerkiisii. Nimanka cilmiga alaabta qadiimka ah ku xeeldeher ayaa meeshaas loogu yeedhay. Xabaashaa weyn waxaa ku aasnaa 12 qof oo ku jira saxaarado sanduuq oo kale ah, ka ugu quruxda badan ee sida fiican loo xardhayna waxaa ku dul qornaa magaca *Yuusuf ina Kayfas*. Kaasi wuxuu ahaa magacii buuxay ee wadaadkii sare kaas oo Ciise xidhay.[66] Saxaaraddaa dhexdeedana waxaa ku jirey lafihii nin 60 jir ah kaas oo hubaashii ah Kayfas-ka Axdiga Cusub lagu sheegay.[67]

Luukos tanna wuu ku saxsanaa.

Aqoonyahanka ku xeeldheer waxyaalaha qadiimka ah ee dhulka hoostiisa laga soo saaro ee Nelson Glueck la yidhaahdo ayaa yidhi, "Waxaa si aan gabasho lahayn loo odhan karaa in aanay jirin wax qadiim ah oo dhulka hoostiisa laga soo saaray oo Baybalka ka hor imaanaya. Waxaa jira waxyaalo badan oo qadiimi ah oo taariikhi ah oo uu Baybalkuna sheegay oo si toos u tusaya saxsanaanta Baybalka."[68] Kitaabbada diimaha kale midkoodna sidan lagama odhan karo. Tusaale ahaan, waxay aqoonyahannadu tuseen inaanay is qaabilayn Kitaabka Mormonka iyo taariikhda iyo juquraafigu.[69]

Ninka ku xeeldheer cilmiga waxyaalaha qadiimka ah ee Joseph Free la yidhaahdo, oo guddoomiye ka ah Jaamacadda Wheaton qaybteeda cilmiga alaabta qadiimka ah, ayaa buuggiisa *Archaelogy and Bible History (Cilmiga Waxyaalaha Qadiimka ah iyo Taariikhda Baybalka)* erayadan ku yidhi, "Kitaabka Baybalka ka tirsan ee Bilowgii ayaan dhex maray oo waxaan ogaadey in mid kasta oo ah 50-ka cutub uu ka kooban yahay ay saansaan ka bixisay ama toos u caddaysayba alaab qadiim ah oo dhulka laga helay — cutubbada kale ee hadhay ee Baybalka, Axidigii Hore iyo Axidiga Cusub iyaguna waa sidaas oo kale."[70]

## WAXA UUSAN SAYNISKU CADDAYN KARIN

Iyada oo ay alaabta ama cilmiga qadiimka ah ee dhulka hoostiisa laga helo (archaelogy) uu qaabilayo runimada in Baybalku yahay qoraal taariikhda run ka sheegayo, cilmigaasi ma caddayn karo waxyiga ilaahiyanka ah. In kasta oo odhaaho saynis ah oo waaweyn Baybalka laga helayo, saynisku ma caddayn karo inuu kitaabkaasi yahay Erayga Ilaahay ee runta ah. Waa muhiim in tan la sheego si looga dhaadhiciyo dadka kitaab uun ku tilmaama inuu Ilaahay soo dejiyey maadaama uu sheegayo odhaaho sayniska ku saabsan oo la caddayn karo.

Xaqiiqooyinka ruuxiyan ah saynis ahaan looma caddayn karo, xaqiiqooyinka sayniska ku saabsanina ma caddayn karaan inuu kitaab ka yimid Ilaahay iyo in kale. Shaydaanka, oo muddo badan joogey laftiisu waxyaalo badan buu isna sayniska ka yaqaanaa. Bilowga inta aynu Baybalka wax ka baranayno waxaynu la kulmaynaa malag markii hore malaa'igta jannada ka tirsanaa, kaas

oo hadda loogu yeedho *Shaydaan* iyo *Ibliiska*, kaas oo Ilaahay cadow ku noqday. Haddase, niyadda ku hay uun inuu Shaydaanku aad u caqli badan yahay oo uu bini'aadanka u muujin karo inay waxyaalo cajiib ah qoraan.

Nebi Daanyeel, wuxuu ahaa nin xigmad leh oo uu Ilaahay u isticmaalay inuu qoro mid ka mid ah kitaabbada Qorniinka ugu caansan, sidaas oo ay tahay, marka ay timaaddo awooddiisa, wuxuu Shaydaanka, kaas oo Ilaahay liddi ku ah ku tilmaamay inuu xataa *"Daanyeel ka sii xigmad badan yahay."* (Yexesqeel 28:3) Shaydaanka ayaa ka dambeeya diimaha beenta ah. Wuxuu caan ku yahay sirta. Magaca *shaydaan* laftiisa ayaa la micne ah *eedeeye* ama *beenaale*.

Maahmaah af Carabi ah baa tidhaahda: *"Iska jir! Beenaalayaasha qaarkood baa marmar run sheega e."*

## WAXA AANAY SUUGAANTU CADDAYN KARIN

Diimaha qaarkood ayaa ku andacooda inay caddayn u tahay inuu Ilaahay soo dejiyey qaabka loo qoray oo aanu bini'aadan samayn karin daraaddiis.[71] Sidii uu Axmed Email-kiisii inoogu soo qoray:

> Dir Mowduuca: Email la soo diray
>
> Quraanku waa mucjisada ugu weyn ee abid nebi loo soo diro! Haye, bal hal aayad oo la mid ah samee, ama, mid u dhow aayadahiisa! Weligaa ma samayn kartid xataa haddaad af Carabiga ugu fiican taqaanid, … ma jiro adduunka wax Quraanka la mid ahi … hadday taasi jirto, sheeg bal.

Odhaahdan Axmed waxay ku salaysan tahay aayad ku qoran suuradda labaad ee Quraanka oo odhanaysa: *"Haddii aad ka shakidaan waxa aanu wakhti ka wakhti addoonkayaga u soo dirnay, **haddaba bal suurad la mid ah keena….**"* (Suurrada 2:23)

Odhaahdan dhibteedu waa inay caddaynteedu tahay mid aan dhinac loo raaco lahayn.

Tusaale ahaan, kaba soo qaad inaan tartan farshaxan sawireed ah abaabulo, oo aan sawirkayga tartanka kaga qayb galo, oo aan isla aniguna ahay ka xukumaya, oo anigu isu xukumo inaan

guuleystey, oo aan haddana kuwii ila tartamayey ku idhaahdo, "Ma jiro qof sidayda sawir gacmeed u samayn karaa. Haddii aad ka shakisan tihiin inaan anigu ahay farshaxan-yahanka adduunka ugu fiican, car bal sawir kayga oo kale ah sameeya."

Taasi ma waxay caddayn u tahay inuu sawirkaygu ka ugu fiican yahay? Ma waxay caddayn u tahay inaan ahay farshaxan-yahanka adduunka ugu weyn? Sidaas oo ay tahay ma jiro qof taas caddayn karaa ama beenayn karaa! Sabab? Qof walba qumanihiisa ayaa qoorta u sudhan.

Waa sidaas oo kale quruxda gabayada ama heesaha ama waxa sida fiican loogu luuqeeyaa. Waa sida uu qofba u arko.

Af Cibraanigu waa af suugaanta taajir ku ah iyo laba-dhaca erayadiisa ama tiradiisa.[72] Sidaas oo ay tahay Ilaahay inagama sugayo inaan Eraygiisa rumayno aftahanimo daraadeed.

Isla sida uusan saynisku caddayn ugu keeni karin waxyiga ilaahiyanka ah, ayaan aftahanimada ama ku luuqaynta macaani u caddayn karin inuu kitaab ka yimid Ilaahay iyo in kale.

Waa muhiim inaynu mar kasta niyadda ku hayno inuu Shaydaanku yahay beenaale abuura wax erayga Ilaahay u eg oo ku dayasho ah oo si fiican oo macaan loogu luuqayn karo iyo *"hadallo isweyneyni ah."* (Yuudas 16) Erayga Ilaahay wuxuu inooga digayaan inaan la inagu sirin *"hadallo macaan oo wanaagsan oo khiyaaneeya qalbiyada jaahiliinta."* (Rooma 16:18), gaar ahaan haddii ay erayadaasi ka soo hor jeedaan qorshaha iyo akhbaarka Ilaahay muujiyey laga soo bilaabo bilowgii adduunka.

Sayniska, cilmiga ku saabsan waxyaalahii hore ee qadiimka ahaa iyo suugaanta midkoodna caddayn uma noqon karo inuu kitaab yahay Erayga runta ah ee Ilaahay iyo in kale. Caddaynta waxyiga Ilaahiyan ahi waa inay ku salaysnaataa maxkamad waxaas oo dhan ka sarraysa — caddayn ka xoog badan oo aan laga daba hadli karin.

Caddayntan ayaynu bilaabaynaa inaynu hadda ka hadallo.



# 5

# Saxiixa Ilaahay

*"Quruumaha oo dhammu ... ha maqleen oo ha yidhaahdeen, 'Taasu waa run.'"*

— Ilaahay (Ishacyaah 43:9)

Dukumentiyada sharciga ah badankoodu waxay u baahan yihiin shaanbad la aqoonsan yahay. Qorniinnada Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub, oo ah akhbaarka iyo axdiga Ilaahay, laguma saxiixin qalin, laakiinse saxiix aad uga duwan oo khaas u ah oo la yidhaahdo *waxyi la kaamilay*.



*"RABBIGA ciidammadu wuxuu leeyahay ... 'Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, oo aniga mooyaane Ilaah kale ma jiro. Bal yaa sidayda oo kale u sheegi kara? Ha naadiyo, oo si hagaagsan ha iigu sheegeen anoo dadkii hore dhisay iyo waxa dhici doona—Haa, bal waxa dhici doona ha sii sheego ... Bal yaa waxyaalahan waa hore muujiyey? Oo bal yaa wakhti hore sii sheegay? Sow ma aha Aniga, RABBIGA?'"*

(Ishacyaah 44:6-7; 45:21)

Waa inaynu si fiican u fahanno sababta uu Ilaahay sidan ugu hadlayo. Maadaama ay Baybalka ka buuxaan waxyiyo faahfaahsan kuwaas oo si buuxda loo kaamilay ama u dhacay, waxaynu aamini

karnaa waxa uu ka sheegayo dhacdooyinkii hore, kuwa hadda, iyo kuwa mustaqbalka.

## CADDAYN SAX AH

Ka keliya ee ka korreeya wakhtiga ee hortiis jirey ayaa sii sheegi kara waxa taariikhaha kala dambeeya dhici doona, inta aanay dhicin ka hor.

Rag iyo dumar san-ku-neefle ah ayaa wakthiyo kala duduwan iyaga oo cilmigooda isticmaalaya sii saadaaliyey waxa dhici doona mustaqbalka, laakiinse Ilaahay oo keliyaa ayaa mustaqbalka u arka sidii isagoo mar horeba dhacay. Ilaahay oo keliya ayaa garanaya waxa dhici doona kun sannadood hadda kaddib. Waxyi ilaahiyan ah maahee, bini'aadan, malaa'igo, jiniyo, ama xataa Shaydaankuba siima sheegi karaan dhacdooyinka mustaqbalka.

Qaar baa odhan kara, "Laakiinse ka warran faaliyeyaasha iyo sixirooleyaasha? Mustaqbalka ayay sii saadaaliyaan!"

Waa marka ugu horraysee, waa muhiim inaynu fahanno inuu Shaydaanku leeyahay awood uu waxyaalo cajiib ah oo mucjiso ah ugu sheego kuwa, *"dabinka Ibliiska lagu qabtay si ay muraadkiisa u yeelaan."* (2 Timoteyos 2:26)

Waa ta labaade, Shaydaanku—jirjiroolaha iyo dhakhtarka cilminafsiga ee ugu weyni wuxuu taariikhda bini'aadanka la socdey kumanyaal sanno—oo wuxuu si fiican u bartay ku been abuurashada "saxiixa" Ilaahay.

Ta saddexaad, in kasta oo ibliisku xooggaa ku fiicnaan karo inuu sii saadaaliyo sida ay dhacdooyin khaas ahi u dhici doonaan, isagu mustaqbalka waxba kama oga. "Waxyiyadiisu' badanaa waa khalad. Intaa waxaa soo raaca kuwaasi waa madmadow aan la fahmeyn. Tusaale ahaan, mid faaliya ayaa laga yaabaa inuu haweeney da' yar u sheego, "Dhowrka sanno ee soo socda gof aad kuu jecel oo ku guursada ayaad heli doontaa." Labadeenuba waynu fahmaynaa inay aad suurtogal u noqon karto inay sidaasi ku dhici karto haweeneydaa. Marka aynu ka hadlayno waxyi ilaahiyan ah oo la kaamilay, kama hadlayno saadaalin aan la hubin oo qiyaas uun ku salaysan.

Haddana aynu eegno saddex tusaale oo ah waxyiyo baybaliyan ah—oo ku saabsan meel, dad, iyo qof.

## WAXYIYO KU SAABSAN MEEL

Qiyaastii 600 oo sanno Ciise Kahor, nebi Yexesqeel wuxuu sheegay waxyi ka dhan ah magaaladii qadiimka ahayd ee Turos tii reer Funiishiya, oo ku taalley xeebta Lubnaanta hadda, oo Turos muddo laba kun oo sanno ka badan ayay caasimadaha adduunka ka mid ahayd. Waxaa iyada loo yaqaaney *boqoraddii badaha*. Sidaas oo ay tahay, iyada oo wakhtigeedii ugu awoodda badnaa ku jirta, ayuu Ilaahay nebi Yexesqeel u sheegay inuu ku dhawaaqo oo qoro waxyi faahfaahsan oo ku saabsan baaba' ku soo fool lahaa Turos, oo ay sababtay sharkeedii iyo Ilaahay oo ay ku dhego adaygtay.

Nebi Yexesqeel wuxuu ka sii waxyoodey inay:

1. *Qaramo badani ka soo horjeesan doonaa Turos.* (Yexesqeel 26:3)
2. *Baabuloon, oo uu boqor ka ahaa Boqor Nebukadnesar ayaa weerarka ugu horreeya ku qaadi doonta.* (aayadda 7)
3. *Derbiyada iyo qalcadaha Turos ayaa la burburin doonaa.* (aayadaha 4,9)
4. Dadka reer Turos *seef baa lagu layn* doonaa. (aayadda 11)
5. *Burburka iyo ciidda magaaladaa badda ayaa lagu guri doonaa.* (aayadda 12)
6. Waxaa iyada loo diiran doonaa *"sida dhagax korkiisa."* (aayadda 4)
7. Waxay u bannaanaan doontaa sida meel ay kaluumaysatadu ku shaqaysato *"oo ay dabinadooda kalluunka ku kala bixiyaan."* (aayadaha 5,14)
8. Magaaladaa weyn ee Turos *"dib looma dhisi doono, waayo Aniga oo RABBIGA ah ayaa hadlay."* (aayadda 14)

Taariikhyahannada aan diinta ku salaysnayni waxay qoreen inay siddeeddaa waxyi ee la sii sheegayba run noqdeen:

1. *Waddamo badan ayaa Turos ka soo horjeestey.*
2. Waxaa ugu horreeyey *Baabuloon, oo uu Boqor Nebukadnesar hoggaaminayo.*

3. Kaddib markii 13 sanno la harreereeyey (585–572 Ciise Kahor), Nebukadnesar *wuxuu burburiyey derbiyadii Turos iyo qalcadaheedii,* oo waxaa halkaa ku rumoobey waxyiyadii ugu horreysay ee Yexesqeel.
4. Nebukadnesar wuxuu xasuuqay *dadkii magaaladaa ku noolaa* ee Turos uga baxsan kari waayey jasiirradii aan la geli karin, oo hal kiilomitir dhinaca Badda Dhexe ku dhex taalley.
5. Taariikhda caadiga ahi waxay qortay in 332 Ciise Kahor, "Alexander the Great noqday kii ugu horreeyey ee qabsada jasiirraddaa Turos ka tirsanayd. Waxaa taas awoodsiisey kaddib markii uu magaaladii dhulka ku taalley burburiyey oo burburkeedii ka dhisay jid uu jasiiradda u maro."[73] Tan oo ka dhigaysa inuu isaga oo aan ogeyn meelmariyo waxyiga qaybtiisii ahayd in *burburka iyo ciidda magaaladaa badda lagu guri doono.* Qabsashadii Alexander waxay si buuxda u soo af jartay Boqortooyadii Funiishiyiinta.[74]
6. Magaaladii waxaa loo diirtay sidii "dhagax qallalan korkiisa."
7. Waxay noqotay "meel dabinnada kalluunka lagu kala baxsado."
8. Sannadihii markaa ka dambeeyey dadaalo badan baa loo galay in Turos dib loo dhiso, laakiinse mar kasta waa la burburin jirey. Maantadan waxaa jirta magaalo casri ah oo Lubnaan ku taalla oo Turos la yidhaahdo, laakiinse magaaladii qadiimka ahayd ee reer Funiishiya ee nebi Yexesqeel waxyiga ka dhanka ah sheegay weligeed burburkii kamay soo kaban. Sawirka hoose wuxuu muujinyaa barxad dhagax ah, oo uu wargeyska National Geographic sidan u qeexayo: "Maanta Turos, tii reer Funiishiya waxay ku aasan tahay barxaddan dhagxaanta iyo tiirarkan dhagaxa ah ee Roomaankii. Haddii wax yar hoos loo qodo waxaa la gaadhayaa adduunkii lumay ee Funiishiyiinta.[75]

Miyaanay adkaateen inuu ninkaas Yexesqeel, haddii uu xigmaddiisa isticmaali lahaa, sii sheego siddeed waxyi oo Turos ku saabsanaa oo dhammaantood rumoobey?

Maadaama Ilaahay wax kasta oo taariikhda ku saabsan arko ka hor intaanay dhicin, Ilaahay oo keliya ayaa warkaa Yexesqeel siin karey.

## WAXYIYO KU SAABSAN DAD

Baybalka waxaa ku qoran boqollaal waxyi oo toos ah oo ku saabsan shakhsiyaad iyo waddamo faro badan: Masar, Itoobiya, Careebiya, Beershiya, Ruushka, Israa'iil, iyo kuwo kaleba.

Hadda oo aynu u gudbeyno tusaalaha ku xiga ee ah waxyi la kaamilay, aynu niyadda ku hayno inaanay ujeeddadu ahayn inay waxyiyadani sheegaan waxa aynu jecellahay inaynu maqallo, mana aha inaynu meel marinayno ujeeddo siyaasadeed ama mid diineed oo aynu wadano. Ujeeddadayadu waa inaynu ogaano waxa uu Erayga Ilaahay sheegayo.

Kani waa waxyi ay fuddudahay in la fahmo laakiinse ay adag tahay inay kuwo badani aqbalaan, kan oo ku saabsan qaran khaas ah.

Qiyaastii 1920 sanno Ciise Kahor, wuxuu Ilaahay ugu ballaanqaaday nebi Ibraahim, *"Dalkan farcankaagaan siin doonaa."* (Bilowgii 12:7)

Mar dambena isla ballanqaadkan buu Ilaahay ugu celiyey Isxaaq iyo Yacquub.[76]

Farcankii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub waxaa markii ugu horreysey loogu yeedhi jirey *Cibraaniyiin*, oo markii dambena noqday *Israa'iiliyiin*-ta, markii dambena *Yuhuud*-da.

Boqollaal sanno markaas kaddib, Ilaahay ayaa Muuse u sheegay waxa iyaga ku dhici doona haddii aanay Ilaahay aaminin oo adeecin.

> *"Oo waxaan idinku kala dhex firdhin doonaa quruumaha, oo seef gal la 'waan idinla daba geli doonaa, dalkiinnuna cidla buu noqon doonaa, oo magaalooyinkiinnuna baabba' bay noqon doonaan."* (Laawiyintii 26:33)

> *"Oo dadyowga RABBIGU idiin geeyn doono oo dhan dhexdooda waxaad ku ahaan doontaan yaab iyo maahmaah iyo halqabsi. ... Oo quruumahaas dhexdooda istareex kama heli doontaan, oo cagtiinnuna ma nasan*

> *doonto, laakiinse RABBIGU wuxuu halkaas idinku siin doonaa qalbigariir, iyo indhabbeel, iyo naf dulloobid.”*
> (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 28:37,65)

Axdigii Hore waxaa ku jira waxyiyo badan oo kuwan la mid ah.

Qiyaastii sannadkii 30 Ciise Kaddib, Ciise oo waxyiyadaa hore kaamilaya ayaa isaguna ka sii waxyoodey burburka Yeruusaalem: *“Oo markuu ku soo dhowaaday [Ciise], ayuu magaalada [Yeruusaalem] arkay oo u ooyay, isagoo leh, ‘... maalmuhu way kuu iman doonaan markii cadowyadaadu ay xaggaaga dhufays u soo qodan doonaan, oo ay kugu wareegi doonaan oo ay dhinac walba kaa celin doonaan. Way ku dumin doonaan, adiga iyo carruurtaada kugu jirta ... waayo, waad garan weyday wakhtigii booqashadaada.’”* (Luukos 19:41-44) Isaga oo macbudka laftiisa ka hadlaya ayuu Ciise sii sheegay: *“Waxaa imanaya maalmo goortii kuwaas aad arkaysaan aan dhagax dhagax kale dushiisa lagu dul dayn doonin oo aan la dumin doonin.”* (Luukos 21:6)

Afartan sanno markaas kaddib ayay tani ayay dhacdooyinkani dheceen.

Taariikhyahankii Flavius Josephus, oo dhashay 37 Ciise Kaddib, ayaa isaga oo joogey arrimahan wax ka qoray. Wuxuu qoray in 70 Ciise Kaddib ay ciiddamadii Boqortooyadii Roomaanku hareereeyeen Yeruusaalem, oo ay xerooyin magaalada hareereheeda ka samaysteen, saddex sanno markay sidaas ugu gadaamnaayeen, ayaa markii dambe ciidamadii Yeruusaalem dhulka la simeen. In kasta oo uu Kaysar laftiisu amray inaan macbudka weyn la dumin, ciidamadii Roomaanka ee cadhaysnaa ayaa kaas dab qabadsiiyey, oo laayey Yuhuuddii halkaa ku dhuumanaysey. Dahabkii iyo lacagtii macbudka taalley ee dhalaashay ayaa sidii biyo oo kale dhagxaanta dhexdooda u qulqushay. Macbudkii dhulka ayaa lala simay sidii uu Ciise ka waxyoodey. *“Dhagax dhagax kale dushiisa laguma dul dayn doono.”*[77] Iyo sidii ay Muuse iyo nebiyadu sii sheegeen, Yuhuuddii waxaa lagu kala *firdhiyey* quruumaha dhexdooda. Labadii kun markaa ka dambeeyey taariikhda ayaa ka markhaati ah sidii waxyiyadaasi u kaamilmeen oo waxay arkayeen Yuhuuddii hadba meel wareegeysey ee *“quruumaha dhexooda ku noqotay yaab iyo maahmaah iyo halqabsi”* aan *“meel ay cagtoodu ku nasato lahayn.”*

Si kastaba oo dareenkeena shakhsiyanka ahi noqdoba, waxyigan baybaliyanka ahi wuxuu leeyahay dhinac kale oo uusan qofna dafiri karin. Ilaahay wuxuu kale oo nebiyadaa u sheegay, in iyada oo ay dhibaatooyinkaas oo dhammi ku dhici doonaan, haddana Yuhuudda lagu xafidi doono quruumaha dhexdooda iyaga oo ah dad khaas ah oo ay dabadeed maalin uun dib ugu soo laaban doonaan dhulkii uu Ilaahay ugu ballanqaaday Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

Muuse ayaa carruurtii reer binu'Israa'iil waxyigan u sheegay: *"Rabbiga... mar kaluu idinka soo ururin doonaa quruumihii RABBIGA Ilaahiinna ahu uu dhexdooda idinku kala firdhiyey oo dhan."* (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 30:3) Nebi Caamoos ayaa intaas ku daray: *"Oo anigu waxaan soo celin doonaa maxaabiistii dadkayga Israa'iil, oo iyana way dhisi doonaan magaalooyinkii baabba'ay, wayna degi doonaan... Waxaan iyaga ku beeri doonaa dalkoodii, oo mar dambena lagama rujin doono dalkooda aan siiyey."* (Caamoos 9:14-15)

Shabakadaha wararka ee caalamiga ah ayaa weriya in dhacdooyinkani meel mareen oo dheceen.

Waxa ku dhacay quruunta Cibraaniyiintu waa mid khaas ku ah taariikhda adduunka. Waa mid e, waxay si toos ah uga hor imaanaysaa qaynuunka isku-dhex-milanka dadyowga. Tani waxay dhacdaa marka uu qaran qabsado qaran kale. Dhowr fac gudahood kuwii qaxay ayaa ku dhex milma waddamadii ay u haajireen. Way ka guursadaan, oo waxay qaataan luuqaddooda iyo dhaqankooda, oo lumiyaan jinsigooda iyo calaamahadaha ay qolo ahaan u leeyihiin. Tani Yuhuuddii kumay dhicin. In kasta oo ay dad malyuumaad ahi aad ah isugu dayeen inay ku milmaan oo is dhex gal ku sameeyaan haddana way awoodi waayeen.[78]

Waan fahmi karnaa inay dad badani ka xumaan karaan xaqiiqadan. Muddo dhoweyto, saaxiibkay oo reer Lubnaan ah ayaa ii soo qoray: "Marka aan eegno kaamilidda waxyiga [uu Ilaahay ugu ballanqaaday dadka Yuhuudda inuu dhulkaas dib ugu soo celin doono], waxaan fahmayaa saamaynta ay yeelan karto haddii aan aqbalo taas. Inaan arrintaas aqbalaa halgankayga ayay ka hor imaanaysaa."

Aynu tan isla fahanno. In la aqoonsado jiritaanka iyo dib u degitaanka Yuhuudda dad ahaan iyo qaran ahaan macnaheedu maaha inaynu raalli ka ahaano wax kasta oo ay dowladda Israa'iil samayso. Waan fahmayaa oo weliba la damqanayaa saaxiibkaygaa reer Lubnaan. 1948 ayaa reerkii hooyadiis iyo deriskeedii, iyo dad badan oo kale, laga saaray guryahoodii. Waddankiisu aad buu u silcay. Sidaas oo ay tahay, qodobka ay tahay inaynu si fiican u fahanno waa kan: dhacdooyinkii ay nebiyada Baybalka ku qorani ka sii waxyoodeen indhaheena hortooda ayay ku kaamilmayaan ama ku dhacayaan.

Xaqiiqada ah inay Yuhuudda maanta jirta badankoodu diidaan akhbaarka isla nebiyada ay ku andacoodaan inay maamuusaan ayaa sidoo kale ah Qorniinka oo la kaamilay. Quruun ahaan, ruuxiyan way indho la' yihiin. *"Laakiin tan iyo maalintaas mar alla markii Muuse* [Towreeddooda] *wax laga akhriyo dabool ayaa qalbigooda saaran."* (2 Korintos 3:15) Quruun ahaan, iyagu barakada Ilaahay ee buuxda ma geli doonaan ilaa iyo maalintaa imaan doonta markaas oo ay toobadkeenayaan (is beddel buuxa oo qalbiga iyo niyadda ah) oo ay rumayn doonaan akhbaarka Ilaahay ee qadiimka ah.[79]

Marka aynu ku dhownahay dhammaadka socdaalkan aynu ku wada jirno ee Qorniinka ku dhex marayno ayaynu arki doonaa sida ay dhacdooyinkani ugu habboon yihiin qorshaha Ilaahay ee yowmal-qiyaamaha. Waxaynu kaloo maqli doonaa waxyiyo ku saabsan barakooyinka uu Ilaahay u hayo Bariga Dhexe iyo adduunka oo dhan.

> *"Waayo,* Rabbigu *wuxuu leeyahay, Anigu waan garanayaa fikirrada aan idiinku fikiro, waana fikirro nabadeed, oo ma aha kuwa masiibeed, si aan ugudambaystiinna rajo idiin siiyo."* (Yeremyaah 29:11)

## WAXYIYO KU SAABSAN QOF

Waxaa Axdiga Cusub ku firidhsan boqolaal waxyi oo ku saabsan Masiixa-Bixiyaha uu Ilaahay ballanqaaday inuu adduunka u soo diri doono. Qoraalladii laga helay Badda Dhimatay (Dead Sea) ayaa caddaynaya in Qorniinnadaa la qoray boqollaal sanno

ka hor intaanu Masiixu dhalan. Waa kuwan qaar aynu ka soo qaadanay waxyiyadaas.

- *Nebi Ibraahim baa loogu waxyoodey, 1900 Ciise Kahor*: **Masiixu wuxuu ka dhalan doonaa farcanka Ibraahim iyo Isxaaq.** (Bilowgii 12:2-3; 22:1-18. Oo lagu kaamilay: Matayos 1)
- *Ishacyaah baa ku waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **Inuu Masiixu ka dhalan doono bikrad, isaga oo aan aabbe bini'aadan ah lahayn.** (Ishacyaah 7:14; 9:6. Oo lagu kaamilay: Luukos 1:26-35; Matayos 1:18-25)
- *Miikaah baa ku waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **Inuu ku dhalan doono Beytlaxam.** (Miikaah 5:2. Oo lagu kaamilay: Luukos 2:1-20; Matayos 2:1-12)
- *Hoosheeca ayaa ku waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **In Isaga looga yeedhi doono Masar.** (Hoosheeca 11:1. Oo lagu kaamilay: Matayos 2:13-15)
- *Malaakii ayaa ku sii waxyoodey, 400 Ciise Kahor*: **Masiixa waxaa ka soo horrayn doona mid imaanshihiisa sii sheega.** (Malaakii 3:1; Ishacyaah 40:3-11. Oo lagu kaamilay: Luukos 1:11-17; Matayos 3:1-12)
- *Ishacyaah ayaa ku sii waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **Isagu indhoolaha buu araggiisa u soo celin doonaa, dhegoolahana maqalkiisa, curyaankana socodkiisa, oo faqiirka ayuu warka wanaagsan ku wacdiyi doonaa.** (Ishacyaah 35:5-6; 61:1. Oo lagu kaamilay: Luukos 7:22; Matayos 9; iyo meelo kale)
- *Ishacyaah ayaa ku sii waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **Isaga dadkiisu way diidi doonaan.** (Ishacyaah 53:2-3; iyo Sabuurradii 118:21-22. Oo lagu kaamilay: Yooxanaa 1:11; Markos 6:3; Matayos 21:42-46; iyo meelo kale)
- *Sekaryaah ayaa ku sii waxyoodey, 500 Ciise Kahor*: **In Isaga lagu gacangelin doono 30 xabadood oo lacag ah, oo loo isticmaali doono in dhul lagu iibiyo.** (Sekaryaah 11:12-13. Oo lagu kaamilay: Matayos 26:14-16; 27:3-10)
- *Ishacyaah ayaa ku sii waxyoodey, 500 Ciise Kahor*: **Masiixa waa la diidi doonaa, oo been baa lagu eedayn doonaa, oo la maxkamadayn doonaa, oo waxaa dili doona Yuhuudda iyo kuwa aan ahayn.** (Ishacyaah 50:6; 53:1-12; iyo: Sabuurradii 2 & 22; Sekaryaah 12:10. Oo lagu kaamilay: Yooxanaa 1:11; 11:45-57; Markos 10:32-34; Matayos 26 & 27)

- *Daa'uud ayaa ku sii waxyoodey, 1000 Ciise Kahor*: **Gacmihiisa waa la daloolin doonaa, oo kuwa daawanaya ayaa ku kajami doona, oo dharkiisa waa loo saami ridan doonaa.** (Sabuurradii 22:16,8,18. Oo lagu kaamilay: Luukos 23:33-37; 24:39) (Niyadda ku hay in waxyigan la sheegay muddo badan ka hor intii aan xataa habka iskutallaabta ee dadka lagu ciqaabi jirey la bilaabin.)
- *Ishacyaah baa ku waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **In kasta oo Isaga loo dili doono sidii dembiilaha ugu xun, waxaa Isaga lagu aasi doonaa xabaal nin taajir ah.** (Ishacyaah 53:8-9. Oo lagu kaamilay: Matayos 27:57-60)
- *Daa'uud baa ku waxyoodey, 700 Ciise Kahor*: **Jidka Masiixu kuma qudhmi doono xabaasha, Isagu wuu ka guuleysan doonaa dhimashada.** (Sabuurradii 16:9-11[sidoo kale eeg: Matayos 16:21-23; 17:22-23; 20:17-19; iyo meelo kale]. Oo lagu kaamilay: Luukos 24; Falimaha Rasuullada 1 & 2)

Sharciyada ku saabsan fursadda ay wax ku dhici karaan iyo in kale, ayaa inoo sheegaya inaan qof keliyahi buuxin karin waxyiyadan khaaska ah ee kala duduwan.

Sidaas oo ay tahay way dheceen.

Mar dambe, waxaad dooni kartaa inaad liiskan dib u nakhtiinto, Baybalkaaga soo qaado, oo akhri waxyi kasta oo Axdigii Hore ku jira iyo kaamilaaddiisa lagu qoray Axdiga Cusub.

## CALAAMADAHA IYO TUSAALAYAASHA WAXYIGA AH

Boqolaalkaa waxyi ee Axdigii Hore ka buuxa waxaa soo raaca, boqolaal calaamadood iyo tusaalayaal (kuwan oo sidoo kale loogu yeedho *noocyo, hadhadh, muujino,* iyo *sawiro*). Ilaahay wuxuu waxyaalahan la arki karo u sameeyey si uu inoo baro waxa ku saabsan Isaga Laftiisa iyo qorshihiisa uu bini'aadanka u hayo.

Socdaalka aynu Erayga Ilaahay ku dhex marayno, waxaynu ku arki doonaa kuwo badan oo ah calaamadahaas iyo tusaalayaashaas. Tusaale ahaan, calaamad aad uga buuxdaa waa wan allabari ahaan loo qalayo, taas oo si faahfaahsan oo cad loogu qeexi doono cutubyada 19 iyo 26 ee buuggan.

Cutubka 21, waxaynu ku baran doonaa teendho khaas ah oo loogu yeedho *Taambuugga*, taas oo uu Ilaahay ku amray dadkiisa inay u dhisaan si habaysan oo uu Isagu diyaariyey. Taambuugga

iyo wax kasta oo la socdey waa tusaalayaal muuqda oo dadka ka caawinaya inay fahmaan Ka uu Ilaahay yahay iyo sida dembiileyaasha loo saamixi karo oo ay ugu qalmi karaan inay Isaga hortiisa joogaan weligoodba.

Waxbarasho is barbardhig ah oo ku saabsan noloshii Yuusuf ina Yacquub iyo Ciisihii reer Naasared ayaa ina siinaysa tusaale cad oo ku saabsan sida ay nolosha qof hore hordhac ahaan u sii tusi karto qof soo socda. Waxaa jira boqollaal isu ekaansho oo ka dhexeeya noloshii Yuusuf iyo noloshii Ciise. Ilaahay ayaa noloshii Yuusuf u isticmaalay inay sawir ka sii bixiso Ciise, oo adduunka imaan dooney 1700 oo sanno markaa kaddib.[80]

Is metelaadahan ama isu ekaanshan waxyiyadani hal meel oo keliya ayay ka imaan karaan:

Ilaahay.

## UJEEDDADA WAXYI

Intii uu adduunka joogey, Masiixu wuxuu yidhi,

> *"Hadda dabadeed waxaas ayaan idiin sheegayaa intaanay dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan inaan ahay Isagii."* (Yooxanaa 13:19)

Sii sheegida waxyaalaha mustaqbalka dhici doona, oo ay ku xigto dhacdooyinkaas oo taariikhda dhexdeeda ka dhacay, waa hal mid oo uu Ilaahay ku tuso inay nebigiisa iyo akhbaarka uu sheegayaaba run yihiin. Si uu u xoojiyo rumaysigeena Eragyiisa, ayuu Ilaaha runta ah ee nooli yidhi *"Bilowga waxaan sheegaa ugu dambaysta, oo wakhtiga hore waxaan sii sheegaa waxyaalo aan weli la samayn, anigoo leh, 'Taladaydu way sii socon doontaa ....'"* (Ishacyaah 46:10)

Socdaalkeena soo socda ee aynu Erayga Ilaahay ku dhex maraynaa wuxuu ka bilaabmi doonaa kitaabka Baybalka ugu horreeya, *Bilowgii*, kan sheegaya sidii uu adduunku ku bilowday. Socdaalkani wuxuu ku dhammaan doonaa kitaabka Baybalka ugu dambeeya, *Muujintii*, oo ka hadlaya dhacdooyinka dhici doona dhammaadka taariikhda adduunka.

Sidee ayay odhaaho khaas ah oo Baybalka ku qoran oo ku saabsan waxyaalo beri hore dhacay oo aan la caddayn karin iyo mustaqbal aan weli dhicin run u noqon karaan? Waxaynu ku hubin karnaa innaga oo ku dabaqayna sida aynu u hubno inay qoraxdu soo bixi doonto berito. Kumanyaal sanno ayay qorraxda, dayaxa, xiddigaha, iyo wixii la xidhiidhaa si fiican u shaqaynayeen. Dhulku marna ma joojin inuu wareego. Qoraxdu si joogto ah bay u soo baxdaa oo u dhacdaa. Waxyiga Baybalku sheegaana waa sidaas oo kale. Dhammaantood waa la baadhi karaa oo saxsanaantooda la caddayn karaa. Kitaabka Ilaahay waa sax.

## ILAAHAY BAA DADKA CARAYNAYA

Dad ehlu-diin ah qaarkood ayaa ku andacooda in iyagana kitaabkooda quduuska ah ku jiraan waxyiyo la kaamilay. Haddii aad maqashid dad sidan ku andacoonaya, adiga oo tixgelinaya weydii iyaga inay kitaabkooda quduuska ah ka soo saaraan saddex ama afar waxyiyadooda ugu muhiimsan ah. Waxay u badan tahay inay kaa diidaan, laakiinse haddiiba ay kaa yeelaan, marka hore hubi in waxyiyadaas la qoray *ka hor* inta aanay dhacdooyinka lagu sheegay dhicin, dabadeedna kuwaas barbardhig taariikhda caadiga ah ee aan diinta ku salaysnayn si aad u hubisid in kuwaas la kaamilay. Inta aan anigu khibrad u leeyahay, saadaallada noocan ahi hadday jiraanba waa kuwo aad u yar, oo madmadow ku jiro.

Sabab fiican ayuu Ilaaha runta ah ee nooli sidan soo socoto ugu diganayaa oo u caraysanayaa diimaha oo dhan iyo ilaahyada beenta ah:

> *"Rabbigu wuxuu leeyahay, 'Dacwadiinna keena ... Sanamyadiina soo saara oo iyagu ha noo sheegeen waxa dhici doona. Waxyaalihii jiri jiray iyo waxay yihiin noo sheega, si aannu uga fiirsanno, oo aannu u ogaanno waxay ugu dambaystoodu noqon doonto, amase waxyaalaha iman doona na tusa. Waxyaalaha hadda dabadeed iman doona noo sheega si aannu u ogaanno inaad idinku ilaahyo tihiin. Bal wanaag ama shar sameeya, si aannu u naxno, oo aannu dhammaantayo u wada fiirinno. Bal*

> *eega, idinku waxaad tihiin sida waxaan jirin oo kale, oo shuqulkiinnuna waa baabba', oo kii idin doortaana waa karaahiyo.'"* (Ishacyaah 41:21-24)

Baybalku keligiis buu ku yahay mid la mid ahina ma jiro, marka laga hadlayo waxyiyo faro badan oo faahfaahsan oo dhammaantood la kaamilay.

Ilaaha keliya ee nooli wuu shaambadeeyey akhbaarkiisa uu bini'aadanka u soo diray kaddib markii taariikhda qoray iyada oo aan weli dhicin.

Waxyiga la kaamilay ayaa ah *saxiixiisa*.



# 6

# Markhaatifur Aamin ah

*"Haddii aad dooneyso inaad ogaato sida ay biyuhu u eg yihiin, ha ka waraysan kalluunka."* — Maahmaah Shiinays ah

Bal ka feker tan.

Maalin aad u kulul adiga oo webiga qarkiisa maraya ayaad go'aansatay inaad dabaalato. Laakiinse, waxaad is weydiisey inaad biyaha jeclaysan doontin iyo in kale. Tolow mowjaddu ma xoog badan tahay? Miyay qabow yihiin? Ma yihiin kuwo guud ahaan lagu dabaalan karo?

Maahmaahdaa Shiinayska ahi waxay inagula talinaysaa inaynaan arimahaas, *"Ka waraysan kalluunka."*

Muxuu kalluunka oo biyaha dhexdooda ku nooli ugu qalmi waayey inuu kuu sheego *"xaaladda biyaha"* (marka laga soo tago inuusan luuqaddaada ku hadlin)? Kalluunku warkaas kuuma sheegi karo waayo ma garanayo meel ama wax kale oo uu biyaha barbardhigo, oo noloshiisa oo dhammi biyaha dhexdooda ayay ku eg tahay. Wuxuu yaqaanaa oo keliya meeshaas biyuhu ka buuxaan

Sidaas oo kale, haddii aynu dooneyno inaynu fahanno adduunka aynu ku noollahay iyo sababta aynu halkan u joogno, waa inuu warkaasi ka yimaaddaa meel ka baxsan fikirka iyo aqoonta xaddidan ee bini'aadanka. Warka wanaagsani waa inuu Ilaaha adduunka abuuray akhbaarkaas siiyey kuwa doonaya.

> *"Qorniin kastaa wuxuu **ku ahaaday Ruuxa Ilaah** oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta, iyo edbinta xagga xaqnimada…"*
> (2 Timoteyos 3:16)

Sidee ayaynu ku ogaan karnaa in Qorniinka uu *"ku ahaaday Ruuxa Ilaah,"* oo uu Ilaahay muujiyey? Cutubkeenii hore, waxaynu ku soo aragnay inuu Ilaahay shaanbaddiisa ku dhuftay runimada Baybalka kaddib markii uu boggagiisa ku sheegay boqolaal waxyi oo la kaamilay. Ilaahay oo keliya ayaa si ku celcelis ah uga waxyoon kara mustaqbal fog oo 100% ku saxsanaan kara.

Si kale oo uu Ilaahay dhidibada ugu taagey in muujintiisa lagu kalsoonaan karo waa markii uu taas nebiyo badan u sheegay qarniyo badan oo kala dambeeyey.

## MARAGFUR KELIGIIS AHI KUMA FILA

Ilaahay wuxuu Muuse u sheegay, *"**Qof keliyahu yuusan nin ugu marag furin** xumaan ama dembi uu dembaabay toona, **laakiinse wax kastaba ha lagu adkeeyo afka laba markhaati ama saddex markhaati**."* (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 19:15)

Qaynuunkan adduunka oo dhan waa laga aqbalay. Maxkamadda waxaa laga doonaa markhaatiyaal hal ka badan si runta loo ogaado. Ka hor inta aan odhaah loo aqbalin inay run tahay, waa inay taas caddeeyaan dhowr qof oo lagu kalsoon yahay.

Markii uu xaqiiqadan muujinayey, Ilaahay iskama indhotirin qaynuunkiisa oo odhanaya: *"Qof keliyahu yuusan nin ugu marag furin."* Qorniinku wuxuu inoo sheegayaa *"Ilaaha nool, kaasoo sameeyey samada iyo dhulka iyo badda iyo waxyaalaha ku jira oo dhan, kaasoo… quruumaha oo dhan u oggolaaday inay jidadkooda ku socdaan. Hase ahaatee isu maragfurla'aan iskama sii dayn…."* (Falimaha Rasuullada 14:15-17)

Xataa qabiillada ku nool meelaha adduunka ugu fogfog ee aan dadka kale weligood arkin waxay haystaan *markhaatifur la arki karo* (iyaga oo arka waxyaalaha uu Abuurahoodu abuuray) iyo *markhaatifurka gudaha ee qalbigooda ah* (kala garashada wanaagga, xumaanta iyo aakhirada ee qalbigooda ku jirta). Qof kasta oo adduunka jooga waxaa la siiyey iftiinka qaarkiis iyo

run qaarkeed. Markaa, Ilaahay wuxuu inoo sheegayaa inaanay bini'aadanku *"marmarsiinyo haysan."*[81] Sidaas oo ay tahay, Abuuraha adduunku wuxuu ballanqaadayaa inuu iftiin dheeraad ah siin doono dhammaan kuwa si dadaal leh u doona inay Isaga iyo runtiisa ogaadaan.

## MARAGFUR JOOGTO AH

Ilaahay weligiis isuma deyn inuu maragfur la'aan noqdo.

Kunkii sanno ee taariikhda bini'aadanka ugu horreeyey, Ilaahay, ama bini'aadanka si toos ah ayuu ula hadlay ama wuxuu runtiisa ku ogeysiiyey *makhatifuradii hadalka* ahaa ee dadkii ugu horreeyey.

Aadan, ninkii ugu horreeyey, wuxuu noolaa 930 sanno. Dadkii noolaa kunkii sanno ee taariikhda bini'aadanka ugu horreeyey may haysan marmarsiiyo aanay ku ogaan xaqiiqada ku saabsan Abuurahooda iyaga Leh, maadaama ay awoodeen inay waraystaan maraggii ugu horreeyey, waa Aadan iyo Xaawa e.[82] Da'dii dadkii berigaas jirey kow iyo toban jeer ayay ku soo labanlaabmeysey da'da dadka hadda jira, taas oo uu Abuurahu hadda ku soo gaabiyey inay noqoto *"toddobaatan sannadood — oo xataa hadduu xoog aawadiis ku sii dheeraado waa siddeetan sannadood."* (Sabuurradii 90:10)

Qiyaastii 1920 Ciise Kahor, Ilaahay wuxuu doortay nin duq ah, kaas oo uu markii dambe u bixiyey Ibraahim. Ilaahay wuxuu Ibraahim ugu ballanqaaday inuu *quruun* ka dhigi doono kaas oo uu u isticmaali doono inuu quruumaha kale ku baro casharro muhiim ah oo ku saabsan Isaga iyo qorshaha uu bini'aadanka u hayo. Sidoo kale, quruuntaa uu doortay ayuu Ilaahay ka dhex dooran dooney *nebiyada* iyo *Qorniinka*, oo uu *Masiixa* uga soo diri dooney adduunka. Qiyaastii 1490 Ciise Kahor, Ilaahay wuxuu quruuntaas uga dhex yeedhay nin noqda af-hayeenkiisa. Ninkaas magaciisu wuxuu ahaa *Muuse*.

## MARAGFUR QORAN.

Ilaahay ayaa Muuse u muujiyey inuu qoro qaybta ugu horraysa ee Kitaabkiisa, *Towreedda*. Abuuraha samada iyo dhulka ayaa

go'aansaday inuu runtiisa *u qoro* facyaasha soo socda—ilaa iyo dhammaadka adduunka. Ilaahay ayaa qalbiga Muuse geliyey erayadii uu qori lahaa. Ilaahay wuxuu erayadiisii uu quruumaha ugu talogalay ku xooggeeyey *mucjisooyin* waaweyn oo uu gacanta Muuse ku sameeyey. Ilaahay wuxuu kaloo muujiyey *dhacdooyin mustaqbalka dhici dooney* kuwaas oo uu Muuse u sheegay Masriyiintii iyo Israa'iiliyiintii. Wax kastaa waxay u dheceen sidii uu Muuse uga sii waxyoodey. Ilaahay meelna shakiga uma bannayn.

Xataa kuwa ugu shakiga badani waxay qirtaan inuu Ilaaha la hadlay Muuse yahay ka runta ah ee jira.[83]

Muuse wuxuu ugu horreeyey nebiyaal badan oo kala dambeeyey oo Erayga Ilaahay qoray muddo 1,500 oo sanno ah.[84] Nebiyadaasu siyaalo badan bay u kala duwanaayeen marka noloshooda la eego. Qaarkood weligood waxbarashada caadiga may gelin.

In kasta oo ay facyaal kala duwan noolaayeen, waxay sheegeen akhbaar midaysan, bilow ilaa dhammaad.

Ilaahay wuxuu doortay niman sida Muuse, Daa'uud, Suleymaan, iyo ilaa labaatan kale si ay u qoraan Qorniinka Axdigii Hore. Wuxuu Eraygiisa ku xooggeeyey ballamo iyo waxyiyo la kaamilay iyo calaamado iyo mucjisooyin waaweyn oo yaab leh.

Axdiga Cusub, asalkii, noloshii, adeegyadii, dhimashadii iyo sarakiciddii Masiixa ayaa waxaa kala qoray afar nin: Matayos, Markos, Luukos, iyo Yooxanaa. Afar-tan nin waxay qoreen Injiilka, oo waxay adduunka siiyeen afar maragfur. Ilaahay wuxuu kaloo u waxyoodey Butros (kalluumayste), Yacquub iyo Yuudas (oo ay Ciise dhinac ka walaalo ahaayeen), Bawlos (aqoonyahan markii hore argaggixiso ahaa), si ay u sharaxaad fiican uga bixiyaan qorshaha uu Ilaahay hadda iyo mustaqbalkaba u hayo dadkiisa. Rasuul Yooxanaa ayaa qoray kitaabka ugu dambeeya Baybalka, kaas oo si faahfaahsan u sii sheegaya sida ay taariikhda adduunka ee aynu naqaanaa ku dhammaan doonto.

## MARAGFUR ISKU MID AH

Isku dar oo, Ilaahay wuxuu isticmaalay in ka badan afartan qore muddo ka badan shan iyo toban qarni ah, inay kuwaasi muujintiisa bini'aadanka u qoraan. In kasta oo aanay qorayaashan

badankoodu is aqoon, wax kasta oo ay qoreen way is qaabilsan yihiin oo waxay isugu imaanayaan hal akhbaar.

Kee, oo aan ka ahayn Mid, kaas oo aan wakhtigu xaddidi karin, ayaa awooda inuu akhbaar sidaas oo kale ah sheego?

> *"Waayo, wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay iman dadka doonistiisa, laakiinse dad Ruuxa Quduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay."* (2 Butros 1:21)

Qarniyaal badan, ayay dad badani isku dayeen inay sharafta ka qaadaan qorayaasha Axdiga Cusub iyo akhbaarkii ay qoreen. Gaar ahaan waxaa si khaas ah loo weeraray qoraallada rasuul Bawlos.

Rasuul Butros ayaa aad inoogu adkaynaya inaynu qoraallada Bawlos qiimeyno: *"Sidii walaalkeen gacaliye Bawlos idiinku soo qoray xigmaddii la siiyey.... Waraaqihiisa waxaa ku jira wax in la gartaa ay dhib tahay, oo jaahiliinta iyo kuwaan adkayn ayaa qalloociya, siday Qorniinka kaleba u qalloociyaan oo ay u halligmaan."* (2 Butros 3:15-16)

Wax kasta oo uu Bawlos qoray waxay qaabilayaan wixii nebiyadu qoreen. Isla sidii uu Bawlos laftiisu ka markhaati kacay, "*Haddaba anigoo caawimaad ka helay xag Ilaah ayaan waxaan ilaa maanta u taaganahay inaan marag furo oo aan u sheego yar iyo weynba,* ***anigoo aan innaba wax kale sheegayn wixii nebiyadii iyo Muuse ay sii sheegeen inay ahaan doonaan mooyaane.... Nebiyadii ma rumaysan tahay?"*** (Falimaha Rasuullada 26:22,27)

## MA IS QAABILAYAAN MISE ISMA QAABILAYAAN?

Aaminimada maragfuraha waa la imtixaamaa, oo laguma imtixaamo inta ay tahay runta ku jirta markhaatifurka qofkaas, laakiinse inuusan qofkaasi kala hadlayn. Sheekadan soo socota ayaa tan tusaale u ah:

> Maalin ay hawadu fiican tahay, ayaa wiilal ciyaala-iskuul ahi go'aansadeen inay iskuulka u jaraan. Subaxdii ku xigtey ayay macallimadoodii u sharaxeen inay iskuulka imaan kari waayeen maadaama uu baabuurkoodii ka banjaray. Nasiib wanaaggooda, intay

dhoola-caddaysay ayay ku tidhi, "Imtixaan yar baan shalay qaaday." Oo ay intaas ku dartay, "Dhib ma leh, fadhiista hadda oo qalin iyo xaashi la soo baxa. Su'aasha koowaad waa: taayirkee baa idinka banjaray?"[85]

Jawaabihii iska hor imaanayey ee ay wiilashaasi su'aashaas ka bixiyeen ayaa sheekadoodii beenta ahayd khashiftay.

Maragfurka Ilaahay maaha sida sheekadaa afarta wiil ee iska hor timid, laakiinse maragfurka Ilaahay wuu is qaabilsan yahay. Isaga oo isticmaalaya maragfurayaal iyo qorayaal badan facyaal badan oo kala danbeeyey, ayuu Abuuraheenu si aan iin lahayn oo sax ah u muujiyey Ka uu Isagu yahay iyo qorshihiisa.

Diimaha iyo filasoofiyada badan ee ay dadku sameeyeen ee iska hor imaanaya dhexdooda, Ilaahay wuxuu ina siiyey oo inoo xafiday markhaatifur adag oo aan la dhaqaajin karin, kaas oo ah *Eraygiisa*.

> *"Oo waxaynu haysannaa* ***hadalka nebiyadii sii sheegeen, oo aad loo sii xaqiijiyey****, oo waad ku wanaagsan tihiin inaad u fiirsataan hadalkaas sida laambad meel gudcur ah ka ifaysa ... Laakiinse waxaa kaloo* ***dadkii ka dhex kacay nebiyo been ah****, oo idinkana sidaas oo kale waxaa* ***idinku dhex jiri doona macallimiin been ah*** *... Kuwa badan baa raaci doona ficiladooda nijaasta ah, oo sababtooda ayaa loo caayi doonaa jidka runta ah. Damac xumaan bay hadallo iskayeelyeel ah idinkaga baayacmushtari doonaan."*
>
> (2 Butros 1:19-2:3)

## NEBIYO BEEN AH

Markaa, Erayga Ilaahay wuxuu inooga digayaa macallimiin cir weyn oo naftooda uun jecel kuwaas oo *"hadallo iska yeelyeel ah idinkaga baayacmushtari doona."*[86] Waxaa Baybalka ku qoran qisooyin badan oo ku saabsan niman ku andacoodey inay Ilaahay magaciisa ku hadlayaan, laakiinse, uu dhab ahaantii akhbaarkooda u weriyey *"ruux beenlow ah."* (1Boqorradii 22:22)

Qorniinku wuxuu sheegayaa wakhti taariikhda Israa'iil ah markaas oo ay joogeen 850 nebi oo been ah iyo hal nebi oo run ah oo keligiis ah, waa Eliiyaah. Iyada oo ay 7,000 oo Israa'iiliyiin

ahi Ilaahay daacad u ahaayeen, malyuumaad kale waxay doorteen inay rumeeyaan nebiyadaa beenta ah ee naftooda uun u shaqaysanayey.[87]

Miikaah, mid ka mid ah nebiyadii Ilaahay doortay ayaa qoray:

> *"Rabbigu sidaasuu kaga leeyahay nebiyada dadkayga qalda ... oo haddana ku qayliya, Nabad, oo ku dhawaaqa in lala diriro ku alla kii aan afkooda wax ku ridin."*
> (Miikaah 3:5)

Waa wax taariikhda oo dhan ka soo dhex dhacayey, oo ah sababta uu Ciise uga digey:

> *"Iridda cidhiidhsan ka gala, waayo, iriddu waa weyn tahay, jidkuna waa ballaadhan yahay kan xagga baabbi'idda u kaca, oo kuwa ka galaa waa badan yihiin. Waayo, iriddu waa cidhiidhsan tahay, jidkuna waa yar yahay kan xagga nolosha u kaca, kuwa helaana waa yar yihiin**. Iska jira nebiyada beenta ah**, kuwa idiinku imanaya iyagoo qaba **dharka idaad**, laakiin hoosta ka ah **yeey wax boobaysa**. Midhahooda ayaad ku garan doontaan. Canab ma laga guraa geed qodxan leh? Berdena ma laga guraa yamaarugga? Sidaasaa geed kasta oo wanaagsanu midho wanaagsan u dhalaa, geedkii xumina **midho xun** u dhalaa."*
> (Matayos 7:13-17)

Qarniyaal badan dhexdooda, nebiyo iyo macallimiin been ah oo aan tiradooda la soo koobi karin ayaa yimid oo tegey. Qaarkood waxay saamayn ku yeesheen boqollaal kun oo qof, halka ay kuwo kalena malyuumaad iyo xataa bilyamaad qof u hoggaamiyeen *"jidka xagga baabbi'idda u kaca."*

Haddii aad dooneysid inaadan noqon mid ka mid ah *"kuwaa badan"* ee sida indho la'aanta ah nebiga beenta ah ugu raaca *"baabbi'idda,"* inta goori goor tahay waxbaridda qofkaa ku imtixaan xaqiiqadan muhiimka ah:

> *Akhbaarka nebiga runta ahi wuxuu mar kasta aqbalaa ama oggolaadaa Qorniinadii ay nebiyadii ka horreeyey ku waxyoodeen.*

Ka feker **saddexdan tusaale** ee ku saabsan niman ku andacoodey inay nebiyo Ilaahay ka yimid ahaayeen. Ma nebiyo run ah bay ahaayeen mise kuwo been ah?

## TUSAALAHA #1: "MASIIX" LA XABAALAY

Taariikhdu waxay qoreysaa dhowr iyo toban nebi iyo masiix oo iyagu is magacaabay oo noolaa waktigii Ciise Masiix kaddib.[88] Midkood wuxuu ahaa Abuu Ciise.

*Abuu Ciisihii reer Beershiya* wuxuu noolaa qarnigii 7-aad qaybtiisii dambe. Kuwii isaga rumaysnaa waxay aaminsanaayeen inuu Masiixa ahaa waayo wuxuu iyaga ugu ballanqaaday inuu guul u hoggaamin doono, oo in kasta oo uusan waxna qori jirin waxna akhrin jirin, haddana waxaa la sheegay inuu buuggaag qoray. Laakiinse akhbaarkiisu wuxuu lidi ku ahaa Erayga Ilaahay.

Abuu Ciise wuxuu xertiisii baray inay maalintiiba toddaba jeer tukadaan oo ay isaga dagaalka u raacaan, isaga oo u ballanqaadaya ilaalin rabbaani ah. Laakiinse, Abuu Ciise wuxuu ku dhintay dagaal, oo waa la xabaalay, oo dhimashadii kamuu sarakicin, xertiisiina waxay markii dambe qirteen inuusan isagu ahayn Masiixa.

Muddo dheer intaanu Abuu Ciise imaan, Ciise ayaa xertiisii iyo kuwii dhegeysaneyey uga digey:

> *"Waayo, waxaa kici doona Masiixyo been ah iyo nebiyo been ah, oo waxay samayn doonaan calaamooyin waaweyn iyo yaabab, si ay xataa kuwa la doortay u khiyaaneeyaan hadday u suurtowdo.* ***Bal eega, horaan idiinku sheegaye****."* (Matayos 24:24-25)

## TUSAALAHA #2: "NEBIGII" IS DILKA

*Jim Jones* wuxuu aasaasay firqo bidci ah oo lagu magacaabi jirey *Macbudkii Dadka* (*People's Temple*). Horraantii 1970-nadii, Jones wuxuu ahaa macallin caan ah oo ku nool San Francisco, Kalifoorniya. Waxaa lagu yaqaaney inuu dad badan isu keeno oo u abaabulo inay ka qayb qaataan siyaasadda iyo qorshayaal dadka faqiirka lagu caawinayo. Jones wuxuu isugu yeedhi jirey "Nebiga'

oo wuxuu ku andacoodey inuu lahaa awood uu ku bogsiiyo dadka cudurka kansarka qaba oo uu kuwo dhintayna ku soo sarakiciyo.

Ugu dambayntii, Jim Jones wuxuu dad kun ka badan oo xertiisii ah ka dhaadhiciyey inay isaga u raacaan "Jonestown" oo ku taalla waddanka Guyana, ee Koonfurta Ameerika. Bulshada cusub ee uu halkaa ka dhisi dooney, "nebi Jim" wuxuu xertiisii ugu ballanqaaday nolol nabad iyo farxad leh. Laakiinse taasi been weyn bay ahayd.

Jones wuxuu keliyoo ahaa sidii yey wax boobeysa oo dhar idaad soo xidhatay. Sida uu weriyey wargeyska *San Francisco Chronicle*, "Nofeember 18 [1978]: Jones wuxuu xertiisii ku amray inay is dilaan iyaga oo cabaya sunta *cynide*-ka la yidhaahdo. Kuwa diida waa lagu khasbayey inay suntaa cabaan. Carruurta waxaa lagu dilay iyada oo lagu duray. Ugu dambaystiina, 914 meyd ayaa loogu tegey Jonestown, oo uu Jones laftiisiina ku jiro."[89]

## TUSAALAHA #3: "KITAAB QUDUUS AH" OO AAN CADDAYN HAYSAN

*Joseph Smith* wuxuu ku dhashay Waqooyiga Ameerika 1805. Isaga oo lagu soo koriyey faqiirnimo iyo rumaysi khuraafaad ah ayuu markii uu dhalinyarada ahaa bilaabay inuu dadka u sheego inuu yahay nebi Ilaahay. Wuxuu ku andacoodey inuu Ilaahay isaga kula hadlay waxyiyo isku xigxiga oo uu ugu soo dhiibey malag iftiima oo magaciisa la yidhaahdo Moroni.

Smith ayaa sidan qoray: "Waxaa igu habsadey awood dhammaantay iga adkaatay, oo xooggeeda aawadeed xataa carrabkaygii dabartay si aanan u hadli karin. Mugdi weyn ayaa i hareereeyey, oo waxaan intii wakhti ah u maleeyey inuu halaag degdeg ahi igu dhacay." Markii ku xigteyna wuxuu Smith ka sheekeeyey sidii uu "tiir dab ahi" madaxiisa korkiisa uga muuqday "korkana shucaacii qorraxda ayaa si tartiib ah u soo degey ilaa ay isaga ku dul habsadey."[90] Smith wuxuu sheegtay inuu Ilaahay isaga siiyey kitaab cusub oo quduus ah, *Kitaabka Mormon*-ka (*Book of Mormon*). Xertiisii wuxuu u sheegay inuu Baybalku ka yimid Ilaahay, laakiinse uu kitaabkiisa cusubi ahaa muujintii ugu dambeysey ee Ilaahay ka timid. Smith wuxuu dadka baray

inay tukadaan, oo soomaan, oo sadaqo bixiyaan, oo camallo wanwanaagsan sameeyaan, oo ay isaga u aaminaan inuu nebi yahay. Sidaas oo ay tahay, isaga laftiisu wuxuu ku dhaqmi jirey hab nololeed uu isagu isu qoray oo uu damacyadiisa jidhka ku raacayo.


In kasta oo aanay jirin markhaatiyaal kale oo "waxyiyada" Joseph Smith caddeeyey (in kasta oo uu sheegay inay saddex jiraan), iyo in kasta oo uu kitaabkiisu ka hor imaanayo Baybalka, taariikhda, iyo cilmiga baadhitaanka waxyaalihii hore ee qadiimka ahaa (archaeology)[91] haddana maantadan malyuumaad qof ayaa rumaysan diinta *Moormon*-ka. Kaniisadda Moormon-ka ee taajirka ah ayaa adduunka oo dhan u dirta dad faafiya mad-habtooda, oo maalin kasta boqolaal qof ayaa *Moorman*-ka (oo sidoo kale loogu yeedho *latter-day Saints*) ku soo biira. Dadka Moormon-ka ah intooda badani waa dad wanaagsan oo daacad ah, laakiinse haddii aad akhbaarka "nebi Joseph" barbardhigtid wixii ay nebiyadii Baybalku sheegeen ee qoreen, waxaad ogaan doontaa inay labadaas akhbaar aad u kala duwan yihiin.

Inaynu aamino oo aakhiradeena ku xidhno war iska hor imaanaya oo aan la caddayn oo nebi-ku-sheeg yidhi—si kasta oo uu kaasi af tahan u yahay ama u caqli badan yahay—waa mid caqlidarro ah. *"Waayo, Shayddaanka qudhiisu wuxuu isu ekaysiiyaa malaa'igta iftiinka."* (2 Korintos 11:14)

## AKHBAAR LA HUBIYEY

Adduun wareersan oo ay dad aad u badani *"runtii Ilaah been ku beddeleen"* (Rooma 1:25), Ilaaha keliya ee runta ahi si cad ayuu runtiisa uga duwey codadka badan ee ka soo horjeeda.

Hal si oo uu Ilaahay ku caddeeyey oo ku hubiyey akhbaarkiisa waa Isaga oo kaas si is dabajoog ah oo is leh ama is qaabilaysa ugu muujiyey nebiyo facyaal kala dambeeyey noolaa. Muujinta noocan ah waxaa qori kara oo keliya Mid jira wakhtiga dibeddiisa ama aanu wakhtigu xadidi karin.



*Afartankan nin* waxay metelayaan rasuullo, kuwaas oo muddo shan iyo toban qarni ka badan qoray Qorniinka akhbaarka Ilaahay ee la caddeeyey ee aan is bedbeddelin.

*Nin keligiis* ahi wuxuu metelayaa rasuul isku sheeg mar dambe la yimid akhbaar aan la caddayn oo lidi ku ah wixii Ilaahay hore u sheegay.

Dhowrkii cutub ee aynu soo dhaafnay waxaynu ku soo aragnay caddaymo badan oo tusaya inuu Baybalku yahay Erayga Ilaahay. Laakiinse, in kasta oo aan caddaymahaas la dafiri karin, haddana caddaynta ugu fiican ee runimada akhbaarka Ilaahay tusaysa waxaa la helaa marka akhbaarkaa la dhegeysto, la fahmo, oo la rumeeyo.

Qisadan cajiibka ah ee Kitaabka Ilaahay waxay muujinaysaa Mid si buuxda oo abadiyan ah uga sarreeya ugana shisheeya awoodda maskaxdeena. Waxay tusaysaa wanaagga iyo isu dheeli-tirnaanta abuuritaanka Abuuraheenna. Waxay dadka ka xoraynaysaa baqdinta dhimashada oo siinaysaa rajo la hubo oo ah nolol weligeed ah. Waxay beddelaysaa dabeecadda iyo hab dhaqanka. Waxay iyaga u geyneysaa Ilaaha keliya ee runta ah.

Shaydaan iyo nin midkoodna akhbaarkan oo kale ma keeni karo.

Laakiinse aniga uun tan ha ii rumaysan, laakiinse:

*"**Wax walba tijaabiya**, waxa fiicanna xajiya."*

(1 Tesaloniika 5:21)



# 7

# Aasaaska

*"Nin caqli leh ...*
*oo gurigiisa ka dul dhisay dhagaxa.*"
(Matayos 7:24)

Wacdiskiisii Buurta Dusheeda, Ciisihii reer Naasared wuxuu ku soo xidhay erayadan:

> *"Haddaba qof kasta oo Ereyadaydan maqla oo yeela, waxaa loo ekaysiinayaa nin caqli leh oo gurigiisa ka dul dhisay dhagaxa. Roobkii ayaa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen gurigaas, ma uuna dumin, waayo, waxaa laga dul dhisay dhagaxa. Qof kasta oo ereyadaydan maqla oo aan yeelin, waxaa loo ekaysiinayaa nin doqon ah oo gurigiisa carrada ka dul dhisay. Roobkii waa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen gurigaas, wuuna dumay, dumiddiisuna waa weynayd."*
> (Matayos 7:24-27)

Maxay ku kala duwan yihiin guriga uu duufaanku dumin kari waayey iyo guriga uu dumiyey?

Aasaaska.

Ninkii xigmadda lahaa wuxuu gurigiisii ka dhisay dhagax adag korkiisa; halka uu kii nacaska ahaa kiisii ka dul dhisay ciid korkeed.

Qorniinka nebiyada dhexdiisa, Ilaahay wuxuu akhbaarkiisa

uu doonayo inuu qof kastaa fahmo oo rumeeyo u dhigay aasaas sida dhagaxa u adag. Aasaasku waa Towreedda (oo sidoo kale loogu yeedho *Sharcigii* ama *Qaynuunkii nebi Muuse.*)

## KITAABKA BILOW-YADII

Towreedda nebi Muuse waxay ka kooban tahay shanta kitaab ee Qorniinka ugu horreeya. Kitaabka ugu horreeya waxaa la yidhaahdaa ***Bilowgii*,** oo uu micnihiisu yahay *unkankii* (meeshii ay wax walba ka soo unkanmeen). Bilowgii waa *Kitaabka Bilow-yada*, oo uu Ilaahay inagu barayo sidii ay adduunka, nolosha, bini'aadanka, guurka, qoysaska, bulshooyinka, quruumaha, iyo luuqaduhu ku soo unkanmeen ama ku soo bilowdeen. Bilowgii wuxuu jawaabo inaga siinayaa waxyaalaha qarsoodiga ah ee nolosha ugu muhiimsan ama ugu waaweyn. Waa kuma Ilaahay? Xaggee ayuu bini'aadanku ka yimid? Maxaynu adduunka u joognaa? Xaggee ayuu sharku ka yimid? Maxay dadku u silcaan? Sidee ayuu Ilaah quduus ahi u aqbali karaa bini'aadan dembi miidhan ah?

Iyada oo ay jawaabaha su'aalahan iyo kuwo kale oo muhiim ahba mar dambe lagu bixinayo Qorniinka dhexdiisa, kitaabkan Bilowgii ayuu Ilaahay aasaaska jawaabahiisa u dhigayaa. Kitaabka ugu horreeya Baybalku waa aasaaska wax kasta oo isaga ka dambeeya.

## QISADA ILAAHAY

Waxaa Baybalka ku qoran boqollaal qiso oo dhacay kumanyaal sanno gudahood. Qisooyinkan oo dhammina hal *qiso* ayay isugu soo uruurayaan, oo ah qisada ugu fiican ee abid la sheego. Waa qiso uu Ilaahay ku sheegay *hal akhbaar oo muhiim* ah, akhbaarka ugu fiican ee abid la weriyo.

Qisada cajiibka ah ee Ilaahay way dhinacyo badan tahay. Inta aynu Qorniinka dhex qaadayno, meel ka mid ah meelaha ugu sarreeya ee ay gaadheyso Injiilka dhexdiisa ayaynu ku arki doonaa. Meel kalena waa kitaabka uu Baybalku ku dhammaado la yidhaahdo *Muujintii*, oo macnihiisu yahay *Daah-rogga*.

In kasta oo ay jirto xaqiiqada ah inuu Ilaahay qorshihiisa uu bini'aadanka u hayo daaha ka rogey, haddana qorshahaasi weli bini'aadanka intiisa badan qarsoodi buu ku yahay.

## SIDA AY ARRIMUHU U KALA HORREEYAAN

Kitaabka Bilowgii waxaa ka tirsan 50 ka mid ah 1,189-ka cutub ee uu Baybalku ka kooban yahay.[92] Haddii aad isku daydid inaad hal fadhi Baybalka oo dhan u akhrido waxay kugu qaadanaysaa saddex maalmood iyo saddex habeen.

Socdaalkeena soo socda ee aynu Baybalka ku dhex marayno, in kasta oo aynu qisooyin badan oo Qorniinka ku qoran ka gudbeyno, qorsheheenu waa inaynu booqano qisooyinka furaha ah ee "sawirka weyn" inaga siinaya qorshaha uu Ilaahay bini'aadanka u hayo. Qayb muhiim ah oo socdaalkeena ah waxaynu ku qaadan doonaa afarta cutub ee Baybalka ugu horreeya, maadaama ay boggagan bilowga ahi inoo furayaan xaqiiqooyin waaweyn oo laga helayo meelo kale oo Erayga Ilaahay ah.

Lama dhayalsan karo muhiimadda ay dhowrkan cutub ee Baybalka ugu horreeyaa leeyihiin.

Marka aynu sheeko u sheegeyno ama u akhriyayno cunug yar, xaggee ayaynu ka bilownaa? Ma qisada dhexdeeda ayaynu ka bilownaa, oo dabadeed u boodnaa dhammaadka, innaga oo boggiiba dhowr sadar uun ka akhrinayna? Maya, waxaynu ka bilownaa bogga ugu horreeya ee qisadu ka bilaabato. Sidaas oo ay tahay, kuwa Qorniinka akhrista badankoodu way ka boodboodaan. Ma laga yaabaa inay qisada Ilaahay iyaga ku adag tahay maadaama ay baylahiyeen inay akhriyaan boggaga ugu horreeya ee Kitaabka Ilaahay? Ma wax lala yaabaa markaa inay dadka badankiisu ku raacsan yihiin fikraddii uu Axmed email-ka inoogu soo qoray ee ahayd, *"Arrinta dembiileeyaasha ku saabsan oo dhammi aniga caqli-gal ilama aha"* (Cutubka 1)?

Haddii aynaan garanayn bilowga qisada Ilaahay way inagu adkaanaysaa inaynu inteeda kale oggolaano. Laakiinse, marka aynu dhowrka cutub ee ugu horreeya fahanno, inta kalena si fiican bay micne weyn inoogu samaynaysaa.[93]

## INIIN BIQLAYSA

Maskaxdaada ka sawiro hal iniin oo qamadi ah. Laga yaabee inaanay wax badan kuula muuqan, laakiinse iniintaa adiga bilaa-micnaha kuula muuqata waxaa ku duugan cilmi qoto dheer iyo

awood looga baahan yahay inuu iyada ka dhasho geed kora oo ay midho badan dhala. Qorniinka ayaa habka inoo sharaxaya:

> *"Dhulka keligiis ayaa midhaha bixiya, **horta** jirridda, **dabadeed** sabuulka, **dabadeedna** sabuulka midho ka buuxsama."* (Markos 4:28)

Ilaahay iniinyaha, khudaarta, iyo midhaha umuu habayn inay isla markiiba bislaadaan, sidaas oo kalena qisadiisa iyo akhbaarkiisa umuu habayn in hal mar dhammaantiis la wada muujiyo. Isla sida uu Ilaahay dadka ugu diyaariyey cunto dhirta uga baxda si qorshaysan oo qaab leh, ayuu cuntadiisa ruuxiyanka ah ee uu qalbiga dadka ugu talogalay, ee runtiisa ku saabsan ugu diyaariyey si qorshaysan oo is dabajoog ah.

> *"**Amarba amar**, amarba amar baa lagu daraa, oo **qaynuunba qaynuun**, qaynuunba qaynuun baa lagu daraa, halkan in yar, halkaasna in yar."* (Ishacyaah 28:10)

Kitaabka Bilowgii waa sida dhul beerashada ku fiican oo uu Ilaahay si fiican ugu beeray midhaha runta. Runtaas dhexdeeda ayuu akhbaarkiisu ku bacrimayaa oo ugu korayaa buuggaagta kale ee Qorniinka ka tirsan dhexdooda, oo adduunka siinayaa nolol iyo nafaqo.

## UUR-JIIF (ILMO)

Tiknoologiyada casriga ah daraddeed, waxyaalihii berigii qarsoodiga inagu ahaa hadda waa la arki karaa. Tusaale ahaan, waxaynu maanta arki karnaa sawiro fasiix ah oo laga qaaday ilmo uur-jiif ah oo aan weli jidh iyo lafo lahayn oo caloosha hooyadii ku koraya. Waa mid cajiib ah! Siddeed usbuuc gudahood, ukuntii la bacrimiyey ee caloosha hooyada ku jirtey ayaa isku beddesha oo noqota cunug sida iniinta u yar oo haddana leh indho, dhego, san, af, gacmo, iyo lugo. Xataa faraqaadid (fingerprints) u gaar ah buu leeyahay. Qaybihii jidhka oo dhan ayaa u samaysma.

Sidaas oo kale, maanta waxaynu ognahay in run kasta oo muhiim ah oo uu Ilaahay muujiyey oo ku saabsan Isaga Laftiisa iyo qorshihiisa uu bini'aadanka u hayo, iyada oo sida ilmahaa uur-

jiifka ah oo kale ah laga helayo Kitaabka Bilowgii. Laakiinse, waa Qorniinka dhammaystiran intiisa kale meesha uu *"qarsoodiga Ilaah"* (Muujintii 10:7) ku barbaarayo.

Ilaa iyo maantadan, shakhsiyada Ilaahay iyo ujeeddadiisu dadka badankiisa qarsoodi bay ku yihiin, laakiinse, maaha inay sidaas noqoto, maadaama *"**wixii aan la garanayn** oo qarsoonaa tan iyo weligiis iyo qarni kasta… **haatan waa la muujiyey**."* (Kolosay 1:26)

Ilaahay wuxuu inagu martiqaadayaa qarsoodigiisa, laakiinse waa inaynu *doonis* u haynaa inaynu fahanno.

## QAYBO YAR YAR

Baybalka wuxuu u ekaan karaa shaxda (jigsaw) oo kale.

Sida ay qaybaha qaarkood isugu aadayaan ama isu leeyihiin way caddahay, halka qaybo kale aanad hore u garanayn. Waxaa loo baahan yahay dulqaad iyo adkaysi. Sidaas oo kale, wareerku wuxuu inaga baxayaa oo keliya marka aynu Erayga Ilaahay wakhti aynu kaga fekerno siino, oo waxaa inoo muuqanaya qorshaha Ilaahay ee is oggolaanaya ama is leh.

Beri dhoweyto, waxaan nasiib u yeeshay inaanu xidhiidh is weydaarsano weriye soo caan-baxaya oo reer Lubnaan ah. In kasta oo aanan weli kulmin, saaxiibbo ayaanu noqonay. Email-kii ugu horreeyey ee uu ii soo diro wuxuu ku yidhi:

> Dir Mowduuca: Email la soo diray
>
> Anigu ma rumaysni inay suurtogal tahay in si kama dambays ah oo la hubo loo garto runta oo buuxda.

Waxaan isaga ku dhiirrigeliyey inuu fikradihii hore looga dhaadhiciyey dhinac iska dhigo oo uu isagu qof ahaan Baybalka u akhristo, oo uu Kitaabkaas u oggolaado inuu isagu isu hadlo. Tan ayuu samaynayey, sida ay tusayso email-kan uu mar dambe ii soo diray:

> Dir Mowduuca: Email la soo diray
>
> Waxaan Axdiga Cusub ku akhriyey af Carabi oo qorshahaygu waa inaan Axdigii Hore ku xigsiiyo. Berigii hore, qaybo yar yar baan marba meel ka akhrin jirey. Hadda, su'aalo badan

> oo aan is weydiin jirey ayaan jawaab u helay…. Maxaan akhriskan ka korodhsaday? Tixgelin qoto dheer oo aan u hayo [akhbaarka Baybalka], aniga oo u arka awood beddeleysa nolosha shakhsiga, oo is beddel dhab ah u keeneysa, oo ka sii qoto dheer ficillada la arki karo ee jidhka ama korka ee aynu ku tusno inaynu ehlu-diin nahay, kuwaas oo aan runtii is beddel hoose oo qalbiga ah sababin…. Waxaan ogaadey inay suurtogal tahay inaynu gacmaheena ku haysano hab aynu runta oo buuxda ku ogaan karno.

Muddo dhoweydna sidan buu ii sheegay:

> Mowduuca: Email la soo diray
>
> Waxaan qaaday tallaabo ay ahayd inaan mar hore qaado. Waxaan garowsaday inaanay ku filayn in la yidhaahdo, "Baybalka ayaan akhriyey." Waa kitaab u baahan in si joogto ah loo akhriyo. Waa yaab sida uu kitaabkani su'aalo badan oo aan qabey hawada uga saaray.

Ninkan, waxaa u bilowday inuu akhbaarka Ilaahay u muuqdo.

Socdaalkeena soo socda ee aynu Erayga Ilaahay ku dhex marayno, qisada macaan iyo akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ah ayaa inoo caddaan doona inta aynu isu soo uruurinayno oo is qaabilsiinayno qaybo muhiim ah oo qarsoodiga weyn ee taariikhda ah.

## WARAAQO JACAYL AH

Waxaa la sheegay sheeko ku saabsan askari jeclaa haweeney dhallinyaro ah. In kasta oo jacaylka uu iyada u qabey qoto dheeraa, dareenkeeda isaga ku aaddan muu caddayn. Wakhtigii ku haboonaa, ayaa askarigii loo diray waddan fog. Si joogto ah ayuu haweeneydii waraaqo ugu soo diri jirey, in kasta oo aanay iyadu marna ka jawaabin.

Ugu dambayntii, waxaa la soo gaadhey maalintii uu soo laaban lahaa. Markii uu yimid, wixii ugu horreeyey ee uu sameeyey waxay ahayd inuu booqasho ugu tegey tii uu jeclaa. In kasta oo ay u dhaqantay sidii iyada oo ku faraxsan inay isaga aragto, haddana sanduuq siigo miidhan oo qolka geeskiisa yaalley ayaa kashifay xaaladdii runta ahayd ee qalbigeeda.

Waxaa kaas ka buuxay waraaqo aan la furin oo la akhrin — kuwiisii.

## SAMADA ILAA ADDUUNKA

Qorniinku waa sida taxane ah waraaqo uu Ilaahay adiga kuu soo diray. Qoraalladiisaa dhexdooda, Abuuraha-Ka Leh samada iyo dhulka ayaa adiga Iskaa baraya, oo jacaylkiisa kuu muujinaya, oo kuu sheegaya sida aad Isaga gurigiisa abadiyanka ah ugula noolaan kartid nolol ammaan iyo farxad leh.

Tani waa qayb "waraaq" uu Isagu adduunka u soo diray 2,700 oo sanno ka hor.

> *"Kuwiinna oomman oo dhammow, xagga biyaha kaalaya, xataa kii aan lacag haysanow, kaalaya, wax iibsada, oo wax cuna .... Haddaba bal maxaad lacag ugu bixisaan wax aan cunto ahayn? Oo wixii aad ku hawshooteena maxaad ugu bixisaan wax aan idin dherjinayn? Bal aad ii maqla, oo waxa wanaagsan cuna, oo naftiinnuna ha iskaga istareexdo barwaaqo miidhan. Dhegihiinna soo dhiga, oo ii kaalaya, i maqla oo naftiinnuna way noolaan doontaa, oo anna waxaan idinla dhigan doonaa axdi weligiis ah .... Maxaa yeelay, sida samooyinku ay dhulka uga sarreeyaan ayay jidadkaygu jidadkiinna uga sarreeyaan, oo ay fikirradayduna fikirradiinna uga sarreeyaan."*
>
> (Ishacyaah 55:1-3,9)

*Waan ku jecelahay,*
***Abuurahaaga***

Miyaad adigu furtay waraaqaha uu Isagu kuu soo diray? Miyaad kuwaas akhriday? Miyaad ka jawaabtey iyaga?


Socdaalku ha bilowdo.

# QAYBTA 2 AAD SOCDAALKA

# OGAANSHAHA QARSOODIGA





8 - Waa Kuma Ilaahay?
9 - Mid La Mid Ahi Ma Jiro
10 - Abuuritaan Khaas ah
11 - Bilowgii Sharka
12 - Qaynuunka Dembiga iyo Dhimashada
13 - Naxariis iyo Caddaalad
14 - Habaarkii
15 - Dhibaato Laba-Jibbaaran
16 - Farcanka Naagta
17 - Waa Kuma Kani?
18 - Qorshaha Abadiyanka ah ee Ilaahay
19 - Qaynuunka Allabariga
20 - Allabari Muhiim Ah
21 - Dhiig Dheeraad ah oo la Daadiyey
22 - Wanka
23 - Kaamilaadda Qorniinka
24 - Waa La Wada Bixiyey
25 - Dhimashada Waa Laga Adkaaday
26 - Ehlu-Diin Ilaahay Ka Fog



# 8

# WAA KUMA ILAAHAY?



Socdaalku wuxuu ka bilaabmayaa meesha uu Kitaabka Ilaahay ka bilowdo.

> *"Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray."* (Bilowgii 1:1)

Halkan la iskuma deyin in qiil loo sameeyo jiritaanka Ilaahay. Jiritaankiisu waa mid iska cad oo aan dood laga keeni karin.

Haddii adiga oo xeeb aan cidina joogin aad ku aragto raad qof, waxaad isla markiiba fahmeysaa inaadan meeshaas keli ku ahayn. Waxaad garanaysaa inaanu raadkaasi iskiis u samaysmin, ama aanay dabaysha iyo biyuhu samayn. Qof ayaa raadkaa ka dambeeya.

Taas waad garanaysaa.

Sidaas oo ay tahay dad badan ayaa muran ka keena inuu jiro Mid abuuray ciiddaa xeebta ee uu qofku raadka ku sameeyey iyo qofkaas raadka lahaaba. Fikrado si fiican loo habeeyey ayay bini'aadanku diyaariyeen si ay u sharaxaan abuuritaan aanu Abuuruhu shaqo ku lahayn, oo qaar baa ku dooday inuu adduunku ku yimid dhacdooyin yaryar oo is dabajoog ah oo bilyamaad sanno soo dhacayey. Laakiinse marka ay soo gaadhaan waxa ay ugu yeedhaan "bilowgii," jawaab uma hayaan su'aasha qadiimka ah: *Maxaa sababay taas*?

Qorniinku wuxuu odhanayaa, "*Wixii Ilaah laga garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga, waayo, Ilaah waa u muujiyey iyaga. Tan iyo abuurniinka dunida waxyaalihiisii aan la arki karin ayaa bayaan loo arkaa,* ***iyagoo laga garto waxyaalihii la sameeyey****, xataa xooggiisa daa'imiska ah iyo ilaahnimadiisa, si aysan marmarsiinyo u lahaan*." (Rooma 1:19-20)

Way fududdahay in tan la fahmo: Wixii la farsameeyey waa inuu jiraa mid farsameeyey.

Tani isla sida ay run uga tahay waxyaalaha uu dadku sameeyey sida raadka, baabuurta, iyo kumbuyuutarrada, ayay run uga tahay waxyaalaha uusan samayn sida cagaha, unugyada, iyo xiddigaha. Wax kasta oo ay indhaheenu arki karaan ama aynu arki karno innaga oo weyneyso ama teleskoobka isticmaalayna iyo sida uu adduunka sidaas u ballaadhani haddana isu haysto oo isugu habboon yahay waxay lagama maarmaan ka dhigaysaa inuu jiro Abuure-Daryeele gacanta ku haya.

Isla sida uu raadka qof u sameeyey ayaa adduunkuna ugu baahan yahay Mid Sameeyey.

> *"Samooyinku waxay caddeeyaan ammaanta Ilaah, cirkuna wuxuu muujiyaa sancadii gacantiisa."*
>
> (Sabuurradii 19:1)

Markaa waa kuma Abuuraha adduunku? Sidee ayaynu Isaga ku ogaan karnaa? Waynu ogaan karnaa, waayo Isaga ayaa inoo sheegay Ka uu yahay.[94]

## ABADIYAN

Hore waxaynu u soo aragnay mid email soo diray oo si kajan ah noo su'aalay, "Yaa Ilaahay abuuray? Waan ilaawaye." Jawaabtu waa: *cidina Ilaahay may abuurin*. Ilaahay waa abadiyan. *"Bilowgii* ***ILAAHAY"*** waxay na baraysaa inaan mid ama wax Abuuraheena la mid ahu jirin.

> *"Intaan buuruhu dhalan ka hor, iyo intaanad samayn dhulka iyo dunida, iyo xataa weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah."* (Sabuurradii 90:2)

Berigii hore, hadda la joogo, iyo mustaqbalku dhammaan Ilaahay waa isugu mid. Isagu waa *"Rabbiga ah Ilaaha Qaadirka ah, oo **jiray** oo j**ira** oo iman **doona**."* (Muujintii 4:8)

Isagu wakhti ma leh oo maskaxdeena wuu ka weyn yahay.

Ma jiro wax la abuuray oo abid ogaan kara wax kasta oo Ilaahay ku saabsan. Isagu waa *"Kan dheer oo sarreeya, oo weligiis waara."* (Ishacyaah 57:15)

Isagu marna isma beddelo, *"Waa isku si uun had iyo goorba, oo sannadihiisuna ma idlaan doonaan."* (Sabuurradii 102:27)

**WEYNE**

Ilaahay wuu ka weyn yahay wax kasta oo maskaxdeena soo geli kara.

Isla sida Kan Abadiyanka ahi aanu ugu baahnayn inuu jiritaankiisa *caddeeyo*, waayo jiritaankiisu wuu iska cad yahay, sidaas oo kale Isagu iskuma deyayo inuu jiritaankiisa *sharaxo*, waayo maskaxdeena koobani ma awooddo inay fahanto wax kasta oo ka baxsan ama ka sarreeya wakhtiga, adduunka gudihiisa, oo aan la arki karin lana taaban karin.

Berigii aan wiilka yar ahaa, waxaan xasuustaa aniga oo cirka eegaya oo ku fikiraya inaan awoodo inaan cirka u duuli karo ilaa aan ka gaadhayo saqafka adduunka. Maan fahansanayn adduun aan dhammaad lahayn oo ka shisheeya saqafkaa aan mala-awaaley!

Waxaa jira waxyaalo la fahmi karo oo keliya marka la rumeeyo wixii uu Ilaahay inoo muujiyey.

Rumaysiga Erayga Ilaahay ee runta ah ee aan is bedbeddelin ayaa fure u ah aqoonta iyo xigmadda ugu sarreeya.

> *"Oo rumaysad la'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo, taas aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu yahay kan u abaalguda kuwa isaga doondoona.... **Rumaysad ayaynu ku garanaynaa** in duniyooyinka lagu abuuray erayga Ilaah, sidaas daraadeed waxa la arko lagama samayn waxa muuqda."*
> (Cibraaniyada 11:6,3)

Sayniska casriga ahi wuxuu qiray inaan *"waxa la arko laga samayn waxa muuqda."* Khubarada Fiisigiska ayaa inoo sheegaya

in waxyaalaha la arki karo laga sameeyey atamyo aan la arki karin, kuwaas oo iyagana elektaroonyo laga sameeyey, kuwaas oo iyaguna ku wareegaya nukliyuus ka samaysan borotoono iyo nuyuutaroono, oo iyaguna ka samaysan …? Waxyaalo badan buu bini'aadanku ilaa iyo hadda ogaadey, laakiinse wax yar uun baynu ilaa hadda naqaanaa. Kuwa xigmadda lihi waxay garowsan yihiin sida uu caqliga bini'aadanku u kooban yahay.

Waxa uusan saynisku caddaynta u haynin ama u heli karin waa *"in adduunka lagu abuuray amarka Ilaahay."* Waxaynu keliya oo tan ku ogaan karnaa marka aynu isticmaalo dareemaha lixaad ee uu Ilaahay ina siiyey: Rumaysadka.

*"Rumaysad **ayaynu** ku **garanaynaa**"* mowduucyada waaweyn iyo qarsoodiga nolosha. Sababtuna way caddahay.

*"Ilaah wuu ka weyn yahay binu-aadmiga."* (Ayuub 33:12)

Muxuu kaloo Weynuhu Isaga-keen muujiyey?

## XAD MA LEH

Isagu wuu awood badan yahay. "*Sayidow, RABBIYOW, bal eeg, samada iyo dhulkaba xooggaaga badan iyo gacantaada fidsan ayaad ku samaysay, oo wax kugu adagna ma jiro."* (Yeremyaah 32:17) Abuuruhu wuu ka sarreeyaa abuuritaankiisa. Isagu wuu ka sarreeyaa oo ka weyn yahay wax kasta oo kale oo ay maskaxdeenu ka fekeri karto.

Isagu wax kasta ayuu og yahay oo yaqaanaa. *"Waad og tahay fadhiisashadayda iyo sara kiciddaydaba, oo fikirkaygana meel fog baad ka garataa…"* (Sabuurradii 139:2) Abuuruhu wax walba wuu og yahay—wakhtigii ina dhaafay, ka aynu ku jirno, iyo mustaqbalkaba. Isagu weligiis sidaas buu ahaa. *"Waxgarashadiisu waa mid aan **la koobi karayn**."* (Sabuurradii 147:5)

Isagu meel kasta ayuu joogaa. *"Bal xaggee baan ruuxaaga ka tagaa? Xaggee baanse wejigaaga uga cararaa?"* (Sabuurradii 139:7) Ka abadiyanka ahi hadda, isla wakhti ayuu adiga iyo anigaba inala wada joogi karaa. Isla wakhtiga uu la hadlayo malaa'igaha jannada ayuu la hadli karaa bini'aadanka adduunka jooga."

Wax Isaga xaddidi karaa ma jiraan.

## RUUX

War kale oo muhiim ah oo xaddidaad la'aanta Ilaahay ku saabsani waa kan:

> *"Ilaahay waa **Ruux**."* (Yooxanaa 4:24)

Ilaahay lama arki karo, Isagu waa abadiyan, iyo ruux meel kasta isku mar jooga. In kasta oo uusan jidh u baahnayn, Isagu wuxuu xor u yahay inuu sida uu rabo isu muujiyo. Qorniinku wuxuu sheegayaa dhowr jeer oo uu Ilaahay rag iyo dumar ugu muuqday siyaalo mucjiso ah, oo muuqaal ah, "*sida nin saaxiibkiis ula hadlo, iyagoo iska soo hor jeeda*." (Baxniintii 33:11)

Ilaahay oo ah Ruuxa ugu sarreeya oo doonaya in Isaga la garto, la aamino, oo ay caabudaan dhammaan ruuxyada kale ee uu Isagu ujeeddadaas u abuuray.

> *"Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale. Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo runta."* (Yooxanaa 4:23-24)

## AABBAHA RUUXYADA

Mid ka mid ah cinwaannadda Ilaahay waa "Aabbaha ruuxyada." (Cibraaniyada 12:9)

Ka hor intii uusan adduunka abuurin,[95] Ilaahay wuxuu sameeyey malyuumaad ruux oo xoog iyo haybad badan oo loogu yeedho *malaa'igo*. Wuxuu kuwaas u abuuray inay Isaga kula noolaadaan gurigiisa jannada. Malag macnihiisu waa *rasuul* ama *midiidin* Ilaahay. Ilaahay oo ugu talogalay inuu yeesho boqortooyo ay ka tirsan yihiin abuuritaan Isaga abadiyan halkaas la jooga, wuxuu abuuray ruuxyo si ay kuwaasi Isaga u gartaan, u caabudaan, u adeecaan, ugu adeegaan, oo ugu farxaan abidkoodba.

> *"... Oo anna carshigii hareerahoodii waxaan ka maqlay **malaa'igo badan** codkood, oo tiradooduna waxay ahayd toban kun oo meelood oo min toban kun ah, iyo kumaan kun."* (Muujintii 5:11)

Isla bilowgiiba, Ilaahay wuxuu abuuray malaa'igaha ugu badan ee uu rabey, maadaama aan iyaga loogu talogelin inay wax dhalaan. Ruuxyadani Ilaahay lamay sinayn, in kasta oo ay dabeecadahooda qaar Ilaahay uga ekaayeen. Ilaahay wuxuu iyaga siiyey fahan aad u sarreeya. Wuxuu kaloo siiyey dareeno, doonis, iyo awood ay Isaga kula xidhiidhi karaan. Sida Abuurahooda, malaa'igaha lama arki karo oo aan ka ahayn marka iyaga loo diro shaqo looga baahan yahay inay is muujiyaan.[96]

Boqortooyadiisa ay ruuxyadaas la abuuray joogaan, Ilaahay oo keliya ayaa ka ah ruuxa aan la abuurin, ee abadiyanka ah, ee awoodda oo dhan leh, ee wax kasta og, ee aan la xaddidi karin.

## WAX KASTA AYUU KA SARREEYAA

> *"Haddaba waxaa jira jidh keliya iyo Ruux keliya ... Oo waxaa jira Rabbi keliya... Ilaah keliya oo kulli Aabbe u ah, oo* ***wax walba ka sarreeya****...."* (Efesos 4:4-6)

In kasta oo Ka *"wax kasta ka sarreeya"* uusan ku xaddidnayn wakhtiga iyo adduunka, waxaa jira meel dhab ah taas oo uu joogo oo wax ka xukumo. *"RABBIGU carshigiisii wuxuu ka dhistay samooyinka, Oo boqortooyadiisuna wax walbay u talisaa."* (Sabuurradii 103:19) Isaga oo ka fekeraya weynaanta iyo haddana dhowaanta Ilaahay ayuu Boqor Suleymaan erayadan Abuurihiisa ugu ducaystay:

> *"Haddaba ma dhab baa in Ilaah dhulka degganaan doono? Xataa* ***samada iyo samada samooyinku*** *kuma qaadi karaan."* (1 Boqorradii 8:27)

Baybalku wuxuu ka hadlaa saddex *samo* oo kala duwan. Laba dadku way arki karaan; laakiinse mid ma arki karaan.

Waxaa jira *samada atomosfeerka*—cirka buluugga ah ee inaga sarreeya.

Waxaa kale oo jira *samada madow*—taas oo ah ta uu Ilaahay ku abuuray meerayaasha iyo xiddigaha.

Waxaa kale oo jirta *samada samooyinka*—samo qurux iyo ammaan leh oo uu Ilaahay joogo. Samadan guriga u ah

Abuuraheena iyo malaa'igaha waxaa kale oo loogu yeedhaa *samada ugu sarraysa*, *samada saddexaad*, *guriga Aabbaha*, *rugtiisa*, *Jannada*, iyo *Samada*.[97]

> *"Rabbigu **samaduu** wax ka soo fiiriyaa, oo wuxuu arkaa binu-aadmiga oo dhan, oo **meesha isaga rugta u ah** ayuu wuxuu ka soo fiiriyaa kuwa dhulka deggan oo dhan, waa isaga kan qalbiyadooda oo dhan sameeya, oo shuqulladooda oo dhan u wada fiirsada."*
>
> (Sabuurradii 33:13-15)

## ILAAHAY WAA MID

Aayadda ugu horraysa ee Baybalka ayaa caddaynaysa inuu hal Ilaah jiro: *"Bilowgii **Ilaah**."*

Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub labaduba waxay sheegayaan: *"Maqal, Israa'iilow, RABBIGA Ilaaheena ahu **waa** Rabbi **keliya**."* (Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 6:4) *"Waxaa jira **Ilaah keliya**."* (Rooma 3:30)

Ilaahay waa MID

Isaga mid la tartami karaa ma jiro. Mid Isaga la mid ahi ma jiro.

Aaminsanaanta jiritaanka Ilaah Keliya waxaa la yidhaahdaa *monotheism*. Tani waxay liddi ku tahay kuwa *ilaahyo* badan aaminsan. Laakiinse waxaa kale oo jira kuwo iyaguna aaminsan inuu Ilaahay wax kasta ku dhex jiro oo ay wax kastaana ilaahay yihiin. Kuwa ilaahyada badan aaminsan iyo kuwa kale ee aaminsan in wax kastaa ilaah yihiin oo wax kastana ilaah ku dhex jiro waxay kala garan la' yihiin Abuuraha iyo abuuritaankiisa. Sidaas daraadeed, waxay iyagu dafiraan jiritaanka Ilaahay iyo astaamihiisa.

## QOTO DHEERAAN

*"Bilowgii **Ilaah**"* waa xaqiiqo *aasaasi* ah, mana aha xaqiiqo la *dhayalsan* karo.

Ka Abadiyanka ahi ma aha mid fudud. Wuu qoto dheer yahay. Kelinimadiisu dhinacyo badan bay leedahay.

Erayga af Cibraaniga ah ee loo isticmaalo *"Ilaah"* waa labnimo, jamac ah—*Elohim*. Eraygaa *Elohim* afka Cibraaniga naxwe ahaan waa jamac, laakiinse macne ahaan waa keli.

Ilaaha keliya ee runta ahi waa qoto dheer yahay oo awooddiisa

lama soo koobi karo. Saddexda odhaahood ee Qorniinka ugu horreeya ayaa sidan qiraya:

> *"Bilowgii **ILAAH*** [magac jamac ah] *samada iyo dhulkuu **abuuray*** [ficil keli ah]. *Dhulkuna qaab ma lahayn, wuuna madhnaa; gudcurna moolkuu dul joogay; oo **RUUXA ILAAH**-na wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha. **ILAAH**-na **WUXUU YIDHI,** 'Iftiin ha ahaado'; iftiin baana ahaaday."* (Bilowgii 1:1-3)

Markaa, odhaahaha ugu horreeya Kitaabka Ilaahay waxay inoo sheegayaan *sidii* uu Isagu wax u abuuray. Wuxuu taas ku qabtay oo ku dhammeeyey isaga oo isticmaalaya *Ruuxiisa* iyo *Eraygiisa*.

Ugu horrayn, *Ruuxa Ilaahay* ayaa samada laga soo diray si uu amarradiisa u fuliyo. Sida shimbir buulkeeda ku dul wareegeysa, *"**Ruuxa Ilaahna** wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay"* adduunkii cusbaa. Erayga Cibraaniga halkan "ruux" loo isticmaalay wuxuu ka soo jeedaa *neef* ama *awood*. *"Ruuxan Ilaahay"* waa awoodda Ilaahay ee xoogga bixisa.

> *"Waxaad soo dirtaa **Ruuxaaga*** [*ruach*]*, kolkaasay iyagu abuurmaan."* (Sabuurradii 104:30)

Markii ku xigtey, *Ilaahay wuu hadlay*. Cutubka ugu horreeya wuxuu toban jeer ku celcelinayaa: *"Ilaahna **wuxuu yidhi**...."* Markii uu Ilaahay hadlay, wixii uu amray ayaa dhacay.

> *"Samooyinka waxaa lagu sameeyey **RABBIGA eraygiisa**, oo guutooyinkooda oo dhanna waxaa lagu uumay **neefta*** [*ruach*] *afkiisa."* (Sabuurradii 33:6)

Ilaahay wuxuu adduunka ku abuuray Eraygiisa iyo Ruuxiisa.

## XIDHIIDHIYE

Xaqiiqada ah inuu Ilaahay wax kasta ku abuuray hadalkiisa arrin kale oo Ilaahay ku saabsan bay ina baraysaa.

Isagu wuu xidhiidhiyaa.

Ka hor intaan abuuritaan jirin xidhiidh baa jirey.

> *"Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii."* (Yooxanaa 1:1-2)

*Erayga,* halkan ku qorani wuxuu ka soo jeedaa erayga af Giriigga ah ee *Logos* oo macnihiisu yahay *soo jeedin feker*.[98] Qorniinka dhexdiisa, *Logos* waa mid ka mid ah magacyada shakhsiyanka ee Ilaahay. Ilaahay iyo Eraygiisu waa mid.

Wax kasta waxaa lagu abuuray *Erayga*.

Ilaahay wuxuu awoodey inuu adduunka *feker* keliya ku abuuro oo isla markiiba iyada oo kaamil ah ayay abuurmi lahayd. Laakiinse sidaas muu yeelin. Isagu fikirkiisii wuu *muujiyey*. Wuu *hadlay*.

*Erayga* ayaa adduunka hadal ku abuuray lix maalmood oo isku dubarridan.

Ilaaha Weyni ma lix maalmood ayuu u *baahnaa* inuu hawshaa ku dhammeeyo?

Maya, Ka abadiyanka ahi wakhtiba uma baahnayn. Laakiinse, maadaama uu adduunka sidan u abuuray, Ilaahay muu dejin oo keliya usbuuc toddoba maalmood[99] ah, wuxuuse kaloo fahan inaga siiyey shakhsiyaddiisa iyo dabeecaddiisa. Tani waa mid muhiim ah maadaama aan Ilaah aan la garanayn la aamini karin, lana jeclaan karin, lana caabudi karin.

Hadda, aynu wax ka eegno, oo ka dhegeysanno, oo ka barano qisada abuuritaanka, sida uu Abuuraha Laftiisu inoo sheegay.

## MAALINTII 1: IFTIINKA IYO WAKHTIGA – ILAAHAY WAA QUDUUS

> *"Ilaahna wuxuu yidhi, Iftiin ha ahaado: iftiin baana ahaaday. Ilaahna wuxuu arkay iftiinkii inuu wanaagsan yahay: Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii. Ilaahna iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, isla maalin ah."* (Bilowgii 1:3-5)

Maalintii ugu horreysey, Ilaahay wuxuu abuuray iftiin. Wuxuu kaloo dejiyey wakhtiga, oo sababay inuu adduunku bilaabo wareeggiisa 24-ka saacaddood ah, saacad samaawi ah oo maalinta iyo habeenka maamusha. Sidaas oo ay tahay Ilaahay weli muu abuurin qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha ilaa laga gaadhayey maalintii afraad.

Waa jirtey wakhti ay saynisyahannadu ku murmi jireen inaanay saynis ahaan saxsanayn inuu *iftiin* jiro iyada oo aan *qoraxi* jirin. Doodaasi way dhammaatay. Maanta, xataa saynisyahannada aan rumaysnayn qisada abuuritaanka ayaa oggol inuu iftiin jirey kaas oo ka madaxbannaanaa qorraxda adduunka.[100]

Markii uu Abuuruhu *iftiinka* (maalintii 1-aad) abuuray ka hor intii uusan abuurin iftiimiyayaasha (maalintii 4-aad), wuxuu Isagu ku tusayey inuu yahay Bixiyaha iftiinka — iftiinka caadiga ah iyo iftiinka ruuxiyanka ahba. Isaga la'aantii, mugdi oo keliya ayaa jira.

Inta aynu Erayga Ilaahay dhex qaadayno, si joogto ah ayaynu ula kulmi doonaa Iftiin Bixiyaha, iyada oo aakhirka wax yar la inaga tusi doono Jannada lafteeda, meeshaas dadka Ilaahay *"uma baahnaan doonaan laambad iftiinkeed iyo iftiinka qorraxda toona; waayo, waxaa iyaga iftiimin doona Rabbiga Ilaaha ah, oo iyana waxay talin doonaan weligood iyo weligood."* (Muujintii 22:5)

Iftiinku qarsoodi aanay fahmeyn buu ku yahay xataa dadka ugu caqliga badan. Culimmada fiisigisku xooggaa waxa uu *qabto* ah bay yaqaanaan, laakiinse wax yar bay ka yaqaanaan waxa uu runtii *yahay*. Marka sayniska la eego iftiinku waa *kaamil*. Xawaarihiisu waa 300,000 oo kiilomitir (186,000 mayl) il-biriqsigiiba. Marka fiisigiska loo eego, markii uu Albert Einstein ogaadey inay $E = mc^2$ (awoodu la mid tahay iftiin badan oo la isku dhutfay oo la laba jibaaray), waxaa bilowday wakhtigii xumaa ee baqdinta badnaa ee bambada nukliyeerka. Bii'addu saamayn kuma yeelato iftiinka. Meel wasakh miidhan ah buu ka ifi karaa, laakiinse iftiinka laftiisu saafi buu ahaanayaa. Iftiinku meel kulama jiri karo mugdiga, iftiinka ayaa kaas dibedda u saaraya.

Ilaahay ayaa ah Bixiyaha iftiinka, *Ka Jira ee Keligiis ah*. Awooddiisa weyn iyo ammaantiisu way kaga argaggixisaa noole kasta oo aan loogu talogelin inuu hortiisa yimaado.

Ilaahay waa saafi waana quduus.

Erayga *quduus* macnihiisu waa: *mid aan mid la mid ahayni*

*jirin*, ama *gooni ah*, ama *wax kasta ka duwan*. Ilaahay waa *mid wax kasta ka duwan*. Malaa'igta had iyo goor ku wareegsan carshigiisa Samada ayaa had iyo goor ku qaylinaya *"Quduus, quduus, quduus waxaa ah RABBIGA."* (Ishacyaah 6:3) Quduusnimadu waa dabeecadda keliya ee Ilaahay ee uu Qorniinku saddex saddex isaga daba yidhaahdo—si muhiimaddeeda loo xooggeeyo. Isagu waa quduus oo *"oo ku dhex jira nuurka aan loo dhowaan karin."* (1 Timoteyos 6:16)

Ilaahay iyo sharku meel mada joogi karaan. Iftiinka iyo gudcurka wuu kala saaraa. Waxaa Isaga la joogi kara oo keliya abuuritaan saafi iyo xaq ah.

> *"**Ilaah waa nuur** yahay, oo isaga aan gudcur ku jirin innaba. Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno."* (1 Yooxanaa 1:5-6)

Maalintii ugu horreysey ee abuuritaanku waxay ku dhawaaqaysaa inuu Ilaahay yahay **quduus**.

## MAALINTII 2: HAWADA IYO BIYAHA – ILAAHAY WAA QAADIR

> *"Ilaahna wuxuu yidhi, Meel bannaani ha noqoto biyaha dhexdooda, oo iyadu biyaha ha ka soocdo biyaha.... sidaasayna ahaatay. Ilaahna bannaankii wuxuu u bixiyey Samo. Waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii labaad."*
> (Bilowgii 1:6-8)

Maalintii labaad ee abuuritaanku waxay ku saabsan tahay laba waxyaalood oo ay nolosha noolaha oo dhammi ku xidhan tahay: hawada iyo biyaha.

Erayga af Cibraaniga ah ee *samooyinka* loo isticmaalaa wuxuu ku saabsan yahay sidii saqaf ballaadhan oo weyn oo wareegsan oo inaga sarreeya, halkaas oo daruuraha iyo cirka la dhigay oo xiddigahana laga arko. Uga feker cirka sidii hawo isu dheelitiran oo ka tirsan ogsijiin iyo naytarajiin, dhibco biyo ah iyo kaarboon-diyoxiidh, iyo hawooyin kale. Haddii sidaas ay isugu qasan yihiin

la beddelo dhammaanteen waynu dhimanaynaa. Ilaahay wuu garanayey waxa uu samaynayo.

Ka feker tiriliyoon halbeeg oo gingiman oo biyo dhibco ah oo cirka korkeena ah ka soo laalaada. Ka warran xigmadda iyo awoodda abuurtay ee haysa isku dhafkaa aanay noloshu ka maarmin — xataa erayo aad ku qeexdo miyaad u heleysaa?

> *"**Isagu wuu hadlay, wayna noqotay**, oo wuu amray, wayna adkaatay."* (Sabuurradii 33:9)

Sida maalin kasta oo kale oo abuuritaankii ka tirsan, maalintan labaadi waxay ina xasuusinaysaa inuu Ilaahay yahay **qaadir.**

## MAALINTII 3: BADDA, DHULKA, IYO DOOGGA – ILAAHAY WAA WANAAGSAN YAHAY

> *"Ilaahna wuxuu yidhi, Biyaha samada ka hooseeya meel ha isugu soo urureen, oo ciidda engegani ha muuqato; sidaasayna ahaatay. ... Oo Ilaah wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay. Ilaahna wuxuu yidhi, Dhulku ha soo bixiyo doog, iyo geedo yaryar oo iniino dhala, iyo geedo waaweyn oo midho caynkooda ah dhala, oo iniinahoodu ku dhex jiraan ... Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay."* (Bilowgii 1:9-12)

Maalintii saddexaad Ilaahay dhulkii ayuu baddii ka soocay oo wuxuu hadal ku abuuray dhammaan doogga. *"Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay."* Wuxuu adduunkeenan ku dhex shubay biyo ku filan uun. Maalintaa iyo ilaa maantana marna umuu baahan inuu wax ku kordhiyo.[101]

Ilaahay wuxuu sameeyey geed yar iyo mid weyn oo kasta inuu iniinyo bixiyo, oo soo saaro khudaar iyo midho *"caynkooda ah."* Muxuu Ilaahay waxaas oo cunto ah u sameeyey? Wuxuu u sameeyey, waayo *"wuxuu dhulka... u uumay in la degganaado."* (Ishacyaah 45:18) Adduunku waa meere khaas ah. Waa meeraha keliya ee loo sameeyey inay nololi ka jirto oo ku barwaaqowdo.

Tusaale ahaan, bal ka feker, qaar ka mid ah faa'iidooyinka aynu geedaha ka helno: oksogiinta aynu u baahannahay, khudaar

iyo midho macaan oo nafaqo leh, hadh inaynu ku nasano, xaabada aynu u baahannahay, daawooyinka aynaan ka maarmin, ubax qurux badan oo udgoon, dhul la daawado oo qurux badan, iyo faa'iidooyin kale oo badan.

Marka cuntada laga hadlayo, Ilaahay wuxuu awoodey inuu dhowr nooc oo cunta ah oo keliya inoo abuuro sida muus, digir, iyo bariis. Intaas waynu ku noolaan karnaa. Laakiinse Ilaahay sidaas muu samayn. Saynisyahannadu waxay qiyaasaan inay adduunkeena ka baxaan laba malyuun oo nooc oo geedo ah oo cunto ku habboon.

Bilowgii cutubka koowaad, Ilaahay toddoba jeer ayuu ku celcelinayaa inuu abuuritaankiisu *"wanaagsan"* yahay. Qorniinka dhexdiisa lambarka toddoba wuxuu metelaa wanaagga ugu sarreeya. Wax kasta oo uu Ilaahay sameeyey waa wax ugu wanaagsan ee jira.

Sababtaasina waa, waayo Isaga ayaa wanaag oo dhammi u sugnaaday.

> *"Ilaah… wax kasta si deeqsinimo ah ayuu* ***inoo siiyaa*** *si aynu ugu raaxaysanno."* (1 Timoteyos 6:17)

Maalinta saddexaad waxay ina bartay inuu Ilaahay **wanaagsan** yaha*y.*

## MAALINTII 4: IFTIIMMADA CIRKA – ILAAHAY WAA AAMIN

> *"Ilaahna wuxuu yidhi, iftiimmo ha ahaadeen meesha bannaan oo samada dhex ah si ay u kala soocaan maalinta iyo habeenka; oo ha u ahaadeen calaamooyin, iyo xilliyo, iyo maalmo iyo sannado… Oo Ilaah wuxuu sameeyey labada iftiin ee waaweyn, si uu iftiinka weynu u xukumo maalinta, iftiinka yaruna u xukumo habeenka, oo xiddigahana wuu sameeyey."* (Bilowgii 1:14-16)

Maalinta afraad waxay tusaysaa Ilaah habaysan. Isagu waa Ka *"qorraxda maalintii nuurka ka dhiga, oo qaynuunnada dayaxa*

*iyo xiddigaha ka dhiga inay habeenkii nuuraan."* (Yeremyaah 31:35) Habeenkii, xiddigo la habeeyey oo aan is bedbeddelin ayaa khariidad la isku hallayn karo u ah kuwa dhulka iyo badda ku socdaalaya. Maalintiina, qorraxda ayaa si aamin ah maalmaha iyo sannadaha inoogu tirisa. Dayaxuna wuxuu maamulaa bilaha iyo hirarka.

Sida qorraxda iyo xiddiga ah oo kale, dayaxa adduunku wuxuu markhaati joogto ah ka yahay aaminimada Ka sameeyey. Ilaahay wuxuu dayaxa ugu yeedhaa *"markhaatiga daacadda ah oo cirka jooga."* (Sabuurradii 89:37) Meel kasta adduunka ka joogoo, dayaxu mar kasta adduunka ayuu soo eegayaa oo marna ma sii jeedo.[102] Ama daruuraha dabadooda ha ku libdho ama yuusan ku libdhine, dayaxu waa kii saacad kasta jooga. Dayaxu waa aamin waayo Ka sameeyey baa aamin ah.

Maadaama uu Ilaahay aamin yahay, waxaa jirta hal arrin oo uusan *Isagu samayn karin*. Isagu dabiicaddiisa kama hor imaan karo, qaynuunadiisana iskama indhotiri karo. *"Isagu weli waa aamin; waayo, isagu isma burin karo.... Ma suurtowdo inuu Ilaah been sheego."* (2 Timoteyos 2:13; Cibraaniyada 6:18) Dad badan ayaa u maleeya inuu Ilaahay aad u "weyn" yahay taas oo keentay inuu samayn karo wax dabeecaddiisa liddi ku ah, ama uu eraygiisa ka noqon karo. Maaha sidaas sida uu Ilaahay *weynaanta* ku qeexaa.

Is bedbeddelku maaha dabeecadda Ilaahay—laakiinse waxaa ah aaminimada. Sida ay meerayaashu iyo xiddigaha u yihiin kuwo aan is bedbeddelin ayaa Abuuraheena-Nooleeyaheenuna uu u yahay mid la isku hallayn karo.

Waad aamini kartaa Isaga.

> *"Hadiyad kasta oo wanaagsan iyo hibo kasta oo kaamil ah kor bay ka timaadaa iyadoo ka soo degaysa xagga* ***Aabbaha nuurarka*** *isagoo aan* ***lahayn rogrogmad*** *ama hoos laallaabasho."* (Yacquub 1:17)

Maalintii afraad ee abuuritaanku waxay ka markhaati kacday inuu Ilaahay **aamin** yahay.

## MAALINTII 5: KALLUUNKA IYO HAADDA – ILAAHAY WAA NOLOL

Maalintii shanaad, xigmaddiisa iyo awooddiisa aan xadka lahayn, ayuu Ilaahay ku abuuray abuuritaan kasta oo badda iyo cirka socda ama ku jira, oo wuxuu kuwaas siiyay wax kasta oo ay baahan yihiin si ay bii'adaha khaaska ah ugu noolaan karaan—kalluunka wuxuu siiyey jidh gaar ah oo u sahlaya inuu biyaha ku dhex noolaan karo oo dabaalan karo, shimbirahana wuxuu siiyey baalal iyo lafo ay ku duuli karaan.

> *"Oo Ilaah wuxuu yidhi, Biyuhu aad ha u soo bixiyeen uun dhaqdhaqaaqa oo badan, oo naf nool leh, haadduna ha duusho dhulka dushiisa xagga meeshii bannaanayd oo samada dhex ahayd. Oo Ilaah wuxuu abuuray nibiriyada badda oo waaweyn, iyo uun kasta oo nool oo dhaqdhaqaaqa, ee biyuhu aad u soo bixiyeen iyagoo badan, oo caynkooda oo kale dhala, iyo haad kasta oo caynkiisa dhala; Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay."* (Bilowgii 1:20-21)

U fiirso sida erayada loo dhigay, *"Biyuhu aad ha u soo bixiyeen uun dhaqdhaqaaqa oo badan."* Aqoonyahannada ku xeel dheer noolaha aan ishu arki karin waxay inoo sheegayaa inay dhibicdii biyo ahiba ku jiri karaan malyuumaad noole aan la arki karin ah, oo wuxuu jidhkoodu u qoto dheer yahay sida xayawaanka waaweyn qaarkood. Nibiriga buluugga ah ayaa ugu weyn xayawaannada badda ku jira, isaguna wuxuu ku cunaa oo keliya noole aad u yaryar—waxaa badda dul sabeeya xayawaan iyo geedo aad u yaryar.

Baddu waxaa ka buuxa abuuritaan badan oo tusaya nolosha mucjisada leh uu Ilaahay bixiyo.

Sidaas oo kale ayaynu ka odhan karnaa shimbiraha kala noocnooca ah ee cirka duula.

U fiirso erayada ah, *"caynkooda oo kale dhala."* Odhaahdan toban jeer ayaa lagu celceliyey Bilowgii cutubka koowaad, tan oo tusaysa in wax kastoo nooli ay sii jirayaan maadaama ay is dhalayaan. Abuuraha nolosha ayaa ansaxiyey in geed kasta iyo

noole kastaa oo kale uu dhalo *"caynkiisa oo kale."* Tani waxay liddi ku tahay kuwa ku dooda inay noolaha oo dhammi ka soo unkameen hal unug oo yar. Iyada oo ay noolayaashu la qabsan karaan oo uu jidhkoodu is beddeli karo bii'adda ay ku nool yihiin darteed, haddana midna kama gudbi karo xuduudkii uu Abuuruhu u dhigay. Waxaa caddayn u ah lafaha iyo xayawaankii hore ee dhulka hoostiisa qaabkoodii laga helay.

Ilaahay oo keliya ah Ka *nolosha* haya oo bixiya. Isaga la'aantii dhimasho oo keliya ayaa jireysa.

> *"Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis.* ***Isaga waxaa ku jirtay nolol****, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka."*
> (Yooxanaa 1:3-4)

Badnaanta noolaha la abuuray maalintii shanaad waxay na tusaysaa inuu Ilaahay **nolol** yahay.

## MAALINTII 6: XAYAWAANKA IYO BINI'AADANKA – ILAAHAY WAA JACAYL

Bilowgii maalintii lixaad Abuuruhu wuxuu sameeyey tobannaan kun oo xayawaanka naas-nuugta ah, kuwa bogga ku socda, iyo cayayaan.

> *"Ilaahna wuxuu sameeyey dugaagga dhulka oo caynkiisa dhala, iyo xoolo caynkooda dhala, iyo wax kasta oo dhulka gurguurta oo caynkiisa dhala; Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay."* (Bilowgii 1:25)

Ilaahay ayaa dhammaantood sameeyey, kuwo waaweyn iyo kuwo yaryar, isagoo siiyey garasho rabbaani ah oo ay ku noolaadaan, oo adduunka dabiiciga ah wax ugu soo kordhiyaan, mid kastaana wuxuu dhalayey farcan isaga oo kale ah, oo wuxuu awoodey inuu carruurtiisa xannaaneeyo.

Markii uu Ilaahay xayawaanka abuuray wax kasta *"way wanaagsanaayeen."* Weli sharka ah dhiig-daadinta ama dilku adduunka muu soo gelin. Xayawaanka waxaa loo abuuray inay geedaha cunaan oo ku noolaadaan. Ilaahay wuxuu yidhi, *"Oo*

*dugaag kasta oo dhulka jooga, iyo haad kasta oo hawada duula, iyo wax kasta oo dhulka gurguurta, oo naf nool leh ayaan geed kasta oo cagaar ah cunto u siiyey."* (Bilowgii 1:30) Muu jirin xayawaan ku nool inuu xayawaan kale cuno. Cadaawad iyo baqdini may jirin. Wax kastaa waxay muujinayeen naxariista Ilaahay. Libaaxu wuxuu la daaqi jirey laxda, bisadaha iyo shimbiruhu way isla joogi jireen. Adduunka nabad dhab iyo kaamil ah baa ka jirtey.

Ilaahay wuxuu dhammeeyey inuu xayawaankii abuuro, haddana waxaa la soo gaadhey abuuritaankii ugu muhiimsanaa: *ninkii iyo naagtii*. Ilaahay wuxuu ugu talogalay inay bini'aadanku Isaga ku caabudaan iyaga oo dhex jooga boqortooyadiisa ammaanta, farxadda, iyo jacaylka abadiyanka ah leh.

Abuuraheena, jacaylkiisu wuu ka badan yahay wax uu qabto uun. Isaga *ayaa* jacayl ah.

> *"Ilaah **waa** jacayl."* (1 Yooxanaa 4:8)

Ficilladii abuuritaanka ee Ilaahay ee maalintii lixaad waxay tusayaan inuu Ilaahay **jacayl** yahay.

**"AYNU"**

Maadaama uu Ilaahay jacayl yahay wuxuu Isagu dadka oo ay tahay inay Isaga caabudaan, jacaylkiisana helay u abuuray adduun qurux badan. Sidaa daraadeed, weli iyada oo maalintii lixaad lagu jiro:

> *"Ilaahna wuxuu yidhi, Aynu nin inoo eg ka samayno araggeenna..."* (Bilowgii 1:26)

Joogso! Bal hal daqiiqo halkan ku hako! Waa maxay taasi? Muxuu runtii Ilaahay ula jeedaa markuu leeyahay, *"Aynu nin **inoo** eg ka **samayno araggeenna**"*?

Maadaama uu Ilaahay MID yahay, maxaa loola jeedaa *"AYNU"*?

Yuu Isagu la hadlayey?



# 9

# Mid La Mid Ahi Ma Jiro

> *"Rabbiga Ilaahiinna ahu waa Ilaah… **waa Ilaah weyn** oo xoogga badan oo laga cabsado!"*
> — Nebi Muuse (Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 10:17)

**DIGNIIN:** Qaybtan soo socota ee socdaalku wuxuu dadka marinayaa jidad adag. Qalbiyada iyo niyadaha waa la imtixaamayaa oo lagaga fekersiinayaa. Laakiinse kuwa qaybtan ka gudbaa waxay awoodayaan inay u diyaar garoobaan inay wajahaan caqabadaha ku soo foolka leh.

## ILAAH WAA ILAAH

Inteena badani waxaynu wada aaminsannahay inuu Ilaahay ka weyn yahay sida aynu innagu caadiyan Isaga u haysano.

Daacadnimada rumaysigeena ayaa hadda la imtixaami doonaa.

Maalintii lixaad ee abuuritaanka, kaddib markii uu Ilaahay dhammeeyey abuuritaankii xayawaanka oo dhan, wuxuu yidhi: *"Aynu nin inoo eg ka samayno araggeenna…"* (Bilowgii 1:26)

Cutubka soo socda, waxaynu ku eegi doonaa siyaabaha ninkii iyo naagtii ugu horreeyey loogu abuuray inay muujiyaan dabeecadda iyo u ekaanshaha Ilaahay, laakiinse marka hore waa in su'aal laga jawaabaa.

Maadaama uu Ilaahay *Mid* yahay, muxuu Isagu u yidhi, *"**Aynu** samayno…"*? Muxuu u odhan waayey, "Nin ayaan ka

samaynayaa u **ekaanshahayga** iyo **araggayga**" ? Muxuu mararka qaarkood Ilaahay isugu yeedhaa *Aynu*, *Kaayaga*, *Innaga*?[103]

Qaar baa yidhaahda in marka uu Ilaahay isticmaalayo *"Aynu"* iyo "*Annaga*" ay ka dhigan tahay "jamacnimada sharaftiisa," sida marka uu boqorku isugu yeedhayo "annaga." In kasta oo Ilaahay sharafta awooddiisa iyo ammaantiisa wax la barbardhigaa jirin, naxwaha af Cibraaniga ahi sharaxaadan oo kale inama siinayo.

Dad kale ayaa sheega inuu Ilaahay malaa'igaha la hadlayey markii uu lahaa, *"Aynu nin inoo eg ka samayno araggeenna,"* in kasta oo aan malaa'igaha halkaa lagu magacaabin, bini'aadankana aan laga samayn u ekaanshaha malaa'igaha.

Marka Qorniinka sida uu yahay loo akhriyo oo loo kuurgalo naxwaha waxaynu arkaynaa inuu Ilaahay doortay inuu Isku qeexo jamac haddana loo isticmaalay sidii kelinimo.

JAMAC: *"Ilaahna wuxuu yidhi, '**Aynu** nin **inoo** eg ka samayno **araggeenna**.'"*

KELI: *"Oo Ilaah nin buu ka abuuray **araggiisa**."*

(Bilowgii 1:26-27)

Isku qeexida uu Ilaahay jamacnimo iyo kelinimo labadaba isku qeexay waxay qaabilaysaa *Ka uu Isagu yahay* iyo *Ka uu Isagu weligiis ahaa*.

Qoto dheeraanta io weynaanta Ilaahay kelinimadiisa way ka sarraysaa sida sahlan ee ay dadku u qeexaan "kelinimada." Qeexid uu bini'aadan sameeyey marna kuma filaanayso inay si fiican u sharaxdo Ka Abadiyanka ah.

Ilaah waa Ilaah.

*"Weligeed iyo weligeedba **adigu waxaad tahay Ilaah**."*

(Sabuurradii 90:2)

## MIDNIMADA QOTADA DHEER EE ILAAHAY

Kitaabka Ilaahay erayadan ayaa lagu furayaa:

*"Bilowgii **IlAAH*** [*Elohim*—magac jamac ah oo lab] *abuuray* [ficil keli ah]*… Oo **Ruuxa Ilaah**-na wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha. **Ilaah**-na **wuxuu yidhi**, Iftiin ha ahaado: iftiin baana ahaaday."*[104]

ILAAHAY wuxuu wax kasta ku abuuray Eraygiisa iyo Ruuxiisa.

*"Samooyinka waxaa lagu sameeyey **RABBIGA eraygiisa**, Oo guutooyinkooda oo dhanna waxaa lagu uumay **neefta afkiisa**."* (Sabuurradii 33:6)

## ERAYGIISA

Dhammaan kuwa doonaya inay bartaan dabeecadda qotoda dheer ee Abuurahooda, Qorniinka ayaa iyaga maclumaad badan ka siinaya. Tusaale ahaan, Injiilka sida uu Yooxanaa u qoray wuxuu ku bilaabmayaa erayadan:

*"Bilowgii waxaa jiray **Ereyga**,*
*Ereyguna wuxuu **la jiray Ilaah**,*
*Ereyguna wuxuu ahaa **Ilaah**.*
***Isagu** Ilaah buu la jiray bilowgii.*
*Wax walba waxaa laga sameeyey **Xaggiisa**...."*
(Yooxanaa 1:1-3)

Sidii aynu cutubkii hore ku soo aragnay, *Eraygu waa ficilka la arkayo ee Ilaahay ee ka yimid fikirradiisa hoose*. Isla sida aad adigu mid ula tahay fikirradaada iyo erayadaada, ayay Ilaahay iyo Eraygiisu Mid u yihiin. *Erayga* waxaa la sheegay inuu *"Ilaahay la jirey"* (Isaga ka duwan yahay) iyo sidoo kale inuu yahay *"Ilaah"* (Isaga mid la yahay).

Waxaa kale oo inaga caawinaya tan inaynu magac-u-yaallada *"Isaga"* iyo *"Xaggiisa"* fiiro gaar ah u lahaano, kuwaas oo loo isticmaalay *Erayga*.

## RUUXIISA

Isla sida uu RABBIGA Ilaaha ahi *Eraygiisa* ugu qeexayo si khaas ah oo shakhsiyan ah, sidaas ayaa qeexitaannada *Ruuxiisuna* shakhsiyan u yihiin.

*"Waxaad soo dirtaa **Ruuxaaga**, kolkaasay iyagu abuurmaan, Dhulkana W**aad** cusboonaysiisaa."*
(Sabuurradii 104:30)

*"Samooyinka **waxaa lagu sharaxay Ruuxiisa**."*
(Ayuub 26:13)

> *"Bal xaggee baan **Ruuxaaga** ka tagaa? Xaggee baanse **Wejigaaga** uga cararaa?"* (Sabuurradii 139:7)

> *"**Ruuxa Quduuska** ah ... wax kasta **ayuu idin bari doonaa**."* (Yooxanaa 14:26)

Isla sidii uu Erayga (hadal ugu abuuray), Ruuxa Quduuska ah (oo amarkii Erayga fuliyey) wuxuu si toos ah mid ula yahay Ilaahay.

## ILAAH WAA WEYN YAHAY

Dadka Ilaaha keliya rumaysan intooda badan dhibaato kuma aha inay tan aqbalaan ducadan Boqor Daa'uud: *"Haddaba, RABBOW ILAAHOW, waad weyn tahay, waayo, mid kula mid ahu ma jiro, oo adiga mooyaane Ilaah kale ma jiro, siday ahaayeen kulli wixii aannu dhegahayaga ku maqalnay oo dhammu."* (2 Saamu'eelka 7:22)

Sidaas oo ay tahay dad badan oo si degdeg ah u qira, "Ilaahay waa weyn yahay! Ilaahay waa weyn yahay, oo mid la mid ahi ma jiro!" ayaa haddana si degdeg ah u diida inuu Ilaahay isu muujiyey si jamac ah haddana dabeecad ahaan kelinimo ah.

Maadaama "aanu mid Isaga la mid ahi jirin," ma in lala yaabaa inuu Ilaaha Weyni isugu muujiyo si ka weyn oo ka qoto dheer sida aynu mala-awaali karno? Ilaahay wuxuu nagu guubaabinayaa inaynu si sax ah Isaga uga fekerno.

> *"Waxaad moodday inaan ahay mid kula mid ah, Laakiinse waan ku canaanan doonaa!"* (Sabuurradii 50:21)

## ILAAH WAA MID

Yuhuudda Towreedda ku dhaqma ayaa ku celceliya duco afka Cibraaniga lagu yidhaahdo *Shema*, oo odhanaysa sidan: *"Adonai Eloheynu, Adonai **echad**,"* macnaheeduna yahay, *"Rabbiga Ilaahayagu, Rabbigu waa **mid**."* Ducadani waxay ku qoran tahay Towreedda: *"Maqal* [*Shema*]*, Israa'iilow, RABBIGA* [*YHWH*] *Ilaaheena ahu **waa RABBI keliya*** [*echad*]*!"* (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 6:4)

Erayga af Cibraaniga ah ee lagu qeexay kelinimada Ilaahay waa *echad*. Erayga waxaa badanaa loo isticmaalaa in lagu qeexo *midnimo ballaadhan*, sida rubuc midho canab ah. Meelo kale oo Qorniinka ah *echad* waxaa lagu turjumaa *"unnug"* oo loola jeedo kabtan iyo unnuggiisa askarta ah.[105] Cutubka kan ku xiga, eraygan ayaynu mar kale arkaynaa marka ay ninkii iyo naagtiisii ugu horreeyey noqonayaan *echad*, ama *"**isku** jidh."* (Bilowgii 2:24) Marka la fiiriyo aayado kale oo isla eraygan af Cibraaniga ah la isticmaalay waxaa caddaanaya in eraygaa uu Ilaahay u isticmaalayo kelinimadiisa ay ka tirsanaan karaan in ka badan hal jiritaan.

Axdigii Hore waxaa ku jira aayado badan oo tusaya oo caddaynaya kelinimada jamaca ah ee Ilaahay.[106] Mid ayaadahaas ka mid ahi waa tan:

> *"Tan iyo bilowgii… **Anigu** halkaasaan joogay, oo haatanna waxaa i soo diray **Sayidka RABBIGA** ah iyo **Ruuxiisa**."*
> (Ishacyaah 48:16)

Waa kuma *"Sayidka RABBIGA ahi"*?

Waa kuma *"Ruuxiisu"*?

Waa kuma *"Aniga"* kaas oo bilowgii halkaas joogey iyo *"ka"* uu diray *"Sayidka RABBIGA ah iyo Ruuxiisu."*?

Su'aalahan si fasiix ah ayaa looga jawaabi doonaa inta aynu Qorniinka dhexmarayno.

## SADDEX-MIDNIMADA AYNU ISLA OGGOLAHAY

Erayga afka Ingiriiska ah ee *midnimo* wuxuu ka yimid afka Laatiinka *unus* oo macnihiisu yahay *mid*. In kasta oo ay dad badani ay diidaan fikradda ah in Ilaahay yahay saddex-midnimo, dad yar ayaa ku dhaca inay dafiraan in saddex-mid ah aynu maalin kasta nolol maalmeedkeena ku aragno.

Tusaale ahaa, **wakhtigu** wuxuu u qaabaysan yahay saddex-mid ah oo leeyahay *beri hore, hadda, iyo mustaqbal*.

**Baaxaddu** waxay ka kooban tahay *joog*, *dherer*, iyo *ballaadh*.

**Qofku** wuxuu ka kooban yahay *ruux, naf,* iyo *jidh*.

**Hal nin** wuxuu noqon karaa *aabbe, wiil, iyo* xaaskiisa *ninkeeda.*

**Qoraxduna** waa saddex-mid ah,
**qorraxda** *lafteeda*,
**qorraxda** *iftiinkeeda*,
iyo **qorraxda** *kulaylkeeda*.

Tani ma waxay ka dhigaysaa inay saddex qorraxood jiraan? Maya. Qorraxdu saddex maaha, laakiinse waa mid. Isma burinayaan inay qoraxdu iyada oo mid ah saddex-mid tahay. Ilaahay waa sidaas oo kale. Isla sida ay iftiinka iyo kulaylka qoraxdu uga soo baxaan qorraxda, ayaa *Erayga Ilaahay* iyo *Ruuxa Ilaahay* uga yimaaddeen Ilaahay. Sidaas oo ay thay iyagu waa MID, isla sida ay qorraxdu mid u tahay.

Dabcan, tusaale kasta oo aynu isku dayno inaynu ku sharaxno qoto dheerida Ilaaha keliya ee runta ahi kuma filla. Qoraxda wuxuu kaga duwan yahay inuu Ilaahay yahay Ilaah jacayl badan, oo shakhsiyan ah, oo la ogaan karo. Sidaas oo ay tahay, tusaalayaashan oo kale inay noo keenaan fahan caam ah maadaama aynu dhammaanteen oggollahay inay waxyaalo saddex-mid ahi ka jiraan abuuritaanka oo ay intaan badani oggollahay inuu Abuurahu ka sarreeyo abuuritaankiisa.

> *"Sida kan guriga dhisa uga murwad badan yahay guriga. Waayo, guri walba mid baa dhisay, laakiin kan wax walba dhisay waa Ilaah."* (Cibraaniyada 3:3-4)

Haddii abuuritaanka Ilaahay ay ka buuxan midnimooyin qoto dheeri, ma la yaab bay inagu noqonaysaa inuu Ilaahay Laftiisu yahay midnimo qoto dheer? Haddii, aqoonteena sayniska oo dhan aysan buuxda ugu sharixi karin adduunka aynu ku noollahay, miyaanay markaa inagaga sii adkaan karin inaynu sharaxno Ka adduunkaa abuuray?

Ilaah waa Ilaahay.

> *"**War miyaad baadhi kartaa Ilaah axwaalkiisa moolka dheer? Miyaadse Ilaaha Qaadirka ah si kaamil ah u garan kartaa?** Xigmaddiisu way u sarraysaa sida samada—**ee bal maxaad samayn kartaa**? Oo She'oolna way ka sii mool dheer tahay—**ee maxaad garan kartaa**?*

*Qiyaasteeduna waa ka sii dheer tahay dhulka, waana ka sii ballaadhan tahay badda oo dhan."* (Ayuub 11:7-9)

Waa inta aynu ka baaraandegeyno *"Ilaah axwaalkiisa sida moolka u dheer"* marka aynu fursadda fiican u yeelanayno inaynu ogaano oo dareenno mid ka mid ah astaamaha ugu cajiibsan ee Ilaahay:

*"**Ilaah waa jacayl**."* (1 Yooxanaa 4:8)

## YUU ILAAHAY JECEL YAHAY?

Jacaylka Ilaahay waa mid aad u weyn oo u qoto dheer oo ka soo butaaca qalbigiisa Aabbanimo oo loo arko siyaalo ficil ah.[107] Maadaama uu Ilaahay **yahay** jacayl, jacaylkiisu kuma xidhan inay kuwaas uu jacaylka tusayaa u qalmaan iyo in kale.

*"Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta!"* (1 Yooxanaa 3:1)

Tani waa mid ay tahay inaynu ka fekero. Jacaylku wuxuu u baahan yahay mid la jacaylkaa helaya. Anigu iskama odhan karo, "waan jecelahay." Laakiinse waxaan odhan karaa, "waxaan jecelahay xaaskayga iyo carruurtayda, waxaan jecelahay deriskeyga," iyo wixii la mid ah.

Jacaylku waa inuu ujeeddo lahaadaa.

***Markaa, ayuu Ilaahay jeclaa** ka hor intuusan samayn abuuritaanadiisa khaaska ah ee uu jecel yahay?* Isagu miyuu *u baahnaa* inuu abuuro malaa'igo iyo dad? Maya, Abuuraheenu wuu *isku filan yahay*. Bini'aadan iyo malaa'igo ayuu abuuray, mana aha inuu *u baahnaa*, laakiinse wuu *doonayey* iyaga. Labadani aad bay u kala duwan yihiin.

Sidii aynu hore u soo barannay: ***Ilaahay wuu hadlaa***.

Hadalku wuxuu micne ku yeeshaa oo keliya xaalad xidhiidh oo jirta. ***Yuu Ilaahay la hadlayey** ka hor intaanu malaa'igaha iyo bini'aadanka abuurin*? Miyuu Isagu u *baahnaa* inuu abuuro waxyaalo kale si uu ay hadalladiisa u fahmaan? Maya, wax kasta oo uu Ilaahay u "baahan" yahay Isaga ayay ku dhex jiraan. Isagu

waxba uma baahnaa. Ilaahay wuu isku filan yahay waana baahi-laawe. Sidaas oo ay tahay dabeecaddiisa ayay qayb ka tahay inuu doonayo inuu hadlo oo lala hadlo, inuu wax jeclaado oo la jeclaado.

Tani waxay inoo geyneysaa run kale: ***Ilaahay waa xidhiidhiye***.

Jacaylka iyo hadalku waxay jiri karaan oo keliya marka uu jiro xidhiidh micne lihi. ***Yuu Ilaahay xidhiidh fiican la lahaa*** ka hor intii uusan waxba abuurin?

Jawaabtu waxay ku dhex milan tahay midnimada Ilaahay ee qotoda dheer.

Abadiyan, ka hor intii uusan Isagu malaa'igaha iyo bini'aadanka abuurin, Ilaaheena xidhiidhiyaha ahi xidhiidh fiican oo ku filan buu Isagu isla lahaa—oo la lahaa Eraygiisa shakhsiyanka ah iyo Ruuxiisa shakhsiyanka ah.

## SIDA AY ARRIMUHU U KALA SARREEYAAN

Qof nala soo xidhiidha ayaa emailkan noo soo diray isaga oo ka hadlaya fekerada qotoda dheer ee ku saabsan jamaca, dabiicadda xidhiidh shakhsiyeedka ah ee Ilaahay:

> Dir Mowduuca: Email la soo diray
>
> Ilaahay wuxuu soo diray nebiyo si ay inoogu sheegaan inuu Isagu yahay mid keliya. Markaa, maxaad idinku u diidan tihiin inaad Eraygiisa dhegeysataan oo aqbashaan? Maxaad idinku arrimo badan oo is dul saarsaaran u kala xayuubinaysaan oo mid mid ugu qeexaysaan idinka oo si dhib yar arrimahaas isugu jumlayn kara sidii mid keliya?

Iyada oo run tahay inaynaan marna awoodin inaynu fahanno wax kasta oo ku saabsan Ilaaheena abadiyanka ah, miyaynaan ahayn inaynu doono inaynu fahanno waxa uu Ilaahay Isaga keen muujiyey ee ku qoran qoraalladii nebiyadiisa? Haddii ayba tahay inaynu Ilaahay ka fekerno, waa inaynu si saxsan Isaga ugaga fekernaa.

Badankeenu waynu isku raacsannahay inuu Ilaahay MID yahay. Laakiinse muxuu ILAAHAN MID-ka ahi Isaga keen sheegay? Maxaynu Qorniinka ka heli karnaa oo Isaga ku saabsan inta aynu innaga oo "xuubabku siday u kala sarreeyaan u kala siibayna"?

Inta aynu la kulmayno *Ilaah* shakhsiyan ah, oo la garan karo, oo la aamini karo, Kaas oo MID la ah *Eraygiisa* iyo *Ruuxiisa*.

Weynaantiisa abadiyanka ah daraadeed, Ilaahay wuxuu isugu keen tilmaanay ***Aabbaha***, Eraygiisana sida ***Wiilka,*** *Ruuxiisana sida* ***Ruuxa Quduuska ah.*** Kuwani waa saddex shakhsiyadood oo khaas ah oo uu hal Ilaah uu run ahi ka kooban yahay.

Aynu dhowr aayadood eegno oo runta "bannaanka inoo soo dhigaya."

## WIILKA ILAAHAY

Qorniinku duubka ayuu ka qaadayaa isla *Eraygii* kaas oo Ilaahay ahaa bilowgiiba sidoo kale loogu yeedho *Wiilka Ilaahay ee keliya*.

> *"Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu* ***la jiray Ilaah****, Ereyguna wuxuu* ***ahaa Ilaah****. ...Ninna ma arkin Ilaah marnaba,* ***Wiilka keliya oo laabta Aabbaha ku jira*** *kaasaa inoo sheegay .... Kii isaga rumaystaa ma xukumna, laakiinse kii aan isaga rumaysan, hore ayaa loo xukumay, maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan magaca* ***Wiilka Ilaah oo keliya*** *oo dhashay."* (Yooxanaa 1:1,18; 3:18)

Waddanka Sinigaal, dadka qaarkii ayaa markay erayga *"Wiilka Ilaahay"* la soo booda, *"Astaaqfuralaah!"* Waa eray af Carabi ah oo gudbinaya fikradda ah: *"Ilaahay ha kaa saamaxo eraygaa bidcinimada ah ee aad tidhi!"* (Bidcinimo oo lagu qeexi karo *"Ilaahay oo lagu kajamo."*) Mar ay i maageen ayaan iyaga ugu jawaabay mid maahmaahyadooda ka mid ah oo odhanaysa: *"Inta aadan adhijiraha afka dhirbaaxin, marka hore ogow sababta uu u foodhyayo,"* oo af Soomaaliga noqonaysa, *"Hubsiimo hal baa la siistaa!"* Way igu qoslaan, markaasaan iyaga ku idhaahdaa, "Ka hor inta aydaan odhaahda ah 'Wiilka Ilaahay,' diidin, bal marka hore ogaada waxa uu Ilahay tan ka yidhi."

Erayga Ilaahay waxaa ku jira in ka badan boqol aayadood oo si toos ah uga hadlaya *"Wiilka,"* Ilaahay, sidaas oo ay tahay aayadahaas midoodna kuma saabsana "wax Ilaah keliya ka badan," mana sheegayaan in Ilaahay "xaas guursaday oo wiil dhalay," sida ay dadka qaarkiis jecel yihiin inay u fasiraan. Fikiraadda noocaas ahi bidcinimo oo keliya maaha; ee waxay kaloo tusaysaa

aqoonyari ku aaddan Qorniinka.[108]

Ilaahay wuxuu inagu martiqaadayaa inaynu fikirradiisa ka fekerno.

> *"Sida samooyinku ay dhulka uga* ***sarreeyaan*** *ayay jidadkaygu jidadkiinna uga* ***sarreeyaan****, oo ay fikirradayduna fikirradiinna uga sarreeyaan."*
>
> (Ishacyaah 55:9)

Sannado hore, nin baayac-mushtar ah oo reer Sinigaal ah oo caan ah ayaa shil gaadhi ku dhintay. Joornaalka dawladda Sinigaal ayaa qoray inay ninkaas u shaqaynayeen laba kun oo qof kuwaas oo "carruurtiisa oo kale ahaa," oo waxaa loogu yeedhay "wiil reer Sinigaal oo waddani ah."[109] Tan macnaheedii ma in waddanka Sinigaal xaas guursadey oo wiil dhalay baa? Dabcan, sidaas lagama wado! Dadka reer Sinigaal dhib uma arkaan inay ninkaa ka dhintay magacaa ugu yeedhaan. Waxay fahansan yihiin macnaha magaca "wiilka Sinigaal." Waxay kaloo fahansan yihiin waxa aan magacaa *loola* jeedin.

Erayga *wiil* dhowr siyaalood ayaa loo isticmaalaa. Marka Quraanka iyo Carabtu *nin socdaala* kugu yeedhayaan "wiilka jidka" (*Ibnu sabiil* [Suuradda 2:177, 215]), waynu fahmaynaa waxa ay ka wadaan. Marka uu Ilaahay *Eraygiisa* ugu yeedhayo *Wiilkiis*a, waa inaynu sidoo kale fahanno waxa uu taas ula jeedo.

Waa inaynaan ku kajamin magacyada iyo erayada uu Abuuraheenu aad u qaddariyo.

> *"****Ilaah*** *wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii, laakiin maalmahan ugu dambaystooda wuxuu* ***inagula hadlay Wiilkiisa*** *uu ka dhigay kan wax walba dhaxla, kan uu duniyooyinkana ku sameeyey. Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa* ***erayga*** *xooggiisa…."* (Cibraaniyada 1:1-3)

Ilaahay wuxuu doonayaa inaynu ogaano inuu *"****inagula hadlay Wiilkiisa****."* Wuxuu kaloo inaga doonayaa inaynu fahanno inuu *Wiilkiisu* yahay *Eraygiisa* kaas oo wax kasta oo samada

iyo adduunka ku dhex jira lagu abuuray oo lagu daryeelo. Turjumaadda af Carabiga ah ee Baybalka, Magaca Wiilka ee ah *"Erayga Ilaahay"* waxaa loo turjumaa *"Kelimatul-ALaah,"* waana magac ama darajo ay Baybalka iyo Quraanka labaduba siiyaan Masiixa. Mar dambe oo socdaalkeena ah, ayaynu tan si hoose u eegi doonaa.

## RUUXA ILAAHAY

Isla sida uu Ilaahay Mid ula yahay *Eraygiisa-Wiilkiisa*, ayuu sidoo kale Mid ula yahay *Ruuxiisa Quduuska ah*.

Ruuxa Quduuska ah ee Ilaahay wuxuu ka qayb qaatay abuuritaankii adduunka iyo muujintii Erayga Ilaahay ee qoran labadaba. Odhaahda labaad ee Baybalka markii uu Ilaahay adduunka abuurayey waa, *"**Ruuxa Ilaahna** wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha*." Mar dambena wuxuu Qorniinku odhanayaa, "*Wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay iman dadka doonistiisa, laakiinse dad **Ruuxa Quduuska ahu** waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay."* (2 Butros 1:21)

Dadka qaarkiisa ayaa sheega inuu Ruuxa Quduuska ahi yahay malagga Jibriil. Kuwo kale ayaa iska dhaadhiciyey inuu Ruuxa Quduuska ahi yahay nebi. Fikradaha noocan oo kale ahi kamay imaanin Qorniinka nebiyada. Malaa'igaha iyo nebiyada waa la abuuray. Ruuxa Quduuska ah lama abuurin, waase, *"Ruux weligiis ah."* (Cibraaniyada 9:14) [110]

Ruuxa Quduusku waa *"Ruuxa runta ah"* (Yooxanaa 14:17), kaas oo uu Ilaahay ku fuliyo ujeeddooyinkiisa adduunka. Isagu waa *"Gargaaraha"* (Yooxanaa 14:16) kaas oo muujiya si cad oo ficil ahaan ah Ilaahay ugu muujiya dhammaan kuwa akhbaarkiisa rumaysan. Dad badan oo adduunka ku nool maanta ayaa og wax Ilaahay ku *saabsan* iyaga oo aan runtii Ilaahay *garanayn*. Garashada noocaas oo kale ahi Ilaahay kuma fila Ilaahay ama dadkaba. Waa Ruuxa Ilaahay ka dadka suurtoggal uga dhiga inay xidhiidh shakhsiyan ah Ilaahay la yeeshaan. Hadhow, waxaynu baran doonaa wax dheeraad ah oo ku saabsan Ruuxa Ilaahay ee cajiibka ah.[111]

Waa sidee socdaalkaagu ilaa iyo hadda? Miyaad yara daashey? Ma sahlana in fikiradan la fahmo. Dadka qaarkii ayaa ku andacooda inay diintoodu run tahay, "maadaama ay jilicsan

tahay." Qeexiddooda Ilaahay waa mid fudud oo jilicsan, laakiinse Ilaahay ma fududa mana jilicsana.

> *"RABBIGU wuxuu leeyahay, fikirradaydu fikirradiinna ma aha, oo jidadkiinnuna jidadkayga ma aha."* (Ishacyaah 55:8)

**KA ABADIYANKA AH**

Erayga Ilaahay wuu cad yahay. Weligeed muu jirin wakhti aynaan jirin Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ahi.[112] Iyagu weligood MID bay ahaayeen. Marka la eego taariikhda bini'aadanka, Qorniinku wuxuu ina tusayaa inuu *Aabbuhu* yahay Ka *samada* ka soo hadla, *Wiilkuna* yahay Ka *adduunka* ka dhex hadlay, *Ruuxa Quduuskuna* yahay Ka la hadla *qalbiyada*.[113] Mid kasta hawshiisu waa gaar, sidaas oo ay tahay iyagu waa MID.

Markii ay sii korodhay aqoonta ay dadku u leeyihiin muujinta uu Ilaahay Laftiisa inooga muujiyey ay bilaabeen inay ku farxaan qoto-dheerida Ka KELIGIIS ah ee ah jacaylka, kaas oo jacaylkiisa abadiyanka ah u tusa siyaalo ficil ah.

Jacaylku wuxuu si macne leh jiri karaa marka uu xidhiidh ka dhex jiro. Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ahi waxay mar kasta lahaayeen xidhiidh ficil ahaaneed oo jacayl iyo midnimo ku dhisan. Meel kale oo Qorniinka ah, waxaynu maqallaa Wiilka oo odhanaya, *"Anigu Aabbahaan **jeclahay**"* iyo *"Aabbuhu Wiilkuu **jecel** yahay."* Wuxuu kale oo Erayga Ilaahay odhanayaa *"midhaha Ruuxu waa **jacayl**."* (Yooxanaa 5:20; 14:31; Galatiya 5:22)

Xidhiidhada bini'aadanka ka dhex jira ee ugu fiican, sida midnimada ka dhexaysa ninka iyo xaaskiisa, ama aabbaha, hooyada iyo cunugga, waxay ka soo maaxdaan *Ka uu Ilaahay **yahay***. Xidhiidhadan addduunka ka jira, kuwooda ugu fiican, waxay wax yar uun inaga tusayaan midnimada weyn ee Ilaahay iyo jacaylkiisa. Abuuraheena ayay ka yimaaddeen wax kasta oo wanaagsani.

> *"Ilaah waa **jacayl**."* (1 Yooxanaa 4:8)

Qaybta ugu fiican ee *"Ilaah waa jacayl"* ku saabsani waa inuu adiga iyo anigaba ku martiqaadayo inaynu xidhiidh dhow

Isaga la yeelano weligeenba! Wuxuu inaga doonayaa inaynu Isaga aamino, in kasta oo aan Isaga si buuxda loo sharrixi karin.

## ILAAHAY WAA AAMIN

Dib uga feker markii aynu ka hadleyney lixdii maalmood ee uu Ilaahay adduunka ku abuuray. Haddii xisaab ahaan loo sheego sidan bay u ekaanaysaa:

Maalin 1: Ilaahay waa quduus
+ Maalin 2: Ilaahay waa weyn yahay
+ Maalin 3: Ilaahay waa fiican yahay
+ Maalin 4: Ilaahay waa aamin
+ Maalin 5: Ilaahay waa nolol
+ Maalin 6: Ilaahay waa jacayl
= ILAAH AAMIN AH

Waa mid lala yaabo inaynu ku degdegno inaynu dadka aamino kuwaas oo aan astaamahaa wanwanaagsan lahayn, sidaas oo ay tahay aynu ka warwareegno inaynu aamino Ka leh astaamahaa oo wanwanaagsan oo kaamilka ah?

Marka aan waraaq aan dirayo ku rido sanduuqa boostada, waxaan taas ku aaminaa hay'adda boostada. Intee ka badan ayay tahay inaan awood u yeesho inaan aamino inuu Abuuraha-Daryeelaha adduunku uu fuliyo ballammadiisa!

> *"Haddii aynu maragfurka dadka aqbali lahayn, **maragfurka Ilaah baa ka weyn**... kii aan Ilaah rumaysanna, wuxuu Isaga ka dhigay beenaaleh; maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan maraggii uu Ilaah ka marag furay Wiilkiisa."* (1 Yooxanaa 5:9-10)

## MAGACA SHAKHSIYANKA AH EE ILAAHAY

Ilaahay wuxuu inaga doonayaa inaynu Isaga garano, oo aamino, oo magaciisa ugu yeedhno.

> *"Oo kuwa* ***magacaaga yaqaanna*** *way* ***isku kaa hallayn*** *doonaan, Waayo, adigu* ***RABBIYOW****, ma aad dayrisid kuwa ku doondoona."* (Sabuurradii 9:10)

Dad badan ayaa u maleeya in magaca Ilaahay uu keliyoo yahay *Ilaah*—ama *Elohim* (af Cibraani) ama *Allah* (af Carabi [114]) ama *Alaha* (af Aramaa'ik) ama *Dieu* (af Faransiis) ama *Dios* (af Isbaanish) ama *Gott* (af Jarmal) ama wax kasta oo kale oo loo magacaa loogu yeedho luuqadda ay dadkaasi isticmaalaan.

Waa run, oo Ilaahay waa Ilaahay (Sarreeyaha), laakiinse Ilaahay ma *magaciisaa*? Miyaanay noqonayn sidii adigoo yidhaahda magacaygu waa *Bini'aadan*? Bini'aadan baan ahay, laakiinse waxaan kaloo leeyahay magac shakhsiyan ah. Ilaahay waa Ilaahay, laakiinse sidoo kale wuxuu Isagu leehayay magacyo uu Iska muujiyey oo uu inagu martiqaadayo inaynu Isaga Shakhsi ahaan ugu yeedhno.

Dad badan baa aaminsan inuu Ilaahay yahay xoog ama awoodda, sida cuf-is-jiidadka (gravity) ama dabaysha oo kale, ama sida "Awoodda" sida ay filimida taxanaha ee la mala-awaaley soo bandhigaan. Sidan maaha sida uu Baybalku Ilaahay ka aaminsan yahay.

Ilaahay waa Shakhsiga ugu sarreeya ee jira kaas oo doonaya inaynu Isaga u garano si shakhsiyan ah.

Ilaahay inuu shakhsiyan yahay maaha inay Baybalka qaabilsan tahay oo keliya, laakiinse sidoo kale waa caqli gal. Bini'aadanku maaha uun awood ama xoog adduunkan ka jira oo aan shakhsiyad lahayn, Ka wax kasta abuurayna waa sidaas oo kale. Isagu waa Jiritaan Shakhsi ah oo magac shakshi ah leh.

Magaca ugu horreeya ee Ilaahay waxaa markii ugu horreysey lagu sheegay cutubka labaad ee Bilowgii.

> *"Kuwanu waa bilowgii samada iyo dhulka kolkii la abuuray iyaga, maalintii* ***RABBIGA*** *Ilaah ahu sameeyey dhulka iyo samada."* (Bilowgii 2:4)

Ma aragtaa magaca uu Ilaahay Isugu yeedhay?

Magaciisu waa *"RABBIGA."* Ugu yaraan marka af Soomaali ahaan loo turjumo. Waxaynu ku faraxsanaan karnaa inuu Ilaahay si fasiix ah luuqadah aoo dhan ugu hadlo oo uusan

inaga dooneyn inaynu Isaga luuqad gaar ah kula hadallo. Wuxuu inagu martiqaadayaa inaynu Isaga kula hadallo afkeena hooyo, wakhti kasta, meel kasta, inaga oo dhinacaynu rabno u jeedna, oo qalbigeena oo dhan kala hadallo.

**WAAN AHAY**

Afka Cibraaniga, magaca ugu horreeya ee Ilaahay ee *"RABBIGA,"* waxaa loo qoraa iyada oo la isticmaalayo afar xaraf oo shibane (consonants): ***YHWH***. Haddii shaqallo (vowels) lagu daro waxaa loo higgaadiyaa *YaHWeH* ama *YeHoWaH*. Magacu wuxuu ka yimid magac-u-yaalka af Cibraaniga ah ee ah *"ahaansho"* waxaana toos loogu macnayn karaa *"**WAAN AHAY**"* ama *"**WUU YAHAY**."* Wuxuu kani ina barayaa inuu Ilaahay yahay *Mid Jira oo Abadiyan ah oo uusan jiritaankiisa wax Isaga dibedda ka ah u* baahnayn. Magacan shakhsiyanka ah ee Ilaahay waxaa Axdigii Hore la isticmaalay in ka badan 6,500 oo jeer, in aad uga badan magacayada kale ee Ilaahay.

Eeg waxa uu Ilaahay yidhi, markii Muuse oo ku dhex koray Masar oo ilaahyo badan caabuda, uu Ilaahay weydiiyey inuu magaciisa u sheego.

> *"Markaasaa Ilaah wuxuu Muuse ku yidhi, 'ANIGU WAXAAN AHAY KAAN AHAY' oo weliba wuxuu ku yidhi, Waxaad ku odhan doontaa reer binu Israa'iil, '**WAAN AHAY**' baa ii soo kiin diray.'"* (Baxniintii 3:14)

Jiritaan si gaar ah oo shakhsiyan ah u jira oo keliya ayaa odhan kara "Waan ahay." Ilaahay wuxuu doonayaa inay dadku fahmaan inuu Isagu yahay Shakhsi Abadiyan ah oo kaamil ah. Isagu waa *WAAN AHAY*.

Waa *Ka uu Isagu yahay*.

Wakhtigii la soo dhaafay, hadda, iyo mustaqbalku Isaga waxba lama aha kamana beddelayaan. Jiritaankiisu wuu ka sarreeyaa wakhtiga iyo adduunkaba.

Jiritaankiisu waa mid iskiis ah oo wax kasta ka madax bannaan.

Adiga iyo aniguba waxaynu u baahannahay neef, biyo, cunto, hurdo, guri, iyo waxyaalo kale oo nolosha muhiim u ah, laakiinse

Isagu waxba uma baahna. Isaga waa Ka ku jira oo ku socda Awooddiisa. Waa Ka Weyn ee ah *WAAN AHAY*—RABBIGA.

Ilaahay umuu deyn inay bini'aadanku Isaga qeexaan.

Isaga ayaa is qeexaya.

**BOQOLAAL MAGAC**

Jiritaankiisa abadiyanka ah ee uu u jiro sida Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ah, RABBIGU wuxuu ku leeyahay boqolaal magac iyo derajo. Magacyada Ilaahay waxay muujinayaan dabeecaddiisa. Magac kastaa wuxuu inaga caawinayaa inaynu si ka sii fiican u fahanno Ka uu Ilaahay yahay oo u eg yahay. Tusaale ahaan, waxaa Isaga loogu yeedhaa:

> *Abuuraha Samada iyo Adduunka, Bixiyaha Nolosha, Ka ugu Sarreeya, Iftiinka Runta ah, Ka Quduuska ah, Xaakinka Xaqa ah, RABBIGA Quudiya, RABBIGA Bogsiiya, RABBIGA Xaqa ah, RABBIGA Nabaddeena ah, RABBIGA Adhijirkayga, Ilaaha Jacaylka iyo Nabadda, Ilaaha Nimcada oo dhan, Bixiyaha Badbaadada Abadiyanka ah, Ilaaha Dhow…*

Fahankeena hadda ee Abuuraheenu intuu le'eg yahayba, midkeen kastaa waa inuu si is hoosaysiin leh u qirto inuu Ilaahay jiro oo aanu jirin mid Isaga la mid ahi. In kasta oo Isaga si buuxda looma sharixi karo loomana fahmi karo, Isagu wuxuu doonayaa inaynu magaciisa garano oo Isaga aamino, oo jeclaano, oo weligeen u noolaano. Ujeeddadan ayuu Ilaahay lahaa markii uu maalintii lixaad ee abuuritaanka yidhi,

> *"Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna."* (Bilowgii 1:26)

Muxuu tan ula jeedey? Sidee ayaa bini'aadanka la arki karaa u lahaan karaa u ekaanshaha Ilaah aan la arki karin?



# 10

# Abuuritaan Khaas ah

Laba cutub ka hor waxaynu ka soo fekerney odhaahda ugu muhiimsan ee abid la yidhaahdo: *“Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray.”* (Bilowgii 1:1) Tanina waa mid kale:

> *“Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa.”* (Bilowgii 1:27)

Ilaahay, bini’aadanka isaga ayaa u abuuray inuu noqdo ka abuuritaankiisa ugu sarreeya.

**ARAGGA ILAAHAY**

> *“Ilaahna wuxuu yidhi, ‘Aan nin* ***inoo eg*** *ka samayno* ***araggeenna****, oo iyagu ha* ***xukumeen*** *kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo xoolaha, iyo dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan.’* ***Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray****.”* (Bilowgii 1:26-27)

Marka uu Ilaah ninka ka abuurayo *“Araggiisa”* tan macnaheedu *maaha* inay bini’aadankii ugu horreeyey dhinac kasta Ilaahay uga ekaayeen. Mid Ilaahay la mid ahi ma jiro. *“Oo Ilaah nin buu ka abuuray* ***araggiisa****”* macnaheedu waa inay bini’aadanku yeelanayaan qaar ka mid ah dabeecadaha Ilaahay. Bini’aadanka waxaa loo abuuray inuu muujiyo astaamaha Ilaahay

qaarkood. Ilaahay wuxuu ninkii iyo haweeneydii ugu horreeyey siiyey dabeecado iyaga u oggolaanaya inay xidhiidh macne weyn samaynaya oo wanaagsan Isaga la yeeshaan.

Ilaahay wuxuu bini'aadanka ku barakeeyey *caqli*, oo siiyey awood ay su'aalo muhiim ah kaga fekeri karaan, oo si caqliyan ah u fekeri karaan, oo ay fahmi karaan xaqiiqooyinka ku saabsan Abuurahooda.

Ilaahay wuxuu iyaga siiyey *dareeno* sida farxadda iyo ka damqashada dhibaatada dadka kale.

Waxa kale oo iyaga siiyey *doonis*, oo ay ku jirto xorriyad iyo mas'uuliyad ay ku doortaan arrimaha aakhiradooda saamaynta ku leh.

Intaa waxaa dheer, inuu iyaga siiyey awood ay ku wada xidhiidhi karaan—ku hadlaan, ku baaqaan, oo ku heesaan. Wuxuu kaloo iyaga awood u siiyey inay mudo dheer ka fekeraan oo qorsheyaal samaystaan oo kuwaas u meel mariyaan si habaysan. Ta ugu muhiimsan, wuxuu iyaga siiiyey *ruux iyo naf abadiyan* ah si ay u caabudaan oo weligood xidhiidh fiican ula yeeshaan Abuurahooda. Bini'aadanku waxay awoodahan kaga duwan yihiin xayawaanka.

Ilaahay, *Isaga* ayaa bini'aadanka isu abuuray. Ilaahay oo *"Jacayl ah"* (1 Yooxanaa 4:8) sababta uu Ilaahay ninka iyo haweeneyda u abuuray maaha inuu iyaga u *baahnaa*, laakiinse wuu *doonayey*. Dadku waxay heleen oo ka muuqday jacaylka Ilaahay.

## JIDHKA BINI'AADANKA

Iyada oo uu cutubka Bilowgii ugu horreeya ka sheekeynayo taariikhda saxda ah ee ku saabsan sidii uu Ilaahay adduunka abuuray, cutubka labaad wuu faahfaahinayaa, oo gaar ahaan fiiro gaar ah siinayaa abuuritaankii bini'aadanka.

> *"RABBIGA Ilaah ahuna nin buu ka sameeyey ciidda dhulka, dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool."* (Bilowgii 2:7)

In kasta oo uu RABBIGU samada iyo dhulka waxba ka abuuray, wuxuu Isaga doortay inuu ninkii ugu horreeyey ka abuuro

ciid. Culimmada bay'oolojiga ee maanta waxay oggolaadeen xaqiiqada ah: "Haddii si loo fiiriyo jidhka bini'aadanku sidaas cajiib uma aha. Labaatanka wax ee ugu muhiimsan ee uu jidhka bini'aadanku ka samaysan yahay dhammaantood ciidda dhulka ee qalalan ayaa laga helaa."[115]

Iyada oo uu jidhka bini'aadanku ka kooban yahay alaab sidaa caadi u ah oo ciidda dhulka laga helo, haddana waxaa loo sameeyey si mucjiso ah oo cajiib ah oo ay ku jiraan ilaa iyo shan iyo toddobaatan tiriliyoon (75,000,000,000,000) unug oo nool, oo uu mid kastaa shaqo gooni ah qabto.

Unuggu waa qaabka ugu yar ee noole ka kooban yahay. Unuggu aad buu u yar yahay oo waxaa keliyoo lagu arki karaa weyneyso (microscope) aad u xoog badan, sidaas oo ay tahay waxaa kaas ka buuxa malyuumaad qaybood oo shaqaynaya. Unug kastaa wuxuu ka kooban yahay DNA [*walax ku jirta unug kasta oo nool oo xambaarsan firka iyo hiddo raaca (jinsiyadda)*] qalqalloocan oo marka weyneysada lagu fiiriyo ah laba-mitir (lix tallaabo), taas oo ay ku jiraan firka iyo hiddaha (genetic code) ee qofkaas.

Bill Gates, ninka aqoonta kumbuuytarka caanka ku ah ayaa yidhi, "DNA-da bini'aadanku waa sida borogaraamka kumbuyuutarka, laakiinse aad uga sii sarraysa borogaraam kumbuyuutar oo abid la sameeyey."[116] Jidhka bini'aadanku wuxuu ka kooban yahay ilaa 200 oo unug. Qaarkood waxay sameeyaan dareerayaasha sida dhiigga; qaarkood waxay sameeyaan jidhka xubnihiisa jiljilicsan; qaarkoodna intay is kaashadaan bay sameeyaan lafaha adadag. Unugyada qaarkooda baa xubnaha jidhka isku xidhxidha, qaar kalena jidhku siduu u shaqeeyo bay maareeyaan, sida dheef-shiidka, iyo hababka dhalmada.[117]

Ka feker qaabka jidhkaaga iyo sida ay qaybihiisu u shaqeeyaan: lafaha ama qalfoodka oo ka kooban 206 lafood oo la isugu xidhxidhay tahar, seedo, muruqyo, cad iyo timo; ama habka dhiig-wareegga ee xididdada waaweyn iyo iyo kuwa yaryari ay qaadaan dhiigga nafta lafteedu ku jirto. Haddana waxaa jira xiidmaha, caloosha, beerka, iyo kelyaha. Haddana waxaa jira sida uu habka dareenku isugu habaysan yahay oo maskaxdaada ugu xidhan yahay. Ha ilaawin wadnaha aaminka ah ee dhiigga u

qaada jidhka intiisa kale ama indhaha, dhegaha, sanka, afka, iyo carrabka, iyo qaybta hadalka kaa soo saarta, ta dhadhanka, iyo ilkaha! Lugahaaga iyo gacmahaaga aadan ka maarmin! Weligaa Ilaahay ma uga mahadisay farahaaga? Isku day inaad mindi ama qaado isticmaasho xataa farahaaga middood la'aanteed? Ciddiyaha sidaa u yaryari shaqo weyn ayay iyaguna qabtaan…

Mid lala yaabo maaha inuu nebi Daa'uud qoray,

> *"Waan kugu mahadnaqi doonaa, waayo, waxaa la ii sameeyey si cabsi iyo yaab badan, Shuqulladaadu waa yaab badan yihiin, Oo naftayduna taas aad bay u taqaan."*
> (Sabuurradii 139:14)

## NAFTA IYO RUUXA

Si kasta oo uu jidhka bini'aadanku aad cajiib ugu yahay, maaha jidhkooda waxa bini'aadanka ka dhiga kuwo aad khaas ugu ah. Xayawaannada, shimbiraha, iyo kalluunku waxay iyaguna leeyihiin jidhadh cajiib ah. Khaas ahaanta bini'aadanku waxay ku jirtaa *nafta bini'aadanka* iyo *ruuxoodda abadiyanka* ah. Waa nafta iyo ruuxa kuwa ninkii iyo haweeneydii ugu horreeyey ka dhigay abuuritaan khaas ah oo laga abuuray *"aragga Ilaahay."*

Markaa, markii uu Ilaahay dhammeeyey inuu jidhka bini'aadanka ka abuuro ciidda, Isagu *"dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool."* (Bilowgii 2:7) Jidhka uu Ilaahay siiyey Aadan wuxuu ahaa oo keliya guri, ama teendho, oo uu Ilaahay dhex dhigay ruuxa iyo nafta abadiyanka ah ee Aadan.

Ilaahay wuxuu bini'aadanka siiyey jidh si uu u dareemo adduunka isaga ku wareegsan, naf si uu u ogaado naftiisa hoose ee shakhsiyanka ah, iyo ruux si uu u dareensanaado Ilaahay.

Waxay ahayd ay naftu xukunto *jidhka*, ruuxuna uu *nafta xukumo,* Ilaahay Laftiisuna[118] uu noqdo ka u talinaya *ruuxa*.

> *"Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo runta."* (Yooxanaa 4:24)

## WAXAA LOO ABUURAY UJEEDDO

Ilaahay wuxuu bini'aadanka u abuuray sidii saddex-midnimo oo kale, oo isku xidhay *"ruuxa, nafta, iyo jidhka"* (1 Tesaloniika 5:23) Isaga oo bini'aadanka suurtoggal uga dhigaya inay saaxiibtinimo dhow la yeeshaan Abuurahooda. Ilaahay wuxuu bini'aadanka siiyey nolol oo karaamadaa sare daraadeed waxay ahayd inay u noolaadaan Abuurahooda iyaga leh caabudaan oo ammaanaan.

> *"Mid kasta oo **magacayga** loogu yeedho, oo aan u uumay **sharaftayda aawadeed** ... Dadkaan **abuurtay** si ay **ammaantayda** u muujiyaan."* (Ishacyaah 43:7,21)

Bini'aadanka waxaa loo abuuray inay muujiyaan ammaanta Ilaahay.

Adduunka waxaa loo abuuray bini'aadanka, laakiinse bini'aadanka waxaa loo abuuray Ilaahay. Ujeeddada Ilaahay waxay ahayd inay bini'aadankii ugu horreeyey Isaga gartaan, ku faraxsanaadaan, oo ay weligood jeclaadaan. Waana isla ujeeddada ta uu adiga iyo aniga inoo abuuray.

> *"Waa inaad **RABBIGA Ilaahaaga ah** ka **jeclaataa qalbigaaga** oo dhan, iyo **naftaada** oo dhan, iyo **caqligaaga** oo dhan, iyo **xooggaaga** oo dhan."* (Markos 12:30)

## BII'AD AAN IIN LAHAYN

Kaddib markii uu Ilaahay abuuray Aadan, wuxuu Isagu qorsheeyey oo abuuray beer aad u raaxo badan oo la odhan jirey *Ceeden*.

> *"Oo RABBIGA Ilaah ahu beer buu ka beeray xagga bari ee Ceeden; oo halkaasuuna geeyey ninkii uu sameeyey. RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu dhulka ka soo bixiyey geed kasta oo indhaha u roon, oo cunto ku wanaagsan; beerta dhexdeedana wuxuu ka soo bixiyey geedkii nolosha iyo geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta. Ceedenna webi*

> *baa ka baxay inuu beerta waraabiyo; halkaasuuna ku kala qaybsamay, wuxuuna noqday afar madax."*
> (Bilowgii 2:8-10)

Ceeden, oo qiyaastii ku taalley waddanka hadda loo yaqaan Ciraaq[119], waxay ahayd beer aad u weyn oo wax kasta oo wanaagsan laga helayo, oo aan quruxdeeda la soo koobi karin. Webi biyo xareed ah leh ayaa beertaa waraabin jirey, kaas oo ay jiinkiisa ka buuxaan geedo nooc kasta oo midho ah leh. Nooc kasta oo midho ah, ubaxyo udgoon, geedo dhaadheer iyo dhul cagaaran oo qurux badan. Nooc kasta oo xayawaan, shimbiro, iyo cayayaan ah ayaa ku noolaa beertaa quruxda badan, oo waxaa ka buuxay nooc kasta oo dhagxaanta qaaliga ah sida dahabka. Hubaal, Ilaahay, Aadan *"wax kasta si deeqsinimo ayuu u siiyey si uu ugu raaxaysto."* (1 Timoteyos 6:17)

Ilaahay wuxuu beerta badhtankeeda ku abuuray laba geed oo khaas ah: geedka nolosha iyo geedka aqoonta wannaagga iyo xumaanta.

Macnaha Ceeden waa *raaxo*. Ilaahay wuxuu bini'aadanka u abuuray guri cajiib ah oo ay ku raaxaystaan, laakiinse raaxada ugu weyni waxay ahayd inuu bini'aadanku xidhiidh wanaagsan Abuurahooda kula raaxayso ama la lahaado.

Ma jiro wax ka fiican in Ilaahay shakhsi ahaan loo barto oo lala joogo. *"**Hortaada** farxad baa ka buuxda, **Gacantaada midigna** nimco baa ku jirta weligeed."* (Sabuurradii 16:11)

## ADEEG QANCIYA

Markii ay beertii diyaarka noqotay, RABBIGU ninkii ayuu dhex dejiyey. Ilaahay muu weydiin Aadan inuu doonayey inuu halkaa ku noolaado iyo in kale. Ilaahay waa Abuuraha ninka, oo ka dhigaysa inuu Isagu leeyahay bin'aadanka. Ilaahay wuu og yahay waxa bini'aadanka u wanaagsan oo midna kalama tashanayo waxa uu Isagu samaynayo ama qabanayo.

> *"RABBIGA Ilaah ahuna ninkii wuu kaxeeyey oo wuxuu geeyey beer Ceeden inuu falo oo dhawro."* (Bilowgii 2:15)

Ilaahay wuxuu Aadan mas'uuliyado ka siiyey gurigiisa cusub.

Ta ugu horraysa, *"ka shaqeeyo"* beerta, laakiinse iyadoo aan hawl, dhidid, iyo daal midna kaga baxayn. Waxay ahayd shaqo uu ku raaxaysanayey oo aan culaab ku ahayn, maadaama ay wax kastaa wanaagsanaayeen. Ma jirin qodax wax mudaysa ama geedo qashin oo ay ahayd in beerta laga falo.

Ta labaadi waxay ahayd, *"inuu dhawro"* beerta. Ma waxaa jira wax khatar ah oo odhaahdan ugu dambaysa ku dhex qarsoon oo adduunka ku dhex gabanaya?

Su'aashaas dhowaan ayaa laga jawaabi doonaa.

## QAYNUUN SAHLAN

Maadaama uu bini'aadanku qof shakhsiyad leh ahaa ee uusan ahayn dabadhilif oo kale, wuxuu kaloo Aadan siiyey hal qaynuun oo fasiix ah oo uu addeeco.

> *"RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh, 'Geed kasta oo beerta ku yaal* ***wax baad ka cuni kartaa****: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta* ***waa inaanad waxba ka cunin****: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."* (Bilowgii 2:16-17)

Ilaahay wuxuu amarkan siiyey ninka ka hor intuusan weli haweeneydii abuurin. Ilaahay wuxuu Aadan u doortay inuu madax u noqdo bini'aadanka oo Aadan buu saaray mas'uuliyadda ah in halkaa amar la adeeco.

## HAWEENEYDII UGU HORREYSEY

Markii ku xigtey Ilaahay wuxuu abuuray haweeney. War tani maxay abuuritaan cajiib ah ahayd!

> *"Oo RABBIGA Ilaah ahu wuxuu yidhi, 'Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado. Waxaan u samayn doonaa mid caawisa oo ku habboon' ... Oo RABBIGA Ilaah ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii, kolkaasuu gam'ay, kolkaasuu wuxuu ka bixiyey feedhihiisii middood, meesheediina hilib buu ku awday. Oo feedhii RABBIGA Ilaah ahu ka*

> *bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey, oo wuxuu iyadii u keenay ninkii. Ninkiina wuxuu yidhi, 'Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa 'Naag', maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin.' Sidaas daraadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa: oo waxay noqonayaan isku jidh. Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo naagtiisuba, mana ay xishoonaynin."* (Bilowgii 2:18, 21-25)

Markaa Ilaahay ayaa qalitaankii ugu horreeyey sameeyey, Isaga oo Aadan feedhiisii uga samaysanaya xaas aad u qurux badan, oo Ilaahay Laftiisa ayaa xaaskiisa guddoonsiiyey.

War sidee buu Aadan ugu farxay xidhiidhkiisii jacaylka iyo is weheshiga ahaa ee *"caawisadan"* uu Ilaahay isaga siiyey! Nin cilmiga Baybalka ku xeeldheer oo Matthew Henry la odhan jirey ayaa qoray, "Haweeneyda waxaa laga abuuray… Aadan dhinaciisa; lagama abuurin madaxiisa inay isaga u taliso, lagamana abuurin cagihiisa si uu iyada ugu tunto, laakiinse dhiniciisa si ay isaga ula sinnaato, cududdiisa hoosteeda si uu iyada u ilaaliyo, wadnihiisa agtiisa si uu iyada u jeclaado."[120]

Sida ninka oo kale, haweeneydana waxaa laga abuuray *u ekaanshaha iyo aragga Ilaahay*, oo loo abuuray inay muujiso dabeecadda RABBIGA oo ay weligiis xidhiidh ruuxiyan ah Isaga kula midowdo. Iyada oo uu Abuuruhu ninka iyo naagta u sameeyey maamul iyo shaqooyin khaas ah oo midkood kastaa qabto, haddana wuxuu caddeeyey inay ka siman yihiin qiimaha iyo muhiimadda.

Maanta, bulshooyin badani waxay haweenka ula dhaqmaan sidii ay yihiin hanti ama alaab, taas oo liddi ku ah ujeeddadii Ilaahay. Waxaan anigu arkay dadka oo u dabbaaldegaya marka uu wiil u dhasho, oo niyad jab muujinaya marka ay gabadhi u dhalato. Nimanka qaarkood ayaa daryeel dheeraad ah siiya xoolahooda in ka badan xaaskooda. Bulshooyin kalena kuwaas ayay aad uga duwan yihiin, oo waxay doorteen inay iska indhotiraan shaqooyinka iyo mas'uuliyadaha khaaska ah uu Ilaahay ninka iyo naagta u kala sameeyey. Labadan bulshoba haweenka sharafta ayay ka qaadaan.

## AROOSKII UGU HORREEYEY

U fiirso ka arooskii ugu horreeyey abaabuley.

Kaasi waa *RABBIGA*. Qorniinku wuxuu odhanayaa, *“**Isagu** wuxuu iyadii u keenay ninkii.”* Isla bilowgiiba Abuuruhu gacanta ayuu kula jirey nololaha dadka uu Isagu isu abuuray. Isagu waa Ka sheegay *“nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa: oo waxay noqonayaan **isku** jidh.”* Erayga af Cibraaniga ah ee *“mid”* waa *echad*, oo wuxuu tusayaa midnimo iyo isku duubni. Ilaahay wuxuu lamaaanihii ugu horreeyey ugu talogalay inay xidhiidh fiican isla yeeshaan oo ay isku faraxsanaadaan oo isu adeegaan *oo* ku faraxsanaadaan inay ISAGA u adeegaan. Wuxuu Isagu doonayey inay ninka iyo naagtu noloshooda udub dhexaad uga dhigaan Abuurahooda iyaga leh—ha ahaato shaksi ahaan ama ha ahaato hantidooda e.

Nasiibdarro, adduunka aynu maanta ku noollahay dadka intooda badani way diidan yihiin sidii uu Ilaahay horraantii guurka u dejiyey oo waxay jaahil ka yihiin sida uu guurka hal nin iyo hal xaas u wanaagsan yahay sannadba sannadka ka dambeeya. Taas daraadeed, waxay dadkaasi ku fashilmaan inay yeeshaan ama tusaan xidhiidh jacayl iyo aaminimo ku dhisan oo ah ka uu RABBIGU ilaa iyo bilowgii ninka iyo xaaskiisa la doonayey.

Guurka uu Ilaahay ninka iyo xaaskiisa u dejiyey wuxuu tusayaa qalbigiisa uu jacaylka xaddhaafka ahi ka buuxo. Ilaahay ujeeddadiisu waa guurku noqdo mid weligiis ah oo ka turjumaya xidhiidhka ruuxiyanka ah ee dhow, ee cajiibka ah ee koraya ee uu dadka ku martiqaadayo inay Isaga la yeeshaan hadda iyo weligeed.

Ma aragtaa sida uu Ilaahay oo guurka dejiyey kaas u qeexayo? *“Sidaas daraadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna **la joogayaa** naagtiisa: oo waxay noqonayaan **isku jidh**. Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo naagtiisuba, **mana ay xishoonaynin.**”*

Qorshaha Ilaahay ee guurka ku aaddan waa inay lamaane xag ujeeddo iyo xag jidhba ka midaysnaadaan, oo ay ceebna xor ka ahaadaan. Marka qorshaha kan ka sii sarreeya la eegona, qorshaha Ilaahay wuxuu ahaa inay iyagu si ceeb la’aan ah *ruuxiyan* weligood ISAGA ula midaysnaadaan.

## BINI'AADANKA OO LA SIIYEY AWOODDA TALINTA

Kaddib markii uu Ilaahay naagtii guddoonsiiyey ninkii, Isagu si toos iyo shakhsiyan ah ayuu iyaga ugula hadlay. Waxay u eg tahay inuu Ilaahay iyaga ugu muuqday hab ay Isaga toos ugu arki karayeen, maadaama uu Qorniinku ka hadlayo *"RABBIGA Ilaaha ah, isagoo beerta dhex* ***socda****."* (Bilowgii 3:8)

Hadda bal mala-awaal Ilaahay oo ninka iyo xaaskiisa geynaya buur halkaas oo ay hoos uga soo eegayaan abuuritaankiisii cusbaa ee quruxda badnaa…

> *"Oo Ilaah waa barakeeyey iyaga; oo Ilaah wuxuu iyaga ku yidhi, '****Wax badan dhala oo tarma, oo dhulka ka buuxsama, oo ka sara mara dhulka, oo xukuma*** *kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo wax kasta oo nool oo dhulka kor dhaqdhaqaaqa. Oo Ilaah wuxuu yidhi, 'Bal eeg, waxaan idin siiyey geed kasta oo yar oo iniino dhala, oo ku yaal dhulka dushiisa oo dhan, iyo geed kasta oo weyn, kaasoo midho leh, iniinona dhala; oo waxay idiin noqon doonaan cunto.'"* (Bilowgii 1:28-29)

Ilaahay wuxuu Aadan iyo Xaawa[121] iyo farcankoodii siiyey talada abuuritaankiisa. Wuxuu iyaga ku sharfay oo mas'uul uga dhigay inay noqdaan "lamaanihii bilowga" u ahaa bini'aadanka. Wuxuu iyaga awood u siiyey inay dhammaan abuuritaanka xukumaan. *Xukunka micnihiisu* waa *awoood iyo talin.* Aadan iyo Xaawa iyo farcankoodu waxay ahayd inay isticmaalaan, daryeelaan, oo si xigmad leh u maamulaan adduunka. Waxay ahayd inay kaas isticmaalaan ee may ahayn inay kharibaan.

Abuuruhu wuxuu adduunka u sameeyey hab ku habboon bin'aadanka. Bilowgii, adduunku wax kasta oo bini'aadanku u baahnaa wuu kala shaqaynayey oo siinayey. Aadan iyo Xaawa marna kamay welwelin meesha ay berito cuntadooda ka heli doonaan. Waxay keliyoo u baahnaayeen inay gacantooda fidiyaan oo midho macaan ka goostaan geedihii badnaa. Carro adag, geedo qashin ah iyo qodxan, jirro iyo dhimasho midna muu jirin. Dhinac kasta oo abuuritaanka ahi wuxuu adeecayey Aadan iyo Xaawa. Ninka ayaa xukumayey.

Abuuritaanku wuxuu ninka adeecayey ilaa iyo intii uu ninku ka adeecayey Abuurihiisa.

## ILAAHAY IYO DADKA OO JAAL AH

Isla bilowgiiba, RABBIGA ujeeddadiisu waxay ahayd inay bini'aadanku xidhiidh dhow oo wanaagsan Isaga la lahaadaan. Waa sababta uu Aadan iyo Xaawa u siiyey *niyado iyo qalbiyo* (fahan iyo dareeno) ay Isaga ku fahmaan oo ku jeclaadaan, iyo xorriyad *doorasho* (doonis) ay ku go'aansadaan inay Isaga aaminaan oo addeecaan ama aanay sidaas samayn. Arrintan doorashada ahi aad bay u muhiimsanayd oo loogu baahnaa, maadaama aan jacaylka iyo daacadnimada dhabta ah marna la khasbi karin. Ilaaha Weyni wuxuu Aadan iyo Xaawa kala xisaabtami dooney doorashooyinkooda.

Weligaa tan ogow: in kasta oo uu Abuuraha adduunka iska lihi uusan marna wax ama qof u baahnayn, haddana Isagu talada kama weyna.

Isla siday aynu innagu u dooneyno in la ina aqoonsado oo la ina jeclaado, ayuu Ilaahayna u doonayaa inay dadka uu Isagu abuurtay u gartaan oo u jeclaadaan. Tani waxay qayb ka tahay dabeecaddiisa abadiyanka ah, inuu doonayo inuu saaxiibtinimo xagga qalbiga ah la yeesho kuwa uu Isagu *"Arraggiisa"* ka abuuray.

Anigu waxaan maqlaa dad leh, "Anigu waxaan ahay addoonka Ilaahay, oo keliya!" Waxaan qirsanahay inay sharaf weyn tahay inuu qofku Ilaahay u adeego sida uu midiidin daacad ahi sayidkiisa ugu addeego, laakiinse Erayga Ilaahay wuu cad yahay: talogalkii Ilaahay marna ma ahayn inuu ninku ahaado *"Addoon, waase **wiilkiisa,**"* (Galatiya 4:7) ama cunnuggiisa, waayo *"**Addoonku** guriga kuma sii jiro, **wiilkuse** waa ku sii jiraa weligiis."* (Yooxanaa 8:35) Ilaahay, oo qalbigiisa si bini'aadanku fahmi karo u muujinaya, wuxuu inoo sheegayaa waxa uu Isagu qorsheeyey si aynu dhammaanteen Isaga u aamino:

> *"Waxaan idiin ahaan doonaa Aabbe, Oo idinkuna waxaad ii ahaan doontaan wiilal iyo gabdho, ayuu RABBIGA Qaadirka ahu leeyahay."* (1 Korintos 6:18)

Waxaa intaas sii dheer, Ilaahay jacaylka uu innaga inoo qabo muu barbardhigin jacaylka ay waalidku carruurtooda u qabaan oo keliya, laakiinse Abuuraheenu tusaalahan intaas wuu ka sii sarraysiiyey, oo wuxuu qoto dheerida iyo adkaanta xidhiidhka uu dadkiisa la leeyahay ku meteley xidhiidhka uu nin la leeyahay xaaskiisa uu jecel yahay.

> *"Oo waxay maalintaas noqon doontaa 'inaad iigu yeedhid, Ninkaygiiyow', oo aadan mar dambe iigu yeedhin, 'Sayidkaygiiyow,' ayaa RABBIGU leeyahay.... Oo waan ku guursan doonaa inaad weligaaba tayda ahaatid. Haah, oo waxaan kugu guursan doonaa xaqnimo, iyo caddaalad, iyo raxmad, iyo naxariis. Oo xataa waxaan kugu guursan doonaa daacadnimo, oo adna RABBIGAAD ogaan doontaa."* (Hoosheeca 6:16,19-20)

Mala-awaal xidhiidhka ugu fiican ee ka dhex jiri kara laba qof oo adduunka ku nool, dabadeedna kaas ka feker: Xidhiidhka uu Ilaahay inagu martiqaadayaa inaynu Isaga la yeelano si aan la soo koobi karin ayuu uga wanaagsan yahay oo uga sarreeyaa xidhiidh kasta oo bini'aadan adduunka jooga inay yeeshaan ka suurtagal ah.

Haddii aadan xidhiidh shakhsiyan ah la lahayn Abuurahaaga, noloshaadu waa mid aan kaamil ahayn oo waxa ugu weynu ka dhiman yihiin. Maalka aad adduunka u haysatid si kasta ha u badnaado, raaxo, madaxnimo, dad, iyo salaad kastaa ma buuxin karto meeshaa naftaada ka madhan. RABBIGA oo keliya ayaa geli kara oo buuxin kara qolkaa qalbigaaga ah ee madhan ee uu Isagu isugu talogalay.

> *"Isagu wuxuu dhergiyaa nafta aad wax u doonaysa, Oo nafta gaajaysanna wuxuu ka dhergiyaa wanaagga."* (Sabuurradii 107:9)

Kani waa qodob ay tahay inuusan ku dhaafin: Ilaaha keliya ee runta ahi kuma farxo *ficillo diimeed*, laakiinse wuxuu ku farxaa *xidhiidh dhab ah* oo u la lahaado kuwa Isaga aamina.

Heer kasta ha noqdee, Ilaahay wuxuu weligiis raalli ka yahay oo ku farxay xidhiidh uu la lahaado:

- LAFTIISA. Weligeed iyo weligeed, xidhiidh jacayl ah ayaa ka dhex jirey Aabbaha Abadiyanka ah, Wiilka Abadiyanka ah, iyo Ruuxa Quduuska ah ee Abadiyanka ah. Tusaale ahaan, Qorniinku wuxuu sheegayaa Wiilka oo ku odhanaya Aabbaha, *“Aabbow… Adaa i jeclaa intaan dunida la aasaasin.”* (Yooxanaa 17:24)
- MALAA’IGAHA. Isagu wuxuu malaa’igaha u abuuray inay Isaga gartaan oo jeclaadaan, oo weligood maamusaan ammaantiisa weyn. *“Malaa’igaha Ilaah oo dhammu isaga ha caabudeen.”* (Cibraaniyada 1:6)
- DADKA. Ilaahay wuxuu bini’aadanka u abuuray inay maalin uun xidhiidh aad u dhow la yeeshaan Abuurahooda kan oo xataa ka sii fiican ka ay malaa’iguhu Isaga la leeyihiin. Boqor Daa’uud ayaa qoray: *“Markaan ka fiirsado samooyinka farahaaga lagu sameeyey, Iyo dayaxa iyo xiddigaha aad amartay, bal waa maxay dadku oo aad u xusuusataa isaga? Iyo wiilka aadanaha oo aad u soo booqataa? Waayo, waxaad isaga wax yar ka hoosaysiisay malaa’igaha, Waxaanad taaj uga dhigtay ammaan iyo murwad.”* (Sabuurradii 8:3-5) Ilaahay wuxuu doonayey inuu dadkiisa la jiro. Laakiinse, waa in marka hore ninka la imtixaamaa.

## MAALINTII 5: ABUURITAANKII WUU DHAMMAADAY

Qisada abuuritaanku waxay ku soo gabagaboobeysaa warkan muhiimka ah:

> *“Oo Ilaah wuxuu arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, **aad bay u wanaagsanaayeen**. Waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii lixaad. Samada iyo dhulkuna way **dhammaadeen**, iyo waxa badan ee ku jira oo dhammuba. Maalintii toddobaadna Ilaah wuu **dhammeeyey** shuqulkiisii uu sameeyey; oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu **sameeyey** oo dhanba.”*
>
> (Bilowgii 1:31; 2:1-2)

Shaqadii Ilaahay ee abuuritaanku way *dhammaatay*. Hadda waxaa la gaadhey wakhtigii lagu raynrayn lahaa wax kasta oo

uu Isagu sameeyey. RABBIGU muu nasan maalintii toddobaad waayo wuu daalanaa. Baahi-laawaha abadiyanka ahi kaas oo magaciisu yahay *"WAAN AHAY"* marna ma daalo. Ilaahay wuu nastay (shaqadii buu joojiyey) waayo hawshiisii abuuritaanku way ***dhammaatay***.

RABBIGU maqsuud buu ahaa.

Wax kastaa way kaamilmeen.

Bal ka feker adduun ay ku noolaayeen laba qof oo aan iin lahayn oo lagu mannaystay inay xidhiidh koraya la lahaadaan Abuurahooda aan iinta lahayn. Sidan bay arrimmuhu bilowgii ahaayeen.

Maanta, adduunkeena daaley wuu ka fog yahay mid aan iin lahayn. Shar iyo dembi, murugo iyo xanuun, faqiirnimo iyo gaajo, nacayb iyo dagaal, iyo cudur iyo dhimasho ayaa meel kasta ka jira.

Maxaa ku dhacay adduunkii Ilaahay ee aan iinta lahayn?

Taasi waa qaybta ku xigta ee qisadeena.



# 11

# Bilowgii Sharka

*"Naftaydoy, RABBIGA ammaan, Oo ha illoobin wanaagga uu kuu sameeyo oo dhan… **Malaa'igihiisa… eraygiisa** oofiya Oo codka hadalkiisa maqlow, RABBIGA ammaana. RABBIGA ammaana, **ciidammadiisa oo dhammow**… wuxuu doonayo sameeyow. **Shuqulladiisa oo dhammow**, RABBIGA ku ammaana meel kasta oo **dowladnimadiisa** ahba…!"*

—Boqor Daa'uud (Sabuurradii 103:2, 20-22)

Ka hor intuu uusan Ilaahay adduun samayn, Isagu wuxuu abuuray ruuxyo aad u badan oo la yidhaahdo *malaa'igo*. Ilaahay wuxuu kuwan ugu talogalay wanaaggiisa iyo caabudaadiisa. Iyagu waxay ahaayeen *"Rabbiga **Ciidammadiisa,**"* oo loogu talogalay inay weligoodba gartaan, u adeegaan, ku farxaan, oo sarraysiiyaan Abuurahooda iyaga Iska Leh. Ilaahay umuu abuurin inay malaa'iguhu xayawaanka u ekaadaan, kuwaas oo dareen ku abuuran ku socda ama ku dhaqma. Sida bini'aadanka oo kale, Ilaahay wuxuu malaa'igaha siiyey mas'uuliyad garasho oo ay iyagu iskood ugu doortaan inay addeecaan Eraygiisa, oo sameeyaan doonistiisa, oo magaciisa ammaanaan iyo in kale.

## KII NUURAYEY

Ruuxa ugu awoodda weyn uguna sarreeya waxaa lagu magacaabi jirey *Lucifer*, oo macnihiisu yahay, *kii nuurayey*.[122]

Malaggan xariifka ah waxaa lagu qeexay *"dhammaystirkii kaamilnimada, oo ay ka buuxday xigmad, quruxdiisuna kaamil ahayd."* (Yexesqeel 28:12)

In kasta oo uusan Ilaahay faahfaahinta oo dhan muujin, waxaynu ognahay inuu malaggan sidaas u awoodda iyo sharafta weyni sabab u ahaa in sharka iyo xumaantu adduunka soo galaan.

Ilaahay wuxuu Lucifer ka odhanayaa,

> *"**Shar ayaa adiga lagaa helay**! ...Qalbigaagu quruxdaaduu kor isula qaaday.... Waxaad qalbigaaga iska tidhi, '**Anigu** waxaan kori **doonaa** samada, oo carshigaygana xiddigaha Ilaah waan ka sara marin **doonaa**, oo weliba waxaan ku fadhiisan **doonaa** buurta shirka ee darafka woqooyi ku taal. Waxaan kori **doonaa** daruuraha sare korkooda, oo waxaan noqon **doonaa** sida Ilaaha ugu sarreeya oo kale.'"* (Yexesqeel 28:15, 17; Ishacyaah 14:13-14)

Halkii uu Ilaahay ka ammaani lahaa oo ka adeeci lahaa, shan jeer ayuu Lucifer odhanayaa *"Anigu sidaasaan noqon doonaa!"* Isagu wuxuu doonayey *"inuu noqdo sida Ilaaha ugu Sarreeya."*

Waxaa isaga indho-sarcaad ku riday quruxdiisa iyo caqli badnaantiisa, oo wuxuu ilaaway KA isaga siiyey wax kasta oo uu haystey, sidaas daraadeed malaggani naftiisii ayuu khiyaaneeyey oo wuxuu u maleeyey inuu Ilaahay ka xigmad badan yahay. Wuxuu doonayey inay malaa'igaha kale *isaga* ammaanaan halkii ay Abuuraha ka ammaani lahaayeen, kaas oo keligiis u qalma caabudaad iyo ammaan.

Lucifer wuxuu kaloo saddex-meeloodow meel malaa'igihii jannada ku qanciyey inay fallaaganimadiisa ku taageeraan.[123] Markaa, *kii nuurayey* wuxuu qorsheeyey inuu Ilaahay xukunka ka tuuro oo uu isagu ku fadhiisto carshiga jannada.

Dembi ayaa soo galay adduunkii Ilaahay.

## WAA MAXAY DEMBIGU?

Erayga Ilaahay ayaa dembiga inoo qeexaya.

- *"Dembigu wuxuu yahay **caasinimo**."* (1 Yooxanaa 3:4)

- *"**Xaqdarrada** oo dhammu waa dembi."* (1 Yooxanaa 5:17)
- Dembigu waa inaad *"garanayso inay tahay inaad wax wanaagsan samayso, laakiinse **aadan samayn**."* (Yacquub 4:17)
- Dembigu wuxuu sababaa *"**damac xun** oo kasta."* (Rooma 7:8)
- Dembigu waa *"ammaanta Ilaah oo la **gaadhi waayo**."* (Rooma 3:23)

*"Ammaanta Ilaahay"* waxaa loola jeedaa daahirsanaanta iyo iin la'aanta buuxada ee Ilaahay. In *"la gaadhi"* waayo taas macnaheedu waa inaynu ka soo bixi weyney xaqnimadii kaamilka ahayd ee uu Ilaahay inaga rabey.

Dembigu waa in lagu guuldarraysto in si buuxda loogu noolaado sida ku habboon dabeecadda Ilaahay ee quduuska ah iyo doonistiisa.

Haddii hoos loo sii dhaadhacana, ***dembigu*** waa doorasho uu abuuritaan ama malaa'ig ha ahaado ama bini'aadan e, naftiisa ku sarraysiiyo oo uu *"jidkiisa u leexdo"* (Ishacyaah 53:6), halkii uu ka sarraysiin lahaa Ilaahay oo uu jidkiisa raaci lahaa.

In fikir ahaan iyo ficil ahaanba Ilaahay laga madaxbannaadaa waa ***dembi***. Waa jidkii uu Lucifer doortay iyo malaa'igihii kale ee isaga taageeray. Intii ay Abuurahooda ku hoos jiri lahaayeen, iyagu qalbigooda ayay iskala weynaadeen oo waxay u leexdeen jidkooda.

> *"Ku alla kii **qalbiga ka kibirsanu** RABBIGA waa u karaahiyo, Waxaan aad idiin ku xaqiijinayaa inaan isagu taqsiir la'aan doonayn."* (Maahmaahyadii 16:5)

*Karaahiyo* waa eray xoog badan, oo macnihiisu yahay *mid sharafdarro ku dhacday, ficil wasakh ah, kharibaad,* ama *bidcinimo*. Ilaahay wuxuu karaahiyeystaa naf-jeclaysiga. Isla weynaantu waa dembi.

Sida uu doofaarka bakhtiga ah ee urayaa guriga la soo geliyo u qudhmuuniyo ayuu dembigu Ilaahay hortiisa ugu qudhmuun yahay. Xataa hal dembi Ilaahay ma oggolaanayo, isla sida aadan adigu u oggalaanayn in hal dhibic oo sun ah shaaha laguugu daro. Maxaynu innagu u oggolaan weyney in neef qudhmay gurigeena la soo geliyo ama hal dhibic oo sun ah shaah la inoogu daro? Waxyaalahaasi dabeecaddeena ayay liddi ku yihiin.

Dembigu wuxuu liddi ku yahay dabeecadda Ilaahay.

> *"RABBIYOW, Ilaahaygiiyow, kayga Quduuska ahow, sow adigu weligaaba ma aad jiri jirin? …Waxaad tahay mid indhihiisu ka sii daahirsan yihiin inay wax shar ah eegaan, oo qalloocna ma fiirin kartid."* (Xabaquuq 1:12-13)

## SHAYDAANKA, JINNIYADA, IYO NAARTA

Maadaama uu Lucifer doonayey inuu ammaanta Ilaahay xado oo uu awooddiisa wiiqo, Ilaahay wuxuu Isaga ka qaaday awooddii sare oo uu lahaa oo ka soo saaray jannada, isaga iyo malaa'igihii kale ee taageeray. Magacii Lucifer waxaa loo beddeley ***Shaydaan*****,** oo macnihiisu yahay *cadow.* Waxaa kale oo isaga loogu yeedhaa ***ibliiska***, oo macnihiisu yahay *been-ku-dacweeye.* Malaa'igihii kale ee dembaabey waxay noqdeen ruuxyo shar leh ama ***jinniyo***, oo macnihiisu yahay *kuwa og*.

Shaydaanka iyo jinniyadiisu way yaqaanaan ka uu Ilaahay yahay oo hortiisa way ku gariiraan baqdin aawadeed; sidaas oo ay tahay waxay aad ugu dadaalayaan sidii ay Isaga uga adkaan lahaayeen.

Laakiinse iyagu ma guuleysan doonaan.

Qorniinku wuxuu ka sii waxyoonayaa, in maalin hore loo qoondeeyey, Shaydaanka iyo jinniyadiisa lagu tuuri doono *"dab weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey."* (Matayos 25:41) *"Dabkan Weligiis ahi"* waa meesha dhabta ah ee uu Ilaahay ku xidhayo dhammaan kuwa ka baydhay sifooyinkiisa quduuska ah.

Axdiga Cusub ee afka Giriigga ah, mid ka mid ah erayada loo isticmaalay qeexidda meesha lagu ciqaabayo kuwa Shaydaanka raaca waa *gehenna*, oo badanaa loo turjumo *naar*.[124] Eraygani waxaa si toosa looga soo xigtey *gubidda meel qashin lagu uruuriyo*.

Meel aan ka fogeyn meeshii aan aniga iyo xaaskaygu carruurtayada ku koriney ee waddanka Sinigaal waxaa ku taalley meel ay dadku ku tuuraan qashinkooda. Qashinkaas badanaa qiiq ayaa ka bixi jirey iyada oo ay dadka agtiisa deggani isku deyi jireen inay gubaan qashinkaa uraya. Wax kasta aan qiimo lahayn halkaa ayaa lagu tuuri jirey.

Naartu waa meesha uu Ilaahay "qashinka ku tuuro" meeshaas oo kuwa dunuubtooda ku dhintay hadda lagu hayo. Maalin uun, Shaydaanka, jinniyadiisa, iyo dhammaan kuwa naarta ku jira waxaa dhammaantood lagu tuuri doonaa meesha loogu talogalay xukunka ugu dambeeya oo loogu yeedho *badda dabka iyo baaruudda ah.*[125]

Dembigu weligiis ma sii kharibi doono adduunka Ilaahay.

## UJEEDDADA SHAYDAANKA

Shaydaanka iyo jinniyadiisu weli kuma jiraan badda dabka ah. Laakiinse, adduunka ayay ka dhex shaqaynayaan. Qorniinku wuxuu Shaydaanka ugu yeedhayaa *"madaxda xoogga hawada oo ah ruuxa* ***haatan*** *ka dhex shaqaynaya carruurta caasinimada."* (Efesos 2:2)

Waxaa muhiim ah in la fahmo inuu Shaydaanku aad u awood badan yahay, laakiinse isagu awood oo *dhan* ma leh. Isagu waa abuuritaan kaas oo weliba dembaabey. Shaydaanku ma gaadho RABBIGA. Shaydaanka waxaa loogu yeedhaa *"ilaaha facan."* Ujeeddadiisuna waa inuu dadka ka hor joogsado inay gartaan Ilaaha keliya ee runta ah oo ay oggolaadaan sababtii iyaga loo abuuray.

> *"Laakiin injiilkayagu [warka wanaagsan ee badbaadada ee Ilaahay] hadduu daboolan yahay, wuxuu ka daboolan yahay kuwa lumaya.* ***Ilaaha wakhtigani wuu ka indho tiray*** *maanka kuwa aan rumaysanaynin, inaan iftiinka injiilka… u ifin iyaga."* (2 Korintos 4:3-4)

Waa maxay ujeeddada Shaydaanku? Inuu dadka maankooda daboolo oo uu iyaga ka hor joogsado inay maqlaan oo rumeeyaan akhbaarka Ilaahay. Isagu dagaal buu Ilaahay kula jiraa. Waa dagaal uusan Shaydaanku ku guuleysan karin, laakiinse intii karaankiisa ah ayuu isku deyayaa inuu dadka ugu badan la dego. Wuxuuna rajeynayaa inuu adigana kugu darsado.

Isaga oo og in Aadan iyo Xaawa loo abuuray ammaanta iyo wanaagga Ilaahay, Shaydaanku wuxuu maleegey inuu wasakheeyo xidhiidhkii saaxiibtinimada ahaa ee ka dhexeeyey Ilaahay iyo bini'aadanka. Dabcan, RABBIGA Ilaaha ah oo og *"qalbiga*

*waxyaalihiisa qarsoon"* (Sabuurradii 44:21), wuu ogaa wax kasta oo uu Shaydaanku qorshaynayey inuu sameeyo iyo wax kasta oo dhici dooney.

Ilaahayna qorshihiisa ayaa u dhignaa.

## HAL AMAR

Ilaahay wuxuu bini'aadanka siiyey xorriyadda ah inay doortaan inay Abuurahooda jeclaadaan, ammaanaan, oo addeecaan iyo in kale. Jacaylka runta ah lama khasbi karo lamana qorshayn karo. Jacaylka qofku wuxuu la xidhiidhaa niyadda, qalbiga, iyo doonista qofka. In kasta oo ay run tahay inuu Ilaahay yahay Boqorka Xukuma Adduunkiisa oo dhan, waxaa sidoo kale run ah inuu qofka kala xisaabtamayo masu'uuliyadda uu ku samaynayo doorashooyinka leh saamaynta abadiyanka ah.

Xataa ka hor intii uusan haweeneyda abuurin, Ilahaay wuxuu ninka siiyey amar. Maadaama uu Aadan ahaa madaxa bini'aadanka, imtixaankan ayuu Ilaahay hor dhigay isaga.

> *"RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh, Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."* (Bilowgii 2:16-17)

U fiirso amarka sahlan ee Ilaahay. Aadan si xor ah ayuu u cuni karey dhammaan midhihii mamacaanaa ee ka baxay geedihii badnaa ee beerta ku yaalley, mid mooyaane. Ilaahay wuxuu Aadan u sheegay waxa Isaga ku dhici dooney haddii uu adeeci waayo. *"Maalintii aad wax ka cuntid **hubaal waad dhiman doontaa**."*

Haddii aad amarkaa jebisid waad dembaabtey. Shaydaankana, fallaaganimidiisii uu kaga soo hor jeestey Sayidka adduunka wuxuu ku mutaysan dooney cawaaqib aad u xun.

In kasta oo uu ninkii ugu horreeyey iin la'aan ahaa, isagu si buuxda xilkas uma ahayn. Hal amar oo keliya haddii uu xejiyo, ninka waxaa la siiyey fursad uu xidhiidh fiican kula yeesho Abuurihiisa. Ilaahay wuxuu Aadan ka doonayey inuu doorto inuu Isaga ku adeeco qalbi leh mahadcelin iyo jacayl.

Ka feker tan! Ilaahay wuxuu Aadan siiyey jidh, naf, iyo ruux. Wuxuu isaga ku barakeeyey awood uu kaga fekero dabeecadda quduuska iyo jacaylka ah ee Abuurihiisa. Wuxuu isaga dhex geeyey beer qurux badan oo siiyey wax kasta oo wanaagsan si uu ugu noolaado nolol farxad ah oo aan waxba ka dhinnayn. Ilaahay wuxuu kaloo isaga siiyey xorriyad iyo awood uu ku sameeyo doorashooyin xilkasnimo leh. Wuxuu Aadan siiyey xaas ku habboon oo wuxuu iyaga mas'uul uga dhigay inay maamulaan adduunkii uu abuuray. Ta ugu wada fiican, RABBIGA Laftiisa ayaa beerta soo dhexmari jirey oo Aadan iyo Xaawa la hadli jirey. Ilaahay wuxuu iyaga siiyey fursad ay ku bartaan Abuurahooda iyaga Iska-leh. Wuxuu ahaa adduun aan iin lahayn.

Dabadeedna maalin maalmaha ka mid ah ayaa abeesadii timid.

## "ILAAH MIYUU IDINKU YIDHI?"

Waa Bilowgii cutubka saddexaad marka ay dhacayso dhacdada ugu cawaaqibka xun uguna saamaynta badan ee taariikhda bini'aadanka abid laga qoray.

Maalin maalmaha ka mid ah Aadan iyo Xaawa waxay ag joogeen geedkii la xaaraameeyey, Shaydaankii ayaa iyaga ugu muuqday si maldahan qaabka abeesada. Waynu ognayahay inuu Shaydaanka ahaa waayo Qorniinka ayaa mar dambe isaga ku magacaabaya *"masduulaagii weynaa, kaasoo la yidhaahdo Ibliis iyo Shayddaan, kii dunida oo dhan khiyaaneeyey."* (Muujintii 12:9)

Isla sidii uu Ilaahay bini'aadanka qorshe ugu hayey, ayuu Shaydaankuna qorshihiisa ugu hayey.

> *"Haddaba abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal kasta ee duurka jooga oo RABBIGA Ilaah ahu sameeyey. Oo waxay naagtii ku tidhi,* ***'Ilaah miyuu idinku yidhi****, 'Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?'"*
>
> (Bilowgii 3:1)

Shaydaanku ninkii lamuu hadlin, laakiinse wuxuu doortay inuu haweeneydii la hadlo. Ma maqlaysaa wixii uu horreeyey ee uu Xaawa ku yidhi?

*"Ilaah miyuu idinku* ***yidhi****...?"*

Shaydaanku ma dooneyn inay Xaawa rumayso ***erayga Ilaahay***. Wuxuu doonayey inay iyadu ka shakido xigmadda iyo awoodda Ilaahay. Wuxuu Xaawa ku dhiirrigeliyey inay ka hor timaaddo Abuuraheeda, isla sidii uu isaga, oo Lucifer ahi sameeyey. Ilaa maantadan, ibliisku wuxuu la daggaallamaa runta, waayo runtu waxay tustaa inuu isagu yahay beenaale oo way ka adkaataa. Isla sida uu iftiinku u caydhiyo mugdiga, ayaa Erayga Ilaahay u caydhiyaa khiyaanada Shaydaanka.

Wuxuu kaloo Shaydaanku weeraray dabeecadda Ilaahay oo Xaawa ku dhiirrigeliyey inay ka shakido ***wanaagga Ilaahay***.

*"Ilaah miyuu idinku yidhi, 'Waa inaydnaan waxba ka cunin geed* ***kasta*** *oo beerta ku yaal'?"*

Shaydaanku wuxuu qallooociyey erayadii Ilaahay, oo ugu macneeyey sidii iyada oo uu Abuuraha deeqsiga ah, oo iyaga siiyey wax kasta oo ay noloshoodu u baahnayd iyo xorriyad ay dhammaan geedaha wax ka cunaan mid keliya mooyaane, doonayey inuu iyaga ka hor istaago wanaagga ugu weyn.

## "MA DHIMAN DOONTAAN!"

> *"Naagtiina waxay abeesadii ku tidhi, 'Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa; laakiinse midhaha geedka beerta dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, 'Waa inaydnaan waxba ka cunin, ama aydnaan taaban, yeydnan dhimanine.'*
>
> *Abeesadiina waxay naagtii ku tidhi, '****Ma dhiman doontaan****. Waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta.'"* (Bilowgii 3:2-5)

Ibliisku ma dooneyn oo keliya inay Xaawa ka shakido erayadii Ilaahay iyo wanaaggiisa, laakiinse wuxuu kaloo doonayey inay iyadu ka shakido ***xaqnimada Ilaahay***, sidii iyada oo ay been tahay ciqaabta Ilaahay ee dhimashada ah ee iyada ku dhacaysa haddii ay midhaha mamnuuca ah dhadhamiso.

Ilaahay wuu caddeeyey:

> *"Maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad* ***dhiman*** *doontaa."* (Bilowgii 2:17)

Shaydaanku tan wuu dafiray, oo wuxuu yidhi, *"**Ma** dhiman doontaan!"*

Sida uu Shaydaanku u shaqeeyaa ismay beddelin. Wuxuu weli sii wadaa inuu qaloociyo akhbaarka Ilaahay. Wuxuu weli doonaynayaa inaynu ka shakino Erayga Ilaahay, wanaaggiisa, iyo xaqnimadiisa.

Shaydaanku wuxuu doonayaa inaynu u malayno inaan Abuuraheena la aamini karin, iyo inuusan Isagu runtii ahayn Ka uu sheegtay inuu yahay.

## IBLIIS EHLU-DIIN AH

Ibliisku aad buu diinta uga helaa. Waa sababta ay maanta adduunka uga jiraan in ka badan 10,000 oo diimood. U fiirso sida uu Shaydaanku isaga dhigay inuu yahay af-hayeenka Ilaahay markii uu Xaawa ku yidhi, *"**Ilaah wuxuu og yahay** in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan."*

Shaydaanku wuxuu jecel yahay inuu Ilaaha Qaadirka ah isu ekaysiiyo. Wuxuu ku takhasusay inuu runta ku dhex qaso beentiisa. Isagu waa foojariistaha iyo indho-sarcaadiyaha ugu weyn. Xataa diimaha beenta ah ee aad aadka ula yaabayso wax run u eg ayaa ku jira. Waa sababtaa ta ay dad u rumeeyeen. Mar kale, maahmaahdii af Carabiga ahayd ayaa tan run ka sheegtay, *"Iska jir: beenaalayaasha qaarkood baa run sheegga e."*

Isku daygiisii ugu horreeyey ee uu ku bilaabayo diin been ah, Shaydaanku Xaawa ayuu u sheegay, *"Waxaad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta."* Markii uu Shaydaanku ku yidhi Xaawa, *"Waxaad noqon doontaan sida Ilaah oo kale,"* been ayuu isagu sheegay, waayo kii dembaabaa marna Ilaahay uma ekaanayo laakiinse wuxuu u ekaanayaa Shaydaanka, kaas oo doonaya inuu awoodda Ilaahay wiiqo. Laakiinse, markii uu Shaydaanku ku yidhi, *"Waxaad kala garan doontaan wanaagga iyo xumaanta,"* run

ayuu isagu sheegay, laakiinse muu sheegin qadhaadhka, silica, iyo dhimashada la socota aqoontaas.

U fiirso Shaydaanka, marka uu RABBIGA ka hadlayo, wuxuu keliya oo isticmaalayaa erayga *Ilaahay*. Shaydaanku wuu ku faraxsan yahay haddii aad hal Ilaah aaminsan tahay, intii aad Ilaahaas u haysato inuu yahay mid fog oo aan la fahmeyn.

> *"Waad rumaysan tahay in Ilaah yahay mid keliya. Taas waad ku wanaagsan tahay. Xataa jinniyaduna sidaas way rumaysan yihiin — wayna gariiraan."* (Yacquub 2:19)

Ibliiska iyo jinniyadiisu waxay dhammaantood rumaysan yihiin hal ilaah oo Ilaaha Weyn hortiisa way ku gariiraan baqdin daraadeed. Waad yaabi doontaa marka tan si cad la inoogu tuso dhowr cutub dabadeed. Shaydaanka iyo malaa'igihiisa dembaabey way og yihiin inuu jiro hal Ilaah oo run ah oo keligiis ahi, laakiinse, alla sidee bay Isaga u neceb yihiin!

Iyagu ma doonayaan inaad *adigu* ruuxa iyo runta ku garatid, ku jeclaatid, ku adeecdid, ku oo caabudid Abuurahaaga-Ku Leh.

**DOORASHADA**

Waxaa la gaadhey wakhtigii ay Aadan iyo Xaawa kala dooran lahaayeen erayga Ilaaha jacaylka badan iyo erayga cadowgiisa soo jireenka ah.

Jidka guushu waa cad yahay: *Aamin xigmadda Abuuraha*. Sidaas bay u sahlan tahay! Waxa keliya ee ahayd inay Aadan iyo Xaawa sameeyaan wuxuu ahaa inay soo xigtaan Erayga Ilaahay soo dejiyey ee runta ah, oo yidhaahdaan, "RABBIGU wuxuu annaga nagu amray: *'Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin.'* Waa inaynaan waxba ka cunin! Bes."

Haddii ay Aadan iyo Xaawa ku adkaysan lahaayeen Erayga Ilaahay ee aan is bedbeddelin, dibindaabyeeyuhu wuu baxsan lahaa. Laakiinse iyagu sidaas may samayn.

> *"Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed caqli*

> *lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay."*
> (Bilowgii 3:6)

Way cuntay. Ninkiina wuu cunay.

Halkii ay ka adeeci lahaayeen erayga iyo doonista Abuurahooda quduuska ah ee iyaga jecel, waxay adeeceen cadowgii Ilaahay. Xuduud ay xaaraan ahayd inay ka gudbaan bay ka gudbeen.


Markii uu Aadan midhihii xaaraanta ahaa dhadhamiyey, cawaaqibkii ka dhashay degdeg buu ahaa.

> *"**Dabaddeedna**, labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen inay qaawan yihiin; waxayna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen. Oo waxay maqleen codkii RABBIGA Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen IlAAH, oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda."* (Bilowgii 3:7-8)

U fiirso is beddelka dhacay. Intii ay ku farxi lahaayeen booqashada uu Ilaahay iyaga ugu yimid, waxaa iyagii ka buuxsantey baqdin iyo ceeb.

Maxaa sababay inay kuwan la abuuray ee xidhiidhka dhow la lahaa ka cararaan Ilaahooda jacaylka miidhan ah? Maxaa iyaga ku kallifey inay u maleeyaan inay iska qarin karaan Abuurahooda wax kasta arka? Maxay waalidkeenaa ugu horreeyey u dareemeen inay u baahnaayeen inay jidhadhkooda ku daboolaan caleemo?

Way dembaabeen.



# 12

# Qaynuunka Dembiga iyo Dhimashada

*"Kii kasta oo dembi sameeyaa waa **addoonkii dembiga**."*
— Ciisihii reer Naasared (Yooxanaa 8:34)

Aadan iyo Xaawa waxay ku dembaabeen Abuurahooda iyaga iska leh. Sidii Shaydaanka oo kale, waxay iyagu lumiyeen xidhiidhkii ay Ilaahay la lahaayeen oo waxay addoomo u noqdeen dembi. Sidii carruur adeeci waayey amarkii aabbahood ee fasiixa ahaa, Aadan iyo Xaawa dib dambe umay doonayn inay la joogaan Ka iyaga jeclaa oo daryeelayey. Dareenkoodii farxadda iyo isku kalsoonaanta ahaa waxaa beddeley dareeno baqdin, faddaranimo, iyo ceeb ah.

> *"Oo waxay maqleen codkii RABBIGA Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen ILAAH, oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda."* (Bilowgii 3:8)

Aadan iyo Xaawa waxaa hadda wasakheeyey dembi, oo ku kalifey inay doonaan inay Abuurahooda iyo Sayidkooda iska qariyaan. Dareenka cusub ee ay hadda heleen wuxuu iyaga ku dhaliyey inay kala gartaan wanaagga iyo sharka, oo ay si toos ah u ogaadaan inay dadka quduuska ah oo keliyahi Ilaahay hortiisa ku noolaan karaan. Aadan iyo Xaawa dib dambe Ilaahay hortiisa daahir uguma ahayn iyaguna taas way ogaayeen. Xidhiidhkii

dhowaa ee Ilaahay iyo bini'aadanka ka dhexeeyey wuu go'ay.

Xidhiidhkaasi waa dhintay.

## LAAN JABTAY



Maalin, aniga oo la hadlaya niman hoos fadhiya geed masaajidka u dhow, ayaa sheekadii nala gashay mowduuca ah dembiga iyo dhimashada.

Laan ayaan geedkii ka jebiyey oo iyaga weydiiyey, "Laantani miyay dhimatay mise way nooshahay?"

Midkood ayaa ku jawaabey, "Way dhimanaysaa."

Mid kale ayaa yidhi, "Way dhimatay."

Waxaan kaftan ahaan ugu canaantay, "Sidee baad u odhan kartaa way dhimatay? Miyaanad arag siday u cagaaran tahay!"

"Waxay u eg tahay inay nooshahay, laakiinse way dhimatay waayo waxaa laga gooyey meeshii ay nolosha ka heleysey," ayuu ku jawaabey.

"Waa runtaa," ayaan ugu jawaabey. "Si sax ah oo Qorniinka qaabilsan ayaad u qeexday *dhimashada*. Dhimashadu maaha halaag, laakiinse in lagaa *gooyo* Isha Nolosha. Waa sababtaa, marka uu qof inaga dhinto aynu iyada oo aan jidhkii weli la aasin u nidhaahno 'Kaasi wuu xijaabtey.' Sidan ayaynu nidhaahnaa waayo waxaynu ognahay inuu ruuxii qofkaasi ka baxay jidhkiisa. Dhimasha macnaheedu waa *ka-goyn*."

Dabadeena, waxaan nimankii u soo koobay amarkii uu Ilaahay siiyey Aadan. Markaasaan iyaga weydiiyey, "Muxuu Ilaahay u sheegay Aadan inuu ku dhici doono haddii uu Ilaahay ku dembaabo? Ma wuxuu Aadan u sheegay in haddii uu midhahaa laga xaaraameeyey cuno, ay tahay inuu falal diimeed sameeyo, sida salaad, soon, sadaqo, iyo masaajidka ama kaniisadda oo uu tago?"

"Maya," ayay ku jawaabeen, "Ilaahay wuxuu Aadan u sheegay inuu dhiman doono."

"Sax. Ilaahay taas wuu caddeeyey: ciqaabta dembigu dhimasho ayay noqon doontey. Laakiinse, ii sheega, kaddib markii ay Aadan iyo Xaawa adeeci waayeen Ilaahay oo ay midhihii laga xaaraameeyey cuneen, isla maalintaaba iyagu miyay dhinteen?"

"Maya!" ayay ku jawaabeen.

"Sax, haddaba, muxuu Ilaahay ula jeedey markii uu Aadan u sheegay 'Maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa!'?"

Halkaa ayaan ka sii waday oo iyaga u sharaxay sida uu Ilaahay dhimashada u qeexo: ka-dheerayn saddex-geesood ah oo ay sababtay markii uu ninkii doortay inuu adeeci waayo abuurihiisa.

## KA DHEERAANSHO SADDEX-GEESOOD AH OO UU DEMBIGU SABABAY

**1. Dhimasho ruuxiyan ah:** ***Qofka ruuxiisa iyo naftiisa oo Ilaahay laga DHEEREEYEY.***


Maalintii ay Aadan iyo Xaawa markii ugu horreysey Ilaahay ku dembaabeen *ruuxiyan ayay ka dhinteen*. Sida laanta geedka laga jaro oo kale, xidhiidhkii dhowaa ee ay Aadan iyo Xaawa la lahaayeen ILAAHAY wuu dhintay. Xaaladdu intaa way ka sii xumaanaysaa. Dhammaan farcanka Aadan iyo Xaawa waxay iyaguna qayb ka yihiin isla "laantaa" ruuxiyan dhimatay.

> *"Aadan bay dhammaan ku wada dhintaan…"*
>
> (1 Korintos 15:22)

In kasta oo uu Qorniinku sidaas cad u barayo, dad badan oo rumaysan inay bini'aadanku ka soo farcameen Aadan ayaa ku adkaysta inay carruurta yaryar ee hadda dhashay ku dhashaan dabeecad daahir ah oo bilaa dembi ah.

Mar kale ka feker laantii la gooyey.

Qaybteedee ayaa dhimatay kaddib markii geedka laga gooyey? Laanta oo dhammi way dhimatay, oo ay ku jiraan caleemaha yaryar ee ku yaalla. Haddii ay caleemahaa yaryari hadli kari lahaayeen laga yaabee inay odhan lahaayeen sidan oo kale, "Bal u yara kaadi! Annagu dembi kuma lihin inay laantu ka jabto geedka! Wax mid kale sameeyey inuu annaga na saameeyo maaha!"



Laakiinse way saamaysay. Sidaas oo kale, Erayga Ilaahay wuxuu barayaa in bini'aadanka oo dhammi ay *"Aadan ka tirsan yihiin."* Dhammaanteen waxaynu qayb ka nahay isla "laantaa" la gooyey, ee dhacday, inta aynu ku silcayno cawaaqibka taasi keentay. Jeclow ama ha jeclaan, markii uu Aadan dembaabey isagu wuu is faddareeyey *iyo* bini'aadankii markaa kaddib isaga ka farcami dooney oo dhan.

Tuulada aan wax ka soo qoraa waxay biyaha ka heshaa Webiga Sinigaal oo dhowr kiilomitir u jira. Tuuladayadu waxay leedahay ceel, laakiinse qofna biyihiisa ma cabo. Sabab? Ceelkaasi wuu wasakhoobey. Biyihiisu cusbo badan bay leeyihiin. Baaldi kasta oo biyo ah oo ceelkaa laga dhaamiyaa waa cusbo miidhan. Ma jirto hal dhibic oo saafi ahi, xataa hal mid.

Sidaas si la mid ah, qof kasta oo Aadan ka tirsan waxaa wasakheeyey dembi. Waa sababta ay xataa carruurta yaryar dembiga u leeyihiin—dabiiciyan. Dembigu wuxuu qayb ka yahay dabiicaddooda. In wanaag iyo naxariis la sameeyaa waxay u baahan tahay go'aan maskaxiyan ah iyo dadaal dheeraad ah, halka in naf-jeclaysi iyo dhaawac la geystaa aanay dadaal iyo shaqo dheeraad ah u baahnayn. Nebi Daa'uud ayaa sharaxaya sababta uu dembigu si toos ah oo dabiiciyan ah inooga soo baxo.

> *"Bal eeg, aniga waxaa laygu qabanqaabiyey* ***xumaan****, Oo waxaa hooyaday igu uuraysatay* ***dembi****."* (Sabuurradii 51:5)
> *"Kuwa sharka lahu waxay qalaad ku noqdaan* ***uurkii hooyadood****, Oo* ***mar alla markii ay dhashaan*** *ayay habaabaan iyagoo been sheegaya."* (Sabuurradii 58:3)
> *"****Dhammaantood*** *gees bay u wada leexdeen, oo way* ***wada*** *nijaasoobeen,* ***Mid*** *wanaag falaa ma jiro,* ***midnaba****."*
> (Sabuurradii 14:3)

Qabiilka Wolof ee reer Sinigaal waxay leeyihiin maahmaahyo cajiib ah oo badan oo qaarkood ka caawiyey inay runta fahmaan. Tusaale ahaan, waxay ku maahmaahaan, *"Jiirku ma dhali karo farcan aan god qodan."* Sidaas oo kale, Aadan-kaa dembigu wasakheeyey ma dhali karo farcan aan dembaabayn.

Maahmaah kale ayaa tidhaahda, *"Cudurka faafaa kuma ekaado ka sababay."* Waa arrin naxdin leh laakiinse run ah. Sida qofka jidhkiisa oo iin leh dhashay ama cudurka faafa, dabiicaddii dembiga lahayd ee Aadan dhammaanteen iyo carruurteena ayay ku faaftay.

> *"Haddaba sida dembigu* ***nin keliya*** *dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa* ***dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan****, waayo,* ***waa la wada dembaabay****."* (Rooma 5:12)

U fiirso odhaahda hore: *"Sida dembigu* ***nin keliya*** *dunida ugu soo galay,"* iyo odhaahda ugu dambaysa: *"waa* ***la wada*** *dembaabay."* Midkeen kastaa dhalashada iyo ficilka waa ku dembiile. Innagu dembiyada aynu samayno kuma eedayn karno Aadan. Marka uu qofku gaadho da'da uu khaladka iyo saxda kala garan karo, Ilaahay wuu kala xisaabtamayaa mas'uuliyadda saaran.[126]

Qoriniinku wuxuu odhanayaa:

> *"****Xumaatooyinkiinnaa*** *idin kala soocay* ***idinka*** *iyo* ***Ilaahiinna****, oo* ***dembiyadiinnaa*** *wejigiisa* ***idinka*** *qariyey."*
> (Ishacyaah 59:2)

Laanta bini'aadanka oo dhammi way ka go'day Abuuraheeda. Bini'aadanku ruuxiyan waxay *"ku* ***dhinteen*** *xadgudubyo iyo dembi."* (Efesos 2:1)

**2. Dhimasho jidh ahaaneed:** ***Qofka ruuxiisa iyo naftiisa oo laga DHEEREEYO jidhkiisa.***

Markii ay Aadan iyo Xaawa dembaabeen, *ruuxiyan* oo keliya umay dhiman laakiinse waxay bilaabeen inay *jidh* ahaan u dhintaan. Isla sida aanay caleemaha laanta hadda uun geedka

laga gooyaa isla markiiba u dhiman, ayaanay Aadan iyo Xaawa u dhiman isla markii ay dembaabeen.

Si kastaba ha ahaatee, jidhkoodii waxaa af-duubtay dhimasho, oo ah cadow aanay ka baxsan karin.

Aadan iyo Xaawa iyo farcankoodii, wakhti uun baa ka xigey ilaa iyo inta ay dhimashadu iyaga soo gaadhi lahayd. *"Dhimashadu geel dheereeya ayay fuushan tahay,"* ayay maahmaah af Carabi ahi tidhaahdaa. Ma jiro qof dhimashada ka baxsan karaa. Erayga Ilaahay ayaa sidan u dhigaya:

> *"Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo."* (Cibraaniyada 9:27)

### 3. Dhimasho Ruuxiyan ah: *Qofka ruuxiisa, naftiisa iyo jidhkiisa oo abadiyan laga DHEEREEYO Ilaahay.*

Laanta nool waxaa loogu taloggalay inay bixiso caleemo, ubax, iyo midho. Laamaha dhintay waa la uruuriyaa oo la gubaa. Markii uu Aadan ku dembaabey Ilaahay, isagu wuxuu lumiyey mas'uuliyaddii loogu talogalay: inuu Ilaahay ammaano oo abadiyan Isaga la noolaado. Bini'aadanka, oo loo abuuray inay weligood noolaadaan, waxay ku caasiyeen Abuurahooda iyaga iska leh. Ciqaabtu waxay noqotay inay *abadiyan* llaahay ka dheeraadaan.

RABBIGA oo naxariistiisa weyn daraaddiis Aadan iyo Xaawa dembigooda daawo u keena maahee, marka ay jidhadhkoodu dhintaan, waxaa iyaga sugayey silic aad u xun oo ahaa in lagu ridi dooney "meesha qashinka lagu uruuriyo" ee loo diyaariyey ibliiska iyo malaa'igihiisa. Baybalku wuxuu ugu yeedhaa *"dhimashada labaad"* waayo waxay dhici doontaa kaddib marka uu jidhku dhinto. Waxaa kaloo loogu yeedhaa *"ciqaabta abadiyanka ah."*[127] Fikradda ah jiritaanka meel bini'aadanka si ku-meel-gaadh ah loogu ciqaabayo dabadeedna laga saari doono waa mid ay bini'aadanku sameeyeen.

Haddii ay *"ciqaabta abadiyanka ahi"* u eg tahay mid aan caqligal ahayn, laga yaabee inay taa keentay iyada oo aan la fahmin dabeecadda Ilaahay, xumaanta dembiga, iyo fikradda ku saabsan abadiyanka.

Mar dambe ayaynu si qoto dheer u eegi doonaa daahirsanaanta Ilaahay iyo xaaraanimada dembiga.

Fikradda ah abadiyanka, waa inaynu qiranaa: in isla erayga *abadiyan* uu maskaxdeena ka weyn yahay, maadaama aynu innagu ku xisaabtano *wakhtiga*.

Abadiyanku *wakhti ma leh*.

Haddii aynu mala-awaalo qof naarta ku jira bilyamaad sanno, fikirkeenu wuu khaldan yahay. Abadiyanku kama koobna sannado. Waase *abadiyanka hadda*. Marka ay dadku galaan mudadaas aan laga baxsan karin, waxay fahmi doonaan cilmiga ay ku salaysan tahay ee dhabta ah. Ma xasuusataa qisadii ninkii taajirka ahaa ee naarta galay (cutubka 3)? Weli meeshaasu ku jiraa.

Ilaahay wuu caddeeyey asbaabaha lagu gelayo Jannada:

> *"Oo gudaheedana* ***sinaba*** *uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been..."*
>
> (Muujintii 21:27)

Ilaa iyo hadda, wax tanaasul ahi ma jiro. Isla sida ay sharciyada bii'adda ee Ilaahay u keenaan inay laan geed laga gooyey dhimato oo qalasho, ayaa qaynuunnada Ilaahay ee ruuxiyanka ahi u keenaan in dembiga lagu ciqaabo ***ka dheeraan*** ruuxiyan, jidh ahaan, iyo abadiyan ah.

## DEMBI IYO CEEB

Waa wakhtigii aynu dib ugu noqon lahayn Aadan iyo Xaawa kaddib markii ugu dambeeyey ee aynu aragnay iyaga: oo ay isku deyayeen inay geedihii beerta dhexdeeda Ilaahay kaga dhuuntaan.

Ka hor inii anaay dembaabin, Aadan iyo Xaawa waxaa ku wareegsanaa ammaanta iyo kaamilnimada Ilaahay. Si isku kalsoonaan leh bay Abuuraha hortooda ugu noolaayeen. Laakiinse, isla daqiiqadii ay qaynuunkii Ilaahay jebiyeen, si kale ayay isku arkeen. Hadda iskumay kalsoonayn, oo ma ahayn oo keliya inay jidh ahaan qaawanaayeen, laakiinse hadda *ruuxiyan* ayay qaawanaayeen.

Ka hor intii aanay dembaabin, Aadan iyo Xaawa waxaa maskaxooda ku jirey Ilaahay oo keliya oo *"mana ay xishoonaynin."*

(Bilowgii 2:25) Hadda iyaga ayaa si aan caadi ahayn isaga fekerayey oo waxay dareemeen inay Ilaahooda quduuska ah hortiisa ku fadaraysnaayeen. Aadan iyo Xaawa lid ayay Abuurahooda ku noqdeen. Iyagu dib dambe *quduus* ***uma ahayn***. Iyagu dib dambe uma dooney inay Ilaahay hortiisa ku daahirsanaadaan oo ku ifaan. Sida baranbarada iftiinka iska qarisa oo kale, ayay iyagu hadda *"waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka, maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen. Nin kastoo shar falaa nuurkuu nebcaadaa, umana yimaado nuurka, si aan shuqulladiisa loogu* ***canaanan****."* (Yooxanaa 3:19-20)

Aadan iyo Xaawa ceebtoodii waa lagu qabtay. Waxay dareemeen inaanay ku habboonayn joogitaanka beertii daahirka ahayd. Sanqadhii codkii Ilaahay ayaa iyaga argagax gelisey. Iyagu dib dambe umay dooneynin inay la joogaan Abuurahooda quduuska iyo jacaylka miidhan ah. Sidaas oo ay tahay, Isagu beertii buu yimid Isaga oo iyaga raadinaya.

Tani waxay qayb ka tahay dabeecadda Ilahaay, *"inuu kii hallaabay doondoono oo badbaadiyo."* (Luukos 19:10)

## ILAAHAY OO NINKII DOONDOONAYA

> *"Oo RABBIGA Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu ku yidhi, '****Xaggee baad joogtaa?****'*
>
> *Isagiina wuxuu yidhi, 'Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey.'*
>
> *Kolkaasuu ku yidhi, 'Yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay? Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan wax ka cunin?'"* (Bilowgii 3:9-11)

U fiirso su'aasha koowaad ee la qoray inuu Ilaahay ninka weydiiyey.

*"Xaggee baad joogtaa?"*

Su'aashan kulul, ee uu jacaylku ka muuqdo, Ilaahay wuxuu doonayey inuu Aadan yiqiinsado dembigii ay isaga iyo xaaskiisu

galeen. Wuxuu doonay inay iyagu qirtaan inay dembaabeen. Wuxuu doonayey inay iyagu fahmaan inuu dembigoodii soo kala dhex galay iyaga iyo Ilaahooda quduuska ah.

Dembigooda ayaa xaaladda xun ee ay galeen u sababay. Dembigoodii wuxuu sababay inay ceeboobaan oo isku dayaan inay geedo iyo caleemo berde dabadooda ku dhuuntaan. Laakiinse Aadan iyo Xaawa kama dhuuman karin Ilaahay, kamana baxsan karin xukunkiisa xaqa ah ee wax kasta og.

## DEMBIGU WUXUU U QALMAA DHIMASHO

Ilaahay muu kaftamayn markii uu Aadan u sheegay: *"maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad **dhiman** doontaa."* (Bilowgii 2:17) Qalbiyadeena gudahooda, waxaynu ka ognahay in kuwa Abuurahooda ku fallaagooba ay u qalmaan in Isaga laga dheereeyo.

Badankeenu waxaynu daawanay filimo "nimanka xunxun" la laayey oo ay "nimanka fiicani" guulaysanayaan. Miyaynu u naxnaa "nimanka xunxun"? Maya, waxaynu qiyaasnay inuu kuwaas ku dhacay wixii ay u qalmeen. Runta aan laga gaban karin waa in Ilaahay indhihiisa, aynu dhammaanteen oo farcankii Aadan ahi nahay "nimanka xunxun."

> *"**Dhammaantood** gees bay u wada leexdeen, oo way wada nijaasoobeen, Mid wanaag falaa ma jiro, **midnaba**."*
> (Sabuurradii 14:3)

Marka la fiiriyo heerka caddaaladda Ilaahay taagan tahay, *dhammaanteen* waxaynu u qalanaa ciqaabta dhimashada. Kitaabka Ilaahay ayaa tan ugu yeedhaya:

> *"**Qaynuunka** dembiga iyo dhimashada."* (Rooma 8:2)

*Qaynuunka dembiga iyo dhimashadu* wuxuu sheegayaa in ficil kasta oo caasinimo Ilaahay ka dhan ah ay waajib tahay in lagu ciqaabo Ilaahay oo laga dheereeyo. Midna lagama dhaafayo. Dembigu wuxuu keenaa dhimasho.

Quduusnimada iyo aamminimada dabeecadda Ilahaay daraadeed Isagu qaynuunkan wuu ilaaliyaa. Hal ficil oo dembi ah

oo ay awooweyaashii aynu ka soo farcannay sameeyeen wuxuu iyaga ka dheereeyey boqortooyada Ilaahay ee ah xaqnimada iyo nolosha, oo wuxuu iyaga ku daray boqortooyada Shaydaanka ee dembiga iyo dhimashada.

Isla markiiba, ***ruuxiyan*** ayay iyagu u dhinteen, isla sida laan laga gooyey geed. Xidhiidhkoodii ay Ilaahay la lahaayeen wuu dhintay.

Sidoo kale, waxay iyagu bilaabeen inay ***jidh ahaan*** u dhintaan, sidi laan qalalaysa oo kale. Wakhti uun baa ka xigey inta ay jidhadhkoodu ciidda ku noqon dooneen.

Waxaa ugu daran, ILAAHAY oo dembigooda iyo ceebtooda xal u keena mooyaane, waxaa iyaga u sugnaatay fursadda ah inay ***abadiyan*** dhintaan, oo weligood Ilaahay lagaga dheereeyo dab aan weligiis demeyn oo loo diyaariyey ibliiska iyo jinniyadiisa.

Qorniinku waa cad yahay:

> *"Nafta **dembaabtaa** way **dhiman** doontaa."*
> (Yexesqeel 18:20)
>
> *"Mushahaarada **dembigu** waa **dhimashada**...."*
> (Rooma 6:23)
>
> *"**Dembigu** kolkuu weynaado wuxuu keenaa **dhimasho**."*
> (Yacquub 1:15)

Sabab fiican ayuu Ilaahay xaqiiqadan aan laga gaban karin ugu yeedhaa *qaynuunka dembiga iyo dhimashada*. Kani waa *qaynuunka*.

Ciqaabta dembiga waa in la fuliyaa.

Waana la fulin doonaa.



# 13

# Naxariis iyo Caddaalad

Muxuu bini’aadanku qaban karaa ee uusan Ilaahay qaban karin?
Kitaabka Ilaahay ayaa hal-xidhaalahan ka jawaabaya.

*“Ilaah ma aha nin been sheego; Mana aha binu-aadmi qoomameeyo. Ma wuxuu yidhi buusan samaynayn? Ama ma wuxuu ku hadlay buusan yeelayn?”* (Tirintii 23:19)

Dadku maalin kasta ayay been sheegaan, oo qalbigooda bedbeddelaan, oo ballammadooda jebiyaan. Ilaahayse sidaas ma samayn karo. Ka uu wanaag oo dhan u sugnaaday ma yeeli karo wax dabeecaddiisa liddi ku ah.

*“Isagu isma burin karo.”* (2 Timoteyos 2:13)

Wakhti hore, ayaan anigu email-kan helay:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Adigu waxaad sheegtay inuusan Ilaahay hadduu rabo wax iska saamixi karin. Waxaad kaloo sheegtay inay Ilaahay qaynuunadiisu Isaga xaddidayaan oo uusan jebin karin. Waxaad adigu qortay, “Ilaahay wax kasta wuu samayn karaa oo aan ka ahayn inuu Isagu is dafiro oo uu qaynuunadiisa iska dhega tiro.” Sidee buu Abuuraheena naxariista badani isaga joojin karaa inuu awoodo inuu u dembidhaafo addoommadiisa

> dembidhaafka weydiista? Muxuu naxariistiisa caqabadaas u hor dhigayaa? …Ma aragtaa inaanay tani caqligal ahayn? Xataa haddii uu sharci noocaas oo kale ah samayn lahaa, isla markiiba kaas wuu jebin karaa maadaama uu Isagu awoodda oo dhan leeyahay! Caqligal maaha in lagu doodo inuu Ilaahay oo ugu wada awood weyni sina u xaddidan yahay. Haddii uu doono dhammaanteen ayuu dabka naarta inagu guri karaa, laakiinse Isagu waa naxariis badan yahay oo wuxuu mar kasta doonayaa inuu addoommadiisa saamaxo si ay u guuleysan karaan marka iyaga la xukumo. Innaga oo dhan Ilaahay saamaxaaddiisa iyo naxariistiisa ha ina siiyo maalinta dhammaanteen la ina soo uruurin doono oo aynu keligeen la ina xukumayo!

Innaga oo eegeyna waxa aynu cutubkii ugu dambeeyey kaga haddalay, ninkani sida uu u fekerayo dhib ma ku aragtaa? Abuuraheenu miyuu xor u yahay inuu qaynuunadiisa uu dejiyey iska indhotiro oo buriyo dabeecaddiisa quduuska ah?

## NAXARIIS AAN CADDAALAD LAHAYN

Ka feker maxkamad ay sidani ka dhacayso:

Xaakinkii ayaa kursigiisii ku fadhiistay. Waxaa isaga hor taagan nin ku eedaysan inuu bangi dhacay oo halkaa qof ku diley. Maxkamadda waxaa ka buuxa dad falkaas markhaati ka ahaa. Waxaa jooga xaaskii iyo qaraabadii qofkaas la diley iyo shaqaalihii bangigaa la dhacay. Weriyayaal badan ayaa iyaguna jooga si ay arrintaas uga warbixiyaan.

Tollow maxaa ninkaa dilaaga ah lagu xukumi doonaa? Dhimasho? Xabsi daa’in?

Dadkii maxkamadda joogey oo dhan baa loo sheegay inay istaagaan.

Xaakinkii ayaa intuu eedaysanihii toos u fiiriyey, kaas ku yidhi, “Anigu waxaan ogaadey inaad si fiican sadaqada u bixiso oo aad salaaddana ku dadaasho. Xataa hadda sida aad tusbaxaaga u rogeyso ayaa i soo jiidatey. Waxaan maqlay inaad dadka soo dhoweyso, oo aad mar kasta diyaar u tahay inaad qofka martida ah cunto siiso. Waad sigatay, laakiinse shuqulladaada fiicfiican ayaa ka miisaan badan kuwaaga xunxun. Waan kuu naxariistay. Waana ku saamaxay oo xor baad u tahay inaad iska tagto.”

Xaakinkii sidaas ayuu xukunkiisii ku soo gabagabeeyey.

Qolkii waxaa buuxiyey af-kala-qaad yaab ah iyo hadallo gunuunuc ah oo cadho ka muuqato…

Dhacdo sidan oo kale ah oo maxkamad ka dhex dhacda waa mid aan la maqlin. Miisaanka waxaa loo isticmaali karaa in lagu miisaamo caddaymaha loo hayo eedaysanaha dembigiisa, laakiinse marka ninkaas dembiyadiisa la caddeeyo, waa in xukunka uu u qalmo lagu qaado. Haddii uu ninkaasi "shuqullo wanwanaagsan" sameeyey iyo haddii kale taas waxba kama beddeleyso. Dhammaanteen taas waynu ognahay.

Haddii "habkan" ay camallada wanwanaagsani ka miisaanka badnaanayaan kuwa xunxun aan marna loo isticmaali karin maxkamadaha dadka ee adduunkan, ma u malaynaysaa in maxkamadaynta sidan xaqdarrada u ah oo kale lagaga dhaqmi karo maxkamadda samaawiga ah ee Ilaahay?

## XAAKIN XAQAANI AH

Ilaahay ma aha sida xaakinkaa sheekadaa mala-awaalka ah ee aynu hadda kor ku soo sheegnay oo kale. Mid astaamihiisa ka mid ahi waa *"Xaakinka **xaqa ah**."* (2 Timoteyos 4:8) Afar kun oo sanno ka hor, nebi Ibraahim ayaa is weydiiyey, *"Dunida oo dhan Xaakinkeedu miyuusan **xaq** samayn doonin?"* (Bilowgii 18:25)

Ilaahay marna xaqnimada iskama indhotiro si uu naxariis u tuso. Haddii uu sidaas sameeyo wuxuu meesha ka saarayaa carshigiisa xaqnimada ku dhisan oo wuxuu meel kaga dhacayaa ammaanta magaciisa quduuska ah.

> *"Carshigaaga aasaaskiisu waxa weeye **xaq iyo caddaalad,***
> *Oo **naxariista iyo runtuna** way ku hor socdaan."*
>
> (Sabuurradii 89:14)

In lagu doodo, sida ninka emailka noo soo qoray oo kale, inuu Ilahaay Isaga oo "awooddiisa weyn" isticmaalaya burin karo qaynuunadiisa macnaheedu waa inuu *"Xaakinka adduunka oo dhammi"* ka caddaalad yar yahay dembiileyaasha uu xukumi doono.

Waa mid cajiib ah inay bini'aadanku leeyihiin dareen weyn oo qalbigooda hoose ku abuuran oo ku aaddan caddaaladda, haddana ay diidaan inuu Abuuraheenu isla dareenkaa caddaaladda ah oo

kale leeyahay! Qalbigeena gudihiisa waxaynu dhammaanteen ka ognahay inuu xaakinka sharka xukumi waayaa yahay mid xun.

Nebi Yeremyaah ayaa qoray:

> *"**Daacadnimadaadu** way **weyn** tahay! Naftaydu waxay tidhaahdaa, 'RABBIGU waa qaybtaydii, sidaas daraadeed isagaan rajo ku qabi doonaa.'"*
> (Baroorashadii Yeremyaah 3:23-24)

U fiirso inuusan nebigu odhan, "Inaad waxa aad rabtid samaysid waa mid weyn!" ama "Isku hallayn la'aantaadu waa mid weyn!" Sidee ayaynu isugu hallayn karnaa ilaah sidan oo kale u ciyaaraya? Ilaahay waa ku weyn yahay *daacadnimadiisa*. Dad badan oo u bartay inay Ilaahay ugu yeedhaan "Ka ugu Naxariista iyo Raxmadda badan" ayaa haddana ilaawa inuu sidoo kale Isagu yahay Ilaah *"daacad iyo caddaalad ah."* (1 Yooxanaa 1:9)

Fikrad aan dhammaystirnayn ama dhinac keliya wax ka eegeysaa waxay keentaa inaynu Ilaahay si khalad ah u fahanno.

## DABEECADDA ILAAHAY EE ISU MIISAAMAN

Si ay shimbirtu u duuli karto, baalkeedee ayaa ugu muhiimsan, ma ka bidixda mise ka midigta?

Dabcan, shimbirtu labadeeda baalba way u baahan tahay si ay u duusho! Qof kasta oo u maleeya inay shimbirtu baal keliya ku duuli karto wuxuu iska indhotirayaa dabeecadda shimbirta iyo qaynuunnada cuf-is-jiidadadka iyo duulintaanka.

Sidaas oo kale, qof kasta oo sheega inuu Ilaahay si caddaalad la'aan ah naxariis u tusi karo wuxuu dafirayaa dabeecadda Ilaahay iyo qaynuunka dembiga iyo dhimashada.

*Naxariista* Ilaahay iyo *caddaaladda* Ilaahay mar kasta way isu miisaaman yihiin. Boqor Daa'uud ayaa qoray:

> *"Waxaan ka gabyi doonaa naxariis **iyo** garsoorid, Rabbiyow, waxaan kuugu gabyi doonaa ammaan."* (Sabuurradii 101:1)

Daa'uud, oo dembiyo xunxun sameeyey, wuxuu ogaa inuusan isagu naxariista Ilaahay u qalmin. Haddii la qeexana, naxariista *looma qalmo*.

> ***Caddaaladdu** waa inaynu hello ciqaabta aynu u qalano.*
> ***Naxariistu** waa inaynaan helin ciqaabta aynu u qalano.*

Sababta uu Daa'uud Ilaahay u ammaanayey waxay ahayd inuu isagu ogaa inuu RABBIGU habeeyey qaab uu ugu naxariisto dembiileyaasha aan taas u qalmin Isaga oo aan burin caddaaladda. Waa sababtaa ta uu Daa'uud uga qasiidoodey *"naxariis **iyo** garsoorid."*

Saamaxaadda dembigu kuma saabsana oo keliya inuu Ilaaheenu quduus yahay. Isagu marna dembi ma saamaxo oo aan ka ahayn marka uu ku qanco in gefafkii dembiilahaa si buuxda loo xukumay oo loo ciqaabay. Bini'aadan ahaan, haddii uu qof inagu gefo, waxaynu kaas ku odhan karnaa, "Dhib ma leh. Waan iska ilaawayaa kaas. Wax weyn maaha." Waxaa laga yaabaa inaynu sidaas oo kale qof u saamaxno, laakiinse xaakinka weligiis quduuska ahi sidaas ma samayn karo.

Naxariistiisu marna ma burinayso oo meesha kama saarayso caddaaladdiisa. Isagu marna ma odhanayo, "Waan iska kaa jecelahay, markaa dembigaaga ma xukumayo." Mana odhanayo, "Maadaama aad adigu dembaabtey, kuma jecli adiga." Ilaahay wuu jecel yahay dembiileyaasha, laakiinse waa inuu dembigooda qabto oo ciqaabo."

Haddii uu Ilaahay sidan oo kale yahay, sidee ayuu naxariistiisa ugu fidin karaa dembiileyaal eedaysan?

## NAXARIIS KU SALAYSAN CADDAALAD

Dib uga feker xaaladdii Aadan iyo Xaawa.

Maadaama uu Ilaahay ***naxariis iyo jacayl miidhan yahay***, Isagu muu dooneyn inay Aadan iyo Xaawa Isaga ka dheeraadaan. Wuxuu doonayey inay iyagu weligood Isaga la joogaan oo aanay ku dambayn dab aan weligiis demeyn.

> *"Rabbigu… dooni maayo in qofnaba halligmo."*
> (2 Butros 3:9)

Sidaas oo ay tahay, maadaama uu ***Ilaahay yahay quduus iyo caddaali***, Isagu isma hilmaansiin karo dembigii Aadan iyo Xaawa. Waa inuu kaas ciqaabaa.

> *"Waxaad tahay mid indhihiisu ka sii daahirsan yihiin inay wax shar ah eegaan, oo qalloocna ma fiirin kartid."*
> (Xabaquuq 1:13)

Markaa, maxay tahay inuu Ilaahay sameeyo? Ma jiraa hab uu dembiga ku ciqaabi karo Isaga oo aan dembiilaha ciqaabayn? Sidee ayaa wasakhaynta uu dembigu keeno loo saari karaa oo daahirsanaantii loo soo celin karaa? Jawaab ku filan ma u haynaa su'aashan nebi Ayuub weydiiyey, *"Sidee baa* ***nin xaq*** *ugu noqon karaa Ilaah hortiisa?"* (Ayuub 9:2) Ilaahay baa mahad leh, si baa jirta.

Qorniinku wuxuu muujinayaa waxa uu Xaakinka Caaddilka ahi sameeyey si uu noqon karo *"xaq* ***iyo*** *xaq-ka dhige"* dembiileyaasha eedaysan sida Aadan iyo Xaawa labadaba, iyo xataa sida aniga iyo adigaba (Rooma 3:26). Adigu ma taqaanaa waxa uu Isagu sameeyey si uu naxariis u fidiyo Isaga oo caddaaladdiisa ilaalinaya?

Jawaabta waynu arki doonaa. Inta aynu socdaalkeenan ku jirno.

## ANIGU EED KUMA LIHI

Marka hore, aynu dhegeysano sheeko dhex martay kuwii aynu ka soo farcannay ee fadaroobey iyo Abuurahooda oo noqday xaakinkooda.

> *"Oo RABBIGA Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu ku yidhi, 'Xaggee baad joogtaa?'*
>
> *Isagiina wuxuu yidhi, 'Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey.'*
>
> *Kolkaasuu ku yidhi, 'Yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay? Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan wax ka cunin?'*
>
> *Ninkiina wuxuu yidhi, 'Naagtii aad i siisay inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan cunay'.*
>
> *Oo RABBIGA Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi, 'Waa maxay waxan aad samaysay?'*
>
> *Naagtiina waxay tidhi, 'Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay.'"* (Bilowgii 3:9-13)

Muxuu RABBIGU su'aalaha u weydiiyey Aadan iyo Xaawa?

Wuxuu Isagu u su'aalay iyaga isla sababta uu waalid u su'aalo cunug ay dhaleen oo adeeci waayey, xataa iyaga oo uu waalidku og yahay waxa uu cunuggaasi sameeyey. Ilaahay wuxuu doonayey inay Aadan iyo Xaawa garowsadaan dembigooda iyo eeddooda. Laakiinse, halkii ay dembigooda ka qiran lahaayeen, midkood kastaa wuxuu isku deyey inuu ka kale eedeeyo.

Aadan wuxuu eedeeyey Ilaahay iyo Xaawa: *Anigu eedda ma lihi! Haweeneydii aad Adigu i siisay—iyadaa eedda iska leh!*

Xaawana abeesaddii ayay eeddii dusha ka saartay: *Abeesada ayaa i khiyaanaysay!*

Maadaama ay iyagu bini'aadan ahaayeen ee aanay ahayn robot-yo la borograameyey, Ilaahay iyaga ayuu doorashooyinka ay sameeyaan kala xisaabtamayey. Ma jirin mid kale oo ay eedeyn kareen oo aan iyaga ka ahayn.

> *"Midna yuu odhanin kolkii la jirrabo, Xagga Ilaah baa layga jirrabay. Waayo, Ilaah laguma jirrabo shar, isaguna midna ma jirrabo. Mid kasta waxaa jirraba **damaciisa** sharka ah isagoo la jiidanayo oo la sasabayo. Dabadeed damacu kolkuu uuraysto wuxuu dhalaa **dembi**, dembiguna kolkuu weynaado wuxuu keenaa **dhimasho**."*
>
> (Yacquub 1:13-15)

Halkii ay qorshaha Abuurahooda ka raaci lahaayeen, Aadan iyo Xaawa waxay raaceen *"damacyadoodii"* oo iyaga u hoggaamiyey jidkii *dembiga* iyo *dhimashada*.

Xaawa waxaa hunguri geliyey oo khiyaaneeyey Shaydaanka. Aadan, oo uu Ilaahay siiyey amarka ah inuusan geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta wax ka cunin, isagu si ula kac ayuu Abuurihiisa u adeeci waayey.

> *"Aadanna lama khiyaanayn, laakiin naagtii baa inta la khiyaaneeyey waxay noqotay mid xadgudubtay."*
>
> (1 Timoteyos 2:14)

Ha ula kaceen ama ha la khiyaameeyee, labadooduba way eedaysnaayeen, laakiinse waxay ahayd oo keliya kaddib markii uu Aadan cunay midhihii la xaaraameeyey marka uu Qorniinku

odhanayo*, "**Oo labadoodiiba** indhahoodii way furmeen."* (Bilowgii 3:7)

Ma ahayn Xaawa, ee Aadan buu ahaa ka uu Ilaahay ku eedeeyey inuu bini'aadanka ka saaray boqortooyada xaqnimada iyo nolosha, oo u hoggaamiyey meesha ay dembiga iyo dhimashadu ka taliyaan. Ilaahay wuxuu Aadan ku sharfay inuu oday u noqdo bini'aadanka, laakiinse fursadda sidaas u weyn waxaa la socda mas'uuliyad weyn.

Dembigii Aadan ayaa dhammaanteen ina faddareeyey, laakiinse doorashooyinka aynu innagu samayno isaga kuma eedayn karno.

> *"Sidaasaa **midkeen kastaba** Ilaah ula xisaabtami doonaa."* (Rooma 14:12)



# 14

# HABAARKII

Wakhtigii is qarinta iyo muranku waa soo gabagaboobey. Aadan isaga ayaa waddadiisii doortay, laakiinse muu dooran doonin cawaaqibyada waddadaa ka dhalan dooney. Abuuritaankii oo dhammi wuu aamusnaa intii uu Xaakinka Caddaaliga ahi sheegayey habaaro taxane ah iyo cawaaqibyadii ka dhashay bini'aadanka dembigooda.

**ABEESADII**

Ilaahay wuxuu ku bilaabay inuu ku dhawaaqo halaag u sugnaaday *"Abeesadii."*

> *"Oo RABIGGA Ilaah ahu wuxuu abeesadii ku yidhi, Waxan aad samaysay aawadiis* ***waad ka habaaran tahay*** *xoolaha oo dhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga; waxaanad ku socon doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha cimrigaaga oo dhan: oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa."* (Bilowgii 3:14-15)

Yay ahayd abeesadan uu Ilaahay ka hadlayey? Abuuruhu ma wuxuu u xanaaqsanaa mas caadi ah?

Erayga Ilaahay fasiraaddiisu waxay mararka qaarkood ka kooban tahay akhbaar laba heer ah isugu ladhan, gaar ahaan

masaallada iyo waxyiyada. Midi waa *macnaha sare* ee aynu iska aragno, midina waa *micne qoto dheer* oo aynaan si toos ah isla markiiba u arki karin. Xukunkanina waa sidaas oo kale.

Habaarka ku dhacay abeesadu laba heer ayuu ka kooban yahay.

## HEERKA 1: TUSAALE WAARAYA

Ugu horraynta, markii uu RABBIGU habaaray (xukun ku ridey) abeesada, Isagu wuxuu bini'aadanka siinayey wax cashar abadiyan ah iyaga u noqota. Maska ayaa loo isticmaalay in ninka dembi lagu jirrabo taas oo markaa laga bilaabo bogga ku gurguuran doontey. Abeesooyinka oo dhammi arrintaa way ka midaysnaan dooneen. Ka hor intii ayan Aadan iyo Xaawa dembaabin, waxay u muuqataa inay masasku sida xayawaanka ay isku nooca yihiin *(reptiles)* lugo lahaayeen. Maantadan la jooogo masaska qaarkood sida jebisada iyo kuwa kale ee ku ugaadhsada inay wax ciijiyaan waxaad ku arkaysaa in yar oo lugahoodii weli ka sii jira oo ku yaalla qaybta sare ee jidhkooda.[128]

Dembigu wuxuu kuwa eedaysan iyo kuwa aan eedaysnayba ku yeeshay saamayno aad u ballaadhan. Waa dembiga darraaddiis *"in uunka oo dhammu wada taahayo."* (Rooma 8:22) Xataa xayawaanka ugu dhibta yar ee adduunka ku nool ayuu saameeyey.

Sabab fiican ayaa loo hayaa in dembigii ninka loogu yeedho ***Dhicitaankii*** *(the Fall).*

## HEEERKA 2: HALAAGGA SOO DHOW EE SHAYDAANKA

Baybalku wuxuu odhanayaa in, *"Wixii nebiyadii sii sheegeen oo la qoray ayan lahayn micnayn gooni ah."* (2 Butros 1:20) Erayga Ilaahay isaga ayaa is fasira. Waxa uu Ilaahay ku sheegay qaybta labaad ee habaarkiisa ah ee khuseeya *"abeesada"* ayaa keeneysa inaynu si hoos u sii qodno Qorniinka.

> *"Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa."*
>
> (Bilowgii 3:15)

Waa ayo abeesada uu Ilaahay ka hadlay? Qorniinku wuxuu kan ku sheegayaa malag isla weyn kaas oo "dhulka lagu riday." (Ishacyaah 14:12) Isagu waa "Maskii duqa ahaa, kaas oo la yidhaahdo Ibliis iyo Shaydaan, kii dunida oo dhan khiyaaneeyey." (Muujintii 12:9) [129]

Abeesadu mid kale ma ahayn ee waxay ahayd *Shaydaanka.*

Isaga oo isticmaalaya luuqad abeesada ku habboon, ILAAHAY halaag ayuu ku xukumay ibliiska iyo dhammaan kuwa isaga raaca. Waxaa jiri doona *"cadaawad"* (dagaal joogto ah) oo ka dhaxayn doona *"**farcanka**"* Shaydaanka iyo *"**Farcanka**"* naagta. Ugu dambaynta, *"Farcankeeda"* ayaa *"madaxa"* jebin doona ibliiska.

Arrimahan dhammaantoodna waxaa la kaamili doonaa wakhti uu Ilaahay ugu talogalay oo Isaga u qorshaysan.

## LABADA "FARCAN"

Waa maxay labadan *farcan* ee laga hadlayaa? Kuwee ku kala saabsan yihiin *farcanka abeesada* iyo *Farcanka naagtu*?

***Farcanka abeesadu*** wuxuu ku saabsan yahay kuwa Ilaahay ku fallaagooba sidii uu Shaydaanku sameeyey oo kale? Kuwa Shaydaanka beenihiisa raacasani waa, marka ruuxiyan loo eego, *carruurta ibliiska*.

> *"Idinku waxaad tihiin kuwo aabbahood Ibliiska yahay, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan damacyada aabbihiin. Tan iyo bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig qaba, runtana kuma uu joogsan, waayo, runtu kuma jirto isaga. Markuu been ku hadlo, tiisuu ku hadlaa, waayo, waa beenaaleh, waana beenta aabbaheed."* (Yooxanaa 8:44)

Haddaba waa ayo ***Farcanka naagtu***?

Tani waa fikrad khaas ah. Taariikhda Baybalka dhexdeeda oo dhan dadka looguma abtirin jirin haweeneyda laakiinse waxaa loogu abtirin jirey ninka. Sidaas oo ay tahay maalintii uu dembigu adduunka soo galay, Ilaahay wuxuu ka hadlay *abtirsiga haweeney*. Sabab?

Hadalkan uu Ilaahay ku dhawaaqay waa waxyigii ugu horreeyey ee tilmaamaya Masiixa, kaas oo ka dhalan doona

haweeney, ee aan nin ka dhalan doonin. Masiix macnihiisa tooska ahi waa Ka La Subkay, ama Ka La Doortay. Waayihii Axdigii Hore, mar kasta oo uu Ilaahay nin u doorto inuu dadka hoggaan u noqdo, qof magac leh, sida nebi, ayaa kaas subki jirey (saliid madaxa kaga shubi jirey) si loo tuso inuu Ilaahay ninkaas u doortay shaqo khaas ah.[130]

Laakiinse, Masiixu wuu ka duwanaan dooney mid kasta oo kale. Isagu wuxuu ahaan doonaa *Ka* La Subkay. Wakhtiga ku habboon oo taariikhda ah, ayuu Ka Ilaahay Doortay soo geli doonaa adduunka *"inuu **baabbi'iyo** kii xoogga dhimashada lahaa, oo ah Ibliiska, iyo inuu **furo** kulli kuwii cimrigoodii oo dhan addoonnimo ugu hoos jiray cabsida dhimashada."* (Cibraaniyada 2:14-15)

In kasta oo uusan Ilaahay qorshihiisa oo buuxa muujin maalintii uu dembigu soo galay bini'aadanka, waxyigan yar ee bilowga ahi wuxuu Aadan iyo Xaawa iyo farcankooda siinayey if yar oo rajo ah. Ballanqaadkan bilowga ah waxa ku jira xaqiiqooyin badan oo aasaasi ah kuwaas oo ay nebiyadii Ilaahay ee dambe sii faahfaahin dooneen.[131]

## HABAARKII

Waxiyagan uu sida taxaddarka leh u yidhi ee ku saabsan *Farcan naag* oo madaxa ka jebin doona abeesada dabaddeed, IlAAHAY wuxuu Aadan iyo Xaawa u sheegay qaar ka mid ah saamaynaha ficil ahaaneed ee dembigooda. Cawaaqibyadaa waxaa loo yaqaanaa ***Habaarkii** (the Curse).*

> *"Naagtiina wuxuu ku yidhi, 'Dhibtaada iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doontaa; oo waxay doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa.'*
>
> *Aadanna wuxuu ku yidhi, 'Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh, 'Waa inaadan waxba ka cunin', sidaas daraadeed dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa. Qodxan iyo yamaarugna waa kaaga soo bixi doonaan, waxaanad cuni doontaa geedaha yaryar oo*

> *duurka. Wejigaagoo dhididsan baad wax cuni doontaa, ilaa aad dhulka ku noqotid; maxaa yeelay, dhulkaa lagaa qaaday; waayo, ciid baad tahay,* ***ciid baadna ku noqon doontaa.****' "*
> (Bilowgii 3:16-19)

Doorashadii Aadan iyo Xaawa ee ahayd inay Abuurahooda ku fallaagoobaan dhibaato aad u xun bay ka dhaxleen.

Farxadda in qoys la yeesho waxaa la socon doona dhibaato iyo xanuun. Halkii ay si caadi ah oo fudud u soo saari lahaayeen midho, khudaar, iyo cagaarka la cuno, hadda ciiddii baa habaar ku dhacay oo waxaa caadiyan uga soo baxaya geedo qashin ah, qodax iyo geedo kale oo aan iyaga faa'iido u lahaan doonin. Waxaa intaas ka daran, dadka noloshooda gaaban waxaa hadhayn doona dhacdo macangag ah oo la yidhaahdo *Dhimasho*.

Dadkii way lumiyeen awooddoodii xukunka. Dembi ayaana habaarkaa keenay.

## DHIMASHADU MA CAADI BAA?

Kuwa Erayga Ilaahay yasaa waxay nolosha adag, silica, hungada, xidhiidhada jarma, cudurrada, gabowga, iyo dhimashada u arkaan wax caadi ah. Fahanka habaarka uu dembigu keenay waa mid ka mid ah furayaasha fahanka sababta ay arrimaha adduunkeenu u yihiin sida ay maanta yihiin. Dad badan oo caqli leh ayaa xaaladda xun ee bini'aadanku ku sugan yahay sabab uga dhiga inay tusayso inuusan Ilaahay jirin. Sababtuna waa in aanay kuwaasi garowsan soo gelitaankii iyo saamaynihii dembiga.[132]

Waddanka Sinigaal, dadka qaarkiis baa yidhaahda (badanaa marka qof la xabaalayo), "Ilaahay dhimasho ayuu abuuray ka hor intaanu nolol abuurin." Filasoofiyadda noocan oo kale ah ayay dad badani nasteexo ka raadiyaan. Laakiinse fikradda noocan ahi waxay ka soo horjeeddaa caqliga iyo Erayga Ilaahay, oo dhimashada ku tilmaamaya *"cadaawaha ugu dambeeya ee la baabbi'in doono."* (1 Korintos 15:26)

Sharka, murugada, dhibaatada, silica, iyo dhimashadu waxay u muuqan karaan caadi, laakiinse arrimahan xunxuni waxay qayra-caadi u yihiin sida ay unugyada kansarku ugu yihiin jidhka qofka caafimaadka qaba.



Qodxaanta geedaha haddana cagaarka ah, hawsha badan ku baxda si midho loo goosto, madax-adayga carruurta aadan haddana nici karin, sida uu nin u xumeeyo xaaskiisa fiican, xanuunka la socda dhalmada mucjisada ah, cudurrada burburiya difaaca jidhka, dhibta xun ee gabowgu keeno, xaaladda xun ee aan laga gabban karin ee dhimashada iyo jidhadhkeena oo ciidda ku noqonaya — qayb kamay ahayn qorshihii ugu horreeyey ee Ilaahay. Ilaahay abuuritaankiisa umuu samayn inuu isagu dhexdiisa ka dagaallamo.

Ka hor intii uusan dembigu imaan, dadka ayaa abuuritaanka oo dhan u talinayey. Wax kastoo kale Aadan iyo xaaskiisa ayay si buuxda u adeecayeen. Xaqnimo iyo nabad ayaa adduunka ka buuxey. Dabadeedna kii aynu ka soo farcannay ayaa jidkii dembiga iyo dhimashada qaaday, oo waxaa kaas ka dhashay bini'aadan fadaroobey oo dhimanaya.

## ABUURITAANKA OO DHAN WUU SAAMEEYEY

"Laakiinse sidani caddaalad ma aha!" ayuu qof odhan karaa, "Muxuu qof ugu silcayaa nin kale dembigiisa?"

Dhammaanteen go'aano ayaynu gaadhnaa waana go'aannadaa kuwa uu Ilaahay inagala xisaabtamayaa, laakiinse waxaa kaloo run ah inaynu ku noollahay adduun habaaran. Runta ku jirta maahmaahdan qabiilka Wolof-ku waa mid iska cad, *"Cudurka faafaa kuma koobnaado kii sababay."*

Taasi waa dabeecadda dembiga. Noloshu dib dambe caddaalad uma sii ahaanayso. Natiijadii dembigii Aadan daraaddiis, *"uunka oo dhammu wuu wada taahayey oo wada foolanayey ilaa haatan."* (Rooma 8:22)

Waxaa dhammaan wada saameeyey habaarka dembiga.

Warka wanaagsani waa in isla bilowgiiba uu Abuuraheenu lahaa qorshe samatobixineed oo geesinimo ah. Isla sida u qofka saacadaha sameeyaa ugu dhex sameeyo hab loo buuxin

karo si wakhtiyada is bedbeddelaya loogu hagaajiyo, oo kale ayuu Abuuraha adduunku adduunkiisa ugu dhex dhisay "hab" uu qalqaliyo xooggaga baaba'a ee Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada. Ilaa iyo bilowgiiba, Ilaahay wuxuu lahaa *ujeeddo,* oo Isaga oo oggolaanaya inuu dembigu soo galo adduunka, ayuu haddana kaloo hayey *qorshe* uu ku daaweynayey habaarka dembiga oo nimcadiisa ku tusayay dhammaan kuwa Isaga aamina.

Murugada, xanuunka, iyo dhimashadu qisada Ilaahay kamay tirsanayn bilowgii, dhammaadkana ma jiri doonaan. Maalin maalmaha ka mid ah, dembiga iyo habaarkiisa gebi ahaanba waa la joojin doonaa. *"Oo isna indhahooda* ***ilmo kastuu ka tirtiri doonaa, oo dhimashona mar dambe ma jiri doonto, oo mar dambena ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona****, waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen... Oo mar dambena* ***naclad ma jiri doonto****."* (Muujintii 21:4; 22:3) Wakhti yar ka hor dhammaadka socdaalkeenan ayaynu ku baran doonaa wax dheeraad ah oo ku saabsan mustaqbalkaa ammaanta leh ee wanaagsan.

## NIMCADA ILAAHAY

Ma xasuusataa wixii ay Aadan iyo Xaawa sameeyeen kaddib markii ay cuneen geedkii aqoonta xumaanta iyo wanaagga?

Caleemo berde ayay isku tosheen si ay isugu qariyaan. Waa isku daygii ugu horreeyey ee ay dadku isugu deyayeen inay dembigooda iyo ceebtooda ku qariyaan. Ilaahay muu aqbalin ficilkaa ay Aadan iyo Xaawa iyagu iskood u sameeyeen. Laakiinse, Ilaahay ayaa iyaga wax u sameeyey.

> *"RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisii u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay iyagii."*
>
> (Bilowgii 3:21)

Ilaahay ayaa Aadan iyo Xaawa dhar uga sameeyey harag xayawaan. Si tan loo sameeyo, dhiig ayaa la daadiyey.

Mala-awaal, ILAAHAY oo laba ido ah dooranaya ama xayawaan kale oo ku habboon, oo kuwaas qalaya oo Aadan iyo Xaawa *"dhar harag"* uga samaynaya. Ilaahay wuxuu iyaga barayey dersi muhiim ah oo ku saabsan qiimaha sare ee uu dembigu ku fadhiyo, Isaga dabeecaddiisa quduuska ah, iyo sida

dembiileyaashu, iyaga aan u qalmin, looga dhigi karo kuwo uu Isagu aqbalo.

Markii uu dharka khaaska ah Aadan iyo Xaawa u samaynayey, wuxuu Abuurahoodu nimcadiisa weyn tusayay kuwii isla hadda Isaga ku fallaagoobey. Iyagu umay qalmin naxariista Ilaahay, laakiinse waa taas *nimcada* macnaheedu—*naxariis aan **loo qalmin***.

***Caddaaladu*** waa wixii aynu galabsannay oo inagu dhaca
(= ciqaab abadiyan ah).
***Naxariistu*** waa wixii aynu galabsannay *oo aan inagu dhicin*
(= ciqaab la'aan).
***Nimcadu*** waa wax aynaan u qalmin oo aynu helo
(= nolol weligeed ah).

## XAQNIMADA ILAAHAY

Markii uu Ilaahay xayawaanka u qalay Aadan iyo Xaawa, Ilaahay wuxuu iyaga ka doonayey inaanay keliyoo fahmin inuu Isagu yahay *"Ilaah naxariis badan,"* laakiinse uu sidoo kale yahay *"Ilaah xaqaani ah."* (Sabuurradii 86:15; Sabuurradii 7:9) Dembiga waa in dhimasho lagu ciqaabaa. Mala-awaal fikiradii Aadan iyo Xaawa qalbigooda ku dhashay kaddib markay arkeen dhiig ka da'aya xayawaannadaa quruxda badan. Ilaahay tusaale cad ayuu iyaga hor dhigay: ciqaabta dembigoodu waa *dhimasho*. Waxay ahayd inay Aadan iyo Xaawa maalintaa dhintaan, laakiinse booskoodii waxaa ka dhintay xayawaano aan dembi lahayn. Ilaahay Laftiisa ayaa allabarigii dhiigga ee ugu horreeyey sameeyey. Malyuumaad kale ayaa kaas daba socdey.

U fiirso inuu sidoo kale ILAAHAY yahay Ka iyaga *"u xidhay dharkii"* haragga xayawaanka ahaa ee uu Isagu u sameeyey. Aadan iyo Xaawa waxay isku dayeen inay daboolaan dembigoodii iyo ceebtoodii, laakiinse isku daygaasi muu raalli gelin Ilaahay. Isaga oo keliya ayaa iyaga ka badbaadin karey dembiga iyo ceebta.

## DEMBIILEYAASHII WAA LA ERYEY

Cutubka 3 ee Bilowgii wuxuu ku soo gabagaboobayaa sidan:

> *"Oo RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu yidhi, 'Ninku wuxuu noqday sidii mid Innaga mid ah, isagoo garanaya wanaagga iyo xumaanta; oo haatan, waaba intaasoo uu gacantiisa soo fidiyaa, oo uu wax ka qaataa geedka nolosha, oo uu cunaa oo uu weligiis noolaadaa'—sidaas daraadeed IlAAH isaga wuu ka saaray Beer Ceeden, si uu u beerto dhulkii isaga laga soo qaaday. Kolkaasuu ninkii eryay; Beer Ceeden barigeedana wuxuu taagay Keruubiim [malaa'igo khaas ah oo ku wareegsan carshiga Ilaahay ee jannada], iyo seef ololaysa, oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhawrto jidka geedka nolosha."*
>
> (Bilowgii 3:22-24)

Isla sidii Shaydaanka iyo malaa'igihiisii Jannada samaawiga ah looga eryey kaddib markii ay Ilaahay ka soo hor jeesteen, ayaa ninkii iyo xaaskiisiina looga eryey jannada adduunka kaddib markii ay iyaguna sameeyeen ficil aan doonista Ilaahay qaabilsanayn.

Markaa, ninkii waa laga eryey Ilaahay hortiisa oo quduus ah iyo geedkii nolosha (ha ku khaldin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta). Marka uu soo dhow yahay dhammaadka socdaalkeenan aynu Qorniinka ku dhex marayno wax yar baynu ka arki doonaa geedkan khaaska ah ee ku yaal Jannada samaawiga. Geedka noloshu wuxuu calaamad u yahay nolosha weligeed ah ee uu Ilaahay siiyo dhammaan kuwa Isaga iyo qorshihiisa aamina.

Kaddib markii ay cuneen geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta, Aadan iyo Xaawa waxay diideen jidka nolosha waaraysa oo waxay doorteen jidka dhimashada waaraysa. Isku xidhnaan fiican oo jannada iyo adduunka ka dhexeysey ayaa waxaa gooyey dembiga.

Aadan iyo Xaawa dhibaato weyn ayay ku sugnaayeen.

Innaguna sidoo kale.



# 15

# Dhibaato Laba-Jibbaaran

**Dembiile Baxsad ahaa ayaa 38 Sanno Dabadeeed la Qabtay,** warkiisa ayaa sidan cinwaan looga dhigay bisha shanaad 2006.

Warbixintu waxay sheegtay in nin la yidhaahdo Mr. Smith uu xabsi Kalifoorniya ku yaalla ka baxsaday 1968 isaga oo u xidhnaa tuuganimo.

38 sanno ayuu isaga oo isticmaalaya magaca hooyadiis aabbaheed, marba meel u guurayey, ugu dambayntiina uu ku dambeeyey baabuur-guri dhex yaaley meel geeda badan oo badhtamaha Ameerika ah. Halkaas ayay dawladu isaga ka heshay.

"Dhulka ayuu xoogaa fiirinayey, dabadeedna kor ayuu u soo jeestay oo yidhi, 'Haa, waa anigii,'" Dembi-baadhe ka tirsan qaybta booliiska ee meeshaas Creek County la yidhaahdo ayaa yidhi, "Xataa kumuu riyoon in isaga weli lagu dabo jiro."[133]

Xataa isla sidii uu Mr. Smith uga baxsan kari waayey gacanta sharciga ee aan wax ilaawin, ayaan qof qaynuunnada Ilaahay jebiyey uga baxsan karin Bixiyaha Qaynuunka Xaqa ah iyo Xaakinka aan laga baxsan karin.

Oo waa ayo kuwan qaynuunnada jebiyaa?

> *"**Kii kasta oo dembi falaa** wuxuu falaa caasinimo; oo dembigu wuxuu yahay caasinimo."* (1 Yooxanaa 3:4)

Mid kasta oo ku caasiya qaynuunnada Ilaahay ee wanwanaagsani waa sharci-jebiye. Sidaas ayuu Shaydaanku

sameeyey. Oo sidaas ayay Aadan iyo Xaawa sameeyeen. Sidaas ayaynu innaguna samaynay.

Dembi oo dhammi Ilaahay ayuu ka soo horjeedaa. Dad badan ayaa dembigooda wax yar u arka, laakiinse Ilaahay indhihiisa, dhammaan dembiileyaasha aan toobadkeeni, si kasta ha u "fiicnaadeen" ama ehlu-diin ha u ahaadeene, waa eedaysanayaal.

## CAYDHSIGA DHALANTEEDKA

Beri hore ayaa qof aanu deris ahayn igu yidhi, "Anigu arrimaha dhinaca wanaagsan baan ka eegaa; waxaan u malaynayaa inaan jannada tegayo."

Niyad-wanaaggan iyo dadaalkiisa naf ahaaneed isaga ma ka badbaadin doonaan ciqaabta maalinta xukunka?

Maalin ayaan dhex ku dhex safrayey Dooxada Dhimashada ee Kalifoorniya (California's Death Valley) oo ah mid ka mid ah meelaha adduunka ugu kulul, oo waxaan meel fog ka arkay wax u eg haro-biyood widhwidhaysa, laakiinse markii aan ku soo dhowaadey, "haradii" meel ay martay waan waayey. Hore ayaan sii eegay, oo "haro" taas oo kale ah ayaa iyaduna baaba'day.

Waxay ahayd dhalanteed.

Dhalanteedka waxaa sababa marka ay fallaadhaha ileysku ku dhacaan lakabyo hawo ah oo ay diirannaantooda iyo cufkoodu kala duduwan yihiin. Harooyinku run bay u ekaayeen, laakiinse kuwo jira may ahayn. Sidaas oo kale, laga yaabee inuu dembiiluhu u arko inuu fursad fiican u leeyahay inuu jannada galo, laakiinse Qorniinka ayaa runta dibedda soo dhiga. Farcanka Aadan *"Awood uma laha"* inay iska badbaadiyaan xukunka (Rooma 5:6).

Sida nin ku dhex lumay lama-degaan qallalan oo biyihii keliya ee uu sitey ka qubteen oo kale, bini'aadanku awood uma laha inay iskood dib ugu hantaan noloshii weligeed ahayd ee ay lumiyeen dembiga daraaddiis.

> *"Waayo, kolleyba dhammaanteen waan dhimanaynaa, oo waxaannu la mid nahay sidii biyo dhulka ku daatay, oo aan mar dambe la soo ururin karin..."* (2 Saamuu'eel 14:14)

Ninka lumay waa laga yaabaa waxa uu si dhab ah u rumaysan yahay inuu ceel biyo ah oo naftiisa badbaadiya, laakiinse

"biyahaasi" waxay noqdaan oo keliya mowjado hawo ah oo aad u kulul. Isaga oo dhibban ayuu dhalanteedba dhalanteed kale uga sii gudbaa ilaa uu ugu dambaysta ka dhinto.

Daacadnimada, iyo ficilladiisa ehlu-diinka ah ee uu isagu iskood u sameeyey ee dembiiluhu waa sidaas oo kale.

> *"Waxaa jirta waddo dadka **la hagaagsan**, Laakiinse dhammaadkeedu waa waddooyinka **dhimashada**."*
> (Maahmaahyadii 14:12)

Si ay ula tacaalaan xaaladaa faddarimada ah, bilyamaad qof oo adduunka ku nooli waxay maanta raacaan jidad u *muuqda inay sax la yihiin* iyaga. Waxay sameeyaan ficillo diimeedyo, jidhadhkooda ayay daahiriyaan, oo yidhaahdaan tukashooyin loo qoray, cuntooyinka qaarkood baanay cunin, lacag bay dadka siiyaan, oo shamacyo shidaan, tusbaxyo rogaan, ku celceliyaan hadallo, oo sameeyaan waxyaalo ay u maleeyaan inay ficillo wanwanaagsan yihiin. Kuwo kale ayaa xoogga saara inay hoggaamiyeyaashooda diinta aad ugu adeecaan, halka ay qaar kale rajeeyaan inay jannada ku galaan iyaga oo shahiidnimo ugu dhimanaya arrimo ay rumaysan yihiin in yihiin quduus ama xaq.

Suurtoggal ma tahay inay kuwaasi dhalanteed caydhsanayaan?

## FIKRADDA SAXDA AH EE QOFKA SAABSAN

*"Runtu waa sida basbaas kulul,"* ayay ku maahmaahaan qabiilka Wolof ee reer Sinigaal.

Xataa haddii aanay inagaga farxinayn, Ilaahay wuxuu inoo sheegayaa xaqiiqadan aan laga gabban karin ee innaga inagu saabsan. Wuxuu inagu martiqaadayaa inaynu Isaga daacad uga ahaano dunuubteena. Marka daacadnimadaa laga soo tago, waxaynu nahay sida haweeney aanu deris ahayn oo aan xaaskayga iyo anigu naqaanay. Waxay taasi diidey inay u baahnayd dhakhtar run ah, oo ku adkaysatay inay xaaladdeedu wanaagsanaan doonto. Dhowr usbuuc markaa kaddib ayay iyadu dhimatay.

Markii uu adduunka joogey, Masiixu wuxuu koox ah hoggaamiyeyaal diimeed isla quman ku yidhi:

> *"Kuwa ladan dhakhtar uma baahna, laakiin kuwa buka ayaa u baahan. Uma aan imanin inaan kuwa xaqa ah* [ee isu maleeya inay ehlu-diinimo ku filan leeyihiin] *u yeedho, laakiin inaan dembilayaasha toobada ugu yeedho ayaan u imid."* (Markos 2:17)

Iyada oo Erayga Ilaahay caddeeyey, ayaa haddana kaniisado, masaajido, iyo sunagogyo badani dadka u sheegaan oo keliya sida ay iyagu u fiican yihiin, ama ay u baahan yihiin inay wax yar dadaalkooda sii badiyaan oo keliya. Kuwaasi dadka ma baraan wax ku saabsan xaqnimada weyn ee Ilaahay iyo cawaaqibka xun ee dembiga.

Masaajid ku yaalla Kanada ayaa warkan ku dhejiyey albaabkiisa:

WAXAANU AQBALAA QOF KASTA OO QOFNA UMA SHEEGNO INUU DEMBIILE YAHAY

Ilaahay war kaas ka duwan ayuu ku dhejiyey Jannada albaabkeeda laga galo:

*"OO GUDAHEEDA SINABA UMA AY GELI DOONAAN WAX NIJAAS AH"*
(Muujintii 21:27)

Qorniinku wuxuu odhanayaa: *"**Dhammaan** way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah."* (Rooma 3:23) Ilaahay *qofna* kuma aqbalayo qiimaha uu kaasi isla leeyahay, oo wuxuu *dhammaan* u sheegayaa inay dembiileyaal yihiin.

Kuwa loo daahiriyey sida uu Ilaahay raalliga ka yahay ee buuxinaysa heerka caddaaladda Ilaahay ee aan iinta lahayn iyo daahirsanaantiisa oo keliya ayaa Jannada gelaya.

## FIKRADDA SAXDA EE ILAAHAY KU AADDAN

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nebi Ishacyaah la siiyey waxyi ku saabsan daahirsanaanta iyo ammaanta weyn ee ILAAHAY. Ishacyaah ayaa qoray:

> *"Sannaddii Boqor Cusiyaah dhintay ayaan arkay Rabbiga oo ku fadhiya carshi sare oo dheer, oo faraqii dharkiisa ayaa macbudkii buuxiyey. Oo meel isaga ka sarraysayna waxaa taagnaa seraafiim [malaa'igo khaas ah oo ku hareeraysan carshiga Ilaahay], oo midkood kastaaba wuxuu lahaa lix baal, laba wejigiisuu ku deday, labana cagihiisuu ku deday, labana wuu ku duulay. Oo midba wuxuu u qaylinayay midka kale, oo waxay lahaayeen, '***Quduus, quduus, quduus waxaa ah RABBIGA ciidammada; oo dhulka oo dhanna waxaa ka buuxda ammaantiisa****!' Oo aasaaska iridda ayaa la gariiray kii qayliyey codkiisii, oo gurigiina waxaa ka buuxsamay qiiq. Markaasaan idhi, '****Anaa hoogay! Waayo, waan lumay, maxaa yeelay, waxaan ahay nin aan bushimihiisu daahirsanayn, oo weliba waxaan dhex degganahay dad aan bushimahoodu daahirsanayn, waayo, indhahaygu waxay arkeen Boqorka ah RABBIGA ciidammada.****'"*
>
> (Ishacyaah 6:1-5)

Ammaanta iyo weynaanta sida dabka ah ee Ilaahay carshigiisa jannada ku wareegsani aad bay u weyn tahay oo xataa malaa'igaha daahirka ah ayaa wejigooda iyo lugahooda ka qariya. Malaa'igahani aad bay ula cajabaan quduusnimada Ilaahay iyo ammaantiisa ilaa ay ka awoodi waayaan inay Isaga hortiisa fadhiistaan. Laakiinse, carshiga ayay iyagoo duulaya ku wareegeystaan, iyaga oo ku qaylinaya, *"Quduus, quduus, quduus waxaa ah RABBIGA ciidammada; oo dhulka oo dhanna waxaa ka buuxda ammaantiisa!"*

Maxay dadka badankiisu ugu guuldarraystaan inay dembiga u arkaan waxa uu yahay? Laga yaabee inay taas sababteedu tahay inaanay iyagu marna Ilaahay u aqoonsan Ka uu Isagu yahay. Marna aad ugamay fekerin daahirsanaantiisa weyn. Ishacyaah wuxuu ahaa nebi Ilaahay, sidaas oo ay tahay waxyigii uu ku arkay ammaanta quduuska ah ee Rabbiga ayaa isaga garansiisay isaga fadaranimadiisa iyo daahirsanaan la'aantiisa, *"Anaa hoogay! Waayo, waan lumay, maxaa yeelay, waxaan ahay nin aan bushimihiisu daahirsanayn!"* ayuu isagu yidhi. Marka Rabbiga la barbardhigo, Ishacyaah wuxuu ogaa in isaga iyo qaranka Israa'iil oo dhammi ay xaalad xun ku sugnaayeen!

Mar dambe ayuu Ishacyaah qoray: *"Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday… Kulligayo waxaannu noqonnay sida wax aan nadiif ahayn, oo xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah."* (Ishacyaah 53:6; 64:6) Ishacyaah wuxuu ogaa in si kasta oo uu weyseystaa aanay isaga RABBIGA hortiisa daahir kaga dhigi karin.[134] Qiyaasta Abuuraheena quduuska ah marka loo eego, *"**Kulligayo** waxaannu noqonnay sida **wax aan nadiif ahayn**."*

Nebi Ayuub ayaa tusay fahankiisa ku aaddan xaaladda aan daahirka ahayn ee bini'aadanka markii uu sidan is weydiiyey, *"**Sidee baa nin xaq ugu noqon karaa Ilaah hortiisa**? … Haddaan biyo baraf ah ku maydho, Oo aan gacmahayga aad iyo aad u nadiifiyo, Adigu waxaad igu dhex tuuri doontaa bohol, Oo xataa dharkaygu waa i nici doonaa."* (Ayuub 9:2,30-31) Nebi Yeremyaah isaguna erayadan ayuu Ilaahay ka qoray: *"Waayo, Sayidka RABBIGA ahu wuxuu leeyahay, In kastoo aad soodhe isku maydhid, oo aad saabuun iska badisid, weli xumaantaadii sida calaamad oo kale bay ii muuqataa."* (Yeremyaah 2:22)

Fikrad sax ah oo aynu Ilaahay ka qabnaa waxay inoo keentaa inaynu nafteenana fikrad sax ah ka haysano. Haddii aynu Ilaahay fikrad khaldan ka qaadano taasi waxay keentaa inaynu nafteena weyneyno.

Nin ku labbisan dhar jeexjeexan oo wasakh iyo cudur ka buuxo ayaa laga yaabaa inuu isu maleeyo inuu nadiif yahay oo dadka oo dhammi soo dhoweynayaan. Sidaas oo kale, laga yaabee inuu dembiiluhu isu maleeyo inuu xaq yahay, laakiinse taasi isaga xaq kama dhigayso.

Marka loo eego ammaanta iyo xaqnimada Ilaahay, si kasta oo aynu dadaalo ficilladeenu waa sidii dhar wasakh ah.

## CASHAR AYNU U WADA BAAHANNAHAY

Mid ka mid ah ujeeddooyinkii uu Ilaahay qaranka Israa'iil u sameeyey waxay ahayd inuu qarammada oo *dhan* baro casharro muhiim ah. In kasta oo uu RABBIGU reer binu-Israa'iil mar kasta daacad u ahaa, Israa'iiliyiintu mar kasta RABBIGA daacadnimaduu ka rabey kamay soo bixi jirin. Ilaahay wuxuu doonayaa inuu innaga cashar ina baro, *"Waxyaalahaasi waxay*

***inoo noqdeen masaallo** si aynaan waxyaalaha sharka ah u damcin siday iyagu u damceen.”* (1 Korintos 10:6)

Kitaabka Baxniintii, oo ah kitaabka labaad ee Towreedda, Muuse wuxuu ku sheegayaa sidii ay reer binu Israa’iil ugu guuldarraysteen inay dembiga u arkaan sida uu Ilaahay u arko. Gacan xoog badan ayuu Ilaahay iyaga kaga soo saaray qarniyo ay addoomo ku ahaayeen Masar. Sidaas oo ay tahay waxaa jirey arrimo badan oo ILAAHAY iyo dabeecaddiisa ah oo aanay weli fahansanayn. Waxay iska dhaadhiciyeen inay xoogaa yar uun Ilaahay adeeci kareen si ay uga baxsadaan xukunkiisa.

Reer binu Israa’iil intooda badani aad bay naftooda ugu kalsoonaayeen ilaa ay Muuse ku yidhaahdeen,


> *“**Kulli** waxa RABBIGU ku hadlay oo dhan **waannu wada yeeli doonnaa**.”* (Baxniintii 19:8)

Iyagu isumay arag dembiileyaal aan is caawin karin, mana ay fahmin doonista Ilaahay ee ah xaqnimo buuxda. Waxay ilaaween inuu hal dembi oo keliyahi Aadan iyo Xaawa ka dheereeyey Ilaahooda. Si Israa’iiliyiinta looga caawiyo inay dembigooda arkaan oo dareemaan ceebtooda, Ilaahay wuxuu iyaga siiyey toban qodob oo imtixaan ah.

Erayga Ilaahay wuxuu inoo sheegayaa sidii awoodda iyo ammaanta Ilaahay looga arkay Buur Siinay korkeeda. *“Waxaa dhacay **onkod** iyo **hillaac**, oo **daruur qaro weyn** baa buurtii soo dul joogsatay, oo waxaa yeedhay **buun codkiisu aad iyo aad u weyn yahay**, kolkaasay dadkii xerada ku jiray oo dhammu wada **gariireen**.”* (Baxniintii 19:16) Dabadeedna cod weyn ayaa halkaa ka soo qayliyey oo bixiyey toban qaynuun:

**TOBANKII AMAR**

1. ***“Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.”***
   In mid kale oo aan RABBIGA ka ahayn oo la caabudaa waa dembi.



Haddii aad daqiiqad kasta oo maalin kasta ah Ilaahay ka jeclaan weydid qalbigaaga oo dhan, niyaddaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan dembi baad ku jirtaa. (Baxniintii 20) [135]

2. ***"Waa inaanad samaysan sanam xardhan… Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin."*** Tani kuma kooban in sanam loo sujuudo ama shay la caabudo. Wax kasta oo gala booska Ilaahay qaynuunka ayuu ka jebinayaa.
3. ***"Waa inaanad magaca RABBIGA Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin."*** Haddii aad sheeganayso inaad Ilaaha keliya ee runta adeecayso, laakiinse aadan ku dadaalayn inaad Isaga si fiican ugu barato, oo Eraygiisa adeecdo, markaa magaciisa quduuska ah ayaad been ugaga hadlaysaa.
4. ***"Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto… Oo waa inaanad shuqul qaban."*** Ilaahay wuxuu reer binu Israa'iil ka rabey inay maalinta toddobaad ee usbuuc kasta shaqada joojiyaan si ay Isaga ugu sharfaan.
5. ***"Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus."*** Wax kasta oo aan ahayn adeecid buuxdaa waa dembi. Inuu cunuggu adeeci waayo ama uu dabeecad xun u yeesho waalidkiisa waxay jebinaysaa amarkan.
6. ***"Waa inaanad qudh gooyn."*** Ilaahay wuxuu kaloo odhanayaa, *"Ku alla kii walaalkii neceb waa dhiigqabe."* (1 Yooxanaa 3:15) Qof kale oo bini'aadan ah oo aad nacayb u qabto waxay u dhigantaa dembi. Ilaahay qalbiga ayuu fiiriyaa oo wuxuu mar kasta inaga doonayaa jacayl buuxa.
7. ***"Waa inaanad sinaysan."*** Qaynuunkani ma quseeyo oo keliya jidhkeena oo aynu sino u isticmaalo, laakiinse wuxuu quseeyaa oo kale fikiro xaaraan ah oo niyaddeena iyo qalbigeena soo gala. *"Laakiin waxaan idinku leeyahay, Nin walba oo qof dumar ah damac u eegaa, durba qalbigiisuu kaga sinaystay."* (Matayos 5:28)

8. ***"Waa inaanad waxba xadin."*** Inaad qaadatid in ka badan waxa aad xaq u leedahay, cashuurta oo aad sirto ama imtixaan aad qishto, ama qofka aad u shaqayso oo aadan si daacad ugu shaqayn dhammaantood waa noocyo tuuganimo ah.
9. ***"Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin."*** War been ah oo aad ka sheegto qof ama arrin waa dembi.
10. ***"Waa inaanad damcin… waxa deriskaagu leeyahay oo dhan."*** Inaad damacdo wax uu qof kale leeyahay waa dembi. Waa inaynu raalli ku ahaano waxa aynu haysano.

**EEDAYSANAYAAL!**

Kaddib markii uu RABBIGU tobankan amar bixiyey, Qorniinku wuxuu odhayaa, *"Oo dadkii oo dhammuna way wada arkeen onkodkii iyo hillaacii, iyo codkii buunka, iyo buurtii qiiqaysay; oo markii dadkii arkay* ***ayay gariireen, oo meel fog istaageen****."* (Baxniintii 20:18)

Iyagu hadda dib dambe ugumay faanayn inay yeeli doonaan *"kulli waxa RABBIGU ku hadlay oo dhan."*

Imtixaankii way ku dheceen.

Adiguna iska warran? Sidee ayaad arrintan uga soo baxday?

Haddii aadan 100-kiiba boqol keenin tobanka amarba (taas oo macnaheedu yahay adeecid buuxdda 7-da maalmood ee usbuuca 24-kooda saacaddood, ka soo bilow markaad dhalatay ilaa iyo hadda oo la joogo), markaa, sidii carruurtii reer binu Israa'iil, iyo sida aniga oo kale, imtixaankii waad ku dhacday.

> *"Ku alla kii sharciga oo dhan xajiya oo* ***qaynuun keliya*** *ku gafa,* ***kulli wuu ku eedaysan yahay****."* (Yacquub 2:10)

Cutubka ugu horreeya buuggan, waxaynu ku soo sheegnay inuu Baybalku yahay kitaabka keliya ee adduunka loogu iibsi badan yahay; sidaas oo kale waa kitaabka loogu baqdinta badan yahay. Mid ka dhigtay in sidaa looga cararo waa inuu dembiyadeena fashilayo oo inaga qaadayo isla weynaanteena. Wuxuu inoo sheegayaa: *"Waxaad tidhaahdaa, 'Taajir baan ahay, oo maal baan helay, oo waxba uma baahni', oo ma ogid inaad*

*tahay tan belaysan, oo loo naxo, oo miskiinka ah, oo indhaha la', oo qaawan,"* iyo: *"Dhulka laguma arag nin xaq ah oo wanaag fala, oo aan dembaabin."* (Muujintii 3:17; Wacdiyahii 7:20)

Sharciga Ilaahay inaynu innagu isla weynaano nagama dhigayo. Taas looguma talogelin.

## MAXAA TOBANKII AMAR LOOGU BAAHDAY?

Waa maxay ujeeddada qaynuunku? Haddii uusan qofna heerka Ilaahay ka rabo gaadheyn, maxaa haddana taas la inoogu sheegay?!

Sabab iska cad oo uu Ilaahay amarradan u bixiyey waa inuu bini'aadanka siiyo heer edaabeed oo ay ku ilaaliyaan inay bulshadu si kala dambayn leh u kala socoto. Ilbaxnimo kasta oo aan isku raacin waxa saxda iyo waxa khaladka ah fadqalallo iyo kala dambayn la'aan ayaa ka jireysa. Ilaahay wuxuu og yahay inay bin'aadanka bulshooyinkiisu u baahan yihiin sharci kala dambaynta ilaaliya. Sidaas oo ay tahay, Ilaahay sababo tan ka weyn ayuu Tobanka Amar u bixiyey.

ILAAHAY Qaynuunkiisa ayuu ina siiyey in *"af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu ay Ilaah ku hor gar darnaato. Maxaa yeelay, shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiis, waayo,* ***sharciga ayaa lagu gartaa dembiga****."* (Rooma 3:19-20)

## SADDEX SHAQO OO TOBANKA AMAR QABTAAN:

**1. Qaynuunka Ilaahay wuxuu aamusiiyaa dadka diiniyan iyagu isla quman.** *"In af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu ay Ilaah ku hor gar darnaato."* Tobanka Qaynuun waxay ina barayaan in: si kasta oo aynu ugu malayno inaynu u fiicannahay, aynaan marna dabooli karin heerka xaqnimada ee aan iinta lahayn ee Ilaahay dejiyey. Waxaad tahay eedaysane sharciga jebiyey, markaa, faanka jooji! [136]

**2. Qaynuunku dembigeena ayuu fashilaa.** *"Waayo, sharciga ayaa lagu* ***gartaa*** *dembiga."* Qaynuunku waa sida raajada (X-ray). Waxay taasi muujisaa lafaha jabay ama ilkaha bololay, laakiinse iyadu kuwaas ma bogsiin karto. Sidaas oo kale,

*"shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo* [si buuxda uguma wanaagsanaan karo] *Ilaah hortiis."* Muraayaddu wasakhda inagu taal way tusi kartaa, laakiinse taas ma tirtiri karto. Qaynuunka Ilaahay dembiga iyo fadaranimadiisa wuu ina tusi karaa, laakiinse kaas inagama baabi'in karo.

Dhowr sanno ka hor ayaan ujeeddada Qaynuunka Ilaahay u sharaxay nin dugsi dhexe macallin ka ah oo Kaatolig ah oo reer Sinigaal ah. Ogaanshaha taasi argagax bay isaga ku noqotay. Isaga oo codkiisa wareer ka muuqdo, ayuu yidhi, "Haye, markaa Tobanka Qaynuun waxay ina barayaan inaynu Ilaahay hortiisa dembiileyaal ku nahay oo aynu xukun u qalano, inaanan ku badbaadi karin camalladeena wanwanaagsan ama tukashada ma soonka. Markaa sidee ayuu Ilaahay inoo aqbali *karaa? Waa maxay* xalku?

**3. Qaynuunku wuxuu ina tusayaa xalka Ilaahay.** Isla sida uu dhakhtarka cisbitaalka ee raajadu qofka ay laftu ka jabtay ugu sheego dhakhtarka takhasuska ku leh ee laftaas u kabi kara, ayay Qaynuunka iyo Nebiyadu inoogu tilmaamayaan "dhakhtarka" keliya ee *"inaga furtay inkaartii sharciga."* (Galatiya 3:13) Mar dhow ayaynu wax tan ku saabsan maqli doonaa.[137]

## CAAWIMAAD!

Haddii aynu biyo ku hafanayno oo uu inoo dhow yahay qof hafashadaa inaga badbaadin kara, miyaynu iskala weynaanaynaa inaynu caawimaad u qayshan kartno?

Inaad garowsatid inaadan awoodin inaad adiga laftaatu iska badbaadin kartid ciqaabta aadka u xun ee dembiga; taasi waa tallaabada ugu horraysa ee aad xagga guusha u qaaday. Qofku caawimaad buu u baahan yahay—caawimaad uu Ilaahay oo keliyahi bixin karo.

Laga yaabee inaad maqashay odhaahda: "Ilaahay wuxuu caawiyaa kuwa iyagu is caawiya." In kasta oo ay odhaahdaasi run ka noqon karto arrimo nolosha qaarkeed khuseeya, marka la eego xaaladdeena dembiga miidhan ah ee ruuxiyan bakhtiga ah, taasi run kama aha, waxaase run ah liddigeeda: Ilaahay wuxuu caawiyaa kuwa og inaanay iyaga laftoodu is caawin *karin.*

Ilaahay wuxuu caawiyaa kuwa qirta inay badbaadiye u baahan yihiin.

Maahmaah Afrikaanku leeyihiin oo caan ah baa tidhaahda, *"Si kasta oo dogobku biyaha u dhex yaallo, kaasi marna yaxaas isuma beddelayo."*

Sidaas oo kale bini'aadanku marna ma beddeli karo dabeecaddiisa daahir la'aanta ah oo iskama dhigi karo mid xaq ah.

**FADDAROOBID**

Dib uga feker Aadan. Ilaahay wuxuu isaga siiyey hal sharci:

> *Geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin.*

Haddii ay Aadan iyo Xaawa adeeci lahaayeen Abuurahooda-iyaga-Leh, iyagu weligood way noolaan kari lahaayeen, oo xidhiidh fiican la sii yeelan lahaayeen Isaga. Laakiinse sidaasi may dhicin.

Kuwaas aynu ka soo farcannay way dembaabeen oo xidhiidhkii ay Ilaahay la lahaayeen ayaa jarmay. Dembiileyaal ahaan, hadda waxay isku deyayeen inay Ilaahay ka dhuuntaan. Ceeb bay dareemeen oo isku dayeen inay qaawanaantooda ku daboolaan caleemo berde. Laakiinse Ilaahay ayaa iyaga doondoonay, oo u bidhaamiyey naxariistiisa iyo caddaaladdiisa, dabadeedna iyaga hortiisa ka dheereeyey. Ilaa inta uu Isagu ka keenayey hab ay ku soo laabtaan, abadiyan ayaa iyaga loo dayriyey. Ilaaha quduuska ah ee Abuuraha ah hortiisa waxay iyagu ku ahaayeen faddare eedaysan.

Su'aal muhiim ahi waa tan: Intee dembi ayay Aadan iyo Xaawa sameeyeen oo uu Ilaahay uga soo saaray Beertii wanaagsanayd ee Ceeden? Hal dembi oo keliya ayaa ka soo saaray. "Wanaag" kasta oo ay hore u sameeyeen ama ficillo diineed ay markaa kaddib sameeyeen halkaa dembi ee ay sameeyeen ma sixi karin.

"Wanaag" ayaa ah heerka *caadiga* ah ee Ilaahay dhigay. Markii uu Aadan dembaabey sida Ilaahay rabey umuu "wanaagsanayn." Wuxuu noqday sida koob ay biyo saafi ahi ku jiraan oo kale laakiinse lagu daray hal dhibic oo sun ah. Haddii aad koob biyo sumaysani ku jiraan haysatid, biyo kale oo aad ku dartaa suntaa miyay ka saaraysaa? Maya. Sidaas oo kale camallo wanwanaagsan oo badan oo la sameeyaa dhibaatada dembiga ma xallinayaan.

Oo xataa haddii ay camallo wanwanaagsan oo badani dembiga tirtiri lahaayeen, runtu waxaa weeye inaynaan dib u haysan "biyo saafi ah," yacni, camallo xaq ah oo run ah, oo aynu kusii darno dabeecaddeena dembiga ah.

Qiyaasta Ilaahay marka la fiiriyo, dadaal kasta oo aynu samaynaa waa wasakhaysan yahay.

Naftii Aadan dembi ayaa wasakheeyey, Xaawana sidoo kale. Innaguna sidaas oo kale baynu nahay. Dhammaanteen meel wasakhaysan baynu ka soo jeednaa. Nebi Daa'uud ayaa xukunka Ilaahay inoo sheegay:

> *"RABBIGU samaduu ka soo fiiriyey binu-aadmiga… **Dhammaantood** gees bay u **wada** leexdeen, oo way wada nijaasoobeen, **Mid** wanaag falaa ma jiro, **midnaba**."*
>
> (Sabuurradii 14:2-3)

## DHIBAATO LABA-JIBAARAN

Qiso qadiim ah ayaa jirta oo ku saabsan nin dil lagu xukumay oo xabsi Ingiriiska ah ku jirey. Maalin ayaa albaabkii qolkiisii xabsiga la furay oo waxaa soo galay kii xabsigaa haystey.

Oo wuxuu maxbuuskii ku yidhi, "Farax!" waayo, "Boqorradda ayaa ku cafidey."

Kii xabsiga haystey wuu yaabay markii uu ninkii iska aamusay oo dareen tusi waayey.

Kii xabsiga haystey baa ku celiyey, "War ninyohow, waan kuu sheegay, ee farax!" Isaga oo tusaya waraaqdii ninkaa lagu saamaxay. "Waa kan cafiskiii. Boqorrada ayaa ku cafidey!"

Maxbuuskii ayaa shaadhkiisii kor u qaaday, oo isaga oo tusaya buro weyn oo kansar ah, wuxuu yidhi, "Anigu waxaan qabaa kansar i dilaya dhowr maalmood ama usbuuc gudahooda. Mar haddii aanay boqorradu kanna iga qaadi karin, cafiskeedu wax micne ah iima samaynayso."

Ninkaasi wuxuu ogaa inuu u baahnaa wax ka badan *cafis* laga siiyo dembiyadiisii; wuxuu u baahnaa *nolol cusub.*

Xubin kasta oo ka tirsan farcanka Aadan waa sida eedaysanahaa oo kale. Innaga oo doorasho iyo dhalashaba dembiileyaal ku ah, laba dhibaato ayaa ina haysata: waxaynu u baahannahay in la inaga

cafiyo dembiyada aynu Ilaahay ka gallay *oo* waxaynu kaloo u baahannahay nolol xaq ah oo abadiyan ah oo inaga dhigaysa inaynu u qalanno inaynu ku noolaanno Ilaahay hortiisa oo quduus ah.

Isku soo wada duub oo, waa tan dhibaatadeena laba-jibaarani:

- **DEMBI:** Waxaynu nahay *dembiileyaal eedaysan*. Ilaahay oo keliya ayaa inaga *daahirin* kara dembigeena oo inaga badbaadin kara ciqaab abadiyan ah.

  Waxaynu u baahannahay ***cafinta*** *Ilaahay.*
- **CEEB:** Waynu *qaawannahay ruuxiyan*. Ilaahay oo keliya ayaa *dhar inooga dhigi kara* xaqnimadiisa oo noloshiisa abadiyanka ah ina siin kara.

  Waxaynu u baahannahay ***wanaagga*** *Ilaahay.*

Dembigeena iyo ceebteenu waxay u baahan yihiin laba daawo oo aynaan heli karin. Warka wanaagsani waa inuu Ilaahay taas inoo soo saaray.



# 16

# Farcanka Naagta

Habeen qabow iyo ceeryaamo jirto ayaa laba cunug oo yaryari ku dheceen god dheer oo dhiiqo leh. Labadooduba way dhaawacnaayeen, oo cabsanayeen, mid caawiyana may haysan. Midkoodna ka kale ma caawin karin maadaama ay isku xaalad ku jireen. Halkaa ayay ku dhiman dooneen haddii aan dibedda baxniino uga imaan iyaga. Saddex nin ayaa oohintii carruurtaa maqlay. Nimankii midkood ayay iyagoo xadhig isticmaalaya godkii madoobaa hoos ugu daadejiyeen. Carruurtiina halkaa way ka soo saareen.

Badbaadadoodii xagga sare ayay ka timid.

Maalintii ay Aadan iyo Xaawa markii ugu horreysey dembaabeen, iyagu sida labadaa cunug oo kale ayay noqdeen. Iskama ay soo saari karin godka dembiga ee ay ku dheceen. Haddii ay ahayd in dhimashada abadiyanka ah ka badbaadaan, baxniinadu waa inay ka timaaddo meel ka baxsan farcanka bini'aadanka ah ee dembaabey, oo ay ka timaaddaa xagga sare.

Sina ha u hilmaamin taas. Xaaladda bini'aadanku aad bay u xun tahay, oo sina iyagu isuma badbaadin karaan.

Qarniyadii la soo dhaafay oo dhan, iyadoo aan midkoodna laga reebeyn, dhammaan farcanka Aadan—ee ka dhashay ninka iyo naagtu—si dabiiciyan ah ayay u dhaxleen dabeecaddaa dembiga leh. Dhammaantood waxay ku hoos dhasheen habaarka dembiga.

Si looga badbaadiyo habaarka dembiga iyo cawaaqibadiisa, Ilaahay wuxuu qorsheeyey inuu adduunka keeno Nin aan dembi

lahayn kaas oo badbaadin siinaya dooney dhammaan kuwa doonaya in laga soo saaro godka dembiga.

Sidee ayuu Ilaahay tan ku samayn dooney? Sidee ayuu midna uga dhex dhalan doonaa qoyska bini'aadanka isaga oo aan dhaxlayn dabeecadda Aadan ee dembiga? Ilaahay wuxuu saansaantii ugu horreysey ee arrintan ku saabsanayd bixiyey maalintii ugu horreysey ee uu dembigu ku dhacay bini'aadanka.

RABBIGU digniin hordhac ayuu sii siiyey "Abeesadii" (Shaydaanka):

> *"Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo **farcankeeda**; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa."* (Bilowgii 3:15)

Marka uu ka hadlayo *"Farcankeeda"* RABBIGU wuxuu ka sii waxyoonayey in cunug lab ah daraaddiis, oo haweeneyda ka dhalan doona, uu Isagu ku badbaadin doono dembiilayaasha oo uu ugu dambaysta kaga adkaan doono oo ku caydhin doono dembiga. Tani waxay ugu horreysey boqollaal waxyi oo ka dambeeyey, oo uu midkood kastaa si sii caddaanaysa u tilmaamayo mar taariikhda ah oo uu Badbaabiyaha-Masiixu adduunka soo booqan doono.

## MUXUU *FARCANKEEDA* U NODAY?

Maxay u ahayd inuu Masiixu adduunka yimaaddo isaga oo ah *"farcank**eeda**"* Maxay u ahayd inuu *"ka dhasho **naag**,"* ee uusan nin ka dhalan? (Galatiya 4:4)

Waa tan jawaabtu: In kasta oo uu Badbaadiyaha dembiileyaashu soo booqanayey farcanka Aadan ee dembiga leh Isaga oo bini'aadan ah, Isagu waa inuu ka yimaado godka dembiga dibeddiisa. Xagga sare ayuu Isagu ka soo degi dooney.

Muddo dheer kaddib waxyigii ugu horreeyey ee ku saabsanaa *farcanka naagta,* ayuu nebi Ishacyaah qoray:

> *"Haddaba Rabbiga qudhiisa ayaa calaamad idin siin doona. **Bal ogaada, gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta, oo waxay dhali doontaa Wiil**, oo magiciisana*

*waxay u bixin doontaa Cimmaanuu'eel [oo macnihiisu yahay 'Ilaah baa inala jira'].”* (Ishacyaah 7:14)

Badbaadiyuhu wuxuu qoyska bini'aadanka kaga soo biiri doonaa caloosha haweeney dhallinyaro ah oo aan weligeed nin u tegin. Sidan ayuu Masiixu ugu soo booqan doonaa farcanka Aadan ee dembaabey Isaga oo aan dhaxlayn dabeecadda dembiga leh ee Aadan.

“Laakiinse, bal yara sug,” qof ayaa ku doodi kara; “haweenku iyaguna waa dembiileyaal. Xataa haddii uu Masiixu khaas ahaan haweeney uga dhalan dooney, miyaanu markaa ku fadaroobeen dabeecadda dembiga leh ee hooyadiis?”

Isla cutubkan dhexdiisa, waxaynu maqli doonaa sida uu Ruuxa Quduuska ahi u sababay uuraysigii mucjisada ahaa. Haddase, aynu eegno arrimo aynaan si toos ah u arki karin oo ah qorshaha uu Ilaahay adduunka ku keeni dooney Wiilkiisa bilaa dembiga ah Isaga oo soo marinaya bikro calloosheed. Sidee ayuu Masiixu ugu dhalan dooney Isaga oo aanu wasakhayn dembiga ku faafay dhammaan farcanka Aadan?

## DEMBI MA FADDARAYN

Sidii aynu hore cutubka 13 ugu soo barannay, Ilaahay wuxuu mas'uuliyadda bini'aadanka loogu hoggaamiyey boqortooyada Shaydaanka ee dembiga iyo dhimashada saaray *Aadan*. Xaawa waa la khiyaaneeyey; Aadan-se lama khiyaamayn. In kasta oo ay haweenkuna ku dhasheen dabeecadda dembiga leh ee bini'aadanka isla sida nimanka oo kale, Qorniinku wuxuu caddaynayaa in xidhiidhka aynu Aadan la leenahay sabab u yahay inaynu ku dhalano dabeecad dembi leh.[138]


Af Cibraaniga, macnaha tooska ah ee *Aadan* waa *ciid cas*. Ilaahay wuxuu Aadan jidhkiisa ka sameeyey ciidda dhulka. Kaddib markii uu Aadan dembaabey, wuxuu isaga u sheegay, *“Ciid baad tahay,* ***ciid baadna ku noqon doontaa****.”* (Bilowgii 3:19)

Taas liddigeeda, *Xaawa* macnaheedu waa *nolol*. Magacan ayaa haweeneydii ugu horreysey la siiyey waayo iyadu, “*waxay ahayd hooyadii* ***waxa nool oo dhan****.”* (Bilowgii 3:20) Maalintii uu dembigu adduunka soo galay, Ilaahay wuxuu ogeysiis ka bixiyey sidii uu ula tacaali lahaa dhibaatada dembiga oo uu adduunka

nolol weligeed ah ugu siin lahaa Isaga oo soo marinaya iyada *"Farcank**eeda**."* (Bilowgii 3:15)

In kasta oo uu Masiixu lahaan dooney jidh ka kooban cad iyo dhiig, Isagu kama imaan doonin abtirsiinyada Aadan ee dembigu saameeyey. Isaga dembi ma faddarayn doonin.

Midda xiisaha lihi waa, haddii xagga bay'oologiga oo keliya laga eego, waxaynu maanta ognahay in labnimada ama dhedignimada cunug uu "iniinta" (shahwada) aabbaha ku salaysan yahay, ee aanu ku salaysnayn "iniinta" (ugxanta) hooyada. Waxaynu kaloo ognahay in, laga bilaabo caloolgalka, uu habka ilmaha jidhkiisa oo dhan u shaqeeyaa ka duwan yahay ka hooyada. Sayniska dawada ayaa inoo sheega: "In mandheertu (placenta) ay samayso derbi dhiigga hooyada gooni u xaniba, laakiinse u oggolaada inay cuntada iyo ogsijiintu (oxygen) u gudbaan ilmahaa caloosha ku jira ee weli cadka (embryo) uun ah"[139] Xataa ka hor intii uusan Ilaahay bini'aadankii ugu horreeyey abuurin, Isagu wuxuu qorsheeyey wax kasta oo ku saabsan imaanshaha Masiixa ee adduunka.



Xasuuso tusaalihii ahaa laantii jabtay. Sida laantaa dhimatay, ee geedka ka go'day, ayuu qoyska bini'aadanku ruuxiyan u dhintay, oo looga gooyey Isha Nolosha. In kasta oo uu Badbaadiyaha dembiileyaashu ku dhex noolaanayey qoska Aadan ee xagga ruuxa ka dhintay dembiguna faddareeyey, Isagu kama soo jeedin iyaga. Isagu Laftiisu wuxuu noqon dooney *"geedka canabka ah oo runta ah."* (Yooxanaa 15:1), Isha Nolosha lafteeda.

Isagu *iin la'aan* buu noqon dooney.

"Iin la'aan" macnaheedu maaha inaan jidhkiisa dhibaato soo gaadhi doonin. Macnaheedu waa inuu dabiiciyan dhinac kasta ka wanaagsanaan doono oo uusan iin yeelan doonin. Dabeecad aan dembi lahayn buu lahaan dooney. Isagu marna kuma xadgudbi doonin Qaynuunka Ilaahay. Isagu wuxuu noqon dooney *"mid quduus ah oo aan khiyaano iyo wasakh toona lahayn, oo dembilayaasha ka soocan, oo samooyinka laga sarraysiiyey."* (Cibraaniyada 7:26)

Markaa, ma mid lala yaabo baa in Masiixa aan dembiga lahayn loogu yeedho *Ninka* ***labaad*** iyo *Aadan-kii* ***ugu dambeeyey***.

## NINKA LABAAD

> *"Waxaa qoran, '**Aadan oo ahaa ninkii ugu horreeyey** wuxuu noqday naf nool,' **Aadankii ugu dambeeyeyse** wuxuu noqday ruux wax nooleeya. Hase ahaatee, kan ruuxa lihi ma aha kii ugu horreeyey laakiin kan nafta leh, markaasna kan ruuxa leh. **Ninkii ugu horreeyey** waa kan dhulka oo cammuud ah, **ninkii labaadna** waa kan jannada."*
>
> (1 Korintos 15:45-47)

Xataa sida uu *"ninkii ugu horreeyey"* bini'aadanka oo dhan ugu hoggaamiyey boqortooyada madow ee Shaydaanka iyo dhimashada, ayuu *"Ninka labaadna"* dad badan uga saari dooney boqortooyada Shaydaanka oo u gelin doontaa boqortooyada ammaanta iyo xaqnimada leh ee Ilaahay iyo nolol. Waana sababtaa, in isla maalintii uu dembigu faddareeyey bini'aadanka, uu ILAAHAY ogeysiis u siiyey Shaydaanka in maalin maalmaha ka mid ah uu farcanka naagtu adduunka imaan doono oo isaga dhaawici doono ugu dambaystana madaxa ka jebin doono.

Nebi Miikaah ayaa sidan ka qoray Badbaadiyaha la ballanqaaday:

> *"**Beytlaxam** Efraataahay in kastoo aad ku yar tahay kumanyaalka reer Yahuudah, waxaa adiga iiga kaa soo bixi doona mid dalka Israa'iil taliye ka noqon doona, **kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis**... Isagu haatan mid weyn buu ku ahaan doonaa tan iyo dhulka darfihiisa; Oo Kanu wuxuu noqon doonaa nabaddeenna."*
>
> (Miikah 5:2, 4-5)

Miikaah muu sheegin oo keliya inuu Masiixu ku dhalan dooney magaalada *"Beytlaxam",* [140] laakiinse wuxuu kaloo sii sheegay sii jiritaankii hore ee Badbaadiyaha *"waa hore, tan iyo weligiis."*

Ka Abadiyanka ahi wuxuu soo geli dooney wakhtiga adduunka.

## NEBIYADII AYAA HORE UGA SII WAXYOODEY

Nebiyadii, kuwaas oo ka sii waxyoodey inuu Masiixu bikrad ka dhalan dooney, oo uu ku dhalan dooney Beytlaxam, waxay kaloo ka

sii waxyoodeen inuu Isaga ka soo horrayn dooney mid ogeysiis ka sii bixiya imaanshihiisa. Waxay qoreen in Ka uu Ilaahay Doortay yeelan dooney magacyada *Wiilka Ilaahay* iyo *Wiilka Aadanaha*. Waxay ka sii waxyoodeen inuu Isagu kuwa indhaha la' arag siin doono, dhegoolayaashana maqal, curyaamadana socod. Yeruusaalem ayuu soo geli dooney Isaga oo dameer fuushan oo dadkiisu way diidi dooneen Isaga. Waa lagu kajami dooney, oo la candhuufayn dooney, oo shaabuug lala dhici dooney, oo iskutallaabta lagu qodbi dooney. Isaga nafsad ahaantiisu dembi la'aan buu ahaan dooney, laakiinse wuxuu u dhiman dooney dunuubta kuwa kale. Waxaa lagu aasi dooney xabaal nin taajir ahi leeyahay, laakiinse meydkiisu muu qudhmi doonin. Laakiinse, dhimashada ayuu ka adkaan dooney, oo la arki dooney Isaga oo nool, oo samada ayuu ku noqon dooney halkaas oo uu markii hore ka yimid.[141]

Qofkee taariikhda noolaa ayaa buuxiyey astaamahan ay nebiyadu qoreen?

Waa isla Qofka taariikhda labada dhinac u kala qaybiyey.

Magaciisuna waa ***Ciise***.

## ILAAHAY BALLAMADIISA WUU DHOWRAA

Qarniyadii la soo dhaafay oo dhan, Ilaahay wuxuu ballanqaaday inuu adduunka u soo diri doono Badbaadiye ka soo bixi doona qoyska Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, Yuudah, Daa'uud, iyo Suleymaan. Markaa, Injiilka sida uu Matayos u qoray, oo ah kitaabka Axdiga Cusub ugu horreeya, ayaa ku bilaabanaya erayadan:

> *"Kanu waa kitaabkii abtirsiinyada Ciise Masiix, ina Daa'uud, ina Ibraahim. Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub, Yacquubna wuxuu dhalay Yahuudah…"*

Waxaa ku xiga abtirsiinyooyin dheer oo ay ku jirto *"boqor Daa'uudna wuxuu dhalay Sulaymaan,"* oo ku dhammaanaya *"Yuusuf oo ahaa ninkii Maryan, tii Ciise, kan Masiix la yidhaahdo, ka dhashay."* (Matayos 1:1-2, 16) *Kiristos* wuxuu la micne yahay Erayga af Cibraaniga ah ee *Masiix* oo uu micnihiisu yahay *Ka La Subkay* [La Doortay] [142] Abtirsiinyooyinkani waxay tusayaan

inuu Ciise si toos ah u ahaa farcankii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub kuwaas oo uu Ilaahay ugu ballanqaaday inuu barakadiisa adduunka oo dhan iyaga soo marin doono.

Waxaa la soo gaadhey wakhtigii uu Ilaahay dhaqan gelin lahaa qorshihiisii badbaadada, qorshahaas oo uu *"ku ballanqaaday xagga Qorniinka Quduuska ah, ee ku saabsan Wiilkiisa…"* (Rooma 1:2-3)

## WIILKA KA UGU SARREEYA

Luukos cutubka koowaad wuxuu qorayaa qiso aadan ka dhergeyn oo ku saabsan malag Jibriil oo booqanaya Sakariyas oo shaqadiisu ahayd inuu allabariyo iyo ducooyin ka bixiyo macbudkii Yeruusaalem. In kasta oo ay Sakariyas iyo xaaskiisii Elisabed aad uga da' weynaayeen inay carruur dhalaan, Jibriil wuxuu isaga u sheegay inay xaaskiisu wiil dhali doonto, kaas oo ay u bixin doonaan Yooxanaa. Yooxanahan ayaa Masiixa ka soo horreyn dooney oo dadka u sii sheegi dooney.

Qisadu way sii soconaysaa oo Jibriil ayaa haddana booqanaya gabadh dhallinyaro ah oo Ilaahay aad u adeecda oo lagu magacaabi jirey Maryan.

> *"Ilaah baa malaa'ig Jibriil u soo diray magaalada Galili oo Naasared la odhan jiray ilaa gabadh bikrad ah oo u doonanayd nin la odhan jiray Yuusuf oo dhashii Daa'uud ahaa; gabadhana waxaa la odhan jiray Maryan.*
>
> *Malaa'igtii baa u soo gashay, oo waxay ku tidhi, 'Nabad, adigoo nimcaysan, Rabbiga ayaa kula jira.' Markaasay hadalkii ka naxday, oo waxay isku tidhi, 'Maxay tahay salaantan?'*
>
> *Malaa'igtii baa ku tidhi, 'Ha baqin, Maryamay, waayo, nimco ayaad Ilaah ka heshay. Bal eeg,* ***waad uuraysan doontaa, oo wiil baad umuli doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa CIISE****. Nin weyn buu ahaan doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa* ***Wiilka Kan ugu Sarreeya****, Rabbiga Ilaaha ahuna wuxuu siin doonaa carshigii awowgiis Daa'uud… boqornimadiisuna ma idlaan doonto.'*

*Kolkaasaa Maryan waxay malaa'igtii ku tidhi,* ***'Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan mayo?'***

*Malaa'igtii waa u jawaabtay oo ku tidhi, '****Ruuxa Quduuska ah ayaa kugu soo degi doona, oo xooggii Kan ugu sarreeya ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaa darteed kan quduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeedhi doonaa Wiilka Ilaah…. Wax aan Ilaah kari doonin ma jiro.'"*** (Luukos 1:26-37)

## BADBAADIYAHA DEMBIILEYAASHA

Dhowr bilood markaa kaddib, Yuusuf ayaa ogaadey inay Maryan, oo isaga u doonnanayd uur leedahay. Si khaldan buu arrintaa u fahmey oo u maleeyey waxa ay dadku u malayn lahaayeen: inaanay Maryan isaga daacad u ahayn. Wuxuuna go'aansaday inuu is guursigooda joojiyo.

*"Ninkeedii Yuusuf wuxuu ahaa nin xaq ah oo aan doonayn inuu dadka tuso [Maryan], wuxuuse doonayay inuu si qarsoon u eryo. Laakiin intuu waxan ka fiirsanayay ayaa malaa'igtii Rabbigu riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, 'Yuusuf ina Daa'uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid, waayo, waxa ay uuraysatay ayaa* ***Ruuxa Quduuskaa ka yimid****. Oo waxay umuli doontaa wiil, magiciisana waxaad u bixin doontaa* ***Ciise, waayo, dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa****.'"*
(Matayos 1:19-21)

Sidii loogu muujiyey cutubka ugu horreeya Bilowgii, *Ruuxa Quduuska* ahi waa Ilaahay Laftiisa.[143] *Ilaahay* ayaa ah Ka si mucjiso ah *Eraygiisa* abadiyanka ugu dhex ridey calooshii Maryan.

Magaca ***CIISE*** wuxuu af Giriigga ku noqonayaa *IESOUS*, oo ka yimid erayga afka Cibraaniga ah ee *YEHOSHUA*, ama marka la soo gaabiyo *YESHUA*.

Magaca micnihiisuna waa ***"RABBIGU wuu badbaadiyaa."***

*"Waxaas oo dhan waxay u dhaceen* ***in la arko*** *wixii Rabbigu kaga dhex hadlay nebiga, isagoo leh, 'Gabadh*

*bikrad ah baa uuraysan doonta oo wiil umuli doonta, Magiciisana waxaa loo bixin doonaa, Cimmaanuu'eel; kan micnihiisu yahay, '**Ilaah baa inala jooga**.'*

*Markaasaa Yuusuf hurdadii ka kacay oo yeelay sidii malaa'igtii Rabbigu ku amartay, oo naagtiisii ayuu qaatay; uma uuse tegin iyada ilaa ay wiil umushay, oo wuxuu magiciisa u baxshay **Ciise**."* (Matayos 1:22-25)

## ERAYGA ILAAHAY WAA LA KAAMILAY

Ilaahay wuxuu mar kasta meelmarinayey qorshe uu bilaabay inuu muujiyo maalintii uu dembigu adduunka soo galay. *"Farcankeeda"* ayaa hadda dhalan dooney!

Dhowr bog ka hor waxaynu ku soo akhrinay waxyigii nebi Miikaah ee ku saabsanaa meesha uu Masiixu ku dhalan dooney. ILAAHAY wuxuu hore u sii sheegay inuu ku dhalan doono *Beytlaxam,* magaaladii Boqor Daa'uud ka yimid.

Laakiinse dhibaato ayaa jirtey.

Maryan iyo Yuusuf waxay ku noolaayeen *Naasared,* oo maalin socodkeed u jirtey Beytlaxam.

Markaa, sidee ayuu waxyiga Miikaah ku hirgelayaa?

Dhib ma leh.

Ilaahay wuxuu kicin dooney Boqortooyadii Roomaanka si ay caawimaad uga geysato in waxyigan la kaamilo.

*"Wakhtigaas waxaa dhacay in amar ka soo baxay Kaysar Awgustus in dadka dunida jooga oo dhan la qoro. Qorniinkaas kolkii ugu horreeyey waxaa la sameeyey markii Kuranayos xukumi jiray Suuriya. Dhammaan waxay u wada tageen in la qoro, mid kastaba magaaladiisii.*

*Yuusufna Galili ayuu ka kacay, oo magaaladii Naasared ka tegey, oo wuxuu aaday Yahuudiya ilaa magaaladii Daa'uud oo Beytlaxam la odhan jiray, maxaa yeelay, wuxuu ahaa dadkii iyo dhashii Daa'uud, in lala qoro Maryan oo ahayd tii u doonanayd oo uurka lahayd.*

> *Waxaa dhacay kolkay halkaas joogeen in maalmihii ay umuli lahayd dhammaadeen, **waxayna umushay Wiilkeedii curadka ahaa**, markaasay maro ku duudduubtay oo qabaal ku jiifisay, waayo, meel ay ku hoydaan ayay hudheelkii ka waayeen.”* (Luukos 2:1-7)

Masiixii la ballanqaaday adduunka kuma soo gelin qasri raaxo iyo qurux badan. Laakiinse, wuxuu ku dhashay buul yar oo waxaa la saaray qabaalka xoolaha lagu quudiyo. Sidaa hoose ee faqiirnimada ah ayuu u dhashay tan oo keentay in xataa dadka caadiga ah iyo kuwa ugu faqiirsani ay Isaga u imaan kareen oo aanay ka cabsanayn.

## OGEYSIISKII MALAA'IGTA

> *“Dalkaas waxaa jiray adhijirro bannaanka jooga oo habeenkii idahooda ilaalinaya. Malaa'igtii Rabbiga ayaa ag istaagtay, oo ammaanta Rabbiga ayaa iftiimisay hareerahooda, aad bayna u baqeen.*
>
> *Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, ‘**Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah**. Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli doontaan ilmo maro ku duudduuban oo ku jiifa qabaal.’*
>
> *Dhaqsoba waxaa malaa'igtii la jirtay guuto fara badan oo jannada ka timid, wayna ammaanayeen Ilaah oo lahaayeen, ‘Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya, Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda!’”* (Luukos 2:8-14)

Kani wuxuu ahaa wakhti muhiim ah oo xusuus mudan oo taariikhda ka tirsan. Sugitaankii dheeraa waa dhammaaday.

> *“Waxayna umushay **Wiilkeedii** curadka ahaa…”*
>
> (Luukos 2:7) [144]

Waxaa yimid farcankii naagta. Wax kastaa waxay u dheceen isla sidii ay nebiyadu uga sii waxyoodeen — Sidii iyo wakhtigii uu Ilaahay ugu talogalay.[145]

Ilaahay keliyoo malaa'igihiisa umuu soo dirin inay dhalashadii Masiixa ogeysiis ka bixiyaan oo weliba u dabaaldegaan, laakiinse wuxuu kaloo habeenkaas cirka ka muujiyey xiddig khaas ah. Koox xiddigiyeyaal ah iyo niman hanti leh oo xigmad badan oo reer Bari ahaa ayaa xiddigtaa arkay oo soo raacay. Waxay ogaayeen inay taasi calaamad u ahayd imaanshihii Masiixii la ballanqaaday. Kaddib socdaal dheer oo adag oo ay Faaris (Beershiya) ka soo bilaabeen dabadeed, nimankan madaxda ahi waxay Boqorkii Herodos ugu tageen Yeruusaalem. Hal su'aal oo keliya ayay isaga weydiiyeen:

> *"**Xaggee buu joogaa** boqorka Yuhuudda ee dhashay? Waayo, bari ayaannu xiddigtiisii ka aragnay, oo waxaannu u nimid inaannu caabudno."* (Matayos 2:2)[146]

## SHAKHSIYADA CUNUGGA

Yuu ahaa cunuggan wiilka ah ee ku dhashay buulka yari, ee qabaalka xoolaha lagu seexiyey, ee ay nebiyadii ka sii waxyoodeen, ee ay malaa'iguhu soo dhoweeyeen, ee ay xoolaleydu soo booqatay, ee xiddigta lagu sharfay, ee ay nimanka xigmadda lihi caabudeen?

Mar kale dhegeyso wixii ay malaa'igtii ku tidhi adhijirradii:

> *"Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah **Masiixa Rabbiga ah**."*
> (Luukos 2:10-11)



Qofka jidhkaa yar ku dhex jiraa wuxuu ahaa RABBIGA.



# 17

# Waa Kuma Kani?

*"Deerada boodboodaa carruur god qodata ma dhali karto."*
— Maahmaah qabiilka Wolof

Isla sida ay deerooyinku u dhalaan farcan deero u eg oo keliya, ayaa dembiileyaashuna u dhalaan farcan leh dabeecado dembiilenimo u leh. Haddii sidiisa loo daayo, bini'aadanku taas kama gudbi karo. Waxaana laga arkaa.

## KUWII DEMBAABEY

Ka feker warshadaha filimada sameeya ee Maraykanka. Sannad kasta, Hollywood waxay soo saartaa oo dhoofisaa filimo ay atoorayaal iyo jilayaal ka yihiin rag iyo dumar tasaya naf-jeclaysi, macsi, faraxumayn, cay, gacan-ka-hadal, aargoosi, iyo khiyaano. Maxay kuwa filimadaa qoraa si ula kac ah dabeecadahaa dembiga ah ugu sheegaan inay jilayaashu jilaan, iyaga oo haddana isla jilayaashaa u tusaya inay yihiin kuwa "fiicfiican"? Maxay u samayn waayeen filimo uu atooruha "fiicani" yahay mid xaq ah, oo naxariis badan, oo dadka caawiya, oo saamaxa, oo daacad ah? Tan bay sameeyaan waayo bini'aadanka dembi ayaa faddareeyey oo ka buuxa. Xataa dadka ugu dabeecadaha wanwanaagsan ee uu bini'aadanku mala-awaali karo dembi baa saamayn xun ku leh. Saamayntaasina Hollywood kuma koobna.

Dabeecadda bini'aadanka ee dembiga u janjeedhaa siyaalo badan oo aan mararka qaarkood toos kuugu muuqan baa loo tusaa.

Haddii aad Adduunka Carabta ku nooshahay, waxaa laga yaabaa inaad maqashay qisada qarniyada badan soo jirtey ee caanka ee Juxaa la yidhaahdo. Qisooyinka Juxaa iyo dameerkiisii waynu ka hellaa oo inagaga qosliyaan. Qisooyinkan Juxaa ee badan iyo sida uu xariifka iyo aftahanka u yahay, waxaa haddana ka buuxa sida uu u naf-jeclaysi badan yahay, caydiisa, fekeraddiisa aan wanwanaagsanayn, aargoosigiisa, khiyaanadiisa, iyo ballandarradiisa. Bal ka feker! Xataa shakhsiyaadka ugu muhiimsan sheekooyinka aynu alifno ee jecellahay dembi ayaa wasakheeyey. Waa kan tusaale sahlan oo ku saabsan mid qisooyina Juxaa ah:

Saaxiibkiis ayaa maalin u yimid.

> Saaxiibkiis ayaa ku yidhi, "Waxaad iigu ballanqaadday inaad lacag i amaahisid, markaa waxaan kuugu imid inaad ballantaa ka soo baxdid."
>
> Juxaa ayaa saaxiibkiis ku yidhi, "Saaxiib dhegeyso, anigu qofna lacag ma amaahiyo, laakiinse ballantaydaa waan ka soo baxayaa maadaama aad qalbigaaga ka gelisey!"[147]

Sheekadan mala-awaalka ah ee Juxaa waynu iska dhex arki karnaa, innaguna sidaas oo kale ayaynu ballammo aynaan ka soo bixin galnaa. Dabeecaddeena dembiga leh marka la eego, *Juxaa* oo kale ayuun baynu nahay.

Laakiinse, waxaa jira Qof taariikhda jirey[148] kaas oo ballammadiisii oo dhan oofiyey. Mar kasta runta ayuu sheegi jirey. Isagu weligiis wax muu sirin, caayin, maagin, mana aargoosan.

Magaciisu waa ***Ciise.***

> *"Isagu **ma uu dembaabin**, **khiyaanona** afkiisa l**agama helin**. Oo isagu markii la caayay, dadkii caayay **cay uma uu celin**. Markuu xanuunsadayna **ninna ma uu cabsiin**, laakiinse wuxuu isu dhiibay kan xaqnimada wax ku xukuma."* (1 Butros 2:22-23)

## KA AAN DEMBIGA LAHAYN

Nolosha Ciise aad bay uga duwan tahay dhaqammada adduunka ee dembiga miidhan ah. Isagu wuxuu ahaa qofka keliya ee abid dhashay ee aan dembiga lahayn. Isaga wuxuu ahaa *"mid si walba loo jirrabay sideena oo kale, oo aan weliba **dembi lahayn**."*

(Cibraaniyada 4:15) Feker xaaraan ahi weligiis maskaxdiisa muu soo gelin. Hadal naxariisdarro ahi weligiis afkiisa kama soo bixin. Ciise wuxuu la koray gabdho iyo wiilal ay dhinac walaalo ka ahaayeen oo kula koray guri faqiir ah oo Naasared ku yaalley,[149] si *caadiyan* ah ayuu Tobanka Amar u adeeci jirey iyo qaynuun kasta oo kale oo Ilaahay—jidh ahaan iyo niyad ahaanba. In kasta oo uu Ciise sideena oo kale jidh lahaa, Isagu muu lahayn dabeecaddeena dembiga diyaarka u ah oo kale.

> *"Oo idinku waad og tihiin in isagu u muuqday inuu dembiyadeena inaga qaado, **oo Isagu dembi ma leh**."*
> (1 Yooxanaa 3:5)

Soddon jirkiisii, ayuu Ciise adduunka ka bilaabay adeeggii uu u yimid.[150] Dagaalkii ka dhexeeyey Ilaahay iyo Shaydaanka ayaa hadda sii kululaanayey. Shaydaanku wuu garanayey inuu Wiilka Ilaahay u yimid inuu Isaga ka adkaado, laakiinse muusan garaneyn *sida* uu qorshaynayey inuu taas u sameeyo.

Isla sidii uu Shaydaanku ninkii ugu horreeyey ugu dibindaabyeeyey inuu Qaynuunka Ilaahay jebiyo, ayuu haddana isugu deyayey inuu dibindaabyeeyo ninka labaad, Ninka Aan Iinta Lahayn, inuu isna jebiyo Qaynuunnada Ilaahay.

> *"Ciise… Ruuxii baa cidlada u kaxeeyey. Afartan maalmood ayaa Ibliisku jirrabayay. Maalmahaasna waxba ma cunin. Goortay maalmihii dhammaadeen ayuu gaajooday.*
>
> *Markaasaa Ibliisku wuxuu ku yidhi, '**Haddaad tahay Wiilka Ilaah** ku dheh dhagaxan, kibis noqo.'*
>
> *Ciise baa u jawaabay oo ku yidhi, 'Waa qoran tahay, "Dadku waa inaanu kibis oo keliya ku noolaan, laakiinse eray kasta oo Ilaahay." '"* (Luukos 4:1-4)

U fiirso inuusan Shaydaanku isku deyeyn inuu Ciise sameeyo wax "shar" ah. Shaydaanku wuxuu doonayey oo keliya in Ninkaa aan dembiga lahayni ee (meeshaa uu isagu ta "talinayey" yimid) sameeyo ficillo uu kaga madax bannaanaanayo Aabbaha Jannada, maadaama aynu hore cutubka 11 ugu soo aragnay in, in *lagu fekero ama la sameeyo ficillo Ilaahay ka madax bannaani yihiin **dembi***.

Muhiimaddu waa: Haddii uu Masiixu hal dembi oo keliya samayn lahaa, Isagu kumuu guuleysteen hawshii uu u yimid ee ahayd inuu farcanka Aadan ee habaaran ka badbaadiyo qaynuunka dembiga iyo dhimashada.

Isla sida ninka deynta badan lagu leeyahay uusan ugu qalmin inuu deynta qof kale bixiyo, ayuusan dembiile u awoodin inuu bixiyo dembiyada dembiile kale. Laakiinse, *Wiilka Ilaahay*, kaas oo noqday *Wiilka Aadanaha,*[151] deyn dembi oo tiisa ah muu lahayn. Isaga dhimasho marna ma asiibteen maadaama uu dembi xor ka ahaa, sida aynu mar dhow arki doono, Ilaahay qorshihiisu sidaas muu ahayn.

Weli wuxuu Shaydaanku ku dadaalayey inuu Ciise ku dhiirrigeliyo inuu dembaabo Isaga oo samaynaya wax ka madaxbannaan qorshaha Ilaahay ee saxda ah. Mar kasta oo uu Shaydaanku sidaas isku dayo Ciise wuxuu soo xiganayey Qorniinka.[152]

> *"Oo markuu kor u kaxeeyey wuxuu wakhti yar ku tusay quruumaha dunida oo dhan. Markaasaa Ibliisku wuxuu ku yidhi, 'Amarkan oo dhan waan ku siinayaa iyo ammaantoodaba, waayo, waa lay siiyey; oo kii aan doonayo ayaan siiyaa. Haddaba haddaad hortayda i caabuddid, kulli adaa lahaan doona.'*
>
> *Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, 'Tag Shaydaanow! Waa qoran tahay, Waa inaad caabuddo RABBIGA Ilaahaaga ah oo waa inaad isagoo keliya u adeegto." '"* (Luukos 4:5-8)

Isla sidii uu Ilaahay abuuritaankii oo dhan madax uga dhigay Aadan, hadda Shaydaanku wuxuu Ciise soo hordhigayey inuu madax u noqdo wixii uu Shaydaan ahaan xaday kaddib markii uu Aadan doortay inuu isaga raaco.[153]

Ciise wuxuu Aadan kaga duwan yahay **inuusan Isagu adeecin** Shaydaanka.

Eraygii Ilaahay ayaa jidh noqday.

## XERTII CIISE

Muddo gaaban kaddib markii uu Ciise addeeggiisii adduunkan bilaabay, Isagu wuxuu doortay laba iyo toban nin oo meeshuu

aadoba u raaca. Haween badan ayaa iyaguna Ciise la socdey. Raggan iyo haweenkani waxay markhaatiyaal ka ahaayeen dhammaan waxyaalihii uu Ciise yidhi oo sameeyey.

> *"Waxaa dhacay inuu magaalooyinka iyo tuulooyinka dhex marayay isagoo dadka ku wacdiyaya oo u sheegaya injiilka boqortooyadii Ilaah; waxaana la jiray laba-iyo-tobankii, iyo naago laga bogsiiyey jinniyo shar leh iyo cudurro… oo qaar badan oo kale oo waxooda ugu adeegi jiray."*
> (Luukos 8:1-3)

Ciise isku si buu u tixgelin jirey ragga, haweenka iyo carruurta. Injiilka waxaa meelo badan kaga qoran qisooyin uu Ciise haweenka ula dhaqmayo si tixgelin iyo sharaf weyn leh taas oo aad uga sarreysey dhaqankii Yuhuudda iyo kii Roomaanka ee berigaa.

Ciise wuxuu qof kasta u arkayey inuu leeyahay qiime aan la goyn karin, laakiinse weligiis qof kumuu khasbin inuu Isaga dhegeysto, rumeeyo, ama raaco. Wuxuu jeclaa inuu wakhti la qaato dadka ay niyadahooda iyo qalbiyadoodu u janjeedheen inay runta maqlaan oo aqbalaan, qiimo kastaba iyaga ha ugu fadhidee.

## SU'AAL FURE AH

In kasta oo dad badan oo caadi ahi Ciise raaceen, hoggaamiyeyaashii diinta ee Yuhuudu sidaas may samayn.

Maalin ayaa Ciise su'aashan muhiimka ah iyaga weydiiyey:

> ***"Yuu idinla yahay Masiixu? Waa ina ayo?"***
> (Matayos 22:42)

Waxay ugu jawaabeen oo sheegeen inuu Masiixu noqon dooney farcanka Boqor Daa'uud. Ciise ayaa iyaga xasuusiyey inuu Daa'uud ka sii waxyoodey Badbaadiye la ballanqaaday kaas oo *adduunka* marka loo eego noqon dooney *ina Daa'uud* isla markaana *samaawi* ahaan dooney *Wiilka Ilaahay.*[154]

Mar ka sii horreysey, ayuu Ciise isla su'aashaas oo kale weydiiyey xertiisa:

> *"'Dadku yay ku sheegaan Wiilka Aadanaha?*

> *Waxay yidhaahdeen, 'Qaar waxay yidhaahdaan... nebiyada midkood.' Markaasuu wuxuu ku yidhi, 'Idinkuse yaad igu sheegtaan?'*
>
> *Simoon Butros ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, 'Waxaad tahay Masiixa ah Wiilka Ilaaha nool.'*
>
> *Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, 'Waad barakaysan tahay Simoon ... waayo, bini-aadmi tan kuuma muujin, laakiin Aabbahayga jannada ku jira ayaa kuu muujiyey.'"*
>
> (Matayos 16:13-17)

Hadda ama hadhow kay noqotaba, dhammaanteen innaguna waa inaynu isla su'aashaas oo ka jawaabnaa: Maxaad Ciise ka qabtaa? Ayuu wiilkiisa Isagu yahay?

**WAXA AY QAAR YIDHAAHDAAN**

Dad badan oo reer Galbeed ah, Erayga *Ciise* waxay isticmaalaan marka ay isku xanaaqaan ee is habaarayaan oo keliya.

Kuwo kale ayaa sheega inuu keliya oo ahaa macallin caan ah oo waxyaallo wanwanaagsan dadka baray.

Yuhuudda xag-jirka ahi xataa way ka gabadaan inay magaca Ciise afkooda soo mariyaan, oo waxay ugu yeedhaan oo keliya "ninkaas."

Hinduugu waxay Ciise u arkaan mid ka mid ah ilaahyadooda ragga iyo dumarkaba leh oo jidh ahaan u muuqday.

Muslimiin badan oo aanu deris nahay ayaa igu yidhaahda: "Waxaanu Ciise u aqoonsannahay oo u sharafnaa inuu nebi weyn yahay, laakiinse isagu maaha Wiilka Ilaahay."

Mid nala soo xidhiidhay ayaa sidan u dhigay:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Anigu waxaan ku noollahay Sucuudi Carabiya… Waxaanu rumaysannahay inuu Ciise ahaa oo keliya nebi ee aanu ahayn wiilka Ilaahay. Ciise lama dilin. Isagu wuu soo laaban doonaa oo qof kastaa wuu arki doonaa dhinaca uu ku biiro. Waxaan rajeynayaa inay tani dhacdo inta aan anigu noollahay si aad idinku diintayada quruxda badan u soo gashaan oo aad u aragtaan ilayska runta ah.

Mid reer Malaysiya ah ayaa isaguna sidan noo soo qoray:

Mowduuca: Email la soo diray

Anigu waxaan rumaysanahay inuu Ilaahay Mid yahay oo uusan weligii noqon ama u ekaan bini'aadan… Haddii uu qofna u maleeyo inuu Ilaahay qaab bini'aadan yeeshay, markaa kaasi waa bidci weyn.

Fikradahaasi waxay ku salaysan yihiin waxa uu Quraanku ka sheegay Ciise Masiix.

## WAXA UU QURAANKU LEEYAHAY

Quraanku wuxuu ku celcelinayaa inuu Ciise *"nebi uun yahay."* (Suuradaha 4:171-173; 5:75; 2:136) Sidaas oo ay tahay, kitaabkan ay Muslimiintu aadka u qagdariyaan ayaa sheegaya inuu Ciise yahay mid khaas ah oo ka duwan nebiyada kale oo dhan oo uusan lahayn aabbe bini'aadan ah, oo Isaga ugu yeedhaan magaca *ibn Maryama, "Ciise ina Maryama."* (Suuradda 19:34) Quraanku wuxuu ka hadlaa dembiyo ay nebiyo galeen, laakiinse marna Ciise dembi kuma sheegayo. Wuxuu Isaga ugu yeedhayaa *"Wiilka quduuska ah."* [155] Quraanku wuxuu kaloo Ciise ku sheegayaa inuu yahay nebiga keliya ee nolol abuuri kara, indhoolaha arag siin kara, baraslayaasha bogsiin kara, oo kuwa dhintay soo sarakicin kara.[156] Waa Ciise oo keliya ka uu Quraanku siinayo magacyadan sarsare sida *Al Masiix* (Masiix), *Ruuxu-ALaah* (Ruuxa Ilaahay), *Kelimatu-ALaah* (Erayga Ilaahay).[157]

Halkaa waxaynu ka aragnaa inuu Quraanku qirayo sida uu Ciise u yahay mid khaas ah, laakiinse waa inaynu kaloo sheegnaa in sida uu Quraanku Ciise ugu sheegayo *"Masiix, ina Maryama"* ay aad uga duwan tahay sida uu Baybalku taas u isticmaalo. Tusaale ahaan, isla aayadda Quraanka ah ee Ciise cinwaannadaa aynu kor ku soo sheegnay siinaysa ayaa haddana odhanaysa:

> *"Masiixa, Ciise ina Maryama, **wuxuu keliyoo ahaa nebi Ilaahay**, eraygiisa oo uu Maryan siiyey, iyo ruuxi Isaga ka yimid. Markaa, Ilaahay iyo nebiyadiisa rumeeya, oo **ha odhanina 'Saddex.' Joojiya**! Taasaa idiin fiican! Ilaahay waa Ilaah keliya. **Weynaanta sharaftiisu way ka fog tahay inuu Isagu wiil yeesho**."* (Suuradda 4:171)

Waddanka Sinigaal, carruurta iyo cirooluhaba way u fuddudahay inay ku dhawaaqaan, "Ciise maaha wiilka Ilaahay! Ilaahay Wiil ma leh!" laakiinse waxay kaloo sidoo kale ku adkaystaan, "Ciise iskutallaabta laguma qodbin!"

Xaggee ayay ka keeneen fikradda ah inaan Ciise la iskutallaabin?

Fikraddanina waxay ka timid Quraanka, oo odhanaya: *"[Yuhuuddu] aad bay Maryan u eedeeyeen; oo waxay faan ahaan u yidhaahdeen, 'Annagu waxaanu diley Ciise Masiix ina Maryama, Nebigii Ilaahay'*; ***laakiinse isaga may dilin, mana iskutallaabin****, laakiinse saasay iyaga ula muuqatay, kuwa aan sidan oggolayna shaki baa ka buux, oo aqoon uma laha, laakiinse way iska raacaan,* ***waayo waa hubaal inaanay isaga dilin****. Maya, Ilaahay baa isaga isu sarakiciyey; Ilaahay waa Awood iyo Xigmad badan yahay."* (Suuradda 4:156-158)

## WAXA UU BAYBALKU LEEYAHAY

Qarniyaal badan ka hor intii aan Quraanka la qorin, afartan nebi iyo rasuul oo Qorniinada Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub qoray sawir kaas ka duwan ayay Ciise iyo adeegiisii ka sheegeen.

Marka la eego cinwaanka Ciise ee "Wiilka Ilaahay," Yooxanaa, oo muddo saddex sanno ka badan Ciise la socdey oo la hadlayey wuxuu ka markhaati kacayaa sidan:

> *"Haddaba waxaa Ciise ku sameeyey xertii hortooda calaamooyin kale oo badan oo aan ku qorrayn kitaabkan. Laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysataan* ***inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah****, iyo inaad* ***nolosha ku lahaataan magiciisa*** *idinkoo rumaysanaya."*
> (Yooxanaa 20:30-31)

Rasuul Yooxanaa ayaa sidoo kale qoray:

> *"Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis… Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay,*

> *oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa."* (Yooxanaa 1:1-3, 14)

Sannado ka hor, ayuu mid Muslin ah oo aanu saaxiib nahay si hoose iigu sheegay, "Quraanku wuxuu Ciise siinayaa cinwaanka ah *Kalimatu-Allah* iyo *Ruuxu-Allah*. Haddii uu Ciise yahay Erayga iyo Nafta Ilahaay, markaa Isagu waa Ilaahay!"

Mar dambe, ayay dad kale saaxiibkaygaa ku eedeeyeen inuu *shirki* sameeyey (Carabi: *Ilaahay wax kale la simay ama la xidiidhiidhiyey*[158]). Keligiis maaha! Ciise ayay madaxdii diinta ee Yuhuuddu eeddaas oo kale u soo jeediyeen.

Ciise ayaa yidhi,

> *" '**Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay**.'*
>
> ***Markaasay Yuhuuddu haddana dhagaxyo u gurteen inay dhagxiyaan**.*
>
> *'Ciise ayaa ugu jawaabay, Shuqullo badan oo wanaagsan ayaan idinka tusay xagga Aabbahay. Shuqulladaas kee baad igu dhagxinaysaan?'*
>
> *Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, 'Shuqul wanaagsan aawadiis kugu dhagxin mayno, laakiin **caytanka aawadiis** iyo **inaad adigoo nin ah Ilaah iska dhigayso**.' "*
>
> (Yooxanaa 10:30-33)

Yuhuuddii waxay Ciise ku eedeeyeen isla sidii uu Shaydaanku isku deyey inuu sameeyo: inuu isa sarraysiiyo oo isa siiyo jagada sare ee Ilaahay keliyahi leeyahay. Waxay Ciise ku dacweeyeen inuu *Laftiisu Ilaahnimo sheegay*.

Laakiinse arrimaha way isku khaldayeen.

## WAA ILAAH JIDH BINI'AADAN QAATAY, EE MAAHA NIN ILAAH NOQDAY

Ciise iyo nebiyadii kale midna ma barin inuu *nin noqonayo Ilaahay,* laakiinse Qorniinka waxaa ku cad inuu *Ilaahay nin noqonayo*.

Tusaale ahaan, 700 oo sanno intaanu Masiixu dhalan ka hor, nebi Ishacyaah ayaa qoray:

> *"Dadkii ku socon jiray gudcurka ayaa iftiin weyn arkay, kuwii fadhiyi jiray dalka hooska dhimashada ahna iftiin baa u baxay. …Waayo, waxaa inoo* ***dhashay Ilmo****, waxaa layna* ***siiyey Wiil****, oo boqornimadu garbihiisay saarmi doontaa, oo magiciisana waxaa loo bixin doonaa Ka Yaabkaleh, iyo Lataliye, iyo* ***Ilaaha Xoogga leh****, iyo Aabbaha Daa'imka ah, iyo Amiirka Nabadda."*
>
> (Ishacyaah 9:2, 6)[159]

Ishacyaah wuxuu sidoo kale erayadan ka qoray imaanshihii Masiixa:

> *"Kaaga warka wanaagsan keenayow, codkaaga kor xoog ugu qaad, kor u sii qaad, oo innaba ha cabsan. Oo magaalooyinka dalka Yahuudah waxaad ku tidhaahdaa, '****War bal Ilaahiinna eega****!'"* (Ishacyaah 40:9)

Ilaa iyo bilowgiiba, qorshaha Ilaahay waxaa ku jirey *Ilaahay oo jidh bini'aadan qaadanaya* (incarnation), ee kumay jirin *bini'aadan laftiisu iska dhigaya ilaah* (deification). In la yidhaahdo qof ayaa Ilaah noqday waa shirki, laakiinse in la garowsado in *Erayga Ilaahay ee abadiyanka ahi uu nin noqday* waa in la aqbalo qorshaha Ilaahay weligiis lahaa.

## QORAAL AHAAN *IYO* SHAKHSI AHAANBA

Haddii aad dooneysid inaad qof si fiican u barato, sidee ayaa ugu fiican inaad taas u samayso?

- Xidhiidkiina ma waraaqo aad isu dirtaan baad ku soo koobi lahayd.
- Mise, kaddib marka aad muddo waraaqo is dhaafsataan, qofkaas weji-ka-weji baad kula kulmi lahayd oo wakhti baad wada qaadan lahaydeen.

Si kastaba Qorniinku mid cajiib ha u ahaadee, Ilaahay, kaas oo beri toos ula socday ulana hadlay Aadan iyo Xaawa, oo qorsheeyey inay farcankoodu Isaga si shakhsiyan ah u bartaan, marna qorshihiisa ma ahayn inuu xidhiidhka uu inala leeyahay qoraal bes ku daayo. Isla bilowgiiba, wuxuu Isagu qorsheeyey inuu *shakhsiyan* inoola xidhiidho. RABBIGA, ay qarniyaal badan

nebiyadiisu Eraygiisa ku qorayeen caleemo la isku tolay iyo harag xayawaan, wuxuu ballanqaaday inuu Naftiisa bini'aadanka ugu muujin doono *jidh bini'aadan*. Ilaahay ma qorshayn oo keliya inuu erayadiisa kitaab inoogu qoro, laakiinse wuxuu kaloo qorsheeyey inuu Eraygiisa *jidh* ahaan inagu siiyo.

> *"Saas daraadeed kolkuu Masiixu dunida soo galay wuxuu Isagu yidhi: '... **Jidh** baad ii diyaarisay Aniga.'"*
> (Cibraaniyada 10:5)[160]

> *"Oo muran la'aan qarsoodiga cibaadadu waa weyn yahay: Isaga **jidh** baa lagu muujiyey."* (1 Timoteyos 3:16)

## SHARAF KA-DHAC?

Iyada oo uu Ilaahay ku celceliyey qorshihiisa ku saabsan inuu dadka dhex imaan doono, waxaan maqlayaa kuwa odhanaya: "Ilaahay sharaftiisa weyn daraadeed wuu ka nasahan yahay inuu Isagu nin noqdo!"

In kasta oo ay fikradda ah Ilaahay oo nin iska soo dhigayaa tahay mid ay sida loo fahmaa adag tahay, taasi runtii ma Ilaahay weynaantiisa ayay ka hoosaysaa oo sharaf dhac ku tahay? Mise waxay qayb aad muhiim ah ka tahay dabeecadda Ilaahay iyo qorshihiisa ah inuu mar kale xidhiidh aad u dhow la yeesho dadka Isagu Laftiisa u abuurtay?

Nolosha caadiga marka la eego waxaynu badanaa xidhiidhka ugu dhow la yeelanaa kuwa soo maray wixii aynu soo marnay oo kale. Dadka u qalma inay u qalbi qaboojiyaan oo caawiyaan kuwa kale waa kuwa iyaguna isla dhibaatooyinka iyo murugooyinka kuwa ay caawinayaan soo maray. Abuuraheenu waa Qalbi-qaboojiyaha Kama-Dambaysta ah.

> *"**Carruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo dhiig, taas aawadeed Isaguna sidaas oo kale ayuu uga qayb qaatay**... Waayo, Isaga qudhiisu wuu xanuunsaday Isagoo la jirrabay, taas aawadeed wuu karaa inuu caawiyo kuwa la jirrabo.... Waayo, ma aynu lihin wadaad sare oo aan itaaldarradeena ka nixi karin, laakiin waxaynu leennahay*

> ***mid si walba loo jirrabay sideena oo kale, oo aan weliba dembi lahayn**.”* (Cibraaniyada 2:14, 18; 4:15)

Isla bilowgiiba qorshaha Ilaahay bay ahayd inuu qaato xadidaadaha iyo dhibaatooyinka jidhka cadka ah; oo uu dhidido, gaajoodo, damqado, oo uu dareemo waxa aynu dareeno. Kuwa si sidan ka duwan baraa ma diidayaan nebiyadii Ilaahay iyo qorshihiisa, laakiinse waxay kaloo beeninayaan dabeecadda Ilaahay iyo astaamihiisa. Halkii ay iyagu ka aqbali lahaayeen waxa uu Ilaahay Isaga keen muujiyey inuu yahay Abuure daacad ah oo jacayl badan oo doonaya inay dadkiisu si shakhsiyan ah Isaga u gartaan, kuwaasi waxay ku doodayaan inuu Ilaahay yahay mid aan la isku hallayn karin oo aan la garan karin.

Wax "sharaf" ahi kuma jirto in la diido in heerka dadka kale hoos loogu soo dego si kuwaas loo caawiyo oo loo barakeeyo. Taariikhda bini'aadanka kuma jirto mar uu Abuuraheenu iskala weynaadey fikirka ah inuu heerkeena hoos ugu soo dego. Qorshihiisa iyo farxaddiisa ayay ahayd inuu sidaas sameeyo.[161]

> *"**Isagoo hodan ah ayuu** aawadiin **miskiin u noqday**, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan."* (2 Korintos 8:9)

Waa adiga iyo aniga daraaddeen in Erayga Abadiyanka ahi adduunkeena yimid. Abuuraha adduunka oo *"hodan ku ah"* ammaan iyo sharaf, ayaa *"miskiin u noqday,"* oo qaatay boos midiidin, si aynu innagu taajiriin u noqono, maaha xagga lacagta iyo alaabta adduunkan, laakiinse xagga barakooyinka ruuxiyanka ah sida saamaxaadda, xaqnimada, nolosha weligeed ah, jacayl, farxad, nabad, iyo damacyo quduus ah.

## WEYNAANTA OO LA QEEXAY

Dad badan ayaa u maleeya inuu Ilaahay aad *uga weyn* yahay inuu adduunka ku yimaaddo jidh cad iyo dhiig leh. Ma laga yaabaa inay sidan ku fekeraan waayo sida ay *weynaanta* u qeexaan ayaa ka duwan sida uu Ilaahay weynaanta u qeexo?

Ciise ayaa qeexay weynaanta runta ah markii uu sidan ku yidhi xertiisii:

> *"Idinku waad garanaysaan in kuwa loo malaynayo inay quruumaha madaxdooda yihiin ay u taliyaan, oo kuwooda u waaweynna ay xukun ku leeyihiin. Laakiin sidaasu dhexdiinna ma aha, laakiin ku alla kii doonaya inuu dhexdiinna u **weynaado, midiidinkiinna** waa inuu ahaado, oo ku alla kii doonaya inuu idiin horreeyo, kulli waa inuu addoon u ahaado. **Waayo, Wiilka Aadanahu uma iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo**."* (Markos 10:42-45)

Qofka ugu weyn ama ugu muhiimsani waa ka isugu hoosaysiinta badan ee dadka sida ugu fiican ugu adeega.[162]

Sidaas ayuu Abuuraheenu innaga inoo sameeyey.

## SAYIDKA DABAYSHA IYO HIRARKA BADDA

Maalin ayay Ciise iyo xertiisii wada saarnaayeen doontoodii kalluumaysiga oo maraysa Badda Galiili.

> *"Oo waxaa badda ka kacay **duufaan weyn**, ilaa ay hirarku qariyeen doonnida, laakiin Isagu [Ciise] waa hurday.*
>
> *Markaasaa xertiisii u timid oo toosisay, iyagoo leh, 'Sayidow, na badbaadi, waannu lumaynaaye!'*
>
> *Kolkaasuu wuxuu ku yidhi, 'Maxaad u baqaysaan, rumaysadyarayaalow?' Markaasuu kacay, oo canaantay dabaysha iyo badda, oo **xawaal weyn** baa dhacday.*
>
> *Haddaba nimankii waa yaabeen, oo waxay isku yidhaahdeen, '**Waa nin caynkee ah kan xataa dabaysha iyo badduba yeelaan**?'"* (Matayos 8:24-27)

Sidee baad *adigu* uga jawaabeysaa su'aashan xerta?

## "WAA KUMA KANI?"

Way caddayd inuu Ciise qof ahaa. Doonta dhexdeeda ayuu hurdey; Isagu wuu fahmayey waxa ay ka dhigan tahay in la daalo, la gaajoodo, oo la harraado. Laakiinse intuu toosay ayuu duufaankii canaantay. Isla markiiba dabayshii xoogga lahayd way joogsatey baddii kacsanaydna way degtey.

Mid la yaab leh maaha inay xertii is weydiiyaan:

*“Waa kuma kani?”*

Kun sannadood markaa ka hor, mid nebiyadii Ilaahay ka mid ah ayaa qoray:

*“Bal yaa sidaada u xoog badan, RABBIYOW? …Adigaa u taliya badda kibirkeeda, Oo markii hirarkeedu kacaan adigaa dejiya.”* (Sabuurradii 89:8-9)

*Waa kuma kani?* Wuxuu kaloo Injiilku sheegayaa Ciise oo badda ku dul socday.[163] Mar kale xertii Ciise *“aad iyo aad bay u nexeen oo ula yaabeen.”* (Markos 6:51) Laakiinse Ciise hirarka badda ugumuu kor socon si ay dadku taas ula yaabaan daraadeed; Isaga ayaa iyaga ka caawiyey inay fahmaan ka uu Isagu yahay.

Laba kun oo sannadood markaas ka hor, nebi Ayuub ayaa sidan Ilaahay ka qoray:

*“**Isaga oo keliya** ayaa samooyinka kala bixiya, Oo **wuxuu ku dul socdaa hirarka badda**.”* (Ayuub 9:8)

*Waa kuma kani?* Ilaahay wuxuu inagu martiqaadayaa inaynu dhibcaha ama xariiqaha isku xidhno oo garanno ka uu Ciise ahaa oo yahay.

Nasiibdarradu waa, dadka badankiisu marna ma fahmaan.

*“Wuxuu ku jiray dunida, dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa, **oo duniduna ma ay garanayn isaga**.”* (Yooxanaa 1:10)

*Waa kuma kani?* Ciise Laftiisa ayaa su’aashaas ka jawaabey, maalin uu la hadlayey koox diimeed cadhaysan.

**“ANNAA AH”**

*“Haddaba Ciise ayaa mar kale la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, ‘Anigu waxaan ahay nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan*

*doonaa nuurka nolosha.... Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddii qof uun ereygayga xajiyo, weligiis dhimasho ma arki doono.'*

*Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen Isaga, 'Imminka waxaannu garanaynaa inaad jinni qabto. Ibraahim waa dhintay iyo nebiyadiiba, adiguna waxaad leedahay, 'Haddii qof uun hadalkayga xajiyo, weligiis dhimasho ma dhadhamin doono' Miyaad ka sii weyn tahay aabbaheen Ibraahim oo dhintay, iyo nebiyadii dhintay? Yaad iska dhigaysaa?'*

*Ciise wuxuu ugu jawaabay, '...Aabbihiin Ibraahim waa ku reyreeyey inuu maalintayda arko, wuuna arkay oo ku farxay.'*

*Sidaas aawadeed Yuhuuddii waxay ku yidhaahdeen, 'Weli konton sannadood ma aadan gaadhin, oo Ibraahim ma aragtay?'*

*Ciise wuxuu ku yidhi, '**Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Intaan Ibraahim jirin** ANNAA AH.' Markaasay dhagaxyo u gurteen inay ku tuuraan, laakiin Ciise waa dhuuntay, wuuna ka baxay macbudka."*

(Yooxanaa 8:12, 51-53, 56-59)

Maxay isugu dayeen inay Ciise dhagxiyaan? Waayo wuxuu yidhi, *"Qof uun hadduu **Ereygayga** xajiyo, **weligiis dhimasho ma arki doono**,"* iyo: *"**Intaan** Ibraahim jirin **ANNAA AH**."* Ciise muu caddayn oo keliya inuu geerida xukumo iyo inuu Ibraahim ka horreeyey (kaas oo noolaa 1900 hortiis), wuxuu kaloo Naftiisa ku magacaabay magaca shakhsiyanka ah ee Ilaahay *"**ANNAA AH.**"*[164]

Kuwii Ciise dhegeysanayey way fahmayeen ulajeeddadiisa. Waana sababtaas ta ay ugu eedeeyeen inuu shirki galay oo ay dhagxaan ay Isaga ku tuuraan u gurteen.

## ILAAHAY OO KELIYA CAABUD

Ciise Masiix wuxuu si aan is bedbeddel lahayn u baray inuu Ilaahay oo keliyahi u qalmo inaynu caabudno. Waa sababtaa ta u Ciise u yidhi, *"Waa inaad caabuddo RABBIGA Ilaahaaga ah oo waa inaad Isaga keliya u adeegto."* (Matayos 4:10) Sidaas oo ay tahay waxaa Injiilka ku qoran tiraba toban jeer oo ay dadku Ciise u sujuudeen oo Isaga caabudeen.

Maalin maalmaha ka mid ah, *"Waxaa u yimid nin baras leh oo **Isaga caabuday**,*[165] *oo ku yidhi, 'Sayidow, haddaad doonaysid, waad i daahirin kartaa.' Ciise intuu gacantiisa soo taagay, ayuu taabtay, oo ku yidhi, 'Waan doonayaa ee daahirsanow.' Kolkiiba baraskiisa wuu ka daahirsanaaday."* (Matayos 8:2-3) Ciise miyuu baraslihii ku canaantay inuu Isaga caabudey?

Maya, laakiinse intuu isaga taabtay ayuu bogsiiyey.

Markii uu Ciise dhimashada ka sarakacay kaddib, xerow Toomas la odhan jirey ayaa hortiisa dhulka isku tuuray oo ku yidhi, *"Rabbigay iyo **Ilaahayow**!"* Ciise miyuu isaga ku canaantay inuu shirki galay?

Maya, wuxuu keliyoo Ciise kaas ku yidhi, *"[Toomas], waad i aragtay, taas aawadeed ayaad rumaysatay. Waxaa barakaysan kuwa aan i arag ee rumaystay."* (Yooxanaa 20:28-29)

Maxay tani inaga baraysaa ka uu Ciise yahay?

## ADIGU GO'AANSO

Waxa uu midkeen kastaa ka go'aansado inuu ka rumeeyo ka uu Ciise yahay waa doorasho shakhsiyan ah, laakiinse midkeena yuusan rumayn fikradaha iska soo horjeeda ee Isaga ku saabsan. Haddii uu Ciise "nebi weyn" ahaa sida ay derisyadaydu ii sheegaan, markaa wuxuu kaloo ahaa ka uu Isagu sheegtay: *Erayga Ilaahay ee abadiyanka ah iyo Wiilka Ilaahay.* In lagu doodo "inuusan Ciise wax nebi ka weyn ahayn," waxay ka dhigan tahay in la beeneeyo markhaatifurkii Ciise iyo akhbaarkii nebiyadaba.[166]

C.S. Lewis, oo ahaan jirey nin hore uga shakisnaa iyo mid ka mid ah aqoonyahannada qarniga labaatanaad ugu muhiimsan, ayaa sidan Ciise ka qoray:

> "Anigu waxaan halkan isku deyayaa inaan dadka ka joojiyo inay yidhaahda odhaahda nacasnimada ah ee ay dadku badanaa Isaga ka sheegaan: 'Anigu diyaar baan u ahay inaan Ciise u aqbalo inuu ahaa macallin weyn oo duruus edaabta iyo dhaqanka wanaagsan ku saabsan baray, laakiinse ma yeelayo sheegashadiisa Ilaahnimo.' Waa inaynaan taas odhan. Nin caadiya oo yidhi waxyaalaha uu Ciise yidhi ma noqon karo macallin diimeed keliya.

Ama wuxuu noqon karaan mid waalan ama wuxuu noqon karaa Shaydaanka Naarta. Waa inaad adigu kala doorataa. Ama ninkani wuxuu ahaa, oo yahay, Wiilka Ilaahay: ama nin waalan ama wax ka sii daran. Isaga waad diidi kartaa adoo nacas ka soo qaadaya, candhuuf baad ku tufi kartaa ama u dili kartaa sidii jinni; ama cagihiisa ayaa ku dhici kartaa oo ugu yeedhi kartaa Sayid iyo Ilaah. Laakiinse yaynaan meesha la imaanin fikradaha nacasnimada iyo laba-wejiilenimada ah sida inuu Isagu ahaa macallin bini'aadan ah oo weyn. Isagu doorashooyin badan innaga inama siin. Ulajeeddadiisuna marna taas may ahayn."[167]

## "BAYAAN NOOGU SHEEG"

Marar badan, ayuu qof aniga igu yidhaahdaa "Baybalka iga tus hal aayad oo uu Ciise ku yidhi, "Anigu Ilaah baan ahay!" Madaxdii diinta ee wakhtigii Ciise ayaa isku deyey inay Isaga isla odhaahdaas ka keenaan ama ku khasbaan.

*Ciise ayaa yidhi, "Waxaan ahay* ***illinka****, haddii qof uun* ***Xaggayga*** *ka soo galo, wuu badbaadi doonaa… Yuhuuddu haddaba waxay isugu soo urureen hareerihiisa oo ku yidhaahdeen, 'Tan iyo goormaad shaki nagu sii wadi doontaa? Haddii aad Masiixa tahay* ***bayaan noogu sheeg****.'*

*Ciise ayaa ugu jawaabay, 'Waan idiin sheegay, idinkuse ma rumaysnidin. Shuqullada aan magaca Aabbahay ku sameeyo ayaa ii marag fura. …* ***Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay****.'*

***Markaasay Yuhuuddu haddana dhagaxyo u gurteen inay dhagxiyaan.*** *Ciise ayaa ugu jawaabay, 'Shuqullo badan oo wanaagsan ayaan idinka tusay xagga Aabbahay. Shuqulladaas kee baad igu dhagxinaysaan?'*

*Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, '****Shuqul wanaagsan aawadiis kugu dhagxin mayno, laakiin caytanka aawadiis iyo inaad adigoo nin ah Ilaah iska dhigayso****.'"* (Yooxanaa 10:9, 24-25, 30-33)

Maxay dadkii badnaa ee isu soo uruuray ee ehlu-diinka ahaa u doonayeen inay Isaga u dhagxiyaan?

Waayo Ciise wuxuu yidhi, *"Aniga iyo Aabbuhu* ***mid*** *baannu nahay."* Sidii ay u fekerayeen, marka uu Ciise Masiix sheegtay inuu Ilaahay midnimo la leeyahay, taasi waxay ahayd shirki. Sidaas oo ay tahay, isla Yuhuuddaas ayaa maalin kasta sidan ku ashahaadan jirey, *"Adonai Eloheynu Adonai* ***echad,*** *" oo macnaheedu yahay: "Rabbiga Ilaaheena ahu waa Rabbi* ***keliya****."* [midnimo jamac ah]*."* Wuxuu Ciise sheeganayey inuu Isagu yahay Wiilka Ilaahay kaas oo weligiis mid la ahaa Ilaahay.[168] Sababtaas daraadeed ayay isaga shirkiga ugu eedeeyeen.

Ciise marna ma qarin kamana gabban jiritaankiisii abadiyanka ahaa Isaga oo ah Erayga Ilaahay iyo Wiilka Ilaahay. Isagu meelahaa ma wareegeyn Isaga oo leh, "Anigu Ilaah baan ahay! Ilaah baan ahay!" Laakiinse, adduunka wuxuu ugu noolaa sida uu ugu talogalay inay bini'aadanka oo dhammi ugu noolaadaan; is hoosaysiin buuxda iyo inay diyaar u ahaadaan inay Ilaahay adeecaan.

Ciise waa Qofka keliya ee odhan kara: *"Waxaan samada uga soo degay* ***ma aha inaan doonistayda yeelo****, laakiinse* ***inaan yeelo doonista*** *kii i soo diray."* (Yooxanaa 6:38) Ammaanta noloshii Ciise waxay ahayd inuu Isagu, *Wiilka* ***Ilaahay*** ee sarreeyaa, is hoosaysiiyey si uu noqdo *Wiilka* ***Aadanaha.***

Sayid Ciise wuxuu doortay inuu ka uu Isagu ahaa ku sheego siyaalo deggan laakiinse aad u awood badan.

Maalin ayaa nin dhallinyaro ah oo taajir ahi u yimid Ciise oo Isaga ugu yeedhay, *"Macallin* ***Wanaagsanow****."* Markaasuu Ciise ninkii weydiiyey, *"Maxaad* ***iigu*** *yeedhaysaa wanaagsanow? Mid wanaagsan ma jiro mid maahee, kaasuna waa* ***Ilaah****."* (Luukos 18:19)[169] Ninkaas taajirka ahi muu rumaysnayn inuu Ciise ahaa Ilaah, laakiinse Ciise — oo qof ahaan tusayey ama ahaa wanaagga ilaahnimada — wuxuu kaas ku martiqaadayey inuu dhibcaha ama xariiqaha isu geeyo si uu marka dambe fahmo ka uu Isagu ahaa.

Isagu sidaas oo kale ayuu innagana inooga doonayaa inaynu u fahanno.[170]

**ERAYADA FICIL BAA LA SOCDEY**

Mucjisooyinka tirada badan ee waaweyn ee uu Ciise sameeyey waxay tusayaan inuu awood ku xukumey wax kasta oo ku saabsan wax kastoo abuuran oo ku jira adduunkan dembigu wasakheeyey. Isagu wuxuu daalacan jirey fikirada dadka, dembiguu saamixi jirey, rooti iyo kalluun yar ayuu kumanyaal xabbo ka dhigay, duufaano ayuu dejiyey, oo jinniyo ayuu u sheegay inay dad ka baxaan. Eray ama taabasho keliya, jirrooleyaal ayuu ku bogsiiyey, curyaan buu ku socodsiiyey, dhegooleyaal ayuu maqal ku siiyey, oo kuwo dhintay ayuu mar kale soo nooleeyey. Isla sidii ay nebiyadu ka sii waxyoodeen, Masiixu wuxuu ahaa *"Cududdii RABBIGA"* ee adduunka.[171]

Kuwa leh indho lagu arko, ammaanta sare ee Ciise ee ilaahnimada ahi waxay ka ifeysey dhinac kasta oo Jiritaankiisa ah. Ficilladiisu waxay adkaynayeen oo run ka dhigayeen Erayadiisa. Tusaale ahaan, isla sidii aynu hadda soo akhrinay, Ciise wuxuu sheegtay inuu yahay *"Nolosha."* Sidee ayuu ku caddeeyey sheegashadan? Wuxuu inay tani run tahay ku meelmariyey kaddib markii uu kuwii dhintay mar kale soo nooleeyey.

Maalin ayuu Sayid Ciise joogey xabaashii Laasaros, oo ahaa nin dhintay afar cisho markaa ka hor. Laasaros waxaa lagu aasay xabaal bohol oo kale ah. Ciise wuxuu gabadhii walaashiis ee barooraneysey u sheegay inay oohinta joojiso: inuu walaalkeed mar kale noolaan doono.

Gabadhii ayaa Ciise ku tidhi, *"Waan garanayaa inuu kici doono wakhtiga sarakicidda ee maalinta u dambaysa."*

Ciise ayaa ugu jawaabey, *"**Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha**. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa."* (Yooxanaa 11:24-25)

Dabadeedna, si sheegashadiisaas ugaga dhabeeyo, Ciise *"wuxuu ku dhawaaqay cod weyn, '**Laasarosow, soo bax**.' Markaasaa **kii dhintay soo baxay**, isagoo gacmaha iyo cagaha ay kafan kaga xidhan tahay, wejigana maro kaga xidhan tahay.*

*Kolkaasuu Ciise wuxuu ku yidhi iyaga, 'Fura oo daaya, ha socdee.'*

*Qaar badan oo Yuhuuddii ah oo Maryan u yimid oo arkay wuxuu sameeyey ayaa rumaystay. Qaarkoodse way u tageen*

*Farrisiintii, oo waxay u sheegeen wuxuu Ciise sameeyey. …* ***Haddaba maalintaas wixii ka dambeeyey waxay ku tashadeen inay dilaan****… Wadaaddadii sare waxay ku tashadeen inay Laasarosna dilaan. Waayo, aawadiis ayaa Yuhuud badani ku tagtay oo Ciise rumaysatay.”* (Yooxanaa 11:43-46, 53; 12:10-11) [172]

War muxuu qalbiga bini'aadanku adag yahay!

## QULUUB ENGEGAN

Sheegashooyinkii Ciise iyo sidii uu caanka u sii noqonayey daraaddood, hoggaamiyeyaashii diinta iyo kuwii siyaasadda ee Yuhuudda ayaa aad uga masayray, oo iyadoo nacayb aad uga buuxo waxay isku raaceen: Ciise waa in la aaamusiyaa! Waxay aad u doonayeen inay taas marmarsiinyo ugu helaan, sababtay rabto ha ahaato e, inay Ciise eed u helaan si Isaga loogu dilo. Laakiinse sidee ayaad eed ugu heli kartaa ninka keliya ee abid dhasha ee bilaa eed ahaa?

Maalin Sabti ah, Isaga oo Ciise wax ka baraya Sunaggoga dhexdiisa…

> *“Halkaasna waxaa joogay nin gacan engegan. Markaasay fiirinayeen [madaxdii diinta] inuu [Ciise] Sabtida bogsiinayo iyo in kale, si ay u ashtakeeyaan. Kolkaasuu ninkii gacanta engegnaa ku yidhi, ‘Dhexda isa soo taag.’ Oo wuxuu iyaga ku yidhi, ‘Sabtida ma xalaal baa in wanaag la falo ama shar; in naf la badbaadiyo ama la dilo?’ Laakiin way iska aamuseen.*
>
> *Goortuu iyaga isha mariyey* ***Isagoo cadhaysan oo qalbigiisii ka tiiraanyooday qalbi engegnaantooda aawadeed****, wuxuu ninkii ku yidhi, ‘Gacanta soo taag. Kolkaasuu soo taagay, oo gacantiisu way bogsatay.’*
>
> ***Markaasaa Farrisiintu*** *[firqo diimeed] baxeen,* ***oo markiiba waxay kala tashadeen Herodosiintii*** *[xisbi siyaasadeed]* ***si ay u dilaan Isaga.***
>
> *Laakiin Ciise xertiisii ayuu badda kula noqday; waxaana raacay dad badan… Isagu dad badan ayuu bogsiiyey, sidaa daraadeed ayay waxay ugu kufeen si ay kuwii cudur qabay oo dhan u taabtaan isaga.*

> *Oo jinniyada wasakhda lehna goortay arkeen, hortiisii ayay isku tuureen oo qayliyeen, oo waxay yidhaahdeen, '**Adigu waxaad tahay Wiilka Ilaah**.'"* (Markos 3:1-11)

## FAHANKII JINNIYADA

Jinniyadu way garanayeen ka uu Bogsiiyahaasu ahaa, waana sababta ay Isaga ugu yeedheen magaciisa ama booskiisa saxda ah, iyaga oo ku qaylinaya, *"Adigu waxaad tahay Wiilka Ilaah!"* Malaa'igahan dembaabey way garanayeen taariikhdii hore ee Ciise. Kun sanno horteed, iyagu waxay markhaati ka ahaayeen Isaga awooddiisii iyo xigmaddiisii weynaa ee uu hadal oo keliya samada iyo adduunka ugu abuuray. Iyagu way gariireen markii ay xasuusteen maalintii uu Isagu, cadhadiisii xaqa ahayd daraadeed, iyaga jannada dibedda uga soo tuuray kaddib markii ay iyagu Shaydaanka fallaaganimadiisii kula safteen.[173] Haddana halkan adduunka ah ayuu joogey oo bini'aadanka ku dhex noolaa!

Arrintu meeshay ku dambeynaysey way iska caddayd.


Awooddii, sayidkooda waa Shaydaanka e, way burburaysey.

Waxaa bilaabmayey in habaarkii dembigu keenay hadda dib loo celiyo.

Wiilka Abadiyanka ah Laftiisa, Isaga oo ah Farcankii Naagta, wuxuu qabsaday meeshii ay hasteen. Markaa, jinniyadii *"hortiisii ayay isku tuureen oo qayliyeen, oo waxay yidhaahdeen, '**Adigu waxaad tahay Wiilka Ilaah**.'"* Isla marka wadaaddadii diintu *"waxay ku tashanayeen… **si ay u dilaan Isaga**."*

Maalin kaddib markii aan qisadan kuwo marti ii ahaa u sheegay, ayuu nin kuwaas ka ka mid ahi isagoo yaaban yidhi, "Waa mid cajiib ah! Jinniyada ayaa tixgelin dheeraad ah Ciise u hayey marka la barbardhigo madaxdii diinta!"

Waa yaab, waase run.



# 18

# Qorshaha Abadiyanka ah ee Ilaahay

*"Rabbigu shuqulladiisa wuu og yahay tan iyo bilowgii dunida."* (Falimaha Rasuullada 15:18)

Ka hor intii aanu wakhtiguba bilaaban, Ilaahay qorshe cad ayuu bini'aadanka u hayey. Isla maalintii uu dembigu fadareeyeey bini'aadanka, ILAAHAY wuxuu bilaabay inuu qorshahaas soo bandhigo, laakiinse hab aan giddigiis isla mar loo wada fahmeyn oo dahsoon. Erayga Ilaahay wuxuu qorshahan u bixiyey *"**qarsoodiga** Ilaahay."* (Muujintii 10:7)

Ilaa iyo maanta, qorshaha iyo ujeeddada Ilaahay bini'aadanka u hayaa dadka badankiisa way ka qarsoon yihiin, laakiinse waa mid iska cad in, maadaama, *"**Waxa aan la garanayn** oo qarsoonaa tan iyo weligiis iyo qarni kasta... **haatan loo muujiyey quduusiintiisa**."* (Kolosay 1:26)

## NASIIB KA WANAAGSAN KII NEBIYADA

Waa kan fikir yaab lihi. Marka laga hadlayo fahanka qisada iyo akhbaarka Ilaahay, adiga iyo anigu waxaynu yeelannay nasiib ka badan kii nebiyadii Qorniinka qoray.

Waxaa ina soo gaadhay oo aynu hellay muujinta Ilaahay oo kaamil ah; iyaguse may helin.

Waxaynu akhrin karnaa dhammaadka Kitaabka Ilaahay; iyaguse sidaas may samayn karin.

> *"Nebiyadii sii sheegay nimcada idiin imanaysa waxay doondooneen oo aad u raadiyeen wax ku saabsan badbaadadaas. Waxayna raadiyeen wixii iyo wakhtigii Ruuxii Masiixa oo iyaga ku jiray uu u tilmaamay markuu horay uga sii markhaati furay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsan doono iyo waxyaalaha ammaanta ah oo iyaga ka daba iman doona.* ***Oo waxaa iyagii loo muujiyey inaanay iyagu isugu adeegin waxyaalahaas, laakiinse idinkay idiinku adeegeen, oo waxyaalahaas waxaa idin ogaysiiyey*** *kuwii injiilka idinkaga wacdiyey Ruuxa Quduuska ah ee jannada laga soo diray; waxyaalahaas* ***oo ay xataa malaa'iguhuna jecel yihiin inay fiiriyaan****."*
> (1 Butros 1:10-12)

## MUXUU ILAAHAY QORSHIHIISA DAAHA U SAARAY

Dad baa su'aashan qaba, "Muxuu Ilaahay isla markiiba bini'aadanka dembaabey ugu sheegi waayey waxa uu qorsheeyey oo dhan? Muxuu Isagu akhbaarkiisa daaha qarsoodiga ah u saaray?

In kasta oo aynaan innagu sharaxaad khasab ugu lahayn Ilaaha adduunka Leh, naxariistiisa daraadeed wuxuu innaga ina siiyey fahan ku saabsan sababta uu daaha u saaray qorshihiisa uu bini'aadanka u hayo. Waa kuwan saddex sababood oo uu Ilaahay u doortay inuu si tallaabo tallaabo ah oo xigmad leh qorshihiisa ugu muujiyo.

Ta koowaad, sidii lagu soo sharaxay cutubyada shan iyo lix, marka uu Ilaahay qorshihiisa si deggan oo taxane ah u muujinayo, wuxuu bini'aadanka siinayey *waxyiyo iyo astaamo* ***caddaymo*** ah oo aan la tirin karin iyo *markhaatiyaal kuwaas goobjoog ka ahaa,* si ay farcannada soo socdaa si la hubo ugu ogaan karaan akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ah.

Ta labaad, Ilaahay wuxuu runtiisa u muujiyey hab ay kuwa aad u danaynaya ee *iyada si dadaal leh ugu raadiyaan* oo keliyahi u heli karaan. *"Waa u ammaan Ilaah inuu xaal qariyo, Laakiinse waa u ammaan boqorrada inay* ***xaal baadhaan****."* (Maahmaahyadii 25:2) Dad badan ayaa runta uga carara isla sida uu tuuggu booliiska uga cararo; kuwaasi ma doonayaan inay runta ogaadaan.[174]

Ta saddexaad, Ilaahay wuxuu qorshihiisa daaha u saaray si uu uga ***qariyo taas*** Shaydaanka iyo xertiisa.

> *"Qarsoonaan ayaannu ugu hadallaa xigmadda Ilaah oo la qariyey, oo Ilaah dunida horteed ka dhigay ammaanteena aawadeed, tan madaxda wakhtigan midkoodna aanu garanaynin, waayo, hadday garan lahaayeen, iskutallaabta kuma ay qodbeen Rabbiga ammaanta."* (1 Korintos 2:7-8)

Haddii ay Shaydaanka iyo kuwa isaga raacay fahmi lahaayeen qorshaha buuxa ee uu Ilaahay iyaga kaga adkaan dooney, waxay samayn kareen wixii ay hore u sameeyeen. Ilaahay wuxuu qorshihiisa u dejiyey hab ay isla kuwa doonayey inay qorshahaas leexiyaan caawinayaan inay kaas kaamilaan!

Oo muxuu qorshahaasi ahaa?

**FURASHO!**

Ilaahay wuxuu qorsheeyey inuu adduunka u soo diro Badbaadiye aan dembi lahayn—kaas oo ah *Farcanka naagta*— si uu farcanka Aadan ee dembiileyaasha ah uga badbaadiyo naarta. Ilaahay ballankiisii ayuu oofiyey wakhtigii ku haboonaa ee taariikhda.

> *"Markii wakhtigii buuxsamay, Ilaah wuxuu soo diray Wiilkiisii, isagoo naag ka dhashay oo sharciga ku hoos dhashay,* ***inuu furto*** *kuwii sharciga ku hoos jiray inuu carruurtiis inaga dhigo."* (Galatiya 4:4-5)

***In la furto*** macnaheedu waa *inaad dib u iibsatid* adoo qiimihii lagaa rabey bixinaya.

Markii aan ahaa wiil yar oo ku koraya Kalifoorniya, waxaan lahaan jirey ey yar. Isaga waan quudin jirey, daryeeli jirey, oo la ciyaari jirey. Mar kasta wuu iga idaba joogi jirtey oo markaan iskuulka ka imaadana way farxi jirtey. Laakiinse hal cillad buu lahaa. Mararka qaarkood xaafadda ayuu ku lumi jirey, in kasta oo uu badanaa soo laaban jirtey. Maalin mooyaane.

Gurigii baan ku soo laabtay anigoo iskuulka ka imid, laakiinse eygeygii ma joogin oo ima salaamin. Habeennimadii la seexan

lahaa baa la gaadhey, laakiinse weli muu imaanin. Maalintii ku xigtey, ayuu aabbahay ii sheegay inaan tago meel ay xaafaddayada ku lahayd hay'adda xayawaanka xannaanaysa, taas oo eyda luntay muddo cayiman halkaa ku haysa. Xayawaanka aan qofna u imaan irbad ay ku dhimanayaan bay marka dambe ku mudi jireen.

Xaruntaas ayaan telefoon u diray. Haa, ey yar oo sumadda aan ku sheegay leh bay hayeen. Nin magaalada "eyda ka uruuriya" ayaa isaga qabtay. Eygeygu isma soo furan karin. Haddii uu qof u tegi waayo oo soo deyn waayo, isaga waa la dili dooney.

Xaruntaas xayawaanka lagu hayo ayaan anigu tegey. Waxaan doonayey inaan eygeyga dib u soo ceshado! Laakiinse ninkii xafiiska joogey ayaa aniga ii sheegay in haddii aan eygeyga inaan sii daayo doonayo ay tahay inaan lacag ganaax ah bixiyo. Sharciga ayay ka soo horjeeddey inay ey jidka iska dhex warwareegaan. Alla sidee buu eygii u farxay inuu xabsigaas ka soo baxo oo uu soo galo gacanta mid isaga jecel! Isagu *furasho* ayuu helay.

Arrintaa igu dhacday markii aan wiilka yar ahaa ee ku saabsanayd eygeygii lumay ee aan dib u soo iibsadey ayaa sawir kooban ka bixinaysa xaaladdeena. Maadaama aynu nahay dembiileyaal xukuman, oo fallaagoobey, sina innagu isuma soo furan karno. Ilaahay ayaa Wiilkiisa adduunka u soo diray si uu inoo furto Isaga oo qiimaha la inagu leeyahay bixinaya. Kaasi wuu ka badnaa wax aynu dhammaanteen bixin karno.

> *"Midkoodna walaalkiis ma **furan** karo, Daraaddiisna Ilaah **madaxfurasho** uma siin karo—**Waayo, furashada naftoodu waa qaali**... Laakiinse Ilaah naftayda wuu ka soo **furan** doonaa xoogga xabaasha."* (Sabuurradii 49:7-8,15)

Oo muxuu ahaa qiimihii la inagu soo furtay?

## NEBIYADII AYAA SII SHEEGAY

Cutubka 3-aad ee Bilowgii, waxaynu ku soo aragnay waxyiga Ilaahay ee kooban ee daahu saaran yahay ee ku saabsan qorshihiisa uu dembiileyaasha kaga badbaadinayo jeelka Shaydaanka. Aynu mar kale dhegeysano wixii Ilaahay berigaa Shaydaanka ku yidhi:

> *"Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa."*
> (Bilowgii 3:15)

Erayadan ayuu Ilaahay ku dejiyey qorshe qarsoodi ah oo habaysan oo uu Shaydaanka iyo dembiga kula tacaalayo, si qaabilsan Ilaahay dabeecaddiisa xaqa ah qaabilsan. ILAAHAY, wuxuu ogeysiis ka sii bixinayey inuu bini'aadanka siin doono Bixiye-Masiix kaas oo Shaydaanka ka adkaan doona Isaga oo *"madaxa"* ka jebin doona. Waxyigani wuxuu kaloo sheegay inuu Shaydaanku dhaawici doono *"cidhibta"* Masiixa.

> *"Isagu* [Masiixa] ***madaxaaguu*** *burburin doonaa, adiguna* [Shaydaanka] ***cidhibtiisaad*** *burburin doontaa* [Masiixa]*."*

Sidee ayuu farcanka naagtu Shaydaanka madaxa uga *"burburin"* dooney? Marka afka Cibraaniga erayga "burburin" lagu turjumo macnihiisu wuxuu noqonayaa "in la burburiyo, la jebiyo, la dhaawaco, oo la dakhro." Marka waxyigaas ugu horreeyey ee tan lagu sheegay la eego, Shaydaanka iyo Masiixa labadaba waa la "dhaawici" dooney, laakiinse midkood uun baa dhaawiciisu mid aad u xun oo aanu ka bogsan doonin noqon dooney. Dhaawac madax soo gaadhey aad buu u xun yahay, laakiinse dhaawac cidhibta soo gaadhey ma xuma.

Ilaahay wuxuu ka sii waxyoonayey in, in kasta oo Bixiyaha la ballanqaaday uu Shaydaanka iyo xertiisu "dhaawici" dooneen, uu Isagu aakhirka ka adkaan dooney Shaydaanka.

Mar dambe ayuu Ilaahay nebi Daa'uud u muujiyey inuu qoro erayadan ku saabsan Masiixa:

> *"**Waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha**."*
> (Sabuurradii 22:16)

Daa'uud wuxuu kaloo ka sii waxyoodey in kasta oo Masiixa la dili dooney, aanu meydkiisu ku qudhmi doonin oo ku baabbi'i doonin xabaasha dhexdeeda. Badbaadiyaha la sii sheegay wuxuu ka adkaan dooney dhimashada.

> *"**Kaaga quduuska ah uma dayn doontid inuu qudhun arko**."* (Sabuurradii 16:10)

Nebi Ishacyaah ayaa hore uga sii waxyoodey silica, dhimashada, iyo sarakicidda Masiixa:

> *"Waxaa Isaga **loo dhaawacay xadgudubyadeenna**, waxaana **loo nabareeyey xumaatooyinkeenna**... Habase ahaatee waxaa RABBIGU raalli ka noqday inuu isaga nabareeyo. Wuxuu isaga ku riday xanuun. Markaad **naftiisa qurbaan dembi** ka dhigtid ayuu arki doonaa farcankiisii, cimrigiisuna waa dheeraan doonaa, oo RABBIGA doonistiisuna gacantiisay ku liibaani doontaa."* (Ishacyaah 53:5, 10)[175]

In kasta oo uu Shaydaanku dadka ka dhaadhicin dooney inay jidh-dilaan oo dilaan Masiixa uu Ilaahay soo diray, wax kastaa waxay u dhici dooneen si qaabilsan qorshihii ay nebiyadu ka sii waxyoodeen. Natiijada kama dambaysta ahi waxay noqon doontey RABBIGA iyo Kiisa Subkan oo guusha oo buuxda lahaan doona.

## ERAYO XIGMAD IYO DIGNIINAH

Kumanyaal sanno ka hor intii aanu Masiixu dhalan, Daa'uud ayaa qoray:

> *"**Bal quruumuhu maxay u cadhoodaan, Dadkuna maxay ugu fikiraan wax aan waxba ahayn?** Boqorrada dhulku col bay u taagan yihiin, Taliyayaashuna waxay u **wada tashadaan RABBIGA iyo Masiixiisa**, iyagoo leh... Kan samada fadhiyaa wuu qosli doonaa, Oo Sayidku iyaga wuu ku majaajiloon doonaa. Markaasuu isagoo cadhaysan iyaga la hadli doonaa, Oo wuxuu iyaga ku dhibi doonaa dhirifkiisa isagoo leh, Anigu **Boqorkaygii** waxaan fadhiisiyey Buurtayda quduuska ah... Haddaba sidaas daraadeed, Boqorradow, caqli yeesha, Oo xaakinnada dhulkow, edeb yeesha. RABBIGA cabsi ugu adeega, Oo reyreeya idinkoo gariiraya. **Wiilka dhunkada***

> [tixgeliya]*, waaba intaasoo uu idiin cadhoodaa oo aad jidka ku baabba'daane. Waayo, cadhadiisu haddiiba way kululaan doontaa.* ***Waxaa barakaysan kuwa isaga isku halleeya oo dhan****."* (Sabuurradii 2:1-2, 4-6, 10-12)

Sinigaal, halkaas oo legdintu ka tahay ciyaar waddanka aad looga jecel yahay, dadku sidan bay ku maahmaahaan:

> *"Ma aha inay ukuni la legdanto dhagax."*

Maxaanay u ahay inay ukuni la legdanto dhagax? Waayo ukuntu marna ma guuleysan doonto! Sidaas oo kale, kuwa *"u wada tashada RABBIGA iyo Masiixiisu,"* marna guuleysan doonaan. In Ilaahay qorshihiisa laga hor yimaaddaa waa sidii iyadoo *"loo tashado wax aan waxba ahayn."*[176]

Sinigaaliisku maahmaahdan kale ayay leeyihiin:

> *"Ka geedaha gooyaa si ula kac ah uma gooyo geedka hoostiisa lagu kulmo."*

Waddankan aan roobka badani ka di'in, tuullooyinka badankooda waxaa dhexda kaga yaalla geed weyn oo la hadhsado. "Geedkan lagu kulmo waxay dadku ka hadhsadaan geedka kulul ee duhurkii: waa meel ay dadku ku nastaan, ku sheekaystaan, oo ku wada shaahaan. Sidee ayay dadku dareemi lahaayeen haddii uu ka geedaha gooyaa bilaabi lahaa goynta "meeshaas lagu kulmo"? Iyagoo xanaaqsan ayay joojin lahaayeen goyntiisa — isla markiiba!

Kuwa ka soo horjeesta qorshaha Ilaahay ee Bixintu waa sida kaas geedaha gooya oo jaray geedka keliya ee ay tuuladu hadhsato.

Kuwaasi ma guuleysan doonaan.

> *"Boqorradow, caqli yeesha… Wiilka dhunkada, waaba intaasoo uu idiin cadhoodaa oo aad jidka ku baabba'daane. Waayo, cadhadiisu haddiiba way kululaan doontaa. Waxaa barakaysan kuwa isaga isku halleeya oo dhan."*
> (Sabuurradii 2:10, 12)

## KA INDHO LA'AANTA QORSHAHA ILAAHAY

Usbuucyadii ugu dambeeyey ee adeeggiisii adduunkan, Ciise wuxuu bilaabay inuu xertiisa ku war geliyo in, halkii ay Isaga ugu soo dhoweyn lahaayeen sidii Boqorkooda, ay madaxda siyaasadda iyo kuwa diintu ku adkaysan doonaan in Isaga la dilo. Kuwa maleegey dhimashadii Ciise wax fikrad ah kamay haysan inay dhab ahaantii qayb ka ahaayeen meel-marinta wixii ay nebiyadu ka sii waxyoodeen: in lugaha iyo gacmaha Masiixa la qodbi doono taas oo qayb ka ah qorshaha uu Ilaahay farcanka Aadan ee lumay ee aan is caawin karin kaga badbaadinayo godka ay Shaydaanka u galeen.

> *"Kolkaa dabadeed Ciise Masiix ayaa bilaabay inuu xertiisii u sheego inay* ***waajib*** *ugu tahay inuu Yeruusaalem tago, oo xanuun badan ka helo waayeellada iyo wadaaddada sare iyo culimmada, oo* ***la*** *dilo, oo maalinta saddexaad la sara kiciyo.*
>
> *Markaasaa Butros gees u waday oo bilaabay inuu canaanto, oo wuxuu ku yidhi, 'Ilaah ha kaa hayo, Sayidow, taasu weligaa kuuma noqon doonto!'*
>
> *Laakiin Butros ayuu u soo jeestay oo ku yidhi, '****Gadaal iga mar, Shayddaan yahow. Waad i xumaynaysaaye, waayo, waxyaalaha Ilaah kama fikirtid, waxaadse ka fikirtaa waxyaalaha dadka****.'"* (Matayos 16:21-23)

Butros wuxuu u fekerayey sida nin doodaha caan ku ah, oo aan dhegeystey isaga oo leh, "Masiixa oo iskutallaabta lagu qodbay waxay la micne tahay sidii nin doob ah oo haddana xaas leh [suurtoggal maaha]."

Sida ninkaa dooda, Butros weli muu fahansanayn qorshaha Ilaahay. Wuxuu u malaynayey inuu Masiixu isla markiiba aasaasi dooney dowladdiisa caalamiga ah ee la ballanqaaday, oo uusan yeeli doonin dhibaatada xun iyo bah-dilaadda ah in Isaga iskutallaabta lagu qodbo!

Butros wuu ku saxsanaa inuu u maleeyo inuu Ilaahay qorsheeyey inuu Ciise noqdo Taliyaha ugu Sarreeya ee adduunka

oo dhan, laakiinse wuu ku khaldanaa inuu ku fekero inuu Masiixu ka fakado silica iyo ceebta iskutallaabta. Mar dambe ayuu Butros qorshaha Ilaahay fahmi dooney oo si geesinimo leh ugu odhan dooney: *"Nebiyadii sii sheegay... waxyaalaha Masiixu ku xanuunsan doono iyo waxyaalaha ammaanta ah oo iyaga ka daba iman doona!"* (1 Butros 1:10-11)[177]

In Masiixa iskutallaabta lagu qodbaa shil ahaan kumay dhicin.
Ilaahay ayaa tan *"ilaa abadiyan"* qorsheeyey oo filayey.
Nebiyadii ayaa tan hore uga sii waxyoodey.
*Farcanka naagta* ayaa yimid oo tan kaamilay.
Muddo hore ayaan email-kan la ii soo diray:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Adigu waad **indho la'dahay** marka aad rumaysid **inuusan Ilaahay xataa wiilkiisa keliya ka badbaadin karin in iskutallaabta lagu qodbo.** Tan macnaheedu waa inuu Ilaahay xaddidan yahay oo daciif yahay ilaa uu oggolaado inay bini'aadan wiilkiisa sidaa u bah-dilaan oo u dilaan. Wax kasta oo xaddidani waa daciif oo maaha in Ilaah loogu yeedho. Ilaahay wuxuu leeyahay **awoodda ugu sarraysa**. Isagu waa ka keliya mid la mid ahina ma jiro.

Alaahu Akbar

Sidii Butros markii hore ahaan jirey oo kale, qofka email-kan soo qoray weli muu fahmin sababta Masiixa *"waa **waajib** in **la** dilo, oo maalinta saddexaad la sara kiciyo."* Maxuuu qorshahaa aadka u dhibaatada badan loogu baahday? Maadaama, sida uu kaas email-ka noo qoray uu "Ilahaay awoodda ugu sarraysa leeyahay," muxuu si dhib yar Shaydaanka naarta ugu tuuri waayey oo farcanka Aadan ee dembaabey u saamixi waayey? ILAAHA adduunku hadal oo keliya ayuu ku abuuray, sidaas oo kale muxuu adduunka hadal oo keliya ugu badbaadin waayey?

Maxaa lagama maarmaan u noqotay inuu Abuuraha-Erayga ahi nin noqdo? Maxay qorshaha Ilaahay ugu jiraa Masiixa silcaya, dhiiggiisa la daadinayo, ee dhimanaya?

Qaybta soo socota ee socdaalkeena ayaa jawaabta ina siin doonta.



# 19

# QAYNUUNKA ALLABARIGA

*"Waa dhiigga waxa loogu **kafaaro gudaa** nolosha daraadeed—RABBIGA* (Laawiyiintii 17:11)

Taariikhdii qoyskii ugu horreeyey waxaa lagu qoray Bilowgii, cutubka afraad. Waa halkan meesha aynu ka barano in Aadan iyo Xaawo laga saaray beertii jannada ee oo Baybalku ugu yeedho Beer Ceeden, bini'aadanka oo dhanna halkaas dib looguma oggolaan. Farcankooda oo dhan waxay ku dhalan dooneen oo ku kori dooneen adduunkan habaaran ee uu cadowgu u taliyo.

## CURADKII DEMBAABEY

*"Ninkiina naagtiisii Xaawa ahayd buu u tegey; wayna uuraysatay, oo **Qaabiil** bay dhashay, oo waxay tidhi, Wiil baan ku helay RABBIGA caawimaaddiisa."* (Bilowgii 4:1)

Macnaha *Qaabiil* waa *helid.* Intii ay ku jirtey xannuunkii foosha iyo mucjisadii cunuggii ugu horreeyey ee dhasha, Xaawa waxay ku dhawaaqday, *"Wiil baan ku helay RABBIGA caawimaaddiisa!"* Laga yaabee inay iyadu u malaynaysey inuu Qaabiil ahaa Bixiyihii la ballanqaaday ee uu Ilaahay u soo diray inuu iyaga ka badbaadiyo cawaaqibada xunxun ee dembiga.

Xaawa waxay ku saxsanayd inay rumayso inuu Badbaadiyaha la ballanqaaday *"ka imaan dooney RABBIGA."* Waxay kaloo ku

saxsanayd inay rumayso inuu Masiixu *ka dhalan dooney naag,* laakiinse haddii ay u malaynaysey in farcanka ninkeedu uu Bixiyaha la ballanqaaday ahaa, taas way ku khaldanayd.

Malayaasha noocaas ah ee khaldan oo dhan isla markiiba meesha waa laga saaray.

Aadan iyo Xaawa waxay isla markiiba ogaadeen in wiilkooda yar ee curadka ah ee ay aadka u jeclaayeen uu lahaa dabeecad dembi oo uu ku dhashay. *Caadiyan* ayuu Qaabiil u dembaabey. Wuxuu muujiyey isla weynaan iyo naf-jeclaysi—isla sidii waalidkiisa iyo sidii Shaydaanka. Qaabiil muu ahayn Bixiyihii la ballanqaaday. Laakiinse wuxuu keliyoo ahaa dembiile kale oo u baahan badbaado.

Markii la gaadhey wakhtigii uu wiilkii labaad ee Aadan iyo Xaawa dhashay, fikrad caqligal ah ayay xaaladda dadka ka qabeen.

*"Dabadeedna waxay dhashay walaalkiis* ***Haabiil****."*
(Bilowgii 4:2)

Aadan iyo Xaawa waxay wiilkoodii labaad u bixiyeen *Haabiil,* oo macnihiisu yahay *faan* ama *waxba-yahay*. Iyagu sina wiil xaq ah uma dhali karin. Badbaadiyaha dembiileyaasha loogu ballanqaaday kama imaan karin farcanka Aadan ee dembiga leh. Labadoodu, waa Aadan iyo Xaawa e, waxay keliyoo dhali kareen dembiile iyaga oo kale ah. Haddii uu Nin xaq ah oo ciqaabta dembiga iyaga ka badbaadiyaa jiri doono, waxay ahayd inuu kaasi RABBIGA ka yimaado.

Sidii aynu Bilowgii cutubka koowaad ka soo barannay, ninkii iyo naagtii ugu horreeyey waxaa laga abuuray *aragga Ilaahay.* Fursaddan dahabiga ah waxaa ku jirey in bini'aadanka la siiyey mas'uuliyadda ah inay doorashooyin sax ah sameeyaan. Doonistii Ilaahay ee Aadan iyo Xaawa iyo farcankoodii ku aaddanayd waxay ahayd inay iyaga ka muuqato dabeecadda quduuska iyo jacaylka ah ee Abuurahoodu. Laakiinse, markii ay Aadan iyo Xaawa doorteen inay Abuurahooda-iyaga-Leh ku adeeci waayaan, waxay iyagu joojiyeen inay arraggiisa muujiyaan. Isla markiiba, halkii uu *Ilaahay* noloshooda udub-dhexaadka uga ahaa, hadda *nafjeclaysigooda* ayaa udub-dhexaad u noqday. Oo waxay dhaleen carruur iyaga oo kale ah.

> *"Aadanna… wuxuu dhalay wiilal iyo gabdho…* ***isagii u eg oo araggiisii leh."*** (Bilowgii 5:3-4)

Isla ay qabiilka Wolof ku maahmaahaan *"Deerada boodboodaa ma dhasho farcan god qota."* Ayaanay waalid dembiileyaal ahi u dhali karin farcan bilaa dembi ah. Qorniinku wuxuu odhanayaa:

> *"Haddaba sida dembigu* ***nin keliya*** *dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina* ***u gaadhay dadka oo dhan****, waayo, waa la wada dembaabay."* (Rooma 5:12)

## CAABUDDAADII DEMBIILEYAASHA

> *"**Haabiil**na wuxuu ahaa adhijir, laakiin* ***Qaabiil*** *wuxuu ahaa beerfale. Maalmo dabadeed waxay noqotay in Qaabiil qurbaan ahaan RABBIGA ugu keenay midhihii dhulka. Haabiilna wuxuu wax uga keenay curadyadii adhigiisa iyo baruurtoodiiba. Rabbiguna wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii."* (Bilowgii 4:2-4)

Qaabiil wuxuu noqday beeraley halka uu Haabiil adhijir ka noqday. In kasta oo uu dembigii dadku iyaga iyo wixii ku harreeraysnaa saameeyey, weli waxaa iyaga ku harreeraysnaa ammaanta abuuritaanka Ilaahay oo wuxuu iyaga ku quudinayey jacaylkiisa daryeelka leh. In kasta oo ay Qaabiil iyo Haabiil labadooduba dembiileyaal ahaayeen, Ilaahay iyaga wuu jeclaa oo wuxuu iyaga ka doonayey inay Isaga gartaan oo caabudaan. Laakiinse, si ay tani u suurtogasho, daawo ayay dhibaatada dembigooda uga baahnaayeen. Ilaahay waa quduus oo *"Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo runta."* (Yooxanaa 4:24)

Sida cad, wiilashan waxaa si fiican wax u baray waalidkooda, kuwaas oo beri hore saaxiibtinimo aad u dhow Abuurahooda la lahaan jirey. Qaabiil iyo Haabiil labadooduba waxay fahansanaayeen inuu dembigu xadgudub ku yahay Ilaahay. Isla sidii waalidkooda, waxaa iyaga laga xidhay Ilaahay hortiisa.

Haddii ay Isaga xidhiidh la lahaan kareen, waa inay taasi u dhacdaa sidii uu Isagu rabey.

Warka wanaagsani waa inuu Ilaahay furay hab Qaabiil iyo Haabiil dembiyadooda lagu dabooli karo haddii ay Isaga aaminaan oo ugu yimaaddaan sidii uu Isagu taas u dejiyey.

Aynu mar kale akhrino siday u dhacday:

> *"Maalmo dabadeed waxay noqotay in Qaabiil* ***qurbaan*** *ahaan RABBIGA ugu keenay* ***midhihii dhulka****. Haabiilna wuxuu wax uga keenay* ***curadyadii adhigiisa*** *iyo baruurtoodiiba. RABBIGUNA wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii, laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin. Qaabiilna aad buu u cadhooday, wejigiisiina wuu madoobaaday."* (Bilowgii 4:3-5)

Sida qiso kasta oo si fiican loo sheego oo kale, isla markiiba wax kasta la inooma sheegin. Qisadu waxay keliya oo sheegaysaa *wixii* ay Qaabiil iyo Haabiil sameeyeen. Sababtii ay waxaas u sameeyeen meel kale ayuu Qorniinku inoogu sheegayaa. Labadan nin ee dhalinyarada ahi waxay labadooduba doonayeen inay caabudaan Ilaaha keliya ee runta ah. Midkood kastaana *"qurbaan buu u keenay… RABBIGA."*

Qaabiil wuxuu soo doortay midhihiisa iyo khudaartiisa kuwii ugu fiicnaa kuwaas oo si dadaal leh u beeray.

Haabiil wuxuu keenay sabeen aan iin iyo eed midna lahayn, wuuna qalay oo jidhkeedii ku dul gubey meel allabari oo uu si sahlan uga sameeyey dhagax ama ciid dusheed.[178]

Marka dusha laga eego, allabarigii Haabiil wuxuu ahaa mid ma naxnimo ah oo dhiig la daadinayo, halka uu kii Qaabiil ka ahaa mid qurux badan oo dadka soo jiidanaya. Siaas oo ay tahay wuxuu Qorniinku odhanayaa:

> ***"RABBIGUNA wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii, laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin.*** *Qaabiilna aad buu u cadhooday, wejigiisiina wuu madoobaaday."* (Bilowgii 4:4-5)

Muxuu Ilaahay u aqbalay Haabiil qurbaankiisii laakiinse u diidey kii Qaabiil?

Haabiil wuxuu aaminay qorshihii Ilaahay.
Qaabiilse ma aaminin.

## RUMAYSIGII HAABIIL IYO SABEENTIISI

Qorniinku wuxuu noo sheegayaa inuu Haabiil ugu yimid Ilaahay *rumaysi*, tan tusaysa inuu Ilaahay Qaabiil iyo Haabiil u muujiyey wixii uu iyaga ka rabey.

> *"**Haabiil*** [oo qorshaha Ilaahay rumeeyey] ***wuxuu Ilaah ugu bixiyey allabari aad uga wanaagsan kii Qaabiil*** [oo aan qorshaha Ilaahay rumayn]*, sidaas daraadeed waxaa loogu markhaati furay* [haabiil] *inuu **xaq** yahay… Oo rumaysadla'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo."*
> (Cibraaniyada 11:4,6)

Rumaysiga Ilaahay raaliga ka yahay waa rumaysi aaminsan oo adeeca qorshihiisa.

Markii ugu horreysey ee ay Aadan iyo Xaawa dembaabeen, Ilaahay wuu diidey dadaaladii ay iskood ugu doonayeen inay dhibaatada dembigooda xalliyaan. Laakiinse, Ilaahay ayaa allabarigii xoolaha ee ugu horreeyey sameeyey oo kaas ayuu ku daboolay Aadan iyo Xaawa dembigoodii iyo ceebtoodii. Isaga oo xayawaan aan waxba galabsan dilaya, wuxuu Ilaahay iyaga ku barayey in *"Mushahaarada dembigu tahay **dhimashada,** laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed…."* (Rooma 6:23)

Mar dambe, Qaabiil iyo Haabiil waxaa la baray isla dersigaa, laakiinse midkood keliya ayaa rumeeyey.

Haabiil wuxuu Ilaahay ugu yimid *rumaysi*, isaga oo si is hoosaysiin iyo adeecid leh RABBIGA ugu keenaya sabeen curad ah oo aan iin lahayn.

Sawiro Haabiil oo gacanta madaxa ka saaraya sabeentii oo si deggan ILAAHAY ugaga mahadnaqaya in inkasta oo uu isagu, Haabiil, u qalmey ciqaabta dhimashada, uu Ilaahay si ku meelgaadh ah u dhiigga sabeenta ugu sii aqbalayey in dembiga lagu soo gudo. Dabadeedna, Haabiil oo intuu mindidii la soo baxay si deggan neefkii u bireeyey oo daawanaya iyada oo dhiiggii nafta siinayey neefkaa ka daadanayo.



Markii uu sabeentaas qalay, Haabiil wuxuu tusay inuu tixgelin u hayey dabeecadda Ilaahay ee quduuska ah iyo qaynuunka ku saabsan dembiga iyo dhimashada. Maadaama uu isagu aaminey qorshihii Ilaahay, Ilaahay wuxuu saamaxay dembiyadii Haabiil oo wuxuu isaga ka dhigay xaq. Haabiil waxaa laga xorreeyey ciqaabtii dembiga waayo ciqaabtaas waxaa dusha laga saaray sabeentii. Allabarigii Haabiil wuxuu sawir ka bixinayaa oo sii tilmaamayey Allabariga ugu wanaagsan ee Ilaahay ku ballanqaaday inuu maalin bixin doono si u qaado dembiga adduunka.

*Waa* sababtaa **ta** uu *"RABBIGU u tixgeliyey Haabiil iyo allabarigiisii."*

## CAMALLADII IYO DIINTII QAABIIL

Waxaa soo hadhay Qaabiil. War muxuu kani ehlu-diinsanaa! Wuxuu isagu Ilaahay hordhigay qudaar iyo midhan oo cagaar, oo bislaaday kuwaas oo uu intuu aad u shaqeeyey beertiisii kala soo baxay. Laakiinse Ilaahay wuxuu diidey allabarigii Qaabiil.

Khaladka Qaabiil muu ahayn inuu Ilaah been ah caabudayey, laakiinse si been ah ayuu u caabudayey Ilaaha keliya ee runta ah.

Halkii uu Abuurihiisa si rumaysi leh ugu imaan lahaa, Qaabiil wuxuu ula yimid *fikradihiisa iyo dadaalkiisa shakhsi ahaaneed.* Ilaahay muu aqbalin markii ay waalidkiisu isku dayeen inay caleemo geed berde isku daboolaan, haddana muu aqbalayn allabariga qudaarta ah ee uu Qaabiil iskiis ula yimid.

Waxaynu ku doodi karnaa, "Laakiinse Qaabiil wuxuu keenay wixii uu haystey uun!"

Ilaahay muu dooney wixii Qaabiil haystey. Wuxuuse doonayey inuu Qaabiil aamino oo uu caabudo Isaga si ku aaddan soo gudida dhimashada—dhiigga sabeenta. Haddii uusan Qaabiil sabeen

haysan, qudaartiisa ayuu kaga beddelan kari lahaa mid sabeenihii Haabiil kamid ah ama si is hoosaysiin leh ayuu IlAAHAY ugu imaan lahaa meeshii allabariga ee lagu daadiyey dhiiggii sabeenta. Laakiinse Qaabiil sidaas wuu iskala weynaa. Wuxuu isagu doortay inuu Ilaahay ku "caabudo" shaqooyinkii gacmihiisa.

***Waa*** sababtaa tu uu Ilaahay *"uusan u tixgelin Qaabiil iyo allabarigiisii."*

## DEYNTA DEMBIGA

Muxuu RABBIGA sidaas ugu adkaystay? Muxuu Isagu u aqbalay sabeentii la qalay ee Haabiil ee u diidey qudaartii markaas uun la soo gooyey ee Qaabiil?

Ilaahay wuxuu allabarigii Qaabiil u diidey sabab fudud oo ah in ciqaabta dembigu tahay *dhimasho*, ee aanay ahayn dadaal shakhi ahaaneed. *Qaynuunka dembiga iyo dhimashada*, ee uu Ilaahay ugu horrayntii Aadan ogeysiiyey, ismuu beddelin. Dhammaan kuwa qaynuunnada Ilaahay jebiya waxay galeen deyn taas oo lagu soo gudi karo oo keliya *DHIMASHO*. Xaakinka xaqa ah ee adduunku ma oggolaanayo in ku xadgudubka qaynuunnadiisa lagu ciqaabo wax taas ka hooseeya.

Si kasta oo daacad loo noqdo, dadaal shakhsi ahaaneed, iyo camallo wanwanaagsani ma soo gudi karaan deynta dembiga.

Si aynu u tusaalayno, mala-awaal inuu bangi weyni i deymiyo dhowr malyuun oo doolar. Halkii aan lacagtaa si caqli leh ugu sii baayacmushtari lahaa, waan ciyaaray oo deyntii bixin kari waayey. Booliis baa gurigaygii yimid si ay ii xidhaan. Maxkamaddii dhexdeeda, waxaan xaakinkii ku idhi, "Inta aan noolahay oo dhan anigu ma awoodi doono inaan malyuunka doolar ee la igu leeyahay iska bixiyo, laakiinse waxaan hayaa qorshe aan lacagtaa deynta ah iskaga tirtirayo. Sidan baan samayn doonaa: Halkii aan deyntaa lacag ahaan u bixin lahaa, camallo wanwanaagsan baan ku bixinayaa! Maalin kasa waxaan madaxweynaha bangiga u keeni doonaa saxan bariis macaan ah. Usbuuciiba maalin baan cuntadii aan cuni lahaa masaakiinta siin doonaa. Maalintiiba dhowr jeer baan si weyso ahaan ah u qubaysan doonaa si aan ceebta deynta isaga maydho. Sidan baan samayn doonaa oo ugu dambaynta deynta oo dhan isaga bixin doonaa."

Miyuu xaakinku aqbalayaa fikraddan aan caqligalka ahayn ee deynta lacagta ah lagu soo gudayo? Marna ma yeelayo! Sidaas oo kale Xaakinka adduunku marna ma aqbalayo salaad, sooniyo camallo wanwanaagsan in lagu bixiyo deynta dembiga. Si keliya ayaa dembiga lagu soo gudi karaa. Waa in kaas ***DHIMASHO*** lagu bixiyaa—*Ilaahay oo abadiyan lagaa fogeeyo.*

Haddaba, ma jiraa hab dembiileyaashan aan iskood is caawin karin looga badbaadin karo qaynuunka *dembiga iyo dhimashada* ee aan la qaloocin karin ama adag?

Waa Ilaahay mahaddii, jid baa furan.

## QAYNUUNKA ALLABARIGA

Anigu turubka ma ciyaaro, laakiinse waxaan ogahay inay kaadhadhka turubka qaarkood felisaan kuwo kale. Qiimaha kaadhadka qaarkood la siiyey daraadeed, waxay ka badiyaan kaadhadhka kale ee qiimaha ka hooseeya leh.

Kitaabbada Axdigii Hore ee Daanyeel iyo Esteer waxay wax ka sheegaan boqorro beri hore jirey oo sameeyey qaynuunno *"aan beddelmin, sida sharciga reer Maaday iyo reer Faaris uusan u beddelmin oo kale"* (Daanyeel 6:8) Haddii uusan boqor qaynuunadaa midkood jeclaysan, intii uu kaas baabi'in lahaa, wuxuu ku beddeli jirey qaynuun awood badan oo kii hore "nasakha."[179]

Siaas oo kale, ilaa iyo bilowgiiba, jidka xaqa ah ee Ilaahay ee lagaga adkaanayo *"qaynuunka dembiga iyo dhimashada,"* waxay ahayd in la keeno qaynuun kaas ka sii adag, oo ah, *"**Qaynuunka allabariga dembiga,**"* (Laawiyiintii 6:25) ama, sida kale ee loogu yeedho: *"**Qaynuunka allabariga**."* (Laawiyiintii 7:11)

Ilaahay, oo dhowra qaynuunnadiisa oo dhan, wuxuu dejiyey *qaynuunka allabariga* si uu kaasi uga adkaado ama u nasakhi karo qaynuunka weli shaqaynaya ee ah *qaynuunka dembiga iyo dhimashada*.

Qaynuunka allabarigu wuxuu *naxariis* siinayaa dembiileyaasha iyada oo uu isla markaana fulinayo *caddaallada* dembiga ku aaddan. (Si aad u nakhtiintid sababta ay u tahay inuu Ilaahay *naxariista iyo caddaalladda* u filiyo si isu dheeli tiran, eeg cutubka 13). Qaynuunka allabariga dhiiggu wuxuu keenaya hab uu Ilaahay dembiga ku ciqaabayo Isaga oo aan ciqaabayn

dembiilaha. Halkan ayuu Ilaahay ku sharaxayaa sida ay tani ku dhici karto:

> *"Waayo, jiidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa* ***dhiigga****; oo anna waxaan meesha allabariga dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu kafaaro gudo, waayo, waa dhiigga waxa loogu* ***kafaaro gudaa*** *nolosha daraadeed."*
> (Laawiyiintii 17:11)

Qaynuunkani wuxuu ka kooban yahay laba sharci hoosaad:

1. ***DHIIGGU WUXUU BIXIYAA NOLOL***—Ilaahay wuxuu yidhi: ***"Jidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa dhiigga."*** Sayniska casriga ahi wuxuu qirayaa waxa uu Erayga Ilaahay sheegay kumanyaal sanno ka hor: nolosha nooluhu waxay ku jirtaa dhiigga. Dhiigga caafimaadka qabaa wuxuu qaadaa waxyaalaha nolosha muhiimka u ah oo wuxuu nadiifiyaa wasakhda. Dhiiggu waa qaali; oo isaga la'aantiisa, dadka iyo xayawaankuba way dhimanayaan.
2. ***DEMBIGU WUXUU DOONAYAA DHIMASHO***—Ilaahay wuxuu kaloo yidhi: ***"Waa dhiigga waxa loogu kafaaro gudaa nolosha daraadeed."*** Erayga *kafaaro gud* wuxuu ka yimid erayga af Cibraaniga ah ee *kaphar,* oo micnihiisu yahay *"daboolid, nasakhid, nadiifin, saamixid, iyo heshiisiin."*[180] Dhiig la daadiyey oo keliya ayaa dembiileyaasha lagu nadiifin karey oo lagula heshiisiin karey Abuurahooda xaqaaniga ah. Maadaama ay ciqaabta dembigu tahay dhimasho, Ilaahay halkan ku sheegayey inuu Isagu dhiig (nolol la bixiyey/diley) oo ah allabari uu raalli ka yahay u aqbalayo sidii soo guditaan ama daboolid qofka dembigiisa.

## KU BEDDELAAD

Sharciga kan aasaaska u ah *qaynuunka allabarigu* waxaa lagu soo koobi karaa erayga: ***ku beddelaad***. Xayawaan aan waxba galabsan ayaa dhimanaya sidii isaga oo ah dembiilaha eedaysan beddelkiisa.

Facyaal badan ka hor intii uusan Masiixu imaanin, ILAAHAY, wuxuu farcankii Aadan ogeysiiyey inuu Isagu si ku meelgaadh

ah u aqbalayo dhiig laga daadiyey neef ku allabari ku habboon, sida sabeen, ri', ama dibi. Xataa qoolleyda ayaa allabari ahaan loo bixin karey.[181] Si kasta oo uu qof taajir ama faqiir, mid wanaagsan ama xun u ahaa, dhammaan Ilaahay way u imaan kareen, iyaga oo garowsanaya dembi badnaantooda oo rumaynaya inuu Ilaahay dembidhaaf iyaga ku siinayo dhiig la daadiyey daraaddiis.

Neefkaas la qalayaa waa inuu ahaadaa mid *"aan iin lahayn."*[182] Waa inuusan jirranayn, oo lafi ka jabnayn, oo uusan nabar ama jeexdimo lahayn. Waxay ahayd inuu dembiilaha allabariga bixinayaa *"gacanta ka saaro saaraa madaxa [neefka], oo uu gowracaa… Kaasu waa **qurbaan dembi**."* Dabadeedna baruurta neefka waxaa lagu gubayey dhuxusha meesha allabariga.

Oo muxuu Ilaahay sheegay inuu allabarigaasi samaynayo?

> *"Dembigiisii… waa la **cafiyi** doonaa."* (Laawiyiintii 4:23-26)

Marka ay dembiileyaashu gacmahooda madaxa ka saaraan neefkaa aan iinta lahayn, taasi waxay tilmaamaysey in dembiyadoodii neefkaas dusha laga saaray. Neefkaas dembiga qaaday ayaa dabadeed iyaga beddelkooda dhimanayey.

Iyaga waa la cafiyey!

Iyada oo la raacayo sharcigan *ku beddelaadda* ah, dembigii waa la ciqaabay oo dembiilihiina waa la cafiyey. Ciqaabtii dhimashada ee dembigu waxay ku dhacday neefkii aan waxba galabsan halkii ay ku dhici lahayd dembiilihii eedaysnaa.

*Qaynuunka allabariga dembigu* wuxuu dembiilayaasha baray inuu Ilaahay quduus yahay iyo in aan *"**dhiig** daadin la'aan* [dhimasho in lagu soo gudo] ***dembidhaaf** jirin* [ciqaabtii dembiga oo la dhaafay]*."* (Cibraaniyada 9:22)

Allabarigaa xoolaha daraaddiis, Ilaahay wuxuu caddaalad ku qaadayey dembiga oo isla markaana naxariis tusayey dembiileyaal aan iskood isu caawin karin kuwaas oo Isaga iyo qorshihiisa aaminey. Waa sababtaa markii uu ILAAHAY quruumihii hore Tobankii Qaynuun siiyey, uu iyaga u xasuusiyey in sida keliya ee lagu saamixi karo qaynuunnadiisa oo la jebiyaa ay ahayd iyada oo Isaga loogu yimaado dhiig allabari samada iyo adduunka u dhexeeya, Ilaahay iyo qofka u dhexeeya—kaas oo meesha allabariga lagu qalo.

> *"Meel allabari waa inaad ciid* ***iiga*** *samaysaa,* ***oo waa inaad dusheeda iigu bixisaa*** *qurbaannadaada la gubo, iyo qurbaannadaada nabaadiinada, iyo idahaaga iyo dibiyadaada.* ***Oo meel kasta oo aan magacayga dadka ku xusuusiyoba waan kuugu iman doonaa oo waan kugu barakayn doonaa****."* (Bixintii 20:24)

Ujeeddada ugu muhiimsan ee dhiiggan dembiga loo daadiyey waxay ahayd in la tuso cadhada Ilaahay ee xaqa ah ee ku aaddan dembiga ilaa iyo marka laga gaadhayo imaanshaha Badbaadiyaha la ballanqaaday. Shaqada Masiixu waxay noqonaysey inuu Isagu kaamilo macnaha runta ah ee qaynuunka allabariga.

Qiimaynta Ilaahay marka la eego, nolosha hal qof oo bini'aadan ahi waxay ka sarraysaa dhammaan xayawaanka adduunka jooga. Xayawaanka lama abuurin aragga Ilaahay. Xayawaanku nafo abadiyan ah ma laha oo iyaga dib looma soo noolaynayo. Halkaa waxaad ka arkaysaa, in dhiigga xayawaanku uu keliyoo calaamad u ahaa wixii ay lagama maarmaan ahayd inuu si dhab ah u soo gudo deynta dembiga ee qofka.

Sabeentii uu Haabiil qalay waa qisada koowaad ee tirsan qisooyin badan oo Axdigii Hore ku qoran oo aynu ku aragno kuwa aaminaadda leh oo Ilaahay ugu imaanaya dhiig allabari ahaan looga daadiyey xoolo aan iin lahayn oo aan waxba galabsan. Qisooyinkan badan ee xoolaha badan la allabari ahaanta loo qalay, middood ayaa dhammaantood ugu caansan.

Taasina waa ta ay sannad kasta Muslimiinta adduunku xasuustaan.



# 20

# Allabari Muhiim Ah

Qoyskii isu soo uruuray. Neef la soo qabtay ayaa dhulka la jiifiyey. Yar iyo weynba, giddigood sabeentii ayay gacmahooda dusha ka saareen ama aabbihii mindida hayey. Si degdeg ah baa loo bireeyey oo noloshii neefka ayaa ciidda ku daadatay.

Allabarigii waa dhammaaday—ilaa iyo sannadka ku xiga.

*Ciidul-Adxa,* "Ciidda Allabariga," Muslimiintu waxay ku dib ugu tilmaamaan marxalad baybali ah oo dhacday afar kun oo sanno markaas oo uu wiilkii Ibraahim ka dhiman lahaa Ilaahay kaa ku beddeley inuu wan geeso leh ka dhinto.[183] Quraanku si kooban qisadan caanka ah waxa kooban ee uu ka sheegay ugu soo gabagabeynayaa: *"Oo **waxaanu isaga ku soo furannay allabari muhiim ah**."* (Suuradda 37:107)

Si aynu u fahanno muhiimmadda buuxda ee qisadan cajiibka ah, waa inayn dib ugu noqono kitaabka Bilowgii.

## IBRAAHIM

Ibraahim[184] wuxuu dhulka Uur la yidhaahdo ku dhashay qiyaastii 2000 oo sanno Ciise Kahor. Sida farcankii Aadan ee kale oo dhan, isaguna dabeecad dembi leh ayuu ku dhashay. In kasta oo Ibraahim ku dhex koray dad cawaan ah oo sanamyo caabuda, isagu wuxuu rumeeyey Ilaaha keliya ee runta ah. Ibraahim dad badan fikradda ay maanta qabaan muu qabin, kuwaas oo ku fekera in daacad loo ahaado oo la haysto diintii waalidiintaa kugu dhaleen.

Sidii Haabiil oo kale, Ibraahim wuxuu RABBIGA ugu tegey caabudaad ah dhiig laga daadiyey neefaf allabari ahaan loo qalay.

Markii uu Ibaahim toddobaatan iyo shan sanno jirey oo ay xaaskiisuna lixdan iyo shan sanno jirtey, ayaa ILAAHAY isaga u muuqday oo ku yidhi:

> *"Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reerka aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u kac.* ***Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakayn doonaa****, magacaagana waan weynayn doonaa; oo waxaad noqon doontaa barako; oo waan barakayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa:* ***oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan****."* (Bilowgii 12:1-3)

Ilaahay wuxuu ballanqaaday inuu Ibraahim ka dhigo *"quruun weyn"* taas oo badbaadadiisa u soo marin doono dadyowga adduunka oo dhan. Quruuntaasi mid *"weyn"* bay ahaan doontey, mana aha *tiro badnaanteeda* daraadeed, laakiinse *muhiimaddeeda* daraadeed. Si ay quruuntaasi cusubi u timaaddo, Ibraahim iyo xaaskii ma-dhalaysta ahayd wuxuu Ilaahay ku amray inay u guuraan dhul uu Isagu ugu ballanqaaday inuu farcankooda siinayo, in kasta oo aanay weli markaa farcan lahayn.

Sidee buu Ibraahim uga jawaabay ballanqaadyadii Ilaahay ee u muuqday inaanay suurtogal ahayn? Isagu Ilaahay ayuu aaminey oo adeecay, oo ka tegey reerkii aabbihiis, una guuray dhulkii Kancaan la odhan jirey, oo maanta loo yaqaan Israa'iil iyo Falastiin.

## RUMAYSIGII IBRAAHIM

Markii uu Ibraahim dhulkii Kancaan yimid, RABBIGU wuxuu isaga ku yidhi, *"Dalkan* ***farcankaagaan*** *siin doonaa. Kolkaasuu meeshaas meel allabari uga dhisay RABBIGII u muuqday."* (Bilowgii 12:7)

Ballanqaadka Ilaahay wuxuu mid aad yaab badan. Dalkaa Kancaan waxaa degganaa qolooyin badan oo kale. Sidee ayaa Ibraahim iyo farcankoodu kaas ku yeelan kareen? Isaga iyo xaaskiisuna farcan ma lahayn.

Mala-awaal lamaane duqooshin ah oo iyaga oo dhul fog ka yimid waddankaaga soo booqanaya. Markii ay yimaadeen, ayaad iyaga ku tidhi, "Maalin maalmaha ka mid ah farcankiina ayaa dhulkan oo dhan yeelan doona!" Ninkii gaboobey wuu qoslayaa oo odhanayaa, "Kaftanka naga daa! Xataa anigu farcanba ma lihi! Duq baan ahay; oo carruur ma lihi, xaaskaykuna waa ma-dhalays, markaasaad aniga ii sheegeysaa inay farcankaygu tarmi doonaan oo ay dhulkan yeelan doonaan? Ma maskaxdaad ka jiran tahay?"

Qaadan-waaga noocan ah ayuu ballanqaadkan Ilaahay u keeni karey Ibraahim. Sideese Ibraahim kaas uga jawaabey? Erayga Ilaahay wuxuu inoo sheegayaa inuu isagu *"RABBIGA **rumaystay**; Ilaahna taas wuxuu ugu tiriyey **xaqnimo**."* (Bilowgii 15:6) Rumaysigii sida ka carruurta oo kale ahaa daraaddiis, Ilaahay wuxuu isaga tilmaamay mid xaq ah. Marka uu dhinto kaddib, Ibraahim weligiis RABBIGA ayuu boqortooyadiisa jannada kula noolaan dooney.

Erayga *"rumeeyey"* luuqaddiisii af Cibraaniga ee ugu horrayn lagu qoray waa *aman*, waxaana tan ka yimid erayga *"Aamiin,"* oo macnihiisu yahay "Sidaas ha noqoto!" ama "waa mid la aamini karo oo run ah!"

Yay tani ku dhaafin. In *RABBIGA la rumeeyo* waa in la dhegeysto waxa u Isagu yidhaahdo oo lagaga jawaabo "aamiin" qalbiga ka timid! Waa rumaysigaa dhabta ah ka carruurta yaryar oo kale ah ka Ilaahay inagu xidhaa. Haddii aynu Erayga Ilaahay run ahaan u aqballay haddii kale waxaa laga garanayaa ficilladeena. Rumaysigii Ibraahim waxaa inuu dhab yahay lagu muujiyey kaddib markii uu isagu doortay waddo adag, oo uu diintii aabbihiis dhabarka u jeediyey si uu RABBIGA u raaco.

> *"**Ibraahimna Ilaah buu rumaystay**, oo waxaa isaga loogu tiriyey xaqnimo, oo waxaa loogu yeedhay **saaxiibkii Ilaah**."*
> (Yacquub 2:23)

Ibraahim wuxuu ahaa Ilaahay saaxiibkii waayo wuxuu Isagu rumeeyey Erayga Ilaahay. Tan macnaheedu inuu Ibraahim mar kasta Ilaahay ku aaminey dhinac kasta oo nolosha ah. Sharci ahaan, Ilaahay wuxuu isaga ku tiriyey mid xaqnimadiisu fiican tahay, laakiinse marka la eego nolol maalmeedkii Ibraahim isagu mid dhinac kasta ka fiican muu ahayn.

Erayga Ilaahay ma qariyo dembiyadii iyo cilladihii nebiyada.

**ISMAACIIL**

Ibraahim iyo xaaskiisii Saarah waxay iyaga oo reer baadiye ah ku noolaayeen dhulkii Kancaan, oo teendhooyin bay deganaan jireen, oo hadba meel u guuri jireen. Muddo kaddib Ibraahim aad buu xoolo uga taajirey.

Muddo toban sanno ah ayaa ka soo wareegtey markii uu Ilaahay ugu ballanqaaday inuu quruun weyn noqon doono. Hadda siddeetan iyo lix sanno buu jirey xaaskiisuna toddobaatan iyo lix sanno bay jirtey, welina carruur may lahayn. Sidee buu Ibraahim quruun weyn ku noqon karaa isaga oo carruurba lahayn? Ibraahim iyo xaaskiisii ayaa go'aansaday inay Ilaahay ka "caawiyaan" inuu ballanqaadkiisii kaamilo.

Halkii ay RABBIGA ka sugi lahaayeen inuu Isagu qorshihiisa meelmariyo wakhtigii uu ugu talogalay, waxay raaceen caqligooda iyo caadadii dadkii dhulkaa degganaa. Saarah ayaa Ibraahim siisay gabadh booyaaso u ahayd oo Masriyad ahayd oo Haagaar la odhan jirey, si uu iyada ula seexdo oo cunug uga dhalo. Haagaar waxay Ibraahim u dhashay wiil ay u bixiyeen *Ismaaciil*.

Saddex iyo toban sanno kaddib, markii uu Ibraahim sagaashan sanno jirey, Ilaaha Qaadirka ah ayaa isaga u muuqday oo u sheegay inay xaaskiisa Saaraah wiil dhali doonto.

> *"Markaasuu Ibraahim wejiga u dhacay, oo qoslay, oo qalbigiisa wuxuu iska yidhi, 'Ma ilmaa u dhalan doona nin boqol jir ah? Oo Saarah oo sagaashan jir ihi miyey dhali doontaa?' Oo Ibraahim wuxuu Ilaah ku yidhi, Waxaan jeclaan lahaa in Ismaaciil hortaada ku noolaado! 'Oo Ilaah wuxuu yidhi, 'Maya, laakiin naagtaada Saarah wiil bay kuu dhali doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Isxaaq; oo waxaan isaga ku adkayn doonaa axdigayga, kaas oo farcankiisa ka dambeeya u ahaan doona axdi weligiis waara. Xagga* ***Ismaaciil****na waan ku maqlay; oo bal eeg, isaga waan barakeeyey, waanan badin doonaa, oo aad baan u tarmin doonaa isaga; laba iyo toban amiir buu dhali doonaa, oo quruun weyn baan*

*ka dhigi doonaa. Laakiin axdigayga waxaan ku adkayn doonaa **Isxaaq** kan Saarah kuu dhali doonto sannadda soo socota xilligan oo kale.”* (Bilowgii 17:17-21)

**ISXAAQ**

Ilaahay ballanqaadkiisii wuu dhowray, oo Saarah, ayaa iyada oo gabowdey Ibraahim u dhashay wiil *Isxaaq* la yidhaahdo.

*“Wiilkiina wuu koray, naaskiina waa laga gudhiyey. Ibraahimna diyaafad weyn buu sameeyey maalintii Isxaaq naaska laga gudhiyey. Saarahna waxay aragtay wiilkii ay Haagaar tii Masriyadda ahayd Ibraahim u dhashay oo ku cayaaraya.”* (Bilowgii 21:8-9)

Ismaaciil kumuu faraxsanayn qorshaha Ilaahay ee ahaa inuu Isxaaq u isticmaalo inuu ka quruun dhaliyo taas oo uu RABBIGU runtiisa soo marin dooney oo adduunka ku siin dooney badbaado. Laakiinse, Ismaaciil wuu ku ciyaaray wiilkii ay dhinaca aabbe walaalaha ka ahaayeen. Khilaafkii ayaa wuxuu gaadhey heer uu Ibraahim go’aansado inuu Ismaaciil iyo Haagaar iska diro. Kani wuxuu Ibraahim ku ahaa go’aan xanuun badan, waayo isagu wiilkiisa Ismaaciil wuu jeclaa.

*“Ilaahna wuxuu Ibraahim ku yidhi, ‘Yaanay kula xumaan wiilka* [Ismaaciil] *dartiis, iyo naagta addoonta* [Haagaar] *ah toona… waayo, farcankaaga **Isxaaq** baa loogu yeedhi doonaa. Ilaahna wiilkii* [Ismaaciil] *buu la jiray; wuuna koray; oo cidladuu degay, wuxuuna noqday qaansoole. Wuxuuna degay cidladii Faaraan: hooyadiis baana dhulka Masar naag uga qaadday.”* (Bilowgii 21:12, 20-21)

Isla sidii uu ILAAHAY ballanqaaday, Ismaaciil wuxuu aabbe u noqday quruun weyn oo uu Ilaahay siyaalo badan u barakeeyey. Sidaas oo ay tahay, RABBIGU wuxuu Ibraahim si cad ugu sheegay inuu Isagu *“Isxaaq”* ku fulin doono axdigiisa uu adduunka ku badbaadinayo.

## ISRAA'IIL

Mar dambe, Isxaaq wuu guursan dooney wiilal mataano ah dhali dooney, Ceesaw iyo Yacquub. Ugu dambaystii Ilaahay magac cusub ayuu Yacquub u bixiyey, oo isaga u sheegay, *"Magacaagu wuxuu ahaan doonaa* ***Israa'iil****."* (Bilowgii 35:10) Yacquub laba iyo toban wiil buu lahaa, awooweyaashii laba iyo tobanka qabiil ee Israa'iil, oo wakhtigii Muuse uu Ilaahay isugu dubariday qaran. RABBIGU wuxuu kuwan ugu yeedhay farcankii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub *dadkiisii uu doortay*.[185]

Muxuu Isagu u doortay *iyaga*? Ma quruumaha kale ayay ka fiicnaayeen? Maya, run ahaantii wuxuu Ilaahay Israa'iiliyiinta u sheegay inay iyagu *"dadyowga oo dhan waad ugu wada* ***yaraayeen*** [daciifsanaayeen]." (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 7:7) Ilaahay wuxuu doortay dadkan Cibraaniyiinta ah ee daciifka ah ee la yaso si uusan ninna ugu faani karin waxa uu Isagu qorsheeyey inuu sameeyo.

Waa sidan sida uu ILAAHAY jecel yahay inuu u shaqeeyo.

> *"Ilaah wuxuu doortay* ***waxyaalaha nacasnimada*** *ah ee dunida inuu ceebeeyo kuwa xigmadda leh, oo Ilaah baa doortay waxyaalaha* ***itaalka daran*** *inuu ceebeeyo waxyaalaha itaalka leh.* ***Waxyaalaha hoose iyo waxyaalaha la fududaystana*** *Ilaah baa doortay,* ***xataa waxyaalaha aan jirin****, inuu waxyaalaha jira wax aan wax tarin ka dhigo,* ***si aan qofna ugu faanin Ilaah hortiisa****."*
> (1 Korintos 1:27-29)

## WADDO WADA-XIDHIIDH

Ilaahay wuxuu kiciyey qaran cusub oo ah waddo uu akhbaarkiisa soo ilaa adduunka meelaha ugu fogfog. Ilaah baa sameeyey "waddadan wada-xidhiidhka ah" wakhti badan ka hor intii aan raadiyaha, telefishinka, iyo internet-ka la samayn—laakiinse kuwan kamay saamayn yarayn. Shuqullada waaweyn ee Ilaaha keliya ee runta ahi ka dhex sameeyey quruuntan ayaa adduunka oo dhan laga maqli dooney. Tusaale ahaan, Erayga Ilaahay wuxuu qorayaa markhaatifurkan haweeney reer Kancaan ah: *"****Waxaannu maqalnay*** *sidii* ***RABBIGU*** *hortiinna uga engejiyey biyihii Badda Cas, markii aad Masar ka soo baxdeen…*

***RABBIGA Ilaahiinna ahu waa Ilaaha** samada sare iyo dhulka hooseba jooga."* (Yashuuca 2:10-11)

Intaas waxaa sii dheer, inay quruuntan noqon doontey ta uu Ilaahay *nebiyada* ka dooran dooney oo *Erayga Ilaahay* qori doontey.

Ta ugu muhiimsani waa, inuu Ilaahay quruuntan ka soo saari doono *mid farcankooda ah* kaas oo uu Isaga Laftiisa barakadu u adduunka u soo mari doonto. Sidii aynu hore u soo aragnay (cutubka 16), kan Farcanka ah ee maaha mid kale ee waa *farcankii naagta ee la ballanqaaday*, Badbaadiyaha la ballanqaaay kaas oo samada ka soo degey inuu ka dhasho gabadh miskiin ah oo Yuhuudiyad ah.

Haddii aad oggoshahay iyo haddii kaleba, quruuntan qadiimka ahi waxay ahayd waddo ama kanaal uu *Ilaahay sameeyey* si uu runtiisa iyo barakadiisa abadiyanka ah ugu sheego quruun kasta oo adduunka joogta. Waxan oo dhamina oo waxay ka bilowdeen RABBIGA oo Ibraahim u sheegaya inuu ka haajiro gurigii aabbihiis oo uu aado dhulkuu Kancaan.

Axdigii weynaa ee Ilaahay la dhigtay Ibraahim laba qaybood oo waaweyn ayuu ka kooban yahay:

> *1) "**Quruun weyn** baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakayn doonaa…"*
> *2) "Oo **qabiilooyinka dhulka oo dhammu** adigay kugu barakoobi doonaan."* (Bilowgii 12:2,3)

Jacaylka Ilaahay kuma koobna koox gaar ah. Isagu ma dooneyn inuu barakadeeyo Ibraahim iyo Israa'iil oo keliya. Qalbigiisa naxariista lihi wuxuu u heelan yahay *"qabiilooyinka adduunka oo dhan."* Axdigii Hore waxaa ka buuxa qisooyin uu Ilaahay Isaga oo isticmaalaya qaranka yar ee madaxa adag ee Israa'iil nimcadiisa ku siiyey quruumaha iyo dadyowga luuqadaha kala duduwan leh oo dhan.[186] Ujeeddadii Ilaahay ee ahayd inuu quruumaha oo dhan ku barakeeyo quruuntan la yaso waa in niyadda lagu hayo mar kasta oo uu Baybalku sheego inuu RABBIGU Israa'iiliyiinta ka ilaalinayo kuwa isku daya inay iyaga xasuuqaan oo adduunka ka dhammeeyaan. Ilaahay ayaa iyaga difaacayey, *mana ahayn inay iyagu ka wanaagsanaayeen* quruumaha kale, laakiinse *waxay ahaayeen **kanaalka*** ama ***waddada*** uu Isagu go'aamiyey

inuu ku tuso awooddiisa iyo ammaantiisa oo uu badbaado ku siiyo adduunka. Marka uu Isagu ilaalinayo farcanka Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub, Ilaahay wuxuu kaloo ilaalinayey barakadiisa *"qabiilooyinka adduunka oo dhan."*

Waxaa intaas sii dheer, tani waxay khusaysay sharafta RABBIGA Ilaaha ah. Wuxuu isagu ku dhaartay magaciisa weyn inuu quruumaha oo dhan ku barakayn doono quruuntan daciifka ah ee la yaso.[187] Ilaahay wuxuu samayn dooney isla sidii uu Isagu ballanqaaday, sharafta magaciisa daraadeed.

Miyaynaan innaguna sidaas oo kale samayneen, haddii arrini saamayn ku leedahay sharafteena, iyo ta qoyskeena?

## ILAAHAY WUXUU IMTIXAAMAY IBRAAHIM

Hadda aynu dib ugu laabano qisada caanka ah ee ku saabsan allabarigii muhiimka ahaa ee Ibraahim.

Xaaladdu sidan bay ahayd: Ibraahim duq weyn buu ahaa, Ismaaciil hore ayaa la isaga diray oo guriga laga caydhiyey. Isxaaq oo keliya, wiilkii Ibraahim iyo Saarah, ayaa guriga ku hadhay.

Ilaahay imtixaankii ugu weynaa ayuu rumaysigii Ibraahim gelin dooney. RABBIGA Ilaaha ahi wuxuu kaloo adduunka hordhigi dooney sawirro iyo waxyiyo ku saabsan wixii uu Isaga Laftiisu qorsheeyey si uu carruurtii Aadan uga xorreeyo xukunka dhimashada ah ee dembiga.

> *"Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah tijaabiyey Ibraahim, oo uu ku yidhi, 'Ibraahimow!' Isna wuxuu yidhi, 'Waa i kan.'*
>
> *Markaasuu ku yidhi, 'Hadda kaxee wiilkaaga keligiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah; oo halkaas isaga sida allabari la gubo ku dul bixi buuraha middood oo aan kuu sheegi doono.'"* (Bilowgii 22:1-2)

Ilaahay wuxuu Ibraahim u tilmaamay inuu tago buur khaas ah hoosteeda oo uu halkaas ku qali dooney oo weliba allabari ahaan ugu gubi dooney wiilkiisa uu jecel yahay. War muxuu kani amar adag ahaa! Tani waxay ahay arrin uusan Ilaahay weligiis hore inuu qof bini'aadan ahi sameeyo oo uusan dib u weydiin doonin inuu qof sameeyo. Sidaas oo ay tahay, maadaama uu Isxaaq sidii

farcankii Aadan oo kale oo dhan deyn dembi ah qabey, xukunkan isaga dusha laga saaray xaq buu ahaa: dhimasho.

> *"Oo aroortii horaa Ibraahim kacay, oo wuxuu kooraystay dameerkiisii, oo wuxuu kaxaystay laba ka mid ah dhallinyaradiisii, iyo wiilkiisii Isxaaq; qoryihiina allabariga la gubo wuu u jeexjeexay, wuuna kacay, oo wuxuu tegey meeshii Ilaah u sheegay."* (Bilowgii 22:3)

Ibraahim, wuxuu rumeeyey Ilaahay. Saddex maalmood oo qalbi-jab iyo dhib miidhan ah ayaa Ibraahim, willkiisii, iyo laba midiidinadoodii ka mid ahi socdaalayeen, iyada oo ay tallaabo kasta oo ay qaadaan iyaga ku soo dhoweyneysey meeshii wiilka lagu qali lahaa.

> *"Maalintii saddexaad ayuu Ibraahim indhihiisa kor u taagay, markaasuu meeshii oo ka fog arkay. Ibraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada ahaa ku yidhi, Idinku halkan dameerka la jooga, aniga iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa."*
> (Bilowgii 22:4-5)

Ibraahim wuxuu midiidinadii u sheegay, *"Waannu idinku soo noqonaynaa."*

Sidee ayay Ibraahim iyo wiilkiisu "u soo noqon" kareen haddii Isxaaq la qali dooney oo lagu gubi dooney meesha allabariga? Meel kale oo Qorniinka ah ayaa jawaabta lagu bixinayaa. Maadaama uu Ilaahay ballanqaaday inuu Isxaaq ka dhigi doono quruun weyn, Ibraahim wuxuu rumaysnaa in marka uu wiilkiisa allabari ahaan u bixiyo, uu Ilaahay isaga dib u soo noolayn dooney.[188] Ibraahim wuxuu bartay inuu RABBIGU mar kasta ballammadiisa dhowro!

## ILAAHAY WUXUU KEENAY BEDDELAAD

> *"Ibraahimna wuxuu qaaday qoryihii allabariga la gubo, oo wuxuu saaray wiilkiisii Isxaaq, isna wuxuu gacantiisa ku qaaday dabkii iyo mindidii; markaasay labadoodiiba israaceen."* (Bilowgii 22:6)

Intii ay wiilka iyo aabbihiis buurta ku sii socdeen, Isxaaq baa yidhi,

> *" 'Aabbow. Isna wuxuu yidhi, Waa i kan, wiilkaygiiyow,' Markaasuu ku yidhi, 'Bal eeg, waa kuwan dabkii iyo qoryihii, laakiinse* ***meeh wankii*** *allabariga la gubo loo bixin lahaa?'*
>
> *Ibraahimna wuxuu yidhi,* ***'Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow****;' saas daraadeed labadoodiiba way israaceen. Oo waxay yimaadeen meeshii Ilaah isaga u sheegay; Ibraahimna meeshaasuu ka dhisay meeshii allabariga, qoryihiina wuu hagaajiyey, markaasuu xidhay wiilkiisii Isxaaq, oo meeshii allabariga saaray qoryihii dushooda. Ibraahimna gacantiisii buu fidiyey, oo mindidii buu u qaaday inuu wiilkiisii dilo.*
>
> *Markaasay malaa'igtii RABBIGU samada uga yeedhay isaga, oo waxay ku tidhi, 'Ibraahimow, Ibraahimow.'*
>
> *Kolkaasuu yidhi, 'Waa i kan.'*
>
> *Markaasay ku tidhi, 'Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah.'*
>
> *Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay wan geesaha kayn kula jira."* (Bilowgii 22:7-13a)

RABBIGA ayaa soo dhex galay. Wiilkii Ibraahim waa laga badbaadiyey xukunkii dhimashada.

Ibraahim ayaa agagaarkiisii eegay, oo meel aan sidaa u fogey oo isla buurta hoosteeda ah ayuu ka arkay wax ka geedaha dhexdooda ka dhaqdhaqaaqaya. Muxuu ahaa…? Ma laga yaabaa inuu yahay…? Haa! Ilaah baa ammaan leh! *"Wan geesaha kayn kula jira,"* kaas oo aan iin lahayn!

Ilaahay isaga oo dhowraya *"qaynuunkiisa allabariga,"* ayuu bixiyey beddelaad.

> *"Markaasaa Ibraahim tegey oo wankii soo kaxeeyey, oo wuxuu u bixiyey allabari guban **meeshii wiilkiisa**."*
> (Bilowgii 22:13b)



Muxuu wiilkii Ibraahim xukunkii dhimashada ahaa ee isaga saarnaa uga badbaadey?

Wankii geesaha lahaa ayaa isaga beddelkiisii dhintay.

Ilaahay ayaa kaas wiilka beddeley bixiyey.

## RABBIGA AYAA BIXINAYA

> *"Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey **RABBIGA–Ayaa Lagu–Arki Doonaa**. xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, '**Buurta RABBIGA ayaa lagu arki doonaa**.'"*
> (Bilowgii 22:14)

Kaddib markii uu Ibraahim beddelkii wiilkiisa wanka qalay, muxuu meeshaas ugu bixiyey *"RABBIGA-Ayaa Lagu-arki-**Doonaa**?"*

Muxuu Ibraahim meeshaas ugu bixin **waayey**, *RABBIGA-ayaa-**Keenay**?*

Marka uu odhanayo, *"RABBIGA ayaa lagu arki doonaa,"* wuxuu nebi Ibraahim ogeysiis ka sii bixinayey dhacdo mustaqbalka dhici doontey, qiyaastii kumanyaal sanno markaas

dabadeed. Waayo waxay ahayd isla buurtan dhinaceeda (meeshii Yeruusaalem markii dambe laga dhisay) meeshan oo uu RABBIGU allabari kale ku bixin dooney, kaas oo uusan hal nin oo keliya dhimashada kaga badbaadin doonin, laakinse uu adduunka oo dhan ku siin dooney furasho buuxda.

Ma xasuusataa wixii uu Ibraahim ku yidhi wiilkiisa markii ay buurta ku sii socdeen, meeshii isaga allabari ahaanta loogu bixin lahaa? Wuxuu isaga ku yidhi,

> ***"Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow."***

Muxuu Ibraahim ka hadlayey? Ilaahay miyuu wan bixiyey inuu kaasi dhinto beddelkii wiilkii Ibraahim? Maya, Isagu wuxuu bixiyey *wan geeso leh*. Markaa muxuu Ibraahim ka hadlayey markii uu lahaa inuu Ilaahay *"Qudhiisu uu* ***wankii****"* isa siin doono?

Jawaab cajiib ah ayaa mar dhow soo baxaysa, laakiinse marka hore waa in qisooyin dheeraad ah la sii sheegaa.



# 21

# Dhiig Dheeraad ah oo la Daadiyey

Haddii si daacad ah loo hadlayo.

Innagu si gaabis ah ayaynu xaqiiqooyinka ruuxiyanka ah u barannaa.

Ilaahayna taas wuu og yahay.

*"Wakhtigii aad macallimiin noqon lahaydeen ayaad haddana u baahan tihiin in laydin baro* ***waxyaalaha ugu horreeya*** *ee Ereyada Ilaah, oo waxaad noqoteen sidii kuwa caano u baahan ee aan cunto adag u baahnayn."*

(Cibraaniyada 5:12)

Alla!

Naxariistiisa daraadeed, Ilaahay waa macallinka ugu dulqaadka badan, oo wuxuu inoogu celceliyaa oo dib inoogu bilaabaa rumo ay ahayd inaynu bari hore baranno. Si uu inoo caawiyo, wuxuu Kitaabkiisa ku daray boqollaal qiso oo si qayaxan u sharaxaya mid kamid ah xaqiiqooyinka ugu muhiimsan:

*"Dhiig daadin la'aan dembidhaaf ma jiro."*

(Cibraaniyada 9:12)

Saamaxadda dembigu marna ma ahayn mid uu Abuuraheena quduuska ahi dhayalsado. Laga soo bilaabo maalintii uu dembigu adduunka soo galay, wuxuu Ilaahay bilaabay inuu dembiileyaasha baro inuu allabari quman oo keliyahi dembiga kafaaragud (dabooli) u noqon karo. Waa sidaa sida uu Ilaahay, Xaakinka Caddaaliga

ahi, u ciqaabo dembiga Isaga oo aan dembiilaha ciqaabayn.

RABBIGU wuxuu diidey dadaalkii ay Aadan iyo Xaawa iskood ugu doonayeen inay dembigooda daboolaan. Dhimasho maahee, si kale Ilaahay dembiga kuma cafiyo. Qisada Qaabiil iyo Haabiil waxay in bartay isla casharkaas oo kale. Waa sidaas oo kale qisooyinka Ibraahim iyo Isxaaq.

Kitaabbada Axdigii Hore ee Bilowgii ku xiga, sida Baxniintii iyo Laawiyiintii, waxaa ka buuxa qisooyin ku saabsan rag iyo dumar u hoggaansamay qaynuunka allabariga.[189]

## "ANIGU WAAN KORMARI DOONAA"

Kitaabka Baxniintii wuxuu inoo sheegayaa qiso aadan ka dhergeyn oo ku saabsan sidii uu Ilaahahay farcankii Ibraahim qaran ahaan isugu dubaridey, isla sidii uu Isagu ballanqaaday.

Marxallado xagga Ilaahay ka sugnaaday oo isku xigxiga daraaddood kuwaas oo uu Ilaahay hore Ibraahim ugu sii sheegay,[190] farcankii Israa'iil waxay addoomo u noqdeen Faraaciintii Masar. Ilaahay wuxuu ballanqaaday inuu iyaga addoonnimadooda ka soo furan doono, oo sida uu taas ku samayn doonana adduunka ku tusi doono "sawirro" tusaya qorshihiisa uu farcanka Aadan kaga badbaadin doono addoonimadooda dembiga.

Tani waa qisada Kormaridda.

Qiyaastii 1490 Ciise Kahor, RABBIGU wuxuu Isaga oo afka Muuse isticmaalaya dalka Masar ku aafeeyey toban belaayo oo aad u xunxun. Sagaalka ugu horreeya ee calaamadahan mucjisooyinka ah, oo uu RABBIGU ku tijaabiyey oo kaga adkaaday ilaahyadii beenta ahaa ee Masar, Fircoon kamay dhigin inuu adeeco Ilaaha keliya oo runta ah oo Israa'iiliyiintii xornimo siiyo.[191] Laakiinse belaayadii tobnaad ayaa Fircoon ku qancin doontey inuu iyaga sii daayo. Ilaahay wuxuu Muuse u sheegay inuu dadka ogeysiiyo in curaddada qoys kasta oo Masri iyo Israa'iili ah lagu xukumay inay dhintaan. Habeen-badhka taariikh la cayimay, ayaa malagga dhimashadu dalka dhexmari dooney oo uu dili dooney curadka qoys kasta.

Kaasi war xun buu ahaa.

Warka wanaagssani wuxuu aha inuu Ilaahay keeni dooney jid lagaga badbaado belaayadan dhimashada ah. RABBIGU wuxuu

Muuse u sheegay inuu qoys kasta ogeysiiyo inay doortaan *"Wan ... aan iin lahayn, waana inuu ahaadaa mid lab oo sannad jiray, waana inaad wananka ama orgiyada ka bixisaan."* (Baxniintii 12:5) Dabadeedna, wakhti la cayimay, wanka waa in la qalaa, dhiiggiisa la mariyaa dhinaca sare, iyo hareeraha albaabka guri kasta. Dhammaan kuwa dhiigga wanka albaabkooda sidaa u mariya, oo guriga ku dhex jira marka ay belaayada dhimashada ahi waddanka dhex marayso, kuwaas waa la badbaadin dooney.

RABBIGU wuxuu ballanqaaday:

> *"**Markii aan dhiigga arko, waan iska kiin kor mari doonaa**, belaayo idin baabbi'isaana **idinkuma** dhici doonto."*
> (Baxniintii 12:13)

Wax kastaa waxay u dheceen isla sidii uu Ilaahay yidhi. Habeenkaa baqdinta badan ee Masar ka jirey, Ilaahay wuxuu daayey dhammaan curadyadii *dhiigga ku hoos jirey*; kuwii kale oo dhan, oo uu ku jiro wiilkii Fircoon curadka u ahaa, way dhinteen.

Yaynaan ku guuldaraysan inaynu fahanno in qoys kasta ay dhimasho ka jirtey. Haa, qoys *kasta*.

Ama wan baa dhintay ama curad baa dhintay.

Habeenkaas, kuwii dhiigga albaabadooda hareeraha ka mariyey waxay ka xoroobeen nolol cadaadis iyo addoonimo ah. Waxay tageen iyaga oo ah dad xor ah oo la furtay.

Oo muxuu ahaa qiimaha loo bixiyey in iyaga la badbaadiyo?

Dhiigga wan.

Mar kale, *qaynuunka allabariga* ayaa ka guuleystey *qaynuunka dembiga iyo dhimashada*. Sannadihii markaa ka dambeeyey Yuhuuddu waxay u dabbaaldegi dooneen *Kormaridda*, xaflad sannadle ah oo ay ku xasuusanayaan furashadii weyneyd ee uu iyaga ilaahay ku siiyey dhiiggii wanka daraaddiis.

## ILAAHAY OO DADKIISA HOGGAAMINAYA

Habeenkii ugu horreeyey ee Kormaridda, Ilaahay wuxuu dadkiisa ka saaray afar boqol oo sanno oo ay addoomo ku ahaayeen Masar oo iyaga u kexeeyey lama-degaankii. Ilaahay wuxuu qorsheeyey inuu iyaga dib u geeyo dalkii uu Isagu ugu

ballanqaaday Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, iyo farcankooda. Intii ay sii socdaalayeen, Ilaahay Laftiisa ayaa iyaga ula socdey si naxariis leh oo la arki karey.

> *"RABBIGUNA inuu iyaga jidka tuso aawadeed ayuu maalintii hortooda socon jiray isagoo ku jira tiir daruur ah, habeenkiina tiir dab ah, inuu iyaga u iftiimiyo si ay u socdaan hadh iyo habeenba."* (Baxniintii 13:21)

RABBIGU dadkiisa lama-degaanka kuma uu dhex hoggaamin oo keliya Isaga oo iftiin siinaya, laakiinse cudud xoog leh ayuu Isagu waddo uga dhex furay Badda Cas, oo wuxuu iyaga ka badbaadiyey ciidankii Fircoon ee caydhsanayey. Dabadeedna, isla sidii uu Isagu ugu ballanqaaday Muuse, ayuu wuxuu iyaga geeyey Buur Siinay.[192]

Halkaas buurta hoosteeda ayay qarankan cusub ee labada malyuun ee qof ka badnaa deganaayeen sannad dhan. Sidee ayay iyaga suurtagal ugu noqon kartey inay meeshaas qalalan ku noolaadaan? Ilaahay, wanaaggiisa iyo nimcadiisa daraadeed, samada ayuu kibis ka siiyey biyona dhagax buu uga soo dhex daayey.[193] In kasta oo ay Israa'iiliyiintu si joogto ah ugu guuldarraysteen inay u mahadnaqaan, oo aaminaan, oo addeecaan Ka iyaga addoonimadii ka soo badbaadiyey, RABBIGU iyaga mar kasta daacad buu u ahaa. Iyaga wuu xukumay marka ay Isaga ku dembaabaan marka ay Isaga rumeeyaana wuu barakadaynayey iyaga. ILAAHAY sidaas ayuu ula shaqeeyey qarankiisaa uu doortay si ay quruumahii kale ee ku hareeraysnaa u arkaan, uga fekeraan, oo u bartaan badbaadadiisa. Ilaahay wuxuu kale oo doonayey inay dadku fahmaan in Isaga loo garan karo si shakhsiyan ah.

Kaddib markii uu Israa'iil siiyey Tobankii Qaynuun (cutubka 15) iyo sharciyo kale, RABBIGU wuxuu dadkiisii ku amray inay dhisaan macbud khaas ah oo loogu yeedho *Taambuugga,* ama *Teendhadii Kulanka*.

## TAAMBUUGGII

> *"Oo meel quduus ah* ***Aniga*** *ha ii sameeyeen* ***aan iyaga dhex joogee.*** *Waxaan* ***ku tusi doono oo dhan****, oo ah*

> ***hannaanka taambuugga*** *iyo* ***hannaanka*** *alaabtiisa oo dhan,* ***waa inaad sidaas oo kale u samaysaan****."*
>
> (Baxniintii 25:8-9)

Maxay ahayd ujeeddadii ay dadkii Ilaahay ee qadiimka ah u dhisayeen teendhadan khaaska ah? Maxayse muhiimka u ahayd in taas loo dhiso isla *"sida hannaankeedu ahaa"* ee uu Ilaahay bixiyey?

Ilaahay wuxuu doonayey inuu taambuuggan u isticmaalo inuu iyaga si la arki karo u baro Ka uu uu Isagu yahay iyo sida Isaga loogu imaan karo.

Baybalku waxaa ku jira konton cutub oo ku saabsan taambuugga iyo wixii la socdey, sidaa daraadeed dhammaan halkan laguma sharixi karo. Waxaynu keliyoo tilmaani karnaa dhowr arrimood oo tan ku saabsan.

## HAL JID

Ilaahay ayaa taambuugga qaabeeyey si uu adduunka u baro in, in kastoo uu Isagu yahay Quduus, uu weli doonayo inuu dadkiisa dhex joogo. Sidaas oo ay tahay, caqabad weyn ayaa Ilaahay iyo dadka dhex taalla.

Caqabaddaasina waa DEMBI.

Teendhadan khaaska ahayd ee calaamadda u ahayd inuu Ilaahay dadka dhex joogo waxay lahayd deyr weyn barxad u ahaa. Deyrka *derbigiisa* waxaa laga sameeyey tiirar naxaas ah iyo alaab qurux badan oo dhar xariir ah ka samaysan. Dhererkiisu wuxuu ahaa laba mitir iyo badh, dherer ku filan inuu qof isaga oo dibadda jooga gudaha qooraansan karo. Ilaahay wuxuu doonayey inay dadku fahmaan in iyaga laga xidhay Isaga hortiisa. Kaasi war xun buu ahaa.

Warka wanaagsani waa inuu Ilaahay dembiileyaasha siiyey jid ay Isaga ugu yimaaddaan. Derbigu wuxuu lahaa albaab laga sameeyey dun midabyo badan oo qurux badan. Jidka keliya ee ay dembiileyaashu Ilaahay ugu soo dhowaan kareen waxay ahayd inay *halkaa albaab*[194] ku soo maraan wan ama dhiig allabari kale oo habboon.

RABBIGU wuxuu Israa'iiliyiintii u sheegay inay meel allabari oo ka samaysayn naxaas oo xaabo qudhac laga soo gooyey lagu dul

uruuriyey dhisaan. Waxay ahayd in meesha allabarigu u dhexayso albaabka iyo teendhada khaaska ah ee Ilaahay. Dadka keenaya allabariga dembigu neefkaa aan waxba galabsan ayay gacantooda dusha ka saari jireen oo qiran jireen xaalladdooda dembiilenimo ee xun. Dabadeedna neefka ayay qali jreen oo jidhkiisa ku gubi jireen meesha allabariga. Mar kale wuxuu Ilaahay dadka ku tusayey in qaynuunka dembiga iyo dhimashada lagaga guuleysan karo oo keliya qaynuunka allabariga.[195]

Sharciga Ilaahay wuu caddaa: Dhiig daadin la'aantii, dembiga lama dabooli karin. Dembiga haddii aan la daboolin, dib u heshiisiin (xidhiidh sax ah) Ilaahay lalama yeelan karin.

Ilaahay wuxuu kaloo Muuse u sheegay inuu sameeyo sanduuq khaas ah oo ka samaysan alwaax dahab lagu dahaadhay. Alaabtan khaaska ah waxaa loo bixiyey *Sanduuqii Axdiga*. Waxay calaamad u ahayd carshiga Ilaahay ee samada. Looxyadii dhagaxa ahaa ee uu Ilaahay ku qoray Tobankii Qaynuun ayaa sanduuqaa dahabka ah la dhex dhigay. Dahabka saafiga ah ee adag ee sanduuqa ku dahaadhan, oo loo bixiyey *Kursiga Naxariista,* waxaa u sujuudayey laba sawir oo malaa'igo keruubiim ah, oo iyaguna dahab ka samaysan. Keruubiimku waa malaa'igo cajiib ah oo ku hareeraysan carshiga Ilaahay ee samada. Ilaahay wuxuu Muuse u sheegay inuu Sanduuqa Axdiga la dhigo qolka ugu hooseeya ee taambuugga.

## MEESHA UGU WADA QUDUUSAN

Taambuugga laba qol baa loo qaybiyey. Qolka hore waxaa loo bixiyey *Meesha Quduuska* ah qolka gudaha ku jira ee ugu shisheeyana waxaa loogu yeedhi jirey *Meesha ugu Wada Quduusan,* ama *Quduusnimada ugu Weyn.* Meeshan caabudaada ee gudaha ku jirtaa waxay ahayd meesha keliya ee meesha ta runta ah … *"**jannada qudheeda**."* (Cibraaniyada 9:24)

*Meesha ugu Wada Quduusan* waxay calaamad u ahayd Jannada, meesha uu Ilaahay deggan yahay. Qolkan khaaska ah oo ah mid sidii afar gees ah loo dhisay; jooggiisa, ballaadhkiisa, iyo dhererkiisu way is le'ekaayeen. Ku dhowaad dhammaadka barashadeenan Qorniinka waxaynu ku arki doonaa magaalo samaawi ah taas oo maalin maalmaha ka mid ah hoy u noqon doonta dhammaan kuwa Ilaahay rumaysan, taas oo iyaduna sidii afar gees u samaysan.

Dadku waxay ka hadlaan wax ku saabsan dhismayaasha kaniisadda, masaajidka, sunaggoga, ama macbudka, in kasta oo ay inta badan meelahan ka buuxaan dad diidan jidka badbaadada ee Ilaahay. Quduusnimada runta ah lagama helo gelida dhisme khaas ah, laakiinse helidda jidka Ilaahay u bixiyey in lagu helo saamaxaad iyo xaqnimo.

## ILAAXIDHKA

Qaabka teendhada korkeedu wuu sahlanaa; teendho weyn oo harag xayawaan ka samaysan bay ahayd. Dusha kamay qurux badnayn, laakiinse aad bay uga qurux badnayd gudaha.[196]

Labada qol ee teendhada waxaa kala qaybinayey daah xajmi weyn oo loogu yeedh jirey *ilaaxidhka*.

> *"Oo waa inaad **ilxidh** ka samaysaa **buluug**, iyo **guduud**, iyo **casaan**, iyo **maro** wanaagsan; hana lagu daabaco keruubiim."* (Baxniintii 26:31)

Ilaaxidhku wuxuu dadka ka xidhi jirey *Meesha ugu Wada Quduusan*, oo guri u ahayd ammaanta iyo iftiinka Ilaahay Hortiisa. Ilaaxidhkani wuxuu dadka dhammaantii u tilmaamayey: **ISKA JIR,** KII SOO GALAA WUU **DHIMANAYAA!**

Daahan khaaska ahi wuxuu calaamad u ahaa heerka xaqnimada. RABBIGU wuxuu bini'aadanka u sheegayey in heerkaa sare uu Isagu dejiyey kaddib markii uu Muuse siiyey Tobankii Qaynuun. Laakiinse tobankaa sharci waxay keliyoo fahan kooban ka bixiyeen waxa uu runtii Ilaahay inaga doonayo. Qorshaha kama dambaysta ah ee Ilaahay wuxuu ahaa inu adduunka u soo diro Wiilkiisa, kaas oo tusi dooney waxa uu Ilaahay rabey si loogu qalmo in abadiyan Isaga lala noolaado: *Quduusnimo buuxda*.

Masiixa ayaa ahaa heerka ugu sarreeya ee Ilaahay rabo. Ilaahay ayaa ilxidhkaa sameeyey si aynu ***Isaga*** uga fekerno.

Daaha quruxda badan waxaa laga sameeyey dhar xariir ah oo saafi ah, oo sawir inaga siinaya daahirnimada Masiixa. Isagu wuxuu ahaan dooney mid quduus ah oo aan dembi lahayn.

Dharkaa daahirka ahi wuxuu ka koobnaa saddex midab oo dhalaalaya: buluug, guduud, iyo casaan.

***Buluug*** = midabka samada. Masiixu wuxuu noqonayaa Sayidka samada ka imaanaya.

***Casaan*** = midabka dhulka, dadka, iyo dhiigga.[197] Masiixu wuxuu qaadan doonaa jidh leh cad iyo dhiig si uu u silco oo ugu dhinto beddelkii dembiileyaasha.

***Guduud*** = buluug iyo casaan isku dhex jira. Masiixu wuxuu noqon dooney Ilaah-Nin. Guduudku waa midabka boqornimada. Masiixu wuxuu boqortooyadiisa ruuxiyanka ah ka dhex aasaasi dooney qalbiyada dhammaan kuwa Isaga aamina. Mar dambena, wuxuu adduunka ka aasaasi doonaa boqortooyo adduun oo dhab ah.

Isla sida uu guduudku ugu dhexeeyo buluugga iyo casaanka, Masiixu wuxuu u imaan dooney inuu dhexdhexaadiye u noqdo Ilaahay iyo dadka.

> *"Waayo, waxaa jira Ilaah keliya* ***iyo dhexdhexaadiye keliya oo u dhexeeya Ilaah iyo dadka****, waana ninka Ciise Masiix ah, oo naftiisii dadka oo dhan furashadooda u bixiyey, oo wakhtigiisii qummanaa loo markhaati furay."*
>
> (1 Timoteyos 2:5-6)

**DARUURTA AMMAANTA AH**

Markii taambuuggii la dhisay oo wax kasta loo sameeyey sidii uu Ilaahay qorsheeyey, Isagu wuxuu samada ka soo diray carshi ammaan ah oo Joogitaankiisa ah oo ah daruur cajiib ah.

> *"Markaasaa daruurtii teendhadii shirka qarisay,* ***ammaantii RABBIGUNA taambuuggay ka buuxsantay****. Oo Muusena inuu teendhadii shirka galo wuu kari waayay, maxaa yeelay, daruurtii baa dul joogtay, oo ammaantii Rabbiguna taambuuggay ka buuxday."*
>
> (Baxniintii 40:34-35)

RABBIGU wuxuu Meeshii ugu Wada Quduusnayd dhigay iftiin cajiib ah, labada keruubiim ee Kursiga Naxariista iyo Sanduuqii Axdiga dhexdooda.

Ilaahay wuxuu u yimid si la arki karo si uu dadkiisa ula jiro.



*"RABBIGU Isagaa taliya,*
*dadyowgu ha gariireen,*
***Isagu wuxuu ku fadhiyaa***
*keruubiimta, dhulku ha*
*dhaqdhaqaaqo!"*
(Sabuurradii 99:1)

Marka uu Abuuruhu ammaantiisa dhex dhigayey Meesha ugu Wada Quduusan oo uu daruurtiisana ku hadhaynayey taambuuggii, wuxuu Isagu quruumihii adduunka, iyo facyaasha aan weli dhalan barayey, dersi muhiim ah: Ilaaha keliya ee runta ahi wuxuu dembiileyaasha ku martiqaadayaa inay Isaga xidhiidh la lahaadaan, laakiinse markay qodobo gaar ah buuxiyaan oo keliya.

## TUSAALAYAAL MUUQDA

Taambuuggu wuxuu tusayey tusaalayaal arag ah tusayey dhammaan kuwa doonayey inay Ilaahay iyo qorshaha uu dadka u hayo ogaadaan.

Bandhiga sawir-tusaalayaasha.

Si qaabilsan amarkii habaysnaa ee uu Ilaahay bixiyey, ee Israa'iil lagaga soo furay addoonsigii—laba iyo tobankii qabiil ee reer binu Israa'iil—waxay si habaysan oo sidii iskutallaab oo kale ah u degeen Buur Siinaay hoosteeda. Taambuuggu dhexda ayuu ka dhisnaa, oo saddex qabiil ayaa dhinaca koonfureed ka degey, saddex qabiilna waqooyiga, saddex qabiilna galbeedka, saddexdii qabiil ee kalena dhinaca bari.[198] Daruurta ammaanta ee Ilaahay ah oo ifaysa ayaa iyaga dul heehaabaysey, oo midna ma dafiri karin inuu Ilaaha keliya ee runta ahi iyaga dhex joogey.

Casharro kale oo arag ah waxaa laga baran karey xaqiiqada ah inuu taambuug-teendhada ku wareegsanaa dhar cad oo xariir ah oo sidii derbi oo kale oo hal albaab oo keliya leh. Albaabka gudihiisa

waxaa ku yaalley meel allabari. Dembiileyaasha dibedda ayaa lagaga xidhay ammaanta Ilaahay ilaa ay Isaga ugu yimaaddaan si ku dhisan dhiig la daadiyey oo tusaale ka bixinaya allabari aan iin lahayn.

> *"Jiidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa dhiigga; oo anna waxaan meesha allabariga dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu kafaaro gudo, waayo,* ***waa dhiigga waxa loogu kafaaro gudaa nolosha daraadeed****."*
>
> (Laawiyiintii 17:11)

Haddii aan la bixin dhimasho dembiga lama saamaxayo. Oo maadaama aanay suurtoggal ahayn inay dadku mar kasta oo ay dembaabaan teendhada allabari keenaan, Ilaahay wuxuu amray in wan la qalo oo lagu dul gubo meesha allabariga korkeeda maalin kasta oo sannadka ah, subaxdii iyo fiidkii. Dhammaan kuwa RABBIGA aaminey iyo qorshihiisu waxay ka faa'iidaysan kareen allabariyadaa maalinlaha ah, oo sidaasay xidhiidhkii ay Abuurahooda la lahaayeen dib ugu soo celin kareen.

> *"Haddaba waxanu waa wixii aad meesha allabariga ku dul bixin lahayd;* ***maalin walba had iyo goor*** *waa inaad laba wan oo sannad jira ku bixisaa.* ***Wan*** *waa inaad subaxda bixisaa,* ***wanka*** *kalena waa inaad makhribka bixisaa. Oo wuxuu ka ab ka ab ahaan doonaa* ***qurbaan joogto ah*** *oo RABBIGA hortiisa lagu gubo xagga iridda taambuugga shirka,* ***oo ah meesha aan kugula kulmi doono inaan kula hadlo****."* (Baxniintii 29:38-39, 42)

## MAALINTII KAFAARAGUDKA

Si uu runtiisa tusaale dheeraad ah uga bixiyo, Ilaahay wuxuu dadkiisa u sheegay inay jirtay hal si oo keliya oo ay dembiileyaashu ku geli kareen Meesha ugu Wada Quduusan (qolka gaarka ah ee jannada lafteeda sawirka ka bixinayey). Sannadkiiba hal maalin, nin si gaar ah loo doortay, oo lagu magacaabi jirey wadaadka sare, ayaa loo oggolaanayey inuu galo qolkaa caabudaada ee gudaha ah. Maalintan Kafaaragudka,[199] wadaadkaas sare wuu dhaafayey ilxidhka. Wuxuu qaadanayey dhiig ri' allabari ahaan loo bixiyey

oo wuxuu toddoba jeer ku rushaynayey Kursiga Naxariista (Sanduuqa Axdiga sidihiisa) hortiisa iyo korkiisaba. Haddii uu wadaadka sare si kale Ilaahay hortiisa ku tago, isagu isla markiiba meeshaasuu ku dhimanayey. Dhiiggaa lagu rusheeyey daraaddiis, Ilaahay wuxuu ballanqaday inuu sannad kale dunuubta reer binu Israa'iil cafin dooney, waa haddii ay kuwaasi Isaga iyo qorshihiisa aaminaan oo keliya.

Faahfaahinnada taambuugga, alaabtiisiisii iyo hawlihiisii, waxaa loo habeeyey in adduunka la tuso sawiro cadcad oo ah sida dembiileyaasha dembiyadooda loo dabooli karey oo ay xidhiidhkii jabay ee ay Abuurahooda quduuska ah la lahaayeen dib ugu soo celin kareen. Dhammaan waxay tilmaamayeen Masiixa imaan dooney iyo qorshihii uu imaanayey.

Markaa, qarniyadii la soo dhaafay oo dhan, Isaga oo isticmaalaya qarankan uu doortay, ayuu RABBIGU boqollaal sawir bixiyey oo adduunkan dembiga ku lumay u sheegay boqollaal ballamood oo cajiib ah.

## MACBUDKII IYO ALLABARIYADIISII

Shan boqol oo sannadood Muuse kaddib ayay carruurtii reer binu Israa'iil dhiseen teendho khaas ah oo lagu xereeyo Joogitaanka RABBIGA, oo Ilaahay ayaa Boqor Suleymaan u sheegay inuu *beddelo taambuuggii hadba meel loo qaadayey* oo ku beddelo *macbud dhisme ah oo joogto ah.* Sidii uu dhismahan Yeruusaalem ku yaalley u qaabaysnaa wuxuu la mid ahaa sidii taambuuggii oo kale, in kasta oo uu ka weynaa oo xataa ka sii qurux badnaa. Macbudkii Suleymaan wuxuu ahaa mid ka mid ah dhismayaasha adduunkii hore ugu cajiibsan.

Isla sidii ay ammaantii Ilaahay samada uga soo degtey si ay u buuxiso Meeshii ugu Wada Quduusanayd ee taambuugga maalintii furitaaniisa, sidaas oo kale ayaa iftiin aan qofna samayn oo ammaan ah oo ah Joogitaanka Ilaahay ugu soo degey oo u buuxiyey macbudkii.

> *"Haddaba Sulaymaan markuu tukashadiisii dhammeeyey, dab baa samada ka yimid oo wada gubay qurbaankii la gubayay iyo allabaryadiiba,* ***oo gurigana waxaa ka***

> ***buuxsantay ammaantii RABBIGA****. Oo wadaaddadiina ma ay geli karin gurigii RABBIGA, maxaa yeelay, gurigii RABBIGA waxaa ka buuxsantay ammaantii RABBIGA.”*
> (Taariikhdii Labaad 7:1-2)

Macbudka waxaa laga dul dhisay isla silsilada buuraha halkaas oo uu kumanyaal sanno ka hor Ibraahim wankii geesaha lahaa allabari ahaanta ugu qalay beddelkiisii wiilkiisa.[200] Si macbudkan khaaska ah Ilaahay loogu hibeeyo, Boqor Suleymaan wuxuu amaray in 120,000 oo laxood iyo 22,000 dibi allabari ahaan loo qalo.[201] Allabariyadan sidaa u badani waxay sawir ka bixinayeen qiimaha dhiigga qaaliga ah ee kun sanno markaa kaddib lagu daadin dooney buur halkaa ku dhow korkeeda.

Markaa, laga soo bilaabo wakhtigii Aadan, Haabiil, Ibraahim, Muuse, Daa’uud, Suleymaan, iyo dabadood, waxaa meesha allabariga lagu dul bixin jirey allabari dhiig ah oo sawir uun ka bixinayey in dembiga daboolay, si daal miidhan ah sannadba sannadka ka dambeeyey…

Dabadeedna Masiixa ayaa yimid.



# 22

# WANKA

*"Ilaah waa jacayl"* (1 Yooxanaa 4:8)
*"Ilaah waa weyn yahay."* (Ayuub 36:26)

Ilaahay oo ***jacayl*** ahi wuxuu doonayaa inuu xidhiidh sokeeye ah dadkiisa la yeesho. Mowduuca ah dabeecadda Ilaahay ee xidhiidh-bulsheedka ah waxaa lagu muujiyey cutubka koowaad ee Kitaabkiisa.

Ilaahay wuxuu Aadan iyo Xaawa ka abuuray *"Arraggiisa"* si ay isaga xidhiidh ula yeelan karaan (Bilowgii 1:27). Isla mowduuca ah "*Ilaaha inala jira"* mowduuca ah[202] wuxuu soconayaa ilaa iyo cutubka ugu dambeeya ee Baybalka, markaas oo ay dadka la badbaadiyey *"wejigiisa arki doonaan"* oo ay Isaga la joogi doonaan weligoodba (Muujintii 22:4). Mid kasta oo tan arki waayaa wuxuu garan waayey mowduuca xuddunta u ah Kitaabka Ilaahay.

Ilaahay oo ***weyn*** wuxuu samayn ku yeelan karaa wax kasta oo uu doonayo inuu Isagu sameeyo.

> *"Bal eeg, anigu waxaan ahay RABBIGA ah Ilaaha binu-aadmiga oo dhan, haddaba ma wax igu adag baa jira?"*
> (Yeremyaah 32:27)

Mid kasta oo si daacad ah u rumaysan inuu hal Ilaah oo keliyahi jiro kuma doodi karo inuusan Ilaahay nin noqon karin haddii uu Isagu doono. Haddii ay jirto wax uusan Ilaaha weyni samayn karin (oo aan ka ahayn inuu Isagu is buriyo) markaa Isagu

Ilaahay wuu ka yaraanayaa oo ma noqanayo.

Su'aashu maaha: Ilaahay nin ma noqon *karaa*?

Su'aashu waa: Ilaahay miyuu *doortay* inuu nin noqdo?

## TAAMBUUGGA DHABTA AH EE ILAAHAY

Kun iyo shan boqol oo sanno kaddib markii uu Ilaahay ku amray Israa'iiliyiinta inay dhisaan taambuug-teendho kaas ah si uu Isagu *"u dhex joogo iyaga"* (Baxniintii 25:8), Qorniinka ayaa odhanaya:

> *"Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah... Ereyguna jidh buu noqday,* ***oo waa ina dhex joogay****, oo waxaannu aragnay* ***ammaantiisii****, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa."*
> (Yooxanaa 1:1, 14)

Odhaahda ah *"ina dhex joogo"* waxay ka soo jeeddaa Erayga af Giriigga ah ee macnihiisu yahay *in teendho ama taambuug la dhiso*. Waxaa si toos ah loogu turjumi karaa: *Isagu teendhadiisii ayuu innaga dhex dhistay*. Qorniinku wuxuu qofka jidhkiisa ku qeexayaa *teendho* ama *macbud* halkaas oo ay naftiisa iyo ruuxiisu deggan yihiin.[203] Sidii aynu ku soo barannay cutubka 16, Wiilka Ilaahay ee abadiyanka ahi wuxuu dhashay Isaga oo wiil cunug ah. Jidhkiisii bini'aadanka ahaa ayaa ahaa teendhadii uu Ilaahay doortay inuu dhex dego.

Waagii Muuse, dhismihii taambuugga ee uu Ilaahay dhex dhigay iftiinkiisii ammaanaa ee aan la abuurin ee Joogitaankiisa ka dhignaa waxaa ku dednaa *haragyo xoolo*. Markaa, xertu waxay odhan kareen, *"Waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha!"*

Qorniinku wuxuu sheegayaa inuu Ciise ahaa *"****taambuugga runta ah*** *ee Rabbigu dhisay oo aan dad dhisin."* (Cibraaniyada 8:2)

Wakhtiyadii Axdigii Hore, taambuugga, oo markii dambe macbud loo beddeley, ayaa ahaa meesha ay dembiileyaashu keeni kareen xoolaha ay allabari ahaanta u qalayeen si dunuubtooda loo daboolo. Markii uu Ciise wiilka ahaa, oo dabadeedna ninnimada u korayey, Isagu marar badan ayuu booqday macbudkii Yeruusaalem, laakiinse marna ma akhrino Isaga oo dembi uu leeyahay allabari u

qalaya. Sabab? Ciise *"mar keliya ayaa la muujiyey inuu dembiga ku baabbi'iyo **allabarigiisa**."* (Cibraaniyada 9:26) Isagu allabari ayuu noqon dooney oo iskutallaabtii Roomaankuna waxay noqon doontey meeshii allabariga.

Ciise ayaa ahaa runta ka dambaysa masaaladaas oo dhan.

> *"**Ilaahay jidh** baa lagu muujiyey."* (1 Timoteyos 3:16)

Maalin maalmaha ka mid ah, Ciise, Isaga oo ag taagan macbudkii weynaa ee Yeruusaalem ayuu koox rag ah ku yidhi:

> *"**Macbudkan** dumiya, oo saddex maalmood dabadeed ayaan kicin doonaa.*
>
> *Yuhuuddu haddaba waxay yidhaahdeen, Lix iyo afartan sannadood ayaa macbudkan la dhisayay, adiguna ma waxaad ku kicinaysaa saddex maalmood?*
>
> ***Isaguse wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa ah**. Sidaa aawadeed markuu ka soo sara kacay kuwii dhintay, xertiisii way soo xusuusteen inuu taas ka hadlay, wayna rumaysteen Qorniinka iyo hadalkii Ciise yidhi."*
>
> (Yooxanaa 2:19-22)

Yuhuuddu may fahmin in *"macbudka"* uu Ciise ka hadlayey uu jidhkiisa ahaa. Waxay moodayeen inuu ka hadlayey macbudkii weynaa ee Yeruusaalem. Laakiinse iftiinka iyo ammaanta Joogitaanka Ilaahay dib uguma sii jirin Meesha ugu Wada Quduusan ee macbudkaa ay dadku gacmahooda ku dhiseen.

Waxayse hadda ku jirtey *"macbudka"* jidhka Ciise ahaa.

Ku dhowaad dhammaadkii adeeggiisii adduunkan, Ciise wuxuu oggolaaday inay saddex xertiisii ahi arkaan iftiinka iyo ammaanta Ilaahay ee cajiibka ah.

> *"Ciise wuxuu waday Butros iyo Yacquub iyo walaalkiis Yooxanaa, oo wuxuu keligood geeyey buur dheer. Hortoodana ayuu ku beddelmay, **wejigiisuna sida qorraxda oo kale ayuu u dhalaalay, dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday.***

> *Oo bal eeg… **daruur dhalaalaysa ayaa hadhaysay**, oo cod baa daruurtii ka soo baxay oo yidhi, '**Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay. Maqla Isaga**.'"* (Matayos 17:1-5)

Iftiinka Ilaahay ee dhalaalaya, ee ololaya, ee widhwidhaya ee ay xataa malaa'igaha jannadu indhahooda ka daboolaan ayaa Ciise ku dhex jirey.

Joogitaankii ammaanta ahayd ee RABBIGA ee Meesha ugu Wada Quduusan ee taambuugga iyo macbudkii joogi jirtey, ayaa hadda Sayid Ciise dhex joogta.



Daruur ifaysa ayaa beri hore taambuugga ka kor ifi jirtey taas oo hadda ka ifeysey meeshii uu Ciise taagnaa.

Ciise wuxuu ahaa Joogitaanka Ilaahay ee adduunkan ee la arki karo.

Ammaantan widhwidhaysa ee Wiilka Ilaahay waxaa la socdey Aabbaha oo samada ka soo hadlay:

> *"Kanu waa **Wiilkayga aan jeclahay** oo aan ku faraxsanahay. **Maqla Isaga**."*

Tani dhab ka ahayd Ilaahay.

Kumanyaal sanno ka hor intii uusan Wiilka Ilaahay bini'aadan noqon, nebi Daa'uud ayaa qoray, "**Wiilka dhunkada**, waaba intaasoo uu idiin cadhoodaa oo aad jidka ku baabba'daane. Waayo, cadhadiisu haddiiba way kululaan doontaa. Waxaa barakaysan kuwa isaga isku halleeya oo dhan." (Sabuurradii 2:12)

*"Wiilka dhunko,"* macnaheedu waa ***Wiilka maamuus.***

Mararka qaarkood waxaan arkaa dad madaxa iyo gacmaha ka dhunkanaya wadaado diimeed, niman sidooda oo kale dembiileyaal u ah. Waxaan arkaa dadkaas oo soo siyaaranaya niman uu jidhkoodii ciidda ku noqday ama dhintay.

*"...in **dadka oo dhammu Wiilka maamuuso siday Aabbaha u maamuusaan**. Kii aan Wiilka maamuusi, ma maamuuso Aabbaha soo diray... Waayo, Aabbuhu Wiilkuu jecel yahay."* (Yooxanaa 5:23, 20)

## SII OGEYSIIYIHII

Ishacyaah wuxuu ka mid ahaa labadii nebi ee khaas ahaan wax ka qoray mid ka soo horrayn doona si uu *"u sii diyaariyo jidka RABBIGA."* (Ishacyaah 40:3) Kan ka soo horreeyey ee dadka ogeysiinayey wuxuu ahaa nebi Yooxanaa, wiilkii Sakariyas[204] In kasta oo ay nebiyadii hore sii sheegeen inuu, "Ilaahay adduunka *u soo diri doono* Masiixa," nebi Yooxanaa si gaar ah sharaf ugu helay inuu dadka ogeysiiyo in, "Masiixii la ballanqaaday, RABIGGII, *uu hadda joogey*!"

> *"Maalmahaas waxaa yimid Yooxanaa Baabtiisaha isagoo cidlada Yahuudiya wax ku wacdiyaya, oo leh, '**toobadkeena, waayo, boqortooyadii jannadu waa dhowdahay**!' Waayo, kan waa kii nebi Isayos ka hadlay kolkuu yidhi, 'Waa codka kan cidlada kaga qaylinaya: "**Jidka RABBIGA hagaajiya, Waddooyinkiisa toosiya**." '"* (Matayos 3:1-3)

## TOOBADKEEN

Si dadka loogu diyaariyo imaanshaha RABBIGA, akhbaarka uu Yooxanaa Baabtiisahu dadka u wadey wuxuu ahaa mid sahlan:

> ***"Toobadkeena!"***

Erayga *toobadkeen* wuxuu ka soo jeedaa erayga af Giriigga ah ee *metanoeo.* Laba qaybood ayuu ka kooban yahay: *meta* iyo *noeo.* Qaybta hore macnaheedu waa *dhaqdhaqaaq* ama *is beddel*. Qaybta labaadna waxay ku saabsan tahay fikirrada niyadda. Sidaas daraadeed macnaha caadiga ah ee *toobadkeen* waa *niyadda oo la beddelo*; inaad fekerkaaga khaldan ku beddeshid fikir sax ah.

Si erayga *toobadkeen* nolol maalmeedka loo dhex geliyo, ka soo qaad inaad dooneyso inaad bas ka raacdo magaalo ilaa magaalo kale, dheh Laasacaanood ilaa iyo Hargeysa. Oo aad fuusho bas aad u malaynayso inuu kii saxda ahaa yahay oo aad kursigaaga intaad ku fadhiisatid iska seexatid. Goor dambe, iyada oo uu baskii jidka dhexdiisa xawaare sare ku socdo, aad adigu ogaatid inuusan basku ku socon waqooyiga ilaa iyo Hargeysa, ee uu ku socdo bariga ilaa iyo Boosaaso! Maxaad samayn lahayd?

Waa inaad laba kala doorataa:

Inaad isla weynaan darteed khaladkaaga qiran weydo, oo aad baska iska *saarnaato* ilaa uu ku geynayo meesha khaladka ah ee aadan ku socon.

Ama, waad is hoosaysiin kartaa oo *toobadkeeni* kartaa, oo niyaddaada beddeli kartaa, adoo qiranaya inaad bas khaldan soo raacday. Daacadnimada toobadkeenkaagu wuxuu muuqanayaa marka aad baskaa kaga degtid kastamka basaska laga raaco ee ugu horreeya oo aad dib u soo raacdid baska saxda ah.

Toobadkeenka runta ahi wuxuu qofka u hoggaamiyaa inuu *beenta ka soo leexdo* oo *runta rumeeyo.*

Toobadkeenka waxaa lagu masaali karaa shilinka lacagta ah dhinacyadiisa midkood.

Hal dhinac wuxuu leeyahay: **TOOBADKEEN!**

Dhinaca kalena wuxuu leeyahay: **RUMEE!**

Labadan dhinac waxay tusayaan waxa uu Ilaahay inaga doonayo:

> *"... u **toobadkeenka** Ilaah iyo **aaminaada** Rabbigeena Ciise Masiix."* (Falimaha Rasuullada 20:21)

*Toobadkeenka* macnihiisu waa inaad niyaddaada ka beddeshid waxa aad badbaado isugu hallaynayso. *Rumaysiga* macnihiisu waa inaad aamintid waxa uu Ilaahay inoo siiyey badbaadada.

Rumaysiga runta ha lagama dhex saari karo toobadkeenka, oo labadu way isku xidhan yihiin.

Sidaas daraadeed, nebi Yooxanaa sidan oo kale ayuu dadka ku lahaa: "Ka toobadkeena fikirkiina khaldan! Qirta inaydaan idinku is badbaadin karin, oo soo dhoweeya Masiixii-Boqorka Samada ka yimid ee la ballanqaaday! Isagu wuxuu u yimid inuu idinka xorreeyo Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada—haddii aad joojisaan inaad naftiina aamintaan oo aad bilowdaan inaad Isaga aamintaan!"

Kuwii Ilaahay hortiisa ka qirtay xaaladdoodii dembiga lahayd Yooxanaa ayaa ku baabtiisay webigii. Waana sababtaa ta Yooxanaa loogu yeedhay *Yooxanaa Baabtiisihii.* Biyo oo lagugu baabtiisaa dembi ma maydhi karin mana maydhi karto hadda. Biyaha webiga oo la muquuriyaa waxay ahayd hab ay dadku si toos ah *oo dusha ah* ugu tusayeen inay *gudaha* ka aqbaleen akhbaarka Ilaahay ee ku saabsan Masiixa kaas oo u imaanayey inuu dembiileyaasha toobadkeenay, ee rumeeyey ka nadiifiyo xaaladdooda daahir la'aanta ah.

## KA LA DOORTAY

Bilowgii adeeggiisa adduunka, Ciise ayaa u yimid Yooxanaa si Isaga loogu baabtiiso Webigii Urdun. Masiixii aan dembiga lahayn umuu baahnayn inuu waxna ka toobadkeeno, laakiinse baabtiisankiisii wuxuu ku muujiyey inuu jaal la yahay bini'aadankii dembaabey ee uu u yimid inuu badbaadiyo.

Markii Ciise la baabtiisayey waxaa dhacday dhacdo aan weligeed la ilaaweyn. Waxay bidhaan yar oo kale inaga tusaysaa Ilaaha keliya ee runta ah, kelinimadiisa qotoda dheer iyo sharaftiisa.

> *"**Ciise** goortii la baabtiisay, ayuu markiiba biyaha kor uga baxay, kolkaasaa samooyinku furmeen, oo wuxuu arkay **Ruuxa Ilaah** oo sida qoolley oo kale u soo degaya oo dushiisa imanaya, oo **cod baa samooyinka ka lahaa**, 'Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, oo aan ku faraxsanahay.'"*
> (Matayos 3:16-17)

Sidii maalintii ugu horreysey ee abuuritaanka, dhacdadani waxay muujinaysaa Joogitaanka Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ah. Laakiinse, wakhtigan muhiimka ka ah ee taariikdha, Ilaahay wuxuu si cad oo dheeraad ah u tusayey kelinimadiisa jamaca ah. Inta aynu Qorniinka barashadiisa ku dhex jirno, meeshani waa meel khaas ah oo ay tahay inuu qof kasta oo barashada ku jiraa ku hakado, oo tusaalayaal kala soo baxo, oo ka fekero.

Sidan bay dhacdadaasi u dhacday. Iyada oo aan caad saarnayn cirka ayuu, ***Wiilkii Ilaahay*** (*Erayga* Ilaahay ee samada iyo adduunka lagu abuuray) biyihii webiga soo dhex galay. Isla daqiiqadaa ***Ruuxii Ilaahay*** (*Ruuxii* moolka biyaha ku dul dhaqdhaqaaqayey maalintii ugu horreysey ee abuuritaanka) ayaa samada ka soo degey, oo intuu ku dul wareegey dabadeedna Isaga oo jidh qoolleey leh ku dul fadhiistay Ciise. Ugu dambaystiina, codkii ***Ilaaha Aabbaha*** ah ayaa samada ka hadlay: *"Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, oo aan ku faraxsanahay."*

Soddonkii sanno ee markaa ka horreeyey, Ciise wuxuu magaaladii yarayd ee Naasared kula noolaa qoys aan hanti badan lahayn. In kasta oo aanay dadku sidaas u aqoon, Aabbaha Samadu isha ayuu sannadahaa oo dhan ku hayey Wiilkiisa uu jecel yahay. Haddana, waxaynu Ilaahay ka maqalnaynaa waxa uu Ilaahay ka qabey noloshii Ciise: *"**Anigu waan ku faraxsanay**."*

Ilaahay sidan oo kale kama sheegi karin bini'aadan kale oo abid dhashay. Ciise wuxuu dhinac kastaba kaga farxiyey Ilaahay. Isagoo ahaa Wiilkii Samada ka yimid, Isagu wuxuu ahaa quduus, daahir, u qalma inuu qabto hawshii uu u yimid inuu qabto. Isagu wuxuu ahaa Masiix, *Kii Subkanaa,* Kii uu Ilaahay Doortay. Ilaahay ayaa Isaga Subkay, mana aha saliid (sidii Wadaaddadii iyo boqorradii oo kale[205]), laakiinse Ruuxa Quduuska ah Laftiisa ayaa Isaga loogu subkay.

> *"**Ilaah ayaa Ciisaha reer Naasared ku subkay Ruuxa Quduuska ah** iyo xoogga…"* (Falimaha Rasuullada 10:38)

Ciise wuxuu ahaa Ka ay wax Isaga ku saabsan nebiyadii oo dhan sii qoreen.

## WANKA ILAAHAY

> *“Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, ‘**Bal eega Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya.**’”* (Yooxanaa 1:29)

Ogeysiiskan uu nebi Yooxanaa sheegay micne weyn ayaa ku duugan.

- *“Bal eega! **Wanka Ilaah**…”*
  Dadkii uu Yooxanaa la hadlayey waxay fahmayeen macnaha weyn ee uu erayga *wanku* lahaa. Laga soo bilaabo ilaa iyo markii uu dembigu adduunka soo galay, dadku wanan ayay allabari ahaan ugu bixin jireen dembiga. Shan iyo toban qarni ayaa meel allabari oo laxaamad ka samaysan wanan allabari ahaan loogu qali jirey subax iyo fiid kasta. Haddana, *Wankii Ilaahay Laftiisa* ayaa yimid! Laba kun oo sanno markaa ka hor, Ibraahim ayaa wiilkiisii ku yidhi, *“Ilaah qudhiisaa keeni doona **wankii** allabariga la gubo loo bixin lahaa.”* (Bilowgii 22:8) Run ahaantiina, Ilaahay ayaa beddelkii wiilkii Ibraahim *“wan geeso leh”* bixiyey (Bilowgii 22:13) *“Wankaa”* waxyigii Ibraahim wuxuu ahaa Masiixa Laftiisa. Ibraahim wuxuu hore u tilmaamayey Ciise Masiix. Waa sababtaa ta uu Ciise u yidhi: *“Aabbihiin Ibraahim waa ku reyreeyey inuu maalintayda arko, wuuna arkay oo ku farxay.”* (Yooxanaa 8:56)

- *“… ee **qaadaya** dembiga…”*
  Laga soo bilaabo waagii Aadan, dhiig xoolo aan waxba galabsan ayaa masaal ahaan u *daboolayey* dembiga kuwa Ilaahay iyo qorshihiisa aaminay, laakiinse wixii uu Ciise u yimid inuu sameeyo taas way ka duwanayd. Isagu si abadiyan ah ayuu *u qaadi dooney* ciqaabta dembiga.

- *“… **dunida**!”*
  Berigii hore, allabari ah dhiig la daadiyey ayaa dembiga *qofka, qoyska, iyo qaranka* loo bixin jirey. Laakiinse

dhiigga Ciise wuxuu si buuxa u bixin dooney deyntii dembiga ee *adduunka* ee wakhtigii la soo dhaafay, hadda, iyo mustaqbalka.

Wankan Ilaahay ee dembiga qaadaya macnaheedu ma waxa weeye in qof kasta oo abid dhashaa uu dhalanayo Isaga oo uu Ilaahay saamaxay? Maya. Laga soo bilaabo maalintii uu dembigu bini'aadanka saameeyey Ilaahay wuxuu mar kasta doonayey inuu qof kasta Isaga iyo qorshihiisa si shakhsiyan ah u aamino.[206]

> *"Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga. Laakiin* ***in alla intii aqbashay****, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa* ***rumaystay****."* (Yooxanaa 1:11-12)



**MUUQAALO IYO MASAALO**

Waayihii la soo dhaafay, wan kasta oo aan iin lahayn oo dembi dartii allabari ahaan loogu qalay wuxuu ahaa, *"**hooska** [hadhka] waxyaalaha wanaagsan oo iman dooney."* (Cibraaniyada 10:1)

Ma aha in hadhka lagu khaldo alaabta hadhkaasi ka yimid. Haddii aad dhulka eegtid iyada oo uu saaxiibkaa dhinacaaga ku soo socdo, waxaa laga yaabaa inaad aragtid hadhkiisii oo ka soo horreeya, laakiinse marka uu hortaada soo istaago, miyaanad markaa saaxiibkaa eegeyn oo la hadlayn intii aad hadhkiisa sii fiirin lahayd?

Allabariyadii Axdigii Hore waxay ahaayeen *hadhadh* uu Ilaahay sameeyey kuwaas oo qorayey oo ogeysiis ka sii bixinayey Masiixa imaanayey. Ilaahay wuxuu inaga doonayaa inaynu *Isaga* fiirino oo dhegeysano.

> *"Waayo,* ***ma suurtowdo*** *in dibiyo iyo orgiyo dhiiggoodu dembiyo qaado. Saas daraadeed kolkuu Masiixu dunida soo galay wuxuu lahaa, 'Allabaryo iyo qurbaan ma aad doonaynin,* ***Laakiin jidh baad ii diyaarisay****. Waxyaalo*

> *la bixiyo oo la gubo oo dhan iyo dembi allabaryadiis kuma aad faraxsanayn. Markaasuu yidhi* [Masiixa]*, 'Bal eeg,* ***waxaan u imid****—inaan sameeyo doonistaada. Si qaabilsan kitaabkii Aniga la iga qoray. Sida doonistaadu tahay, Ilaahayow.' …Wuxuu rujiyey kii kowaad* [allabariyadii xoolaha] *si uu ka labaad u taago* [allabariga uu Isagu ahaa]. *Waxaa quduus laynagaga dhigay bixinta jidhka Ciise Masiix oo* ***mar keliya la bixiyey****."*
>
> (Cibraaniyada 10:4-7, 9-10)

Allabariyadii xooluhu waxay keliyoo *calaamado* u ahaayeen waxa uu Ilaahay ugu dambaynta doonayo. Xoolaha lagama samayn aragga Ilaahay. Qiimaha wanku lama sina qiimaha qofka. Isla sida aadan baabuur boombale ah uga bixinayn qiimaha baabuurka dhabta ah, ayuusan dhiigga wanku u soo bedi karin deynta dembiga ee qofka. Waxaa loo baahan yahay allabari la siman ama ka qiimo sarreeya.

Ciise oo ah Wankii Ilaahay wuxuu u yimid inuu bixiyo allabari noocaas oo kale ah.

## QORSHE-LAAWE?

Dhowr sanno ka hor, waxaan isla xidhiidhayney nin cilmiga filasoofiga dhakhtar ku ah. Arrinta ah inuu Ciise u yimid inuu *"qaado dembiga adduunka,"* ayuu kaga soo jawaabey:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Maxaa ku dhacaya dadkii dhashay ka hor intaanu Ilaahay qorshahan 2000 ee sanno ee keliya jira samayn? Waxay u muuqataa inuu Ilaaha Masiixiyiintu yahay mid aan qorsho fiican lahayn oo dib ka fekera waayo kumanyaal ama xataa milyamaad sanno ayay ku qaadatay inuu helo jid uu ku saamaxo 'dunuubta' bini'aadanka.

Waxay u muuqataa inuu ninkan, oo hadda muddo mootan, ku guuldarraystay inuu garto macnaha ka dambeeya malyuumaadka neef ee allabariga laga dhigay iyo boqollaalka waxyi ee tilmaamayey maalin uu Masiixu qaadi doono ciqaabtii dembiyada bini'aadanka—berigii hore, hadda, iyo mustaqbalka. Ilaa iyo

bilowgiiba, qorshaha badbaadada ee Ilaahay waxaa ku jirey *"dembidhaafka uu dembiyadii* ***hore*** *loo sameeyey ku dhaafay, muujinta xaqnimadiisa ee haatan joogta."* (Rooma 3:25-26)

Ilaahay wuxuu dembiileyaashii Masiixa ka horreeyey ku saamaxay isla qaynuunka uu maanta ku dembiileyaasha ku saamaxo — rumaysi ay ku qabaan ballamada iyo qorshaha Ilaahay.

Dabcan, kala duwanaan baa jirta.


Kuwii Ilaahay rumeeyey ee noolaa Ciise Masiix hortiisa dembiyadoodii waa la *daboolay*. Waxay noqon doontey kaddib markii Ciise dhiiggiisii la daadiyey oo uu dhimashadii ka adkaaday marka deynta dembiilaha si abadiyan ah looga *baabi'inayo* buuggaagta diiwaangelinta ah.

Ka hor intii uusan Ciise, Wanka Ilaahay adduunka imaanin, qofka neefka ku allabaryayey wuxuu ahaa sidii qof baayacmushtar ah oo aan lacag badan haysan oo doonaya inuu bangiga lacag ka amaahdo.

Saaxiib lacag leh ayaa kaas damaano qaadaya, oo ballanqaadaya inuu lacagtaas la amaahiyey bixin doono haddii uu kaas baayacmushtarka ahi bixin kari waayo. Sannad kasta oo gudbaba, ninkii baayacmushtarka ahaa deyntii wuu bixin kari waayaa, oo deyn hor leh buu sii galaa. Sannad kasta saaxiibkiisa taajirka ah ayaa ka bixiya. Maxaa ninkaa baayacmushtarka ah ka celinaya inuu kaco? Deyntiisa waxaa daboola saaxiibkiisa aamminka ah iyo taajirka ah.

Allabariyadii xoolaha ahaa ee Axdigii Hore waxay ahaayeen "ku-meelgaadh". Ka Wax Kasta ogi, oo taariikhda aan iinta lahayn lihi wuxuu ilaaliyaa ballammadiisa, wuxuuna hore u ballanqaaday inuu aqbalayo dhiigga xoolo aan iin lahayn si dembiga loo *daboolo*. Laakiinse dhiigga xooluhu si kama dambays ah uma *baabi'inayo* dembiga badan ee qofka ku uruuray. Waxay keliya oo xoolahaasi ahaayeen *"****xusuus dembiyo*** *sannad kasta. Waayo, ma suurtowdo in dibiyo iyo orgiyo dhiiggoodu dembiyo qaado."* (Cibraaniyada 10:3-4)

Dembigu waa dhibaato weyn oo uu xallin karto oo keliya daadinta dhiigga Wiilka Ilaahay ee abadiyanka ahi. Ciise, Wanka Ilaahay, ayaa u yimid inuu bixiyo deynta dembiga ee bini'aadanka lagu leeyahay.




**Maxay *adiga* kula tahay?**

Ilaahay "ma bilaa qorshe baa mise gadaal buu ka fekeraa?" Mise nebi Yooxanaa iyo xertiisii sabab fiican bay u hayeen inay Ciisihii reer Naasared u aqoonsadaan inuu ahaa, *"**Masiixa**... Ka Sharcigii Muuse iyo sidoo kale nebiyadii ay uga qoreen,"* inuu yahay, *"Bal eega **Wanka Ilaah** ee dembiga dunida qaadaya."* (Yooxanaa 1)

Abuuraheen, oo ah Qorsheeyaha ugu Fiican, marna qorshe kale muu lahayn oo aan ka ahayn inuu deynta dembiga bixiyo. Isaga oo ka duulaya ogaanshihiisa abadiyanka ah, Wiilkiisa uu jecel yahay wuxuu weligiis, hadda iyo abadiyan yahay:

> *"...**Wanka** la gowracay waagii dunida la aasaasay."*
> (Muujintii 13:8)



# 23

# KAAMILAADDA QORNIINKA

> *"**Ballantu** waa daruur; **kaamiliddeedu** waa roob."*
> — Maahmaah Carab

Kumanyaal sannadood ayay nebiyadu sii sheegayeen ballanqaadkii Ilaahay ee ahaa inuu adduunka u soo diri doono Badbaadiye, *"laakiinse markii wakhtigii buuxsamay, Ilaah wuxuu soo diray Wiilkiisii, isagoo naag ka dhashay oo sharciga ku hoos dhashay…."* (Galatiya 4:4)

Nebiyadii Ilaahay waxay ina siiyeen *ballanqaadyo sida daruur ah.*

Ciisihii reer Naasared ayaa ahaa *roobka kaamilaadda* Ilaahay.

Qorshaha Ilaahay muu ahayn mid uu dib kaga fekerey. Waase, *"Injiilkaas **ayuu Ilaah markii hore nebiyadii ku ballanqaaday** xagga Qorniinka quduuska ah, oo ku saabsan Wiilkiisa, Ciise Masiix…"* (Rooma 1:2-3)

Qorniinku waa sida daruur; Masiixa ayaa roobka ah.

## DAMEER BUU YERUUSAALEM KU SOO GALAY

Sayid Ciise wuu ogaa hawsha uu u yimid. Shan boqol oo sanno markaa ka hor, nebi Sekaryaah ayaa qoray dhacdo ka soo hor mari doonta dhimashadii Masiixa ee allabariga ahayd.

> *"Magaalada Siyoonay, si weyn u reyree, magaalada Yeruusaalemay, qayli. **Bal eeg, boqorkaagu waa kuu***

> ***imanayaa. Isagu waa xaq oo guul buu leeyahay, waana qalbi qabow yahay, oo wuxuu fuushan yahay dameer ah qayl dameereed.*** *"* (Sekaryaah 9:9)

Ciise ayaa waxyigan kaamilay. Afarta kitaab ee uu Injiilku ka kooban yahay way qorayaan dhacdadan. Matayos, oo goobjoog iyo xerow Ciise ahaa ayaa qoray:

> *"Goortay Yeruusaalem ku soo dhowaadeen oo ay Beytfaage galeen ilaa Buur Saytuun, markaasaa Ciise laba xer ah diray, oo wuxuu ku yidhi, 'Tuulada idinka soo hor jeedda taga, oo kolkiiba waxaad ka helaysaan* ***dameer xidhan iyo qayl la jooga****. Soo fura oo ii keena, oo haddii nin wax idinku yidhaahdo, waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa u baahan, oo kolkiiba wuu soo diri doonaa. Waxanu waa dhaceen* ***in la arko*** *wixii nebiga lagaga dhex hadlay markuu yidhi, '****Bal eeg, boqorkaagu waa kuu imanayaa, Isagoo qalbi qabow, oo dameer fuushan Iyo qayl dameereed.****'"* (Matayos 21:1-5)

Markaa, Ciise Naftiisa ayuu Boqor ahaan qarankii u bixiyey, haddana iyadoo la dayrin doono—isla sidii ay nebiyadii hore uga sii waxyoodeen.[207]

Injiilku wuxuu si faahfaahsan u qorayaa wixii dhacay kaddib markii uu Ciise soo galay Yeruusaalem isaga oo dameer fuushan. Macbudka ayuu tegey oo ka caydhiyey dhammaan kuwii dadka lacagta ka samaynayey ee halkaa joogey. Wuxuu kuwii wax iibinayey oo yaaban ku yidhi, *"Waa qoran tahay* [Qorniinka]*, 'Gurigayga waxaa loogu yeedhi doonaa guriga tukashada, laakiin waxaad ka dhigaysaan god tuugo!' Waxaana macbudka ugu yimid kuwa indha la' iyo kuwa luga la'; wuuna bogsiiyey."* (Matayos 21:13-14)

Dhowrkii maalmood ee ku xigey, Ciise macbudka ayuu dhex fadhiistay oo dadkii baray hadallada runta ah ee Ilaahay. Hoggaamiyeyaashii diinta ayaa isku deyey inay Isaga siraan si uu u yidhaahdo wax ay Isaga ku eedeeyaan oo ku dilaan, laakiinse

kumay guuleysan. Ciise wuxuu su'aalahoodii kaga jawaabey xigmad rabbaani ah, taas qof kasta kaga yaabisay.[208]

Dabadeedna wakthigii baa la gaadhey.

## SAACADDII BAA TIMID

Ciise oo keliya ayaa ahaa shakhsiga keliya ee sax ah u ogaa:

*wakhtiga* uu Isagu dhiman dooney,
*meesha* uu ku dhiman dooney,
*sida* uu u dhiman dooney,
iyo *sababta* uu u dhiman dooney.

> *"Waxaa dhacay goortii Ciise hadalladan oo dhan dhammeeyey, inuu xertiisii ku yidhi, '**waxaad og tihiin laba maalmood dabadeed inay tahay Iiddii Kormaridda, oo Wiilka Aadanaha waxaa loo gacangelinayaa in iskutallaabta lagu qodbo.**'*
>
> *Markaasaa wadaaddadii sare iyo waayeelladii dadka waxay isku urursadeen barxadda wadaadkii sare oo Kayafas la odhan jiray. Oo waxay ka wada hadleen si ay Ciise khiyaano ugu qabtaan oo ay u dilaan. Laakiin waxay yidhaahdeen, '**Yaanay** noqon wakhtiga iidda si aan rabshad dadka uga dhex kicin.'"* (Matayos 26:1-5)

Hoggaamiyeyaashii diinta ee naftooda uun u adeegi jirey waxay sameeyaan bay la'aayeen. Dhowr jeer ayay, *"waxay dooneen inay qabtaan, laakiin ninna faro ma uu saarin, waayo, **saacaddiisii weli ma iman**."* (Yooxanaa 7:30)

Dabaddeedna wixii ay rabeen ayay heleen.

Yuudas, oo korka uun xerow ka ahaa ee aan qalbiga ka ahayn, ayaa u tegey wadaaddadii macbudka oo kala hadlay inuu Ciise iyaga u soo gacangeliyo. Wadaaddadii waxay oggolaadeen inay Yuudas siiyaan soddon xabaddood oo lacag ah. Ficilkan xun ee gacangelinta ah wuxuu kaamilay dhowr waxyi oo Axdigii Hore ah.[209]

Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi, *"**Saacaddii way timid**."* (Yooxanaa 12:23)

Waxaa la gaadhey wakhtigii uu Wanka Ilaahay dhiman lahaa.

## USBUUCII IIDDII KORMARIDDA

Jidadkii cidhiidhiga ahaa ee Yeruusaalem waxaa ka buuxay dadka halkaa deggan iyo dad ajnabi ah oo u yimid Iidda Allabariga ee sannadlaha ah. Waxaa jidka laga maqlayey cida adhi iyo dibiyo loo wado ama loo iibsanayo in la qalo. Kuwa iibinaya iyo kuwa iibsanaya ayaa si cod dheer ah ugu baayactamayey qiimaha wanka ku habboonaa inay iibsadaan.

Wuxuu ahaa usbuucii Iiddii Kormaridda

Iidda Kormariddu waxy ahayd dabaaldeg usbuuc socon jirey oo Ilaahay dejiyey shan iyo toban qarni ka hor. Waxay ahayd wakhti ay dadkiisu *dib u jalleecaan* oo xasuustaan sidii uu RABBIGU iyaga oo ah "qarankiisii uu adduunka kula xidhiidhayey" uga soo xorreeyey gumeysigii iyo dhimashadii habeenkii khatarta ahaa markaas oo ay awooweyaashood dhiig mariyeen albaabka hore ee guryahooda. Marka ujeeddada Ilaahay laga eegona, waxay ahayd wakhti *hore loo eego filitaanka* maalinta uu Masiixu kaamili doono macnaha qotoda dheer ee Iidda Kormaridda.


Laakiinse, dad yar, haddiiba ay jireen, ayaa fahmayey inuu Ciisaha reer Naasared dhiiggiisa u daadin dooney sidii Wankii Iidda Kormaridda ee kama dambaysta ahaa oo uu kaamili dooney tusaaleyaashii ay wananka allabari ahaanta loo qali jirey sannad kasta bixin jireen laga soo bilaabo wakhtigii Muuse. Wuxuu kaga duwanaa hawshii Muuse u yimid oo ahayd inuu dadka ka soo saaro *gumaysigii jidh ahaaneed* ee bini'aadanka, hadda Masiixu wuxuu u yimid inuu dadka ka xorreeyo gumaysiga *ruuxiyanka ah* ee Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada.

Hoggaamiyeyaashii diintu waxay maleegeen inay Ciise dilaan, laakiinse *"**Aanay** noqon wakhtiga iidda si aan rabshad dadka uga dhex kicin."* (Matayos 26:5) Sidaas oo ay tahay waxay ahayd wakhtiga isla iiddan ka uu Ciise qorsheeyey inuu Isagu dhinto! Wanka Ilaahay waxaa la dili dooney inta dabaaldegga Iidda Kormariddu socdo.[210] Wax kastaa waxay u dhici dooneen sidii uu Ilaahay u qorsheeyey.

Ta yaabka lihi waxay ahayd, in isla kuwii qorshaha Ilaahay diidey ay qayb weyn ka qaadanayeen inay kaas kaamilaan. Way ka hoos baxday Shaydaanka, in marka uu wadaaddadii diinta kicinayo si ay Ciise u dilaan, uu isaga laftiisu qorshaynayo jabkiisa!

Qorniinku wuxuu xaaladahan sidii loola jeeday si ka duwan u dhacday ugu yeedhay: *"... **xigmadda Ilaah oo la qariyey, oo Ilaah dunida horteed ka dhigay** ... tan madaxda wakhtigan midkoodna aanu garanaynin, waayo, hadday garan lahaayeen, iskutallaabta kuma ay qodbeen Rabbiga ammaanta."* (1 Korintos 2:7-8)

## KIBISTII IYO KOOBKII



Fiidkii la qoondeeyey, Ciise iyo xertiisii ayaa ku kulmay guri qol gaar ah oo dabaqa sare ku yaalley si ay Iidda Kormaridda ugu xusaan. Kaddib markii ay wada cuneen hilib wan oo lagu daray xawaashyo qadhaad, ayaa Sayidku kibis qaaday, oo ka mahadnaqay, oo intuu kala jaray xertiisii siisiiyey, oo u sheegay inay taas cunaan, Isagoo leh, *"Sidan xusuustayda u sameeya."* (Luukos 22:19)

***Kibistaa la kala jaray*** waxay tusaale ka bixinaysaa jidhkiisa oo loo dhaawici dooney oo loo ciqaabi dooney iyaga daraaddood.

Dabadeedna, wuxuu xertiisii saf ka mariyey koob uu ku jiro canab la miiray. *"Koobkan,"* ayuu xertiisii ku yidhi, waa *"dhiiggayga axdiga cusub kan kuwo badan loo daadshay dembidhaafkooda aawadiis."* (Matayos 26:28)

***Koobku*** wuxuu metelayey dhiigga Ciise ee loo daadin dooney inuu daahfuro axdiga cusub ee la ballanqaaday.

Labadan calaamadood waxay tilmaamayaan akhbaarka udub-dhexaadka u ahaa nebiyadii Ilaahay: inuu Abuuraheenu qaadan doono jidh bini'aadan si uu u silco oo dhiiggiisa ugu daadiyo farcanka Aadan ee dembiga miidhan ah.

Kaddib markii uu xertiisii niyadda ugu dhisay ballanqaadyo xaqiiqooyin aad cajiib u ah,[211] Ciise wuxuu iyagii geeyey beer u dhow oo magaceedu ahaa Getsamene. Dhulka ayuu ku sujuudey, iyada oo ay naftiisu aad u quluubsan tahay oo xaalad adag ugu jirto ayuu ducaystay, *"Aabbow, hadday suurtowdo, koobkanu ha i dhaafo, hase ahaatee, yaanay noqon sidaan doonayo laakiin sidaad doonaysid ha noqoto."* (Matayos 26:39)

Muxuu ahaa *"koobkan"* Ciise culayska aadka u weyn ugu hayey? Wuxuu ahaa koobka uu dembiga ku silcayey, si aan

hore loo arag ee ayaa Isaga looga dheeraynayey Aabbihiis, iyo dhibaatada ugu xun ee naarta ah ee uu adiga iyo aniga daraadeed u mari dooney.

Kaddib markii uu ducadaas saddex jeer ku celceliyey, Wiilku diyaar buu u haa inuu adeeco doonista Aabbihiis. Isla sidii uu nebi Daa'uud hore uga sii waxyoodey, Masiixu wuxuu dib u soo celin doonaa wax uusan isagu hore u dayacin. *"Markaasaan magdhabay wax aanan qaadan."* (Sabuurradii 69:4)

Ciise si buuxda oo kama dambays ah ayuu dembiga allabari ugu noqon dooney.

## QABASHADII

Isla markii Ciise uu dhammeeyey la hadalkii Aabbihiis, waxaa beertii soo galay unug askar ah oo ay soo direen wadaaddadii sare, kuwii maxkamadda haystey, iyo odayaashii. Iyaga oo tooshash, budhad, iyo seefo wata ayay u yimaadeen inay qabtaan Kii duufaannada dejiyey, jinniyada saaray, ee sarakiciyey kuwii dhintay.

> *"**Sidaa daraadeed Ciise isagoo og waxa ku dhici doona oo dhan** ayuu baxay oo ku yidhi iyaga, 'Kumaad doondoonaysaan?'*
>
> *Waxay ugu jawaabeen, 'Ciisihii reer Naasared.'*
>
> *Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, 'Isagii **baan ahay**.' …Sidaa daraadeed Ciise markuu ku yidhi, 'Isagii **baan ahay**,' dib bay u socdeen, oo dhulkay ku dhaceen. Mar kale haddaba ayuu weyddiiyey, oo ku yidhi, 'Kumaad doondoonaysaan?'*
>
> *Oo waxay ku yidhaahdeen, 'Ciisihii reer Naasared.'*
>
> *Ciise ayaa ugu jawaabay, 'Waan idiin sheegay inaan isagii **ahay**.'"* (Yooxanaa 18:4-8)

Kuwii u yimid inay Isaga qabtaan, wuxuu Ciise isugu magacaabay Magaca Ilaahay Laftiisa, *"WAAN AHAY."*[212] Way caddahay, in haddii uu Ciise iyaga raaco, ay taasi doorashadiisa ahayd.

Markii ay askartii Isaga ku soo dhowaadeen si ay u qabtaan, ayaa Butros oo xertiisa ka mid ahaa seef la soo baxay oo dhegta kaga jaray midiidinkii wadaadka ugu sarreeya. Ciise ayaa si

naxariis leh ninkaa u bogsiiyey oo dhegtiisii ugu soo celiyey, oo dabadeedna Butros ku yidhi:

> *"Seeftaada meesheedii ku celi, waayo, kuwa seefo qaada oo dhammu seef bay ku halligmi doonaan. Ma waxaad u malaynaysaa inaanan Aabbahay baryi karin oo uusan haddeer ii soo diri karin malaa'igo laba iyo toban guuto ka badan? **Haddaba sidee buu u noqon doonaa Qorniinku kan leh, Waa in sidaasu noqotaa**?"* (Matayos 26:52-54)

Dhacdadani waxay tusaysaa sida uu Ciise uga duwan yahay dhammaan kuwa diintooda darteed dagaalka iyo dilka u sameeya! In kasta oo uu Ciise ogaa inay nimankani u yimaadeen inay Isaga ku kajamaan, jidh-dilaan, oo dilaan, wuxuu haddana iyaga tusay dulqaad iyo naxariis ee muu tusin nacayb iyo aargoosi.

## NEBIYADII BAA KA SII WAXYOODEY

Dabadeedna, kuwii u yimid inay Isaga qabtaan, Ciise wuxuu ku yidhi, *"Ma waxaad iila soo baxdeen seefo iyo ulo inaad i qabataan sidaan tuug ahay? Maalin walbaba macbudka ayaan fadhiyi jiray oo wax bari jiray, imana aydnaan qabsan."*

Dabadeedna Qorniinka ayaa faahfaahintan ku daraya:

> *"Laakiin waxan oo dhan ayaa noqday **in qorniinka nebiyadu rumoobo**.*
>
> *Markaasaa xertii oo dhammu ka wada tageen oo carareen.*
>
> *Kuwii Ciise qabtay **waxay u geeyeen** Kayafas oo ahaa wadaadkii sare, ilaa meeshii culimmada iyo waayeelladu ku urursanaayeen."* (Matayos 26:55-57)

Muxuu Ka awooddiisu ka sarrayso dabaysha iyo hirarka badda u oggolaaday in Isaga la qabto, la xidhxidho, oo la kexeeyo?

Wuxuu Isagu sidan u sameeyey jacayl daraaddiis iyo Aabbihiis oo uu adeecayey.

Wuxuu sidan u sameeyey inuu adiga iyo aniga ka badbaadiyo xukun abadiyan ah.

Wuxuu sidan u sameeyey *"in qorniinka nebiyadu rumoobo."*

Boqollaal sanno markaa ka hor nebi Ishacayaah ayaa qoray, *"Isaga **sidii wan la qalayo baa loo kexeeyey**."* (Ishacyaah 53:7)

Nebi Ibraahim ayaa isna sidan ku waxyoodey, *"Ilaah qudhiisaa keeni doona **wankii** allabariga la gubo loo bixin lahaa."* (Bilowgii 22:8)

Nebi Muuse ayaa isna qoray, *"Oo wadaadku waa inuu soo qaadaa **wananka** midkood oo waa inuu u bixiyaa… **Oo wanka waa inuu ku gowracaa** meesha lagu gowraco qurbaanka dembiga."* (Laawiyiintii 14:12-13)

Yaabka halkan ku jiraa yuu ku dhaafin.

Wadaaddadii, masuulka ka ahaa inay wananka qalaan oo ku gubaan meesha allabariga ee naxaasta ka samaysan ee macbudka ku taalla, ayaa ahaa isla kuwii Ciise qabtay si ay Isaga u dilaan. Sidaas oo ay tahay may fahansanayn inay iyagu allabari ahaan u qalayaan ***Wanka*** ay nebiyadii oo dhammi wax Isaga ku saabsan sii qoreen.

## WADAADDADII DIINTA OO EEDEYEY

> *"Ciisena waxay u geeyeen wadaadkii sare, waxaana u soo ururay wadaaddadii sare iyo waayeelladii iyo culimmadii."*
> (Markos 14:53)

Hoggaamiyeyaashii diinta ee Yuhuudda ayaa habeennimo qorsheeyey maxkamadayn aan sharci ahayn.

> *"Wadaaddadii sare iyo shirkii oo dhan ayaa waxay dooneen markhaati Ciise ka gees ah si ay u dilaan, waase heli waayeen. Waayo, qaar badan baa marag been ah ku fureen, laakiin maraggoodii isku mid ma ahayn.*
>
> *Markaasaa wadaadkii sare dhexda istaagay oo Ciise weyddiiyey isagoo leh, 'Miyaanad waxba ka jawaabayn? Kuwanu waxay kugu marag furayaan waa maxay?'*
>
> *Isaguse waa iska aamusay oo waxba uma jawaabin.*
>
> *Mar kale wadaadkii sare ayaa weyddiiyey oo ku yidhi, '**Miyaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Kan la ammaano?**'*

> *Ciise baa yidhi, '**Waan ahay**,' oo '**waxaad arki doontaan Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Ilaah, oo ku imanaya daruuraha cirka.**'*
>
> *Markaasaa wadaadkii sare dharkiisii jeexjeexay oo yidhi, 'Maxaannu markhaatiyaal weli ugu baahan nahay?'"*
>
> (Markos 14:55-56, 60-63)

Muxuu wadaadkii sare aadka ugu xanaaqay, oo uu taas aawadeed dharkiisii ugu jeexjeexay, oo Ciise ugu eedeeyey bidcinimo? Wuxuu sidan u sameeyey waayo Ciise ayaa sheegtay inuu yahay Wiilka Ilaahay iyo Wiilka Aadanaha, Masiixa ay nebiyadii oo dhammi wax Isaga ku saabsan sii qoreen. Ciise wuxuu kaloo Isagu yeedhay magaca Ilaahay ee shakhsiyanka ah *"WAAN AHAY."* Oo markii uu Isagu ka hadlay wax ku saabsan *"Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Ilaah, oo ku imanaya daruuraha cirka,"* wuxuu Ciise soo xiganayey Qorniinka nebiyada oo Isaga ku tilmaamaya inuu yahay Xaakinka adduunka oo dhan.[213]

Waa sababtaa tii uu *"wadaadkii sare dharkiisii jeexjeexay oo yidhi,*

> *"Maxaannu markhaatiyaal weli ugu baahan nahay? Waad maqasheen caytanka. Maxay idinla tahay?*
>
> ***Kulligood waxay xukumeen inuu dhimasho istaahilo**.*
>
> *Qaar waxay bilaabeen inay candhuuf ku tufaan oo wejigiisa daboolaan oo garaacaan, waxayna ku yidhaahdeen, 'Wax sheeg.' Askartiina way dharbaaxeen."*
>
> (Markos 14:63-65)

Toddoba boqol oo sanno markaas ka hor, nebi Ishacyaah ayaa ku sii waxyoodey Masiixa oo si doorashadiisa ah u silcaya: *"Kuwii i karbaashay ayaan dhabarkaygii u duway, oo kuwii timaha iga rifayna dhabannadaydaan u duway. Wejigaygiina ceeb iyo candhuuf toona kama aan qarin."* (Ishacyaah 50:6)

## WAXAA XUKUMAY HOGGAAMIYEYAASHII SIYAASADDA

Waaberigii, wadaaddadii iyo hoggaamiyeyaashii diinta ayaa Ciise u geeyey Bontus Bilaatos, oo ahaa guddoomiyihii

Roomaanka ee gobolkii Yuhuudiya. Waxayna hoggaamiyeyaashaas diintu Bilaatos ka dalbadeen in Ciise lagu dilo iskutallaab. Wakhtigan taariikhda, waxay Yuhuuddu ku hoos jireen xukunkii Imbiraadooriyaddii Roomaanka oo iyagu awood umay lahayn inay qof ay dembi ku haystaan dil ku xukumaan.

Saddex jeer ayuu Bilaatos ku celceliyey, "*Isaga wax dembi ah kuma helin,*" laakiinse dadkii badnaa ee kacsanaa, oo ay wadaaddadiina sii shidayaan oo uu iyana ibliisku sii kicinayo, waxay keliyoo sii wadeen inay ku sii qayliyaan, *"**Kaxee, kaxee, iskutallaabta ku qodob**!"*[214]

Bilaatos wuxuu u nuglaadey cadaadiskii hoggaamiyaashii diinta oo wuxuu Ciise ku xukumay ciqaab ay Roomaanku isticmaalaan ta ugu xun: in Isaga la garaaco ilaa ay lafihiisu dibadda u soo baxaan, dabadeedna iskutallaabta lagu qodbo.

> *"Oo goortuu Ciise karbaashay ayuu u dhiibay in iskutallaabta lagu qodbo.*
>
> *Markaasaa taliyaha askartiisii waxay Ciise geeyeen guriga taliyaha, oo waxay isaga ku soo ururiyeen askartii oo dhan. Dharkiisii ayay ka qaadeen oo waxay u geliyeen dhar guduudan. Markaasay taaj qodxan uga taxeen oo madaxiisay saareen, cawsduurna gacantiisa midigtaa ayay u geliyeen, oo intay hortiisa jilba joogsadeen oo ku majaajiloodeen ayay waxay ku yidhaahdeen, 'Nabad, Boqorka Yuhuuddow.' Wayna ku candhuufeen, markaasay cawsduurkii ka qaadeen oo madaxay kaga dhufteen.*
>
> *Oo goortay ku majaajiloodeen dabadeed ayay dharkii ka qaadeen oo dharkiisii bay u geliyeen, markaasay wadeen in iskutallaabta lagu qodbo."* (Matayos 27:26-31)

## BUURTII RABBIGA

Markaa, Rabbiga ammaantii — Isaga jidhkiisii, hadda wuxuu ahaa mid sidii loo garaacayey la googooyey, oo madaxiisa qodxo la isku xidhxidhay taaj looga dhigay, dhabarkana laga saaray iskutallaab culus oo alwaax ka samaysan — kaas oo magaalada dibedeeda loo kexeeyey, isla silsiladda buurtii laba kun oo sanno ka hor ku dhowaad uu Ibraahim korkeeda kaga waxyoodey:

> ***"Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa…. Buurta RABBIGA ayaa lagu arki doonaa."*** (Bilowgii 22:8,14)

Arrimihii oo dhammi meel bay isugu soo uruureen: dadkii, qorshayaashii, Shakhsigii, meeshii. Wax kastaa waxay u dhacayeen isla sidii ay nebiyadii hore ugu sii sheegeen.

Wuxuu ahaa wakhtigii heshiiska wax kala beddelashada ee facyaasha.



# 24

# WAA LA WADA BIXIYEY

Iskutallaabtu waa ciqaabta ugu daran ee ay abid dawlad dadka ku ciqaabto. Boqortooyadii Roomaanku waxay ciqaabtan marin jirtay dembiileyaasha kuwa ugu xunxun.

Markii uu Abuurahu innaga ina soo booqday, waxaynu haddaynu bini'aadan nahay doorannay in Isaga iskutallaab ku dilno.[215]

> *"Waxaana lala waday laba kale oo xumaanfalayaal ah in lala dilo. Markay yimaadeen meeshii la odhan jirey Dhakada,[216] halkaasay iskutallaabo ku qodbeen isaga iyo xumaanfalayaashii, mid midigta, kan kalena bidixda."*
> (Luukos 23:32-33)

**ISKUTALLAABTA AYAA LAGU QODBAY!**

Iskutallaabta waxaa loo sameeyey inay qofka xanuunka ugu daran u geysato oo ay sida ugu xun sharafta uga qaado.

Anigu weligey ma arag, mana arki doono, farshaxan ama mid filin sameeya oo weligii si buuxda u soo bandhigay ceebtii iyo xanuunkii uu Ciise maray markii uu iskutallaabta ka laalaadey. Tusaale ahaan, farshaxannada iyo kuwa filimada qoraa waxay Isaga dhexda kaga xidheen maro, laakiinse runtu waa inay askartii Roomaanku qofkaa xukuman qaawin jireen ka hor inta aanay si arxan darro ah geed ama iskutallaab ugu qodbin, iyaga oo dabadeedna cagihiisa iyo gacmihiisa musbaaro ka dusinaya.

Dhimashada iskutallaabtu waxay ahayd mid ceeb badan, oo

xanuun badan, oo ah dhimasho tartiib ah.

Ciise si doonistiisa ah ayuu ciqaabtan ku maray—xanuunka iyo ceebta—waana adiga, aniga, iyo bin'aadanka oo dhan daraadeed. Ciqaabta sidaas u xun ee Ciise dusha laga saaray macnaheedu wuxuu ahaa inay innaga inaga caawiso inaynu fahanno ciqaabta aadka u daran ee uu dembigu istaahilo.

Qarniyo ka hor intii aanay Roomaanku iskutallaabta hindisin, nebi Daa'uud ayaa sii qeexay silica Masiixa ee iskutallaabta:

> *"Waxaa hareerahayga isku wareejiyey shirkii xumaanfalayaasha,* ***Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha****. Lafahaygii oo dhan waan tirin karaa, Oo iyagu way i fiiriyaan oo igu dhaygagaan, dharkayga bay qaybsadaan, Oo maradaydana saami bay u ritaan. …Iyaga oo madaxa ruxaya ayay yidhaahdaan, 'RABBIGUU isku halleeyey, ha samatabbixiyo, Bal isagu waa kan ku faraxsane hadda ha samatabbixiyo.'"* (Sabuurradii 22:16-18, 8)

Nebi Ishacyaah ayaa sii sheegay:

> *"Naftiisuu geeri u huray, waxaana lagu tiriyey kuwa xadgudbay, weliba wuxuu xambaartay kuwa badan dembigood, wuuna u duceeyey kuwa xadgudbay."*
> (Ishacayaah 53:12)

Aayadahan soo socda ee Injiilka ku qoran, waxaad ku arkaysaa sida waxyaalo badan oo la kaamilay ay ugu salaysan yihiin waxyiyadii aynu haddadan akhrinay.

> *"Markay yimaadeen meeshii la odhan jirey Dhakada,* [meeshii uu Ilaahay qiyaastii 2000 oo sanno ka hor Ibraahim beddelkii wiilkiisa wanka ku siiyey,] *halkaasay iskutallaabo ku qodbeen isaga iyo xumaanfalayaashii, mid midigta, kan kalena bidixda. Markaasaa Ciise wuxuu yidhi, '****Aabbow, iyaga cafi, waayo, garan maayaan waxay samaynayaan****.' Markaasay dharkiisii qaybsadeen, wayna saami riteen. Dadkuna way taagnaayeen iyagoo daawanaya. Taliyayaashuna way ku qosleen iyagoo leh,*



*'Kuwa kale ayuu badbaadiyey, kanu ha isbadbaadiyo, hadduu yahay Masiixa Ilaah, kan uu doortay.' Askartiina waa ku majaajiloodeen, oo intay u yimaadeen, ayay khal siiyeen. Xumaanfalayaashii deldelnaa midkood ayaa caayay isagoo leh, 'Miyaanad ahayn Masiixa? Annaga iyo qudhaadaba badbaadi.' Laakiin kii kale ayaa jawaabay oo canaantay isagoo leh, 'Miyaanad xataa Ilaah ka baqin, waayo, isku xukun baad tihiin? Waayo, innaga waa inoo xaq, maxaa yeelay, waxaynu helnay abaalkii wixii aynu falnay, ninkanuse wax aan jid ahayn ma uu falin.' Markaasuu ku yidhi, 'Ciisow, i xusuuso goortaad boqortooyadaada ku timaado.'*

*Wuxuu ku yidhi, '**Runtii waxaan kugu leeyahay, Maanta Firdooska ayaad igula jiri doontaa**.'*

*Haddaba waxay ahayd abbaaraha saacaddii lixaad, dhulka oo dhammuna gudcur buu noqday ilaa saacaddii sagaalaad. Qorraxdu way madoobaatay…."*

(Luukos 23:33-36, 39-45)

## WAX IS DHAAFSIGII

Qarniyaashii la soo dhaafay oo dhan dad aan tiro lahayn ayaa xanuunkaa iskutallaabta ku silcay. Ka hor intii aan Yeruusaalem la qabsan, 70 Ciise Kaddib, askartii Roomaanku waxay halkii maalinba qodbi jireen shan boqol oo Yuhuud ah.[217] Dadka qaarkood ayaa maalmo badan iskutallaabta ka laalaadi jirey ka hor inta aanay dhiman. Ciise wakhti lix saacaddood ka gaaban ayuu iskutallaabta ku silcayey ka hor intii aanu dhiman. Markaa maxaa siliciisa mid khaas ah ka dhigay?

Mid weyn oo uu dhammaan kaga duwanaa waa inay nebiyadii hore uga sii waxyoodeen silica iyo dhimashada Ciise. Mid kale oo khaas ka dhigtayna waa inay kuwo badani dhiiggooda daadiyeen intii ay iskutallaabta ka laalaadeen, laakiinse uu Sayid Ciise oo keliyahi daadiyey dhiig aan iin lahayn. Qisada aynu hadda Injiilka ka soo akhrinay waxay muujinaysaa dhinac kale oo khaas ah oo ku saabsan dhimashadii Ciise.

> *"Haddaba waxay ahayd abbaaraha saacaddii lixaad,* ***dhulka oo dhammuna gudcur buu noqday*** *ilaa saacaddii sagaalaad."* (Luukos 23:44)[218]

Ciise waxaa la qodbay sagaalkii subaxnimo. Duhurkii ilaa iyo saddexdii galabnimo adduunka oo dhammi mugdi buu noqday. Sabab? Saddexdaa saacaddood, ee adduunku aanu waxba arkayn, waxaa socdey heshiis wax is dhaafsi ah oo aan saamayntiisa oo kale abid taariikhda adduunka ka dhicin. Ilaahay wuxuu wax ka qabaneyey dembigeena si aanu kaasi dusha inooga saarnaan ilaa iyo yowmal-qiyaamaha.

Intii saddexdaa saacaddood ee mugdiga ah lagu jirey, Ilaahay samada ayaa Wiilkiisa uu jecel yahay ee xaqa ah dusha ka saaray ciqaab oo dhan, oo abadiyan looga baahan yahay in dembiyadeena laga jaro. Waa ujeeddadaas tii uu Wiilku u qaatay jidh leh cad iyo dhiig.

> *"Oo isaguna wuxuu dembiyadeena u yahay kafaaragudka [allabari dembi oo ku filan oo joojiyey cadhada Ilaahay] oo kuweena oo keliya uma aha ee weliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo dhan."* (1 Yooxanaa 2:2)

Toddoba qarni markaas ka hor, nebi Ishacyaah ayaa mar horeba sii qeexay heshiiskan wax is weydaarsiga ah ee abadiyanka ah:

> *"Isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay...* ***RABBIGU wuxuu isaga dul saaray xumaanteena oo dhan****. ...Isaga sidii wan la qalayo*

> *baa loo kexeeyey… wuxuu RABBIGU raalli ka noqday inuu isaga nabareeyo. Wuxuu isaga ku riday xanuun. Markaad naftiisa qurbaan dembi ka dhigtid… Wuxuu arki doonaa waxay naftiisu ku dhibtootay, wuuna u riyaaqi doonaa. Addoonkayga xaqa ahuna aqoontiisa ayuu kuwa badan xaq kaga dhigi doonaa, wuxuuna xambaari doonaa xumaatooyinkooda."* (Ishacyaah 53:5-7, 10-11)

Saacadahaas uu iskutallaabta ka laalaaday, ee uu mugdigu adduunka ku gadaanaa, RABBIGU si doonistiisa ah ayuu Wiilkiisa aan dembiga lahayn dusha uga saaray fadarimada iyo wasakhda dembiyadeena. Laga yaabee inaynaan weligeen fahmin waxa dhab ahaantii ka dhex maray Aabbaha iyo Wiilka, laakiinse mid baa la hubaa: kani wuxuu ahaa hesiishkii wax is weydaarsiga ahaa ee ugu weynaa ee abid dhaca.

**KELINIMO!**

Intii uu adduunku ku jirey mugdiga weyn, *"Ciise ayaa cod weyn ku dhawaaqay oo yidhi, 'Eloy, Eloy, lama sabakhtani,' waxaa weeye, '**Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay**?'"* (Matayos 27:46)

Muxuu Ciise sidaa naxdinta iyo damqashada leh ugaga dul qayliyey iskutallaabta korkeeda? Sidan buu ku qayliyey waayo Ilaahay ayaa Isaga kaga tegey inuu bixiyo ciqaabta dunuubta…

kelinimo.

Dhammaan bini'aadanka daraaddood, Ciise saddex heer oo uu dembigu sababay buu u silcay:

- Isaga waxaa ku dhacday *dhimasho ruuxiyan* ah. Ilaaha samada ayaa wejigiisa quduuska ka leexiyey Wiilkiisa kaas oo uu dusha kaga raray dunuubta bini'aadanka.
- Waxaa Isaga ku dhacday *dhimasho jidh* ahaaneed. Isla daqiiqadii uu Ciise dhintay, waxaa jidhkiisii ka baxay ruuxii iyo naftii.
- Wuxuu kaloo Isagu dhadhamiyey *dhimashada labaad.* Ciqaabta naarta ayuu adiga iyo aniga daraaddeen ugu silcay.

Naartu waa meel uu Ilaahay nacay oo mugdi iyo kelinimo ah; meel wanaag oo dhan ka fog; meel laga dheereeyey joogitaanka iyo jacaylka Ilaahay. Markii uu iskutallaabta ku qodbanaa, waxay ugu horreysey uguna dambeysey ee abid, Wiilka weligiis jira waxaa laga dheereeyey Aabbihiis. Ciise, ka fogaanshahan Ilaahay ee aadka u xun ayuu maray, si aynaan innagu taas u marin.

Wanka quduuska ah ee Ilaahay ayaa noqday Dembi-Qaade, Beddelkeena. Isagu wuxuu dusha ku qaaday culayska buuxa ee habaarka dembiga, oo aqbalay xanuunka, ceebta, qodxaanta, iyo musbaarada. Meesha allabariga ee iskutallaabta korkeeda, Isaga oo cirka iyo dhulka dhexdooda ku qodban, ayuu Ciise noqday *"allabarigii la gubey"* ee dembiga[219] ee kaamilka ahaa uguna dambeeyey.

## DHOWR SAACADOOD NAARTA DHEXDEEDA?

Ciise wuxuu dusha ku qaatay naarteenii. Laakiinse sidee ayuu hal nin ku bixin karaa ciqaabta bini'aadanka oo dhan? Sidee ayuu Ciise dhowr saacadood gudahood ugu silci karey ciqaab abadiyan ah?

Isagu sidaas ayuu samayn karey, waayo ka uu Isagu yahay.

Waa Ka uu Isagu yahay daraadeed inuusan Isagu u baahnayn inuu weligiis sii wado inuu ciqaabta dembiyadeena bixiyo sida innaga inagu dhici lahayd. Wiilka Abadiyanka ah ee ah Erayga Ilaahay muu lahayn dembi kiisa ah uu soo gudo, wakhtiguna Isaga ma xadido sideena oo kale.

Waa Ka uu Isagu yahay daraadeed sababta uu u awoodey inuu *"dhimashada ugu dhadhamiyo qof walba"* (Cibraaniyada 2:9) weligeed iyo weligeed, ilaa iyo yowmal-qiyaamaha.

Ciise, RABBIGA Ilaaha ahaan, umuu baahnayn wakhti gaar ah oo cayiman oo adduunkan sidaa u ballaadhan oo u kala duduwan ku abuuro (in kasta oo uu ku doortay inuu *lix maalmood* ku abuuro), sidoo kale umuu baahnayn wakhti cayiman oo uu iskutallaabta ku qodbanaado si uu bini'aadanka u badbaadiyo (in kasta oo uu doortay inuu taas ku sameeyo *lix saacadood* gudahood).

Ilaahay, wakhtigu waxba lama aha.

*"Weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah! ... Kun sannadood waxay hortaada ku yihiin sida shalay oo kale markay dhammaadaan. Oo waxay la mid yihiin sida wakhti la soo jeedo oo habeennimo."* (Sabuurradii 90:2, 4)

**"WAA DHAMMAATAY!"**

*"Markaas dabadeed Ciise isagoo garanaya wax kasta inay dhammaadeen, in Qorniinku ahaado, ayuu yidhi, '**Waan harraadsanahay!**' Markaas waxaa meeshaas yiil weel khal ka buuxo. Sidaa daraadeed geed isbonji la yidhaahdo bay khalkii ka buuxiyeen, markaasay kor saareen geed husob la yidhaahdo oo afkiisa ku dhoweeyeen. Haddaba markii Ciise khalkii qaatay ayuu yidhi, '**Waa dhammaatay**!' markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey."* (Yooxanaa 19:28-30)

Muddo yar ka hor intii uusan Ciise dhiman, Isagu wuxuu bixiyey ogeysiis:

***"Waa dhammaatay!"***

Odhaahdan waxaa laga soo turjumey hal eray oo keliya oo af Giriig ah, *Tetelestai.* Wuxuu ahaa eray caan ku ah arrimaha baayacmushtarka ee wakhtigii Roomaanka. Wuxuu muujinayaa in deyntii si buuxda loo bixiyey. Waxaa la helay waraaqo xisaabeed qadiim ah oo ay dusha kaga qoran tahay *"Tetelestai"*, macnaheeduna yahay:

*"Waa la wada bixiyey."*

Erayga *Tetelestai* waxaa kaloo loo isticmaalay hawl la dhammeeyey. Marka warbixin lagu soo celinayo kii hawshaa u diray, midiidinku wuxuu odhan karey *"Tetelestai"*, oo macnaheedu yahay:

*"Qorshihii ama hawshii waa la wada fuliyey."*

Qorayaasha kale ee Injiilka ayaa dhammaantood weriyey *"Markaasaa Ciise **cod weyn ku dhawaaqay** oo ruuxii bixiyey."* (Markos 15:37)

War maxay ahayd qaylo guuleed!

Waxyiyadii iyo masaalladii tilmaamayey Wankii allabariga ee Ilaahay waa la kaamilay.

Ciise, Wiilka Aadanaha iyo Wiilka Ilaahay wuxuu si guul leh ula tacaalay habaarkii: ***dembiga***. Isagu wuxuu bixiyey deyntii loo baahnaa oo dhan inuu Ilaahay badbaadiyo farcanka Aadan ee fadaroobey, ee eedaysan. Dabeecadda Ilaahay ee xaqa ah iyo cadhadiisa dembiga ka soo horjeedda si buuxda ayaa hadda loo dejiyey oo loo kaamilay. Sharciyadiisii oo dhan waa la meelmariyey.

Waa dhammaatay. Si buuxda ayaa loo bixiyey. Qorshihii oo dhan waa la meelmariyey!

> *"Idinka laydinkuma soo **furan** waxyaalaha baabba'aya oo ah sida lacagta iyo dahabka... laakiinse waxaa laydinku soo furtay **dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix** oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn. Isaga horaa loo yiqiin intaan dunida la aasaasin, laakiinse wakhtiyadii dhammaadkoodii ayaa loo muujiyey **idinka aawadiin**."* (1 Butros 1:18-20)

Qarniyadii la soo dhaafay oo dhan, dhiig ayaa laga daadin jirey malyuumaad xoolo ah oo aan iin lahayn oo allabari ahaan loo qali jirey. Hadda, dhiiggii Ciise ayaa ka da'ayey jidhkiisii aan dembiga lahayn. *"Dhiigga Ciise ee qaaliga ahi"* si ku meelgaadh umuu *dabooli* doonin dembiga; laakiinse si abadiyan ah ayuu dembiga u *tirtirayaa*. Sidan ayay ahayd sidii axdigii koowaad ee Ilaahay lagu sii sheegay.

> *"'Bal eega, maalmihii waa imanayaan,' ayaa RABBIGU leeyahay, 'oo anigu **axdi cusub** baan la dhigan. ...Xumaantooda waan cafiyi doonaa, oo dembigoodana kol dambe ma xusuusan doono.'"* (Yeremyaah 31:31, 34)

Qorniinka Axdiga Cusub ayaa dabadeed sharaxaya, *"Kolkuu yidhi, '**Axdi cusub**', ayuu kii hore **duug** ka dhigay."* (Cibraaniyada 8:13) Dib dambe looguma baahna allabariyo loo qalo dembiga daraaddiis. Xoolihii allabari ahaanta loo qali jirey

waxaa mamnuucay oo meesha ka saaray dhimashadii Masiixa ee iskutallaabta.

Isla sidii uu RABBIGA Ilaaha ahi u qalay allabarigii dhiigga ee *ugu horreeyey* (maalintii ay Aadan iyo Xaawa dembaabeen), ayuu haddana u bixiyey allabarigii dhiigga ee ugu habboonaa ee *kama dambaysta* ahaa.

Isla sidii uu Ibraahim uga sii waxyoodey, Ilaahay ayaa *"Qudhiisu keenay wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa."* (Bilowgii 22:8) In kasta oo aanu Ilaahay dilin wiilkii Ibraahim, Isagu *"Wiilkiisa muu lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen buu u bixiyey."* (Rooma 8:32)

Dhiigga Ciise ee la daadiyey ayaa qanciyey oo halkaa ku xidhay *qaynuunka dembiga iyo dhimashada* oo sidoo kale kaamilay *qaynuunka allabariga*.

Mid lala yaabo maaha, inuu Isagu ku qayliyo, ***"Waa dhammaatay!"***

## DAAHII KALA DILLAACAY

Markaa, maxaa dhacay kaddib markii uu Ciise ku dhawaaqay, *"Waa dhammaatay"?*

> *"Markaasaa Ciise cod weyn ku dhawaaqay oo ruuxii bixiyey.* ***Markaasaa daahii macbudka kor ilaa hoos laba u kala dillaacay****."* (Markos 15:37-38)

Taariikhyahan hore ayaa daahii macbudka ku qeexay in xajmigiisu le'kaa gacanta qofka oo dhowr jeer labanlaab la isugu tolay oo kale, oo uu aad u cuslaa una baahnaa inay 300 oo nin kaas qaadaan ama xidhaan.[220]

Maxaa sababay inuu daaha sidaas u weyni laba u kala jeexmo?

Cutubkii 21, waxaynu ku soo barannay inuu Ilaahay dadkiisii ku amray inay daah khaas ah ku xidhaan taambuuggii iyo markii dambe macbudkii. Daahaasi wuxuu qofka ka xidhayey Meesha ugu wada Quduusan ee macbudka gudihiisa halkaas oo Ilaahay beri dhigay iftiinkii weynaa ee Joogitaankiisa tusayey. Daahan oo midabo badan lahaa wuxuu metelayey Wiilka Ilaahay kaas oo

samada ka imaan dooney oo adduunka imaan dooney. Wuxuu kaloo daahan ujeeddadiisu ahayd inuu dembiileyaasha xasuusiyo sida ay Abuurahooda quduuska ah uga dheer yihiin. Kuwa buuxiyey heerka sare ee Ilaahay u dhigay xaqnimadiisa buuxda ayaa loo oggolaan dooney inay galaan guriga Ilaahay ee abadiyanka ah.

Sannadkiiba hal mar, Maalinta Kafaaragudka, ayaa wadaad sare si gaar ah loo subkay loo oggolaan jirey inuu daahaa dhaafo oo galo Meesha ugu wada Quduusan. Sida keliya ee Ilaahay hortiisa lagu geli karey dhimashona looga badbaadi karey waxay ahayd inuu wadaadka sare qaado madiibad uu ku jiro dhiig ri' allabari ahaan loo qalay (kaas oo metelaya dhiigga la daadiyey ee Masiixa). Wadaadkaasi waa inuu ku lebbisnaadaa dhar xariir saafi ka samaysan (oo meteleysa xaqnimada buuxda ee Masiixa). Marka uu Meesha ugu wada Quduusan galo, wadaadka sare dhiiggaas ayuu toddoba jeer halkaas ku rushayn jirey (taas oo meteleysa kaamilaad) Kursiga Naxariista ee Sanduuqii Axdiga korkiisa iyo hortiisa. Sanduuqa waxaa ku jirey Qaynuunkii Ilaahay, kaas oo dembiileyaasha oo dhan ku xukumay dhimasho. Laakiinse Ilaahay wuxuu naxariis tusay dembiileyaasha Isaga oo oggolaaday inuu neef aan waxba galabsani iyaga beddelkooda u dhinto.

Shan iyo toban qarni ayuu daahaasi ka markhaati kacayey quduusnimada buuxda ee Ilaahay, iyo inaan dhiigga Masiixa ee la daadiyey la'aantii, kafaaragud kama dambays ah loo heleyn dembiga. *Ka la Doortay* ee Ilaahay ee bilaa dembiga ah oo keliya, ee daahaasi metelayey, ayaa bixin karey ama soo gudi karey qiimaha dembiga. Waa sababtaas, wakhtigii ku habboonaa, uu Ilaahay u soo diray Wiilkiisa Keliya inuu ku noolaado nolol aan shar lahayn oo adeecsan qaynuunnada Ilaahay, dabadeedna uu si iskiis ah dhiiggiisa ugu bixiyo, ciqaabtii buuxday ee ay galabsadeen sharcilaaweyaasha ah farcanka Aadan.

Markaa, yaa laba ugu kala dillaaciyey daahii, kor ilaa hoos? Ilaahay baa sameeyey. Ficilkani wuxuu tusayey sida uu Ilaahay raalliga uga noday Wiilkiisa oo uu markii Wiilkaasi yidhi, *"Waa dhammaatay!"*[221] uu Aabbuhuna *"Aamiin!"* ugu jawaabey.

Ilaahay wuu qancay.

## ALLABARIYO DAMBE LOOMA BAAHNA

Markii uu Ciise allabari ahaan iskutallaabta ugu dhintay, kafaaragud buuxa [dembidhaaf iyo dib ula heshiin Ilaahay] ayaa la gaadhey. Allabarigii Kaamilsanaa ayaa dhiiggiisa u daadiyey dembiga adduunka.

Dib dambe dadka Ilaahay culays uguma siin hayn doonaan allabariyadii sannadlaha ahaa ee dembiga loo qali jirey.

Dib dambe Ilaahay iyaga ugama sii rabi doono ficilladii diinta ee macbudka lagu samayn jirey ama wadaadado sare oo iyaga masuul ka noqda.

Allabari kama dambays ah oo abadiyan ah ayaa la sameeyey. Xaqiiqadii ka dambeysey tusaalayaashii iyo masaalladii ayaa hadda tidhi, *"Waa dhammaatay!"*

Dhammaan kuwa Ilaahay rumaysan, wuxuu Ilaahay Laftiisu ka odhanayaa:

> *"'Oo dembiyadooda iyo xadgudubyadoodana mar dambe ma xusuusan doono.' Markii waxyaalahan la cafiyo, wax dambe oo dembi loo bixiyaa ma jiro.* ***Taas daraadeed, walaalayaalow, waxaynu haysannaa dhiirranaan inaynu meesha quduuska ah ku galno dhiigga Ciise****, oo ah waddo cusub oo nool oo uu inooga banneeyey daaha, kaas oo ah jidhkiisa. Oo waxaynu haysannaa wadaad weyn oo ka sarreeya guriga Ilaah. Taas daraadeed aynu ugu soo dhowaanno qalbi run ah iyo hubaal rumaysad."*
> (Cibraaniyada 10:17-22)

## WUU DHINTAY

Isla daqiiqadii uu Ciiise dhintay, daahii macbudka oo keliyahi laba umuu kala dilaacine, waxaa kaloo dhacay dhulgariir, oo dad badan oo argagaxsan ayaa carar iyo qax galay.

> *"Boqol-u-taliyihii iyo kuwii la jiray oo Ciise dhawrayay, goortay arkeen dhulgariirkii iyo wixii dhacay, aad bay u baqeen oo yidhaahdeen, 'Runtii, kanu wuxuu ahaa Wiilkii Ilaah.'"* (Matayos 27:54)

Mar dambe, si loo hubiyo inuu Isagu run ahaantii dhintay, ayaa askari Roomaan ahi wuxuu Ciise dhinaca ka geliyey waran. Waxaa ka soo daatay dhiig iyo biyo, taas oo dhinaca sayniska daawada marka laga eego caddaysay inuu Isagu dhintay. Ficilka askarigaasi wuxuu kaamilay waxyiyo kale.[222]

**WAA LA AASAY**

> *"Goortay casarkii ahayd waxaa yimid nin reer Arimataya oo hodan ah oo Yuusuf la odhan jiray, oo isaguna Ciise xertiisa ahaa. Kaasu wuxuu u tegey Bilaatos oo ka baryay Ciise meydkiisii. Markaasaa Bilaatos amray in loo dhiibo. Yuusuf goortuu meydkii qaaday ayuu kafan nadiif ah ku duudduubay, oo wuxuu geliyey xabaashiisii cusbayd, tan uu dhagax ka qoday, oo xabaashii afkeedii wuxuu ku soo giringiriyey dhagax weyn, wuuna ka tegey."*
>
> (Matayos 27:57-60)

Nebi Ishacayaah ayaa ku sii waxyoodey in xabaasha Masiixa *"lagu daray taajiriinta dhimashadiisa."* (Ishacyaah 53:9). Qodob kasta oo qorshihii Ilaahay ah waa la kaamilay. Sidaas oo ay tahay, xertii Ciise weli qorshahaas may fahansanayn. Waxay run ahaantii u rumaysnaayeen inuu Ciise ahaa Masiixa boqortooyadiisa ka aasaasi dooney adduunka, laakiinse markii ay arkeen Isaga oo dhimanaya, rajadoodii Isaga ayay la dhimatay. Sayidkoodii mucjisooyinka samayn jirey iyo saaxiibkoodii ugu qaalisanaa waa la diley oo la aasay.

Inay halkaa ku dhammaatay ayay iyaga la ahayd.

Ta yaabka lihi waxay ahayd, in, in kasta oo ay xertii Ciise ilaaween ballantiisii ahayd inuu maalinta saddexaad soo noolaan dooono, aanay taas ilaawin wadaaddadii diinta ee sharowyadaha ahaa.

> *"Wadaaddadii sare iyo Farrisiintii waxay u wada yimaadeen Bilaatos, oo waxay ku yidhaahdeen, '**Sayidow, waxaannu xusuusan nahay in khaa'inkaasu yidhi, intuu weli noolaa, 'Saddex maalmood dabadeed waan soo sara kacayaa**.' Haddaba amar in xabaashii aad loo dhawro ilaa maalinta saddexaad inaan xertiisu iman oo xadin oo aanay dadka ku odhan, 'Kuwii dhintay wuu*

*ka soo sara kacay, oo aanay khiyaanada dambe ka sii xumaan tii hore.'*


*Bilaatos wuxuu ku yidhi, 'Waardiyayaal baad leedihiin. Taga oo adkeeya in alla intaad adkayn taqaaniin.'*

*Markaasay tageen, iyaga iyo waardiyayaashii, oo xabaashay soo adkeeyeen, dhagixiina way shaabadeeyeen."* (Matayos 27:62-66)



Dhagixii ku afaafnaa xabaashii qaboobeyd ee meydkii Ciise ku jirey inta la sii awdey ayaa la shaambadeeyey. Askar Roomaan ah oo aad u hubaysan ayaa xabaasha lagu wareejiyey inay waardiyeeyaan. Sidan waxay ugu ekayd in qisadii Ciise halkaa ku soo dhammaatay.

Dabadeedna waxaa la gaadhey subaxdii Axadda.



# 25

# Dhimashada Waa Laga Adkaaday

Erayga Ilaahay wuxuu Aadan ka odhanayaa, *"dabadeedna wuu **dhintay**."* (Bilowgii 5:5) Halkan ayaa qisadiisii adduunkani ku dhammaatay. Farcankii Aadan ee kalena sidaas kama duwanayn. Cutubka shanaad ee Bilowgii oo ka hadlaya kuwo farcankii Aadan ah oo isaga ka dambeeyey ayaa ku celcelinaya,

*"dabadeedna wuu dhintay.*

*... kaasina wuu dhintay.*

*... Isaguna wuuna dhintay.*

*... dabadeedna wuu dhintay.*


*... Dabadeedna wuu dhintay."*

Taariikhdan oo kale ayay yeelanayaan nimanka iyo haweenka dembigu faddareeyey. Way noolaayeen, dabadeedna dhimanayaan, oo la aasayaa, fac ilaa fac, qarniba qarniga uu ka dambeeyo.

Laakiinse qisada Masiixu kuma dhammaanayso xabaashii dhexdeeda.

## XABAAL MADHAN

> *"Sabtidii dabadeed goortii waagii beryayay maalintii ugu horraysay ee toddobaadka, Maryantii reer Magdala iyo Maryantii kale waxay u yimaadeen inay xabaashii arkaan. Oo bal eeg, waxaa jiray dhulgariir weyn, waayo, malaa'igta Rabbiga ayaa intay samada ka soo degtay timid oo dhagixii ka giringirisay oo ku dul fadhiisatay.*



*Midabkeedu wuxuu u ekaa hillaac, dharkeeduna wuxuu u caddaa sida baraf cad. Oo cabsi aawadeed kuwii ilaalinayay waa gariireen, oo waxay noqdeen sida meydad. Malaa'igtii ayaa u jawaabtay oo naagihii ku tidhi, 'Ha baqina, waayo, waxaan ogahay inaad doonaysaan Ciise, kan iskutallaabta lagu qodbay.*

***Halkan ma joogo, waayo, wuu sara kacay siduu yidhi**. Bal kaalaya oo arka meeshii Rabbigu jiifay.*

*Dhaqso u taga, oo waxaad xertiisii ku tidhaahdaan, Kuwii dhintay ayuu ka soo sara kacay, oo wuu idin hor marayaa ilaa Galili. Halkaasna waad ku arki doontaan. Bal eega, waan idiin sheegaye.' Dhaqsoba waxay xabaashii kala tageen baqdin iyo farxad weyn, oo waxay u ordeen inay xertiisa u warramaan. Kolkaasaa Ciise ka hor yimid oo ku yidhi, '**Nabad**.' Markaasay u dhowaadeen oo intay cagihiisa qabteen ayay caabudeen. Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, '**Ha baqina**. Taga oo*

> *walaalahay u sheega inay Galili tagaan, oo halkaasay igu arki doonaan.'"* (Matayos 28:1-10)

Dimashadu ma sii hayn karin Masiixa. Isagu dembi kiisa ah muu lahayn, Ilaahay ayaa Isaga dhimashada ka sarakiciyey. Ciise, ciqaabtii dembiyada adduunka oo keliya muu bixine, wuxuu kaloo ka guuleystey ciqaabtaas. Isagu dhimashada lafteedii ayuu ka adkaaday!

Waa in Shaydaanka iyo jinniyadiisa madaxa laga jebiyaa.

Hoggaamiyeyaashii diintu wax ay sameeyaan bay la'aayeen oo wareer baa ku dhacay iyaga.

> *"Intay sii socdeen* [haweenkii hadda arkay Sayidkii sarakacay] *ayaa waardiyayaashii qaarkood magaaladii yimid, oo waxay wadaaddadii sare uga warrameen wixii dhacay oo dhan.*
>
> *Iyaguna goortay waayeelladii la shireen oo ay wada hadleen, ayay askartii lacag badan siiyeen, oo waxay ku yidhaahdeen, 'Waxaad tidhaahdaan, "Xertiisii ayaa habeennimo timid oo xadday isaga intii aannu hurudnay." Oo haddii taliyihii waxan maqlo, waannu rumaysiinaynaa oo waannu idiin welwel tiraynaa.' Markaasay lacagtii qaateen oo yeeleen sidii lagu yidhi. Hadalkanu maalintaas ilaa maanta waa ku dhex firdhisanaa Yuhuudda."* (Matayos 28:11-15)

Cadaawayaashii Ciise way ogaayeen inay xabaashii madhnayd. Waxay iyagu dadaal dheeraad ah ugu jireen inay runta qariyaan. May dooneyn inay dadku ogaadaan inuu Ninkii ay dileen dib u soo noolaaday!

## DHIMASHADII WAA LAGA ADKAADAY

Beerta Ceeden [Beertii Jannada], Ilaahay wuxuu Aadan ugu digey inuu isagu *"**hubaal dhiman doono**"* haddii uu adeeci waayo xataa hal qaynuun oo Abuuruhu siiyey. Shaydaankii baa kaga hor yimid, *"hubaal adigu **ma dhiman doontid**"* oo wuxuu sii waday inuu Aadan iyo bini'aadanka oo dhan u hoggaamiyo waddada

dhimashada iyo halaagga. Kumanyaal sanno ayay ragga, dumarka iyo carruurtu Shaydaanku ugu jireen xabsi aanay ka bixi karin. Dabadeedna Wiilka Ilaahay ayaa dhimashadii la dagaalamay, oo ka adkaaday, oo furay albaabkii laga galo nolosha weligeed ah.

> *"Siday* ***dhammaan Aadan ugu wada dhintaan****, sidaas oo kalaa* ***dhammaan Masiixa loogu wada noolayn doonaa****."*
> (1 Korintos 15:22)

Isla shalayto, ayaa haweeney duq ah oo aanu deris nahayi igu tidhi, "Waxa keliya ee intaan noolahay aadka uga cabsado waa dhimashada." Aad baan ugu farxay inaan iyada u sheego Ka dhimashada maray ee soo laabtay Isaga oo nool, Isaga oo ka guuleysanaya cadowgan xun.

> *"Carruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo dhiig, taas aawadeed Isaguna* [Ciise] *sidaas oo kale ayuu uga qayb qaatay, inuu dhimasho ku baabbi'iyo kii xoogga dhimashada lahaa—oo ah Ibliiska—iyo inuu furo kulli kuwii cimrigoodii oo dhan addoonnimo ugu hoos jiray cabsida dhimashada."* (Cibraaniyada 2:14-15)

Ka soo qaad haddii uu Ciise dembiyadeena uun u dhiman lahaa laakiinse aanu ka sarakaceen dhimashada. Markaa, dhimashadu waxay weli sii ahaan lahayd wax laga cabsado.

Markii uu dhimashada ka adkaaday, wuxuu Sayid Ciise caddeeyey inuu Isagu ka sarreeyo hubka ugu awoodda badan ee uu Shaydaanka iyo cadowga ugu xun ee bini'aadanka. Maadaama uu Ciise ka adkaaday dhimashadii, ma jirto wax ay kuwa Isaga aaminsani kabsadaan, ha noqoto noloshan ama ta soo socota.

Akhbaarka Ilaahay wuu cad yahay: Haddii aad adigu aamintid Wiilkiisa adiga daraaddaa iskutallaabta ugu silcay, oo adiga daraaddaa u dhintay, oo maalintii saddexaad adiga kuu soo noolaaday, Isagu wuxuu markaa kaa sii deyn doonaa xabsiga dhimshada oo wuxuu ku siin doonaa noloshiisa abadiyanka ah.

Waa kaas Warka Wanaagsan ee Ilaahay u hayo adduunkan dembiga u afduuban.

> *"Masiixu wuxuu u **dhintay** dembiyadeena **sida Qorniinku leeyahay**, waa la **aasay** isaga, oo maalintii saddexaad ayaa **la sara kiciyey, sida Qorniinku leeyahay**."*
> (1 Korintos 15:3-4)

Kuwa Ciise Maxiis oo rumaysan oo dhammi waxay markaa odhanayaan:

> *"Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan. …Ha cabsan, Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, iyo kan nool. Anigu waan dhintay, oo bal eeg, waan noolahay tan iyo weligayba, oo waxaan haystaa furayaasha dhimashada iyo Haadees* [meesha ruuxyadii dhintay joogaan]*."*
> (Yooxanaa 14:19; Muujintii 1:17-18)

## SHAYDAANKII WAA LAGA ADKAADAY

Markii uu Ciise galay adduunka dhimashada oo uu saddex maalmood kaddib halkaas ka soo baxay, dagaalkii uu Shaydaanka kula jirey wuu kululeeyey oo kor u qaaday — guushaas oo uusan weligiis sii deyneyn.

Hadda Shaydaanku waa cadow laga adkaaday. In kastoo ay isaga iyo jinniyadiisu ilkaha ku dirirayaan, marna ma guuleysan karaan.

Ma aragtaa sida uu Ilaahay u kaamilay ballanqaadkii uu ka dhex sameeyey Beerta Ceeden maalintii ay Aadan iyo Xaawa dembaabeen? Sidii uu Isagu hore u sii sheegay, *Farcanka naagta* (Ciise) waxaa dhaawacay *Abeesadii* (Shaydaanka), isla dhaawacaas ayaa Shaydaanka jabkiisii noqday.

> *"Taas aawadeed ayuu Wiilka Ilaah u muuqday inuu baabbi'iyo shuqullada Ibliiska."* (1 Yooxanaa 3:8)

Dhimashadiisii, aaskiisii, iyo sarakiciddiisii, Ciise wuxuu kaga guuleystey habaarka dembiga, oo odhanaya:

> *"…**ciid** baadna ku noqon doontaa."* (Bilowgii 3:19)

Kumanyaal sanno, Shaydaanku wuu isla weynaa intii ay dhimashadiisa xumi farcanka Aadan ciidda dib ugu celineysey. Laakiinse waxaa hadda joogey Mid uusan jidhkiisu **ku noqonin** ciidda!

Muxuu *jidhkii* Ciise xabaasha dhexdeeda ugu qudhmi waayey?

Dhimashadu awood uma hayn Isaga waayo wuxuu ahaa Mid bilaa dembi ah. Kumanyaal sannadood markaa ka hor ayaa nebi Daa'uud sidan sheegay:

> *"Kaaga quduuska ahna **uma** dayn doontid inuu **qudhun** arko."* (Sabuurradii 16:10)

Ka Quduuska ahi wuxuu qabsaday oo ka adkaaday Shaydaankii, dembigii, iyo dhimashadii innaga ayuuna sidaas inoo sameeyey.

## CADDAYNTII

Caddaymaha tusaya inuu Ciise dhimashada ka sarakacay way badan yihiin waana kuwo lagu qancayo.[223]

Xabaashii waa madhnayd.

Meydkii muu oollin.

Haweenka ayaa ahaa kuwii ugu horreeyey ee arkay inay xabaashu madhan tahay, oo maqlay ogeysiiskii malaa'igta, oo arkay Ciise oo nool, oo Isaga taabtay, oo la hadlay. Haddii qisada Injiilka ee arrintan ku saabsan la been abuuray, ma kula tahay inay afarta qore ee Injiilku ay qori lahaayeen inay haweenku ahaayeen kuwii ugu horreeyey waxaas oo dhan?!

Qoraallada sheegaya Ciise oo la arkay kaddib markii uu sarakacay way badan yihiin. Tobannaankii sanno ee markaa ku xigey, boqollaal markhaati oo aamin ah ayaa ka markhaati kici dooney inay la socdeen oo la hadleen Masiixii sarakacay.

Xertii waxay arkeen Ciise oo silcay oo dhintay. Aad bayna u qalbi jabeen. Rajadoodii waa la burburiyey waayo waxay qabeen fikradda khaladka ah ee ah inuusan Masiixu weligiis dhimanayn. Guryahoodii ayay dib ugu laabteen iyaga oo murugeysan oo cabsanaya. Dabadeedna arrin ayaa dhacday. Waxay arkeen Ciise oo nool. Isla markiiba waxay xusuusteen sidii uu Ciise iyaga ugu

sheegay in Isaga la qodbi doono oo uu mar kale soo sarakici doono maalinta saddexaad.[224] Ugu dambaystii waxay iyagu fahmeen erayadii nebiyada.

Fulayaashii hore ayaa hadda noqday markhaatiyaasha Ciise ee dhiirran.

Wakhti gaaban kaddib sarakiciddii Ciise, Butros, oo hore u wareersanaa una cabsanayey, wuxuu hadda jidadkii Yeruusaalem ee dadka cadaawadu ka muuqato ka buuxeen si aan baqdin lahayn uga sheegayey kuwii maleegey in Ciise iskutallaabta lagu qodbo:

> *"Idinku waxaad diideen Kan Quduuska iyo Xaqaba ah…* ***oo waxaad disheen Amiirkii nolosha, kan Ilaah ka sare kiciyey kuwii dhintay****, annaguna markhaatiyaal baannu ka nahay. …Waxaanan ogahay, walaalayaalow, inaad tan aqoon la'aan u samayseen, sidii madaxdiinnuba yeeshay oo kale.* ***Laakiin Ilaah sidaasuu u dhammeeyey waxyaalihii uu hore uga sheegay afafkii nebiyada oo dhan*** *oo ahaa in Masiixu silci doono. Haddaba toobadkeena oo soo noqda, si dembiyadiinna loo tirtiro."*
> (Falimaha Rasuullada 3:14-19)

Butros iyo xertii kale, waxay diyaar u ahaayeen inay dhibaato kasta u maraan Ka nolosha weligeed ah iyaga siiyey.

Xertii Masiixa (oo sidoo kale loogu yeedhay *Kiristaanka*[225]) waa lagu kajamay, oo la xabisay, oo la jidh diley, kuwo badana waa la laayey markhaatifurkii dhiirranaa ee ay Sayidka Ciise u sameeyeen daraadeed. Butros laftiisa waa la silciyey, sida ay taariikhyannada aan Masiixiyiinta ahayni sheegaana isagana markii dambe iskutallaab ayaa lagu diley—iyada oo madaxiisa la hoos mariyey lugihiisana kor. Sidaas oo ay tahay Butros iyo xertii kale si farxad leh ayay silicaa u aqbaleen maadaama ay *ogaayeen* inuu Badbaadiyahooda iyo Sayidkoodii dhimashada iyo naarta ka adkaaday.[226] Waxay *ogaayeen* inuu Ilaahay iyaga siiyey saamaxaad, xaqnimo, iyo nolol weligeed ah. Dhimashadu dib dambe ugama argagixinayn maadaama ay *ogaayeen* in isla daqiiqadda ay jidhadhkoodu dhintaan, ay nafahooda iyo ruuxyadooda abadiyanka ahi jannada *"Rabbiga la joogayaan."* (2 Korintos 5:8)

Ma jirin wax hadda iyaga kaga nixin karey. Akhbaar ayay adduunka u hayeen, oo qiimaha akhbaarkaas ayaa kala weynaa nolosha lafteeda.

Sidan ayay xertii Masiixu ugu soo koobeen oo ugu sheegeen dadkii badnaa ee ku kajamayey ee madaxa adkaa ee ku noolaa magaaladii qadiimka ahayd ee Ateenay:

> *"Ilaah hadda wuxuu dadka ku amrayaa in* ***dhammaantood meel kastaba ha joogeene*** *ay soo* ***toobadkeenaan****; maxaa yeelay, wuxuu dhigay maalin uu dunida* ***si xaq ah ugu xukumi doono ninkuu doortay, taasoo uu dhammaan ugu caddeeyey sarakicidda uu isagii ka soo sara kiciyey kuwii dhintay****."* (Falimaha Rasuullada 17:30-31)

Waxay ugu soo koobeen arrin cad oo sahlan: *Toobadkeena!* Joojiya inaad ku fekertaan inaad iskiin isaga badbaadin kartaan xukunka Ilaahay ee la hubo. Laakiinse, si buuxda u talo saarta Badbaadiyaha dhiiggiisa u daadiyey dembiyadiina daraaddood oo dhimashada ka sarakacay.

## CADDAYN SAX AH

Sidee baan adiga iyo anigu u hubin karnaa inuu Ciise yahay Badbaadiyaha iyo Xaakinka adduunka? Waxaynu jawaabta ka akhrinaa inuu *Ilaahay taas "dhammaan ugu* ***caddeeyey sarakicidda uu Isagii ka soo sara kiciyey kuwii dhintay****."*

Maxay tahay caddaynta kale ee loo baahan yahay in Ciise yahay Badbaadiyaha keliya? Maxaynu mustaqbalkeena abadiyanka ugu hallaynaynaa mid kale? Ta naxdinta lihi waa, inay adduunka oo dhan dadku weyneeyaan oo caabudaan *niman dhintay* kuwaas oo intii ay noolaayeen muran geliyey qisada Ilaahay iyo akhbaarkiisa. Muxuu qofna aaminaad u saaranayaa mid dhimashada ka adkaan kari waayey oo Erayga Ilaahay been ka sheegay, marka uu *Ka uu Ilaahay Doortay* ka adkaaday dhimashada oo uu kaamilay erayadii nebiyadii?

Isla sida uu waxyiga la kaamilay u yahay hab uu Ilaahay caddayn aan muran ku jirin ku tusayo inuu Baybalku yahay Erayga Ilaahay, ayaa sarakiciddii Ciise ee maalintii saddexaad u

tahay caddayn aan muran ka taagnayn in Isaga oo keliyahi inaga badbaadin karo dhimashada weligeed ah oo ina siin karo nolol daa'imis ah.

## BADBAADIYAHA DADKA OO DHAN

Qorniinku waa cad yahay. Akhbaarka ku saabsan dhimashadii Ciise iyo sarakiciddiisi wuxuu khuseeyaa, *"dhammaan meel kastaba."* Waa in tan lagu celceliyaa oo muhiimaddeeda la tusaa, waayo qaar baa isku deyaya inay kuu sheegaan inuu Ciise u yimid Yuhuudda oo keliya.

Taasi runta way ka fog tahay.[227]

In kasta oo ay run tahay in addeeggii adduunkan ee Masiixu uu ugu horrayn diirradda saarayey Yuhuudda, ujeeddadii uu quruuntaas ugu yimid waxay ahayd inuu badbaado siiyo adduunka oo dhan. Toddoba boqol oo sanno ka hor ayuu nebi Ishacyaah qoray ballanqaadka Ilaahay ee Wiilkiisa ku saabsan, *"Oo weliba quruumahaan iftiin kaaga dhigi doonaa, si ay badbaadintaydu dhulka darafkiisa u gaadho."* (Ishacyaah 49:6)

Masiixu wuxuu adduunka yimid Isaga oo og inay madaxdii Yuhuuddu diidi doonaan inay Isaga boqorkooda u aqbalaan. Wuxuu kaloo ogaa in diidmadaa daraadeed uu Isagu ku bixin dooney ciqaabta dembiga oo uu adduunka badbaado ku siin dooney.

> *"Wuxuu ku jiray dunida, dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga. Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga. Laakiin i***n alla intii*** *aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan,* ***kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay****."*
> (Yooxanaa 1:10-12)

Ciise Masiix waa badbaadiyaha dadka oo dhan, laakiinse *"waa kuwa* ***Magiciisa*** *rumaystay"* ***(ka uu Isagu yahay*** iyo ***wixii ii uu Isagu qabtay*** inuu dembiileyaasha badbaadiyo) ayaa la siinayaa *"amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan."*

Saaxiibkayow, Ilaahay wuu ku jecel yahay adiga oo wuxuu kaa qabaa inaad u qalantid nolosha Wiilkiisa. Sidaas oo ay tahay, kuguma khasbayo inaad Isaga rumaysid.

Doorashada adiga ayuu kuu deynayaa.

> *"Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in* ***mid kastoo isaga rumaystaa*** *uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah."*
>
> (Yooxanaa 3:16)

## WAREER DAMBE MA JIRO

Isla maalintii uu Ciise dhimashada ka sarakacay, ayuu Isagu la lugeeyey oo la sheekaystay laba xertii ka mid ah oo wareersan, kuwaas oo aan weli fahmin sababta ay muhiimka u ahayd inuu Masiixu dhiiggiisa daadiyo oo uu dib u soo noolaado. Ciise ayaa iyaga ku yidhi:

> *"'****Markaasuu ku yidhi, Nacasyo yahow oo qalbigoodu ka raagay inuu rumaysto wixii nebiyada oo dhammi ay ka hadleen!*** *Masiixa miyaanay waajib ku ahayn inuu waxaas oo dhan ku silco oo uu ammaantiisa galo?'*
>
> *Markaasuu ka bilaabay Muuse* [Towreedda/Bilowgii] *iyo nebiyada oo dhan, Qorniinka oo dhanna ayuu uga micneeyey wixii* ***Isaga qudhiisa*** *ku saabsanaa."*
>
> (Luukos 24:25-27)

Ugu dambaystii, wareerkii way ka bexeen. Sidee bay sidaa ugu indho la'aan kareen? Masiixu umuu imaanin inuu baabbi'iyo cadaawayaashii siyaasadda ee wakhtiga kooban uun jirayey; wuxuu Isagu u yimid inuu ka guuleysto cadaaweyaal ka sii khatarsan: Shaydaanka, dembiga, dhimashada, iyo naarta!

Goor dambe oo isla maalintaas ah, Ciise wuxuu xertiisii ugu muuqday qol sare oo dabaq ah oo ay Yeruusaalem ka degganaayeen. Wuxuu iyaga tusay gacmihiisii iyo cagihiisii musbaarka lagaga qodbay, waxbuu la cunay, oo wuxuu iyaga u sheegay:

> *"'Kuwani waa hadalladaydii aan idinkula hadlay intii aan weli idinla jiray. Waa inay* ***noqdaan wax walba oo sharciga Muuse iyo Nebiyadii iyo Sabuurrada laygaga qoray oo Igu saabsanaa****.' Markaasuu garashadooda u furay si ay u gartaan Qorniinka. Wuxuuna ku yidhi, 'Sidaasay u qoran tahay, Waa inuu Masiixu silco, oo uu maalinta saddexaad kuwa dhintay ka soo sara kaco, iyo*

*in toobaddii iyo dembidhaafka magiciisa lagu wacdiyo quruumaha oo dhan oo laga bilaabo Yeruusaalem. Idinkuna waxyaalahaas ayaad markhaati ka tihiin.'"*
(Luukos 24:44-48)

Ciise wuxuu xertiisii u sheegay inay iyagu *"waxyaalahan uga markhaati kici dooneen"* quruumaha dhexdooda. Warkoodu waa waa caddaa: *Sayidka samada ka yimid ayaa ciqaabtii dembiga bixiyey oo qof kasta daraaddiis dhimashadii uga guuleystey. Haddii uu qof Ilaahay hortiisa toobadkeeno (is beddel xagga niyadda ah) oo rumaysto (aaminaad dhab oo qalbiga ka timid) Sayid Ciise Masiix iyo shaqadiisii badbaadada ahayd, markaa wuxuu Ilaahay qofkaas siinayaa dembidhaaf iyo nolol weligeed ah.*

## MARTIQAAD NASASHO AH

Dib u xasuuso maalintii toddobaad ee abuuritaanka.

Muxuu Ilaahay maalintaas sameeyey? Isagu wuu nastay.

Muxuu Isagu u nastay? Wuu nastay waayo shaqadiisii waa *"**dhammaatay**. ...Ilaah wuu dhammeeyey shuqulkiisii uu sameeyey, oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay **shuqulkiisii uu sameeyey oo dhanba**."* (Bilowgii 2:1-2)

Ma jirin wax kale oo looga baahnaa in lagu daro shaqadii Ilaahay ee abuuritaanka. *Waa dhammaatay.* Sidaas oo kale, ma jirin wax kale oo loo baahnaa in lagu daro shaqada Ilaahay ee badbaadada. *"Waa dhammaatay!"*

Isla sidii uu Ilaahay u nastay ee ugu farxay shaqadiisii abuuritaanka, ayuu adiga iyo anigana inagu martiqaadayaa inaynu nasano oo ku rayrayno shaqadiisa dhammaatay ee badbaadada. *"Waayo, **kii nasashadiisa galay**, Isaga qudhiisuna **waa ka nastay shuqulladiisii sidii Ilaah kuwiisii uga nastay**."* (Cibraaniyada 4:10)

Iyada oo ay tobanaan kun oo diimood oo adduunka ka jiraa ku qaylinayaan, "Wax dhammaaday ma jiro. Sidan iyo sidaas samee! Dadaal dheeraad ah samee! Ciise wuxuu yidhi, *"Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, **oo anigu waan idin nasin doonaa**."* (Matayos 11:28)

Adigu ma nasanaysaa oo ma ku farxaysaa waxa uu Ilaahay adiga kuu qabtay?

## AFARTAN MAALMOOD OO KALE AY SAYIDKA LA JOOGEEN

Sayid Ciise wuxuu xertiisii la joogey muddo afartan maalmood ah kaddib markii uu dhimashada ka sarakacay. Waxyaalo badan oo boqortooyada Ilaahay ku saabsan ayuu iyaga baray. Way eegeen Isaga oo jidhkiisii taabteen—jidh si buuxda u ammaanan oo samaawi ah oo aanu wakhtigu xaddidi karin—jidhkan oo kale oo ay kuwa Isaga rumaysani maalin heli doonaan.

Xertii waxay la socdaaleen, oo la hadleen, oo la cuneen Sayid Ciise. Wuxuu iyaga xasuusiyey inuu dhowaan ka tegi dooney, laakiinse uu Aabbuhu samada ka soo diri doono Ruuxa Quduuska kaas oo mid kasta oo iyaga ah noloshiisa dhexdeeda ku noolaan dooney. Ruuxa Quduuska ah ayaa iyaga ku hoggaamin oo ku xooggeyn dooney inay quruumaha dhexdooda Masiixa uga markhaati kacaan, dabadeedna maalin ayuu Isagu—Ciise—adduunka ku soo laaban doonaa si uu ugu xukumo xaqnimo buuxda.

Maalintii afartanaad kaddib markii uu Ciise sarakacay, ayuu xertiisii kula kulmay Buur Seytuun oo Yeruusaalem barigeeda ahayd korkeeda.

Waxaa la gaadhey wakhtigii uu ku noqon lahaa *"Guriga Aabbahii."* (Yooxanaa 14:2)

## SAMADA AYUU U BAXAY

> *"Oo intuu iyagii la shiray, ayuu wuxuu kula dardaarmay, oo ku yidhi, Yeruusaalem ha ka tegina, laakiinse suga ballankii Aabbaha "oo aad iga maqasheen, waayo, runtii Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay biyo, laakiinse waxaa laydinku baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah maalmo aan badnayn dabadood…* ***Waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog.****'*
>
> *Oo kolkuu waxyaalahaas yidhi dabadeed, iyagoo eegaya,* ***ayaa sare loo qaaday Isagii****, oo daruur baa indhahoodii ka qarisay.*

> *Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya, ayaa waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba, oo waxay ku yidhaahdeen, 'Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan?* ***Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa****."* (Falimaha Rasuullada 1:4-11)

## GUUL SAMADA LOOGA DABBAALDEGEY

Markaa, isla sidii ay nebiyadu hore ugu sii sheegeen, Wiilka Ilaahay *"samada ayuu u baxay."*[228] Ka, muddo saddex iyo soddon sanno ka hor ah, si iskiis ah Isaga oo ay malaa'igaha samadu amaanayaan ku beddeshey inuu hoos u dego oo dadku ku kajamaan, ayaa hadda gurigiisii dhabta ahaa imaanayey! Laakiinse is beddel ayaa Isaga ku dhacay. Ka dadka ka abuuray arraggiisu wuxuu hadda lahaa suuradda dadka oo kale.

Qorniinku faahfaahin badan inagama siin ku noqoshadii uu Wiilka Ilaahay ee samada. Laakiinse intan baynu ognahay: inay ahayd dhacdo ammaan iyo sharaf leh!

Waxaan sawiran karnaa cutubyo malaa'ig ah oo aan tiradooda la soo koobi karin iyo kuwii Aadan farcankiisa ahaa ee badbaadey ee halkaa joogey oo filasho weyn ku sugayga markii uu Sayidku soo gelayey albaabkii jannada. Waxay Isaga u yaqaaneen inuu yahay *Wiilka Ilaahay* iyo *Boqorka Amaanta*, laakiinse waxay hadda Isaga la kulmayeen Isaga oo ah *Wiilka Aadanaha* iyo *Wanka Ilaahay*.

Samada oo dhan aamusnaan baa jirtey.

Isla markiiba waxaa aamusnaantii jebiyey cod turumbo oo macaan oo samaawi ah iyo malaa'ig ku qaylinaysa: *"Madaxiinna kor u qaada, Oo albaabbada daa'imiska ahow! Kor ha laydiin qaado, Oo waxaa soo geli doona Boqorka ammaanta!"* (Sabuurradii 24:7)

Albaabbadii ayaa la wada fura, iyadoo sawaxaad soo dhoweyn ahi jirto, badeedna waxaa soo galay Kii Guuleystey, Wiilka Ilaahay Laftiisa, Wankii, Wiilka Aadanaha ee dagaalka weyn soo galay—**Ciise!**

Kuwii badnaa ee amaanayey ayuu dhex maray, oo kor u sii

socday ilaa uu gaadhay carshigi Aabbaha. Intuu soo jeestey, ayuu fiiriyey dadkii badnaa ee farcanka Aadan ahaa ee badbaadey. Wuuna fadhiistay.[229]

Hawshii waa la dhammeeyey.

Kuwii badnaa ee badbaadey ee Isaga hor joogey ayaa sujuudey oo hal cod ku wada yidhi:

***"Istaahil waxaa ah Wankii!"*** (Muujintii 5:12)

War muxuu kani ahaa dabaaldeg weyn! Muxuu dabaaldeg weyn yahay! Waa dabaaldeg iyo farxad aan weligeed dhammaanayn.



# 26

# Ehlu-Diin Ilaahay Ka Fog

Waxaa laga yaabaa inaad maqashay odhaahda ah: *Markaad wax ku soo dhaafay dib uga fiirsatid baad si fiican u fahantaa*. Dhakhaatiirta indhaha ee Waqooyiga Ameerika waxay *Aragga Fiican* saldhig uga dhigaan *20/20*. Taas macnaheedu waa in haddii uu arraggaagu yahay 20/20, aadan u baahnayn muraayadaha indhaha.

Marka aad *dib u fiirino oo uga fekerno* wixii hore u dhacay, waxaynu arkaynaa sida saxsanayd ee ay ahayd inaynu arrin la soo dhaafay u qabano, laakiinse waa goor taas la soo dhaafay. Dib u fiiriska ama uga fekerka arrin ee noocan ahi waxba ma tarayo.

Laakiinse, marka laga hadlayo qisada iyo akhbaarka uu Ilaahay muujiyey qarniyaal badan ka hor, dib u fiirinta ama uga fekerka taasi waa mid wax taraysa oo qumman. Waxay taasi inoo oggolaanaysaa inaynu ka gudubno caqabadaha waaweyn oo aynu runta iyo khaladka kala garano. Waa sababtaa tii uu Ciise xertiisii ugu yidhi:

> *"**Waxaa barakaysan indhihiinna, waayo, wax bay arkaan**, iyo dhegihiinna, waayo, wax bay maqlaan. Runtii waxaan idinku leeyahay, **nebiyo badan iyo niman xaq ah ayaa doonay inay arkaan waxaad aragtaan**, mana arkin, iyo inay maqlaan waxaad maqashaan, mana ay maqlin."*
>
> (Matayos 13:16-17)

Kuwa nool markii uu Masiixu adduunka yimid dabadeed, waxay heleen barakada ah inay awoodaan inay taariikhda dib u

fiiriyaan, oo bartaan Erayga Ilaahay oo la kaamilay, oo si fasiix ah u arkaan qorshaha Ilaahay oo buuxa.

Innaga oo fikirkan niyadda ku hayna, oo ka baaraan-degeyna dhaammaan waxyaalihii aynu socdaalkan aynu Qorniinka ku baranayney ku soo aragnay, aynu mar kale dib ugu laabano *Kitaabka Bilowyadii.*

## DIB U JALLEEC QAABIIL IYO HAABIIL

Cutubka afraad ee Bilowgii waa cad yahay: Qaabiil iyo Haabiil labadoodaba dhibaatada dembigu way saamaysay. Markii ay koreen, midkood kastaa wuxuu isku deyey inuu Ilaahay caabudo laakiinse mid keliya ayuu Ilaahay aqbalay.

> *"RABBIGUNA wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii; laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin."*
> (Bilowgii 4:4-5)

Innaga oo dib u jaleecayna wixii aynu Baybalka ka soo barannay, maadaama aynu maqallay qisada ah Ciise Masiixa ah Badbaadiyaha dembiileyaasha, way fududdahay inaynu fahanno sababta, kumanyaal sanno ka hor uu, *"RABBIGU **u eegay** Haabiil iyo qurbaankiisii; laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu **uusan u eegin**."*

Wankii uu haabiil qalay wuxuu tilmaamayey Ciise, Wanka Ilaahay, kaas oo dhiiggiisa u daadin dooney dembiileyaasha. Qudaarkii Qaabiil bixiyey may tilmaamayn Ciise.

Halka uu Haabiil niyadda ku hayey ama hore u fiirinayey waxa dhici dooney, innagu waxaynu maanta dib u fiirinaa waxa uu Ciise ku sameeyey ama ku meel-mariyey dhimashadiisii iyo sarakiciddiisii.

> *"Dhiigga Ciise Masiix… **wuxuu inaga nadiifiyaa** dembi oo dhan."* (1 Yooxanaa 1:7)

## RUMAYSI BADBAADO KEENAYA

Ilaahay wuxuu Haabiil u saamaxay isla sida uu dembiileyaasha maanta u saamaxo. Mar allaale marka uu dembiile qirto

xaqdarronimadiisa oo uu aamino RABBIGA iyo badbaadadiisa, qofkaa waa la saamaxaa oo waxaa la siiyaa hadiyadda Ilaahay ee xaqnimada. Sidaas oo kale ayaa ku dhacday nebiyadii iyo muuminiintii oo dhan wakhti kasta ha noolaadeene.

Tusaale ahaan, sidii aynu hore u soo ogaaney, Ibraahim *"wuu* ***rumaystay*** *RABBIGA, taasna wuxuu Isagu ugu tiriyey* [ku siiyey] ***xaqnimo****."* (Bilowgii 15:6) In la yidhaahdo Ibraahim, *"wuu rumaystay RABBIGA,"* macnaheedu waa inuu Ibraahim ku *kalsoonaa* wixii Ilaahay sheegay inay run ahaayeen, oo uu Ibraahim *aaminey* Erayga Ilaahay. *Ilaahay* oo keliya ayuu isagu rumeeyey.

Sidii nebi Ibraahim oo kale, Boqor Daa'uud wuxuu isna rumeeyey ballammadii Ilaahay. Qalbi farxaddi ka buuxdo, ayuu Daa'uud ku qoray, *"Waxaa barakaysan kii xadgudubkiisa la cafiyey, oo dembigiisa la daboolay. Waxaa barakaysan ninkii aanu RABBIGU dembi ku tirin."* (Sabuurradii 32:1-2) Wuxuu sidoo kale Daa'uud ku dhawaaqay, *"Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis, Oo weligay guriga RABBIGA ayaan degganaan doonaa!"* (Sabuurradii 23:6)

Sidaas oo kale ayaa kuwii Ciise *hortiis* noolaa, deyntii dembiyadii dadkii ay ka midka ahaayeen Haabiil, Ibraahim, iyo Daa'uud loo *daboolay* waayo RABBIGA iyo qorshihiisa ayay aamineen. Laakiinse markii uu Masiixu dhintay, deyntii dembiga ahayd ee iyaga lagu lahaa si buuxda ayaa looga *tirtiray* xagga Ilaahay.

Maanta, waxaynu innagu noollahay Masiixa *kaddib*. Warka wanaagsan ee Ilaahay waa in haddii aad rumaysatid wixii uu Sayid Ciise adiga kuu sameeyey dhimashadii uu beddelkaaga u dhintay darteed iyo sarakiciddiisii guusha ahayd, uu Ilaahay buuggaagtiisa ka tirtirayo deynta dembiga ah ee lagugu leeyahay, oo ku siinayo xaqnimada Masiixa, oo uu hubaal kaaga dhigayo inaad "*weligaa guriga RABBIGA degganaato."*

Waxan oo dhan iyo wax ka sii badan adiga ayaa leh haddii aad rumaysato.

Sayid Ciise oo aad rumaysato macnaheedu waa inaad Isaga iyo wixii uu kuu qabtay si buuxda u aamintid. Si aad micnaha aaminaadda si ka sii fiican ugu fahantid, mala-awaal inaad soo gashid qol ay kuraas badani taalo. Qaarkood ayaa jaban.

Qaarkoodna taag ma leh oo si sahlan bay ku jabayaan haddii culays la saaro. Qaarkood baa qurux badan, laakiinse marka aad u sii fiirsatid waxaad arkaysaa inaanay hagaagsanayn oo aadan isku hallayn karin inaad ku fadhiisato. Adiga oo is leh inaan qolka kursi lagu fadhiisan karaaba oolin, ayay ishaadu ku dhacday kursi adag oo si fiican loo sameeyey. Kaas ayaa dhinaciisa tagtaa oo ku fadhiisataa. Rumaysigaaga ayaad kaas dul saarataa. Oo ku nasataa. Waxaad og tahay inuu kaasi ku haynayo oo aanu ku sii deyneyn.

Kuwa Isaga iyo shaqadii uu dhammeeyey ku nasta marna Ciise Masiix kuma hungoobi doonaan.

## RUMAYSI KHATAR LEH

Wanaagga rumaysgeenu wuxuu u dhigmaa oo keliya qiimaha *waxa* aynu rumaysannahay. Qof kastaa rumaysi buu leeyahay, laakiinse dhammaantood isku wax ma rumaysna.

Haabiil wuxuu rumaystay Ilaahay iyo jidkiisa saamaxaadda iyo xaqnimada.

Qaabiil wuxuu rumaystay fikradihiisa iyo dadaalkiisa qof ahaaneed.

Qaabiil iyo dhammaan kuwa diidey baadhitaanka Ilaahay iyo daawadiisa dhibaatada dembiga waxaa lagu meteli karaa kuwa masaska ciyaarsiiya ee aan telefishinka ku arkay. Nin ayaa waxaa qaniinay maska weyn oo kobra (cobra) ah, laakiinse wuxuu diidey in lagu duro daawadii suntaa liddiga ku ahayd ee naftiisa badbaadin lahayd. Wuxuu u maleeyey inuu leeyahay xoog uu sunta maskaas iskaga difaaco.

Ninkaasi rumaysi buu lahaa, rumaysi *xooggan*, rumaysi *aan waxtar lahayn*. Wuxuu kaasi rumaysigiisa saartay naftiisa halkii uu ka saaran lahaa daawadii dhakhtarka.

Doorashadiisaas ayuuna naftiisii ku waayey.

Qorniinku waa cad yahay. Haddii aynu rumaysigeena saarano nafteena, ee aynaan saaran badbaadada Ilaahay, waa sidii inaga oo raacna *"jidkii Qaabiil"* oo dabadeed *"weligeen galla madowga gudcurka ah."* (Yuudas 1:11, 13) Fikraddii Qaabiil ee ahayd inuu qofku iskiis dadaal shakhsiyan ah ugu shaqaysan karo raalli ka ahaanshaha ilaahay, waxay ahayd mid mar kasta liddi ku ah qorshaha Ilaahay ee badbaadada.

Sidaas oo ay tahay, ilaa maantadan dadku waxay qaadaan *"jidkii Qaabiil."*

## MIISAANKA BINI'AADANKA

Maalin maalmaha ka mid ah ayay Yuhuud ehlu-diin ahi Ciise weydiiyeen, *"**Maxaannu** yeelnaa si aannu shuqullada Ilaah u samayno? Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, 'Kanu waa shuqulkii Ilaah inaad **rumaysataan Kii** uu soo diray.'"* (Yooxanaa 6:28-29) Kuwan su'aasha weydiiyey waxay doonayeen inay *"camallo sameeyaan."* Ciisena wuxuu iyaga u sheegay inay *"Isaga rumeeyaan."*

Wareerka Yuhuuddan haystey waa mid meel kasta ka jira.

Walaashay iyo ninkeedu waxay deggan dhulka guudka ah ee waddanka Papua New Guinea. Qabiil go'doon ah oo halkaa deggan ayay si ficil ahaan ah u caawiyaan una baraan Ilaaha keliya ee runta ah iyo akhbaarkiisa abadiyanka ah. Warkan kooban waxaa soo diray mid iyaga la shaqeeya oo la sheekaystay nin dhegeysanayey "Hadalka Ilaahay" (Sidaa ayay reer Papua ugu yeedhaan Baybalka):

> "Kaddib markii uu [ninkaasi] maqlay Ciise oo lagu magacaabay *'Kibista nolosha,"* ayuu yidhi, 'aad bay sahlan tahay, intii aan noolaa oo dhan baan isku deyayey inaan janno shaqaysto oo aan Ilaahay hortiisa nadiif ku ahaado, halkana waxaad adigu noogu sheegeysaa in waxa keliya ee aanu u baahannahay inaanu samaynaa ay tahay inaanu Ciise rumayno?"
>
> Waxaan ninkaas mar kale u sheegay wixii uu Ciise yidhi, *"Anigu waxaan ahay kibista nolosha."* (Yooxanaa 6:35). Dabadeedna waxaan isaga u sheegay inuu mar kale akhriyo Yooxanaa 6:29. *'Kanu waa shuqulkii Ilaah inaad **rumaysataan Kii** uu soo diray.'* Wuxuu kaloo akhriyey Yooxanaa 3:16: *'Mid kastoo **Isaga rumaystaa** ma lumi doono laakiinse wuxuu lahaan doonaa nolosha weligeed ah.'* Waxaan ninkii weydiiyey haddii uu Ilaahay innaga caawimaad inooga baahan yahay, sidii Isaga oo aan awood ku filan oo inagu badbaadiyo lahayn.


> Intuu qoslay ayuu yidhi, 'Dabcan maya! Ilaahay caawimaaddeena uma baahna.'
>
> 'Markaa, sida Erayga Ilaahay leeyahay, Ilaahay miyuu camalladaada u baahan yahay si uu jannada kuu geeyo?'
>
> Ninkii madixiisa ayuu ruxay oo isaga oo aad u fekeraya ayuu tegey."

In kasta oo uu akhbaarka Ilaahay cad yahay, dadka adduunka ku nool, ha ahaadeen qabiil go'odoon ah ama kuwa dhaqammada horumaray leh ee Sunagogyada, kaniisadaha, iyo masaajidda wax ku caabuda, ayaa weli ku dhegan in Maalinta Xukunka uu Ilaahay miisaan weyn camalladooda wanwanaagsan iyo kuwooda xunxun saari doono. Waxay u malaynayaan in haddii uu miisaankoodu 51% dhinaca wanaagsan u bato, ay Jannada geli doonaan, laakiinse haddii 51% miisaankoodu dhinaca camallada xunxun u liico ay markaa naarta geli doonaan.

Habka noocan ah ee ay shuqullada wanwanaagsani ka miisaanka weynaanayaan kuwa xunxun xataa marna lagama isticmaalo maxkamadaha adduunkan. Maxkamadda jannada ee Ilaahayna marna sidaas lagagama shaqayn doono.

Si fiican tan uga feker.

Runtii, ma waxaad dooneysaa in meesha aad aakhiro tegeyso ay ku salaysnaato wanaaggaaga iyo dadaalkaaga shakhsiyanka ah?



Waxaad ku mahadnaqi kartaa inaan habkan miisaanka ku salaysan **laga helayn** Baybalka.

## HEERKA ILAAHAY DEJIYEY

Ilaahay wuxuu doonayaa bilaa iin ama wanaag kaamil ah.

Kuwa hela hadiyadda Ilaahay ee xaqnimada ah oo keliya ayaa isaga la joogi kara. Haddii saxar keliya oo dembi ahi Maalinta Xukunka kuu qoran yahay, adigu Jannada geli maysid.

Ilaahay wuxuu inaga doonayaa xaqnimo buuxda.

Sidii aynu hore ugaga soo fekerney, dembigu wuxuu Ilaahay ugu urayaa isla sida uu doofaar weyn bakhtiya oo qudhmay oo gurigeena ku jiraa inoogu uro. Cadar aynu ku buufinaa miyuu bakhtigaa urta iyo fadaranimada ka baabi'inayaa? Maya! Sidaas oo kale camallo diineed si kasta ha u badnaadeene inagama baab'inayaan fadaranimada inoo sababaysa inuu Ilaahay ina aqbali waayo.

Ilaahay wuxuu xataa hal dembi oo keliya ugu neceb yahay isla sida aynu ku nahay hal dhibic oo sun ah. Biyo dheeraad ah dhibicdaa sunta ah lagu daraa miyay ka baabi'inaysaa khatarteeda? Maya! Sidaas oo kale camallo wanwanaagsani si kasta ha badnaadeene inama daahirin karaan oo inagama badbaadin karaan xukunka abadiyanka ah.

Marka laga hadlayo baabi'inta deynteena dembiga ah ama Ilaahay hortiisa oo aynu kuwo xaq ah ku noqono, *innagu iskeen isuma caawin karno.* Isaga ayaa ina siiyey wax kasta oo aynu u baahannahay si aynu weligeen ugu noolaano Isaga hortiisa oo ah daahir kaamil ah.

## RUMAYSIGA IYO CAMALLADA

Dhammaan kuwa Sayid Ciise Masiix rumaysan, kaas oo ciqaabtooda dembiga si buuxda u bixiyey, Ilaahay wuxuu ku leeyahay, *"Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco* [naxariis aydnaan u qalmin] *xagga rumaysadka* [aaminaadda waxa uu Masiixu adiga kuu qabtay]*, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin."* (Efesos 2:8-9)

Jannada dhexdeeda faan kama jiri doono.

Badbaadada waxaa lagu helaa *"nimco"* daraadeed. Babaadadu waa *"hadiyadda Ilaahay."* Waa hadiyad aynaan u qalmin oo ay tahay inaynu si mahadnaq leh ku aqbalo, mana

aha wax sidii billad oo kale loo shaqaysanayo, *"si aan ninna ugu faanin."* Sidaa oo ay tahay, ta naxdinta lihi waa in dadka ehlu-diinka ah badankoodu arrintan jaahil ka yihiin, sida qofkan Bariga Dhexe nooga soo qoray:

> Mowduuca: Email la soo diray
>
> Arrinta ugu muhiimsan ee rumaysigu waa aaminaadda Ilaaha keliya ee runta ah, wanaag la sameeyo, ficillada sharka ah oo la iska ilaaliyo. Kuwan ayaa badbaadadayada ah.

Haddii ka baxsashada xukunka abadiyanka ah iyo Ilaahay hortiisa oo la joogaa ay ku xidhan tahay dadaalkaaga shakhsiyanka ah, sidee ayaynu marna ku ogaan karnaa inaynu wanaag inagu filan samaynay ama aynu si inagu filan sharka uga leexanay si aynu Jannada ugu qalano? Marna badbaadadeenu mid sugan uma noqonayso?

Saddex kun oo sanno ka hor, ayuu nebi Yoonis yidhi, *"Badbaado waxaa leh RABBIGA."* (Yoonis 2:9)

Aynu tan Ilaahay ku ammaano!

> *"Waayo, idinku waxaad ku **badbaaddeen** nimco **xagga rumaysadka**, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah**, mana aha xagga shuqullada**, si aan ninna ugu faanin."* (Efesos 2:8-9)

Erayga Ilaahay waa fasiix: Shuqulladaada oo aad isku hallaysaa si ay ciqaabta dembiga kaaga badbaadiyaan waxay ka dhigan tahay adiga oo diidey hadiyadda Ilaahay ee badbaadada.

Markaa, halkee ayay dembiga oo la iska ilaaliyo iyo shuqullo wanwanaagsan oo la sameeyaa tan ka soo gelyaan? Aayadda ku xigta ayaa inoo sheegeysa:

> *"Waayo, innagu waxaynu nahay wixii uu sameeyey, oo waxaa laynoogu uumay Ciise Masiix **shuqullada wanaagsan aawadood** oo Ilaah hore ugu diyaariyey inaynu ku soconno."* (Efesos 2:10)

Kala duwanaanshuhu waa cad yahay. Innaga shuqullo

wanwanaagsani ***inama aysan*** badbaadin. Laakiinse waxaa la inoo badbaadiyey shuqullo wanwanaagsan ***daraaddood***.

> *"Ilaaheena weyn oo ah Badbaadiyeheena Ciise Masiix… Nafsaddiisuu u bixiyey aawadeen**, inuu dembi oo dhan** inaga furto oo uu inaga dhigto dad daahirsan oo uu isagu leeyahay oo ku **dadaalaya shuqullo wanaagsan**."*
> (Tiitus 2:13-14)

Hordhaca buuggani wuxuu ku bilowday beeldaajiye saaxiibkii ku yidhi, "Camalladii wanwanaagsanaa ee aad samaysay daraaddood baad jannada ugu qalantaa…"

Erayga Ilaahay wuxuu fashilayaa khaladka weyn ee ninkani ku fekerayo.

Ma jiro mid "u qalma inuu jannada ku tago" "camalladiisa wanwanaagsan" daraaddood. Laakiinse kuwa helay haddiyada cajiibka ah ee wanaagsan ee Ilaahay ee ah nolosha weligeed waxay *dooni doonaan* inay iska ilaaliyaan sharka oo wanaag u sameeyaan ammaanta Ilaahay iyo barakaynta dadka kale daraaddood.

## MIDHUHU MAAHA XIDIDKA

Shuqullada wanwanaagsani marna ***sabab*** *umay ahayn badbaadada* laakiinse waa inay mar kasta noqdaan ***maxsuulka*** *ka soo baxa badbaadada*. Tusaale ahaan, Ciise sidan ayuu xertiisa baray:

> *"Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub oo ah, Waa inaad isjeclaataan; sidaan idiin jeclaaday, idinkuna waa inaad isu jeclaataan. Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan."* (Yooxanaa 13:34-35)

*Badbaadadu ma waxay ku xidhan tahay* in dadka loo jeclaado oo loo daryeelo sidii uu Ciise u jeclaa oo kale? Maya. Haddii ay sidaas ahaan lahayd, midkeena Jannada ma geli kareen maadaama uu Ciise yahay Ka keliya ee abid dadka kale u jeclaa sida ugu wanaagsan ee aan is bedbeddelka lahayn.

Miyay tahay in jeclaanta iyo daryeelka dadka kale noqoto *dabeecadda ama sifada* muuminiinta runta ah? Haa. "*Sidaasay* ***dadka oo dhammi*** *idinku* ***garan doonaan*** *inaad xertaydii tihiin,* ***haddaad*** *jacayl isu qabtaan.*"

Dadka Ilaahay ee runta ahi waxay rumaysigooda *ku tusaan* sida ay u nool yihiin.[230]

Waa lagama maarmaan inaynaan *xididka* badbaadada ku khaldin *midhaha* badbaadada. Kuwa Masiixa aaminsani waa inay mahadda ay Sayidka u hayaan hadiyaddiisa badbaadada (xididka) daraadeed ku tusaan nololahooda quduuska ah, ee jacaylka iyo mutadawacnimada miidhan ah, ee is celinta leh (midhaha).

Dadka Ilaahay shuqullo wanwanaagsan uma sameeyaan si ay wanaag u kasbadaan; shuqullo wanwanaagsan ayay iyagu sameeyaan waayo waxaa iyaga la siiyey wanaag aanay u qalmin.

**DIIN BEEN AH**

Qaabiil baa bilaabay diinta "adigu iskaa janno u shaqayso." Halkii uu Ilaahay ugu imaan lahaa dhiigga wan allabari ah, wuxuu ula yimid fikradihiisa iyo dadaalkiisa shakhsi ahaaneed. Markaa, ducooyinkii Qaabiil meel ka dhac iyo xumaan bay Ilaahay ku ahaayeen.

> *"Kii dhegtiisa ka leexiya inuu sharciga maqlo,* ***xataa baryootankiisu waa karaahiyo****."* (Maahmaahyadii 28:9)

Qaynuunka Ilaahay wuxuu qorayey dhiig wan oo la daadiyey ama allabari kale oo ku habboon inuu dembiga daboolo. Maadaama uusan Qaabiil la imaan wixii uu Ilaahay ka doonayey, *"xataa baryootankiisu waa [waxay ahaayeen] karaahiyo."* Qaabiil diin wuu haystey, laakiinse waxay ahayd diin been ah. Allabarigiisii muu tilmaamayn Badbaadiyaha la ballanqaaday iyo ku dhimashadiisa iskutallaabta. Sidaas daraadeed:

> *"RABBIGU wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii; laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu*

> *eegin. Qaabiilna aad buu u cadhooday, wejigiisiina wuu madoobaaday.*
>
> *Oo RABBIGU wuxuu ku yidhi Qaabiil, 'Maxaad u cadhoonaysaa? Maxaase wejigaagu u madoobaaday? Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen?'"* (Bilowgii 4:4-7)

ILAAHAY si naxariis leh ayuu Qaabiil ula hadlay, oo wuxuu siiyey wakhti uu ku toobadkeeno, oo kaga soo laabto camalladiisa aan xaqa ahayn oo uu u hoggaansamo qorshaha xaqa ah ee Ilaahay.

Qaabiilse wuu sii cadhooday. Muu dooneyn inuu diintiisa isaga la quruxda badnayd ee uu rabey inuu camalladeeda jannada ku galo ku beddelo dhiig si arxandarro ah wan looga daadiyey oo allabari ahaan loo qalay. Magaca Ilaahay isaga oo isticmalaya ayuu doonayey inuu wax kasta siduu rabo u sameeyo.

Taasina xaggee ayay isaga geysey?

## DIIN CADAAWADEED

> *"Qaabiilna wuxuu ku yidhi walaalkiis Haabiil, ina keen, aynu duurka tagnee. Waxaana dhacday, markii ay duurka joogeen,* ***in Qaabiil walaalkiis Haabiil ku kacay oo dilay isagii****."* (Bilowgii 4:8)

Qaabiil, oo iskala weynaa inuu wan allabari ahaan ugu qalo dembigiisa daraaddiis, iskalama uusan weyneyn inuu walaalkiis dilo.

Qaabiil wuxuu waddo u furay diimo iyo habab siyaasadeed mustaqbalka imaan dooney kuwaas oo ku kajami dooney, silcin dooney, oo xataa dili dooney kuwa diida inay u hoggaansamaan qaynuunnada iyo dhaqammada khasabka ah.

Sidii Qaabiil oo kale, dad badan oo ehlu diin ah oo adduunka ku nool ayaa cadaawad iyo dil isticmaala si ay diintooda u difaacaan. Waxay ficilladooda daraaddood adduunka ku tusayaan sida aanay rumaysigooda ugu kalsoonayn iyo sida ay kalsooni aad u yar ugu qabaan inuu Abuurahoodu arrimaha siduu rabo ugu qabto.

Nin Maraykanka ku nool, oo aanu aad emaillo isu dhaafsanay, ayaa soo qoray:

Mowduuca: Email la soo diray

Ninkii ugu dambeeyey ee Nebiga Quduuska ah hortayda ku caayey ilkaha ayaan ka daadiyey. Aad baan ugu faraxsanahay inuu marka labaad ee nebiga caayo uu carab la' yahay.

Dadka aan diintayda rumaysnayn waa in lagu khasbo haddii kale la laayo. Jid kale uma banaana.

Ninkan erayadiisa iyo ficilladiisu waxay si weyn uga duwan yihiin Sayid Ciise oo yidhi, *"Laakiin waxaan idinku leeyahay kuwiinna maqlaya, **cadowyadiinna jeclaada**, kuwa idin necebna wax wanaagsan u sameeya. Kuwa idin habaara u duceeya, kuwa idin caayana Ilaah u barya."* (Luukos 6:27-28)

Sidaas si la mid ah, iskutallaabta dusheeda, Ciise wuxuu ugu duceeyey kuwii Isaga ku qodbay, ***"Aabbow, iyaga cafi, waayo, garan maayaan waxay samaynayaan***.*"* (Luukos 23:34)[231]

## QAABIILKII AAN TOOBADKEENIN

Haddaynu qisada Qaabiil dib ugu laabano, kaddib markii uu walaalkiis diley, Ilaahay wuxuu weli isaga siiyey fursad uu kaga toobadkeeno fikirkiisii iyo jidadkiisii sharka ahaa.

> *"RABBIGUNA wuxuu Qaabiil ku yidhi, 'Walaalkaa Haabiil meeh?' Kolkaasuu yidhi, 'Ma aqaan: ma anigaa ah walaalkay ilaaliyihiisa?'*
>
> *Kolkaasaa Ilaah ku yidhi, 'Maxaad samaysay? Codkii dhiiggii walaalkaa ayaa dhulka iiga dhawaaqayaye. Oo haatan waad ka habaaran tahay dhulkii afkiisa u kala qaaday si uu dhiiggii walaalkaa gacantaada uga helo.'"*
>
> (Bilowgii 4:9-11)[232]

Qaabiil wuu diidey inuu dembigiisii qirto oo uu si is hoosaysiin Ilaahay ugu toobadkeeno isaga oo wan dhiiggiisa daadinaya oo allabari ahaan u qalaya. Laakiinse*, "Qaabiil RABBIGA hortiisuu ka tegey"* (Bilowgii 4:16)

Marna Qaabiil ma toobadkeenin. Laakiinse halkii uu jidka Ilaahay uga hoggaansami lahaa, wuxuu sii wadey inuu fikradihiisa

sii raaco. Wuxuu bilaabay ilbaxnimo weyn, laakiinse waxay ahayd ilbaxnimo aan Ilaahay Abuuraha ah u hoggaanayn.[233] Sidii Qaabiil oo kale, farcankiisiina waxay ku sii socdeen jidkii ay halaagga ku kasbanayeen ee ay ku samaynayeen waxa naftooda uun jeceshahay.

Cutubka afraad ee Bilowgii ayaa lagaga sheekaynayaa qisada Lameg, oo ahaa farcankii lixaad ee Qaabiil. Sidii awowgiisii hore oo kale, Lameg wuxuu ahaa nin leh naf jeclaysi, cir weyni, aargoosi, iyo gacan ku dhiiglenimo. Wiilashiisii ayaa sayniska iyo cilmiyo kale heer ka gaadhey. Waxyaalo badan oo muhiim ayay iyagu aqoon u lahaayeen, laakiinse may aqoon Ilaahay.

Dadkii *jidkii badbaadada ee Ilaahay* kamay jeesan oo keliya, ee waxay kaloo ka jeesteen inay u *noolaadaan sida uu Ilaahay iyaga ka doonayey*.

## BINI'AADAN AAN TOOBADKEEN LAHAYN

Toddoba fac oo keliya Qaabiil dabadiis, sidan ayuu ILAAHAY bini'aadanka ku qiimeeyey:

> *"Rabbiguna wuxuu arkay in dadka sharkiisu ku badan yahay dhulka, iyo in male kasta oo fikirrada qalbigiisu ay* ***shar keliya yihiin had iyo goorba****."* (Bilowgii 6:5)

Markii nebi Nuux la gaadhey, isaga iyo qoyskiisii ayaa ahaa kuwa keliya ee adduunka joogey ee weli Abuurahooda aaminsanaa. Diidmadii joogtada ahayd ee ay dadku Ilaahay ku diidayeen ayaa adduunkii daad u sababtay. Nimcadiisa daraadeed, Ilaahay ayaa jid kaas lagaga badbaado keenay, laakiinse siddeed qof oo keliya ayaa jidkaas aqbalay. Nuux iyo xaaskiisii, wiilashoodii Sheem, Xaam, Yaafed, iyo xaasaskoodii, ayaa ahaa dadka keliya ee rumeeyey Ilaahay iyo akhbaarkiisii (Bilowgii 6-8).

> *"Nuux oo Ilaah uga digay waxyaalo aan weli la arkin ayaa cabsaday, oo* ***rumaysad*** *buu ku diyaariyey doonni in reerkiisu ku badbaado, sidaasuu dunida u xukumay oo ku noqday mid dhaxla xaqnimada* ***rumaysadka*** *ku timaada."*
> (Cibraaniyada 11:7)

In kasta oo ay saynisyahannada maantu ku kajamaan qisada Baybalka ku qoran ee ku saabsan daad adduunka oo dhan saameeyey,[234] midkoodna ma dafiri karo in beri hore adduunka maanta jira ee dhulka ah ay biyo wada qariyeen, oo xayawaan badan oo badda keliya ku nool ayaa hadhaadigoodii laga helay lama-degaanada waaweyn ee adduunka iyo buuraha. Sidoo kale iyagu ma dafiri karaan jeegaanta cirka ka samaysanta marka roob badani da'o, in kasta oo laga yaabo inay kuwaasi ku qoslaan muhiimadda ay leedahay calaamaddaa jeegaantu, taas oo tusaysa ballanka Ilaahay ee ah inuusan Isagu mar dambe adduunka oo dhan daad ku halaageyn.

## FALLAAGO WAREERSAN

Xataa markii iyaga lagu barakeeyey inay noloshooda mar kale dib u bilaabaan xukunkii daadka ahaa dabadiis, dhowr fac dabadeed, dadkii waxay bilaabeen inay mar kale Abuurahooda ku fallaaggoobaan oo ay fikradahooda raacaan. Tusaale ahaan, Ilaahay wuxuu bini'aadanka ku amray inay faafaan oo *"adduunka buuxiyaan."* (Bilowgii 1:28; 9:1) Laakiinse maxay dadkii sameeyeen? Sidaas liddigeeda ayay sameeyeen.

> *"Ina keena, **aynu magaalo dhisannee, iyo munaarad dhaladeedu samada gaadho**, oo aynu **magac yeelannee, waaba intaasoo aynu** dhulka dushiisa oo dhan ku **kala firidhnaaye**."* (Bilowgii 11:4)

U fiirso naf jeclaysiga iyo fallaaganimada qorshayaashooda. Halkii ay ka raaci lahaayeen doonista wanaagsan ee xaqa ah ee Ilaahay iyaga u hayey, waxay samaysteen qorshayashooda inay raacaan xigmaddooda oo magacooda weyneeyaan. Laga yaabee inay u malaynayeen in haddii ay *"munaarad dhaladeedu samada gaadho"* dhistaan ay markaa daad kale ka badbaadayeen. Iyagu waxay ahaayeen sida dad badan oo ehlu diin ah oo maanta jira oo rajeynaya inay xukunka Ilaahay kaga baxsanayaan camalladooda badan ee ay iskood u sameeyaan.

Ilaahay wuu joojiyey qorshihii dadka ee ahaa inay dhammaantood isku meel ku wada noolaadaan. ILAAHAY wuu ogaa inuu qorshaha noocaas ahi bini'aadanka u keeni dooney

caasinimo iyo baaba'. Innaga oo niyadda ku hayna in wakhtigaa taariikhda ah *"adduunka oo dhammu ahaa isku af iyo isku hadal keliya"* (Bilowgii 11:1) Aynu eegno waxa uu Ilaahay sameeyey.

> *"Oo RABBIGU wuxuu yidhi, 'Bal eega, iyagu waa isku dad keliya, oo dhammaan isku af keliya bay leeyihiin, oo waxanuna waa waxa ay bilaabayaan inay sameeyaan, oo haatan wax ka hor joogsan doona waxay damcaan inay sameeyaan ma jiraane. Ina keena, aynu degnee, oo halkaas aynu afkooda iskaga qasnee, yaan midna midka kale hadalkiisa garanine.'*
>
> ***Kolkaasaa RABBIGU halkaas ka kaxeeyey oo ku kala firdhiyey** dhulka dushiisa oo dhan, oo dhisiddii magaaladii way joojiyeen. Sidaas daraadeed magaceedii waxaa loo bixiyey **Baabel**, maxaa yeelay, halkaasaa RABBIGU afkii dhulka oo dhan iskaga qasay; oo halkaasuu RABBIGU ka kaxeeyey iyagii oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oo dhan."* (Bilowgii 11:6-9)

Markii ay is af garan waayeen, dadkii munaaraddoodii iyada oo weli qabyo ah ayay ka tageen oo adduunka ayay ku kala firdheen, isla sidii uu markii horeba Ilaahay iyaga la doonayey. *"Sidaas daraadeed magaceedii waxaa loo bixiyey **Baabel.**"*

Baabel macnaheedu waa "wareer."

Qorshaha Ilaahay oo la diidaa wuxuu mar kasta keenaa wareer.

## DADKA BADANKIISA OO KHALDAN

Hal cashar oo laga baranayo qoomkii Nuux iyo kuwii isku deyey inay munaaraddii Baabel dhisaan waa kan:

> *Dadka badankiisu wuu khaldanaa.*

In kasta oo ay dembiileyaashii isku kalsooni ka helayeen malyuumaadkii qof ee kale ee ay isku fikradda ahaayeen, haddana xukunkii Ilaahay ayaa dhammaantood ku dhacay. Ilaa iyo maantadan, dad badan ayaa u maleeya in fikradda ah jiritaanka Ilaahay iyo aaminaadda akhbaarkiisu tahay mid laga yaabo inay saxsan tahay maadaama dad badan oo kale isla taas rumaysan yihiin.

Nin waddanka Ingiriiska ku nool ayaa qoraalkan gaaban soo diray:

> Mowduuca: Email la soo diray
>
> Haddii aad adigu dooneysid inaad naarta ka badbaadid soo raac diinta adduunka ugu koridda badan …

Haddii ay koritaanka degdegga ah ama tirada badani runta muujiyaan, markaa farcankii Qaabiil, qoomkii Nuux, iyo dadkii Baabel degganaa iyaguna kuwo saxsan bay noqonayaan. Laakiinse khalad weyn bay kuwaasi ku jireen.

> *"Iridda cidhiidhsan ka gala, waayo, iriddu waa* ***weyn*** *tahay, jidkuna waa* ***ballaadhan*** *yahay kan xagga baabbi'idda u kaca, oo kuwa ka galaa waa* ***badan*** *yihiin. Waayo, iriddu waa* ***cidhiidhsan*** *tahay, jidkuna waa* ***yar*** *yahay kan xagga nolosha u kaca, kuwa helaana waa* ***yar*** *yihiin."*
>
> (Matayos 7:13-14)

**QORSHAHA ILAAHAY EE AAN LA JOOJIN KARIN**

Haddii aynu ku noqono qisada ku saabsan qoyskii ugu horreeyey, aynu eegno waxa dhacay kaddib markii uu Qaabiil diley Haabiil.

> *"Aadanna naagtiisii mar kale ayuu u tegey; waxayna dhashay wiil, magiciisiina waxay u bixisay* ***Seed****, iyadoo leh, '****Ilaah abuur kaluu ii soo dhigay Haabiil meeshiisii****; waayo, Qaabiil baa dilay isagii.' Seedna waxaa u dhashay wiil, magiciisiina wuxuu u bixiyey Enoos; markaasaa dadkii waxay bilaabeen inay* ***RABBIGA ku baryaan magiciisa****."*
>
> (Bilowgii 4:25-26)

Damaca iyo qorshaha Ilaahay ee ah inuu Isagu lahaado dad aamina lama joojin karo.

Magaca *Seed* micnihiisu waa *"meeshiisii mid kale baa lagu beddeley."* Xaawa waxay fahansanayd inuu Ilaahay iyada *"abuur kale"* siiyey beddelkii Haabiil, kaas oo uu Qaabiil diley. Farcanka Seed weeye midka *Farcanka naagta* noqon dooney ka dhalan

dooney. Maryan, gabadhii bikradda ahayd ee Ciise hooyadiis, farcankii Seed ayay ahayd. Waxay kaloo ahayd farcankii Ibraahim iyo Daa'uud, isla sidii uu Ilaahay ballanqaaday.

Si kasta oo dadaal dheeri leh oo uu Shaydaanku isugu deyey inuu qorshaha Ilaahay qas ugu rido, qorshahaas uu RABBIGA Ilaaha ahi diyaariyey *"aasaaskii dunida ka hor"* hore ayuu u sii socday.

Ma jiro wax ama mid kaas joojin karey.

## MAGACA RABBIGA

Sidii Haabiil oo kale, Seed wuxuu aaminey Ilaahay iyo jidkiisa saamaxaada oo *"RABBIGA magiciisa ku baryootamay."* (Bilowgii 4:26) Qarniyadii ka dambeeyey oo dhan, adduun ay ka buuxaan dad sidii kuwii berigii Baabel noolaa oo kale isku deyeya inay *naftooda magac u sameeyaan*, waxaa mar kastaba ku dhex noolaa dad sidii Haabiil iyo Seed oo kale, doortay inay rumeeyaan oo ku baryootamaan ***magaca RABBIGA***.

Qaar saaxiibaday ka mid ah ayaa ii sheega inuu Ilaahay boqol magac leeyahay, laakiinse ay yaqaaniin sagaal iyo sagaashan magac oo keliya. Ma laga yaabaa in magaca aanay garanayn yahay ka uu macnihiisu yahay *"RABBIGU wuu badbaadiyaa"?*

Waa kee magacaasi?

Haa, waa magaca ***Ciise***.

Magacaas oo la aamini waayo—*ka uu Isagu yahay* iyo *waxa uu Isagu qabtay*—waa sidii iyadoo la adeeci *waayo* Ilaahay.

Aynu akhrino ducadii rasuul Bawlos ee dadkii ay isku waddanka ahaayeen ee ahayd Yuhuuddii ehlu-diinka ahayd ee Ilaahay ku fallaagowdey.

> *"Walaalayaalow, waxaan qalbigayga ka doonayaa oo Ilaah ka baryaa inay iyagu badbaadaan. Waayo, waxaan markhaati u furayaa inay iyagu* ***Ilaah qiiro weyn*** *u qabaan,* ***laakiinse xagga aqoonta ma aha****. Waayo, iyagoo* ***aan ogayn xaqnimada Ilaah*** *oo* ***doonaya inay taagaan tooda****,* ***ayayan hoos gelin Ilaah xaqnimadiisa****. Waayo, Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisii xagga xaqnimada.... Haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka*

> *rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa…. Waayo, Qorniinku wuxuu leeyahay, 'Ku alla kii rumaysta isaga, ceeboobi maayo.' Waayo, Yuhuudda iyo Gariigtu waxba kuma kala duwana, waayo, isku Rabbi baa Rabbi u wada ah, waana u taajir in alla intii barida isaga. Waayo, '**ku alla kii magaca RABBIGA ku baryaa, waa badbaadi doonaa**.'"*
>
> (Rooma 10:1-4, 9, 11-13 [Yoo'eel 2:32])

## QIIMO MISE QIIMODARRO

Kaba soo qaad haddii aan jeeg (cheque) bangi oo hal milyan doolar ah kuu qoro. Wuxuu jeeggaasi u ekaan karaa mid sharciyaysan, laakiinse qiimo ma leh. Sabab?

Lacag intaas le'eg aniga bangiga iima taalo!

Haddana, ka soo qaad haddii uu ninka adduunka ugu taajirsani kuu qoro jeeg uu hal milyan oo doolar ah?

Dhib ma leh. Kaasi qiimaha lacagta ku qoran wuu u qalmaa.

Isla bangiga diidey jeeggii aan anigu magacayga ku qoray ayaa oggolaanaya oo qiimaynaya jeegga uu magaca ninka taajirka ahi ku qoran yahay.

Adduunkeena waxaa ka buuxa dad ku dadaalaya inay Ilaahay ugu yimaaddaan magacyo badan, laakiinse Ilaaha quduuska ah ee Wiilkiisa u soo diray inuu deynta dembiga soo gudo hortiisa, kuwaasi bilaa qiimo ayay ka yihiin, waana magacyo dembi miidhan ah.

Isla sida uusan bangigu u qiimaynayn jeegga aan qoray ee $1,000,000 ah, ayuusan Ilaahay dembidhaaf iyo nolol ugu bixinayn magac aan ka ahayn ka ***Ciise***.

> *"Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, **ma jiro magac kale** samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno."*
>
> (Falimaha Rasuullada 4:12)

Ma dooneysaa inuu Ilaahay buuggaagtiisa ka tirtiro deynta dembiga ah ee lagugu leeyahay oo uu kaa dhigo mid xaq ah? Ma dooneysaa inaad ka guuleysatid habaarka dembiga oo aad xidhiidh fiican oo abadiyan ah Abuurahaaga la yeelatid?

Hal magac oo keliya ayaa markaa kugu filan.

*"Ku alla kii **magaca RABBIGA** ku barya wuu samatabbixi doonaa."* (Yoo'eel 2:32)

*"Rumayso **Rabbi Ciise**, waadna badbaadi doontaa, adiga iyo dadka gurigaaguba."* (Falimaha Rasuullada 16:31)

Qalbigaaga ma ka rumaysan tahay inuu Sayid Ciise Masiix u silcay, oo u dhintay, oo mar kale u soo sarakacay si uu u tirtiro ciqaabta dembigaaga? Markaa, *"waad badbaadi doontaa."*

**LABA DIIMOOD OO KELIYA**

Waxaynu socdaalkeena ku soo bilownay inay maanta adduunka ka jiraan in ka badan *toban kun* oo diimood.

Xaqiiqaduse waa inay *laba* diimood oo keliyahi jiraan.



• Diinta ay dadku isku halleeyaan *dadaalkooda shakhsi ahaaneed* ee odhanaysa ***naftaada badbaadi***.

• Diinta ku salaysan *waxa uu Ilaahay inoo sameeyey* oo odhanaysa ***adigu waxaad u baahan tahay Badbaadiye***.

Ilaa iyo inta aad isku deyeyso inaad adigu is badbaadisid, diin kasta ama magac kastaba waad isticmaali kartaa. Laakiinse marka aad garowsatid inaad Badbaadiye u baahan tahay, hal magac oo keliya ayaa shaqaynaya.

Magacaasina waa ***Ciise***.

*"**Isaga** nebiyada oo dhan ayaa u markhaati fura in mid kastoo **Isaga** rumaystaa uu **magiciisa** ku helo dembidhaafka."* (Falimaha Rasuullada 10:43)

# QAYBTA 3 AAD DHAMMAADKA SOCDAALKA

# FASAQAADDII HABAARKA



27 - Heerka 1-aad: Qorshihii Hore ee Ilaahay

28 - Heerka 2-aad: Qorshaha Hadda ee Ilaahay

29 - Heerka 3-aad: Qorshaha Ilaahay ee Mustaqbalka

30 - Sii Qooraanso Jannada

Erayo Gunaanad ah

Qoraallo Gunaanad ah

Dib Uga Fekerka Socdaalkeenii



# 27

# Heerka 1-aad: Qorshihii Hore ee Ilaahay

*“**Maanta** Firdooska ayaad igula jiri doontaa!”*
— Sayid Ciise (Luukos 23:43)

Dhowr daqiiqo ka hor, baytariga kumbuyuutarkayga (laptop) ayaa dhammaad ku dhowaa, laakiinse dib baa loo soo nooleeyey. Sidee ayaa baytarigaa lagaga badbaadiyey inuu bakhtiyo?

Korantada ayaan geliyey.

Kumbuyuutar, telefoon gacan, ama toosh kuu doono ha noqdee, baytariyadoodu ugu dambaysta way dhammaadaan ama bakhtiyaan—oo dabka ayaa ka dhammaada—ilaa laga gaadhayo wakhtigii mar kale koranto tooda ka weyn la gelin lahaa si dib loogu soo nooleeyo (recharged).

Farcanka Aadan waxay waa sida baytariyadaa uu dabku ka dhammaanayo oo kale ee bakhtiyaya. Waxaynu bilownay inaynu bakhtino maalintii aynu calool galnay oo ma jiro si habaarkaa dembigu keenay dib loogu celin karey.

Innaga oo hadda geleyna qaybtii ugu dambeysey ee socdaalkeena, waxaan doonayaa inaan idiin sheego sheeko ku saabsan nin Faransiis ah oo ay xaaladdiisa nololeed u ekayd mid aan rajo lahayn sida baytari bakhtiyaya oo kale.

## RAJO LA’AANTII

Anigu waxaan ninka Bruno la yidhaahdo oo markaa 26 sanno jira la kulmay Maarso 1987.

Sannado badan markaa ka hor, ninkan dhallinyarada ahi wuxuu bilaabay inuu ka fekero macnaha nolosha. Wuxuu qalbiga ka dareemay mid madhan, madhnaantaas oo ku buuxin kari waayey mad-habtii Kaatoligga ee lagu soo koriyey iyo ku raaxaysigii adduunkan midnaba.

Markii uu wiilka ahaa, wuxuu Bruno u fiirsaday kuwii Isaga barayey wax Ilaahay ku saabsan oo ku guuldarraynaya inay ku dhaqmaan wixii ay dadka kale barayeen. Wiilkaas dhallinyarada ah ee fallaagoobey wuxuu arkay adduun ay caddaaladdarro ka buuxdo. Marki uu 18 sanno gaadhey ujeeddadiisa ugu muhiimsan ee noloshu waxay ahayd inuu maalmaha nasashada ee usbuuca asxaabtiisa meelahaa la warwareego, oo khamri badan ku sakhraamo si uu dhibaatadiisa isu ilowsiiyo. Dhibaatadii noloshiisa haysatey waxaa sii laba jibaaray markii ay gabadhii saaxiibtiisa ahayd ku dhimatay shil baabuur. Aad buu isagu Ilaahay ugu cadhooday.

Bruno wuxuu go’aansaday inuu Hindiya u socdaalo. Isagoo is leh diimaha badan ee halkaa ka jira baad noloshaada macno ugu heli doontaa. Kaddib markii socdaal daal iyo dhib badan oo dhulka ah sii maray ayuu yimid magaallooyinka Hindiya ee dadka aadka u badani ku nool yihiin ee ay ehlu-diinimo kulul iyo haddana dhibaato bini’aadan oo badani ka jirto. Haddii aan toos u soo xigto hadalkii Bruno, “Anigu waxaa arkay dad aniga iga sii dhibaato badan, weligoodba diin iyo imaan ha lahaadeene.”

Kaddib markii uu muddo sannad ku dhow Hindiya ku noolaa, Bruno wuxuu go’aansaday inuu Ilaahay oo keliyahi kama dambaysta yahay Ka runtiisa ugu weyn u muujin kara. Sidaas daraadeed ayuu duco sahlan oo gaaban Abuuraha ugu ducaystay, isaga oo leh, “Haddii aad adigu jirtid, isu kay muuji!”

Maalin maalmaha ka mid ah isaga oo jidadka magaalada Kalkata dhexmaraya, Bruno wuxuu arkay dukaan ay ku qoran tahay calaammada: *GURIGA BAYBALKA*. Dukaankii buu degdeg galay oo qofkii iibinayey ku yidhi, “Baybal af Faransiis ah ma haysaa?” Wayna u heleen.

Wuu iibsadey oo bilaabay inuu akhriyo.

Waxyaalo badan ayaa isaga kaga yaabiyey. Tusaale ahaan, wuxuu isagu la fajacay qodobbada kow iyo laba ee Tobanka Amar oo Ilaahay ee amrayey ku odhanayo, *“Aniga mooyaane* ***ilaahyo kale***

*waa inaanad lahaan. Waa inaanad samaysan sanam xardhan… Waa inaanad **iyaga u sujuudin**, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah."* (Baxniintii 20:3-5) Sidaas oo ay tahay wuxuu Bruno meel kasta ku arkayey dad macbudyada Hinduuga ka buuxa oo u sujuudaya sanamo. Markii uu ka fekerey diintii isaga lagu soo koriyey wuxuu garowsaday inay dadkii ehlu-diinka ahaa ee uu halkaa ka yaqaaney jebiyeen qaynuunkan Ilaahay oo ay u sujuudi jireen sanamo laga sameeyey Maryan iyo awliyadooda.

Isla sidaas oo kale, waxaa Bruno aad u soo jiitey aayada kale, *"Kitaabkan sharcigu waa inaanu afkaaga ka tegin, laakiinse waa inaad u fiirsataa habeen iyo maalinba, si aad u dhawrtid wax alla waxa ku qoran oo dhan, waayo, markaasaad jidkaaga ku barwaaqoobi doontaa, waanad liibaani doontaa."* (Yashuuca 1:8)

Isaga oo ku qanacsan in runta uu isagu doonayo Baybalka dhexdiisa oo keliya laga heli karo, ayuu Bruno ka tegey Hindiya oo Faransiiska ku soo laabtay. Laakiinse, halkii uu ka sii wadi lahaa inuu Baybalka sii akhriyo, meel ayuu iska dhigay oo wuxuu sii waday inuu keliyoo sii shaqaysto oo iska sii baashaalo ama sii tunto—kan oo ahaa qaab nololeed dhibaato iyo qalbi madhnaan dheeraad ah u keenay.

Afar sanno ayaa ka soo wareegay.

Maalin ayaa Bruno ka fekerey nolosha uu ku nool yahay ee aan qiimaha lahayn, dabadeedna wuxuu xasuustay aayad Baybalka ah oo uu Ilaahay ku ballanqaadayo: *"Oo waad i doondooni doontaan, **waanad i heli doontaan** markaad **qalbigiinna oo dhan** igu doondoontaan."* (Yeremyaah 29:13) Bruno ayaa sidan ku ducaystey, "Waa yahay Ilaahayow, qalbigayga oo dhan aaan Adiga kugu doondooni doonaa oo ogaan doonaa in ballanqaadkaagu run yahay iyo in kale."

Si uu isaga ilaaliyo saamaynta meeshii uu ku noolaa iyo asxaabtiisa, Bruno wuxuu go'aansaday inuu safar kale u baxo, markan ilaa Afrika. Intii uu ku sii jirey socdaalkiisii dhulka ahaa, Baybalkiisa ayuu akhriyayey oo ku ducaysanayey, "Ilaahayow, runtaada igu hoggaami oo beenta iga ilaali." Kaddib markii uu lama-degaanka Saxaraha ka soo gudbey wuxuu soo galay waqooyiga Sinigaal. Habeenkii ugu horreeyey wuxuu ku hoydey magaaladii aan aniga iyo qoyskaygu ku noolayn.

Subaxdii ku xigtey, Bruno magaalada ayuu dhex marmarayey. Sidii Kalkata oo kale, calaamad kale oo albaab ku taalla ayaa ishiisu qabatay. Tanina waxay lahayd:

*ECOUTEZ! CAR L'ETERNEL DIEU A PARLÉ!*

(Dhegeyso! Waayo RABBIGU Ilaaha ahi wuu hadlay!)

Bruno ayaa albaabkaa galay.

Wuxuu ahaa xafiiskayga. Shaqadaydii ayaan ka soo jeestey oo waxaan arkay nin gadh weyn leh oo gacanta ku haysta kitaab yar oo buluug ah oo gaboobey—waa Baybalkii uu Hindiya ka iibsadey. Su'aashiisii ugu horreysey ayaa weli dhegahayga ka sii guuxaysa.

"Maxaad tahay adigu, Kaatolig mise Borotestant?"

"Waxaan ahay Masiixi; mid Masiixa rumaysan," ayaan ugu jawaabey. Bruno wuu la yaabay oo u bogey jawaabtaas, waayo, ilaa iyo intii uu Baybalka akhriyayey marna *Kaatoliga* ama *Borotestant* kuma arkin, laakiinse wuxuu ku arkay *Masiixiyiinta*—kuwa Masiixa rumaysan. Mar dambe, wuxuu Bruno ii sheegay in haddii aan ku jawaabi lahaa "Anigu Kaatolig baan ahay" ama "Anigu Borotestant" baan ahay," uu isla markiiba dib u noqon lahaa oo albaabka ka bixi lahaa. Diin buu ka daaley. Wuxuu doonayey runta.

Dhowrkii maalmood ee markaa ku xigey, su'aalo ayuu Bruno igu daaliyey. Waxaan jawaabaha Ilaahay ka tusay Baybalka dhexdiisa. Maalin ka hor intii uusan tegin (wuxuu rajeynayey inuu Koonfurta Afrika u sii gudbo), sidan ayaan isaga kula dardaarmay, "Mar kale Baybalkaaga akhri oo arag waxa uu Ilaahay adiga kuu qabtay."


Lix usbuuc kaddib, ayaan aniga iyo xaaskaygu warqad ka helay Bruno taas oo uu ku sharaxayo inuu qol ka kiraystay tuulo noo dhoweyd oo kalluumaysato ku nooshahay. Wuxuu dhammeeyey inuu mar kale Baybalka oo dhan akhriyo, oo uu Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub is barbardhigo.

Erayga Ilaahay oo dhanna Masiixa ayuu ka dhex arkay.

Haddaan erayadii Bruno laftiisa isticmaalo, "Habeen aniga oo keligey dibedda jooga, waxaa qalbigayga si awood leh ku soo galay ballanqaadkii Ciise ee ahaa, '*Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow,* ***oo anigu waan idin nasin doonaa****.'* (Matayos 11:28) "Markii aan noloshayda iyo guuldarrooyinkeedii dib uga fiirsaday, is canaanasho iyo

shallaay—iyo khilaaf weyn ayaa qalbigayga ka buuxsamey. Waxaan ogaa in haddii aan Masiixa rumaysnaan lahaa, aanan marna xor u noqdeen inaan ka daba ordo damacyadadyda jidhka iyo doonistayda. Ugu dambaystii waan is dhiibey. Ilaahay ayaa indhahayga furay. Waxaan rumeeyey inuu Masiixu dhiiggiisa *iigu* daadiyey iskutallaabta oo *ii* sarakacay. Nabad ayaa qalbigayga ka buuxsantey. Waxaan bilaabay inaan oohin joojin kari waayo. Culayskii weynaa ee dembigeygu waa baxay!" Bruno isaga oo sii hadlaya ayuu yidhi, *"En somme, je suis né de nouveau!"* (*"Haddii aan soo gaabiyo, mar labaad ayaan anigu dhashay!"*)

Bruno wuxuu helay wixii uu raadraadinayey: qalbi iyo niyad la nadiifiyey, xidhiidh uu la yeeshay Abuurihiisa, iyo nolol weligeed ah. Hadda wuxuu fahmey sababta uu isagu adduunka u joogey iyo meesha uu ku socdey ama ku dambeyn dooney.



Raacdayntii waa dhammaatay.

Baybalku wuxuu odhanayaa: *"Haddii qof **Masiix ku jiro** waa abuur cusub, oo **waxyaalihii hore way idlaadeen**, bal eega, **wax waliba way cusboonaadeene**."* (2 Korintos 5:17)

Isla markiiba, noloshii Bruno si yar iyo si weynba way isu beddeshey. Tusaale ahaan, in kasta oo uu sigaarka cabi jirey laga soo bilaabo markii kow iyo toban sanno jirka ahaa, Ilaahay ayaa dabeecaddan xun ka badbaadiyey. Noloshiisii khamriga, sinada, iyo naf-jeclaysiga ahayd hadda waxay noqotay mid la soo dhaafay oo ceeb ah. Erayga Ilaahay ayaa hadda ku duxey oo baryada Ilaahay ayaa isaga nolol caadi ah u noqotay.

Halkii uu socdaalkiisa ka sii wadi lahaa, lixdii bilood ee markaa ku xigey Bruno wuxuu joogey Sinigaal oo Baybalka ayuu baranayey, oo la joogey Masiixiyiinta, oo dadka kale u sheegayey waxa uu Ilaahay u sameeyey isaga.

Bruno wuxuu noqday abuur cusub.

In kasta oo ay labaatan sanno ka soo wareegtey markii ugu horreysey ee aan Bruno la kulmo, weli waanu isla xidhiidhnaa.

Maanta "Bruno-ha cusubi" Faransiiska ayuu ku nool yahay, halkaas oo ay isaga iyo xaaskiisu Ilaahay la socdaan oo ay afartooda carruurta ah ku korinayaan aqoonta iyo barakada Ilaahay.

Tan macnaheedu ma inaan dhibaato Bruno la soo gudboonaan baa? Maya, isaga iyo qoyskiisuba waxay wajahaan dhibaatooyin faro badan, laakiinse kuwaas keligood kuma aha.

Rabbiga Laftiisa ayaa iyaga la jira.

## SADDEXDA HEER EE QORSHAHA ILAAHAY

Laga yaabee inuu qof uun ku fekero: "Bal hal daqiiqo sug. Haddii uu Masiixu innaga darteen uga adkaaday Shaydaanka, iyo dembiga, iyo dhimashada, maxay dadku, oo ay ku jiraan kuwa Masiixa rumaysani weli siyaalo badan ugu dhibaataysan yihiin? Maxaa weli adduunka dembi iyo dagaal uga buuxaan? Meeye baxniinadii iyo wanaaggii kama dambaysta ahaa ee la ballanqaaday?

Waxaa jawaabta laga helayaa xaqiiqada ah in qorshaha qadiimka ah ee uu Ilaahay taariikhda adduunka ku soo farageliyo saddex heer u qaybsamo:

Heerka I: Ilaahay dadkiisa wuxuu ka badbaadin
doonaa ***CIQAABTA*** *dembiga*.
Heerka II: Ilaahay wuxuu dadkiisa ka badbaadin
doonaa ***AWOODDA*** *dembiga*.
Heerka III: Ilaahay wuxuu dadkiisa ka badbaadin
doonaa ***JOOGITAANKA*** *dembiga*.[235]

Aaayaddan soo socota ee aynu ka soo xiganey Axdiga Cusub ayaa soo koobeysa saddexda heer ee qorshaha Ilaahay — hore, hadda, iyo mustaqbalka:

> Ilaahay wuxuu *"innaga* ***samatabbixiyey*** *dhimasho saas u weyn* [Heerka 1] *wuuna* ***na samatabbixin doonaa*** [Heerka II] *kan aannu rajaynayno* ***inuu weliba na samatabbixin doono*** [Heerka III]*."* (2 Korintos 1:10)

Socdaalka aynu Erayga llaahay ku dhex marayno inta inooga hadhay waxaynu diiradda ku saaraynaa saddexdan heer ee

qorshaha Ilaahay ah, oo uu Ilaahay si abadiyan ah u furfurayo oo uga takhalusayo saamaynta Shaydaanka, dembiga iyo dhimashada. Qaybta ugu dambaysa ee socdaalkeena waxay noqon doontaa midda ugu sii cajiibsan oo Jannada lafteeda ayaynu qooraansan doonaa oo wax yar ka arki doonaa.

## FASAQAADDA HABAARKA: HEERKA KOOWAAD

Markii ay Aadan iyo Xaawa dhegeysteen Shaydaanka waxay lumiyeen saaxiibtinimadii ay iyagu la lahaayeen Abuurahooda, oo waxay iyaga iyo farcankoodaba u soo jiideen habaarka dembiga. Adduunkii ugu horreeyey ee bilaa dembiga ahaa wuxuu markiiba isu beddeley meel ay dadku doonayaan inay Ilaahay ka dhuuntaan oo ay ku sameeyaan siday doonaan. Noloshii waxaa dabeecad u noqday qalbijab iyo damqasho, xanuun iyo dhaawac, faqiirnimo iyo gaajo, murugo iyo dagaal, gabow iyo dhimasho.

Dembigii wuxuu keenay habaar. Laakiinse, wakhtigii la ballanqaaday, Wiilka Abadiyanka ah ee Ilaahay ayaa samada ka yimid oo adduunka yimid isaga oo ah *Farcanka naagta* si uu farcanka Aadan uga samatabbixiyo Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada.

> *"**Ilaah** wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii, **laakiin maalmahan ugu dambaystooda wuxuu inagula hadlay Wiilkiisa** uu ka dhigay kan wax walba dhaxla, kan uu duniyooyinkana ku sameeyey. Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa, **oo goortuu daahirinta dadka dembiyadooda sameeyey dabadeed ayuu wuxuu fadhiistay Weynaha xagga sare midigtiisa**."*
>
> (Cibraaniyada 1:1-3)

Sayid Ciise Masiix dembi ma wasakhayn.

Awood buuxda buu ku haystay oo u lahaa qayb kasta oo ka tirsan abuuritaankan uu dembigu habaarka ku ridey. Eray keliya oo afkiisa ka soo baxa ama taabasho gacantiisa ah, ayuu ku awoodey inay jinniyada sharka lihi baxsadaan, indhoolayaashu arkaan, kuwa baraska qabaa bogsadaan, kuwa dhintayna soo noolaadaan. Biyo ayuu ku dul socday, duufaano ayuu dejiyey, dhowr xabbo oo

rooti ah ayauu kuwa gaajaysan u badiyey. Sidoo kale dembi ayuu saamaxay oo qalbiyada jabay ayuu nabad siiyey.

Dabadeedna wuxuu sameeyey wixii uu Isagu u yimid.

Wuu silcay, dhintay, oo mar kale soo sarakacay si uu u sarraysiiyo Aabbihiis, oo Qorniinka u kaamilo oo u badbaadiyo dhammaan kuwa Isaga rumeeya.

> *“**Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga, isagoo inkaar inoo noqday**, (waayo, waxaa qoran, ‘Mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu inkaaran yahay’) inay barakadii Ibraahim quruumaha ugu timaado Ciise Masiix; inaynu ballankii Ruuxa ku helno rumaysad.”*
>
> (Galatiya 3:13-14 [Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 21:23])

## NIMCO CAJIIB AH

Ciise, oo qaynuunnada Ilaahay aan weligii ku xadgudbin, wuxuu u yimid inuu kuwa sharciyadaa jebiyey ka badbaadiyo *“inkaarta sharciga*, [oo inaga doonaya adeecid buuxda], *Isaga oo inkaar inoo noqday!”* Ciise wuxuu si iskiis ah dusha ugu qaatay ciqaabta aynu innagu galabsannay si uu inooga samata-bixiyo ciqaab abadiyan ah.

Xataa iyada oo uu Sayidku ku dul silcayo iskutallaabta, ayuu muujiyey ujeeddadiisa ahayd inuu tirtiro habaarka dembigu keenay.

Ciise Masiix waxaa lagu dhex qodbay laba dembiile oo lagu xukumay basaasnimo, tuuganimo, iyo dil. Aynu mar kale dhegeysano sheekadii dhex martay Sayidka iyo labadan dembiile. Ugu horrayn, labadan ninba way ku kajameen Ciise, laakiinse markii saacadihii sii socdeen, midkood ayaa toobadkeenay.

> *“Xumaanfalayaashii deldelnaa midkood ayaa caayay isagoo leh, ‘Miyaanad ahayn Masiixa? Annaga iyo qudhaadaba badbaadi.’*
>
> *Laakiin kii kale ayaa jawaabay oo canaantay isagoo leh, ‘Miyaanad xataa Ilaah ka baqin, waayo, isku xukun baad tihiin? Waayo, innaga [ciqaabteenu] waa inoo xaq, maxaa yeelay, waxaynu helnay [abaalkii wixii aynu falnay], ninkanuse wax aan jid ahayn ma uu*

> *falin.' Markaasuu ku yidhi, 'Ciisow, i xusuuso goortaad boqortooyadaada ku timaado.'*
>
> *Ciise ayaa isaga ku yidhi, 'Runtii waxaan kugu leeyahay, Maanta Firdooska ayaad igula jiri doontaa.'"*
>
> (Luukos 23:39-43)

Labadan dembiile ee sharciga jebiyey way dhimanayeen oo naarta ku socdeen. Dabadeedna, markii saacadahoodii ugu dambeeyey la gaadhey, ayaa midkood dembigiisii Ilaahay hortiisa ku garowsaday oo aaminey Badbaadiyaha aan dembiga lahayn ee dhexdooda isna iskutallaabta ku qodbanaa.

Ciise ayaa isaga siiyey ballanqaadkan:

> *"Maanta Firdooska ayaad igula jiri doontaa!"*

Halkii uu ka geli lahaa oo weligii ku jiri lahaa meesha loo diyaariyey ibliiska iyo malaa'igaha dembaabey, dembiilahan la saamaxay wuxuu hadda weligiis joogi doonaa Abuurahiisa-Bixiyihiisa hortiisa.

War maxay tani fasaqaad aad u weyn tahay!

Rumaysigiisii Wanka Ilaahay, oo isla daqiiqaddaa dhiiggiisa u daadinayey bixinta ciqaabta dembiga darteed, Ilaahay wuxuu buuggaagtiisa ka tirtiray dembiyadii ninkaas, oo wuxuu isaga dusha ka huwiyey xaqnimada Ciise, oo aan ka noqosho lahayn oo magaciisa ugu qoray *Kitaabka Nolosha ee Wanka*, Kitaabkaas oo ay weligiis ku qornaan doonaan dhammaan magacyada kuwa helay hadiyadda badbaadada ee Ilaahay.

Dembiilahaas rajo la'aanta ahaa, habaarkii dembigu ku ridey si abadiyan ah ayaa dib looga celiyey oo looga tirtiray.

## GACAN-KU-DHIIGLAYAASHA MA LA SAAMIXI KARAA?

Email-kan waxaa soo diray mid su'aal qaba:

Dir Mowduuca: Email la soo diray

Waxaan doonayaa inaan ogaado sidii aan u sharixi lahaa erayga "caddaalad" aniga oo qaabilsiinaya odhaahda ah in "Ciise (nabadi korkiisa ha ahaatee) uu beddelkeena

dembiyadeena ugu dhintay." Tan macnaheedu ma inaan dembiyadayda la ii xisaabinayn baa ilaa inta aan noolahay oo dhan? Dilaaga baxsada ee inta la soo qabto cadddaaladda la hor keeno adduunkan, aakhiro lama ciqaabayo waayo Ciise Masiix baa dembiyadiisii bixiyey… Way igu adag tahay inay fikraddani iga dhaadhacdo… Dhammaanteen hanuun ha inoo sugnaado!

Dhimashada Ciise ee iskutallaabta uu ugu dhintay beddelkii dembiileyaashu caddaaladda ma qaabilsan tahay? Xataa "qof qof kale diley" Ilaahay ma saamixi karaa? Aynu marka hore su'aashan kaga jawaabno markhaatifuro dhowr "dhagar-qabe" oo la saamaxay oo noloshoodii is beddeshey.

## DAD-QALATOOYIN

Buuggiisa *Lords of the Earth* (Sayiddada Adduunka), ninka Baybalka turjuma, ee dhaqammada bulshooyinkana ku xeeldheer, waa Don Richardson e, ayaa ka sheekaynaya dadka la yidhaahdo Yali—kuwaas oo ah dagaalyahano, hilibka dadka cuna oo deggan buuraha Irian Jaya, ee Indinuusiya. Qarniyo badan ayay dadkan caado u ahayd inay dadyowga ku nool tuullooyinka kale ee cadowgooda ah intay dilaan, hilibkooda cunaan, haa, *cunaan.* Aargoosi iyo cabsi ayaa ahaa "dhaqanka" dadkaas.

Dabadeedna Injiilka ayaa dadkaa la gaadhsiiyey.

Qabiilkaas Yali iyo qabiilladii la deriska ahaa waxay maqleen warka wanaagsan ee Ilaahay ee ku saabsan dembidhaafka iyo nolosha cusub ee Masiixa dartii lagu helo. Kuwo badan oo iyaga ah baa rumeeyey. Waxaa is beddel buuxaa ku dhacay sidii ay u fekeri jireen iyo hab nololeedkoodii. Maadaama ay hadda noqdeen carruurta Ilaahay oo mar labaad dhashay, dhaqan cusub ayay yeesheen. Si ay xidhiidhka cadaawayaashoodii hore u beddelaan, "waddooyin cusub oo wanaagsan ayay tuullooyinkii Yali"[236] ka sameeyeen.

Maanta, gacan ku dhiiglayaashaas hore, naxariis ayay tusaan kuwa isku daya inay iyaga waxyeeleeyaan, maadaama uu Ruuxa Ilaahay qalbiyadooda beddeley oo uu baray: *"Midkiinba midka kale ha u roonaado, oo ha u qalbi jilicsanaado, idinkoo is cafiyaya sidii Ilaahba Masiixa idiinku cafiyey."* (Efesos 4:32)

**GABADH DHIBAATAYSAN**

Emma oo reer Singabuur ah waxaa lagu soo koriyey qoys diinta Islaamka aad ugu dheggan. Is-furniinkii waalidkeed iyo noloshii qoyska oo kala daadatay daraadeed, ayay iyada oo 16 sanno jir ah go'aansatay inay qof disho — nafteeda.

Emma waxay go'aansatay inay iska soo tuurto dabaqa tobnaad ee gurigoodii fooqa ahaa. Intii ay isu diyaarinaysey sidii ay qorshaheeda u fulin lahayd, cadho iyo niyad jab weyn darteed ayay Ilaah aanay aqoon ugu qayshatay, "Haddii aad runtii adigu jirtid, si uun iigu sheeg!" Dabadeedna hoos bay ugu soo degtey ferendada dabaqa tobnaad…

Waxay aragtay Baybal yaalla jaranjarada!

Kor ayay u qaaday oo qolkeedii degdeg ugu laabatay. Waxaa furmay bog Baybalkii ah oo ay erayadani ku qoran yihiin:



*"**RABBIGU waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.** Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis, Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda. **Naftayda wuu soo celiyaa.** Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada. In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada, Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa, Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya. Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis, Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa. **Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis, Oo weligay guriga RABBIGA ayaan degganaan doonaa.**"*
(Sabuurradii 23)

Intii ay Emma Sabuurkan akhriyeysey, waxaa iyada qiiro ku abuuray hubaasha Ilaahay IYO JACAYLKIISA. Muddo gaaban kaddib, waxay aamintey Sayid Ciise, oo yidhi, ***"Waxaan ahay adhijirka wanaagsan. Adhijirka wanaagsanu wuxuu naftiisa u bixiyaa idaha daraaddood."*** (Yooxanaa 10:11)

Emma waxay ka mid noqotay idihiisa. Dib dambe umay dooneyn inay is disho. Haddase, iyadu waa xaas farxad miidhan

oo ah iyo lix carruur ah hooyadood. Waxay aad u jeceshahay inay dadka kale helaan wixii ay iyadu Masiixa ka heshay—JACAYLKA ILAAHAY EE AAN GUDHAYN.

Markii aan Emma sheekadeeda u diray si aan u hubiyo inaan si sax ah ugu qoray, email bay iigu soo jawaabtey, iyada oo ku daraysa farta waaweyn ee kor ku qoray ee ku saabsan *jacaylka Ilaahay*. Cadaadiska iyo dhibaatooyinka badan ee ay haweenka adduunku ku jiraan dhexdooda, waxay Emma xooggeeda iyo farxaddeeda maalinlaha ah ka heshaa jacaylka iyo daryeelka cajiibka ah ee Sayidka.

## NIN DAGAAL BADAN

Ugu dambayntii, ka feker *Sawlos-kii reer Tarsos*, nin xagjir diimeed ahaa oo dadka ku magaca Ilaahay dartiis ku dili jirey.

Sawlos wuxuu ku dhashay Tarsos, oo ah Aasiyada Yar (Turkiga maanta), wakthigii uu Masiixu adduunka joogey. Sawlos muu rumaysnayn inuu Ciise ahaa Masiixa iyo Wiilka Ilaahay. Muddo gaaban, ka hor intii aanu Ciise ku laaban Samada, waxay maxkamaddii sare ee Yuhuuddu Sawlos u xilsaartay inuu soo xidhxidho, oo maxkamadeeyo oo laayo dhammaan xertii Masiixa. Wuxuu isagu rumaysnaa inuu Ilaahay u adeegayey markii uu xabisayey, oo shaabuugaynayey, laynayey Yuhuuddii Masiixa rumaysnayd.[237] Sidan ayaa maalin ku dhacday Sawlos iyo raggii la socday iyaga oo u ambabaxay inay soo qabqabtaan koox Yuhuud Masiixiyiin ah.

> *"Oo kolkuu sodcaalay, waxaa dhacday inuu Dimishaq u soo dhowaaday; oo dhaqsiba waxaa hareerihiisa ka iftiimay iftiin samada ka yimid. Markaasuu dhulka ku dhacay, oo wuxuu maqlay cod isaga ku leh, 'Sawlosow, Sawlosow, maxaad **ii** silcinaysaa?'*
>
> *Markaasuu ku yidhi, 'Yaad tahay, **Sayidow**?'*
>
> *Wuxuuna ku yidhi, 'Waxaan ahay **Ciisaha** aad silcinaysid.'*
>
> *Markaasuu isaga oo gariiraya oo yaaban yidhi, 'maxaad iga dooneysaa inaan sameeyo, Sayidow?'"*
>
> (Falimaha Rasuullada 9:3-6)

Fikraddii uu Sawlos ka haystey Ciise si buuxda ayay isu beddeshey. Maadaama uu Qorniinka Axdigii Hore ku xeeldheera, wuxuu isagu isla markiiba fahmey inuu Ciise ahaa Masiixii ay nebiyadii oo dhammi wax ka qoreen.

Mucaaradkii weynaa wuxuu noqday muxaafid weyn.[238]

*Sawlos,* oo mar dambe magaciisii u beddeley *Bawlos* (macnihiisuna yahay *"kii yaraa"*) sidan ayuu ka markhaati kacay:

> *"In kastoo aan hore u ahaan jiray mid **dadka caaya** oo **silciya**, **oo dhiba**, laakiin waa la ii naxariistay, waayo, aqoon la'aan baan ku sameeyey, anigoo aan rumaysanayn. Nimcada Rabbigeena waxay aad iyo aad ula badatay rumaysadka iyo jacaylka ku jira Ciise Masiix. Hadalkanu waa run, waana mid istaahila in la wada aqbalo: **in Ciise Masiix dunida u yimid inuu badbaadiyo dembilayaasha—oo aan ahay kan ugu daran**."*
>
> (1 Timoteyos 1:13-15)

## TAKHASUSKII CIISE

Xataa "gacan-ku-dhiiglayaasha" ma la saamixi karaa oo noloshaada la beddeli karaa?

Sidaas ayaa ku dacday dad-qalatooyinkii ku noolaa Irian, Emma tii reer Singabuur, iyo Sawlos kii reer Tarsos. Sidaas ayaa ku dhacday gacan ku dhiiglihii toobadkeenay ee ku qodbanaa iskutallaabtii, tii Ciise ku xigtey. Sidaas ayaa maalin kasta ku dhacda dembiileyaasha adduunka dacalladiisa ku nool marka ay akhbaarka Ilaahay rumeeyaan, xabsi ha ku jireen ama yaynaan ku jirine.

Badbaadinta iyo beddelaadda qalbiyada kuwa dadka ugu xunxun iyo dembiileyaasha ugu "wanwanaagsan" waa takhasuska Ciise. Waa taas naxariista iyo nimcada Ilaahay ee laga hadlayaa.

Dabcan, cawaaqibo ayaa dembiga ka dhasha.

Dembiilihii iskutallaabta ku qodbanaa ciqaabtii dembigiisa ayuu ku sugnaa. Isagu marna adduunkan kumuu helin nabadda iyo farxadda ka timaadda rumaynta Sayidka, u noolaansha Isaga, iyo caawinta kuwa kale inay iyaguna Isaga rumeeyaan.

Sidaas oo ay tahay, *jidka* dembiile lagu saamaxayo oo Ilaahay hortiisa xaq lagaga dhigayo mar kasta waa isku mid: inuu kaasi

garowsado xaaladda dembiga miidhan ah ee uu ku sugan yahay oo uu aamino jidka uu Ilaahay u furay in lagu badbaado.

Ciise Masiix oo aan la rumayn waxay la mid tahay in lala halaagmo dembiilihii kale ee aan toobadkeenin ee iskutallaabta ku qodbanaa ee dhinaca kale Ciise ka xigey.

## NAXARIIS IYO CADDAALAD WADA SOCDA

Qofkii aynu emailkiisa dhowr bog ka hor ku soo argna wuxuu su'aalay: *"Sidee ayaad ku sharixi* [kartaa] *erayga '**caddaalad**' oo u qaabilsiinaysaa odhaahda ah 'inuu Ciise beddelkeena dembiyadeena ugu dhintay'?"* Axmed ayaa isna mar ka horreysey su'aashan kale keenay:

> Mowduuca: Email la soo diray
>
> Miyuusan Ilaahay weynaantiisa dartiis awoodin inuu dadka u sheego inuu doonayo inuu dembiyadooda ka tirtiro, oo uusan sidaas samayn karin Isaga oo aan wiilkiisa qaaliga ah allabari ka dhigin???!

Sidii aynu marar badan hore ugu soo aragnay, waa Ilaahay weynaantiisa *daraadeed*—sababta uusan Isagu u awoodin inuu dadka dembiyadoodka "*ka tirtiro*" iyada oo aan dembiyadaas si buuxda loo xukumin oo loo ciqaabin.

Ma xasuusataa tusaalihii aynu ku soo bixinay cutubka 13 ee ku saabsanaa xaakin naxariis sameeyey isaga oo aan caddaalad samayn? Ficilkiisaasi wuxuu maxkamaddii ka dhex dhaliyey cadho iyo yaab.

Ilaahay maaha sida xaakinkaa caddaaladda ku ciyaaraya. Dabeecaddiisa oo dhammi waa quduus. Isagu marna naxariis ma bixiyo Isaga oo caddaaladda iska indho tiraya. Waa sababtaa, ta uu jacaylkiisa weyn daraaddiis, Wiilkiisa samada uga soo diray oo adduunka u keenay si Isaga iskutallaabta loogu qodbo, oo dushiisa loogu muujiyo naxariista iyo runta Ilaahay oo si buuxda isu qaabilsan.

> *"**Naxariis iyo runu way isla kulmeen**, Xaqnimo iyo nabaduna way isdhunkadeen. Runtu waxay ka soo baxdaa dhulka, Xaqnimaduna waxay hoos ka soo fiirisaa samada."*
> (Sabuurradii 85:10-11)

Maadaama ay cadhada Ilaahay innaga daraaddeen Ciise ugu dhacday, Ilaahay *"samada ayuu hoos inooga soo fiirin karaa"* oo ina siin karaa hadiyadihiisa kala ah cafinta, xaqnimada, iyo nolosha weligeed ah. Markii uu beddelkeenii noqday, Sayid Ciise wuxuu tusay *caddaaladda*, *naxariista*, iyo *nimcada* Ilaahay. Sidii aynu hore us oo aragnay:

> *Caddaaladdu* waa wixii aynu galabsanay oo inagu dhaca.
> *Naxariistu* waa wixii aynu galabsanay oo aan inagu dhicin.
> *Nimcadu* waa wax aynaan u qalmin oo aynu hello.

Dhammaanteen, kuweena Ciise Masiix aaminsani waxaynu helay *wax aan qofna u qalmin*: dembi la inaga nadiifiyey, xaqnimada Masiixa, qoyska Ilaahay oo aynu ka mid noqonay, iyo nolol weligeed ah. Dhammaan kuwa diida ama iska dhegatira Masiixa waxaa ku dhici doona *waxa ay dadka oo dhammi istaahilaan*: ciqaab abadiyan ah.

Toddoba qarni ka hor intii aanu Masiixu imaan, nebi Miikaah ayaa qoray: *"Xaakinka ul bay dhabanka kaga **dhufan** doonaan."* (Miikaah 5:1) Bal tan u fiirso! Xaakinka adduunka oo dhan ayaa jidh bini'aadan qaatay si ay Isaga u dilaan dembiileyaal bilaa abaal ah oo uu u yimid inuu badbaadiyo.

Caddaalad, naxariis, iyo nimco sidan ka fiicani ma jiraan.

> *"**Innaga oo weli itaaldaran ayuu Masiixu wakhti qumman u dhintay kuwa aan cibaadada lahayn**. Mar dhif ah mid waa u dhintaa nin xaq ah, mindhaase qof waa ku dhici lahaa inuu nin wanaagsan u dhinto. Laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli dembilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey."*
> (Rooma 5:6-8)

## XAQA IYO KA XAQA KA DHIGA

Heerka koowaad ee Qorshihiisa, Ilaahay wuxuu dembiileyaasha u furay jid cafis Isaga oo aan hoos u dhigin heerkiisa sare ee wanaagga ah ee uu inaga rabo. Isaga ayaa ah *"**xaq** iyo **kan xaq ka dhiga** kan Ciise rumaysan."* (Rooma 3:26)

Ilaahay waa *xaq* waayo si buuxda ayuu dembiga u ciqaabay.

Ilaahay waa *ka Xaq ka dhiga* dhammaan kuwa aamina Badbaadiyaha uu Isagu soo diray.

Isla daqiiqadda aan anigu joojiyo isku hallaynta dadaalkayga shakhsi ahaaneed oo aan aaminaadayda u gudbiyo Masiixa iyo dhimashadiisa iyo sarakiciddiisa aniga daraadday, Xaakinka Xaqa ahi wuxuu buugga ka tirtiri doonaa dhammaan xadgudubyadayda.

*XAQ BAA LAGA DHIGAY!*

In mid *xaq laga dhigo* waa inay maxkamadda Ilaahay kaas ku tilmaanto *dembi laawe.* Wuxuu Isagu baabi'inayaa qofkaas dembigiisa, oo isaga ka dhigayaa mid xaq ah.

Sidee ayuu sidaas ku samayn karaa?

Wuu samayn karaa, waayo iskutallaabta ayuu Isagu ku bixiyey ciqaabtii dembigeyga.

Markii uu Aadan dembaabey, Ilaahay wuxuu bini'aadanka oo dhan ku tilmaamay *kuwo aan xaq ahayn*. Laakiinse ilaa iyo markii uu Ciise dhintay oo mar kale soo sarakacay, Ilaahay wuxuu dhammaan kuwa Isaga rumaysta ku tilmaamay inay *xaq yihiin*.

> *"Waayo, sida nin keliya caasinimadiisii kuwa badan **dembilayaal looga dhigay**, sidaas oo kalena nin keliya addeeciddiis ayaa kuwa badan **xaq looga dhigi doonaa**."*
> (Rooma 5:19)

Xataa sida uu dembigii Aadan faddaranimo iyo dhimasho u keenay, ayaa dhimashadii iyo sarakiciddii Masiixu daahirin iyo nolol u keentaa.

> *"Siday **dhammaan Aadan ugu wada dhintaan**, sidaas oo kalaa **dhammaan Masiixa loogu wada noolayn doonaa**."*
> (1 Korintos 15:22)

Marka uu Xaakinka Xaqa ahi samada hoos kaaga soo fiiriyo, ma wuxuu adiga *kaa dhex arkayaa Aadan* iyo dembigiisii fadaraha ahaa? Mise wuxuu Ilaahay kaa *dhex arkayaa Masiixa* iyo xaqnimadiisa daahirka ah?

Maxkamadda Ilaahay dhexdeeda doorasho saddexaad kama jirto.

## DHIBAATADA LABA JIBBAAARAN EE BINI'AADANKA

Sidii aynu cutubka saddexaad ee Bilowgii ka soo akhrinay, markii ay Aadan iyo Xaawa ku caasiyeen Abuurahooda, waxay isu soo jiideen labadan kala ah *dembiga iyo ceebta*.

***Dembigoodii*** wuxuu iyaga u sababay inay dhuuntaan.

***Ceebtoodii*** waxay iyaga u keentay inay qaawanaantoodii daboolaan.

Ilaahay ayaa *caddaaladdiisa daraadeed* diidey caleemihii berdaha ee ay intay iskood u samaysteen isku dabooleen, laakiinse Ilaahay ayaa *naxariistiisa daraadeed* dhar uga sameeyey harag neef allabari ahaan loo qalay. Dhiigga neefkaasi wuxuu metelayey waxa lagama maarmaanka ay ahayd in *dembiga* la tirtiro, haragga neefkuna wuxuu metelayey waxa laga maarmaan ay ahayd in *ceebtooda* la daboolo.

Kuwaas aynu ka soo faracanay ayaynu la wadaagnaa dembiga iyo ceebta. Innagu waxaynu Ilaahay hortiisa ku nahay dembiileyaal faddaraysan oo ruuxiyan qaawan. Waynu ceebaysannahay oo ma istaahilo inaynu Isaga hortiisa joogno. Waxaynu u baahannahay ***cafintiisa*** iyo ***xaqnimadiisa.***

Dhibaatadeena *laba jibbaaran* waxaa lagu soo koobi karaa labadan su'aallood:

1. Sidee ayaa innaga la inooga ***daahirin*** karaa dembiga innaga iyo Abuuraheena ina kala dhex galay?

2. Sidee ayaa la inoogu ***dabooli*** karaa xaqnimo si aynu abadiyan Isaga ugula noolaan karo?

## DAAWADA ILAAHAY EE LABA JIBBAARAN

Ilaahay oo keliya ayaa daawayn kara dembiilenimada iyo xaqnimo la'aanta bini'aadanka. Markii uu Ciise, Wiilka Ilaahay ee bilaa dembiga ahi, dhiiggiisa ku daadiyey iskutallaabta, wuxuu

*Isagu dusha ku qaatay* ***ciqaabteenii***, oo Isaga oo dhimashada ka adkaaday, ayuu *ina siinayaa* ***Xaqnimadiisa.***



*"Waxaa loo tirin doonaa [dhammaan] kuweena rumaysan kii kuwii dhintay ka soo sara kiciyey Rabbigeena Ciise. Kii loo* ***bixiyey xadgudubkeena aawadiis*** *oo loo* ***sara kiciyey inuu xaq inaga dhigo****."*
(Rooma 4:24-25)



*"Haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeene. Ilaah…wuxuu inagula heshiiyey Masiix… Wuxuu isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay inuu* ***dembi*** *[allabari dembi] noqdo* ***aawadeen****, inaynu noqonno* ***xaqnimada Ilaah ee ku jirta Isaga****."*
(2 Korintos 5:17-18, 21)

Isla daqiiqadda aad adigu *iska dhaafto isku hallaynta* naftaada iyo diintaada, oo aad *rajadaada dul saaratid* Masiixa iyo dhiigga xaqa ah ee uu adiga uu daadiyey, wuxuu:

1. Isagu, *adiga kaa nadiifin* doonaa fadaranimada dembiga, oo
2. Isagu, *adiga kugu dabooli* doonaa Xaqnimadiisa aan iinta lahayn.

Daawo aan tan ka ahayn Ilaahay ma bixinayo.

## QORSHAHA WAX IS DHAAFSIGA AH EE ILAAHAY

Dhimashadiisii iyo sarakiciddiisii daraaddood, Ciise Masiix wuxuu qaaday *dembigeenii* oo innaga ina siiyey *Xaqnimadiisa*. Waa kan qorshaha weyn ee wax is weydaarsiga ah ee Ilaahay: ***Dembigeyga oo lagu beddeley Isaga xaqnimadiisa.***

Muxuu qofna u diidayaa haddiyadan sidaa u weyn?

Ta caloolxumada lihi waa, inay dadka badankoodu diidaan hadiyaddan Ilaahay. Sidaas oo ay tahay, hadiyaddiisu waa mid weli taagan: Dhammaan kuwa yeela hadiyadda Ilaahay ee badbaadada

waxaa laga dhigay xaq. Dhammaan kuwa diida waxaa loo ciqaabi doonaa dembiyadooda dartood, mana aha ciqaab ku meel gaadh ah, laakinse waxay gelayaan naarta lagu waarayo ee loo diyaariyey ibliiska iyo jinniyadiisa.

Dad badan oo ehlu-diin ah baa ku dooda, "Qof kastaa waa inuu dembigiisa bixiyaa ama gudaa." Haddii si loo fiiriyo dhammaan kuwa diida hadiyadda Ilaahay ee dembidhaafka iyo xaqnimada ahi sidaas ayay samayn doonaan. Laakiinse, deynta dembigooda marna lama soo gudi doono, maadaama ay tahay deyn aan dhammaanayn. Intaa waxaa dheer, iyada oo ay dembiileyaasha aan toobadkeenin dunuubtooda daraaddood naar ku waarayaan, iyagu marna xaqnimada ay u baahan yihiin ma heli doonaan si ay jannada ugu soo wareegaan. Ilaahay oo keliya ayaa dembiileeshaas aan rajada lahayn siin kara dembidhaaf *iyo* xaqnimo ay Isaga hortiisa ugu noolaan karaan.

Toddoba boqol oo sanno ka hor intaanu Badbaadiyuhu imaan, nebi Ishacyaah ayaa sidan kaga sii waxyoodey qorshaha Ilaahay ee weyn ee wax is weydaarsiga ah:

> *"Kulligayo waxaannu noqonnay sida* ***wax aan nadiif ahayn****, oo* ***xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah****. Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday,* ***oo RABBIGU wuxuu isaga dul saaray xumaanteena oo dhan****. Naftaydu Ilaahayga bay ku farxi doontaa,* ***waayo, wuxuu ii xidhay dharkii badbaadada, oo wuxuu i huwiyey khamiiskii xaqnimada****."* (Ishacyaah 64:6; 53:6; 61:10)

Adigu weli Ilaahay hortiisa ma waxaad ka tahay *mid aan daahir ahayn?* Mise waxaa adiga lagugu ***daahiriyey*** *dhiigga Masiixa?*

Weli ma waxaad gashan tahay *xaqnimadaada shakhsi ahaaneed ee ah sida dhar gaboobey oo wasakh ah*? Mise waxaa laguu ***geliyey*** *khamiiska nadiifta ah ee ah xaqnimada Masiixa*?

Hal su'aal bay waxan oo dhammi isugu soo uruurayaan:

> *"Ayaa warkayagii* ***rumaystay****?"* (Ishacyaah 53:1)

Miyaad adigu rumaysatay warka Ilaahay? Miyaad diidey wax kasta oo kale oo runtiisa yeeshay?

## **"SI AAD U OGAATAAN"**

Erayga Ilaahay wuxuu odhanayaa: *"Waxyaalahan waxaan idiinku soo qoray,* ***idinka oo rumaystay*** *magaca Wiilka Ilaah,* ***si aad u ogaataan*** *inaad nolosha weligeed ah leedihiin."* (1 Yooxanaa 5:13)

Sannado ka hor, ayaan anigu haweeney aad ehlu-diin u ah kala hadlay wax ku saabsan hadiyadda Ilaahay ee nolosha weligeed ah. In kasta oo ay iyadu Masiixiyad isku sheegeysey, marna si dhaba umay rumaysan badbaadada uu Ilaahay ku bixiyey Masiixa.

Markii aan iyada u sheegay, "Waan ogahay inaan jannada geliyo marka aan dhinto," iyada oo xanaaqsan bay iigu jawaabtey, "Ooh, oo ma waxaad adigu u malaynaysaa inaad sidaa u wanaagsan tahay oo aad toos jannada u geleysid?"

"Maya," ayaanu ugu jawaabey, "sababtu maaha inaan anigu 'aad u wanaagsanahay.' Waa inuu Ilaahay aad u wanaagsan yahay. Isagu waa Ka noo sheegay inaanu *'**ognahay** [inaanu] nolosha weligeed ah leenahay'* haddii aanu Isaga iyo wixii uu noo sameeyey rumayno."

> *"Waayo, mushahaarada dembigu waa **dhimashada**, laakiinse hadiyadda Ilaah waa **nolosha** weligeed ah ee laga helo Rabbigeena Ciise Masiix."* (Rooma 6:23)

## **SIDII UU CALI KU *OGAADEY***

Cutubka ugu horreeya ee buuggan, waxaan ku soo hadal qaaday Cali, kaas oo ay qoyskiisu dayriyeen waayo wuxuu rumaystay warka Ilaahay.

Sidii Bruno oo kale, Cali isna wuxuu jirey 26 sanno markii aanu is barannay. Wuxuu isagu Bruno kaga duwanaa inuu Cali si daacad ah diintiisa ugu dhaqmi jirey, oo maalin kasta salaadda ugu luuqayn jirey sidii loogu qoray, oo sannadkiiba bil dhan soomi jirey, oo uu isku deyi jirey inuu dadka kale si fiican ula dhaqmo. Sidaas oo ay tahay qalbigiisu wuxuu u oomanaa nabad.

Cali habeen-badhkii ayuu sariirta ka kici jirey isaga oo is leh, "Amarradii diintayda oo dhan waan wada fuliyey—haddana, maxaan aakhiro uga cabsanayaa? Ilaahayow, ma jirtaa si aan ku *ogaanayo* meesha aan gelayo kaddib marka aan dhinto?"

Cali wuxuu su'aashan weydiiyey aabbihiis iyo hooggaamiyeyaashii diinta, "Sidee ayaan anigu ku hubin karaa inuu Ilaahay Jannada i geynayo?" Qof kastaa isku si buu ugu jawaabey, "Ma ogaan kartid. Qofna ma ogaan karo meesha uu ku dambayn doono. Ilaahay oo keliya ayaa og."

Jawaabtoodani may qancin Cali.

Guriga iyo iskuulka markuu joogoba, Cali waxaa Quraanka dhexdiisa laga bari jirey wax ku saabsan Ciise, ina Maryan, oo ahaa nebi xaq ah oo ka dhashay bikrad. Wuxuu kaloo bartay inuu Ciise samayn jirey mucjisooyin waaweyn oo ay magacyadiisu ahaayeen *Masiix, Erayga Ilaahay* iyo *Ruuxa Ilaahay.* "Laga yaabee inuu nebi Ciise i siinayo jawaabta aan anigu raadinayo," ayuu Cali ku fekerey.

Cali wuxuu go'aansaday inuu helo buug ka hadlaya Ciise. Dhowr usbuuc kaddib ayaanu annagu is barannay. Baybal ayaan isaga siiyey, kaas oo uu bilaabay inuu si xiiso badan u barto. Halkan, erayadiisa ayuu ku sheegayaa wixii uu Cali ogaadey kaddib markii uu sannad ku dhowaad Qorniinka baadhayey:

> Waxaan ogaadey inay nebiyadii oo dhammi sii tilmaamayeen Ciise. Waxaan akhriyey meesha uu Ciise Laftiisu ku yidhi, *"**Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha**. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee…. Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, kii ereygayga maqla oo rumaysta kii i soo diray, **wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli maayo**, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay."* (Yooxanaa 14:6; 5:24)
>
> Kuwan iyo aayado kale ayaa aniga igu caawiyey inaan fahmo oo aqbalo inuu Ciise yahay Ka uu Isagu yahay: Badbaadiyaha keliya ee dhiiggiisa daadiyey ee dhimashada ka sarakacay si uu u bixiyo badbaado hubaal ah. Waxaan rumeeyey Isaga iyo xaqiiqada ah inuu u silcay oo u dhintay dembiyadayda, beddelkayga. Isla daqiiqadii aan rumeeyey, waxaan qalbiga ka dareemay nabad aanan weligey hore u dareemin. War maxaa is beddel weyni igu dhacay!

> Dib dambe ugamaan welweleyn meesha aan aakhiro tegayo waayo waxaan ogahay inuu Sayidku si buuxda u bixiyey ciqaabtii dembiyadayda xukunka ii keenayey. Hadda waxaan anigu *ogahay* inaan jannada tegayo, sababtuna maaha inaan anigu wanaagsanahay laakiinse waxaan ku tegayaa nimcada Ilaahay igu siiyey Ciise Masiix darteed. Hadda waxaan anigu *doonayaa* inaan wax kasta oo aan qabto Ilaahay ku raalli geliyo, mana aha inaan badbaadadayda shaqaysanayo, ee waa inuu Ilaahay i badbaadiyey oo qalbigayga beddeley.

Habaarkii dembiga ee Cali dusha ka saarnaa dib baa loo celiyey oo waa la beddeley. Maanta, isaga iyo xaaskiisa, iyo saddexdooda carruurta ahi meesha ay aakhiro tegayaan oo keliya ma oga e, waxay kaloo og yihiin sababta ay adduunka u joogaan: inay gartaan, jeclaadaan, oo u adeegaan Abuurahooda-Badbaadiyahooda oo ay dadka kalena u hoggaamiyaan inay iyaguna Isaga gartaan.

## DHIMASHADA: MIDIIDINKA MUUMINKA

Kaddib markii uu Isagu adduunka yimid, Masiixu wuxuu kaamilay qaybta koowaad ee qorshaha Ilaahay ee saddexda heer ka kooban oo dib u celiyey una joojiyey habaarka dembigu keenay. Noloshiisii, dhimashadiisii, aasitaankiisii, iyo sarakiciddiisii, Ciise wuxuu ku jebiyey gidaarkii weynaa ee u ekaa mid aan laga gudbi karin ee dembiga iyo dhimashada. Tuuggii iskutallaabta ku qodbanaa, qabiilkii dadka qalan jirey, Emma, Sawlos, Cali, Bruno, iyo dhammaan kuwa si daacad ah u rumeeya akhbaarka Ilaahay, waxay ka faa'iideen waxaas uu Masiixu sameeyey.

Muuminiinta Masiixa rumaysan, ta keligeed galisa ee arxanka daran, waa dhimashada e, waxaa hadda looga dhigay midiidin hoose oo shaqadeedu tahay inay albaabka jannada iyaga ugu furto marka Ilaahay dartii. Isla sida uu Qorniinku leeyahay, *"RABBIGA hortiisa* ***dhimashada*** *quduusiintiisa Ayaa* ***qiimo weyn*** *ku leh."*[239] (Sabuurradii 116:15)

Kuma ayaa abid ku riyoon lahaa in erayga *"qiimo weyn"* lagu qeexi doono *"dhimashada"*? Ilaahay baa mahad ku leh inay sidaasi u sugnaatay—dhammaan kuwa rumaysan.

> *"Dhimashoy, meeday libtaadii?* ***Dhimashoy, meeday micidaadii****?...Ilaah baa mahad leh kan libta inagu siiya Rabbigeena Ciise Masiix!"* (1 Korintos 15:55, 57)

Habaarkii hore ee dembiga dib baa loo celiyey.



# 28

# Heerka 2-aad: Qorshaha Hadda ee Ilaahay

*"Sharcigayga waxaan gelin doonaa **uurkooda**,*
*oo **qalbigoodana** waan ku qori doonaa"*
—RABBIGA (Yeremyaah 31:33)

Iyada oo aanay dad badani si fiican uga fekerin *habaarka dembigu* keenay ee aadka u xun, ayay haddana intooda badani waxay u xabbisan yihiin waxa aynu ugu yeedhi karno habaaro *maalin kasta noloshooda* haysta.

Dadka dunida intooda badani waxay ku nool yihiin baqdin ay ka qabaan nasiibdarro, cudur, iyo dhimasho. Kuwo badan ayaa ka welwelsan inay lacag la'aani ku dhacdo oo ay xataa awoodi waayaan inay cunto iibsadaan ama deynta iska bixin kari waayaan. Qaar kale ayaa ka cabsi qaba sixir, cawri ama nasiibkooda oo xumaada, oo waxay xataa qariyaan haddii ay helaan wax ay ku faraxsan yihiin iyaga oo ka baqaya in waxaas lagu cawryo. Si ay jin iyaga gala iyo dhibaato xun oo ku dhacda uga hor tagaan dad ayaa iyaga iyo carruurtoodaba qoorta ugu xidha qardhaaso, oo guryahoodana sudha. Kuwo badan oo kale ayaa cabitaano la isku qasay caba ama aayado akhriya iyaga oo ka doonaya ilaalo.[240]

Mahadi ha ka gadhee, kuwa garanaya oo aaminsan Abuuraha-Badbaadiyaheenu uma baahna feejignaanaha noocaas oo kale ah maadaama uu Isagu aad uga weyn yahay xooggagaa sharka oo dhan ama ha jireen ama ha la malo-awaalee. Ma jiro wax ay tahay inuu qofka Masiixigiga ahi ka cabsado maadaama uu Ciise Masiix

ka awood badan yahay wax kastoo kale, oo ay dhimada lafteeduna ka mid tahay.

Ciise umuu imaan oo keliya inuu beddelo oo dhinaca kale u rogo saamaynaha habaarka dembigu ku yeeshay *aakhiradeena,* laakiinse wuxuu kaloo beddeley saamaynaha uu habaarku dembigu ku yeeshay *nolol maalmeedkeena.*

## FASAQAADDII HABAARKA: HEERKA LABAAD

Qorniinku wuxuu odhanayaa, *"Carruurtiiyey, kuwa Ilaah baad tihiin, oo iyagaad ka adkaateen; maxaa yeelay,* ***Ka idinku jira ayaa ka weyn*** *ka dunida ku jira."* (1 Yooxanaa 4:4)

Waa kuma kaas *"**Ka** ku **dhex** jira"* qofka Masiixigu?

Hal habeen ka hor intii aan Isaga iskutallaabta lagu qodbin, wuxuu Ciise xertiisii ku yidhi,

> *"Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna wuxuu idin siin doonaa* ***Gargaare kale*** *inuu idinla jiro weligiin— waxaa weeye,* ***Ruuxa runta*** *ah oo aanay dunidu qaadan karin, waayo, ma aragto, garanna mayso, idinkuse waad garanaysaan, waayo,* ***wuu idinla jiraa****, wuuna* ***idinku jiri doonaa****.*
>
> *Idiinkama tegi doono agoonnimo,* ***ee waan idiin imanayaa****.*
>
> *Waxyaalahaas ayaan idinkula hadlay intaan idinla joogay, laakiin* ***Gargaaraha Ruuxa Quduuska*** *ah oo Aabbuhu ku soo diri doono* ***magacayga****, wax kasta ayuu idin bari doonaa, wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan idinku idhi.*
>
> *Nabad baan idiinka tegayaa, nabaddaydana waan idin siinayaa, sida dunidu u siiso anigu idiin siin maayo.* ***Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin****."*
>
> (Yooxanaa 16:16-18, 25-27)

## GARGAARE KALE

Ciise wuxuu xertiisii ugu ballanqaaday in, kaddib marka uu Isagu ku laabto samada, uu Aabbihiis iyaga u soo diri doono *"**Gargaare kale**... Ruuxa Quduuska ah."*

Erayga af Giriigga ah ee laga soo min-guuriyey *gargaare* waa *parakletos* oo macnihiisu yahay *gargaare, u qalbi-qaboojiye, la taliye,* ama *qareen*. Qorniinka dhexdiisa, *Parakletos* waxaa loo isticmaalay *Wiilka Ilaahay* iyo *Ruuxa Quduuska ee Ilaahay* labadaba. [241]

Isla sida uu Wiilku ugu yimid inuu dembiileyaasha ka badbaadiyo ciqaabta dembiga, ayaa Ruuxuna ugu yimid inuu Masiixiyiinta ka badbaadiyo *awoodda* dembiga.

*Ruuxa Quduuska* ahi weligiis Ilaahay ayuu la jirey, xataa sida uu *Wiilku* weligiis Ilaahay ula joogey. Waa sababtaas ta aayadaha ugu horreeya ee Kitaabka Ilaahay isaga loogu magacaabay, *"Ruuxa* ***Ilaahay****."* (Bilowgii 1:2)

In la yidhaahdo sida ay dad badani sameeyaan,[242] inuu Ruuxa Quduuska ahi yahay nebi mustaqbalka la soo diri doono (ama malag Jibriil!) Qorniinka uu nebiyada u soo dhiibay ayay burinaysaa, laakiinse waxay kaloo si toos ah uga hor imaanaysaa wixii uu Sayid Ciise yidhi oo qabtay.

Ciise wuxuu xertiisa u sheegay in kaddib marka uu Isagu ku dhinto iskutallaabta oo dib u soo noolaado, uu samada u bixi doono si uu Ruuxa Quduuska ahi ugu soo degi karo oo ugu degi karo qalbiyada dhammaan kuwa rumaysan akhbaarka Ilaahay. Wiilku kor ayuu u bixi doonaa Ruuxuna hoos buu u soo degi doonaa. Ciise wuxuu xertiisa u sheegay: *"Runta ayaan idiin sheegayaa, Waxaa idiin roon inaan tago. Haddaanan tegin,* ***Gargaaruhu*** *idiinma iman doono,* ***laakiin haddaan tago waan idiin soo diri doonaa****."* (Yooxanaa 16:7)

Ilaa markaa taariikhda la joogey waxaa jirtey wakhtiyo uu Ruuxa Quduuska ahi la *jirey* kuwii iimaanka lahaa si uu iyaga u xooggeeyo, u hoggaamiyo, una barakeeyo. Laakiinse, wuxuu Ruuxa Quduuska ahi si buuxda u yimid kaddib markii uu Masiixu xalliyey dhibaatadii dembiga ee adduunka isaga oo si joogto ugu dhex noolaanaya qalbiyada Masiixiyiinta *dhexdooda*.

Sayid Ciise wuxuu ogeysiis ka sii bixinayey dhacdadan khaaska ah. *"Ruuxa runta ahi... wuu idinla jiraa,* ***wuuna idinku jiri doonaa****."* (Yooxanaa 14:17)

## IMAANSHIHII RUUXA QUDUUSKA AH

Kaddib markii uu Ciise dhimashada ka sarakacay, wuxuu Qoriniinku yidhi:

> *"Oo intuu iyagii [xertiisii] la shiray, ayuu wuxuu kula dardaarmay, oo ku yidhi, Yeruusaalem ha ka tegina, laakiinse* ***suga ballankii Aabbaha*** *oo aad iga maqasheen, waayo, runtii Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay biyo, laakiinse waxaa laydinku baabtiisi doonaa* ***Ruuxa Quduuska*** *ah maalmo aan badnayn dabadood….* ***Waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog****."* (Falimaha Rasuullada 1:4-5, 8)

Waa sidaas sidii dhacday Maalintii Bentekost,[243] konton maalmood kaddib markii uu Ciise sarakacay, oo ahayd toban maalmood kaddib markii uu samada u baxay.

> *"Oo kolkii maalintii Bentekoste la gaadhay, meel bay kulligood wada joogeen* [qiyaastii 120 Masiixiyiin ah—rag iyo dumar (Falimaha Rasuullada 1:14)]. *Oo waxaa filanla'aan samada ka yimid sanqadh sida dabayl xoog leh oo aad u dhacaysa, oo waxay buuxisay gurigii ay fadhiyeen oo dhan. Markaasaa carrabbo u kala qaybsamaya sida dab oo kale iyaga u muuqday oo ku dul fadhiistay midkood kasta. Kolkaasaa* ***waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah****…"*
>
> (Falimaha Rasuullada 2:1-4)

Axdiga Cusubi wuxuu dhacdadan muhiimka ah ku qorayaa cutubka labaad ee Falimaha Rasuullada. Awoodda Ruuxa Quduuska ah daraadeed, xertii Ciise waxay bilaabeen inay ku wacdiyaan warka wanaagsan ee Ilaahay luuqado kala duduwan oo aanay weligood baran oo ay ku hadlayeen dadkii ajnabiga ahaa ee Yeruusaalem wakhtigaas xajka u joogey ee ka kala yimid Aasiya, Careebiya, iyo meelo kale oo adduunka ah.

Isla maalintii uu Ruuxa Quduuska ahi soo degey, saddex kun ayaa rumeeyey akhbaarka Ilaahay oo helay hadiyadda nolosha weligeed ah. Tiradii xertu si degdeg ah ayay u korodhay.

Kitaabka Falimaha Rasuullada waxaa ku qoran taariikhda Masiixiyiintii ugu horreeyey ee Ciise oo wuxuu sheegayaa sidii uu warka wanaagsan ee Masiixu ugu faafay Imbiraadooriyadii Roomaanka dhexdeeda, maaha awoodda seefta darteed, ee awoodda jacaylka Ilaahay iyo Ruuxa Quduuska ah darteed.

## KUWII LOO YEEDHAY

Qorshaha Ilaahay ee adduunka ee wakhtigan hadda la joogo waa *"inuu dad [quruumaha] ku soo bixiyo iyaga magiciisa aawadiis."* (Falimaha Rasuullada 15:14)

Imaanshihii Ruuxa Quduuska ee Maalintii Bentekoste wuxuu ku dhaliyey qoys khaas ah oo rumaystayaal ah oo loogu yeedho *kaniisad*. Eraygii hore ee af Giriigga ahaa ee *kaniisad* laga soo turjumey waa *ekklesia*, oo uu macnaheedu yahay: *urur* ama *kuwa loo yeedhay* ama la doortay. Maanta, erayga *kaniisad* waxaa ka buuxa fahano iyo firqooyin badan. Dad badan oo Masiixiyiin isugu yeedha ayaa si toos ah magaca Masiixa ugu ceebeeya sida ay u nool yihiin. Kuwo badani waxay haystaan *diin*, laakiinse *xidhiidh* dhab ah lama laha Ilaahay. Iyaga weligood dembiyadooda lagagama nadiifin aaminaad ay ku qabaan dhiigga Ciise daraadeed.

Warka wanaagsani waa inuu Ilaahay dadka oo dhan meel kasta ha joogeene ku martiqaadayo inay Wiilkiisa rumeeyaan, oo noqdaan abuuritaan cusub oo khaas ah, oo ay ka mid noqdaan qoyska Masiixiyiinta ah ee weligood Isaga la joogi doona.

Dhammaan kuwa rumeeyey ballanqaadyada Ilaahay *ka hor intii uusan Masiixu imaanin* (Wakhtigii Axdigii Hore) waxay iyaguna ka tirsan yihiin qoyska Ilaahay, laakiinse kuwa aaminaada yeesha *laga soo bilaabo intii uu Masiixu yimid* ayaa qayb ka ah qoyska nool ee shaqaynaya ee loo yaqaano *"kaniisadda."* Kaniisadda waxaa kaloo loogu yeedhaa *"jidhka Masiixa."* iyo *"ta u doonnan."*[244] Dhammaan kuwa Sayid Ciise Masiix aamina, wuxuu Qorniinku ka odhanayaa:

> *"Waxaad tihiin…* ***dad Ilaah iska leeyahay****, inaad ogeysiisaan wanaagga kan gudcurka idiinka yeedhay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh. Idinku waagii hore dad ma aydin ahayn, laakiinse haatan waxaad tihiin* ***dadka Ilaah****…"* (1 Butros 2:9-10)

Cutubka koowaad iyo ka labaaad ee Baybalku waxay muujinayaan sida, bilowgii, Ilaahay bini'aadanka uga dhigay *abuuritaankiisa muhiim ah*. Cutubka saddexaad wuxuu qorayaa sidii uu Aadan u dembaabey oo uu Isaga laftiisa iyo bini'aadanka oo dhammi ay Ilaahay uga dheeraadeen. Laakiinse, Qorniinka ee ku soo xigaa waxay sharaxayaan waxa uu Ilaahay sameeyey si ay dembiileyaasha faddaraha ahi mar kale ugu noqon karaan *"dadkiisa muhiimka Isaga u ah."*

Adigu ma waxaad qayb a tahay *dadka Ilaahay muhiimka u ah?* Haddii ay sidaas tahay, markaa waxaad mar horeba soo dhex gashay heerka labaad ee qorshaha uu Ilaahay habaarkii dib ugu celinayo ama u beddelayo.

## BADBAADO BUUXDA

Shaqada ugu horraysa ee uu Ruuxa Quduuska ahi ka qabto nolosha dembiilaha hela hadiyadda badbaadada ee Ilaahay waa inuu qofkaas siiyo *nolol cusub*. Dhammaan kuwa talo saarta Ciise Masiix iyo wixii uu Isagu iskutallaabta ugu qabtay iyaga si ruuxiyan ah ayay dib ugaga dhalan doonaa xagga Ruuxa Quduuska ah.

Ciise wuxuu yidhi,

> *"Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux. Ha la yaabin haddaan ku leeyahay, '****Waa inaad mar kale dhalataan****.' …Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in* ***mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah****."* (Yooxanaa 3:6-7, 16)

War maxay aad u fiican tahay in *"mar labaad la dhasho!"* Inuu dembiile mar labaad ruuxiyan dhasho waa shaqada Ilaaha nool ee

keligiis ah u ah si qoto dheer. Dhalashada cusub waa suurtogal waayo *Aabbaha* ayaa wiilkiisa soo diray, *Wiilkuna* dhiiggiisa ayuu dembiga daraaddiis u daadiyey, *Ruuxa Quduuskuna* wuxuu qofka aaminaadda leh ku durayaa nolol cusub.

Ruuxa Quduuska ahi nolol cusub oo keliya inama siinayo; laakiinse taas si abadiyan ah ayuu inoogu shaambadaynayaa, oo wuxuu inagu calaamadaynayaa inaynu nahay kuwo Ilaahay iska leeyahay, oo si joogto ah ayuu inoo dhex degayaa. Wuxuu kaloo hubinayaa inaynu si ammaan ah ku tagno guriga Aabbaha marka la gaadho wakhtiga aynu adduunkan ka tegeyno.

> *"Idinku isagaad ku maqasheen ereyga runta ah, kaas oo ah injiilka badbaadadiinna, oo weliba idinku* ***markii aad rumaysateen ayaa laydinku shaabadeeyey Ruuxa Quduuska ah oo uu ballanqaaday, oo ah carbuuntii dhaxalkeena xagga furashada hantida Ilaah in la ammaano cisadiisa****."* (Efesos 1:13-14)

Ma jiro wax Masiixiga dhabta ah u sababi kara inuu lumiyo badbaadadiisa abadiyanka ah. *"Ruuxa Quduuska ah... ayaa* ***carbuunay****."*

## MIYAA LAGA XORREEYEY INAY MAR KALE DEMBAABAAN?

Wakhti ilaa ka wakhti, waxaan maqlaa dad si kajan ah u leh, "Haa, markaa si aan hubaashii Janno u galo ma waxaa la iiga baahan yahay oo keliya inaan rumeeyo inuu Ciise dembiyadayada u dhintay, markaa kaddibna aan sii waddo inaan u dembaabo sida aan anigu rabo, miyaanay sidaa ahayn?"

Haddii aan sidooda oo kale u fekero, haddii uu qof kaa badbaadiyo adiga oo lama-degaan aan rajo jirin ku lumay, ma waxaad qofka ku badbaadiyey ku odhan lahayd, "Mahadsanid! Hadda xor baan u ahayn inaan ma kale lumo!"?

Ama qof deyn kugu leh oo deyntii kaa saamaxay, miyaad adigu si ula kac ah u samayn lahayn waxyaalo qofkaas si ula kac ah ugaga xanaajiya?

Mise haddii aad dhar nadiif ah oo qurux badan xidhato,

miyaad isku odhan lahay, “Haa! Hadda meel wasakh waan iska fadhiisan karaa!”?

Fikirka noocaas ahi waa mid aan caqligal ahayn.

Maxay markaa farcankii Aaadan ugu fekerayaan sidaas oo kale marka laga hadlayo dembiga iyo cawaaqibyadiisa?

Nasiibdarro jawaabtu way iska caddahay. Dembigu gacan xoog leh ayuu ku haystaa niyadaheena iyo qalbiyadeena, xataa ilaa heer uu inaga dhaadhiciyo inuu dembigu fiican yahay. Dabcan, fikirka noocan ahi maaha mid cusub. Aadan iyo Xaawa ayaa sidoo kale sidan dembiga u maleeyey—haddii ay midhihii laga xaaraameeyey cunaan *“yahay geed caqli **lagu yeesho**.”* (Bilowgii 3:6)

Waxa loo baahan yahay in la sameeyo waa isla daqiiqada uu dembiiluhu akhbaarka Ilaahay rumeeyo, uu kaasi *dib dambe uusan ugu lunsanayn* lama-degaanka dembiga. Deyntii culayska badnayd si *buuxda ayaa loo soo gudey.* Masiixiga dhabta ah waxaa hadda *dhar looga dhigay oo loo geliyey* xaqnimada daahirka ah ee Ciise Masiix.

Ruuxa *Quduuska* ahi wuxuu cunugga mar labaadka dhashay ee Ilaahay ku dhex ridaa inuu ku adkaysto inuu dembigu yahay wax xun, ee aanu ahayn mid wanaagsan. Wuxuu kaloo ku dadka Ilaahay ku xooggeeyaa inay ku noolaadaan nololo ka turjumaya dabeecaddiisa iyo hab dhaqankiisa *quduuska* ah. Maadaama ay xubno ka yihiin qoyska quduuska ah, carruurta Ilaahay mar labaadka sida cusub u dhashay waxay doonayaan inay ku noolaadaan nololo dhowra sharafta qoyska.

Iyada oo ay Masiixiyiintu iska dhega tiri karaan Ruuxa Quduuska ah oo ay Sayidka sharafdarro ugu soo jiidi karaan sida ay u nool yihiin daraadeed, dhammaan Masiixiyiinta dhabta ahi waxaa ku dhex nool mid samaawi ah oo marti ah. Waa sababtaa ta uu Qorniinku dhammaan kuwa Masiixa rumeeyey ugu guubaaninayo:

> *“**Ha calool xumaynina** Ruuxa Quduuska ah oo Ilaah oo **laydiinku shaabadeeyey** maalinta madaxfurashada.”*
> (Efesos 4:30)

Masiixiyiinta Ciise Masiix sida dhabta ah u rumaysani marna badbaadadooda ma ay rumaysiga daraaddiis ku rumeeyeen ma

lumin karaan, laakiinse waxay *"calool xumayn karaan Ruuxa Quduuska ah ee Ilaahay"* marka ay u noolaadaan sida kuwa aan Ilaahay rumaysnayn. Iyada oo ay dadka Ilaahay weli *adduunka ku **dhex** jiraan,* iyagu dib dambe uma aha *"kuwa dunida, sidaanan kan dunida u ahayn."* (Yooxanaa 17:16)

Xataa sida uu Ciise Masiix u neceb yahay dhaqammada dembiga ah ee adduunkan, ayay u tahay inay xertiisuna u nebcaadaan.

> *"Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Miyaynu ku sii soconnaa dembiga inay nimcadu badato? **Yaanay noqon**! Innagoo dembiga kala dhimannay, sidee baynu mar dambe ugu dhex noolaannaa?"* (Rooma 6:1-2)

> *"Haddaba dila xubnihiinna dhulka yaal, kuwaas oo ah sino, iyo wasakhnimo, iyo kacsi xaaraan ah, iyo damac shar ah, iyo hunguri xumaan, taas oo ah sanam caabudid, waxyaalahaas oo daraaddood ay cadhada Ilaah ugu soo degto carruurta caasinimada. Kuwaas ayaad waagii hore ku socon jirteen markii aad waxyaalahaas ku noolaan jirteen. Laakiinse haatan iska fogeeya waxyaalahan oo dhan, kuwaas oo ah xanaaq, iyo cadho, iyo xumaan, iyo cay, iyo hadalka ceebta ah oo afkiinna ka baxa. Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad **iska xoorteen dabiicaddii hore** iyo falimaheediiba, oo waxaad **huwateen dabiicadii cusbayd** taas oo loo cusboonaysiinayo aqoon sida ay tahay **u-ekaanta kan iyada abuuray**."* (Kolosay 3:5-10)

**NOLOSHA ILAAHAY OO MASIIXIGA KU DHEX JIRTA**

Xataa isla sida uu *Wiilka Ilaahay* ugu yimid inuu dembiileyaasha rumeeyey uga badbaadiyo *ciqaabta dembiga,* ayaa *Ruuxa Ilaahay* ugu yimid inuu Masiixiyiinta dhabta ah ka badbaadiyo *awoodda maalinlaha ah ee dembiga*.

Sidan ayay taasi u shaqaysaa.

Isla daqiiqadda uu qofku aamino Masiixa, Ruuxa Ilaahay ayaa boqortooyadiisa qofkaas ka dhex dhista isaga oo u imaanaya inuu

ruuxa qofkaa ku noolaado, xarunta hoose ee iyaga naftooda laga xukumo. Wuxuu Masiixiga siiyaa dabeecad cusub oo *dooneysa* inay Rabbiga kaga farxiso. Taas macnaheedu maaha in dabeecaddii qofkaa ee naf-jeclaysiga iyo dembiga miidhan ahayd laga saaray. Dabeecadda waxaa la tirtirayaa oo keliya marka uu Masiixigu u tago Rabbiga samada, adduunkanse, Masiixiyiintu ma gaadhi karaan heer ay haba yaraatee bilaa dembi yihiin. Laakiinse, waxay tahay inay aad uga calool xumaadaan marka ay sameeyaan wax aanu Ilaahay raalli ka ahayn.[245]

Nolosha qof walba oo Masiixi dhab ah waxaa ka dhex socda dagaal joogto ah oo ka dhexeeya dabeecaddiisii hore (oo uu ka dhaxlay Aadan) iyo dabeecaddiisa cusub (oo uu Ruuxa Quduuska ahi ku tallaalay). Ruuxa Masiixa ah ee dhex deggan ayaa Masiixiga dhabta ah siiya doonis daacad ah oo uu Ilaahay ku raalli gelinayo. Ilaahay wuxuu dadkiisa barayaa in inkastoo uu dembigu bixin karo *"farxado **wakhti yar ah**"* (Cibraaniyada 11:25) *"waxyaalahaas ugu dambaystoodu waa **dhimashada**. Laakiin haatan idinkoo **dembi** laydinka xoreeyey... waxaad **midho ku haysataan quduusnaanta.**"* (Rooma 6:21-22) Ruuxa Quduuska ahi wuxuu is beddello waaweyn ka dhex sameeyaa nolosha Masiixiga.

*"Laakiin midhaha Ruuxu waa*
*jacayl, farxad, nabad,*
*dulqaadasho, roonaan, wanaag,*
*aaminnimo, qabownimo, iscelin;*
*waxa caynkaas ah sharci ka gees ahu ma jiro."*
(Galatiya 5:22-23)

Diimaha ku salaysan inay cammaladdooda ajar ku galabsadaan ma soo saaraan midho ruuxiyan ah. Iyada oo ay qaynuunnada diiniyanka ahi awoodaan inay saamayn ku yeeshaan beddelaada dabeecadda qofka ee *korka ah* ama la arki karo, ilaa iyo heer, Ruuxa Quduuska ah oo keliya ayaa beddeli kara dabeecadda *hoose* ama gudaha ah ee qofka.

Ilaahay wuxuu doonayaa inuu qaynuunkiisa ku dabaqo noloshaada, ee ma doonayo inuu ku siiyo liisto ah amarro aad raacdo, Isagu adiga ayuu kugu dhex nool yahay, adiga oo ammaanta magaciisa daraadeed dadka kale u noqonaya barako.

## LIISTO MISE JACAYL?

Waxaa la sheegay qiso ku saabsan nin uu xaaskiisu geeriyoodey. Ninkii ayaa shaqaaleeyey haweeney guriga u nadiifisa oo dharka u dhaqda usbuuciiba saddex maalmood. Ninkii ayaa firinjiyeerkiisa wax qaboojiya dushiisa ku dhejiyey waraaq ay ku qoran yihiin liisto ah shaqooyinka ay ahayd inay booyeesadaasi qabato maalin kasta oo ay timaado. Haa, mushaharna wuu u qoray iyada.

Muddo kaddib, ninkii ayaa jeclaaday naagtii oo weydiistey inay is guursadaaan. Wayna yeeshay. Kaddib markii ay is guursadeen, ninkii wuu jeexjeexay waraaqdii ay liistada shaqadeeda ahi ku qornayd. Wuxuu kaloo joojiyey inuu iyada mushahar siiyo. Sabab? Waayo "naagtii booyaasada ahayd" waxay hadda noqotay xaaskiisa uu jecel yahay! Hadda iyada oo ku faraxsan ayay guriga nadiifinaysey, oo dharka dhaqaysay oo samaynaysey shaqooyin badan oo kale oo aan liiskii hore ku qornayn. Sabab? Waayo waxay iyadu *jeclayd* ninkeeda oo *dooneysey* inay isaga kaga farxiso oo u adeegto. Qaynuunadii firinjiyeerka ku dheganaan jirey hadda qalbigeeda ayay ku qornaayeen.

Waa sidaas sida uu Ilaahay ku sameeyo kuwa Isaga aaminsan.

> *"Sharcigayga waxaan gelin doonaa **uurkooda**, oo **qalbigoodana waan ku qori doonaa**, oo Ilaahooda waan ahaan doonaa, iyaguna dadkaygay ahaan doonaan."*
>
> (Yeremyaah 31:33)

Sidii liiskii uu ninku ku dhejiyey firijiyeerkiisa, *diinta* dadku sameeyeen waxay kuu sheegayaan liisto diimeed ay tahay inaad ku dhaqantid, iyaga oo kuu ballanqaadaya in laga yaabo in Yowmal-qiyaamaha lagu abaal marin doono, "haddii uu Ilaahay yidhaahdo."

Waxaa taas aad uga duwan oo saxsan, inuu Sayidku ina siinayo *xidhiidh* aynu Isaga Laftiisa la yeelano. Isagu ciqaabtii aynu galabsanay oo keliya dusha kuma qaadan oo keliyoo nolol weligeed ah ina uu siin, laakiinse wuxuu kaloo Isagu doonayaa inuu yimaado oo uu noloshaada ku dhex noolaado Ruuxiisa Quduuska ah, waa haddii aad aqbashid sidan uu kula doonayo oo ku siinayo.

Intii uu kugu khasbi lahaa liisto camallo ah oo aadan marna awoodin inaad kaamisho, Ilaahay wuxuu kuu ballanqaadayaa

inuu adiga ku siiyo *doonis* aad Isaga ku raalli gelinaysid oo ugu adeegaysid *qalbi leh jacayl*. Xidhiidh jacayl ku dhisani wuxuu bixinayaa dhiirrigelin ka fiican inaad camallo wanwanaagsan samaysiid si ka sii fiican liistada qaynuunnada ah ee diintu bixiso. Sababtuna waa:

> *"...**jacaylku** haddaba waa oofinta sharciga."*
> (Rooma 13:10)

Waxaa laga yaabaa inay diintu kuugu *ballanqaado* nolol cusub iyo boos Jannada ah, laakiinse Ruuxa Quduuska ah oo keliya ayaa ku *siin* kara kaas. Isaga waa Ka keliya oo kaa buuxin kara jacaylka, farxadda, nabadda, hubaasha abadiyanka ah ee Ilaahay.

> *"Rajaduna inama ceebayso, maxaa yeelay, **jacaylka Ilaah baa qalbiyadeena ku dhex shubmay, oo waxaa ku shubay Ruuxa Quduuska ah** oo layna siiyey."*
> (Rooma 5:5)

**ADEECID FARXADAYSAN**

Dabcan, xaqiiqada ah inay Masiixiyiinta dhabta ahi Ilaahay iyo dadkaba ugu adeegaan qalbi farxadi ka buuxdo macnaheedu maaha inaanay iyagu haysan amarro ay tahay inay adeecaan. Tusaale ahaan, muddo gaaban ka hor intii aanu Masiixu samaad dib ugu laaban, wuxuu xertiisii ku yidhi,

> *"Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey. Haddaba taga, **oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga**, **oo ku baabtiisa** magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa, **oo bara inay dhawraan wax walba** oo aan idinku amray, oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xataa ilaa wakhtigu dhammaado."* (Matayos 28:18-20)

Ciise wuxuu xertiisa ku amray inay warka wanaagsan ee badbaadada gaadhsiiyaan *"quruumaha oo dhan."* Kaddib marka uu qof helo hadiyadda Ilaahay ee badbaadada, waa in kaas la baro inuu *"inuu dhowro wax walba"* oo uu Ciise amray. Tusaale ahaan, wuxuu Ciise xertiisa baray inay cadaawayaashooda jeclaadaan

oo ay dadka oo dhan si farxad leh ugu adeegaan. Dadaalka iyo doonista ugu weyn ee qofka Ciise rumaysani waa inay noqoto inay dadka oo dhammi gartaan, aaminaan, oo ammaanaan Ilaaha keliya ee runta ah.

Ciise wuxuu kalo xertiisa u sheegay inay Masiixiyiinta cusub ku baabtiisaan *"magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa."* U fiirso waa *"**magaca**"* (keli), ee maaha "magacyada" (jamac). Kuwa isku arka dembiileyaal rajo la'aan ah oo keliya, ee rumeeya akhbaarka wanaagsan ee Ciise noloshiisii, dhimashadiisii, iyo sarakiciddiisa ayaa xidhiidh abadiyan ah la yeelan doona Ilaaha keliya ee runta ah oo ah Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ah.

Dadka rumeeya akhbaarka Ilaahay waa inay rumaysigooda ku tusaan iyada oo lagu baabtiisayo webi ama biyo kale dhexdooda.

## MAXAA LOO BAABTIISAYAA?

Masiixigu miyuu u baahan yahay in biyo dhexgeliyo si dembiyadiisa looga nadiifiyo? Maya, Masiixiga mar horeba waa la nadiifiyey oo Ilaahay baa kaas ku tilmaamay inuu xaq yahay wixii uu Masiixu dhimashadiisii iyo sarakiciddiisii ku qabtay daraadeed. Baabtiiska biyuhu waa calaamad korka ah oo tusaysa xaqiiqo gudaha (qalbiga) ah. Marka aynu rumayno akhbaarka Ilaahay, waa in innaga la ina baabtiiso inagga oo taas ku adeecayna Badbaadiyaheena iyo Sayidkeena, laakiinse yaanan u fahmin inuu baabtiisanku inaga dhigayo inaynu jannada u qalano.[246]

Markaa xaggee ayay biyaha baabtiisanku arrimaha ka soo gelayaan? Waxay si la arki karo calaamad ugu tahay Masiixiga oo tusaya inuu Sayid Ciise jaal kula yahay dhimashadiisii, aasiddiisii, iyo sarakiciddiisii. Biyaha baabtiisanku waa hab ay Masiixiyiintu ku tusayaan rumaysigooda qorshaha Ilaahay ee badbaadada. Biyuhu waxay metelayaan dhimasho. Qofka ayaa biyaha la muquurinayaa, isaga oo tusayaa: "Inuu Ciise dembiyadiisa u dhinta oo la xabaalay." Marka uu qofku biyaha kor uga soo baxo, wuxuu tusayaa: "Inuu Ciise dhimashadii ka adkaaday isaga daraaddiis. Dhimashadiisii, xabaaliddiisii, iyo sarakiciddiisii aniga daraaadday, aniga waa dembigii waa la iga nadiifiyey, oo waxaa la iga dhigay xaq, oo la i siiyey nolol weligeed ah."

Tan khalad ha ka fahmin. Dembiilaha Ilaahay hortiisa laga aqbalayo waxaa keliyoo laga helayaa xaqnimada buuxda iyo shaqada la kaamilay ee Ciise Masiix. Dembiile la saamaxay ahaan, waxaan anigu ogahay inaan abidkey Sayidka la noolaan doono, maahana inaan anigu wanaagsanahay, laakiinse waxaa aniga *"oo **isaga dhexdiisa** layga helo, anigoo aan lahayn xaqnimo tayda ah, taas oo sharciga laga helo, laakiinse anigoo leh tan laga helo rumaysadka Masiixa, taas oo ah **xaqnimada xagga Ilaah rumaysadka lagaga helo**."* (Filiboy 3:9)

Diimaha ay dadku sameeyeen waxay ku barayaan inaad adigu camalladaada iyo dadaalkaaga shakhsi ahaaneed isku hallaysid. Injiilka Ilaahay wuxuu barayaa inaad isku hallaysid Masiixa iyo xaqnimadiisa bilaa iinta ah ee kaamilka ah.

## MIYAAN MASIIXIGA DHABTA AH LA XUKUMAYN?

Xaqiiqada ah inuu Masiixu wax kasta oo loo baahnaa si dembiileyaasha ciqaab abadiyan ah looga badbaadiyo waxay maskaxaheena ku dhalinaysaa su'aal kale. Qof e-mail ii soo qoray ayaa su'aalay:

> Dir Mowduuca: Email la soo diray
>
> Haddii uu Masiixu dhiiggiisa iskutallaabta ku daadiyey si uu dadka uga badbaadiyo dembiyadooda, taasi ma waxay meesha ka saaraysaa ujeeddadii laga lahaa maalinta xukunka?

Maya, dhimashadii uu Ciise dembiyadeena iskutallaabta ugu dhintay ma burineyso xaqiiqada ah inuu Ilaahay la xisaabtamayo Masiixiyiinta dhabta ah. Qorniinku wuxuu odhanayaa, *"Waxaa la gaadhay **wakhtigii dadka Ilaah xukunka laga bilaabi lahaa, oo haddii innaga marka hore laynaga bilaabo**, kuwa aan injiilka Ilaah addeecin muxuu aakhirkoodu ahaan doonaa?"* (1 Butros 4:17)

## LABA JEER OO XUKUN AH

Qorniinku wuxuu qeexayaa inay mustaqbalka jiri doonaa laba Maalmood oo Xukun jiro. Ta hore, waxaa jiri doona *sarakicinta iyo xukumidda kuwa xaqa ah,* dabadeedna, *sarakicinta iyo xukumaadda kuwa aan xaqa ahayn.*[247]

• **Xukunka kuwa Xaqa ah:** Waxaa adiga kuu *fiican* inaad qayb ka noqotid Maalintan Xukunka. *Kursiga Xukunka ee Masiixa* hortiisa wax su'aal ahi kama taagna inay kuwa halkaa taagan ama jannada ama naarta loo kala dirayo. Kuwaas horeba jannada ayay u gelayaan taas oo ku salaysan xaqiiqada ah inay iyagu heleen hadiyadda Ilaahay ee xaqnimada intii ay adduunkan ku noolaayeen. Laakiinse, iyada oo lagu saleeyey qiyaasta Ilaahay ee ujeeddooyinka iyo camalladooda rumaystayaal ahaan, iyaga ama waa la abaalmarin doonaa ama khasaare ayay la kulmi doonaan. Masiixi u noolaa sida uu Ilaahay raalli ka yahay, oo si is hoosaysiin leh kuwa kale ugu adeegey, oo dhibaatooyinkii soo maray Ilaahay ku dhex aaminsanaa, oo jacayl lahaa, Eryaga Ilaahayna faafiyey, oo si filasho weyn ah leh Sayidka soo laabashadiisa u sugey, kaas waa la abaal marin doonaa, halka Masiixiga naftiisa uun danta ka lahaa *"wuu khasaari doonaa, isaga qudhiisuse wuu badbaadi doonaa, laakiin sidii wax dab laga soo baxshay oo kaluu u badbaadi doonaa."* (eeg 1 Korintos 3:11-15) Baybalku wuxuu ka hadlaa shan nooc oo *"taajaj"* ah oo ay Masiixiyiintu heli karaan, oo ugu dambaysta ku tuuri doonaan Sayidka lugihiisa qushuuc daraaddiis.[248] *"**Kulligeen** waxaynu hor istaagi doonnaa kursiga xukumaadda Ilaah. ...Sidaasaa **midkeen kastaba** Ilaah ula xisaabtami doonaa."* (Rooma 14:10,12)

• **Xukunka kuwa aan Xaq ahayn:** Adiga *kuuma* fiicna inaad qayb ka noqotid meesha loogu yeedho *Carshiga Weyn ee Cad ee Xukunka* ee laga argaggaxayo. Dhacdadan aadka u xumi waxay u sugnaatay dhammaan kuwa dembiyadooda ku dhintay iyaga oo aan weli aaminin jidkii badbaadada ee uu Ilaahay bixiyey intii ay adduunka joogeen. Shaki kuma jiro jannada iyo naarta ta ay geli doonaan. Dhammaantood waxaa lagu xukumi doonaa haro naar ah, in kasta oo iyaga heerar kala duduwan oo ciqaab ah lagu xukumi doono oo ku salaysan wixii ay iyagu runta kaga jawaabeen runtii iyaga loo sheegay. *"Waxaa laga xukumay **nin walba sidii shuqulladiisu ahaayeen**. Oo dhimashadii iyo Haadeesba waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd. Oo taasu waa dhimashadii labaad. Oo ku alla kii aan kitaabkii nolosha laga helin isagoo ku qoran, waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd."* (Eeg Muujintii 20:11-15)

Warka wanaagsani waa inaanay ahayn inuu qof hadda erayadan akhriyaa halaagmo, maadaama uu Sayid Ciise dhammaan xorriyad inaga siinayo ciqaabta dembiga.

## CARRUURTA ILAAHAY

Sida hore loo soo carabaabay, isla daqiiqada aad aamintid Sayid Ciise Masiix iyo wixii uu adiga kuu qabtay, waxaad adigu xubin ka noqonaysaa qoyska Ilaahay.

Ilaahay mar dambe kuulama muuqan doono mid kaa fog.

Isagu wuxuu noqon doonaa *Aabbahaa*.

> *"Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay* ***carruurtii Ilaah*** *ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay, waxay ka* ***dhasheen Ilaah****."* (Yooxanaa 1:12) *"Oo* ***wiilashiisa aad tihiin*** *daraadeed ayaa* ***Ilaah u soo diray Ruuxa Wiilkiisa qalbiyadeena dhexdooda****, isagoo dhawaaqaya oo leh,* ***Aabbow****!"*
>
> (Galatiya 4:6)

Adduunka waxaa ka buuxa diimo dadka u sawira Ilaah fog oo camallo doon ah kaas oo dadka siinayn xidhiidh shakhsiyan ah oo ay Isaga la yeeshaan. Taas bilcaksigeeda, Ilaaha adduunka u soo diray Wiilkiisu wuxuu Isugu keen muujiyey Aabbe samaawi ah kaas oo dembiileyaasha jecel. Dhammaan kuwa aqbala Wiilkiisa Ciise Masiix, wuxuu Isagu ugu ballanqaadayaa inuu iyga nadiifiyo, oo u geliyo xaqnimad Masiixa, oo uu qalbiyadooda u soo diro Ruuxiisa Quduuska ah.

Buuggeedii ay u bixisay, *Waxaan Ku Dhiirradey inaan Isaga Aabbe ugu Yeedho* (I Dared to Call Him Father), Bilquis Sheikh oo reer Bakistaan ahi waxay ku sheegaysaa socdaalkii ay ku heshay akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ah. Kaddib markii ay bilo badan is barbar dhigeysey Baybalka iyo kitaabka diintii iyada lagu soo koriyey, ayay waxay sheegeysaa arrin iyada ku dhacday iyada oo ooyeysa oo Ilaahay ka baryaysa inuu runta tuso:

> "Labadii kitaab ayaan kor u qaaday, anoo midkiiba gacan ku haya. 'Kee, Aabbow?' ayaan idhi. 'Kitaabkee baa kaaga ah?' Dabadeedna arrin yaab leh baa dhacday.

> Weligey arrin taas oo kale ahi noloshayda kuma dhicin. Cod ayaan iska dhex maqlay, codku si fasiix ayuu aniga iila hadlay sidii uu iga daba odhanayey erayda ku jira qalbigayga dhexdiisa. Waxay ahaayeen kuwo nasteexo iyo naxariis badan, sidaas oo ay tahay awoodi ka buuxdo.
>
> **'Kitaabkee ayaad aniga Aabbe ahaan iigula kulmaysaa?'**
>
> Waxaan is arkay aniga oo isu jawaabaya oo leh: 'Baybalka dhexdiisa.' Intaas baa igu filayd."[249]

Sida haweeneydan Bakistaaniyadda ah oo kale, anigana sidoo kale Ilaahay waa Aabbahay. Maalintii aan akhbaarka Ilaahay rumeeyey, mar kale ayaan ruuxiyan dib u dhashay. Ma jiro wax ii sababi kara inaan lumiyo booska aan ku leeyahay xubinimada qoyska Ilaahay. Ciise ayaa yidhi, *"Idahaygu codkaygay maqlaan, waanan garanayaa iyaga, wayna i raacaan. Oo waxaan iyaga siiyaa **nolosha weligeed ah, weligoodna ma lumi doonaan**, oo ninna kama dhufsan doono gacantayda."* (Yooxanaa 10:27-28)

## XIDHIIDH & WEHELNIMO

Markaa maxaa dhacaya marka aan anigu dembaabo? Miyay tani ii keeneysaa inaan mar kale Ilaahay ka dheeraado?

Haddii wiil aabbihiisa bin'aadanka ah adeeci waayo, miyay taasi ka joojinaysaa inuu weli qoyska ka sii tirsanaado?

Maya.

Wiilka adeecid la'aantiisu isaga kama dhigayso mid aan weligiis dhalan. Xidhiidhka dhiig ahaaneed ee uu waalidkiis la wadaago lama jari karo. Waa sidaas oo kale xidhiidka ruuxiyanka ah ee aad Ilaahay la leedahay. Ma jiro wax sababi kara inaad lumiso booskaaga ah cunug Ilaahay oo mar labaad dhashay. Dhammaan kuwa rumaysan *"**mar kale** laguma dhalin abuur baabba'aya, laakiinse waxaa **lagu dhalay** abuur aan baabba'ayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo **waara**."* (1 Butros 1:23) Ilaahay waa Aabbeheena samaawiga ah. Xaqnimada Masiixa ee adiga laguu geliyey weligaa lagaama qaadayo. Ruuxa Quduuska ahi weligaa kaama tegayo.

Ammaan abadiyan ah baad haysataa.

> *"Waxaan hubaa inaan dhimashada, ama noloshu… aanay inaga sooci karin jacaylka Ilaah oo ku jira Rabbigeena Ciise Masiix."* (Rooma 8:38-39)

Ma jiro ficil aan anigu sameeyo oo dib u celin kara ***xidhiidhka*** *abadiyanka* ah ee uu Ilaahay igu dhex dhisay. Laakiinse, dembigu wuxuu saamayn ku yeelan karaa ***wehelnimadayda*** *maalinlaha ah* ee aan Ilaahay la leeyahay.

**BOOS & SHARDI**

Ka soo qaad haddii uu aabbe wiilkiisa u sheegi lahaa inuu beerta falo, laakiinse uu wiilkii u tago inuu saaxiibadii kubbad la soo ciyaaro. *Booska* wiilkaas ee ah inuu yahay cunuggii aabbihiis taasi saamayn kuma yeelanayso, laakiinse *xaalladda* uu ku sugan yahay xidhiidhka uu wiilkaasi la leeyahay way saamaynaysaa! Marka uu wiilku guriga ku soo laabto waa la su'aalayaa isaga; erayo adadag ayaa lagula hadli doonaa oo xataa edbinta ku habboon ayaa la siin doonaa. Wiilku waa inuu qirto inuu aabbihiis adeeci waayey si uu mar kale *xidhiidh dhow ula yeesho* aabbihiis.

Sidaas oo kale weeye kuwa Ilaahay kuwiisa ah. Isagu carruurtiisa wuu edbiyaa marka ay iyagu dembaabaan.

> *"Wiilkaygiiyow, RABBIGA edbintiisa ha quudhsan, Oo canaantiisana ha ka daalin, waayo, RABBIGU ninkuu jecel yahay wuu canaantaa* ***sida aabbe*** *u canaanto wiilkii uu ku faraxsan yahay."* (Maahmaahyadii 3:11-12)

Marka laga hadlayo wehelinimada maalinlaha ah ee aynu Ilaahay la leenahay, wuxuu Baybalku odhanayaa:

> *"Haddaynu nidhaahno,* ***wehelnimo*** *ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno…. Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafsaddeena ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma jirto.* ***Haddaynu dembiyadeena qiranno, isagu***

> ***waa aamin iyo caaddil inuu dembiyadeena inaga cafiyo,*** *oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan."*
> (1 Yooxanaa 1:6, 8-9)

Ruuxa Quduuska ah ee dhex deggan ayaa doonaya inuu carruurta Ilaahay ku baraarujiyo dembi kasta, si kastaba mid yar ugu muuqdee. Wuxuu Isagu doonaya inuu dareen dheeraad ah in oo siiyo dembiyada nololeheena xataa kuwa aanay dadka kale dembiga u arkin.

Tusaale ahaan, haddii aan si naxariisdarro ah xaaskayga ula hadlo, ama haddii aan dareen jacayl la'aan ah u hayo qof i xumeeyey, ama aan idhaahdo wax aan run buuxda ahayn, Ruuxa Quduuska ah ayaa dembigeyga igu caddeeya.

Daawadu waa *"dembigeyga oo aan u qirto"* Sayidka oo aan saamaxaad weydiisto qofka aan u gefey. Marka aan sidan sameeyo, mar kale ayaan *wehelnimo* fiican oo dhow la yeelanayaa Rabbigayga.

Adigu ma aragtaa kala duwanaanshaha?

Masiixa dhexdiisa, ***booskaygu*** Ilaahay hortiisu waa mid aan iin lahayn, laakiinse nolol maalmeedkayga, ***shardi*** maaha inaan bilaa iin ahay.

Shaqadiisii badbaadada ee uu *aniga* ***ii qabtay*** waa la kaamilay, laakiinse hawshiisa uu *aniga iga* ***dhex*** *hayo* waa sii soconaysa ilaa aanu Jannada ku kulmayno.

## LOO BADBAADIYEY UJEEDDO

Ruuxa Quduuska ee Masiixu wuxuu doonayaa inuu dib u habeeyo oo beddelo sida ay dadka Ilaahay u fekeraan, hadlaan, oo u dhaqmaan. Wuxuu odhanayaa,

> *"Idinku waa inaad quduus ahaataan, waayo, aniguba quduus baan ahay."* (1 Butros 1:16)

Wuxuu kaloo dadkiisa u sheegayaa: *"Nacasyo ha ahaanina, laakiinse garta waxa ay doonista Rabbigu tahay. Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto, laakiinse* ***Ruuxu ha*** *idinka* ***buuxsamo*** [ha idin xukumo ama maammulo]*."* (Efesos 5:17-18)

Ruuxa Quduuska ahi shakhsiyadaheena ma tirtiro; laakiinse wuxuu inoo xorreeyaa inaynu maalin kasta ku noolaano xaqnimo iyo nololo guuleystey oo Ilaahay raalli ka yahay. Ujeeddadaas ayuu Ilaahay inoo badbaadiyey. Wuxuu inoogu yeedhay inaynu wax kasta oo aynu ku fekerno, nidhaahno, oo qabano Isaga ku sarraysiino.

> *"Miyaanaydin ogayn* ***jidhkiinnu inuu yahay macbudka Ruuxa Quduuska ah*** *ee idinku jira ee aad Ilaah ka hesheen? Oo idinku isma lihidin, waayo, qiimo weyn baa laydinku soo iibsaday. Sidaa aawadeed Ilaah jidhkiinna ku ammaana."* (1 Korintos 6:19-20)

War maxay tani run nolosha beddesha u tahay dhammaan kuwa injiilka rumeeyey! Joogitaanka shakhsiyanka ah ee Ilaahay oo inagu dhex nool! Waa marka aynu Isaga adeecno marka ay nololeheenu magaciisa ammaan u soo jiidayaan dadka kalena barako u noqonayaan.

Waxyaalo badan oo kale oo shaqada Ruuxa Quduuska ahi dadka noloshooda ka dhex qabto ayaa la sheegi karaa.

Isagu wuu iyaga wuu qalbi qaboojiyaa, xooggeeyaa, hagaa, fahan siiyaa, oo waxbaraa.

Wuxuu Masiixiyiinta dhabta ah ka caawiyaa inay fahmaan Erayga Ilaahay.[250]

Wuxuu iyaga awoodsiiyaa inay u ducaystaan hab Ilaahay ku xidhaya.[251]

Wuxuu dadkiisa siiyaa hadiyado iyo kartiyo khaas ah si ay dadka kale u caawin karaan oo dhisi karaan.[252]

Wuxuu kuwa Masiixa aaminsan ku xooggeeyaa inay Isaga u adeegaan oo u markhaati furaan si kasta oo looga soo hor jeestaba. Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi,

> *"Waxaan idiin dirayaa sidii ido yeey ku dhex jira, sidaa darteed caqli u lahaada sida abeesooyin, oo u sir la'aada sida qoolleyo. Laakiin dad iska jira, waayo, waxay idiin dhiibi doonaan shirar, oo sunagogyadooda ayay idinku karbaashi doonaan. ...Laakiin goortay idin gacangeliyaan, ha ka welwelina sidaad u hadli doontaan ama waxaad ku hadli doontaan, waayo, waxaad ku hadli*

> *doontaan ayaa saacaddaas laydin siin doonaa.* ***Waayo, ma aha idinka kuwa hadlayaa laakiin waa Ruuxa Aabbihiin kan idinka dhex hadlayaa.****"* (Matayos 10:16-20)

## ISAGA AYAA LOO EKAYSIIYEY

Haddii la soo gaabiyo, Ruuxa Quduuska ahi wuxuu dadka Ilaahay u suurtogeliyaa inay meelmariyaan ujeeddadii uu markii ugu horrayseyba Ilaahay dadka ka lahaa, oo ahayd inay iyagu muujiyaan aragga ama u ekaansha Ilaaha keliya ee runta ah oo ay xidhiidh sokeeye oo dhow abidkood Isaga la yeeshaan.

> *"Ruuxu wuxuu inaga caawimaa itaaldarradeenna.... Oo waxaynu og nahay in wax waliba wanaag ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel, xataa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay. Waayo, kuwuu hore u yiqiin wuxuu haddana hore ugu doortay inay u* ***ekaadaan suuradda Wiilkiisa****, inuu isagu curad ku noqdo walaalo badan dhexdood."*
> (Rooma 8:26, 28-29)

Wuxuu Ilaahay doonayaa inuu dhacdo iyo dhibaato kasta oo nolosha dadkiisa ku dhacda u isticmaalo inay iyagu dib ugu ekaadaan *"suuradda Wiilkiisa."*

Cutubka ugu horreeya ee Kitaabka Ilaahay ayuu Ilaahay ku sheegayaa in ninkii iyo haweeneydii ugu horeeyey laga abuuray *"aragga iyo u ekaanshaha Ilaahay."* Doorashadii uu ninku ku doortay inuu Abuurihiisa ku dembaabo ayaa u ekaanshahaa kharribey. Laakiinse, markii la gaadhey wakhtigii ku habboonaa, wuxuu Ilaahay adduunka u soo diray Wiilkiisa aan iinta lahayn ee ammaanan.

Noloshii Ciise ee xaqa ahayd, dhimashadiisii, iyo sarakiciddiisii ayaa ahaa heerkii koowaad ee qorshaha uu Ilaahay dib ugu furfurayey dhaawicii uu dembigu keenay. Laakiinse, sida aynu cutubkan ku soo aragnay, waxaa qorshihiisa ku jira waxyaalo badan oo kale.

Isla daqiiqada uu dembiilaha bilaa rajada ah sidaada iyo sidayda oo kale rumeeyo warka wanaagsan ee badbaadada ee Ilaahay, wuxuu Isagu qofkaas siiyaa Ruuxiisa Quduuska ah, kaas

oo bilaaba sidii uu kaas dib ugu ekaysiin lahaa Isaga arraggiisa iyo u ekaanshihiisa ha noqoto xagga fikirradeena, ujeeddooyinkeena, erayadeena, iyo camalladeena. Kani waa heerka labaad ee qorshaha habaarka dembiga dib loogu celinayo.


Ilaahay wuxuu doonayaa inay carruurtiisu muujiyaan dabeecadda iyo hab dhaqanka Masiixa. Waa taas waxa magaca *Masiixi* macnihiisu noqdo. Sidaas oo ay tahay, shaqada Ruuxa Quduuska ee ah inuu inoo ekaysiiyo arraga Masiixa waa mid soconaysa oo la dhammayn doono oo keliya maalinta aynu Isaga si weji-ka-weji ah arki doono.[253]

> *"**Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah, oo saasaynu nahay!** Sidaa aawadeed dunidu ina garan mayso, maxaa yeelay, isagaba ma ay garanaynin.*
>
> *Gacaliyayaalow, imminka waxaynu nahay carruurta Ilaah; oo weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu muuqdo **aynu noqon doonno sidiisa oo kale**, waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay."* (1 Yooxanaa 3:1-2)

Shaqada Wiilka Ilaahay ee badbaadada *dhammaan* kuwa Isaga rumeeya daraadeed, iyo shaqada Ruuxa Quduuska ahi uu *dib* ugu habaynayo dhammaan kuwa Isaga maamulkiisa aqbala daraadeed, awooddii Shaydaanka waxaa laga dhigay mid aan saamayn lahayn, oo boqortooyada Ilaahay ee xaqa ah ee ah jecalka, farxadda, iyo nabadda ayaa dib loo dhisay.

Innaga oo leh nololo ay ujeeddo buuxda iyo filasho weyn waxaynu sugeynaa heerka ugu dambeeya ee qorshaha Ilaahay markaas oo si abadiyan ah uga takhalusayo Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada.

Ciise wuu soo noqonayaa.



# 29

# HEERKA 3-AAD: QORSHAHA ILAAHAY EE MUSTAQBALKA

*"Oo Ilaaha nabaddu Shaydaan buu **haddiiba** cagihiinna hoostooda ku burburin doonaa."*
(Rooma 16:20)

Ballanqaadkan la siiyey Masiixiyiinta runta ahi wuxuu ka soo maaxanayaa waxyigii qotoda dheeraa ee uu Ilaahay sheegay maalintii uu dembigu fadareeyey bini'aadanka: *Farcanka naagta ayaa madaxa ka jebin doona Abeesada* [Shaydaanka].

Abuuraha Leh adduunkani wuxuu fulin doonaa wax kasta oo uu Isagu ku ballanqaaday. Laakiinse si qaabilsan wakhtiga uu ugu talogalay iyo qorshihiisa.

## FASAQAADDII NACALADDA: HEERKA SADDEXAAD

Imaanshihiisii koowaad, wuxuu Masiixii la ballanqaaday jebiyey Shaydaanka kaddib markii uu ciqaabtii dembiyada si buuxda u soo gudey. Qofka Masiixiga dhabta ah naari dib dambe uguma sugna, laakiinse wuxuu hubaa jannadiisa. Taas daraadeed, hubka uu Shaydaanku ugu jecel yahay, waa dhimashada e, ayaa lumisey qaniinyadeedii xanuunka badnayd. ***Ciqaabtii dembiga*** waa la fasaqay.

Kaddib markii uu Sayid Ciise samada dib ugu laabtay, wuxuu Isagu soo diray Ruuxiisa Quduuska, *"Gargaaraha,"* si uu

dadkiisa u xooggeeyo inay nolol maalmeedkooda kaga adkaadaan dibindaabyada Shaydaanka iyo dembiga, oo ay dib ugu ekaadaan arraga Ilaahay. ***Awooddii dembiga*** waa la jebiyey oo la beddeley.

Laakiinse, marka uu Ciise adduunka dib ugu soo laabto oo keliya weeye marka uu Isagu Shaydaanka si buuxda u jebin doonaa oo uu dadkiisa uga xorrayn doono ***joogitaanka dembiga***.

## WAXYAALAHA DHICI DOONA

Isla sidii ay nebiyadii Ilaahay ka sii sheegeen imaanshahii hore ee Masiixa, ayay sidoo kale u sii sheegayaan imaanshaha labaad ee Masiixa.[254] Isla sida ay booqashadiisii ugu horreysey ugu dhacday isla sidii hore loogaga sii waxyoodey, ayay soo noqoshadiisuna ugu dhici doontaa. Waxaa soo socota maalin uu ogeysiiskani jannada ka hirgeli doono:

> ***"Boqortooyadii dunidu waxay noqotay boqortooyadii Rabbigeena iyo Masiixiisa, oo isna boqor buu ahaan doonaa weligiis iyo weligiis!"*** (Muujintii 11:15)

Marka uu Ciise adduunka dib ugu soo laabto, farcanka Aadan qodxaan ugagama dhigi doonaan taaj oo iskutallaabta kuma qodbi doonaan Isaga. Magaciisana si ciyaar ciyaar ah uma qaadan doonaan oo Isaga uma fahmi doonaan mid aan nebi ka weyneyn. Hab dhaqanyadan xunxun ee Boqorku [Ciise] lagula dhaqmay dib dambe suurtoggal uma noqon doonaan.

Qorniinku waa cad yahay. Marka uu Ciise dib u soo laabto, *"jilib waluba wuu u sujuudi doonaa."* (Ishacyaah 45:23; Filiboy 2:9-11) Laakiinse ka hor inta aanay taasi weli dhicin, waa in waxyiyo kale oo isku xigxigaa kaamilmaan.

## FARXAD SAMADA KA JIREYSA

Mid ka mid ah dhacdooyinka dhici doona ka hor inta aanay weli quruumuhu u sujuudin Abuurahooda iyaga iska Leh, Ciise Masiix ayaa hawada adduunka ku soo dhex degi doona oo dadka uu badbaadiyey ee Isaga rumaysan samada ugu qaadi doona.

*"Rabbiga qudhiisu samaduu kala soo degi doonaa qaylo iyo codka malaa'igta sare iyo buunka Ilaah, kolkaasay kuwii Masiixa rumaysnaa oo dhintay horta soo kici doonaan, dabadeedna kuweena nool oo hadha ayaa iyaga kor loola qaadi doonaa daruuraha dhexdooda inaynu Rabbiga hawada kula kulanno, oo sidaasaynu Rabbiga weligeen ula joogi doonnaa."* (1 Tesaloniika 4:16-17)

Arrintan qarsoodiga ah, dhacdadan cajiibka ahi waxay dhici kartaa wakhti kasta oo ah taariikhda aynu hadda ku jirno. Marka ay dhacdo, Jidhadhkii Masiixiyiintii dhabta ahaa ee dhintay kuwaas oo ay nafahoodu horeba samada u joogeen, oo ay la socdaan Masiixiyiinta dhabta ah ee weli markaa nool, *"kor baa loola qaadi doonaa... inay Rabbiga hawada kula kulmaan."*[255] Kuwa Masiixa rumaysan isla markiiba waxaa loo beddeli doonaa u ekaanshaha Masiixa. Waxay iyagu heli doonaan jidhadh cusub oo aakhiro u qalma, oo aanay wakhtiga iyo adduunku midna saamayn ku yeelan karin.

Muddo kaddib marka *"kor loo qaado,"* Masiixi kastaa wuxuu heli doonaa abaalgudyo ay ku kasbadeen waxyaalihii ay sida mutadawacnimada ah adduunka ugu sameeyeen ammaanta Ilaahay iyo barakadii ay dadka kale u ahaayeen daraaddood.[256] Dabadeedna, dadka Ilaahay, *"ee quduuska iyo daahirka ah,"* waxaa loo geyn doonaa ka ay abidkood *"U doonanaayeen"*[257] *K*a noloshiisa iyaga dartood ugu huray inuu iyaga ka badbaadiyo ciqaab abadiyan ah.

*"'Aynu rayrayno oo aad u faraxno, oo aynu ammaanno isaga; waayo, arooskii Wanku wuu yimid, oo afadiisiina way isdiyaarisay.' 'Oo waxaa iyadii lagu amray inay xidhato dhar wanaagsan oo dhalaalaya oo daahir ah; waayo, dharka wanaagsanu waxa weeye falimihii xaqa ahaa oo quduusiinta. Oo wuxuu igu yidhi, 'Waxaad qortaa, "Waxaa barakaysan kuwa loogu yeedhay arooska Wanka cashadiisa. Oo wuxuu kaloo igu yidhi, Kuwanu waa erayadii Ilaah oo run ah."''"* (Muujintii 19:7-9)

Xidhiidhka Ilaahay iyo dadkiisa ka dhex jiri doona aakhiro si maskaxdeena ka weyn ayuu uga sarrayn doonaan xidhiidh kasta oo kale oo aynu adduunka ku naqaanay.

## DHIBAATO WEYN OO ADDUUNKA KA JIRI DOONTA

Isla markaana adduunkan dhexdiisa, wuxuu Qorniinku sheegayaa wakhti *"dhibaato aad u weyn"*[258] ah oo ka jiri doonta, inta uu Ilaahay cadhadiisa ku soo deynayo adduun aan toobadkeen lahayn oo uu u sii diyaarinayo imaanshaha labaad ee Wiilkiisa. Wakhtigan waxaa kaloo loogu yeedhay *"wakhtigii dhibkii dadka Yacquub."* (Yeremyaah 30:7), maadaama kaas loo sameeyey inuu dadka reer binu Israa'iil ku soo duwo toobadkeen.

Wakhtigaas, waxaa soo bixi doona hoggaamiye weyn oo xoog leh oo uu Qorniinka ugu yeedho *"Kan Masiixa ka Geesta ah"* iyo *"Bahalka"* (1 Yooxanaa 2:18; Muujintii 13) kaas oo adduunka oo dhan ka talin doona. Dad aad faro badan ayaa si indho la'aan ah u raaci doona isaga iyo calaamooyinka yaabka leh ee uu isagoo nebi been ah samayn doono. Qof kasta oo adduunka ah waxaa lagu waajibin doonaa *"sumad lagaga dhigo gacanta midigta ama wejiga, iyo inaanu ninna awoodin inuu wax iibiyo ama iibsado, kii sumadda leh mooyaane, taasoo ah magaca bahalka ama nambarka magiciisa."* (Muujintii 13:16,17)

Kuwa sidaas diida qoorta ayaa laga goyn doonaa. Masiixan beenta ahi wuxuu ballanqaadi doonaa nabad iyo bashbash iyo barwaaqo, laakiinse wuxuu taas beddelkeeda dadka u hoggaamin doonaa wadada been, hallaag, iyo dhimasho ah.

## ARMAGEDDOON

Baybalka dhexdiisa, kuwo badan oo nebiyadii Ilaahay ee Ilaahay waxay wax kaga qoreen Dagaal Adduun oo kama dambays ah kaas oo jiri doona marka uu Sayid Ciise ka soo dego samada oo adduunka ku soo dego. Dagaalkan weyn waxaa lagu dagaalami doonaa dooxada Yesreceel, dhul aad u ballaadhan, ka bilow Webiga Urdun ilaa iyo Badda Dhexe (Mediterranean Sea). Qorniinku wuxuu kaloo dagaalkan qadiimka iyo mustaqbalka labadaba ah ugu yeedhaa *Armageddoon* oo macnaheedu yahay, *Xasuuqii Buurta.*

> *“Ruuxyo jinniyo ah oo calaamooyin samaynaya, ayaa oo u taga boqorrada dunida oo dhan inay u soo ururiyaan dagaalka maalinta weyn oo Ilaaha Qaadirka ah. ‘Oo bal eeg, Anigu waxaan u imanayaa sida tuug oo kale. Haddaba waxaa barakaysan kii soo jeeda oo dharkiisa dhawra sii uusan qaawanaan ugu socon oo aan cawradiisa loo arag.’ Oo iyana waxay boqorradii ku soo ururiyeen meesha afka Cibraaniga lagu yidhaahdo* ***Armageddoon****.”* (Muujintii 16:14-16)

Nebi Sekaryaah ayaa isna qeexid cajiib ah ka bixiyey dhacdooyinka la socon doona soo laabashada Masiixa.

> *“Bal eeg, waxaa imanaysa maalintii RABBIGA… Waayo, quruumaha oo dhan waan u soo wada ururin doonaa inay Yeruusaalem la diriraan, oo magaalada waa la qabsan doonaa, guryahana waa la dhici doonaa, naagahana waa la kufsan doonaa, oo magaalada badhkeedna maxaabiis ahaan baa loo kaxaysan doonaa, laakiinse dadka intiisii hadhay magaalada lagama baabbi’in doono.”*
> (Sekaryaah 14:1-2)

*“Quruumaha oo dhan”* ayaa Yeruusaalem hareerayn doona. Wuxuu kani noqon doonaa xasuuq aan weligiis kan oo kale hore loo arag.

## SOO NOQOSHADA MASIIXA

Iyada oo rajo oo dhammi dhammaatay oo ay dadka weli nooli meel ay caawimaad u doontaan waayeen, ayay Iyagu RABBIGA badbaado ugu qayshan doonaan. Dabadeedna Ka uu magaciisu yahay *“RABBIGU wuu badbaadiyaa”* ayaa samada ka soo degi doona. Yaabka iyo u qaadasho-la’aanta dadka ku dhici doontaa waxay noqon doontaa inuu Bixiyahoodaasi aanu mid kale ahayn, yahayse ***Ciise***, kii ay iskutallaabta ku qodbeen! Laakiinse wakhtigan, iyaga oo leh toobadkeen qoto dheer iyo ruuxiyo aad u murugaysan aayay Boqorka aqbali doonaan.

> *"Oo… dadka Yeruusaalem degganba waxaan ku shubi doonaa ruuxa raxmadda iyo baryootanka, oo* ***waxay arki doonaan aniga oo ah kii ay wareemeen****, oo iyana isagay ugu barooran doonaan sida mid ugu baroorto wiilkiisa madiga ah, oo aad bay ugu murugoon doonaan isaga, sida mid ugu murugoodo curadkiisa."* (Sekaryaah 12:10)

Ugu dambaysta quruunta Yuhuudda ee ruuxiyan indhaha la' indhahooda waa la furi doonaa oo waxay iyagu rumayn doonaa inuu Ciise ahaa oo yahay Masiixa keliya.[259]

Arrinta ku xigta ee dhici doontaa waxay sida ugu cad u tusaysaa dagaalka taariikhda adduunka inta uu Ciise, oo ah *Eraygu,* uu intuu hadal keliya yidhaahdo uu cadowgu baabba'yo.

> *"****Markaasaa RABBIGU soo bixi doonaa, oo*** *quruumahaas buu* ***la diriri doonaa****, siduu u diriray maalintii dagaalka. Oo maalintaas cagihiisu waxay ku istaagi doonaan Buur Saytuun, taasoo Yeruusaalem ka horraysa oo xagga bari ka xigta, oo Buur Saytuunna dhexday uga kala dillaaci doontaa xagga bari iyo xagga galbeed, oo waxaa jiri doonta dooxo aad u weyn….*
>
> *Oo tanuna waa belaayada RABBIGU ku dhufan doono dadyowga Yeruusaalem la diriray oo dhan. Iyagoo cagahooda ku taagan ayaa hilibkoodu iska* ***dhammaan*** *doona, oo indhahoodu waxay ku dhex* ***baabbi'i*** *doonaan godadkooda, carrabkooduna afkooda.*
>
> *Laakiinse waxay ahaan doontaa maalin uu Rabbigu og yahay, taasoo aan maalin ahayn, oo aan habeena ahayn, laakiinse waxay ahaan doontaa in markay fiidkii tahay uu iftiin jiri doono.* ***Oo RABBIGU boqor buu ka ahaan doonaa dunida oo dhan****—oo maalintaas* ***Rabbigu mid buu ahaan doonaa, oo magiciisuna mid buu ahaan doonaa****."* (Sekaryaah 14: 3-4, 12, 7, 9)

Ugu dambaysta Ilaaha keliya ee runta ah ayaa la sida saxda ah la qaddarin doonaa oo la ammaani doonaa.

## XUKUNKII OO DIB LOO HANTAY

Dhowr boqor oo sanno ka hor ayuu nebi Sekaryaah qoray waxyigii aynu hadda soo akhrinay, Ilaahay wuxuu waxyi kaas ku aaddan siiyey nebi Daanyeel:

> *"Riyadii habeennimada waxaan ku arkay mid u eg **Wiilkii aadan aha oo ku yimid daruuraha samada!** Oo wuxuu u yimid, kii da'da weynaa, oo waa loo soo dhoweeyey oo hortiisaa la soo taagay. Oo waxaa la siiyey **dowladnimo** iyo ammaan iyo boqortooyo, inay dadyowga, iyo quruumaha, iyo kuwa kala afka ahu u wada adeegaan. **Dowladnimadiisu** waa **dowladnimo** weligeed jiraysa, oo aan dhammaanayn, boqortooyadiisuna waa mid aan la baabbi'in doonin."* (Daanyeel 7:13-14)

Erayga *dowladnimo* waxaa lagu celiyey saddex jeer.

Markii ugu horreysey ee uu Ilaahay ninka iyo naagta abuuray, wuxuu iyaga ka dhigay inay *"**boqortooyo**... wax kasta oo dhulka ku dul dhaqdhaqaaqa."* (Bilowgii 1:26, 28) Markii uu Aadan ku fallaagoobey Abuurihiisa, wuxuu isagu xukunkaa ku wareejiyey Shaydaanka. Laakiinse taladii, awooddii, iyo xukunkii uu Aadan, "*ninkii ugu horreeyey"* lumiyey, Ciise *"Ninka Labaad,"*[260] ayaa dib ula soo wareegey.

Ilaahay wuxuu xerowgii Ciise, ee Yooxanaa la odhan jirey, siiyey waxyihi sii adkaynaya labadaa waxyi ee hore ee Sekaryaah iyo Daanyeel:

> *"Oo bal eeg, waxaan arkay samadii oo furantay, iyo faras cad, oo kii fuushanaana waxaa la odhan jiray Aamin iyo Run; oo isagu xaqnimuu wax ku xukumaa oo uu ku diriraa. Oo indhihiisuna waxay u ekaayeen ololka dabka, madaxiisana waxaa u saarnaa taajaj badan; oo waxaa ugu qornaa magac aanu ninna aqoon isaga mooyaane. Oo isna wuxuu qabay dhar dhiig lagu rusheeyey, **magiciisana waxaa la odhan jiray Ereyga Ilaah**. Oo ciidammadii samada ku jirayna isagay soo raaceen iyagoo fuushan fardo cadcad oo qaba dhar*

> *wanaagsan oo cad oo daahir ah. Oo afkiisana waxaa ka soo baxday seef af badan inuu ku laayo quruumaha; oo wuxuu iyaga ku xukumi doonaa ul bir ah, oo wuxuu ku tumay macsaraddii canabka oo xanaaqii cadhada Ilaaha Qaadirkaa. Oo dharkiisa iyo bowdadiisana waxaa ugu qornaa magac, kaas oo ah* ***BOQORKA BOQORRADA, IYO SAYIDKA SAYIDYADA****.”* (Muujintii 19:11-16)

Marka uu *Boqorka boqorradu* soo laabto, waxaa isaga la socon doona *“ciidammadii samada ku jiray oo qaba dhar wanaagsan oo cad oo daahir ah,”* oo ka kooban malaa'igta badan ee jannada iyo farcankii Aadan ee la badbaadiyey.[261] Awooddii iyo ammaantii weynaa ee Ciise ku muujiyey imaanshihiisii koowaad waxba maaha marka la barbardhigo awoodda iyo ammaanta cajiibka ah ee uu Isagu ku tusi doono imaanshihiisa labaad.

## BOQORTOOYADA JANNADA OO QALBIYADA KA TALINAYSA

Ii sheeg, haddii aad keligaa meel jiq ama ay ah maraysid, keebaad jeclaan lahayd inuu halkaa kaaga hor yimaaddo—wan mise libaax?

Markii ugu horreysey ee uu Masiixu adduunka yimid, wuxuu Isagu u yimid sidii *“Wanka”* si uu dembiileyaasha allabari ugu noqdo oo u badbaadiyo, laakiinse marka uu Isagu soo laabto, wuxuu u imaan doonaa sida *“Libaaxa”* si uu dembiileyaasha ku xukumo.[262]

Booqashadii hore ee Ciise adduunka ku yimid, wuxuu Isagu ku wacdiyey, *“Toobadkeena, waayo, boqortooyadii jannadu waa dhowdahay.”* (Matayos 4:17) Laakiinse halkii ay ka toobadkeeni lahaayeen fikradahoodii khaldanaa oo ay Boqorka ka soo rumayn lahaayeen, Yuhuuddii iyo quruumihii kaleba waxay isu bahaysteen inay Boqorkooda iskutallaabta ku qodbaan. Markaa, waxay iyaga oo aan ula kasin, meel mariyeen qorshihii Ilaahay ee qadiimka ahaa ee ahaa inuu Masiixu dhiiggiisa u daadiyo inuu bixiyo deynta dembiga ee adduunka.

Warka wanaagsani waaa in marka ay dembiileyaashu aaminaan Ciise Masiix iyo wixii uu iyaga u sameeyey, uu Ilaahay

yahay ka qalbiyadooda xukumaya oo ka dhigaya kuwo abidkood Isaga u hoggaansan.

Adigu ma og tahay in Masiixi kasta oo run ahi haddadan jannada waddani ahaan uga qoran yahay?

> *"Laakiinse innaga waddaninimadeennu* ***waxay ku jirtaa*** *jannada halkaasoo aynu weliba ka sugayno Badbaadiye kaas oo ah Rabbi Ciise Masiix. Isagu wuxuu beddeli doonaa jidhkeena liita inuu u ekaado jidhkiisa ammaanta leh, oo wuxuu ku beddelayaa xoogga uu isagu ku awoodo inuu wax kastaba isaga hoosaysiiyo."* (Filiboy 3:20-21)

## BOQORTOOYADA JANNADA OO ADDUUNKA KA TALINAYSA

Marka uu Ciise adduunka dib ugu soo laabto wuxuu boqortooyadiisa xarun uga dhigi doonaa Yeruusaalem, halkaas oo uu adduunka ka xukumi doono kun sannadood. Ugu dambaystana, boqortooyadiisa ayaa imaan doonta oo doonistiisa ayaa *"dhulka lagu yeeli doonaa sida jannada loogu yeelo."* (Matayos 6:10) Dib dambe sharka quruumaha looguma dulqaadan doono, waayo *"Isaga Laftiisa ayaa iyaga ku xukumi doonaa ul bir ah."* (Muujintii 19:15)

Dad badan ayaan rumaysnayn inuu Wiilka Ilaahay jidh ahaan ugu soo noqonayo adduunka. Laakiinse Qorniinku si cad ayuu arrintan uga hadlayaa. Isla sidii uu Wiilka Ilaahay imaanshihiisii hore ee adduunka jidh bini'aadan ugu qaatay, dabadeedna samada ugu aadey jidhkiisii aan samaawiga ahaa ee haddana bini'aadanka ahaa ee sarakacay, ayuu Isugu soo laaban doonaa *jidh ahaan*. Sidaas ayay malaa'igihii u sheegeen xertii Ciise maalintii uu Isagu samada ku laabtay:

> *"****Ciisahan*** *samada laydiinka sare qaaday,* ***sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa****."*
> (Falimaha Rasuullada 1:11)

## SHAYDAANKA WAA LA XIDHAYAA

Kitaabka Ilaahay waxyaalo badan buu ka odhayaa kunka sanno ee uu Ciise Masiix xukumayo. Waxaynu keliyoo soo koobi karnaa dhacdooyinka muhiimka ah.

Kaddib marka uu Ciise adduunka ku soo laabto, mid ka mid ah shaqooyinkiisa ugu horreeyaa waxay ku saabsanaan doontaa Shaydaanka, "abeesadaa" qadiimka ah ugu horrayntii bini'aadanka u hoggaamisey jidka halaagga.

> *"Oo markaasaan arkay malaa'ig samada ka degaysa, oo waxay gacanta ku haysatay furihii yamayska iyo silsilad weyn. Oo markaasay qabsatay masduulaagii ahaa maska duqa ah, kaasoo ah Ibliiska iyo Shayddaanka, oo intii kun sannadood ah ayay xidhay, oo waxay ku ridday yamayskii, markaasay xidhay oo shaabad ku awday inaanu quruumaha mar dambe khiyaanayn ilamaa kunka sannadood ay dhammaadaan; oo taas ka dib waa in isaga la furo wakhti yar."* (Muujintii 20:1-3)

Shaydaanka waxaa la xidhayaa oo la takoorayaa kunkaa sanno oo dhan. Ka Sharka ah oo la xidhay waxay ka dhigan tahay in Ka Xaqa ah oo keliyahi talinayo, ugu dambaystana *"Xagga dhulka nabad baa ahaan doonta dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda."* (Luukos 2:14)

Dowladda Ilaahay ee xaqnimada ah, oo uu adduunku aad ugu baahi qabey, ayaa rumoobi doonta.

> *"Ilaaha samadu wuxuu dhisi doonaa boqortooyo aan weligeed la baabba'ayn… oo* ***weligeed taagnaan doonta****."* (Daanyeel 2:44)

## ADEECID DHAB AH

Qiyaastii saddex kun oo sannadood ka hor, Boqor Suleymaan[263] ayaa wax ka sii qoray xukunka Masiixa ee mustaqbalka markaas oo ay quruumaha oo dhan iyo qof kasta oo adduunka joogaa Isaga si adeecid run ah Isaga ugu sujuudi doonaan. Dad badan oo

maanta adduunka ku nool ayaa ku andacooda inay Ilaaha keliya ee runta ah adeecaan, laakiinse maalintaas, dadka oo dhammi si dhab ah ayay Isaga u garan doonaan oo u adeeci doonaan.

> *"**Wakhtigiisa** ayaa kan xaqa ahu barwaaqoobi doonaa, Oo nabadduna way badan doontaa tan iyo inta dayaxu aanu mar dambe jiri doonin.*
>
> ***Oo isagu wuxuu u talin doonaa** bad ilaa ka bad, Iyo tan iyo Webiga iyo ilaa dhulka darfihiisa. Kuwa cidlada degganu hortiisay ku sujuudi doonaan; Oo cadaawayaashiisuna ciidday leefleefi doonaan. Boqorrada Tarshiish iyo kuwa gasiiraduhuba waxay isaga u keeni doonaan gabbaro, Boqorrada Shebaa iyo kuwa Sebaana [Afrika iyo Careebiya] waxay isaga siin doonaan hadiyado. **Haah, oo boqorrada oo dhammu hortiisay ku wada sujuudi doonaan, Oo quruumaha oo dhammuna isagay u adeegi doonaan.***
>
> ***Waayo, isagu wuxuu samatabbixin doonaa kan baahan markuu qayliyo**, iyo miskiinka aan mid caawiya lahayn. Wuxuu u nixi doonaa miskiinka iyo kan baahan, Oo kuwa baahan naftoodana wuu badbaadin doonaa. Naftooduu ka furan doonaa khiyaano iyo dulmi, oo **dhiiggooduna hortiisuu qaali ku ahaan doonaa, oo isagu wuu noolaan doonaa**, oo waxaa la siin doonaa dahabka Shebaa; Had iyo goorba dadku way u ducayn doonaan, Oo weliba maalinta oo dhan isagay ammaani doonaan.*
>
> ***Oo dhulka waxaa jiri doona hadhuudh badan** xagga buuraha dushooda, Oo midhihiisuna waxay u soo ruxmi doonaan sida Lubnaan oo kale, Oo kuwa magaalada joogaana waxay u barwaaqoobi doonaan sida doogga dhulka. **Magiciisu weligiis buu waari doonaa**, Magiciisu waa sii jiri doonaa in alla intay qorraxdu jirto; **Oo dadku way ku barakoobi doonaan isaga, Quruumaha oo dhammuna waxay ugu yeedhi doonaan ka barakaysan**.*
>
> *Mahad waxaa leh Rabbiga Ilaahaa oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil, Oo **keligiis** sameeya waxyaalo yaab badan, Magiciisa ammaanta badanu mahad ha lahaado*

> *weligiisba, Oo dhulka oo dhanna ammaantiisu ha ka buuxsanto. Aamiin iyo Aamiin."* (Sabuurradii 72:7-19)

Sabuurkani wuxuu fahan cad inaga siinayaa boqortooyada mustaqbalka ee Masiixa taas oo uu *"Isagu u **talin** doono… ilaa iyo dhammaadka adduunka."*

**DOWLAD KAAMIL IYO XAQ AH**

*"Wuxuu u nixi doonaa miskiinka iyo kan baahan."* Talinta Masiixu waxay si buuxda uga duwanaan doontaa adduunkan musuqmaasuqa iyo qalalaasaha badan ee maanta. Waayo markii ugu horreysey laga soo bilaabo Dembaabidii, waxay dhammaan heli doonaan xorriyad iyo caddaalad. Nolosha cunug, haweeney, iyo nin kasta si buuxda ayaa loo qiimayn doonaa. *"Naftooduu ka furan doonaa khiyaano iyo dulmi, oo dhiiggooduna hortiisuu **qaali** ku ahaan doonaa."*

Warbaahintu waxay marar badan werisaa hoggaamiyeyaal siyaasadeed iyo kuwo diimeed oo ku baaqaya nabad iyo in laga waxa hadlo sidii hubka loo dhimi lahaa. Laakiinse, awooddooda gaaban daraadeed, hoggaamiyeyaashaasi waxay ku guuldarraystaan inay dhaliyaan nabadda ay sheeganayaan inay raadinayaan. Laakiinse marka uu *Isagu* soo laabto, Ka ay dabaysha iyo hirarka baddu adeecaan, adduunku wuxuu ugu dambaysta heli doonaa caddaalad run ah iyo *"**nabad** buuxda."*

Qorniyaal badan, boqorro iyo hoggaamiyaal adduun ayaa noolaa *oo **dhintay***. Laakiinse, Boqorka boqorrada, wuxuu Qorniinku ka odhanayaa: *"Magaciisu **weligiis** buu waari doonaa."* Adduunku wuxuu kun sannadood nabad iyo barwaaqo naashoon doonaa si aan weligeed hore loo arag markaas uu ku hoos jiro xukunka Wiilka Aadanaha, ka dembiga iyo dhimashada ka adkaaday.

> *"Haah, oo boqorrada oo dhammu **Isaga** hortiisay ku wada sujuudi doonaan. ... oo dadku way ku barakoobi doonaan **Isaga**, Quruumaha oo dhammuna waxay **Isaga** ugu yeedhi doonaan ka barakaysan."* (Sabuurradii 72:11, 17)

Ilaahay Laftiisa ayaa adduun daaley siin doona dowladda keliya ee xaqa ah ee abid soo marta. Carruurta la badbaadiyey ee Aadan, oo jidhadh ammaanan iyo dabeecado quduus ah abadiyan u yeeshay, ayaa Isaga la xukumi doona.

Boqortooyadaasi waxay xor ka noqon doontaa musuqmaasuq.

> *"Waxaa barakaysan oo quduus ah kii ka qayb gala sarakicidda kowaad; kuwaas dhimashada labaadi amar kuma laha, laakiinse waxay wadaaddo u ahaan doonaan Ilaah iyo Masiixa, oo* ***waxay isaga wax la xukumi doonaan kun sannadood****."* (Muujintii 20:6)

Iyada oo dowladu noocyo badan ahi shaqayn waayeen—boqortooyooyin, keli-taliye dimuqraadi, diimeed—Tiisuse ma dumi doonto.

Waxay iyadu dhinac kasta uga wanaagsanaan doontaa isla sida uu Isagu yahay.

## AMIIRKA NABADDA

Waxaynu hore uga soo fekerney dhowr waxyi oo laga sheegay imaanshihii hore ee Masiixa. Tusaale ahaan, nebi Miikaah ayaa ka sii waxyoodey inuu Masiixu ku dhalan dooney Beytlaxam. Laakiinse, ma aragtaa in waxyiga Miikaah sidoo kale hore u sii sheegay Maalin uu Masiixu adduunka oo dhan xukumi doono?

> *"Laakiinse adigu Beytlaxam Efraataahay in kastoo aad ku yar tahay kumanyaalka reer Yahuudah, waxaa adiga iiga kaa soo bixi doona* ***Mid*** *dalka Israa'iil* ***taliye ka noqon doona****, kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis. …**Isagu haatan mid weyn buu ku ahaan doonaa tan iyo dhulka darfihiisa**."* (Miikaah 5:2, 4-5)

Ishacyaah, oo ay Miikaah isku wakhti ahaayeen ayaa ka sii waxyoodey cunug dhalan dooney iyo Wiil abadiyan ah oo la siin dooney dadka. Waxyiga Ishacyaah wuxuu kaloo hore u sii tilmaamay Wiilka ay dowladnimadiisu adduunka oo dhan ahaan doonto.

> *"Waayo, waxaa inoo dhashay ilmo, waxaa layna siiyey wiil, oo* ***boqornimadu garbihiisay saarmi doontaa****, oo magiciisana waxaa loo bixin doonaa Ka Yaabkaleh, iyo Lataliye, iyo Ilaaha Xoogga leh, iyo Aabbaha Daa'imka ah, iyo Amiirka Nabadda.* ***Oo boqornimadiisa iyo nabaddu*** *way badnaan doonaan****, dhammaadna uma lahaan doonaan*** *carshiga Daa'uud iyo boqortooyadiisa, in la sii adkeeyo, oo caddaalad iyo xaqnimo lagu sii hayo haatan iyo tan iyo weligeedba."* (Ishacyaah 9:6-7)

Ugu dambaysta, adduunka oo dhammi wuxuu Wiilka Ilaahay ugu yeedhi doonaa darajooyinkiisa dhabta ah.

*"Magiciisana waxaa loo bixin doonaa Ka Yaabkaleh,*
*iyo Lataliye,*
*iyo Ilaaha Xoogga leh,*
*iyo Aabbaha Daa'imka ah,*
*iyo Amiirka Nabadda."*

Quruumuhu waxay ku naashoon doonaan caddaalad iyo nabad *"haatan iyo tan iyo* ***weligeedba****."*

Doonista Ilaahay ayaa si dhab ah dadka ula jiri doonta. Weligeed.

> *"Quruumo badan ayaa* ***RABBIGA isugu darmi doona****, oo* ***dadkaygay*** *noqon doonaan, oo* ***dhexdaadaan degganaan doonaa****."* (Sekaryaah 2:11)

Warka wanaagsan ee maantu waa in dhammaan kuwa Ruuxa Masiixu qalbiyadooda ku jiraa ay haystaan Ilaahay la joogitaankiisa iyo nabad *isla haddadan*.

## JAAHILNIMO DAMBE MA JIRI DOONTO

Markii hore ee uu Sayidku adduunkan dadka ku dhex noolaa, dadka badankiisu waxay ku guuldarraysteen inay garowsan waayaan ka uu Isagu ahaa. Ilaa iyo maantadan, dadka badankiisu waxay diidaan inay Ciise u aqoonsadaan Boqorkooda. Sidaas oo ay tahay, waxaa imaan doona wakhti dahabi ah markaas oo ay naf

kasta oo adduunka joogtaa Isaga u garowsan doonta Ka uu Isagu sheegtay inuu yahay.

> *"Oo **RABBIGU** wuxuu leeyahay, Waxay noqon doontaa in bil ka bil iyo sabti ka sabti binu-aadmiga oo dhammuba ay u iman doonaan inay hortayda **Igu** caabudaan."*
> (Ishacyaah 66:23)

Dib dambe uma jiri doonaan kumanyaal diimood, firqooyin, iyo koox diimeed oo adduunka ka buuxa. Mana jiri doono mid ku dhici doona inuu dafiro xaqiiqada taariikhiga ah ee ah inuu Ciise, Wiilka Ilaahay, iskutallaabta ku dhintay oo uu dhimashada ka sarakacay. In kasta oo aanay dhammaantood wada aamini doonin Isaga, dhammaantood waxay ogaan doonaan runta Isaga iyo akhbaarkiisa ku saabsan.

> *"Waayo, sida biyuhu badda u daboolaan oo kale ayaa dhulka waxaa ka buuxsami doona aqoonta sharafta RABBIGA."* (Xabaquuq 2:14)

**DAGAAL DAMBE MA JIRI DOONO**

Rabbigu marka uu adduunka u talinayo, khilaafka ka dhex jira Waqooyiga iyo Koonfurta, Bariga iyo Galbeedku wuu dhammaan doonaa. Khilaafka ka dhex jira Israa'iil iyo quruumaha ku wareegsani wuu soo gabaggaboobi doonaa. Silica xun ee qaaradda Afrika ka jiraa weligiis dib uma jiri doono. Qaaradaha kalena sidaas oo kale. Dagaalka sokeeye iyo cadaadisku wuu dhammaan doonaa. Nabad run ah, barwaaqo, iyo ujeeddo ayaa adduunka ka jiri doona.

> *"**Oo dad badan baa halkaas tegi doona oo waxay odhan doonaan, 'Ina keena, buurta RABBIGA aynu u kacnee,** oo guriga Ilaaha reer Yacquub aynu tagnee, oo isna wuxuu ina bari doonaa jidadkiisa.'*
>
> *Oo isaguna quruumuhuu u kala garsoori doonaa, oo dad badan ayuu canaanan doonaa, oo iyana waxay seefahooda ka tuman doonaan marashiyo, warmahoodana manjooyin,*

> *oo quruunina quruun kale seef uma qaadan doonto,* ***oo innaba mar dambe dagaal ma ay baran doonaan****."*
> (Ishacyaah 2:3-4)

Nabadda iyo midnimadu mid caam ah bay noqon doontaa inta ay dadku garanayaan oo caabudyaan Ilaaha keliya ee runta ah.

Wareerkii ka soo bilowday Baabel waa la beddeli doonaa. Mar kale, adduunka oo dhammi isku luuqad keliya bay ku hadli doonaan:

> *"Markaas ayaan dadyowga siin doonaa af daahir ah, si ay kulligood magaca RABBIGA ugu yeedhaan, oo ay isaga ugu adeegaan isku niyad keliya."* (Sefanyaah 3:9)

## HABAARKII WAA LA QAADAY

Bashbashkan iyo barwaaqadan mudada kunka sanno ah jirta waxaa sii dheer, inuu Rabbigu adduunka ka dulqaadi doono habaarkii uu dembigu iyada ku ridey.

Markii hore ee uu Ciise adduunka ku noolaa, wuxuu tusay awooddiisii uu habaarka ku qaadi karey. Isagu wuxuu dibedda u saaray jinniyo, oo jidhadh kala dhiman dib u hagaajiyey, oo cudurro bogsiiyey, oo kuwo dhintay soo sarakiciyey, kumanyaal quudiyey, oo tusay sidii uu awoodda sare uga lahaa bii'adda. Ficilladaas wuxuu caddayn aan laga murmi karin ku tusayey inuu Isagu ahaa Masiixii iyo Boqorkii la ballanqaaday.

Waxa uu Ciise imaanshihiisii hore ku bixiyey ama sameeyey waxay tusaale ka sii bixinayeen waxa uu si caam ah ugu bixin doono imaanshihiisa labaad.

Isagu wuxuu xabbisi doonaa Shaydaanka iyo jinniyadiisa. Wuxuu tirtiri doonaa kala dhinaanta jidhka ah, cudurrada, iyo dhimashada caadiga ah. Dhulku dib uma soo saari doono geedo qashin ah iyo qodxaan. Beeraleydu waxay si aan weligeed hore ugu dhicin u goosan doonaan midho badan. *Faqiirnimada* iyo *gaajadu* waxay noqon doonaan sheekooyin beri hore jiri jirey.

Quruun kastaa waxay geli doontaa cahdi dahabi ah oo taariikhda adduunkan ah.

Boqortooyada jannada ee ay dadkii adduunkan ku noolaa markii hore uu Ciise yimid ayaa hadda adduunka oo dhan lagaga aasaasi doonaa imaanshihiisa labaad.

> *"Kuwa indhaha la' indhahoodu furmi doonaan, oo kuwa dhegaha la' dhegahooda furka laga bixin doonaa. Oo markaasaa ninkii curyaan ahu wuxuu u boodboodi doonaa sida deerada oo kale, oo kii carrab la' carrabkiisuna wuu gabyi doonaa, waayo, cidlada biyaa ka soo burqan doona, oo lama-degaankana durdurraa ka soo bixi doona…. Yeyda iyo baraarku way isla wada daaqi doonaan, libaaxuna sida dibi oo kale caws buu u cuni doonaa, oo* ***boodhkuna abeesada quudkeeduu ahaan doonaa****. RABBIGU wuxuu leeyahay, Buurtayda quduuska ah oo dhan waxba kuma yeeli doonaan, waxna kuma baabbi'in doonaan."* (Ishacyaah 35:5-6; 65:25)

Xataa boqortooyada xayawaanku si nabad ah bay u wada noolaan doontaa, oo waxay ku laaban doontaa cunidda dooggii iyaga hore loogu talogalay inay cunaan, waagii Ceeden, ka hor intaanu dembigu jirin.

Sidaas oo ay tahay, xididka dembiga waxaa laga heli doonaa qalbiyada kuwa dhasha wakhtiga lagu jiro kunka sanno ee Masiixa xukunkiisa. Isla sida fac kasta oo kale, ayuu farcanka Aadan u baahnaan doonaa inay helaan hadiyadda Ilaahay ee dembidhaafka kaddib marka ay aaminaan jidka badbaadada ee uu Isagu bixiyey.

Adigu ma aragtaa waxa ay aayadda ugu dambaysey ee aynu akhrinay ka sii sheegeyso abeesada? *"Boodhkuna abeesada quudkeeduu ahaan doonaa."* Kunkaa sanno gudahooda, masasku waxay weli ku socon doonaan beerkooda. Dhulka ay gurguuranayaan wuxuu xusuus u noqon doonaa inay weli soo socoto dhacdo weyn oo yaab leh oo dhici doonta heerka saddexaad oo ah ka ugu dambeeya qorshaha uu Ilaahay si abadiyan ah dib ugu laabayo habaarka.

## WEERARKA UGU DAMBEEYA EE SHARKA

Waxaynu hore u soo barannay in *"masduulaagii ahaa maska duqa ah, kaasoo ah Ibliiska iyo Shayddaanka"* la xidhi doono oo kunkaa sanno ee uu Masiixu adduunkan ka talinayo lagu hayn doono god aan gun lahayn, *"inaanu quruumaha mar dambe khiyaanayn ilamaa kunka sannadood ay dhammaadaan;* ***oo taas ka dib waa in isaga la furo wakhti yar****."* (Muujintii 20:2-3)

Muxuu Ilaahay u sii deynayaa Shaydaanka? Maxaa isaga xabsiga loogu sii hayn waayey?

Ilaahay, xigmaddiisa aadka u weyn daraadeed, wuxuu qalbiga dembiga miidhan ah ku siin deyn doonaa hal wakhti oo kama dambays ah ka hor inta aan sharka si abadiyan ah loo tirtirin. Inta uu bini'aadanku wakhtiga adduunka uga gudbayo aakhiro, xaqiiqadan ayaa ahaan doonta mid aan laga gabban karin: farcanka Aadan marka iskiis kor ugama gudbi karo oo kama adkaan karo dabiicaddiisa dembiga leh. RABBIGA Ilaaha ah oo keliya ayaa dembiileyaasha xaq ka dhigi kara oo beddeli kara qalbiyadooda qalloocan.

> *"**Qalbiga dadku wax kasta buu ka khiyaano badan yahay, oo aad iyo aad buu u xun yahay**, bal yaa garan kara? Aniga RABBIGA ah ayaa qalbiga baadha, anigaa kelyaha imtixaama, si aan nin kastaba ugu abaalmariyo sidii jidkiisu ahaa iyo sidii midhaha falimihiisu ahaayeen."*
> (Yeremyaah 17:9-10)

Ilaa heerkee ayuu qalbiga dadku yahay mid *"khiyaano badan oo aad u xun?"* Xataa kaddib markii ay kun sanno ku noolaayeen adduun aad u wanaagsan oo aan lahayn, oo uu ka talinayey Boqor aan iin lahayn, isla daqiiqadda Shaydaanka la sii daayo, dad faro badan oo dhashay kunkaa sanno dhexdooda ayaa beenta Shaydaanka rumayn doona oo isaga la jaal noqon doona! Cadowga Ilaahay ayay kuwaasi la raaci doonaan oo waxay ku fallaagoobi doonaan Abuurahooda, isla sidii kuwii ay ka soo farcameen ku sameeyeen Beer Ceeden dhexdeeda.

Kaasi wuxuu noqon doonaa weerarka kama dambaysta ah ee sharka.

## IS DIFAACA SHAYDAANKA EE KAMA DAMBAYSTA AH

> *"Oo markii kunkii sannadood ay dhammaadaan ayaa Shayddaanka laga furi doonaa xabsigii lagu xabbisay, oo wuxuu u soo bixi doonaa inuu khiyaaneeyo quruumaha deggan dhulka afartiisa gees… oo tiradooduna waa sida ciidda badda. Oo waxay ku soo kor baxeen ballaadhka dhulka, oo waxay hareereeyeen kaambadii quduusiinta*

> *iyo magaaladii la jeclaa;* ***markaasaa waxaa samada ka soo degay dab, wuuna laastay iyagii****.”* (Muujintii 20:7-9)

Ilaahay wuxuu guutooyinka Shaydaanka ee bini'aadanka fallaagoobey ah u oggolaan doonaa inay Yeruusaalem hareereeyaan, laakiinse isla marka ay is uruursadaan, dab ayaa samada ka imaan doona oo iyaga wada gubi doona. Shaydaanka iyo dhammaan kuwa isaga raacay waxay gaadheen wakhtigoodii ugu dambeeyey.

## SHAYDAANKII WAA LA JEBIYEY

Waxa ku xiga ee dhacayaa waa dhacdo taariikhda ah oo muhiimad rasmi ah leh:

> *“****Oo Ibliiskii iyaga khiyaanayn jirayna waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka iyo baaruudda ahayd****, halkaas oo ay ku jiraan bahalkii iyo nebigii beenta ahaa, oo iyaga waxaa la cadaabi doonaa habeen iyo maalinba weligood iyo weligoodba.*
>
> ***Oo markaasaan arkay carshi weyn oo cad, iyo kii ku fadhiyey, oo wejigiisa dhulkii iyo samadii ay ka carareen****, oo iyagiina meel looma helin. Oo markaasaan arkay kuwii dhintay, yar iyo weynba, iyagoo taagan carshiga hortiisii, markaasaa waxaa la furay kitaabbadii; oo haddana waxaa la furay Kitaab kale oo ah kii Nolosha; oo kuwii dhintay waxaa lagu xukumay waxyaalihii kitaabbadii ku qornaa, sidii ay shuqulladoodii ahaayeen. Markaasaa baddii waxay sii daysay kuwii dhintay oo dhexdeedii ku jiray; oo Dhimashadii iyo Haadeesna waxay sii daayeen kuwii dhintay oo dhexdoodii ku jiray; markaasaa iyagii waxaa laga xukumay nin walba sidii shuqulladiisu ahaayeen.*
>
> *Oo Dhimashadii iyo Haadeesba waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd.* ***Oo taasu waa dhimashadii labaad oo ah badda dabka ah. Oo ku alla kii aan Kitaabkii Nolosha laga helin isagoo ku qoran, waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd****.”* (Muujintii 20:10-15)

Khilaafkii weligiis soo socdey halkaas ayuu weligiis ku dhammaan doonaa.

Xukunka Carshiga Weyn ee Cad kaddib, habaarkii dembigu halkaas ayuu ku dhammaan doonaa. Laakiinse dersiyada laga bartay xukunka Ilaahay ee dembiga marna lama ilaawi doono. Abuuritaanka oo dhammi wuxuu ka markhaati noqon doonaa xumaanta dembiga iyo xaqnimada Ilaahay.

Ugu dambaynta, Abeesada madaxa ayaa laga jebin doonaa.

Shaydaanka iyo dhammaan kuwa raacay waxaa weligood la dhex gelin doonaa *"dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey."* (Matayos 25:41) Xabsiga abadiyanka ah kuwa lagu xukumay abid kama baxsan doonaan. Mana ay awoodi doonaan inay ciqaabtooda ku eedeeyaan Ilaahay, waayo xataa markii lagu jirey kunka sanno ee adduunka aan iinta lahayn ee Boqorka ugu wanaagsani haystey, waxay kuwaasi doorteen inay ku fallaagoobaan Abuurahooda iyaga Leh.

Dadku haba yaraatee marmarsiinyo ma haysan doonaan.

Sharafta iyo akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ah ayaa si kama dambays ah oo abadiyan ah loo xaqiijin doonaa.

Dhammaan kuwa magacyadooda lagu qoray *Kitaabka Nolosha* waxay weligood la joogi doonaan Ilaahay, *"Laakiinse kuwa fulayaasha ah, iyo kuwa aan rumaysan, iyo kuwa karaahiyada ah, iyo gacankudhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo saaxiriinta, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo beenlowyada oo dhan waxaa qaybtoodu ku jiri doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu ka ololayaan, oo taasuna waa dhimashada labaad."* (Muujintii 21:8) [264]

Mar dambe sharku madaxiisa foosha xun uma soo kicin doono. Abuuritaanka oo dhammi wuxuu weligiis adeeci doonaa Ilaaha keliya ee runta ah.

## ISAGA AYAY LA JOOGI DOONAAN!

Waxa ku xiga ee dhici doonaa waa wax maskaxdeena ka weyn.

> *"Markaasaan maqlay cod weyn oo carshiga ka yeedhaya oo leh,* ***Bal eeg, rugta Ilaah waxay la jirtaa dadka, oo isna wuxuu la degganaan doonaa iyaga****, oo iyana waxay*

> *ahaan doonaan dadkiisa, oo* ***Ilaah qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga****, oo wuxuu ahaan doonaa Ilaahood; oo isna indhahooda ilmo kastuu ka tirtiri doonaa, oo* ***dhimashona mar dambe ma jiri doonto, oo mar dambena ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona****, waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen. Markaasaa kii carshiga ku fadhiyey wuxuu yidhi,* ***Bal eeg, wax kastaba cusayb baan ka dhigayaa****."* (Muujintii 21:3-5)

Isla sida ay labada cutub ee Axdigii Hore ugu horreeya u qeexayaan qorshihii hore Ilaahay u hayey abuuritaankiisa, ayay labada cutub ee Axdiga Cusub ugu dambeeyaa u qeexayaan abuuritaankiisa cusub. Shaydaankii, dembigii, iyo dhimashadii oo laga takhalusay dabadeed, wax kastaa waxay marka kale u sida ugu wanaagsan u qaabilsanaan doonaan dabeecadda quduuska ah ee Abuuraha. Bini'aadanka iyo Shaydaanku dib dambe dembi halis uguma sii jiri doonaan. Duruustii loo baahnaa markaa waa la bartay, oo *"Ilaah qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan doonaa Ilaahood."*

Qorshaha Ilaahay wuxuu ka kooban yahay wax aad uga badan baabi'inta cawaaqibadii dembigii Aadan oo keliya. Waxaa ku jira oo kale *"wax kasta oo la cusboonaysiinayo."* Dadka Ilaahay waxay yeelan doonaan jidhadh samaawi ah oo cusub oo ammaanan oo ku habboon joogitaanka Ilaahay hortiisa. Aakhirada abadiyanka oo dhan dhexdeeda, nafahaa la badbaadiyey ee qaran kasta iyo fac kasta ka socdaa waxay ka qayb qaadan doonaan qorshayaashiisa cajiibka ah ee samaawiga weligood u ah. Masiixiyiin dhab ah ahaan, farxaddeena ayay noqon doontaa inaan weligayo Isaga la joogno oo raalli ka ahaanshihiisa farxadda ayay ahaan doontaa inaanu halkaas joogno.

*"Ilaaha nala joogaa"* wuxuu noqon doonaa xaqiiqo si abadiyan ah u dhabowdey.

## ISAGA OO KALE!

Isla jooga iyo is weheshiga Badbaadiyaha iyo Dadkiisu marna ma dhammaan doono. Wixii Aadan ku lumiyey jannadii adduunka ahayd waa la soo celin doonaa oo waxaa ka sii fiicnaan doona

Jannada samaawiga ah. Markii uu Ilaahay ninkii iyo naagtii ugu hore abuurayey, wuxuu Isagu yidhi,

> *"Aan nin inoo eg ka samayno* ***Araggeenna****."* (Bilowgii 1:26)

Wax kastaa waxay noqon doonaa sidii uu Isagu u qorsheeyey.

Jannada waxaa ka buuxi doona rag iyo dumar leh *Isaga u araggiisa iyo u ekaanshihiisa* ha ahaato dabeecaddooda iyo hab dhaqankoodaba e. Dembigu xataa dib dambe suurtoggal uma ahaan doono. Dadka Ilaahay waxaa lagu shaanbadayn doonaa xaqnimo. Nebi Daa'uud arrintan ayuu hore u sii arkay markii uu qorayey: *"Laakiinse anigu* ***xaqnimaan*** *wejigaaga ku fiirin doonaa, Oo waa i deeqi doonaa markii aan ammaantaada arko, oo aan* ***ekaantaada*** *la soo tooso."* (Sabuurradii 17:15)

Raggaa, haweenkaa, iyo carruurtaa la soo furtay weligood ammaan bay ahaan doonaan iyaga oo ah abuuritaanka cusub ee Ilaahay, iyagoo *"u ekaaday* ***suuradda Wiilkiisa****."* (Rooma 8:29)

> *"Weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu muuqdo* ***aynu noqon doonno sidiisa oo kale****, waayo, waynu arki doonnaa Isaga siduu yahay."* (1 Yooxanaa 3:2)

**KUWIISA!**

Laga soo bilowgii, ujeeddada Abuuruhu waxay ahayd inuu boqortooyadiisa ka dhex aasaaso bini'aadanka si aynu innagu Isaga ammaantiisa, quduusnimadiisa, jacaylkiisa, caddaaladiisa, naxariistiisa, iyo nimcadiisa ku ogaan karno.

Dagaalkii dheeraad ee Shaydaanka dhexdiisa, waxa mar kastaba qorshaha Ilaahay ahaa inuu *"soo booqdo dadka aan Yuhuudda ahayn inuu dad uga soo bixiyo iyaga magiciisa aawadiis."* (Falimaha Rasuullada 15:14) Sayidku wuu ku guuleysan doontaa dantii uu adduunkan u yimid inuu ku guuleysto: dad la badbaadiyey oo araggiisa leh, kuwaas oo qalbiyo mahadnaq iyo khushuuc leh, weligood Isaga jeclaan doona, oo ku faraxsanaan doona, oo ammaani doona.

Heerka saddexaad ee kama dambaysta ah ee qorshaha Ilaahay uu habaarka ku beddelayaa wakhti kasta ayuu bilaaban karaa.

Adigu diyaar ma tahay? Fikirka ku saabsan soo laabashada Masiixu adiga ma farxad buu kaa buuxinayaa mise argagax?

Baybalku wuxuu fahanno badan inaga siinayaa dhammaadka wakhtiga kaas oo aynaan socdaalkeenan aynu Qorniinka ku dhex marayno wakhti ugu hayn. Haddase, waxaa inagu filan inaynu ogaano in Abuuraheena aaminka ahi uu kaga dhabayn doono waxyi yar oo ku aasan cutubka ugu dambeeya ee Kitaabkiisa:

> *"Oo **mar dambena naclad** [habaar] ma jiri doonto."*
> (Muujintii 22:3)

# 30

# Sii Qooraanso Jannada

Dadka badankiisu wuxuu sharka uga fekeraa si *ying-yang* oo kale ah. *Yin* macnihiisu waa *dahsoon, yang* mancaheeduna wax *muuqda.* Laga yaabee inaad adigu aragtay calaamadda yin-yang—goobaabin midabkeedu isugu jiro madow iyo caddaan. Filasoofigan qadiimka ah ee Shiinayska ahi waxaa ku jira run, oo wuxuu khalkhal geliyaa kala duwanaanshaha u dhexeeya khayrka iyo sharka, saxda iyo khaladka, nolosha iyo dhimashada. Kani wuxuu khayrka iyo sharka u arkaa arrin aan dhammaad lahayn oo caadi ka ah jiritaanka bini'aadanka.

Sidii aynu soo aragnay, Baybalku wuxuu ina siinayaa fahan kaa ka duwan oo ku saabsan khayrka ama wanaagga iyo sharka. Ma taageerayo fikrada ah in silica iyo niyad-jabku hore iyo haddaba ay weligood qayb muhiim ah uga ahaayeen adduunka. Qorniinka waa cad yahay. Waxaa imaan doonta maalin sharka, dhibaatada, iyo dhimashadu ay ka soo gabagaboobi doonaan taariikhda adduunka.

Sawirkan hoose wuxuu tusayaa qorshaha aan la beddeli karin ee Ilaahay.

| ← Abdiyinkii Hore | [Wakhtiga] | Aakhiro → |
|---|---|---|
| **Wanaag Kaamil Ah** | **[Khayr / Shar]** | **Wanaag Kaamil Ah** |

Kharyrka iyo sharka hadda, bil xir iyo bil fur ayaa la geliyey. Xaaladdaasi weligeed ma sii jiri doonto.[265]

Labada cutub ee Kitaabka Ilaahay ugu dambeeya ayaa sawir inaga siinaya adduun bilaa dembi ah, sida ay tahay ee saxda Ilaahay loo jecel yahay oo loo weyneeyo. Waa inta u dhaxaysa cutubka ugu horreeya iyo ka ugu dambeeya meesha aynu ku arkayno Ilaahay oo fulinaya qorshihiisa uu dembiga iyo nacalladiisa wax kaga qabanayo, oo uu ku badbaadinayo dadka uu Isagu doortay, kuwaas oo Isaga garanaya oo jecel, oo *doonaya* inay weligood Isaga la joogaan.

Sida qiso kasta oo kale oo wanaagsan, taariikhda Ilaahay ee badbaadadu waxay leedahay bilow, dhex, iyo dhammaad.

**BILOWGA:** Bilowgii 1 & 2:
*Adduun bilaa shar ah oo wanaagsan* – ka hor intii aan la dembaabin.
**DHEXDA:** Bilowgii 3 ilaa Muujintii 20:
*Adduun dembi faddareeyey* – Badbaadinta Ilaahay.
**DHAMMAAD:** Muujintii 21 & 22:
*Adduun bilaa dembi ah oo wanaagsan* – kaddib marka sharka laga takhaluso.

## KITAABKA DHAMMAADYADA

Isla sida uu kitaabka ugu horreeya Baybalku u yahay *kitaabka bilowyada* ayuu kitaabka Baybalka ugu dambeeyaa u yahay *kitaabka dhammaadyada*.

| **Bilowgii** | **Muujintii** |
|---|---|
| ◊ Bilowgii wax kasta | √ Dhammaadka wax kasta |
| ◊ Abuuritaankii samada & adduunka | √ Abuuritaanka samo & adduun cusub |
| ◊ Ilaahay qorrax ayuu u abuurayaa adduunka | √ Ilaahay baa ah Iftiinka jannada |
| ◊ Dibindaabyayntii ugu horreysey ee Shaydaanku dadka u geystey | √ Dibindaabyada kama dambaysta ah ee Shaydaanku dadka u geysanayo |
| ◊ Xukunkii ugu horreeyey ee Ilaahay | √ Xukunka kama dambaysta ah ee Ilaahay |
| ◊ Imaanshihii dembiga & dhimashada | √ Tirtiraada dembiga & dhimashada |

| | |
|---|---|
| ◊ "Aadankii Koowaad" oo maamulkii lumiyey | √ "Aadanka Dambe" oo maamulkii dib u hantay |
| ◊ Ilaahay oo ballanqaaday inuu Shaydaanka jebinayo | √ Shaydaankii oo bad dab ah lagu tuuray |
| ◊ Wankii ugu horreeyey ee allabari laga dhigay | √ Wankii Ilaahay oo la sarraysiiyey |
| ◊ Dadkii oo jannadii adduunka laga saaray | √ Dad la geeyey jannada samaawiga ah |
| ◊ Dadkii oo laga dheereeyey Geedka Nolosha | √ Dad wax ka cunaya Geedka Nolosha |
| ◊ Bini'aadankii oo Ilaahay ka dheeraaday | √ Bini'aadankii la badbaadiyey oo weligood Ilaahay la jiraya |

Liistadu way sii socon kartaa, laakiinse koley waad fahantay fikradda aan soo gudbinayo.

## MUUJINTII

Inta aynu dhammaynayno socdaalkii aynu ku soo wada jirney, waxaynu dooneynaa inaynu ka sii fekerno "dhammaadka" qisada Ilaahay, taas oo dhab ahaantii ah daah-furidda bilow gebigiisba cusub.

Kitaabka uu Baybalku ku dhammaanayaa wuxuu ku bilaabanayaa erayadan:

> *"Tanu waa muujintii Ciise Masiix oo Ilaah isaga siiyey inuu tuso addoommadiisa—waxyaalaha waajibka ah inay dhowaan dhacaan. Oo isagu wuxuu taas tusay addoonkiisii Yooxanaa isagoo malaa'igtiisa u soo diraya isaga, kaasoo ka markhaati furay erayga Ilaah iyo markhaatifuridda Ciise Masiix, iyo wixii uu isagu arkay oo dhan. Waxaa barakaysan ka akhriya iyo kuwa maqla erayadii wax sii sheegidda, oo xajiya waxyaalaha ku qoran, waayo, wakhtigii wuu dhow yahay ...* ***Kan ina jecel oo dembiyadeena dhiiggiisa inagaga furay*** *...* ***Isaga ammaanu ha u ahaato iyo dowladnimo weligiis iyo weligiisba. Aamiin. Bal eega, wuxuu la imanayaa daruuraha, oo waxaa isaga arki doona il kasta iyo kuwii isaga wareemay****; oo qabiilooyinka dhulka oo dhammuna*

*isagay u barooran doonaan. Haah, saas ha ahaato. Aamiin. Rabbiga Ilaaha ahu wuxuu leeyahay, 'Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega [xarfaha ugu horreeya iyo ka ugu dambeeya ee alifbeetada af Giriiggga], oo ah kan jira oo jiray oo iman doona, iyo Qaadirka.'"*

(Muujintii 1:1-3, 5-8)[266]

Ilaahay wuxuu erayadan siiyey *"addoonkiisii Yooxanaa."* Yooxanaa wuxuu ka mid ahaa laba iyo tobankii xertii Ciise la socdey intii uu Isagu adduunka ka adeegayey.[267] Lixdan sanno kaddib markii uu Ciise jannada dib ugu laabtay, ayuu Ruuxa Quduuska ahi u muujiyey Yooxanaa inuu qoro kitaabkan ugu dambeeya Kitaabka Ilaahay.

*Muujinta* macnaheedu waa *daahfuridda*. Waa kitaab cajiib leh oo daahfuraya dhacdooyin aanu qof bini'aadan ahi mala-awaali karin. Wuxuu si habaysan u sharaxayaa sida uu Ilaahay u soo celin doono sharaftii magaciisa oo u ilaalin doono oo dib ugu soo celin doono dowladnimadii samaawiga ahayd ee dembiga dartii la lumiyey. Wuxuu kaloo kitaabkani fikrad kooban inaga siinayaa Jannada.

## CARSHIGA

Dhowr ka tirsan nebiyada iyo rasuullada Ilaahay oo la xushay ayaa wax yar laga tusay meesha uu Ilaahay deggan yahay ama carshigiisa, laakiinse midkoodna sida rasuul Yooxanaa oo kale uma arkin taas. Yooxanaa wuxuu qoray:

*"Waxyaalahaas dabadeed kor baan eegay oo waxaan arkay **albaab samada ka furmay**, oo codkii ugu horreeyey oo aan maqlay sidii buun ila hadlaya oo kale, wuxuu igu yidhi, 'Halkan soo fuul oo waxaan ku tusi doonaa waxyaalaha waajibka ah inay hadda ka dib dhacaan.' Haddiiba waxaan ku jiray Ruuxa, oo bal eeg, waxaa jiray **carshi samada qotoma**, **oo mid baa carshigii ku fadhiyey**, oo kii fadhiyey midabkiisu wuxuu u ekaa dhagax yasbid iyo dhagax sardiyos* [laba ah dhagxaanta qaaliga ah[268]]. *Oo carshigana waxaa ku wareegsanaa qaansoroobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumurud."* (Muujintii 4:1-3)

Yooxanaa wuxuu la legdamay inuu sharaxo qolka carshiga ee samada. Wuxuu ahaa mid aan hadal lagu sharixi karin oo ammaan samaawi ah leh. Waxaa carshiga Ilaahay dul heehaabayey malaa'igo si aan nasasho lahayn ugu dhawaaqaya: *"**Quduus, quduus, quduus** waxaa ah Rabbiga ah Ilaaha Qaadirka ah, oo jiray oo jira oo iman doona."* (Muujintii 4:8)

Yooxanaa wuxuu keliyoo soo werin karey sidii ay wixii uu arkay si aad u yar ugu shabaheen waxyaalaha adduunka ka jira, laakiinse wax kastaa si samaawi ah bay uga qurux badnaayeen oo uga weynaayeen arrimaha adduunka. Wuxuu isagu qooraansaday meel leh iftiin dhalaalaya iyo midabo widhwidhaya oo samaawi ah. Wuxuu maqlay dhawaaqyo onkod ah io codad macaan oo badan oo farxad leh, ammaan badani afkooda ka soo burqanayso. Ka isaga indhihiisu ka jeesan kari waayeen wuxuu ahaa *Kii* carshiga ku fadhiyey.[269]

## RAYRAYNTII

Diimaha adduunku siyaabo kala duduwan oo badan bay Jannada sawir uga bixiyaan.

Qeexidaha tan ka bixiyaan ayaa qaab daran. Laga yaabee inaad aragtay sawir gacmeedyo: dad daruuraha ag fadhiya oo shareero tumaya! Maaha sidaas sida uu Baybalku ku qeexayo gurigaas Ilaahay ee ammaanta leh.

Dad kale ayaa jannada ku qeexa meel raggu ku raaxaystaan oo ay had iyo goor galmo aanay ka daalayn ku mashquulsan yihiin. Fikradda noocan ahina way khaldan tahay. Markii uu Sayid Ciise adduunkan joogey, wuxuu baray, in guriga Aabbihiis, ee ay dadka la badbaadiyey gelayaan *"layskuma guursado, guurna layskuma siiyo, laakiin waxay yihiin sida malaa'igaha Ilaah oo jannada ku jira."* (Matayos 22:30)

Jannadu waa meel Ilaahay udubdhexaad u yahay oo ay farxadda, cajaa'ibka, iyo ammaanta joogitaanka Ilaaha xigmadda iyo jacaylka badan hortiisu aanay marna dhammaanayn. Jannadu waa meel uu xidhiidhka ka jiraa ka sarreeyo mid kasta oo aynu adduunka ku naqaaney. Ilaahay ayaa guurka adduunkan aasaasay si uu wax yar inooga tuso xidhiidhka weyn ee weligiis ka dhex jiri doona Sayidka iyo dadkiisa uu badbaadiyey. Xataa guurarka ugu fiicani ma meteli karaan farxadda iyo is weheshiga quduuska

ah ee ay dadka Masiixu badbaadiyey Isaga kula yeelan doonaan jannada. Qorniinku wuxuu tan ugu yeedhaa *"qarsoodi **weyn**"* (Efesos 5:32) oo kaloo odhanayaa, *"Waxaa barakaysan kuwa loogu yeedhay **arooska Wanka cashadiisa**!"* (Muujintii 19:9)

Wax kasta oo jannada ahi ISAGA ayay ku saabsan yihiin.

Malaa'igihii la abuuray kumanyaal sanno ka hor ayaa maantadan weli Ilaahay yaab, mucjiso, iyo caabudaad la hor taagan. Sidaas oo kale ayay farcanka Aadan ee la badbaadiyeyna noqon doonaan. Fahanka iyo jeclaanta quruxda, xigmadda iyo wanaagga Rabbiga Ilaaheena ahi wuxuu inagu qaadanayaa weligeen, xataa aakhiro.

> *"Ilaahow, fikirradaadu ila qiimo badanaa! Oo tiro badanaa! Haddaan tiriyo, way ka sii tiro badan yihiin ciidda, Oo markaan tooso weli adigaan **kula joogaa**."*
> (Sabuurradii 139:17-18)

Rayraynta iyo farxadda la joogitaanka Ilaahay marna ma gaboobeyso. Su'aashu maaha inaynu taas weligeen ka caajiseyno, laakiinse miyaynu awoodeynaa inaynu abidkeen indhaheena Isaga ka jeedino?

> *"Waxaad i tusi doontaa jidka nolosha, **hortaada farxad baa ka buuxda**, Gacantaada midigna nimco baa ku jirta weligeed."* (Sabuurradii 16:11)

**DAD FARO BADAN**

Rasuul Yooxanaa keliyoo wax yar inagama tusayo Sayidka oo carshigiisa ku fadhiya, laakiinse wuxuu kaloo arkay dad faro badan oo la badbaadiyey.

> *"Waxyaalahaas ka dib waxaan arkay **dad faro badan, oo aan ninna tirin karin, oo lagala soo baxay quruun kasta, iyo qabiil kasta, iyo dad kasta, iyo af kasta**, oo taagan carshiga hortiisa iyo Wanka hortiisa, iyagoo qaba khamiisyo cadcad, gacmahana ku haysta caleemo timireed. Oo iyana waxay ku dhawaaqeen cod weyn,*

> *iyagoo leh, Badbaado waxaa leh Ilaahayaga carshiga ku fadhiya iyo Wanka."* (Muujintii 7:9-10)

Adigu ma xasuusataa sidii uu Ilaahay ugu ballanqaaday inuu Isagu quruumaha iyo dadyowga adduunka oo dhan ku barakayn doona Badbaadiye ka dhalan doona farcanka Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub?[270] Ilaahay wuxuu Yooxanaa u oggolaaday inuu mustaqbalka arko oo uu ka markhaati noqdo kaamilaadda ballanqaadkan.

Quruun iyo dad kasta oo adduunka ku nool luuqad kasta ha ku hadleene wax baa ka joogi doona carshiga Ilaahay hortiisa. Qalbiyo ay mahadnaq iyo farxadi ka buuxaan ayay dadkaa badan ee ah dembiileyaasha la badbaadiyey weligood ku ammaani doonaan oo ku caabudi doonaan *Wanka* dhiiggiisa u daadiyey iyaga daraaddood si uu uga badbaadiyo dhimasho abadiyan ah ama naar oo uu ku barakeeyo nolol weligeed ah.

> *"Oo waxay ku gabyeen gabay cusub iyagoo leh,* ***Adigu waxaad istaahishaa… waayo, waa lagu gowracay, oo waxaad Ilaah dhiiggaaga ugu soo iibisay*** *dad ah qabiil kasta iyo af kasta iyo dad kasta iyo quruun kasta, oo waxaad iyagii ka dhigtay inay Ilaaheena u ahaadaan boqortooyo iyo wadaaddo; oo iyana dhulka ayay wax ku xukumi doonaan.*
>
> *Oo anna carshigii iyo xayawaanadii iyo odayaasha hareerahoodii waxaan ku arkay oo ka maqlay malaa'igo badan codkood, oo tiradooduna waxay ahayd toban kun oo meelood oo min toban kun ah, iyo kumaan kun; oo waxay cod weyn ku lahaayeen,* ***Istaahil waxaa ah Wankii la gowracay*** *inuu helo xoog, iyo maal, iyo xigmad, iyo itaal, iyo ciso, iyo ammaan, iyo mahad."* (Muujintii 5:9-12)

**BIXIYAHAYGA!**

Afar kun oo sanno ka hor, nebi Ayuub ayaa sidan Ilaahay u ammaanay:

> *"**Waan ogahay in kii i soo furtay nool yahay**, Iyo inuu ugudambaysta dhulka ku istaagi doono. Oo markii haraggaygu sidaas u baabba'o dabadeed, **ayaan anigoo aan jiidh lahayn Ilaah arki doonaa**, kaasoo aan **aniga qudhaydu** arki doono, oo **indhahaygu** ay fiirin doonaan, oo aanay kuwa mid kale arkayn. Qalbigayguna aad buu ugu **hiloobey**!"* (Ayuub 19:25-27)

Qalbigaagu sida Ayuub oo kale ma u hiloobaa inuu *"Ilaahay arko"?* Isaga ma taqaanaa oo ma u qirsan tahay inuu yahay Bixiyahaaga?

Masiixiyiinta runta ah oo dhammi Ayuub ayay rajo run ah la leeyihiin. Saaxiibkaygow, anigu af-hayeen adiga kuuma noqon karo, laakiinse waxaa anigu ogahay inaan Bixiyahayga si toos ah u arki doono! Waxaan anigu la socon doonaa oo la hadli doonaa *"Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey **daraadday**."* (Galatiya 2:20)

Haa, waxaan sugayaa wakhtiyo cajiib ah oo aan dadka Ilaahay weheshanayo fac kasta oo ay nooleenba, oo ku jiraan xubno qoyska ka tirsan iyo saaxiibo mar hore Sayidka u tegey, oo qalbigayga oo dhan ayaan ku rajeynayaa inaad *adiguna* kuwaas ka mid noqon doontid. Laakiinse ta waxaas oo dhan ka muhiimsani waa inaan *Ciise* arki doono!

Isagu naartayda ayuu aniga daraadeed u qaaday.

Shaki la'aan, mid ka mid ah xaqiiqooyinka ugu cajiibsan ee maskaxdaydu isku deyi kartaa inay ka baaraandegto waa tan:

***ISAGU*** wuxuu *aniga* iga doonayaa inaan aakhiro ***ISAGA*** la joogo!

Habeenkii Cisie la qabtay si loo xukumo oo iskutallaabta loogu qodbo, wuxuu Isagu ku ducaystey:

> *"**Aabbow, kuwaad i siisay waan doonayaa inay ila joogaan meeshaan joogo** inay arkaan ammaantaydii aad i siisay, waayo, adaa i jeclaa intaan dunida la aasaasin."* (Yooxanaa 17:24)

Kani waa nuxurka akhbaarka Ilaahay. Isagu wuxuu bini'aadanka u sameeyey inay Isaga la joogaan, laakiinse adiga

kuguma khasbayo inaad martiqaadkiisa aqbashid.

Doorashada adiga ayuu xor kaaga dhigay.

> *"Kii guulaysta ayaa waxaan siin doonaa amar uu wax kaga cuno geedka nolosha oo ku dhex yaal Firdooska Ilaah. …Waa ayo kan dunida ka adkaadaa, kan rumaystaa inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah mooyaane?"*
> (Muujintii 2:7; 1 Yooxanaa 5:5)

## GURIGA KAAMILKA AH

Labada cutub ee Baybalka ugu dambeeya wuxuu Yooxanaa wax yar inaga tusayaa guriga abadiyanka ah, waa aakhiro e, meeshaas oo ay Masiixiyiinta runta ah ee abid jirey ay kuwada noolaan doonaan iyaga Abuurahooda-Bixiyahoodu, oo ka wada qayb qaadan doonaan dhammaan waxyaalaha uu dadkiisa u diyaariyey.

> *"Oo waxaan arkay* ***samo cusub*** *iyo* ***dhul cusub****; waayo, samadii hore iyo dhulkii hore way dhammaadeen; oo baddiina mar dambe ma ay jirin. Oo haddana waxaan arkay magaalada quduuska ah, taasoo ah Yeruusaalem cusub oo samada ka soo degaysa xagga Ilaah."*
> (Muujintii 21:1-2)

Magaaladan samaawiga ahi waxay *"ka soo degeysaa samada xagga Ilaah"* si ay u midayso adduunkaa cusub ee dib loo sameeyey. Dhulkaa cusub *"mar dambe bad ma jirto."* Oo ma jiri doonaan qaarado kala qaybsani.

> *"Oo isna indhahooda ilmo kastuu ka tirtiri doonaa, oo dhimashona mar dambe ma jiri doonto, oo mar dambena ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona, waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen."* (Muujintii 21:4)

Wax kastaa kaamil bay ahaan doonaan oo aad bay u wanaagsanaan doonaan. Magaaladan samaawiga ahi waxay noqon doontaa mid leh amaan maskaxdeena ka weyn. Yooxanaa waxay ku adkayd inuu taas qeexo.

*"Oo magaaladuna waxay u dhisnayd afar gees, oo dhererkeeduna wuxuu le'ekaa ballaadhkeeda; oo markaasay waxay magaaladii ku qiyaastay cawsduurkii, oo waxay noqotay laba iyo toban kun oo istaadiyon* [2200 kiilomitir]*; oo dhererkeeda iyo ballaadhkeeda iyo sarajooggeeduba waa isla ekaayeen…*

*Oo derbigeediina waxaa laga dhisay yasbid, oo magaaladuna waxay ahayd dahab saafi ah oo u eg muraayad saafi ah. Oo derbigii magaalada aasaaskiisiina waxaa lagu sharaxay dhagaxyo qaali ah oo cayn kasta ah…*

*Oo laba iyo tobankii irdoodna waxay ahaayeen laba iyo toban luul, oo kii kastoo irdihii ka mid ahaaba wuxuu ahaa luul! Oo* ***magaaladii jidkeediina wuxuu ahaa dahab saafi ah oo u eg muraayad wax laga dhex arko****. Oo dhexdeedana macbud kuma arag; waayo, Rabbiga ah Ilaaha Qaadirkaa iyo Wanka ayaa waxay yihiin macbudkeeda.*

*Oo magaaladuna uma baahna qorrax iyo dayax toona inay dusheeda ka iftiimaan; waayo,* ***ammaanta Ilaah ayaa iftiin u ahayd, oo laambadeeduna waa Wanka****. Oo quruumuhuna waxay ku dhex socon doonaan iftiinkeeda….*

*Oo gudaheedana sinaba uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been;* ***laakiinse waxaa keliyahoo geli doona kuwa ku qoran Kitaabka Nolosha ee Wanka****."* (Muujintii 21:16-24, 27)

Magaaladan weyn waxay dhinac kasta ka ahaan doontaa mid amaanan; xataa jidadkeedu waa *"waa dahab saafi ah oo u eg muraayad wax laga dhex arko."* Wax kasta oo magaaladaa ku saabsan waxaa loo habeeyey in amaanta Ilaahay laga dhex arko. Magaaladu qorax iyo macbud toona ma leh, maadaama uu Ilaahay Laftiisu magaalada iftiin iyo xarun caabudaadeed u yahay. *"Laambaddeeduna waa Wanka."* Jannada waxaa iftiiminaya Kii maalintii ugu horreysey ee abuuritaanka, yidhi,

*"Iftiin ha ahaado."* (Bilowgii 1:3)

Nuurka magaaladaasi wuxuu u widhwidhayaa sidii kii Meesha ugu wada Quduusan ee Taambuuggii iyo Macbudkii waaggii Towreedda jirey, oo Sayid Ciise Masiix Laftiisuna wuxuu yidhi,

> *“**Anigu waxaan ahay nuurka** dunida.”* (Yooxanaa 8:12)

Magaaladan samaawiga ahi waxay yeelan doontaa qaab afar gees ah oo wanaagsan, isala sidii ay ahayd Meeshii ugu wada Quduusnayd ee Teendhadu taas oo meteleysey Jannada. Qiyaasta magaalada, dherer, ballaad iyo joogba, waxay dhinac kasta gaadhayaan 2200 kiilomitir. Waxay u muuqataa, inay magaaladaasi ay gaadhi doonto cirka adduunkaas cusub.

Gurigan amaanta leh qof kasta oo abid dhashay guri ku filan buu ku leeyahay, laakiinse dadka oo dhammi halkaa ma wada gelayaan, *“laakiinse waxaa keliyahoo geli doona kuwa ku qoran Kitaabka Nolosha ee Wanka.”*

Cutubka ugu dambeeyaa wuxuu qeexayaa beer ku dhex taalla magaalada.

> *“Wuxuu i tustay webi ah biyaha nolosha, oo u dhalaalaya sidii madarad oo kale, oo ka soo baxaya carshigii Ilaah iyo Wanka. Jidkii magaalada dhexdiisa. Webiga dhankiisan iyo dhankiisaasba waxaa ku yiil **geedkii nolosha** ... Oo mar dambena naclad ma jiri doonto, oo waxaa halkaas ku jiri doona Ilaah iyo **Wanka** carshigooda; oo addoommadiisuna way u adeegi doonaan. Oo **wejigiisay** arki doonaan, oo magiciisuna wuxuu ugu oolli doonaa wejigooda. ... Oo iyana waxay **talin** doonaan weligood iyo weligood.”* (Muujintii 22:1-5)

## QISO KAAMIL AH

Qisada Ilaahay waxay soo samaysay wareeg buuxa.

> *“Jidkii magaalada dhexdiisa. Webiga dhankiisan iyo dhankiisaasba waxaa ku yiil **geedkii nolosha**.”*

Wax ku bilowday beer qurux badan ayaa ku soo dhammaanaya magaalo aad u wanaagsan oo leh beer aan quxuxdeeda la soo koobi karin. Beerta Jannadu waxay Beer Ceeden tii adduunka kaga duwan tahay inaanay tani lahayn *geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta*, laakiinse waxaa tan dambe ku dhex ooli doona *geedka nolosha* kaas oo Aadan iyo Xaawa loo diidey kaddib markii ay dembaabeen. Quduusnimo buuxda iyo nolol weligeed ah oo keliya ayaa magaaladaa samaawiga ah ka jiri doona.

Wakhtigii imtixaanka iyo ku noolaanshaha nolol rumaysi leh waa laga soo gudbey.

> *"Oo waxaa halkaas ku jiri doona* ***Ilaah*** *iyo* ***Wanka*** *carshigooda; oo addoommadiisuna way u adeegi doonaan. Oo* ***wejigiisay arki*** *doonaan, oo magiciisuna wuxuu ugu oolli doonaa wejigooda. ...Oo iyana waxay* ***talin doonaan weligood iyo weligood****."*

Aakhiro dadka Ilaahay weligood ma ilaawi doonaan qiimihii weynaa ee ay "Ilaahay iyo… Wanku" bixiyeen si ay dad aan caawimaad haysan uga soo furtaan xukunka oo uga dhigaan kuwo u qalma inay abidkood Isaga la noolaadaan.

Wehelnimo macaan oo aan la jebin karin ayaa had iyo goor ka dhex jiri doonta Sayidka iyo dadkiisa. Ilaahay oo inala jooga oo aynu innagu la joogi doono Isaga xataa markaa way ka sii fiicnaan doontaa sidii ay Aadan iyo Xaawa ahaayeen ka hor intii aysan dembaabin.

Oo maxay xataa *aad uga sii fiicnaan* doontaa berigaa hore?

Jawaabta waxaa laga dhex helayaa erayga ***madaxfurasho***.

> *"Isagu waa* ***inaga samatabbixiyey*** *xoogga gudcurka, oo wuxuu* ***inoo beddelay*** *boqortooyadii Wiilka jacaylkiisa, kaas oo aynu ku leennahay* ***madaxfurasho*** *ah dembidhaafka."* (Kolosay 1:13-14)

Maxaa ka fiican in lagaa ***samatobixiyo*** dhibaatada ugu xun ee *kugu soo fool leh* adiga oo ku eedaysan godka ugu madow ee dembiga iyo dhimashada, oo markaa lagu ***keeno*** *meesha ugu fiican ee aad abid filato* oo lagaa dhigo mid xubin ka ah boqortooyada Ilaahay ee nuurka iyo jacaylka miidhan ah?

Sidaas ayuu Abuuraheena-Bixiyaheenu u sameeyey dhammaan kuwa Isaga keligiis ku rumaysan badbaadadiisa. Jacaylkiisa weyn daraaddiis, dhiiggiisa wax kasta ka qiimaha badan ayuu dembiileyaal aan rajo lahayn ka badbaadiyey naarta oo ka dhigay inay jannada u qalmaan.

Waa qiso aad u Wanaagsan oo Cajiib ah, waa Qisada Samatobixinta oo tahay in weligeed laga fekero oo laga mahadnaqo.

> *"Oo bal eeg, waxyaalahaas ka dib waxaan arkay dad faro badan, oo aan ninna tirin karin, oo lagala soo baxay quruun kasta, iyo qabiil kasta, iyo dad kasta, iyo af kasta, oo taagan carshiga hortiisa iyo Wanka hortiisa… Oo iyana waxay ku dhawaaqeen cod weyn, iyagoo leh,* ***Badbaado waxaa leh Ilaahayaga carshiga ku fadhiya iyo Wanka****."* (Muujintii 7:9-10)

## FARXAD ABADIYAN AH

Adduunka dacalladiisa, dadku wakhti kastaba ha noolaadeene way jecel yihiin qisooyinka ku saabsan jacaylka iyo samatobixinta, qisooyinka ku dhammaada farxadda.[271]

Hadday tahay qiso qadiim ah oo uu sheeko yaqaankii tuulladu u sheegayey dad dab wada kulaalaya ama qiso mala-awaal ah oo waalid cunug ku seexinayo, sheekooyinku badanaa isku sii baa loo sheegaa. Sidan oo kale:

*Gabadh gashaanti ah oo dhibaataysan, oo qof shar badani addoonsado, ayaa waxaa marxalladaa rajo la'aanta ah waxaa iyada lagu badbaadiyey faragelin rabbaani ah iyo amiir geesi ah oo qurux badan. Markii uu gabadhaa uu jeclaa soo furtay, geesigaasi wuu guursadey iyada, oo waxay ku wada noolaadeen guri aad u wanaagsan.*

Sidee ayay sheekadani ku dhammaanaysaa?

***Farxad ayay weligood ku sii wada noolaadeen.***

Maxay dadku sheekooyin noocan oo kale ah u sheegaan? Sidan bay u sheegaan waayo Ilaahay ayaa qalbiga bini'aadanka ku

dhex abuuray doonis ah in sharka laga magangeliyo, oo la jeclaado, oo weligood farxad ku noolaadaan. Waana sababtaa ta ay dadka waaweyn iyo carruurtuba sheekooyinkan oo kale u jecel yihiin.

Laakiinse qisada Ilaahay maaha mid malo-awaal ah.

Waxa mala-awaalka ahi taariikh run ah kuma salaysna, mana aha waxa baadhitaanka cilmiga baadhitaanka dhulka lagu xaqiijin karo. Qisada la iska abuuray dad badani may qorin muddo shan iyo toban qarni, caddayna uma aha boqolaal waxyi oo faahfaahsan. Nin geesi ah oo la mala-awaaley kama waxba kama sheegi karo xigmadda jannada ee Ciise, kuwa uu u yimid inuu badbaadiyona uma sheegi karo:



> *"Waxaynu ku soconnaa Yeruusaalem, oo wax walba oo nebiyadu qoreen ayaa Wiilka Aadanaha u noqon doona. Waayo, Isaga waa lagu... kajami doonaa, oo la caayi doonaa, oo lagu tufi doonaa, wayna karbaashi doonaan oo dili doonaan, maalinta saddexaadna wuu soo sara kici doonaa."* (Luukos 18:31-33)

Sheekooyinka beenta ahi dembiileyaasha naarta u socda ma siin karaan qalbi daahir ah iyo hubaal ah nolol weligeed ah.

Mala-awaalku inama siin karo xidhiidh shakhsiyan ah oo aynu Abuuraheena la yeelano oo qalbiyadeena dembiga iyo nafjecelysia miidhan ah uma beddeli karo kuwo si qiiro leh Ilaahay u amaana oo dadka kale ugu adeega.

Qisada Ilaahay oo keliya ayaa sidaas samayn karta.

Waayo iyagu waa run.

Haddii la soo koobo:

Qisada iyo akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ahi waxay ku saabsan tahay Wiilka abadiyanka ah oo nin noqday, oo ku noolaa nolol quduus ah, oo dhiiggiisa quduuska aan iinta lahayn daadiyey, oo dhimashada ka sarakacay si uu dembiileyaal bilaa rajo ah uga badbaadiyo Shaydaanka, dembiga, dhimashada, io naarta, oo uu dhammaan kuwa Isaga rumaysan ula qaybsado oo ula joogo

guriga Aabbihiis ee aan wanaaggiisa, sharaftiisa, iyo amaantiisa la soo koobi karin.

Kani waa warka wanaagsan ee Ilaahay u hayo adduun xaalad xun ku jira.

Wixii uu Isagu inoo sameeyey daraadeed ayaa fursad inoo siinayo inaynu aakhiro farxad abadiyan ah ku noolaano.

> *"Waxaan ogahay in wax kasta oo Ilaah sameeyaaba ay **weligood** sii waarayaan."* (Wacdiyahii 3:14)

## MARTIQAAD IYO DIGNIIN

Kitaabka Ilaahay wuxuu ku soo gabagaboobayaa erayadan:

> *"Oo **Anigoo Ciise** ah ayaan malaa'igtaydii u soo diray inay waxyaalahan idiinku markhaati furto… Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega, kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, bilowgii iyo dhammaadka.*
>
> ***Ruuxa iyo aroosadduba*** [dembiileyaasha la samatobixiyey] *waxay **yidhaahdaan, 'Kaalay'**. Oo kii maqlaana ha yidhaahdo, Kaalay. **Oo kii harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba biyaha nolosha hadiyad ahaan ha u qaato**.*
>
> *Oo anigu waxaan ku idhaahdaa nin kasta oo maqla erayadii wax sii sheegidda ee kitaabkan lagu qoray, **Haddii nin** wax **ku daro** iyaga, Ilaah wuxuu isaga ku dari doonaa belaayooyinka kitaabkan ku qoran; oo **haddii nin wax ka qaado** erayadii kitaabka wax sii sheegiddan, isna Ilaah baa qaybtiisa ka qaadi doona Geedka Nolosha iyo magaalada quduuska ah iyo waxyaalaha kitaabkan ku qoran. Haddaba kan waxyaalahan ka markhaati furayaa, wuxuu leeyahay,*
>
> *'Haah, anigu dhaqsaan u imanayaa.'*
>
> *'Aamiin, Rabbi Ciisow, kaalay.'*
>
> *Nimcada Rabbi Ciise ha la jirto quduusiinta oo dhan. **Aamiin**."* (Muujintii 22:16, 13, 17-21)

Markaa, *"Aamiinta"* (oo macnaheedu yahay *waa run iyo aamin),* wuxuu Qoraha, Weligiis jirey, jira, jirina doonaa, halkan ku soo gabagabaynayaa qisadiisa iyo akhbaarkiisa.

## ILAAHAY IYO BINI`AADANKA OO ISLA JIRA

Ma xasuusataa jawaabtii Aadan ka bixiyey markii uu RABBIGU beertii yimid ee Isaga ugu yeedhay, *"Xaggee baad joogtaa?"*

Isaga oo ceebaysan ayuu Aadan ku jawaabey:

> *"Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday."*
> (Bilowgii 3:10)

Ninkii iyo naagtii waxay isku dayeen inay iska qariyaan Abuurahooda iyaga Leh waayo iyagu way dembaabeen.

Laakiinse hadda, dhammaadka taariikhda, sidee ayay ragga, dumarka, iyo carruurta muuminiinta ahi uga jawaabayaan ballanqaadka Abuurahooda-Bixiyahooda ee ah inuu iyaga u imaanayo oo dhammaantood u qaadayo inay Isaga weligood la noolaadaan?

Si farxad leh ayay ugu jawaabayaan:

> *"**Aamiin, Rabbi Ciisow, kaalay**."* (Muujintii 22:20)

Maxaa is beddelka intaas le'eg keenay? Maxaanay qaar farcankii Aadan ka tirsani dib dambe uga sii dhuumanayn Ilaahooda? Maxayse aad ugu heelan yihiin rajada ah inay Isaga weji ka weji u arki doonaan?

Jawaabta waxaa laga helayaa akhbaarka Ilaaha keliya ee runta ah:

> *"Ilaah waa kan ina badbaadiyey oo yeedhid quduus ah inoogu yeedhay—mana aha xagga shuqulladeenna, laakiinse waa xagga qasdigiisa iyo nimcadiisa, oo uu waayadii hore hortood inagu siiyey Ciise Masiix, laakiinse haatan lagu muujiyey muuqashada Badbaadiyeheena Ciise Masiix, kaas oo dhimashada baabbi'iyey, oo nolosha iyo dhimashola'aanta iftiinka ugu soo saaray xagga injiilka."* (2 Timoteyos 1:9-10)

## HAL QAYNUUN

Isla sidii uu Ilaahay halkiisa qaynuun ee cad Aadan ugu siiyey beertii jannada ee adduunka, ayuu halkiisa qaynuun ee cad ugu sameeyey farcanka Aadan kan oo ku saabsan magaalada samaawiga ah ee Jannada:

> *"Oo gudaheedana* ***sinaba*** *uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been; laakiinse waxaa* ***keliyahoo*** *geli doona kuwa ku qoran Kitaabka Nolosha ee Wanka."* (Muujintii 21:27)

Magacaagu ma ku qoran yahay Kitaabka Nolosha ee Wanka? Haddii ay sidaas tahay, kani waa akhbaar shakhsiyan ah oo uu Isagu kuu hayo:

> *"****Qalbigiinnu*** *yuusan murugoon. Ilaah* ***waad*** *rumaysan tihiin, anigana i rumaysta. Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan* ***idiin*** *sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tegayaa inaan meel* ***idiin*** *sii diyaariyo. Oo haddaan tago oo meel* ***idiin*** *diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan* ***idiin*** *qaadan doonaa, in meeshaan joogo,* ***idinkuna*** *aad joogtaan…. Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee."* (Yooxanaa 14:1-3, 6)

# ERAYO GUNAANAD AH

Qoritaanka buuggani wuxuu aniga ii ahaa socdaal xiiso badan. Waxaa si aan qiyaas lahayn ii barakeeyey inaan ka fekero oo idiin soo gudbiyo shakhsiyadda, qisada, iyo akhbaarka Abuurahayga-Bixiyahayga ammaanta leh. Wehelnimadiisa iyo hoggaamintiisa ayaa caddayd intii aan hawshan ku gudo jirey. Isaga ayay amaan oo dhammi u sugnaatay.


**MAHADSANID**

In kasta oo aan ka gaabsaday inaan ku daro liisto dheer oo magacyo ah, buuggani sida uu yahay muu noqdeen haddii aanay ahayn taageeradii dulqaadka lahayd ee xaaskayga Carol iyo fikradaha qiimaha leh ee aan ka helay asxaabtayda iyo qaraabadayda. Jeldiga iyo farshaxanku waa shaqadii walaalkay Dave. Mahadnaq qalbigayga ka soo go'day ayaan dhammaantiin idin siinayaa.

> *"Ilaah ma xaqdarra, mana illoobo shuqulkiinna iyo jacaylka aad magiciisa u qabtaan."* (Cibraaniyada 6:10)

Waxaan kaloo mahadnaq u hayaa Muslimiinta aan la tirin karin ee emaillada su'aalaha iigu soo diray taas oo igu dhiirrigelisey inaan buuggan qoro.

Ta ugu weyni waa, inaan doonayo inaan *adiga* kaaga mahadinayo inaad socdaalkan gaaban aniga ila gasho. Waxaan idhi *gaaban* waayo kani wuu dheeraan karey. Aayadihii aynu soo akhrinay way ka yar yihiin boqolkiiba 4 marka loo eego aayadaha uu Baybalku ka tirsan yahay oo dhan. Markaa, in kasta oo aynu soo gaadhney dhammaadkii socdaalkeena, haddana hadda uun buu inoo bilowday.

## SII WADIDA SOCDAALKA

Iyada oo uu Ilaaha keliya ee runta ahi akhbaarkiisa u caddeeyey dhammaan kuwa doonaya inay kaas fahmaan, Isaga Laftiisu wuu ballaadhan yahay, qoto dheer yahay, oo waa abadiyan. Bini'aadan iyo malaa'igtoona weligood ma awoodayaan inay wada fahmaan wax kasta oo Isaga laga ogaan karo. Rasuul Yooxanaa ayaa xaqiiqadan ku muujiyey aayadda ugu dambaysa qisada Injiilka:

> *"Waxaana jira waxyaalo badan oo kale oo Ciise sameeyey, oo haddii mid mid loo wada qoro, waxaan u malaynayaa inaan dunidu qaaddeen buugagga laga qoro."*
> (Yooxanaa 21:25)

Waan fahmayaa oo ku raacsanhay. Laga yaabee inay arrintii ugu adkayd ee qoritaanka buuggan *Ilaah Keliyo iyo Jid Keliya* ay ahayd doorashada aayadaha Baybalka ee lagu daro iyo kuwa laga tago. Runtii, Erayga Ilaahay lama soo koobi karo. Isagu waa mid nafta u leh macaan iyo nasteexo. Saaxiibkeen reer Lubnaan ah ayaa taas ogaadey (Cutubka 7), "Waxaan garowsaday inaanay ku filayn in la yidhaahdo, 'Anigu Baybalka waa akhriyey.' Kitaabkani wuxuu u baahan yahay in *si joogto ah loo akhriyo."*

Hadda socdaalkii waad dhammaysay, laga yaabee inaad dooneyso inaad ku noqoto *Ilaah Keliya iyo Jid Keliya* oo aad Baybalka ka eegto aayadaha badan ee Baybalka laga soo xigtey, oo aad akhrido qayb kasta oo laga soo xigtey. Waxaaba taas ka sii fiican, Kitaabka Quduuska ah ee Ilaahay oo dhan wada akhri, marba kitaab, adiga oo sidan Isaga ka baryayaya:

> *"Indhahayga fur si aan waxyaalo yaab badan sharcigaaga uga arko."* (Sabuurradii 119:18)

Haddii aad dareento inaad u baahan tahay sharaxaad dheeraad ah, eeg qoraallada gabagabada ah ee buugga ugu dambeeya. Waxaa kaloo aad boggaga ugu dambeeya buugga ka akhrin karaa su'aalo ku saabsan nakhtiinka cutubyada. Hana ka gaban inaad ii soo qorto fikradahaaga iyo su'aalahaaga.

Waxaan kugu nabadgelyeynayaa barakadan 3,500 sanno jirta:

*"RABBIGU ha ku barakeeyo, oo ha ku dhawro.*
*RABBIGU wejigiisa ha kugu iftiimiyo,*
*oo ha kuu roonaado.*
*RABBIGU jaahiisa kor ha kuugu qaado,*
*oo nabadna ha ku siiyo."* (Tirintii 6:24-26)

Paul Dan Bramsen
pdbramsen@rockintl.org
www.One-God-One-Message.com

# QORAALLO GUNAANAD AH

*"Haddaba waxaanan u jeedin i bar."*
(Ayuub 34:32)

**ERAYO GUNAANAD AH**

[1] Saaxil: meesha aan roobka badani ka di'in ee Saxaraha Afrika kaga gudban dhulka cagaaran ee roobka badani ka da'o ee Afrika. Dhulkan ciidda badan ee geedaha gaagaabani ka baxaan wuxuu ku baahsan yahay Sinigaal ilaa iyo Suudaan.

[2.] Dadka Ilaaha keliya rumaysan waxaa afka Ingiriiska lagu yidhaahdaa *monotheists*, halka dadka Ilaahyada badan rumaysan lagu yidhaahdo *polytheists,* kuwa rumaysan inay wax kastaa Ilaahay ka tirsan yihiin waxaa la yidhaahdaa *pantheists*, kuwa bini'aadanka sarraysiiya ee aan Ilaahay waxba ka soo qaadin waxaa la yidhaahdaa *secular humanists*, kuwa aan Ilaahay rumaysnayna waxaa la yidhaahdaa *atheists*.

**CUTUBKA 1: IIBSO RUNTA**

[3.] *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*, odhaahdan iyo xigashooyin kale oo 1,000 ka badan oo Qorniinadii nebiyada ah ayaa Baybalka laga soo qaatay. Mararka qaarkood qayb aayadda ka mid ah ayaa la soo xigtey, sida halkan oo kale. Maahmaahyadii cutubka 23, aayadda 23, oo iyada oo dhan sidan qoreysa: *"Runta soo iibso, oo ha sii iibin, Oo weliba waxaad ku sii darsataa xigmadda iyo edbinta iyo waxgarashada."*

[4] Barrett, David B., George T. Kurian and Todd M. Johnson. *World Christian Encyclopedia: A Comparative Survey of Churches and Religions in the Modern World*. London: Oxford University Press, 2001.

[5] "Maanta, waxaa Qorniinka lagu turjumey luuqado aan ka yarayn 2,479, oo Baybalka oo dhanna waxaa lagu turjumey ugu yaraan 451 luuqadood, halka Axdiga Cusub oo keliya lagu turjumey 1,185 luuqadood. Waxaa intaas dheer, in qaybo Baybalka ah lagu turjumey 843 luuqadood." (United Bible Society, 2010, www.ubs-translations.org/about_us)

[6] Foxe, John (edited by G.A. Williamson). *Foxe's Book of Martyrs.* Toronto: Little, Brown & Company, 1965.
[7] Waa khalad in waddan gaar ah kuu doono ha noqdee lagu qeexo "waddan Masiixi ah" maadaama uu Masiixu yidhi, *"Boqortooyadaydu tan dunidan ma aha. Haddii boqortooyadaydu tan dunidan tahay, midiidinyadaydu waa ii diriri lahaayeen inaan Yuhuudda la ii gacangelin. Imminkase boqortooyadaydu tan halkan ma aha." (Yooxanaa 18:36)*
[8] Wurmbrand, Richard. *Tortured for Christ – 30th Anniversary Edition.* Bartlesville, OK: Living Sacrifice Book Co., 1998.
[9] *Jidka Xaqnimada* taxane barnaamijyo raadiyaha loogu talogalay oo lagu turjumey in ka badan 100 luuqadood oo adduunka lagaga hadlo worldwide. www.one-god-one-message.com
[10] Aayadda Quraanka oo dhan waxay odhanaysaa: *"Dabadoodna waxaan u dirnay Ciise ibnu Maryama isagoo rumaynay sharcigii hortiisa yimid, waxaana u dirray Injiil, arrintaasna waxaa ku sugan hanuun iyo nuur, iyo rumaynta sharcigii isaga ka horreeyey, Hanuun iyo waanada. kuwa Alle ka baqaya."* (Suuradda 5:46). Haddii aanan si kale idiin sheegin, turjumaadda af Ingiriiska ah ee uu buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya* isticmaalay waa ta Abdullah Yusuf Ali. *The Qur'an Translation.* New York: Tahrike Tarsile Qur'an, Inc., 2003. **U fiirso:** Quraanku wuxuu ka kooban yahay cutubo la yidhaahdo *suurado*. Waxaa laga yaabaa inay lambarada aayaduhu kala wax yar kala duwanaadaan taas oo ku xidhan turjumaadda Quraanka. Marka aayad la raadinayo, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in la raadiyo aayadaha taas ku wareegsan.
[11] Waa ayo "Annagu"? Quraanka dhexdiisa, wuxuu Ilaahay isugu yeedhaa magac u yaalka koowaad oo jamac ah. Baybalka dhexdiisa, RABBIGU wuxuu sidoo kale Isugu yeedhaa jamac ahaan. **U fiirso:** Dadku waxay erayga "Allah" u isticmaalaan laba siyaabood: "Allah" waa magaca guud ee Ilaahay oo ay isticmaalaan Masiixiyiinta Carabta ah, kuwooda aan Muslinka ahayn, iyo Muslimiintuba. Marka sidan loo isticmaalayo *maaha* magaca quman ee Ilaahay. Dadka afka Carabiga ku hadla dhexdooda, ma jiro qolo gaar ah oo gooni u sheegan karta magacaa guud ee *Allah*. Muslimiintu waxay *"Allah"* isticmaalaan magaca ugu horreeya ee saxda ah ee Ilaahay. Cutubka 9 ayaynu wax dheeraad ah kaga odhan doonaa.
[12] E-maillo kala duduwan oo *Ilaah Keliya iyo Jid Keliya* lagu soo gudbiyey laakiinse aan dadka magacooda la sheegin si loo ilaaliyo kuwa soo qoray.
[13] "p.b.u.h." waxay u taagan tahay "nabadi isaga korkiisa ha ahaato" oo af Ingiriisi ah, oo Muslimiinta ayaa badanaa qoraalkooda raaciya marka ay magaca nebiga soo hadal qaadaan. Carabi ahaana waxay

isticmaalaan: *salalaahu caleyhi wa salam* (s.a.w), oo macnaheedu yahay "ducooyinka Ilaahay isaga korkiisa ha ahaadeen iyo nabad." Waxay tan ku saleeyaan aayadda Quraanka ah: *"Bal eeg! Eebbe iyo malaa'igihiisa ayaa ku tukanaya nebiga. Kuwiinna rumeeyayow, u duceeya oo nabad ku salaama."* (Suuradda 33:56) Ku dhaqanka arrintani ma qaabilsana Baybalka, oo odhanaya, *"Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo."* (Cibraaniyada 9:27) Marka uu qofku dhinto, meeshuu aakhiro ku dambayn lahaa lama beddeli karo oo kitaabkiisa waa la xidhay. Si kasta oo loogu duceeyaba taasi waxba kama beddeleyso meesha uu aakhiro tegi doono (Muujintii 22:11)

[14] [*sic*] waa eray af Laatiin ah oo macnihiisu yahay "markaa" iyo "sidaa daraadeed." Qoys baa la geliyaa oo waxaa laga dambaysiiyaa xigasho daabacaad ah oo tusaysa in qoraalkii hore xigasho lagu soo sameeyey in kasta oo uu kaas khalad ku jiro. **U fiirso**: Intii aan ka ahayn soo gaabinta iyo naxwaha oo la hagaajiyey (si si sahlan loogu fahmi karo), e-maillada *Ilaah Keliya iyo Akhbaar Keliya* lagu soo xigtey waxaa loo soo gudbiyey sidii lagu helay. Tusaale ahaan, e-mailkan khaaska ah ee "Axmed" ka timid dhammaanteed far waaweyn baan lagu soo qoray. Taas oo la saxay.

[15] *The Meaning of the Glorious Koran: An Explanatory Translation by Mohammed Marmaduke Pickthall*. New York: Meridian, 1997.

[16] Tusaale ahaan, Quraanku wuxuu suuradda (cutubka) 40 aayadaha 70-72 ku odhanayaa, *"Kuwa beeniya Kitaabka **iyo waxyiyada aanu la soo diray rasuulladayada**: waxaan ku dirray Rasuullada, way ogaan doonaan dhowaan — marka qoortooda harqood lagaga xidho, oo iyaga oo silsiladaysan dhulka lagu jiidjiido — dheecaanka uurjiifkoodana la karkariyo; dabadeedna iyaga dab lagu gubo"*. Sidoo kale: *"Waxaanu iyaga dabadood soo dirnay Ciise ibnu Maryama, isagoo u xaqiijinaya **Sharciga hortiisa yimid**, waxaan u dirnay **Injiil**. Halkaasna waxaa ku sugnaa hanuun iyo nuur, iyo xaqiijintii sharciga isaga ka horreeyay. **Hanuunka iyo waanada** kuwa Ilaahay ka cabsada."* (Suuradda 5:49) *"Kuwa xaqa rumeeyow! Rumeeya Ilaahay iyo rasuulkiisa, iyo kitaabka uu u soo diray rasuulkiisa iyo **Kitaabbadii uu u dhiibey kuwii isaga ka horreeyey**. Ruuxiise beeniya Ilaahay, Malaa'igtiisa, **Kutubtiisa, Rusushiisa**, iyo Maalinta Qiyaame, wuxuu dhumay dhumid fog. …Annagaa kugu soo dirnay Nabiyow sidaan ugu dirray Nabi Nuux iyo Rasuuladii ka dambeeyay, waxaan u waxyoonay nebiyadii Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo Qabiilooyinkii, nebi Ciise, Ayuub, Yoonis, Haaruun, Sulaymaan iyo Daa'uudna waxaanu siinay **Sabuurradii**."* (Suuradda 4:136, 163) Odhaaho noocan oo kale ah oo Quraanka ka yimid waxaad ku arki kartaa bogga ugu horreeya cutubka 3 iyo faahfaahina la socda.

[17] Maahmaahyadii 23:23. Halkii ay runta "ka soo iibsan" lahaayeen, dad badani "way sii iibiyaan" iyaga oo ka cabsanaya waxa ay qaraabada iyo saaxiibbadood iyaga ku odhan doonaan haddii ay ku arkaan iyaga oo Baybalka baranaya (In kasta oo uu kaasi yahay Erayga Ilaahay ee runta ah, oo uu xataa Quraanku ku amrayo Muslimiinta inay isaga rumeeyaan)

**CUTUBKA 2: KA GUULEYSIGA CAQABADAHA**

[18] Doyle, Sir Arthur Conan. *Treasury of World Masterpieces: The Celebrated Cases of Sherlock Holmes.* R.R. Donnelley and Sons Company, 1981, p. 17. (First published in Great Britain in 1891.)

[19] Rooma 14:1-15:7; Matayos 7:1-5

[20] Doyle, p. 16

[21] Tirintii 12

[22] 2 Boqorradii 5

[23] Yoonis 4

[24] Eeg kitaabbada Baybalka ee kala ah: Daanyeel, Cesraa, iyo Esteer

[25] Yooxanaa 4

[26] "The Greatest Journey," *National Geographic Magazine*, Mar. 2006, p. 62.

[27] Sabuurradii 90:1-12; Markos 8:36; 2 Korintos 4:16-18; Rooma 8:18; Yacquub 4:13-15

[28] Taariikhda bini'aadanka, Ilaahay wuxuu oggolaaday oo/ama adduunka u soo diray aafooyin kala duduwan. Waagii nebi Nuux, kaddib markii uu boqollaal sannadood dulqaatay oo digniin bixinayey, Ilaahay wuxuu adduunka oo dhan u soo diray daad kaas siddeed qof maahee dadka intoodii kale ku halaagmeen (Bilowgii 6-8). (Dad badan ayaa daadkan adduunka oo dhan saameeyey u arka sheeko baraley in kasta oo dadka baadha cilmiyahanada baadha waxyaalaha dhulka hoostiisa laga soo qodo iyo qalfoofyadii waayihii hore tan caddaynyaan). Berigii nebi Ibraahim, magaalooyinkii Sodom iyo Gomorah waxaa ku halaagmay dadkii deganaa oo dhan saddex qof maahee. Waagii Muuse iyo dabadeed Ilaahay wuxuu Israa'iiliyiintii ku amray inay baabi'iyaan quruumihii reer Kancaan (Yashuuca 1-10). Dagaalladaas waxaa lagu abaabuley amarro khaas ah oo Ilaahay bixiyey oo waxaa badanaa ku jirey faragelin mucjiso ah oo Ilaahiyan ah, sida gidaarradii Yerixoo ku wareegsanaa oo gadaal-gadaal u dumey (oo ay uu cilmiga taariikhda dhulku caddeeyey) kaddib markii ay Israa'iiliyiintii magaaladii ku soo wareegeen toddoba malmood oo isku xiga. Ilaahay boqollaal sanno ayuu sugey ka hor intii uusan quruumaha xukum, Isaga oo siiyey wakhti ay ku toobadkeenaa oo ay kaga soo laabtaan sanamyo caabudkooda, fusuqooda, iyo bini'aadankii ay allabari ahaanta u qali jireen (Bilowgii 15:16; Baxniintii 12:40), sidaas oo

ay tahay waxay iyagu iska dhego tireen markhaatifurkii nimankii Ilaahay soo diray sida Ibraahim, Yuusuf, iyo Muuse. Reer Kancaan dad yar ayaa ka toobadkeenay oo rumeeyey Ilaaha keliya ee runta ah ee tobankii belaayo ee samaawiga ahaa u soo diray Masar, Badda Cas-na waddada ka dhex sameeyey. Markii uu Ilaahay isticmaalay quruuntiisii qadiimka ahayd inay xukunnada Ilaahay meel mariyaan, Isagu mar kasta wuxuu caddaali aan eexasho lahayn. Tusaale ahaan, Towreeddu waxay qoraysaa inuu Ilaahay markii hore Israa'iiliyiintii laftooda ku ciqaabay belaayo (sanam caabudkoodii iyo fusoqoodii daraaddiis) taas oo ay 24,000 oo Israa'iiliyiin ahi ku le'deen (Tirintii 25-31). Kaddib markii uu Ilaahay Israa'iiliyiintii xukumay oo keliya ayuu markaa iyaga u diray inay xukunkiisa ka dhex fuliyaan quruumihii iyaga ku wareegsanaa ee sharka badnaa. Waa been in loo maleeyo inaanay quruumahaasi eed lahayn. Qorniinku wuxuu inoo sheegayaa inuu sharkoodu aad iyo aad u badnaa ilaa uu *"dalkii matagay dadkii deganaa."* (Laawiyiintii 18:25) Wanaagga iyo dulqaadka Ilaahay way weyn yihiin, laakiinse sidoo kale cadhadiisuna waa weyn tahay xukunkiisuna waa hubaal.

[29] Hal sabab uusan Ilaahay isla markiiba sharka u xukumin waa inuu dembiileyaasha siiyo wakhti ay ku toobadkeenaan oo ay ku aqbalaan jidka badbaadada ee Isagu u furay: *"Ha illoobina in maalin keliyahu Rabbiga la tahay sida kun sannadood, kun sannadoodna la yihiin sida maalin keliya. Rabbigu kama raago inuu ballankiisa oofiyo sida dadka qaarkiis ku tiriyo inay tahay raagid,* ***laakiinse idinkuu idiin dulqaadanayaa, oo dooni maayo in qofnaba halligmo, laakiinse wuxuu doonayaa in kulli la wada toobadkeeno****."* (2 Butros 3:8-9)

[30] Cutubbada 8, 12, 28 iyo 29 ee buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya* waxay jawaabo ka bixinaaan saddexdan arrimood ee ay dadku u arki karaan is khilaaf mowduucyadan ka jira.

[31] Matayos 7:1-20; Barbardhig Rooma 14 iyo 1 Korintos 6.

[32] Dhowr shabakadood ayaa sii wada inay soo qoraan liisto dheer oo ah *"101 ah iskhilaafyo cad oo Baybalka ku jira,"* in kasta oo sannado badan ka hor qoraal kale la soo bandhigay kaas oo odhanaya: *"101 'iskhilaaf' oo Baybalka lagu tuhmey oo* ***la xaliyey****."* www.debate.org.uk/topics/apolog/contrads

[33] Laba qaynuun oo ku saabsan fasiraadda aayad kasta oo Baybalka ka mid ah: Akhri qisada aayadda ku wareegsan ee laga hadlayo. Qorniin barbardhig Qorniin kale. Si aan u sharaxo, Sharciga Ku-Noqoshadiisa (kitaabka 5-aad ee Baybalka, Muuse wuxuu ka waxyigan ka sheegay reer binu Israa'iil: *"Oo RABBIGA Ilaahiinna ahu wuxuu dhexdiinna idiinka kicin doonaa nebi sidayda oo kale oo walaalihiinna ka mid ah, oo idinku waa inaad isaga dhegaysataan"* (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 18:15) Muxuu

Muuse ula jeedaa marka uu Israa'iiliyiinta ku leeyahay inuu Ilaahay nebi ka soo saarayo *"walaalihiinna ka mid ah"?* Dad ayaa yidhaahda inuu Muuse ka hadlayey reer Ismaaciil; kuwo kale ayaa yidhaahda inuu Israa'iiliyiinta ka halayey. Aayadaha ku wareegsan aayaddaa ayaa jawaabta saxda ah ina siinaya (tusaale ahaan, Sharciga Ku-Noqoshadiisa 17:15,20; 18:2,5, iwm.). Yuu ahaa *"Nebigan"* khaaska ah ee uu Ilaahay ballanqaaday inuu *"soo kicinayo."?* Iyada oo ay dad badani isku dayaan inay waxyigan qaabilsiiyaan qofka diintooda u gaarka ah aasaasay, fasiraadda saxda ah mar dambe ayaa si cad loogu sheegay Qorniinka dhexdiisa. Akhri Yooxanaa 5:43-47, Yooxanaa 6:14, iyo Falimaha Rasuullada 3:22-26.

[34] BC = Ciise Kahor / AD = Ciise Kaddib, *Anno Domini* oo macnaheedu yahay '*Sannadkii Sayidka dhexdiisa'*. Dad badan ayaa maanta isticmaala BCE (Before Common Era "Wakhtiga Caadiga ah Hortii") iyo (Common Era "Wakhtiga Caadiga ah") taas oo isku deyeysa inay "Masiixa" meesha ka saarto, in kastoo dhibicda taariikhda kala qaybisaa ay weli tahay dhalashadii Masiixa.

[35] Haddii aad mar uun lacag ka amaahatay bangi, waxaad saxeeday heshiis nooc ah—qoraal sharci ah. Bangiga waxaa ku waajibey inuu ku siiyey lacagtii uu ballanqaaday; adna waxaa kugu waajibey inaad lacagtaa ku bixiso wakhti la cayimay. Haddii aad heshiiska qaybtaada ka soo bixi weydid cawaaqib xun ayaa kaa raacaya. Sidaas oo kale, Baybalku wuxuu sheegayaa Axdi uu Abuuruhu siinayo bini'aadanka, ballanqaadyo dadka aniga iyo adiga oo kale ah suurtogal uga dhigay inay barakadiisa abadiyanka ah helaan. Ilaahay oo *"axdi"* dadka la dhiganaya waa arrin khaas ku ah Qorniinada Baybalka (Yeremyaah 31:31).

[36] Waxaynu astaanta samaawiga ah Qorniinka kaga ku eegi doonaa cutubka 5. Tusaale awood weyni waa Ilaahay oo waxa taariikhda dhacaya sii sheegaya ka hor intaa aanay dhicin sida ku qoran kitaabka Daanyeel cutubbada 7 iyo 12. Daanyeel wuxuu qeexayaa taariikhda boqortooyada adduunka laga bilaaba 400 Ciise Kahor ilaa iyo wakhtigii Masiixa, oo sii wadayaa isaga oo qeexaya dhacdooyin dhici doona maalmaha ugu dambeeya ama yowmal-qiyaamaha. Daanyeel ayaa waxaas oo dhan qoray intii u dhexeysey 600 iyo 530 Ciise Kahor.

**CUTUBKA 3: BEDDELAAD MISE XAFIDAAD?**

[37] Tusaalayaal dheeraad ah oo tixraac Quraaniyan ah leh oo Muslimiinta ku wargelinaya in Qorniinka baybaliyanka ah uu Ilaahay muujiyey waxay ku qoran yihiin: Suuradaha 2:87-91, 101,136,285; 3:3-4; 4:47,54,136,163; 5:43-48,68; 6:92; 10:94; 20:133; 21:105; 28:43; 29:46; 32:23; 40:53-54,70-72; 45:16; 46:12; 57:27, iwm.

[38] Qarniyadii la soo dhaafay dhexdooda, Qorniinada Axdigii Hore waxaa si macangagnimo ah u ilaalinayey bulshada diinta ee Yuhuudda. Bal ka feker. Iyagu miyay marna u oggolaan lahaayeen inuu qorna Qorniinka Quduuska ah wax yeelo, kutub ay diyaar u ahaayeen inay u dhintaan? Ma jirto arrin kale oo taariikhda ah oo la og yahay in bulsho diin lihi (Masiixiyiinta) ay aaminaaddooda ku saleeyaan kitaab (Axdigii Hore) kaas oo ay haddan bulsho kale diin lihi ilaaliso (Yuhuudda Towreedda ku adag). Miyaanay xaqiiqadan keliyahi wax aan suurtogal ahayn ka dhigayn inuu qofna wax ka beddelo Qorniinada ee Axdigii Hore ku qoran?

[39] *The Holy Qur'an*. Oo uu turjumey M.H. Shakir. Tahrike Tarsile Qur'an, Inc., Oo kumbuyuutarka laga akhrisan karo, version, 1993.

[40] Metzger, Bruce M. and Michael D. Coogan. *The Oxford Companion to the Bible.* NY: Oxford University Press, 1993, p. 754.

[41] Eeg sharaxaadda hoos ku qoran ee lambar 37.

[42] Ma jiraan qoraallo Quraan ama Islaami ah oo cilmi ahaan loo hubiyey oo jirey ka hor 750 Ciise Kaddib (muddo ka badan 100 sanno dhimashadii Maxamed kaddib) www.debate.org.uk/ debate-topics/historical/is-quran

[43] Metzger iyo Coogan, p. 683.

[44] Waa kan tusaale ku saabsan noocyada ay u muuqato inay qoraalladii hore kala duduwan yihiin. Kitaabka Axdigii Hore ku jira ee Boqorradii Labaad waxaynu ka akhrinaa: *"Oo Yehooyaakiinna markuu boqor noqday wuxuu jiray* ***siddeed iyo toban*** *sannadood."* (Boqorradii Labaad 24:8) Haddana kitaabka Taarikhdii Labaad wuxuu odhanayaa: *"Oo Yehooyaakiinna markuu boqor noqday wuxuu jiray* ***siddeed*** *sannadood."* (Taariikhdii Labaad 36:9) Sidee ayaa kala duwanaanshan oo kale loo sharixi karaa? Aqoonyannada qaarkood waxay yidhaahdaan markii uu 8 sanno jirey ayuu bilaabay inuu aabbihiis dowladda taladdeeda la *wadaago* laakiinse wuxuu si toosa *xukunka* ula wareegey isaga oo 18 sanno jir ah kaddib markii uu aabbihiis dhintay, taas oo suurtogal ah. Laakiinse, sharaxaad kale oo tan kaga sii dhowaan kartaa waa kala duwanaanshaha tiradu yahay qalin-daar ku dhacay dadkii qadiimka ahaa ee tan fartooda ku qorayey oo "8" qoray halkii ahayd "18." Haddii ay sidan tahay, lambarka khaladka ah waxaa lagu soo minguuriyey dhammaan koobiyada laga sameeyey qoraalkaa ugu horreeyey. Si kastaba ha ahaatee, kala duwanaansha noocaas ahi sina saamayn uguma yeelanayo akhbaarka uu Ilaahay inoo soo gudbinayo. Inta badan, tiro badnaanta qoraallada qadiimka ah ee Baybalku waxay aqoonyahannada u oggolaanaysaa inay go'aamiyaan arrinta saxda ah kaddib marka ay qoraallo dhowr ah is barbardhigaan.

[45] Xadiiska ayaa qoraya: *"Cismaan ayaa dabadeed Saacid bin Taabit ku yidhi, 'Cabdillaahi bin As-Subeyr, Saacid bin Al-Caas iyo 'Cabdiraxmaan*

*bin Xari-bin Hisham* ***inay dib u qoraallada dib ugu qoraan si fiican****... Sidaas ayay sameeyeen, oo markii ay koobiyo badan ka sameeyeen, 'Cismaan wuxuu qoraalkii ugu horreeyey ee laga koobiyeeyey u celiyey Xafsa. 'Cismaan wuxuu gobolladii Muslinka oo dhan u diray hal koobi oo ka tirsan wixii ay soo koobiyeeyeen, oo* ***ku amray in qoraallada kale ee Quraanka ah ee qaybqaybta u qoran ama dhanba la wada gubo.****"* (Hadith, Sahih Bukhari, VI, No. 510) (*Xadiis-ku* ["Odhaahaha"] waa qoraalladii qadiimiga ahaa ee Maxamed xaasaskiisii iyo kuwii ku dhowaa. Muslimiintu caqiidooyin badan bay ku saleeyeen ku dhaqanka Xadiiska.)

[46] Xataa ka hor intii aan la helin Qoraalladii Badda Dhimatay *(Dead Sea Scrolls)*, kuwaas oo caddeeyey inaan Qorniinku is beddelin, dadku waxay keliyoo u baahnaayeen inay Axdigii Hore ee aynu hadda haysano barbardhigaan Septuagint (turjumaadii af Giriigga ee Axdigii Hore ee la dhammeeyey qiyaastii 270 Ciise Kahor). Septuagint waxay sii xoojineysaa xaqiiqada ah inaan Qorniinada Axdigii Hore la beddelin laakiinse la xafiday.

[47] Abegg, Martin Jr., Peter Flint and Eugene Ulrich. *The Dead Sea Scrolls Bible.* San Francisco: Harper, 1999, page xvi.

[48] McDowell, Josh. *A Ready Defense.* Nashville: Thomas Nelson Publishers, 1993, pp. 42-48.

[49] Qorniinada Axdiga Cusub waxaa laga soo turjumey dhowr qoraal oo hore oo af Giriigga ah (Majority Text, Textus Receptus, Alexandrian Tex). *NKJV (nooc turjumaadah Baybalka ah)* wuxuu Axdiga Cusub ka soo turjumey *Majority Text*, halka *NIV (nooc turjumaadaha Baybalka ah)* ka soo turjumey Alexandrian Text. Meesha uu kala duwanaansho "weyni" ka muuqdo oo ka dhex jira qoraallada Giriigga ee Axdiga Cusub turjumaada Baybalka intooda badani waxay raaciyaan sharaxaad dheeraad ah oo tusaysa kala duwanaanshahaa. Meelaha Baybalka ka tirsan ee ugu dhaadheer ee su'aaluhu ka taagan yihiini waa Markos 16:9-20 iyo Yooxaana 7:53-8:11, oo midkood kastaa yahay 12 aayadood. Iyada oo ay aayadahani ka maqan yihiin qoraallada ugu qadiimsan ee ilaa iyo hadda la hayo (Alexandrian Text), ogowna inaan qoraallada *gaboobey* macnaheedu ahay inay *ka saxsan* kuwa kale, maadaama ay qoraallo kala duduwani ku salaysan yihiin koobiyo qadiim ah oo kala duduwan. Laga yaabee inuu qoraagaa hore qalin-daarmay isaga oo aan ula kasayn. Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqooyinka laga boodey haddana waxaa lagu baray meel kale oo Qorniinka ah. Akhbaarka muhiimka ah ee Ilaahay isma beddelin saamayna kumay yeelan. Ma xigmad baa in akhbaarka Ilaahay loo diido waayo qoraallo hore oo qadiim ah ayaa meelo yaryari ka maqan yihiin—qaybahaas oo aan sina saamayn ugu yeelanayn ama waxba ka beddeleyn akhbaarka Ilaahay?

[50] Beryahan dambe, buuggaag ayaa laga qoray oo filimo ayaa laga sameeyey kuwaas oo loogu talogalay inay Baybalka shaki geliyaan. Kuwo Baybalka eedeeya ayaa tilmaama "injiillo kale" oo burinaya. Dhammaan "injiillada" noocaas oo kale ahi waxay yimaaddeen wakhtigii Masiixa dabadeed oo taariikhiyan looma caddayn karo.
[51] Odhaanhadan waxaa kaloo laga helayaa Matayos 11:15; 13:43; Markos 4:9,23; 7:16; Luukos 8:8; 14:35; Muujintii 2:7,11,29; 3:6,13,22;13:9.

**CUTUBKA 4: SAYNISKA IYO BAYBALKA**

[52] *Webster's New World College Dictionary.* New York: Simon & Schuster, 1997. See: *science*.
[53] Bucaille, Maurice. *La Bible, le Coran et la science*. Paris: Seghers, 1976, p. 35. Oo jawaab u ahayd buuggii Dr. Bucaille, Dr. William Campbell wuxuu qoray *The Qur'an and the Bible in Light of History and Science.* Second Edition; Middle East Resources, 2002. Dr. Campbell beenayntiisa sida taxaddarka leh ugu beeniyey taas waxaa kaloo iyada oo toddoba luuqadood ku turjuman laga akhriyi karaa: https://answering-islam.org/Campbell
[54] Is-bedbedelka Bay'oologiga ku sallaysan (Biological evolution) wuxuu odhanayaa in noocyo nolol ah oo *algeega* iyo *daayeer* (*algae and apes*) ahi, malyuumaad fac gudahooda, isu beddeli kareen *geedaha iyo dadka* hadda jira. Sida *evolution-ku* aaminsan yahay dadka, daayeerada, iyo noocyo kalluunka yaryar ahi isku meel bay ka soo farcameen. Runtu waa inaanu saynisku taas caddayn karin.
[55] http://www.gma.org/space1/nav_map.html
[56] Aayaddo dheeraad ah oo tusaya is bedbeddelka biyaha: Sabuurradii 135:7; Yeremyaah 10:13; Wacdiyahii 1:7; Ishacyaah 55:10
[57] *Newsweek Magazine*: "DNA-da waxaa loogu abtiriyey (Saynisyahannada) inaynu dhammaanteen haweeney keliya ka soo farcannay." *Newsweek,* January 11, 1988, pp. 46-52.
[58] *Time Magazine*: "…waxaa jira 'Aadan' laga soo farcamay oo unugyadiisa ugu yaryar laga helayo qof kasta oo maanta adduunka ku nool." *Time,* Diseember 4, 1995, bogga, 29. **U fiirso**: Saynisyahannadu waxay ku andacoodaan inaan ninka aynu dhammaanteen ka soo farcannay ka da' yar yahay haweeneyda aynu dhammaanteen ka soo farcannay. Sheegashadoodani Baybalka ayay qaabilsan tahay, kaas oo tusa inay dhammaan ka soo farcameen Nuux. Laakiinse hooyada aynu dhammaanteen wadaagnaa waa Xaawa, maadaama uu Nuux lahaa saddex wiil iyo *saddex gabdhood oo uu soddog u ahaa* kuwaaas oo ay dadka oo dhammi ka yimaaddeen.)
[59] www.pbs.org/wnet/redgold/basics/bloodletting.html

[60] www.bible.ca/tracks/matthew-fontaine-maury-pathfinder-of-sea-ps8.htm **U fiirso**: Maury wuxuu ogaadey inay waddooyinka badaha dhexdooda maraa yihiin kuwo habaysan oo aan is beddelin oo uu ka markabka wadaa uu si toos ah badda dhexdeeda ugu mari karo. (Rozwadowski, Helen M. *Fathoming the Ocean.* Cambridge, MA: The Belknap Press of Harvard University Press, 2005, p. 40); Markii uu nebi Daa'uud wax ka qoray *"waddooyinka badaha,"* badda keliya ee ay isaga iyo dadkiisii yaqaaneen waxay ahayd Badda Miditereeniyaanka, Badda Galiili, Badda Dhimatay, Badda Cas. Badahani may lahayn *"waddooyin"* ama mowjado aad u waaweyn oo ishu qabaneysey.

[61] *World Book Encyclopedia* 1986; Stars.

[62] "Habeen aan cirka caad saarnayn, dhowr kun oo xiddigood ayay ishu arki kartey. Laakiinse diiradda cirka lagu fiiriyo ee xoogga leh, waxaanu ku arki karney xiddigo faro badan oo aanan tirin kareyn. In kasta oo ay xiddig kastaa ahayd mid khaas ah, xiddigaha oo dhammi wax badan bay iskaga mid ahaayeen." (Cornell University Astronomy website: http://curious.astro.cornell.edu/stars.php) Baybalku wuxuu sidoo kale sheegayaa inaan xiddigaha badnaantooda la tirin karin. (Bilowgii 15:5; 22:17).

[63] Ramsay, Sir William Mitchell. *The Bearing of Recent Discovery on the Trustworthiness of the New Testament.* Grand Rapids, MI: Baker Book House, 1953, p. 222.

[64] Josephus, Flavius. *Josephus: The Essential Works.* (Paul L. Maier, editor) Grand Rapids, MI: Kregel Publications, 1988. pp. 268, 277. Buugga waxaa ku jira sawirrada dhagxaan uu Bilaatos wax ku dul qoray iyo tiyaatarkii Heerod.

[65] Bruce, F.F. *Archaeological Confirmation of the New Testament.* (*Revelation and the Bible.* Edited by Carl Henry) Grand Rapids, MI: Baker Book House, 1969.

[66] Josephus, Flavius. *Antiquities* 18: 2, 2; 4, 3

[67] Footada iyo faahfaahinada saxaaraddii Kayfas lagu xabaalay: http://www.kchanson.com/ ANCDOCS/westsem/caiaphas.html

[68] Glueck, Nelson. *Rivers in the Desert*. NY: Farrar, Strauss & Cudahy, 1959, p. 136. Glueck wuxuu ku takhasusay inuu Bariga Dhexe wax ka qodqodo.

[69] Mormon-ku waa diin ay adduunka oo dhan ku rumaysan yihiin malyuumaad qof. Waxay Baybalka kaga duwan tahay, inaan Kitaabka Mormonka cilmiga waxyaalaha dhulka hoostiisa laga qodaa (archaeology) caddayn. Hay'adda Smithsonian ee ku taalla Washington, DC ayaa ku soo gabagabeysey: "Smithsonian archaeologists-ku ma arkaan xidhiidh toos ah oo ka dhexeeya cilmiga dhulka hoostiisa ee Adduunka Cusub iyo mowduuca uu [Kitaabka Mormon-ku] ka hadlo." (Martin, Walter.

*The Kingdom of the Cults*. Minneapolis, MN: Bethany House Publishers, 1997, pp. 200-202.) Sidoo kale eeg sharaxaadda dheeraadka ah 91 ee isla mowduucan ku saabsan ee cutubka 6. Is barbardhigga uu cilmiga waxyaalaha dhulka hoostiisa lag qodaa (archaeology) ku sameeyey Baybalka iyo Quraanka, eeg: http://www.debate.org.uk/?s=archaeology

[70] Free, Joseph P. and Howard F. Vos. *Archaeology and Bible History*. Grand Rapids, MI: Zondervan, 1992, p. 294.

[71] Muslimiimta iyo Mormoniiyiinta labaduba waxay ku andacoodaan inay caddaynta ugu weyn ee kitaabbadoodu tahay sida naxwaha fiican ee loo qorayaa. *Website Muslin ah* ayaa qoraya: "Carayn Weyn… Quraanka Kariimka ah: … Ilaa iyo intii Quraanka la muujiyey, afar iyo toban qarni ka hor jirin mid awooda inuu soo saaro qoraal la mid ah xataa hal cutub oo Quraanka ah, ha noqoto quruxdiisa, ku luuqayntiisa, iyo sharaftiisa…" (www.islam-guide.com/frm-ch1-2.htm) *Website ay Mormoniyiintu* leeyihiin ayaa isla sidaas ku andacoonaya: "Kitaaabka Mormon Carrayntiisa: … Waa inaad qortaa qoraal adoo isticmaalaya hab gabayeedkii hore af Cibraaniga qaarkiis yo sidii ay wax u qori jireen kuwaas oo aan hore looga helin adduunka af Ingiriiska lagaga hadlo ilaa kaddib inta aad ka daabacaysid qoraalkaas…" www.fwrb.org/BOMChallenge.html

[72] Sabuurradii 119, cutubka ugu dheer ee Baybalka, ayaa tusaale inaga siinaya habka qoraal ee xigmadda iyo quruxda badan ee qotoda dheer ee laga helo Qorniinka. Sabuurradii 119, wuxuu ku salaysan yahay alifbeeto, ka kooban 22 qaybood, oo midkood kastaa 8 aayadood yahay. 8 aayadood ee qayb kastaa waxay ka bilaabataa isla hal xaraf oo alifbeetada af Cibraaniga ah. Qaybta 1, xaraf kastaa wuxuu ka bilowdaa *Alif* (xarafka koowaad ee alifbeetada af Cibraaniga). Qaybta 2, siddeeda aayadoodba waxay ka bilowdaan *Beet* (xarafka labaad ee alifbeetada af Cibraaniga), sidaas ayayna ku sii soconayaan ilaa laga wada isticmaalayo alifbeetada uu afka Cibraanigu ka kooban yahay oo dhan. Isku day inaad sidaas oo kale samaysid. Maya, ha isku deyin. Waxaadse akhridaa Sabuurradii 119, oo ku dhex dabaalo awoodda erayadiisa. *"Waan ka sii waxgarasho badnahay macallimiintayda oo dhan, Waayo, waxaan u fiirsadaa markhaatifurkaaga."* (Sabuurradii 119:99)

## CUTUBKA 5: SAXEEXA ILAAHAY

[73] Wallenfels, Ronald and Jack M. Sasson. *The Ancient Near East*. Volume IV. NY: Charles Scribner's Sons, 2000; also see: Carl Roebuck. *The World of Ancient Times.* NY: Charles Scribner's Sons, 1966, p. 355.

[74] *"Alexander the Great sagaal bilood buu magaalladii hareereeyey oo qaarkeed burburiyey (332 Ciise Kahor), laakiinse giddigeed muu*

*burburin. Hoos haddaad eegtid, Turos dib uma soo kaban…"* (Avery, Catherine B. & Jotham Johnson. *The New Century Classical Handbook*. NY: Appleton-Century-Crofts, Inc., 1962, p. 1130.)

[75] Matthews, Samuel W. "The Phoenicians: Sea Lords of Antiquity," Washington, DC: *National Geographic,* August 1974, p. 165.

[76] Genesis 26:3; 28:15 **U fiirso**: Dhulkii uu Ilaahay u ballanqaaday inuu siin doono quruun ka soo farcami doontey Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquuub waxaa si ku habboon *"loo dhex dhigay quruumaha dhexdooda."* (Yexesqeel 5:5) Sidoo kale eeg Falimaha Rasuullada 1:8; 2:5)

[77] Josephus, Flavius, *The Complete Works of Josephus*. (William Whiston) Grand Rapids, MI: Kregel Publications, 1967, pp. 566-568, 580-583, 588-589.

[78] Haddii aan sawir ka bixiyo, Dagaalkii 2-aad ee adduunka ka hor, Yuhuud aad u tiro badan oo ku noolaa Jarmalkii uu Hitler ka talin jirey ayaan dooneyn in loo aqoonsado inay Yuhuud yihiin. Af Jarmalka ayay ku hadli jireen, cashuurta Jarmalka ayay bixin jireen, oo iyagoo Jarmalka la jira ayay Dagaalkii 1-aad ka qayb qaateen. Sidaas oo ay tahay Naasigii wuxuu iyaga ku calaameeyey Yuhuudnimo. Dhowr sanno gudahood, 6 malyuun oo Yuhuud ah ayaa lagu xasuuqay "the Holocaust…called history's best documented crime." (Phillips, John. *Exploring the World of the Jew*. Neptune, NJ: Loizeaux Brothers, 1993, p. 109) Sidoo kale eeg qoraalkan cinwaankiisu yahay: "Nazis Admit Murdering 6 Million Jews in Europe." Bourne, Eric. *The Palestine Post*, Sunday, December 16, 1945.

[79] Ishacayaah 44:18; Yeremyaah 5:21; Yooxanaa 5:39-47; 2 Korintos 3:12-16; Rooma 9-11. **U fiirso*:*** Qiyaastii 2600 oo sanno ka hor, wuxuu Ilaahay u muujiyey Yexesqeel inay inay dib u dhalashada Israa'iil saddex heer u dhici doonto. Wuxuu Israa'iil u ekeysiiyey dooxo ay ka buuxaan *lafo qalalan*, kuwaas oo *isu soo uruuraya* oo jidh noqonaya oo ugu dambaysan *nolol lagu afuufayo* [Yexesqeel 37:1-14]

[80] Barbardhig Bilowgii 37-50 noloshii Ciise ee lagu qoray Injiilka. Akhris aan kugula talinayo: *Joseph Makes Me Think of Jesus*, by William MacDonald. Grand Rapids, MI: Gospel Folio Press.

**CUTUBKA 6: MARKHAATIFUR AAMIN AH**

[81] "***Maxaa yeelay, wixii Ilaah laga garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga, waayo, Ilaah waa u muujiyey iyaga.*** *Tan iyo abuurniinta dunida waxyaalihiisii aan la arki karin ayaa bayaan loo arkaa,* ***iyagoo laga garto waxyaalihii la sameeyey, xataa xooggiisa daa'imiska ah iyo ilaahnimadiisa, si ayan marmarsiinyo u lahaan***." (Rooma 1:19-20) Xataa dadka aan weli Qorniinka helin, "*Waxay muujiyaan shuqulka sharciga*

*oo qalbiyadooda ku qoran, iyagoo* ***garashadoodu*** *u markhaati furayso, oo fikirradoodu midba midka kale* ***ashtakaynayo ama marmarsiinyo samaysanay***.” (Rooma 2:15) Sidaas oo ay tahay, halkii ay run dheeraad ah ka raadin lahaayeen, dadka badankiisu beenta ayay dabagalaan.

[82] Marka si fiican kumbuyuutarka loogu xisaabiyo facyaal badan oo abtirsiinyooyinka Baybalka ku qoran ah, waxaynu ogaaneynaa inuusan Aadan dhiman ilaa intii uu Nuux aabbihiis (farcankii 9-aad ee aad Aadan) ka gaadhayey in ka badan 50 sannadood jir (Bilowgii 5).

[83] *“Markaasaa saaxiriintii waxay Fircoon ku yidhaahdeen, ‘Tanu waa fartii Ilaah.’”* (Baxniintii 8:19) Sidoo kale eeg Baxniintii 12:30-33 Qisada oo dhan: Baxniintii 5-14.

[84] Iyada oo uu Muuse qoray qaybta ugu horraysa ee Qorniinka, waxaa suurtoggal ah in kitaabka Ayuub la qoray Towreedda horteed (qiyaastii wakhtigii nebi Ibraahim), tan oo ka dhigaysa mid kamid ah qoraallada kaamilika ah ee ugu da’da weyn ee adduunka ka jira. Haddii ay taariikhdani saxsan tahay, markaa waxaa Baybalka qoraalkiisu socdey muddo qiyaastii 2,000 oo sanno ah.

[85] DeHaan, Dennis. *Our Daily Bread*, May 6, 2006. Grand Rapids, MI: RBC Ministries.

[86] Dad ayaa su’aala, “Muxuu Ilaahay u oggaalaaday inay nebiyo been ahi soo gudbiyaan akhbaarradooda khiyaanada ku salaysan?” Muuse ayaa su’aashaas kaga jawaabey Towreedda dhexdeeda. “***Hadduu dhexdiinna ka kaco nebi*** *ama mid riyooyin ku riyooda, oo uu idin tuso calaamad ama yaab, oo calaamadda amase yaabku haddu rumoobo oo la arko wixii uu idinkula hadlay isagoo leh, ‘Ina keena aynu ilaahyo kale raacnee oo aynu iyaga u adeegnee - kuwaas oo aydaan aqoonin,’* ***waa inaydaan dhegaysan erayada nebigaas*** *ama riyaalowgaas, waayo, RABBIGA* ***Ilaahiinna ahu wuu idin tijaabinayaa*** *inuu ogaado bal inaad RABBIGA Ilaahiinna ah ka jeceshihiin qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo dhan iyo in kale.”* (Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 13:1-3)

[87] Boqorradii Kowaad 18; Boqorradii Kowaad 19:18; Rooma 11:14

[88] Smith, James E. *What the Bible Teaches about the Promised Messiah.* Nashville, TN: Thomas Nelson Publishers, 1993, pp. 470-474; Also: Phillips, John. *Exploring the World of the Jew*. Neptune, NJ: Loizeaux Brothers, 1993, pp. 80-81.

[89] Taylor, John. “Jones Captivated San Francisco’s Liberal Elite,” *San Francisco Chronicle*, November 12, 1998.

[90] Smith, Joseph. *Pearl of Great Price*. Joseph Smith – History; 1:15-16.

[91] Kitaabka Baybalka waxaa caddeeyey baadhitaanada lagu sameeye waxyaalihii hore ee qadiimka ahaa ee dhulka hoostiisa ama korkiisa laga qoday ama helay, taas aan kitaabka Mormoniyiinta caddayn looga

haynin. Barafisoorka la yidhaahdo Thomas Stuart Ferguson oo aasaasay qaybta Cilmiga Alaabta Qadiiimka ah (Archaeology) ee Jaamacadda Brigham Young University isagoo ujeeddo keliya ka lahaa oo ah nin caddayn la taaban karo loo helo "buuggooda quduus ah." 25 sanno kaddib oo baadhitaan dadaal leh, meelna caddayn way uga waayeen ha ahaato geedo, dad, alaab, maagaalooyin hore, juquraafi, laca hor, ama degaano kitaabka Mormon-ka lagu sheegay. Ferguson wuxuu isagoo juquraafiga kitaabka Mormon-ka ka hadlaya ku soo gabagabeeyey inuu yahay "mala-awaal." (Martin, Walter. *The Kingdom of the Cults*. Minneapolis, MN: Bethany House Publishers, 1997, pp. 200-202)

**CUTUBKA 7: AASAASKA**

[92] Baybalku wuxuu ka kooban yahay 66 kitaab—39 oo Axdigii Hore ah iyo 27 oo Axdiga Cusub ah. Mar dambe oo taariikhda ah, Kaniisadda Roomaan-Kaatoliga (taas oo sida kaniisado badan oo Protestant-ah Erayga Ilaahay ka kor marisa caadada kaniisaddooda) waxay go'aansatay inay Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub dhexdooda ku darto 11 buug oo kale. Buuggaagtan, oo lagu magacaabo *Apocrypha* (mise buugaagta *Deuterocanonical*), ayaa guud ahaan la qoray muddadii u dhexeysey Axdigii Hore iyo ka Cusub. In kasta oo ay halkaas ku qoran yihiin taariikho iyo arrimo kale oo caan ahi, Masiixiyiintii ugu horreysey ee Cibraaniyiinta ahaa marna kuwaas umay aqbalin inay yihiin Qorniin Ilaahay muujiyey. Qoraalladii laga helay Badda Dhimatay (Dead Sea Scrolls) intooda badan, kuwaas oo la helay 1947 waxay keliyoo fasirayaan buuggaagta 39-ka ah ee Axdigii Hore ee marna ma soo hadal qaadayaan buuggaagtan Kaniisadda Kaatoligu ku dartay kitaabkooda Baybalka (Apocrypha). Markii uu Masiixu adduunka joogey marar badan buu Axdigii Hore soo xigtey, laakiinse marna muu soo xigan buuggaagtaas Apocrypha la yidhaahdo. Buuggaagtaas (Apocrypha) marna laguma soo xigan Axdiga Cusub. 39-ka kitaab ee uu Axdigii Hore ka kooban yahay waxaa qoray nebiyadii uu Ilaahay sida tooska ah ula hadlay oo uu Eraygiisa u caddeeyey, *"oo uu ugu marag furay calaamooyin iyo yaababba, iyo xoogag kala duduwan, iyo hadiyado Ruuxa Quduuska ah."* (Cibraaniyada 2:4) Marka, Axdiga Cusub la eego, Masiixiyiintii noolaa mudadii ku xigtey wakhtigii uu Masiixu adduunka soo booqday waxay isku si u aqbaleen murwadii rasuulladii Masiixa iyo Qorniinnada Axdiga Cusub, inay la siman yihiin nebiyadii axdigii Hore iyo Qorniinnadiisa. Taasi run kama aha buuggaagta ay Kaatoligu kitaabkooda ku dareen (apocrypha).

[93] Luukos 24:25-48; Yooxanaa 5:39-47. Qoraallo akhbaarka Ilaahay sida ay isugu xigaan kuugu soo gudbinaya waxaad ka heleysaa: www.one-

god-one-message.com www.goodseed.com

**CUTUBKA 8: WAA KUMA ILAAHAY?**

[94] Aqoonyahannada ku xeeldheer cilmiga ku saabsan asalka adduunku waxay iskju dayaan inay taariikhda adduunka fahmaan iyaga oo dadaalkoodaa ku salaynaya "waxa ay arkaan ama helaan iyo mala-awaalka ay ka sameeyaan." (Loeb, Abraham. "The Dark Ages of the Universe," *Scientific American*, November 2006) Iyada oo uu cilmigoodu ku salaysan yahay *indho-indhayn iyo* ***sharaxaad cilmi ku dhisan,*** cilmiga kuwa Baybalka rumaysani waxay ku salaysan tahay *waxa ay arkaan iyo* ***muujin***—muujin ay shaanbad Ilaahiyan ah oo samaawi ahi ku taallo (sida lagaga hadlay cutubbada 5 iyo 6 ee buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*). Ilaahay wuxuu runtiisa u muujiyey hab aynu innagu ku *garan* karno inay run tahay.

[95] Kitaabka Ayuub 38:6-7 wuxuu sheegayaa inay malaa'igo arkayeen oo ku rayraynayeen markii uu Ilaahay adduunka abuuray. Ayuub waa kitaab sida maanso gabayeed loo soo gudbiyey; markaa malaa'iga waxaa lagu qeexay sidii *"xiddigo arooryeed"* iyo *"wiilasha Ilaahay."* Labadan odhaahood abuuritaano kala duwan ma sheegayaan. Qeexiddan la-dhaca ahi waxay tusaale u tahay odhaahaha lamaanayaasha ah iyaga oo isku wax sharaxaya, kuwaas oo laga helo maansada af Cibraaniga. Sidoo kale eeg Ayuub 1:6; 2:1.

[96] In ka badan kala badh 66-ka kutub ee Baybalka ayaa waxay wax ka sheegaan malaa'igaha. Tusaale ahaan: Bilowgii 3:24; 16:7-11; 18:1-19:1; Boqorradii Kowaad 19:5-7; Sabuurradii 103:20-21; 104:4; Daanyeel 6:22; Cibraaniyada 1:4-7,14; 12:22; Matayos 1:20; 2:13,19-20; 22:30; 26:53; Luukos 1 & 2; Tesaloniika Labaad 1:7, Muujintii 5:11; 18:1; 22:6-16, iwm (Muujintii waxay erayada *malaa'ig* ama *malaa'igo* isticmaalaysaa 70+ jeer).

[97] Sharciga Ku-Noqoshadiisa 10:14; Korintos Labaad 12:2,4; Yooxanaa 14:2; Sabuurradii 33:13; 115:3; Boqorradii Kowaad 8:39

[98] Vine, W.E., M.A. *An Expository Dictionary of New Testament Words.* Westwood, NJ: Fleming H. Revel Company; 1966, p. 229.

[99] Lixdii malmood ee uu Ilaahay adduunka ku abuuray iyo maalinta toddobaad ee nasashadu waxay bilaabeen wareegga wakhtiga ee uu Ilaahay bini'aadanka u dejiyey oo ilaa maantadan adduunka lagaga dhaqmo. *Usbuucu* cilmiga xiddigiska ma qaabilsan, taas oo kaga duwan yahay maalmaha, bilaha iyo sannadaha. Usbuuca Ilaahay ayaa dejiyey.

[100] Dadka taageera fikirka dhacdadii weyneyd "big bang" waxay mala-awaalaan inuu iftiinka jiritaankiisu qorraxda iyo adduunka ka horeeyey 9,000,000,000 oo sannaddood! (Loeb, Abraham. "The Dark Ages of the

Universe," *Scientific American;* November 2006, p. 49.)
[101] Marka markan ku xigta ee aad biyo cabto, waxaa kuu habboon inaad Abuurahaaga ku tidhaahdid, "Mahadsanid!" Marka laga soo tago xaqiiqada ah inay biyuhu harraadka inaga baabi'iyaan oo aynu ku noollahay, haddana waa kuwo mucjiso ah. Biyuhu waa dareeraha keliya ee marka la barafeeyo faafa; markaa xajmigoodu wuu khafiifaa oo heehaabaa. Haddii ay biyuhu sida waxyaalaha kale oo kale ahaan lahaayeen oo ay cuslaan lahaayeen waxay ku degi ama muquuri lahaayeen baddaha, harayaasha, iyo webiyada guntooda. Badankooduna markaa may milmeen oo waxaa ugu dambaysta meeshaas hoose ku xidhmi lahaa biyaha la cabo ee macaan. Ilaahay ayaa biyaha sidaas cajiibka ah ee wanaagsan u abuuray!
[102] Dhinaca madow ee dayaxa waxaa ugu horreysey oo bini'aadan arkay Disembar 24, 1968, markaas oo uu dayaxgacmeedkii Apollo 8 dayaxa ku wareegey. Ta xiisa lihi waa in, isla maalintaas, ay saddexdii nin ee dayaxgacmeedka la socday akhriyeen Bilowgii cutubka 1 iyada oo telifishinka laga daawanayo. (Reynolds, David West. *Apollo: The Epic Journey to the Moon.* NY: Harcourt, Inc., 2002, pp. 110-111)

**CUTUBKA 9: MID LA MID AHI MA JIRO**
[103] Tusaalayaal dheeraad ah oo Baybalka ku jira oo uu Ilaahay Isugu yeedhayo *"Annaga"*: Bilowgii 3:22; 11:7; Ishacyaah 6:8 (U fiirso: In Quraanka, "Allah" uu mar kasta isaga hadlayo jamac ahaan. Aayadaha Quraanka ah ee lagu soo xigtey cutubka 3 ee buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya* ayaa arrintaas sharaxaya.)
[104] Bilowgii 1:1-3 Iyada oo aanay qaybta lagu bilaabo ee Bilowgii sharaxayn inuu Ilaahay yahay saddex-midnimo, haddana sida erayadiisa loo dhigay ayaa taas sida ugu fiican muujinaysa taas oo sharaxaaddeeda mar dambe Baybalka lagu muujiyey. Qorniinku wuxuu caddaynayaa in dhammaan saddex Shakhsiyadood ee Ilaahnimadu ay abuuritaankii ka qayb qaateen.
[105] Markii uu Daa'uud noqday Boqorkii Israa'iil, Qorniinka wuxuu odhanayaa: *"Markaasaa reer Benyaamiin dhammaantood soo wada urureen oo Abneer soo daba galeen, oo waxay noqdeen* ***unug keliya*** [echad]*, markaasay buur isku dul taageen."* (Samuu'eel Labaad 2:25) Isla erayga lagu sheegay *"ILAAHAY waa* ***mid****."* ayaa loo isticmaalayaa in lagu qeexo midnimadan haddana jamaca ah.
[106] Aayado badan oo Axdigii Hore ah ayaa qira midnimada Ilaahay ee ballaaadhan ee qotoda dheer: Bilowgii 17:1-3; 18:1-33 Ilaahay wuxuu qaab jidh ahaan ugu muuqday nebi Ibraahim. Kuwani waxay ahaayeen kulano weji-ka-weji ah ee ma ahayn riyo ama waxyi. Bilowgii 35:9-

15; Baxniintii 3:1-6; 6:2-3; 24:9-11; 33:10-11. Barbardhig Baxniintii 33:11 iyo 33:20. Muuse wuxuu si toos ah ula hadlay mid ka Mid ka mid ah Shakhsiyadaha Ilaahay (Wiilka), laakiinse isaga looma oggolaan inuu arko wejiga Shakhsiga kale ee Ilaahay (Aabbaha). Miyaanay qoto dheerayn? Haa. Ilaahay waa Ilaahay. Eeg Yooxanaa 1:1-18. Waa kuwan aayado dheeraad ah oo Axdigii Hore ka tirsan kuwaas oo aan si saxa loo fahmeyn haddii aan la qaabilsiin fahanka ah kelinimada Ilaahay ee jamaca ah: Sabuurradii 2; Sabuurradii 110:1 (barbardhig Matayos 22:41-46); Maahmaahyadii 30:4; Ishacyaah 6:1-3 (barbardhig Yooxanaa 12:41); Ishacyaah 26:3-4; Ishacyaah 40:3-11; Ishacyaah 43:10-11 (Ishacyaah 7:14; 9:6-7); Ishacyaah 48:16; Ishacyaah 63:1-14; Ishacyaah 49:1-7; Yeremyaah 23:5-6; Daanyeel 7:13- 14; Hoosheeca 12:3-5; Miikaah 5:2; Malaakii 3:1-2, iwm.

[107] Luukos 15:11-32; Sidoo kale akhri Yooxanaa Kowaad.

[108] Akhri Sabuurradii 2, oo uu nebi Daa'uud Masiixa ugu yeedhayo *Wiilka Ilaahay*. Sidoo kale ka feker qaar ka mid ah magacyada ama darajooyinka kale ee Wiilka. Isaga waxaa loogu yeedhay *"irridda,"* (Yooxanaa 10) laakiinse taas macnaheedu maaha albaab ka samaysan alwaax ama bir. Waxaa kaloo Isaga loogu yeedhay: *"Kibista Nolosha,"* (Yooxanaa 6) laakiinse tan macnaheedu maaha xabad kibis caadi ah oo kale. Sidoo kale *"Wiilka Ilaahay,"* macnahiisu maaha inuu Ilaahay intuu xaas guursaday uu wiil dhalay. Akhri Yooxanaa, cutubbada 1, 3 iyo 5.

[109] *Le Soleil*, March 14, 1984: «Bienfaiteur sincère, il considérait ses 2.000 employés **comme ses enfants** et partageait leur problèmes, leur soucis et leur joie. Le 'Vieux' comme l'appelaient familièrement et tendrement son personnel, était **un grand fils du Sénégal**.» (Turjumaadda: "Isaga oo ah qof bini'aadnimo daacad ah leh ayuu isagu 2000 ee shaqaalihiisa u arkaa **sidii carruurtiisa oo kale**, oo la wadaagaa dhibaatooyinkooda, welwelladooda, iyo farxadahooda. "Odaygu" waa sida ay shaqaalihiisa iyagoo jecel isaga ugu yeedhi jireene, wuxuu ahaa **Wiil reer Sinigaal ah oo sharaf weyn lahaa**.")

[110] Sida Ilaahay Laftiisa oo kale, Ruuxa Quduuska ah looma fasiri karo sida aynu innagu rabo. Mid ka mid ah nebiyadii Ilaahay, oo wax yar laga tusay Jannada, wuxuu Ruuxa Quduuska ah u arkay "***toddoba*** *laambadood oo dab ah oo carshiga hortiisa ka ololaya, kuwaas oo ah* ***toddobada*** *Ruux oo Ilaah*." (Muujintii 4:5) Nebi kale ayaa Isaga ku qeexay Ka bixiya toddobada hadiyadood ee Ilaahay oo keliya ka yimaadda: "*Oo waxaa ku dul joogi doona* ***Ruuxa RABBIGA****… Ruuxa* ***xigmadda*** *iyo* ***waxgarashada****, iyo Ruuxa* ***talada*** *iyo* ***xoogga****, iyo Ruuxa aqoonta iyo ka* ***cabsashada RABBIGA***." (Ishacyaah 11:2)

[111] Markii uu adduunka joogey, Wiilka Ilaahay wuxuu xertiisii ugu

ballanqaaday, *"**Ruuxa Quduuska** ah oo **Aabbuhu** ku soo diri doono **magacayga**, wax kasta **Ayuu** idin bari doonaa, wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan **Anigu** idinku idhi*." (Yooxanaa 14:26) Erayadani waxay tusayaan midnimada buuxda ee weligeed ka dhexeysey Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska ah. Sida Aabbaha iyo Wiilka, ayaa Ruuxa Quduuska ahi u yahay Jiritaan Shakhsi ah *("Isagu…")*. Wax dheeraad ah oo Ruuxa Quduuska ah ku saabsan, ka eeg cutubbada 16, 22, iyo 28. Waxaaba ka sii fiican, inaad akhridid *Waraaqaha Guud* iyo *Falimaha Rasuullada* oo Baybalka ka tirsan, adiga oo fiiro gaar ah u yeelanaya shaqada Ruuxa Quduuska ah.

[112] Injiilku wuxuu qoray Wiilka oo Aabbaha kala hadlaya, *"ammaan ammaantaan adiga kula lahaa **ka hor** intaan dunidu jirin."* Waxaynu kaloo maqalaa Wiilka oo leh: *"Aabbow… Adaa i jeclaa **ka hor** intaan dunida la aasaasin."* (Yooxanaa 17:5, 24) Eeg sidoo kale Miikaah 5:2; Ishacyaah 9:6. Ruuxa Quduuska ahna, mid darajooyinkiisa ka mid ahi waa *"Ruuxa **abadiyanka** ah."* (Cibraaniyada 9:14)

[113] Bilowgii 20:22; Cibraaniyada 12:25; Luukos 3:22; 5:24; Yooxanaa 1:1-18; 3:16- 19; 17:22; Falimaha Rasuullada 5:3; 7:51: Galatiya 4:6; iwm.

[114] Luuqadda Carabiga, erayga *Allah*, macnihiisii qadiimka ahaa, wuxuu af Carabi ahana u dhigmaa erayga af Ingiriiska ah ee *God*. Haddii ay tahay aayaddaha Axdigii Hore ku jira sida Bilowgii 1:1: *"Bilowgii Ilaah* [samada iyo dhulkuu] *abuuray…*", ama aayadda Axdiga Cusub ee Yooxanaa 1:1: *"Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray **Ilaah**, Ereyguna wuxuu ahaa **Ilaah,**"* erayga af Carabiga ah ee guud ahaan lagu qeexo *Jiritaanka ugu Sarreeya* waa *Allah.* Waa muhiim inuu Jiritaanka ugu Sarreeyaa leeyahay magacyo shakhsiyan ah oo uu doonayo in la ogaado. "Allah" maaha magaca saxda ah ee shakhsiga ah ee Isaga, in kasta oo ay dad badani sidaas u haystaan. Sidoo kale erayga "God" isaguna maaha Magaciisa saxda ah ee shakhsiyanka ah, sida ay dadka qaarkiis u haysan karaan.

**CUTUBKA 10: ABUURITAAN KHAAS AH**

[115] Guinness, Alma E. *ABC's of The Human Body.* Corporate Author: The Reader's Digest Association, 1987, p. 22.

[116] Gates, Bill. *The Road Ahead*. NY: Penguin Group, 1995, p. 188.

[117] Si uu u sharaxo xaqiiqo ruuxaani ah, wuxuu Baybalku qeexayaa sida ay jidhka bini'aadanka xubnihiisu isugu habaysan yihiin: *"…jidhka oo dhammu si wanaagsan isugu haysto oo isugu wada xidhan yahay caawimaadda xubin kastaaba keento sida xubin kastaaba u shaqayso qiyaasteeda oo ugu kordhiso jidhka…"* (Efesos 4:16)

[118] Fikiradani waxaa laga soo qaatay qaamuuska John Philip ee Bilowgii

(Phillips, John. *Exploring Genesis*. Chicago: Moody Press, 1980). **U fiirso**: Qorniinku wuu kala duwayaa ruuxa, nafta, iyo jidhka. Eeg Tesaloniika Kowaaad 5:23; Cibraaniyada 4:12-13; Yooxanaa 4:24.

[119] Fikradda ah inay Ceeden ku taalley gobol Ciraaq ka tirsan waxay ku salaysan tahay warka juquraafiga ah ee ku jira Bilowgii 2:13-14. **U fiirso**: Dad baa Beer Ceeden ku tilmaama *beerta jannada,* in kasta oo aanu Qorniinku sidaas qabin. Beer Ceedenta adduunkan maaha in lagu khaldo Jannada aakhiro.

[120] Henry, Matthew. *Matthew Henry's Commentary*. Grand Rapids, MI: Zondervan, 1960, p. 7.

[121] Aadan *(Adamah)* waa erayga af Cibraaniga ee *nin,* oo macnihiisa tooska ahi yahay *ciid cas* waayo waxaa isaga laga sameeyey ciidda. Xaawa *(chavvah)* macnaheedu waa *nolol—"maxaa yeelay, waxay ahayd hooyadii waxa nool oo dhan."* (Bilowgii 3:19-20)

## CUTUBKA 11: BILOWGII SHARKA

[122] *"Xiddigta waaberiyow,* ***Ibliiskow,*** *Inanka arooryadow, sidee baad samada uga soo dhacday! Kaagan quruumaha taag yareeyeyow, sidee baa dhulka laguugu riday!"* (Ishacyaah 14:12) Aayaddan, magaca afka Ingiriiska ah ee *(Lucifer)*, oo macnihiisu yahay *ileys side*, kama muuqdo qoraalka afka Cibraaaniga ah. Waase eray *helel* af Laatiin ah laga soo turjumey erayga afka Cibraaniga ah ee uu macnihiisu yahay *ka ifaya*. Ishacyaah 14 iyo Yexesqeel 28 ayaa ina siinaya tusaalayaal laba-dhaca tafsiirka qaynuunka. Korka marka laga eego, labadan qorniiin waxay ku saabsan yihiin boqorro bini'aadan ahaa. Ishacyaah wuxuu ka hadlayey *"boqorkii Baabuloon,"* Yexesqeelna wuxuu wax ka qorayaa *"amiirkii Turos."* Laakiinse labadan qoraalba kuma saabsanaan oo keliya dad caadi ah. Marka qorniinadan lagu barto iyada oo lala xidhiidhanayo kuwa kale sida (Luukos 10:18; Ayuub 1:6-12; Muujintii 12:10; 1 Butros 5:8; iwm.), mid cad ayay noqonaysaa inay aayadahani sharaxayaan sidii Shaydaanku u dembaabtey, kan oo kan sameeya oo xukuma boqorrada sharka badan.

[123] Muujintii 12:4

[124] Matayos 10:28; 23:33; Markos 9:43-48

[125] Muujintii 20:10-15

## CUTUBKA 12: QAYNUUNKA DEMBIGA IYO DHIMASHADA

[126] Su'aal Caadi ah: Maxaa ku dhacaya ubadka iyo carruurta dhinta? Miyaa lagu xukumayaa dabeecadda dembiga ah ee ay dhacleen (Sabuurradii 51:5; 58:3)? Xaakinka Caddaaliga ah si quman buu samayn doonaa (Bilowgii 18:25). Isagu qofka kuma xukumo waxa uusan qofkaasi awoodin inuu fahmo. Isagu wuxuu dadka kala xisaabtamaa waxa ay iyagu

og yihiin ama *ogaan kareen* haddii ay dadaal dheeraal ah u galaan inay raadiyaan runta Ilaahay (Rooma 2:11-15; Sabuurradii 34:10; Ishacayaah 55:6). Qof bini'aadan ahi wuxuu Ilaahay hortiisa la xisaabtan ka sugayaa marka uu kaasi gaadho qaangaadhnimo ku filan oo uu wanaagga iyo xumaanta ku garto (Sharciga Ku-Noqoshadiisa 1:39; Ishacayaah 7:16; 2 Samu'eel 12:23; Matayos 18:10; 2 Timoteyos 3:14-17). Ilaahay oo keliya ayaa og da'da qof dembiyadiisa iyo doorashooyinkiisa lagala xisaabtami karo. Si kastaba ha ahaatee, akhbaarka Ilaahay wuxuu ina barayaa: *"Bal eeg, **hadda** waa wakhtigii la aqbalay; bal eeg, **hadda** waa maalintii badbaadinta."* (2 Korintos 6:2)

[127] Muujintii 20:14-15; 2:11; 21:8; Matayos 25:46

**CUTUBKA 13: NAXARIIS IYO CADDAALAD**

Cutubkani sharaxaad dheeraad ah ma laha.

**CUTUBKA 14: HABAARKII**

[128] "Masaska ay jebisada iyo nooceeda oo kale ah waxay maqaarkooda hoostiisa, dhinaca dambe ku leeyahay wax lugo u eg. Run ahaantii, waxay ahaan jireen lugo hore u jirey haddase wax yar ka sii hadheen. Weliba masaska labka ahi waxay lugtaas yar ee hadhaadiga ah u isticmaalaan inay maska dheddigga ah dhinaca hoose kaga xoqaan si ay u kiciyaan marka ay isu galmoonayaan, laakiinse lugtaas uma isticmaali karaan inay ku socdaan. Ma jiraan masas kale oo lugo leh." http://usatoday30.usatoday.com/tech/columnist/aprilholladay/2005-06-10-wonderquest_x.htm Dad ayaa arrintan bay'oologiga ah u isticmaala inay ku taageeraan fikradda mala-aawaalka ku dhisan ee ku saabsan inay nooluhu ka yimaaddeen unugyo yaryar oo is bedbeddeley iyo bini'aadankuna gaar ahaan daayeero. Laakiinse arrintu waa caddahay: abuuritaanka jidh ahaaneed ee masasku wuxuu qaabilsan yahay waxa Qorniinka lagu qoray kumanyaal sannadood ka hor.

[129] Sidoo kale: Muujintii 20:2; Luukos 10:18 iyo Korintos Labaad 11:3,14: *"Sidii **abeesadii xeeladdeedii Xaawa ugu khiyaanaysa**y oo kale," ayaa "**Shayddaanka qudhiisu** wuxuu isu ekaysiiyaa malaa'igta iftiinka."*

[130] Baxniintii 29:7; Samuu'eel Kowaad 10:1; Boqorradii Labaad 9:6; Sabuurradii 45:7

[131] Cutubka 18 wuxuu tusayaa saddex sababood oo ku saabsan sababta uu Ilaahay sir uga dhigay qorshihiisa samatobixinta. Mid ka mid ah farxadda iyo macaansiga ku jir in Qorniinada loogu barto sida uu u kala dambeeyey waa in la helo qisada marba marka ka dambaysa kuu muuqanaysa ee ku saabasan qorshaha uu Ilaahay dembiileyaasha kaga badbaadinayo Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada. Ilaahay, ayaa

xigmaddiisa daraadeed, qorshihihiisa u muujiyey si tartiib tartiib ah oo isku xigxigta, *"amarba amar, amarba amar baa lagu daraa, oo qaynuunba qaynuun, qaynuunba qaynuun baa lagu daraa, halkan in yar, halkaasna in yar."* (Ishacayaah 28:10)

[132] Qiso kartoon qosol ah oo cinwaankeedu yahay, "Ma Waxaas Baad Caqli Badnaan Ugu Yeedhaa?" *Joornaalka Times* wuxuu ku kajamayaaa fikradda ah Jiritaan Caqli Badan (Ilaahay): "Miyaanay ahayn in gabowga si sharaf leh oo fiican loo xaliyo? Tusaale ahaan: Kaba soo qaad haddii ay dadka gaboobaa intii ay jidhkoodu harag noqon lahaa ay si yar oo fiican isaga libdhi lahaayeen?" (Handy, Bruce and Glynis Sweeny. *Time*, July 4, 2005, p. 90) sidoo kale, buugga *The Improbability of God*, in a chapter entitled *Neither Intelligent nor Designed*, wuxuu odhanayaa "miyaanay isla weyni bini'aadan uun ahayn ta meesha keenaysaa Abuure Caqli Badna oo haddana sameeyey abuuritaan sidaa xun loo sameeyey?" (Bruce and Frances Martin in *The Improbability of God* by Michael Martin and Ricki Monnier. Amherst, NY: Prometheus Books, 2006, p. 220)

**CUTUBKA 15: DHIBAATO LABA-JIBBAARAN**

[133] Associated Press, May 20, 2006 http://forums.anandtech.com/archive/index.php/t-1869858.htm

[134] Hab diimeedkii la isu daahirin jirey wuxuu qayb ka yahay qaynuunkii Axdigii Hore (eeg Laawiyiintii). Waxaa kuwaas loogu talogalay fadaranimada ruuxiyanka ah ee Ilaahay hortiisa lala tago. Markaa kaddib wuxuu Ilaahay daahirsanaan buuxda iyo xaqnimo inagu siiyey Masiixa, oo qaynuunadaas hore Ilaahay inoogama baahna. Akhri Falimaha Rasuullada 10 iyo Kolosay 2. Ilaa iyo maantadan, diimaha qaarkood waxay xoogga saaraan daahirsanaanta korka ee diiniyanka ah. Emailkan waxaan ka helay mid Muslin ah oo London ku nool: "Dadka aan Muslinka ahayn oo ay Masiixiyiintu ku jiraan oo dhammi waa wasakh… Muslimiintu aad bay u nadiifsan yihiin oo Ilaahay bay ag joogaan waayo way is maydhaan…"

[135] Kaddib markii uu Ilaahay Qaynuunadiisa hadal ahaan ugu dhawaaqay (Baxniintii 20), Muuse ayuu buurta dusheeda ugu yeedhay oo siiyey laba loox oo dhagax ah oo uu RABBIGA Laftiisu ku qoray Qaynuunnada (Baxniintii 24:12; 31:18). *"Oo looxyadu waxay ahaayeen shuqulkii Ilaah, oo farta ku qoranuna waxay ahayd fartii Ilaah oo looxyada ku xardhan."* (Baxniintii 32:16)

[136] Eeg Luukos 18:9-14; Efesos 2:8-9.

[137] Masiixu waa Ka keliya ee dhawray dhammaan qaynuunnada Ilaahay, ee odhan karey, *"Ilaahayow, waxaan jeclahay inaan sameeyo*

*doonistaada, Haah, oo sharcigaagu wuxuu ku dhex jiraa qalbigayga."* (Sabuurradii 40:3) Qaynuunku wuxuu inoo geeyaa ama tilmaamaa Isaga. *"Sidaas daraadeed sharcigu wuxuu ahaa **edbiyeheena** inuu Masiixa inoo geeyo, inaynu xaq ku noqonno **rumaysadka**."* (Galatiya 3:24) Xalka Ilaahay ee dembiga bini'aadanka waxaa si xoog leh loogu faahfaahiyey Rooma 3:20-27.

**CUTUBKA 16: FARCANKA NAAGTA**

138 *"Siday dhammaan Aadan ugu wada **dhintaan**, sidaas oo kalaa dhammaan Masiixa loogu wada **noolayn** doonaa."* (1 Korintos 15:22); sidoo kale akhri Rooma cutubka 5; Galatiya 4:4-5.

139 Neobirth Pregnancy Care Center: www.neobirth.org.za/development. html

140 *"Bethlehem Eprathah"* waa magacii hore ee Beytlaxam, magaalo dhinaca koonfureed ka xigta Yeruusaalem (Bilowgii 35:16-19; 48:7). Boqor Daa'uud ayaa Beytlaxam ku dhashay (Samuu'eel Koowaad 16:1, 18-19; 17:12), iyo Kii isaga ka Sarreeyey ee uu ka soo farcamay (Matayos 2:1-6; Luukos 2:1-12). Yuhuuddii noolayd waagii Ciise arrintan way ku wareereen maadaama uu Isagu ku koray Naasared, oo gobolka Galiili ku taal (Yooxanaa 7:41-42).

141 Si aad Baybalka tixraac ugaga heshid, eeg liistada waxyiyada ah ee cutubka 5 ku qoran.

142 War dheeraad ah oo ku saabsan macnaha "Masiix" eeg cutubka 14, cinwaan hoosaadkiisa: LABADA "FARCAN."

143 Bilowgii 1:2; Ruuxa Quduuska ah ee Ilaahay maaha in lagu khaldo Jibriil. Malag Jibriil waxaa abuuray Ilaahay. Ruuxa Quduuska ah lama abuuran, laakiinse waa Ruuxa weligii jirey ee shaqaynayey ee Ilaahay Laftiisa. Eeg cutubbada 9 iyo 28.

144 Dhalashadii Ciise kaddib, Maryan waxay ninkeedii Yuusuf kula noolayd sida ay lamaanayaasha caadiga ahi isula nool yihiin, oo waxay isu dhaleen wiilal iyo gabdho (Matayos 13:55-56; Luukos 8:19; Yooxanaa 7:3-10).

145 Nebiyadii waxay hore uga sii waxyoodeen inuu Masiixu ka dhalan doono bikrad: Ishacyaah 7:14; oo uu Isagu noqon doona farcanka Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, iyo Yahuudah: Bilowgii 17:18-21; 26:3-4; 28:13-14; 49:8-10; inuu Isagu noqon doono farcanka boqornimada ee Boqor Daa'uud: Samuu'eel Labaad 7:16; inuu Isagu ku dhalan doono Beytlaxam: Miikaah 5:2.

146 Matayos 2. Boqorkii Herod ayaa ka masayray fikirka ah inuu "boqor" kale dhashay, markaasuu isku deyey inuu Ciise dilo, isaga oo amray in la laayo dhammaan carruurtii labka ahayd ee ku dhalatay Beytlaxam iyo hareeraheeda, ee jirtey laba sanno iyo wixii ka yar. Shaydaanka

ayaa waxan oo dhan ka dambeeyey. Ujeeddadiisu waxay ahayd inuu burburiyo *Farcanka naagta,* kaas oo isaga ka qabsaday "meeshii uu haysan jirey!" Laakiinse, Ilaahay ayaa isku daygii Shaydaanka ee ahaa inuu Ciise dilo ka hor degey Isaga oo Yuusuf taas uga digey, oo isaga u sheegay inuu Maryan iyo cunugga yar magangeliyo ahaan ugu kexeeyo Masar. Dhacdooyinkana nebiyadii ayaa hore uga sii waxyoodey (Matayos cutubka 2; Miikaah 5:2; Hoosheeca 11:1; Yeremyaah 31:15). Kaddib markii uu Boqor Heerod dhintay, ayaa Yuusuf, Maryan, iyo Ciise ku soo laabteen Naasared halkaas oo uu wiilkii Ciise ugu koray nin.

**CUTUBKA 17: WAA KUMA KANI?**

[147] Laga soo minguuriyey Jayyusi, Salma Khadra. *Tales of Juha*. Interlink Books. Northampton, MA, 2007, p. 19.

[148] Kuwani waa qorayaal qadiim ah oo taariikhihii wax ka qoray, oo aan Baybalka shaqo ku lahayn, oo haddana wax ka qoray Ciisihii reer Naasared: Tacitus, Taariikhyahan Roomaaniyiintii ah (Ciise Kaddib 55-120) [*Tacitus* 15:44]; Josephus, Taariikhyahan Yuhuud ah (Ciise Kaddib 37-101) [*Antiquities* 18:3]; Talmuudka, qoraal wadaadada Yuhuudda oo Towreedda tafsiira [*The Babylonian Talmud.* Sanhedrin, 43a]; nin Giriig ah oo Lucian la odhan jirey [*The Death of Pereguire*, p. 11-13 in *The Works of Samasota*, uu turjumey H.W. Fowler and F.G. Fowler, 4 volumes. Oxford: Clarendon Press, 1949; Suetonius (Ciise Kaddib 69-122), gacanyarihii ugu sarreeyey ee Boqorkii Hadrian [*Claudias*, 25] **U fiirso**: J. Oswald Sanders inuu qoray: "In lagu andacoodo inuu Masiixa Baybalku yahay mala-awaal bini'aadan oo keliya oo uusan ahayn shakhsi taariikhi ah oo jirey, waxay Injiilka qoraal mucjiso ah oo weyn sida uu Masiixa nooli mucjiso weyn uga yahay taariikhda. Ernest Renan ayaa isna ka hadlay in haddii qof uu Ciise keeni lahaa uu kaasi Ciise oo keliya ahana lahaa. J.J. Rousseau ayaa isna qiray inaanay caqligal ahayn inay intay dhowr qof isu tagaan ay taariikh noocaas oo kale ah qoraan, halkii uu mid kaliyahi mowduuc ka qori lahaa." (Sanders, J. Oswald. *The Incomparable Christ.* Moody Press. Chicago, 1971, p. 57.)

[149] Matayos 13:55-56. Ciise wuxuu ku koray Naasared. (Matayos 2:22-23; Luukos 2:51-52), Isaga oo nijaar ah ayuu la shaqayn jirey aabbihiisii sharciyanka ahaa, Yuusuf (Markos 6:3). Is hoosaysiintii Ciise waxay kaga xanaajisay dadkii doonayey geesi dhul qabsanaya, ee aan dooneyn Midiidin is hoosaysiinaya.

[150] *"Oo Ciise markuu bilaabay inuu wax baro, wuxuu ahaa qiyaas soddon jir, isagoo ahaa (sida loo moodayay) ina Yuusuf..."* (Luukos 3:23)

[151] Ciise wuxuu marar badan Isugu yeedhi jirey *"Wiilka Aadanaha,"* Magac Masiixi ah oo macnihiisu yahay "Wiilka bini'aadanka/

Bini'aadanimada" (Af Giriig: *Anthropos*). War muxuu cinwaan yaab leh yahay! Aynu jeclaano ama yaynaan jeclaane, dhammaanteen waxaynu nahay "wiilasha bini'aadanka." Laakiinse marka laga Wiilka Ilaahay ee la sarraysiiyey, Isaga ayaa ***doortay*** inuu noqdo *Wiilka Aadanaha* si uu jaal ula noqdo bini'aadanka. Markaa, magacani wuxuu diiradda saaraayaa Ilaahnimada Ciise isla sida uu diiradda u saarayo bini'aadanimadiisa, maadaama uu tilmaamayo sida uu Ilaahay shakhsiyan faraha ula soo galay bini'aadanka. Akhri Daanyeel 7:13-14; Matayos 8:20; Luukos 5:24; 22:69-70; Yooxanaa 5:27; 13:31; Muujintii 1:13-18; 14:14.

[152] Tusaale ahaan, aayaddan Axdigii Hore ku jirta ee uu Ciise soo xogtey (Luukos 4:4) waxay ku jirtaa Towreeddii nebi Muuse: Sharciga Ku-Noqoshadiisa 8:3.

[153] Dembiga bini'aadanka daraaddiis, Shaydaanku wuxuu runtii noqday *"madaxa adduunkan"* iyo *"madaxda xoogga hawada oo ah ruuxa haatan ka dhex shaqaynaya carruurta caasinimada."* (Yooxanaa 12:31; Efesos 2:2) Wiilka Ilaahay wuxuu u yimid inuu dib u soo celiyo xukunkii bini'aadanka ee lagu lumiyey dembiga daraaddiis.

[154] Sabuurradii 110 iyo Sabuurradii 2; Matayos 21:41-46

[155] Quraanka 19:19; Tan barbardhig 48:2; 47:19

[156] Quraanka 19:19; 3:45-51; 5:110-112; 19:19

[157] Quraanka 4:171

[158] Dembiga ugu ee Islaamka waa *"shirki"* (Af Carabiga *la wadaajin*). *Shirki* waa dembiga la galo marka Ilaahay wax uun lala simo.

[159] U fiirso magacyada la siiyey Masiixii la ballanqaaday: *Cajiib* = Magac Ilaahay oo keliya loo isticmaalo. Macnihiisu waaa *mid caqliga aan geli karin. La taliye* = Masiixu wuxuu noqon doona mid xigmad oo dhammi ku dhan tahay. *Ilaaha Weyn* = Ilaahay Laftiisa ayaa jidh bini'aadan soo qaadan dooney. *Aabbaha Abadiyanka ah* = Isagu wuxuu ahaa dooney Weligiis Jiraya. *Amiirka Nabadda* = Wuxuu dhammaan kuwa aamina siin doonaa: nabad ay Ilaahay la lahaadaan (Rooma 5:1), nabad ay dadka kale la lahaadaan (Efesos 2:14-18), nabad ay qalbigooda ku haystaan (Filibos 4:7), ugu dambayntana, nabad caalami ah (eeg cutubka 29).

[160] Nebi Daa'uud wuxuu hore uga sii waxyoodey imaansha uu RABBIGA adduunku ku imaan doono isaga oo Shakhsi ah: *"Bal eeg, **anigu waan imid**, Oo kitaabka duudduuban wax **Igu** saabsan baa ku qoran."* (Sabuurradii 40:7) Malaakii wuxuu ka sii waxyoodey inuu Ilaahay soo diri doono mid ka sii horeeya si uu dadka ugu sii diyaariyo imaanshaha *"RABBIGA."* (Malaakii 3:1)

[161] Ilaahay ma sharaf dhac bay ku tahay inuu soo dego oo heerkeena yimaado? Mala-awaaal inaad adiga iyo saaxiibkaa ka wada sheekaysanaysaan laba hoggaamiye oo ruuxi ah, Cumar iyo Haaruun.

Saaxiibkaa ayaa kugu yidhi, "Haaruun baabuurta macmalka ah buu la ciyaaraa, laakiinse Cumar sidaas ma sameeyo." Adiga oo aad u tixgeliya Haaruun, ayaad isaga ugu jawaabtey, "Suurtogal maaha! Way ka fog tahay inuu Haaruun ku ciyaaro baabuurta macmalka ah sida ciyaalka yaryar!" Bilowga, jawaabta noocan oo kale ahi waxay u muuqataa mid caqligal ah. Kaba soo qaad haddii aynu ogaaney inay Cumar iyo Haaruun labaduba leeyihiin wiilal yaryar oo ay dhaleen oo jecel inay aabbayaashood intay derinta guriga la fadhiistaan kula ciyaaraan baabuurta macmalka ah ee u soo iibiyeen. Hadda haddii aynu ogaaney inuu Haaruun jecel yahay inuu wiilashiisa sidan wakhti ula qaato, iyada oo uu Cumar taas diidey waayo sharaftiisa ayay meel kaga dacaysaa? Kee baa markaa labadooda ah aabbe, nin, iyo hoggaamiye fiican, Cumar mise Haaruun? Sidaas oo kale, marka ay dadku leeyihiin, "Sharafta iyo weynaanta Ilaahay ayay ka hoosaysaa inuu Isagu adduunka yimaaddo Isaga oo nin ah," laga yaabee inay ula jeeddo sax ah ka leeyihiin, laakiinse halkii ay ka weyneyn lahaayeen sharafta iyo weynaanta Ilaahay, taas way ceebaynayaan.

[162] Yooxanaa 13 waxay ka hadlaysaa Ciise oo xertiisa lugaha u maydhaya, shaqo midiidin! Inaad Injiilka akhridid waxay ka dhigan tahay inaad la kulantid Midiidinka dhabta ah: Sayidka Laftiisa.

[163] Matayos 14; Markos 6; Yooxanaa 6

[164] Ciise Masiix wuxuu sheegayey jiritaankiisii *abadiyanka* ahaa. Haddii uu keliyoo doonayey inuu sheego inuu jirey Ibraahim hortii, markaa wuxuu odhan lahaa, "Ka hor intii uusan Ibraahim jirin, *Anaa jirey*." Laakiinse wuxuu yidhi, *"Intaan Ibraahim jirin* ***Anaa ah****."* eeg cutubka 9 waxa ku saabsan YHWH (Baxniintii 3:14)

[165] Erayga loo istimcaalo *caabudaad* ee la xidhiidha kuwii Ciise caabudey waa isla eryaga loo isticmaalo caabadaada Ilaahay. (Barbardhig Matayos 8:2 iyo Muujintii 7:11. Labada meeloodba, *caabudeen* waa erayga af Giriigga ah ee *proskuneo* oo macnihiisu yahay *in mid sujuudo ammaan iyo caabudaad darteed.*)

[166] Haddii aad weli ku dhegan tahay sheeko-baraleyda aan wax caddayn ah loo hayn ee ku saabsan in Qorniinada ee Baybalka la beddeley, mar kale akhri cutubka 3, oo uu cinwaankiisu yahay: "Beddelaad mise Xafidaad?"

[167] Lewis. C.S. *Mere Christianity*. NY: Macmillan-Collier, 1960, pp. 55-56.

[168] Si aad u nakhtiintid midnimada Ilaahay ee qotoda dheer, akhri cutubka 9.

[169] Dad badan ayaa ku kufa arrin kale oo ku saabsan qisada Ciise iyo ninkii dhalinta yaree ee taajirka ahaa. Nin baa isaga oo ordaya Ciise u yimid oo weydiiyey, *"Macallin wanaagsanow,* ***maxaa wanaagsan*** *oo aan sameeyaa inaan* ***nolosha weligeed ah*** *helo?"* (Matayos 19:16; Markos 10:17; Luukos 10:25) Dadkii badnaa ee dhegeysanayey ninka dhalinyarada ah

su'aashiisu mid fiican bay ula muuqatey, laakiinse Sayidka sidaa ulama muuqan. Ciise wuxuu ogaa inuusan ninkan ehlu-diinka ahi weli fahmin xaqiiqooyinka aasaaska u ah quduusnimada abadiyanka ah ee weyn ee Ilaahay iyo dembi badnaanta bini'aadanka. Ninkan isla qumani wuxuu u malaynayey inuu isagu jannada iskiis u shaqaysan karo; oo uu isku deyi karo inuu mid wanaagsan noqdo. Waa sida cunug yar oo dhow shilin gacanta ku haysta oo ninka adduunka ugu taajirsan weydiinaya, "Intee baan ku siiyaa si aan hantidaada u iibsan karo?" Sidee ayuu Ciise ugu jawaabey ninkaas? Wuxuu isaga dib u tusay oo u xasuusiyey Tobankii Amar si uu isaga u tuso inuusan weligiis, awooddiisa shakhsi ahaaneed, ku buuxin karin ama ku kasban karin xaqnimada Ilaahay ee weyn. *"Nolol weligeed ah"* ma leh kuwa u maleeya inay taas kasban karaan kaddib marka ay "*camallo wanwanaagsan"* sameeyaan.

[170] Ciise wuxuu kaloo yidhi, *"Qalbigiinnu yuusan murugoon.* ***Ilaah*** *waad rumaysan tihiin,* ***Anigana*** *i rumaysta....* ***Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee****....* ***Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha****. Sidee baad u leedahay, 'Aabbaha na tus?' Miyaadan rumaysan* ***Inaan Aabbaha ku jiro, Aabbuhuna uu Igu jiro****? ...I rumaysta inaan Aabbaha ku jiro, oo Aabbuhuna aniga igu jiro, haddii kale* ***shuqullada aawadood ii rumaysta****."* (Yooxanaa 14:1,6,9-11)

[171] Ishacyaah 53:1; Yooxanaa 12:38; Luukos 1:51; Sidoo kale eeg: Ishacyaah 40:10-11; 51:5; 52:10; 59:16; 63:5; Yeremyaah 32:17.

[172] Iyada oo Ilaahay xooggeeyey labada nebi (Eliiyaah iyo Eliishaa) inay qof dhintay soo nooleeyaan, ma jiro nebi abidkii sheegtay inuu yahay *Isha* Noloshu ka soo maaxato ama uu nolol bixin karo. Ciise oo keliya ayaa odhan karey, *"****Anigu*** *waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha."*

[173] Ka hor intaanu Masiixu adduunka imaanin, Isagu samada ayuu joogey. Isagu halkaas ayuu joogey markii Shaydaanka dibedda looga soo tuuray. Markaa, Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi, *"Waxaan arkay Shayddaankoo sida hillaac samada uga soo dhacaya."* (Luukos 10:18)

## CUTUBKA 18: QORSHAHA ABADIYANKA AH EE ILAAHAY

[174] Cibraaniyada 11:6; Yeremyaah 29:13; Ishacyaah 29:11; Matayos 11:25; 13:13-14; Luukos 8:4-15; Yooxanaa 6. Xaqiiqooyin badan oo kuwa Ilaahay ah ayaa loo muujiyey hab khaas ah oo dadban, oo kuwa runta raadinaya oo keliyahi ku heli karaan. Ilaahay dadka kuma khasbayo inay dhegeystaan, fahmaan, oo rumeeyaan. Kuwa *doonaya* runta way heli doonaan. Kuwa *ula kaca* isu *indho tirayaana* ma heli doonaan.

[175] Ma aragtay in waxyiyo badan sidii ficil tegey loo qoray iyada oo haddana la qoray kumanyaal sanno ka hor iyaga oo aan weli dhicin?

Qorshaha Ilaahay lama leexin karo. Marka uu Abuuruhu wax yidhaahdo, waxaasi waa sidii ay dheceen oo kale. Waana sababtaa Masiixa loogu yeedhay *"Wanka la gowracay waagii dunida la aasaasay."* (Muujintii 13:8)
[176] Akhri Sabuurradii 2, oo la qoray 1000 sanno ka hor markii ugu horreysey ee uu Masiixu adduunka yimid. Meel kale oo Qorniinka ah, Masiixaa, mar labaadka uu imaan doono (oo lagu qeexay cutubka 29 ee *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya),* waxaa loo ekaysiiyey sidii dhagax weyn oo samada ka soo dhacaya. *"Dhagaxaasi"* wuxuu *"sida budada ka dhigi doonaa"* dhammaan kuwa diidi doona inay Isaga addeecaan (Daanyeel 2:34-35; Matayos 21:33-44).
[177] Erayo dheeraad ah oo uu Butros yidhi, akhri Falimaha Rasuullada cutubbada 2-5; Falimaha Rasuullada 10; Butros Kowaad 1:10-12; 2:21-25; 3:18; iwm. Sidoo kale ka feker erayda uu qoray Rasuul Bawlos: *"**Hadalka ku saabsan iskutallaabtu waa u nacasnimo** kuwa lumaya, laakiin **waa u xoogga Ilaah** kuweena badbaadaya. ...oo **itaaldarrada Ilaahna** waa ka itaal badan tahay itaalka dadka... Ilaah baa doortay waxyaalaha **itaalka daran** inuu ceebeeyo waxyaalaha itaalka leh."* (Korintos Kowaad 1:18,25,27)

**CUTUBKA 19: QAYNUUNKA ALLABARIGA**
[178] Sidee ayuu Qaabiil waxyaalahan oo dhan ku sameeyey? Ilaahay ayaa isaga u sheegay. Cibraaniyada 11:4 waxay inoo sheegaysaa inuu allabarigiisa ku bixiyey *"rumaysi"*—rumaysiga waxa uu Ilaahay amray oo ballanqaaday. Mar dambe, Qorniinada ayaa hab qoraal ah u bixinaya qaynuunada ku saabsan allabariyada, ee uu Haabiil si adeecid leh u bixiyey muddo aad markaa ugu horreysey. Bilowgii 4:4 wuxuu sheegayaa inuu Haabiil *"curadkii"* (barbardhig Baxniintii 13:12-13), wan ka keenay *"adhigiisii"* (eeg Laawiyiintii 5:6), oo uu bixiyey *"baruurtiisii"* (eeg Laawiyiintii 3:16). Laguma sheegin uu Haabiil wan ku qalay meesha allabariga, laakiinse waxay u muuqataa inuu sidaas sameeyey, isla sidii ay muuminiintii ka dambeeyey sameeyeen. Bilowgii 8:20; 12:7; 13:4,18; 22:8-9; Baxniintii 20:24-26; Laawiyiintii 17:11; iwm.
[179] Daanyeel 6; Esteer 3:8-15; 8:7-17
[180] Strong, James. *The Exhaustive Concordance of the Bible*. NY: Abingdon-Cokesbury Press, 1948, p. 57. Barbardhig Bilowgii 6:14 (*"dabool"*) Laawiyiintii 5:18 (*"kafaarogudka"*). Isla erayga af Cibraaniga ah *Kâphar* (kafaaragudka) ayaa aayadahan lagu isticmaalay.
[181] Laawiyiintii 5:7
[182] In ka badan 50 jeer ayuu Qorniinka sheegayaa inuu allabarigu ahaado *"mid aan iin lahayn."* Tusaale ahaan, *"Oo haddii qurbaankiisu yahay neef adhi ah—, ha ahaado wan ama orgi—oo qurbaan la gubo loo*

*keenay, ha bixiyo neef lab oo* ***aan iin lahayn****."* (Laawiyiintii 1:10)

**CUTUBKA 20: ALLABARI MUHIIM AH**

[183] *Ciid al-Adxa* waa ciidda Muslimiinta ee sannadka ugu muhiimsan. Waxay dib u tilmaamaysaa markii uu Ilaahay wanka geesaha leh allabariga ah ee beddelka wiilkiisii ah siiyey Ibraahim. Sida ay Muslimiin badani aaminsan yihiin wiilkaa allabari ahaanta loo qali lahaa wuxuu ahaa Ismaaciil, ee ma ahayn Isxaaq — in kasta oo uusan Quraanka laftiisu marna sheegeyn inuu Ismaaciil ahaa, laakiinse uu Baybalku si cad u sheegayo inuu Isxaaq ahaa. Allabariga Iidda Muslimiinta adduunka oo dhan ayaa sameeya. Waxaa kaloo kan lagu soo xidhaa *Xajka* Maka loo tago. Xujaajtu waxay xajkooda ku soo gabagabeeyaan iyagoo daadinaya dhiigga neef (badanaa ido ama lo') kaddib marka ay tukadaan salaadda Iidda ee subaxdii. Muslimiinta badankoodu waxay rumaysan yihiin in allabarigani uu iyaga siinayo nooc "dhalasho cusub" ah, iyo haddii ay kaas si saxa u sameeyaan in dembiyadooda laga nadiifinayo. Laakiinse, waxay Muslimiintu qiraan inaanuu allabarigaas iyo ficillo diimeedka kale ee ay halkaa ka samaynayaan iyaga siinayn hubaal badbaado, maadaama ay dembiyo hor leh bilaabayaan inay sameeyaan markay xajiyaan oo allabariga Iidda qalaan kaddib. (Wuxuu Baybalku arrintaa ka qabo akhri Cibraaniyada cutubka 10 iyo Yooxanaa cutubka 3.)

[184] Waa marka ugu horraysee, magacii Ibraahim wuxuu ahaa Abraam. Maadaama aanan meel u hayn oo ay qisadaasi dheer tahay, qaybtaa laguma sharixin buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya.* Eeg Bilowgii 17. Qisada Ibraahim oo buuxda, ka akhri Bilowgii 11 laa 25; sidoo kale akhri Rooma 4, iyo Galatiya 4, iyo Cibraaniyada 11.

[185] Sharciga-Ku-Noqoashadiisa 7:6-7; 14:2

[186] Waa kuwan dhowr tusaale oo u saabsan sidii uu Ilaahay quruunta Israa'iil ugu isticmaalay inay barako u noqdan quruun aan Yuhuud ahayn: Yuusuf wuxuu badbaadiyey nolosha malyuumaad Masaari ah (Bilowgii 37-50). Nimco, gabadhii Ibraahim, waxay barako u noqotay laba haweeen ah oo reer Moo'aab ah Corfah iyo Ruud (Kitaabka Ruud ee Axdigii Hore). Nebi Eliiyaah wuxuu barako u noqday carmalladii reer Siidoon (Boqorradii kowaad 17; Luukos 4:26). Yoonis, in kasta oo uusan aad ugu faraxsanayn, wuxuu akhbaarka badbaadada u geeyey reer Nineweh (Yoonis). Boqor Suleymaan wuxuu barako u noqday boqorradii Careebiya ee Sheeba (Boqorradii Kowaad 10; Luukos 11:31). Daanyeel wuxuu barako u noqday Baabulooniyiintii (Daanyeel 1-6). Esteer iyo Mordekay waxay barako u noqdeen Boqortooyadii Faaris (Esteer), iwm.

[187] Bilowgii 12:2-3; 22:16-18; Cibraaniyada 6:13-20; Yooxanaa 4:22; Falimaha Rasuullada 1–10, iwm.

[188] *"Ibraahim kolkii la jirrabay, rumaysad buu Isxaaq allabari ahaan ugu bixiyey. Kii ballamada aqbalay ayaa wuxuu bixinayay wiilkiisii keliyaha, in kastoo lagu yidhi, Kuwa **Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa. Wuxuu ku tirinayay in Ilaah ka kicin karo xataa kuwii dhintay**; oo sida masaal oo kale ayuu isagii uga helay kuwii dhintay."* (Cibraaniyada 11:17-19)

## CUTUBKA 21: DHIIG DHEERAAD AH OO LA DAADIYEY

[189] Waxaan bilaabay inaan tiriyo "qisooyinka allabariga" ee Axdigii Hore ku jira, laakiinse waxaan tirintooda joojiyey markii aan marayey qisada 200-aad! Afartan eray ee: *"dhiig," "allabari," "hadiyad Ilaahay loo bixiyo,"* iyo *"meesha allabariga,"* waxaa Baybalka laga helaa in ka badan 1400 oo jeer.

[190] Bilowgii 15:13-14 *"Markaasuu wuxuu ku yidhi Aabraam, 'Ogow in hubaal farcankaagu ay dad qalaad ku ahaan doonaan dal aan kooda ahayn, oo ay u adeegi doonaan, oo **afar boqol oo sannadood** waa la dhibi doonaa; oo weliba quruuntaas ay u adeegi doonaan, xukun baan ku ridi doonaa; **oo dabadeedna way ka soo bixi doonaan iyagoo xoolo badan wata**.'"* Kaamilaadda ballanqaadkan Ilaahay waxaa lagu qoray Baxniintii 1:1-12; 12:35-41. Ilaahay waa weyn yahay. Qorshayaashiisu mar kasta way meel maraan.

[191] Baxniintii 5-11

[192] Wakhti hore, geed ololaya oo Buur Siinay dusheeda ku yaaley dhexdiisa, ayuu Ilahaay ugu ballanqaaday Muuse: *"Xaqiiqa anigaa kula jiraya, oo taasaa calaamo kuu noqonaysa, inaan anigu ku soo diray; markii aad dadka ka soo bixiso Masar, Ilaah baad buurtan ugu adeegi doontaan."* (Baxniintii 3:12)

[193] Baxniintii 13:17; *"Dhagaxii ayuu dillaaciyey, markaasay biyo ka soo buqdeen, Oo meelihii engegnaa ayay ku durdureen sidii webi oo kale."* (Sabuurradii 105:41)

[194] Baxniintii 28:9-19; Mar dambe, oo Masiixu adduunka joogey, wuxuu yidhi, *"Waxaan ahay **illinka**, haddii qof uun xaggayga ka soo galo, wuu **badbaadi** doonaa."* (Yooxanaa 10:9) Wax kasta oo ku saabsan taambuuggii wuxuu tilmaamayey Isaga Shakhsiyaddiisii iyo shaqadiisii.

[195] *"Oo waa inuu g**acanta saaraa** madaxa neefka qurbaanka ah, oo waa inuu ku ag **gowracaa** iridda teendhada shirka, oo wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu waa inay **dhiigga ku dul rusheeyaan hareeraha meesha allabariga**... Oo wiilasha Haaruun waa inay ku dul **gubaan** meesha allabariga."* (Laawiyiintii 3:2, 5)

[196] Taambuuggu wuxuu nooc sawir ah ka sii bixinayey Badbaadiyaha samada ka imaanayey ee dhulka ku soo degayey. Kuwa dhab ahaan u

garanaya Badbaadiyaha, *"Isaga dhammaantiis waa mid aad loo jecel yahay."* (Gabaygii Suleymaan 5:16), sida taambuuggii gudahiisa. Kuwa aan Isaga aqoona, *"Isagu suurad iyo qurux aynu ku fiirinno toona ma leh."* (Ishacyaah 53:2-3), sida taambuuggii dibaddiisa.
[197] *Aadan (Adamah)* waa erayga af Cibraaniga ah ee "nin" oo macnihiisa tooska ahi yahay "ciid cas," waayo wuxuu Ilaahay ka sameeyey jidhkii Aadan ciidda dhulka.
[198] Tirintii 3:23-39
[199] Laawiyiintii 16: Maanta waxay Yuhuuddu ugu yeedhaan Maalinta Kafaaragudka *Yom Kippur*, laakiinse Maalintu macnaheedii hore maleh maadaama aanay berigaa jirin macbud, wadaadnimo, iyo allabariga xooluhu. Ta yaabka lihi waa in calaamadaha Yuhuudda ee maanta middood ay tahay derbi (Derbiga Dhinaca Galbeed (*Western Wall*); derbi ka hadhay kii uu dhisay Heerod-kii Caanka ahaa si uu u weyneeyo baaxadda Macbudka Buurta Dusheeda *"Temple Mount"*). Yuhuuddu maalin kasta ayay kaas hortiisa joogsadaan oo waxay Ilaahay ka barayaan imaanshaha Masiixii—kaas oo mar hore yimid! Sidii ay nebiyadii hore u sii sheegeen, quruunta Yuhuuddu ruuxiyan way indho la' yihiin (Ishacyaah 6:10; 53:1; Yeremyaah 5:21; Yexesqeel 12:2; Korintos Labaad 3:12-4:6). Maalin maalmaha ka mid ah ayaa indhahooda la furi doonaa si ay u fahmaan Ciise (*Yeshua*) inuu yahay Ka kaamilay calaamadaha iyaga loogu muujiyey macbudka, wadaadnimada, iyo allabariyada. (Cibraaniyada 8-10; Efesos 2) Derbiga indho la'aanta ruuxiyanta ahi wuu dumi doonaa (Efesos 2:14; Rooma 9-11). Eeg cutubka 5 ee buuggan, ee cinwaan hooseedkiisu yahay WAXYIYO SHAKHSIYAAD KU SAABSAN Sidoo kale akhri qoraalka gabagabada buuggan.
[200] Taariikhda Kowaad 3:1, barbardhig Bilowgii 22:2. Waxay ahayd isla meeshan meeshan halka ay Muslimiintu qarnigii 7-aad ka dhiseen masjidka Al-Aqsa (*Dome of the Rock Mosque*).
[201] Taariikhdii Labaad 7:5

**CUTUBKA 22: WANKA**

[202] Mid ka mid magacyada RABBIGA ee Qorniinka ku jiraa waa *Cimmaanuu'eel,* oo macnihiisa tooska ahi yahay, *"Ilaah baa inala jooga."* (Ishacyaah 7:14; Matayos 1:23)
[203] Korintos Labaad: 5:1-4; Korintos Kowaad 6:19; Butros Labaad 1:13-14; Efesos 2:21
[204] Ishacyaah 40:3-9; Malaakii 3:1; Luukos 1; Yooxanaa 1
[205] Baybalka dhexdiisa oo dhan, mar allaale marka uu Ilaahay nin u doorto inuu wadaad ama boqor noqdo, qof kale oo uu Ilaahay raalli ka yahay sida nebi ayaa kaas la dooranayo ugu subki jirey saliid si

loo tuso in ninkaas uu Ilaahay u diray shaqo gaar ah. Ilaahay wuxuu Wiilkiisa ugu subkay Ruuxa Quduuska ah Laftiisa. Qorniinka, saliidda waxaa badanaa loo isticmaali jirey inay metesho Ruuxa Quduuska ah. **U fiirso**: Saddexda Shakhsi ee Ilaahnimadu way ka wada qayb qaateen *abuuritaankii*, markaa Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Quduuska way ku wada hawlnaayeen hawshii *badbaadada*.

206 *"Kii xaq ahu* ***rumaysadkiisa*** *buu ku noolaan doonaa."* (Xabaquuq 2:4) Iyada oo allabarigii uu Ciise u yimid inuu adduunka u noqdo uu ku filan yahay *"inuu qaado dembiga adduunka,"* wuxuu keliyoo faa'iido u noqonayaa kuwa rumeeyey inuu Ciise allabari u noqday iyaga dartood. Xaqiiqadan waxaa si fiican loogu soo gudbiyey taxanaheena barnaamijyada raadiyaha ah ee Sinigaal lagu qoray ee la yidhaahdo "Jidka Xaqnimada" (www.twor.com; www.lesprophetes.com). Barnaamijyo badan oo aanu sii deyney ayaa dadka dhegeysta la siiyey Qorniinka oo bilaash ah. *Dhammaan* kuwa noo soo qora oo kaas na weydiista, bilaash bay ku heleen. Hadiyaddani ma mid ay u qalmaan baa malyuumaadka dadka ah ee raadiyaha naga dhegeysta? *Haa*. Miyay dhegeystayaasha oo *dhammi* noo soo qoraan oo na weydiistaan Qorniinka oo bilaash ah? *Maya.* Badankoodu tan kama faa'iidaystaan. Sidaas oo kale, in kasta oo allabariga Wiilkiisu dhammaan ku filan yahay, oo uu Ilaahay saamaxaad iyo nolol weligeed ah ugu yaboohayo dhammaan. Haddana, boqolkiiba dad yar oo farcanka Aadan ah ayaa aqbala haddiyaddaa uu Ilaahay bixinayo. Eeg Luukos 14:15-24.

**CUTUBKA 23: KAAMILAADDA QORNIINKA**

207 Ishacyaah 53; Sabuurradii 22. Sidoo kale eeg Daanyeel 9:24-27, oo sharaxaya qorshaha Ilaahay ee abadiyanka ah. Waxaa qorshahaa qayb ka ahaa: *"Masiixa waa la goyn doonaa, waxbana ma haysan doono."* (Daanyeel 9:26)

208 Matayos, cutubbada 21 ilaa 25

209 La gacangeliyey: Eeg Sabuurradii 41:9; Sekariyaah 11:12-13 iyo Matayos 26:14-16; 27:3-10.

210 Intii ay Yuhuuddu u dabaaldegayeen iiddooda sannadlaha ah ee Kormaridda, Ciise wuxuu noqon dooney Wanka Kormaridda ee kaamilka ah, kama dambaystana ah, Isaga oo muuminiinta ka furan doona cadhada Ilaahay ee dembiga ku aaddan. *"Waayo,* ***Masiixa ah Kormariddeena*** *waa la sadqeeyey."* (1 Korintos 5:7)

211 Injiilka Yooxanaa, cutubbada 13 ilaa 17.

212 Wuxuu keliyoo Ciise ku yidhi kuwii u yimid inay Isaga qabtaan, *"WAAN AHAY."* Erayga *"Isagii baan ahay"* ayay turjumaanada af Ingiriisku u qaateen, laakiinse eryaga *"Isaga"* kuma jiro qoraalkii af

Giriigga. Ciise wuxuu sheegayey Ka uu Isagu yahay: Ka Weligiis Iskiis u Jirey *"WAAN AHAY"* kaas oo ka soo degey samada. Markaa mid lala yaabo maaha, in markii uu Ciise ku jawaabay *"WAAN AHAY,"* ay hoggaamiyeyaashii diinta iyo askartii u yimid inay Isaga qabtaan ay dib u gurteen oo dhulka ku daateen.

[213] *"Riyadii habeennimada waxaan ku arkay* ***Mid u eg wiilkii aadan aha oo ku yimid daruuraha samada****!"* (Daanyeel 7:13) **U fiirso**: In mid dharka uu gashan yahay jeexjeexo waxay dhaqan ahaan tusi jirtey in qofkaasi murugo ama cadho aad u weyni hayaan. Waxaa xiiso leh, qaynuunka uu Ilahaay siiyey Muuse wuxuu qorayey, *"Oo kii wadaadka sare walaalihiis ka dhex ah… waa inuusan… dharkiisa dildillaacin."* (Laawiyiintii 21:10). Taas daraadeed (Matayos 27:65; Markos 14:63), ayuu Kayfas isaga casiley wadaadnimadii sare. Wadaadka sare ee cusub ee abadiyanka ahi waa Ciise Laftiisa kaas oo adduunka u yimid inuu jidhkiisa u bixiyo sidii allabari. Isagu waa Ka Keliya ee run ahaantii bini'aadanka dembiga leh ula heshiisiin kara Ilaaha quduuska ah (Cibraaniyada 2:17; 3:1; 4:14-16; 7:26; 8:1; 9:11, 25; 10:19-22)

[214] Yooxanaa 18:38; 19:4,6; Yooxanaa 19:15; Luukos 23:21

**CUTUBKA 24: WAA LA WADA BIXIYEY**

[215] Haddii aadan weli fahmin cutubbada 8 iyo 9, iyo 16 iyo 17, ee buugga *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*, laga yaabee inaad odhaahdan u qaadatid mid bidcinimo ah. Waxaan xataa maqlay kuwo si kajan ah u leh, "Markaa intii uu 'Ilaahay' caloosha bikrada ku jirey oo uu mar dambena iskutallaabta ku qodbanaa, yaa adduunka xukumayey?" Su'aashani waxay muujinaysaa sida ay kuwaasi fikrad khalad ah uga qabaan Qorniinka iyo Ilaaha kaas bixiyey, *"Waad qaldan tihiin oo garan maysaan Qorniinka iyo xoogga Ilaah."* (Matayos 22:29) Maadaama uu Ilaahay weligiis ku jirey saddex-midnimo qoto dheer, Isaga dhibaato kuma aha inuu adduunka iyo samada isla hal mar joogo. Haddii ay qoraxdu iyada oo samada sare joogta iyada oo isla markaana innaga ina ifinaysa oo ina diirinaysa, muxuusan Abuuraha qorraxdaasi u awoodi waayeyn inuu isla hal mar samada iyo adduunka joogo?

[216] *Calvary (Kranion)* waa magaca af Giriigga ah ee laga soo turjumey magaca af Cibraaniga ah ee *Golgotha*, oo macnihiisu yahay *meeshii dhakada* (Matayos 27:33; Markos 15:22; Yooxanaa 19:17). Tani waa buurtii gaabnayd ee dusheeda Ciise lagu iskutallaabay, tan oo ku taalla Yeruusaalem xaafaddeeda qadiimka ah dibaddeeda una samaysan sida madax xiiran, waxayna qayb ka tahay silsilad buuraha ah ee Ibraahim uu beddelkii wiilkiisa wanka geesaha leh ku qalay.

[217] Taariikhyahankii Josephus wuxuu ka war bixiyey in ka hor intaan

Yeruusaalem la qabsan sannadkii 70 Ciise Kaddib, ay askartii Roomaanku "maalin kasta qaban jireen shan boqol oo Yuhuud ah; maya, maalmaha qaarkood in ka badan bay qabqaban jireen… askartaasi, cadho iyo nacayba ay u qabeen Yuhuudda daraadeed, kuwa ay qabtaan waxay iskutallaab bay ku qodbi jireen, xagga shafka; marka uu dadku aad ugu bato, oo meel dheeraad ah oo lagu qodbo loo baahdo, iskutallaabuhuna ay dad dheeraad ah oo lagu qodbo u baahdaan." Josephus wuxuu kaloo qoray in dadkaa dhibanayaasha ah "marka hore la shaabuugayn jirey, dabadeedna siyaalo kala duduwan oo kale loo jidh dili jirey." (Josephus, *Antiquities* 11:1, p. 563)

[218] Yuhuuddu waxay wakhtiga ku xisaabin jireen iyaga oo ka bilaabay 6-da subaxdii. *"Waxayna ahayd saacaddii saddexaad* (6:00 + 3 saacaddood = 9:00)*, oo iskutallaabta ay ku qodbeen… Goortii saacaddii lixaad la gaadhay* (12:00 duhurkii)*, dhulka oo dhammu gudcur buu ahaa ilaa saacaddii sagaalaad* (15:00)." (Markos 15:25,33)

[219] Bilowgii 8:20; 22:2-8; Baxniintii 29:18. Odhaahda *"qurbaan la gubo"* waxaa Axdigii Hore laga helaa 169 jeer. Ciise ayaa noqday qurbaanka dembiga dartii loo gubo ee kama dambaysta ah. Markos 12:33; Cibraaniyada 10:6-14. **U fiirso**: Si si dheeraad ah loogu fahmo sababta uu Ilaahay uga jeestey Sayid Ciise markii uu Isagu iskutallaabta ka laalaadey, akhri Ishacyaah 53 iyo Sabuurradii 22. Isla Sabuurradii meesha uu Daa'uud ka sii waxyoodey inuu Masiixu odhan doono, *"Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay?"* (Sabuurradii 22:1) Daa'uud wuxuu inoo sheegayaa sabata uu Ilaahay u ilaawey Wiilkiisa. *"**Adigu quduus baad tahay**!"* (Sabuurradii 22:3) Ilaahay wuxuu ka jeestey Ciise, waayo Ilaahay gebigiisba waa quduus, oo *"Isagu shar ma fiirin karo."* (Xabaquuq 1:13) Saacadahaas mugdiga ahaa, Wiilka Aadanaha ee bilaa dembiga ahi wuxuu u silcayey beddelkii kuwa sharka leh iyad oo uu Ilaahay u ciqaabay Isaga sidii uu dembiile ahaa. Ciise, Wanka Ilaahay ee quduuska ah, ayaa noqday Dembi-Side (Isaga oo aan Laftiisu dembiile noqonayn). Mid qasiidooyinka tiriya ayaa si fiican u dhigay markii uu yidhi, "Waa qarsoodi weyn! In Ka Abadiyanka ahi dhinto! Bal yaa fahmi kara qorshahan mucjisada ah?" *(Amazing Love*, Charles Wesley, 1707–1788)

[220] Edersheim, Alfred. *The Life and Times of Jesus the Messiah.* 1883, p. 614.

[221] Akhri Cibraaniyada 9 iyo 10. **U fiirso**: Sida lagu qoray cutubka 22 ee buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*, ammaanta Ilaahay, oo mar ku dhex jiri jirtey Meesha-Ugu-Wada-Quduusan ee taambuuggii iyo macbudkii, hadda dib dambe daah dabadiis ma ahayn. Haddase Ciise ayay ahayd.

[222] Yooxanaa 19:31-37; Baxniintii 12:46; Sabuurradii 34:20; Sekariyaah 12:10;13:6

**CUTUBKA 25: DHIMASHADA OO LAGA ADKAADAY**

[223] Matayos 28; Markos 16; Luukos 24; Yooxanaa 20-21; Korintos Kowaad 15. **U fiirso**: Dad badan oo ku dadaaley inay buriyaan sarakiciddii Ciise ayaa ku dambeeyey inay qoraan buuggaag tusaya caddaymaha badan ee aan la dafiri karin ee tusaya inuu dhab ahaantii Ciise sarakacay. Tusaale ahaan: Morrison, Frank. *Who moved the Stone?* Grand Rapids, MI: Zondervan, 1987; McDowell, Josh. *Evidence that Demands a Verdict.* Nashville, TN: Thomas Nelson, Inc., 1993; Strobel, Lee. *The Case for Christ.* Grand Rapids, MI: Zondervan, 1998.

[224] Ciise Masiix ma uusan sheegin oo keliya inuu *"**maalinta saddexaad** soo sarakacayo,"* (Matayos 16:21) laakiinse wuxuu kaloo Isagu yidhi, *"Sida Yoonis saddex maalmood iyo saddex habeen caloosha nibiriga ugu jiray, sidaasuu Wiilka Aadanahuna **saddex maalmood iyo saddex habeen** caloosha dhulka uga jiri doonaa."* (Matayos 12:40). Dad badan ayaa si daacadnimo leh isu weydiiya, haddii la xabaalay habeenkii Jimcaha oo xabaasha ku jirey ilaa subaxdii Axadda, markaa, saddex maalmood oo buuxa maaha. Laakiinse, muddadii uu Ciise xabaasha ku jiri lahaa waxaa loo xisaabiyey si jumlad ah, oo caadadii Yuhuudda ee berigaa waxa dhaca maalinta saacadday doonto ha ahaatee waxaa loo xisaabin jirey maalin buuxda (tusaale ahaan: Matayos 27:63-64; Bilowgii 42:17-18; Samuu'eel Kowaad 30:12-13; Esteer 4:16-5:1). Qodob kalena waa kan: Qorniinka ma odhanayo in Ciise iskutallaabta lagu qodbay maalintii Jimcaha. Iyada oo ay dad badani iskaga dhawaaqayaan "Is buris!" waxaa jira sharaxaado badan oo wanaagsan oo xalinaya "is burisyada" loo maleeyo inay Baybalka ku jiraan.

[225] Falimaha Rasuullada 11:26; 26:28; Butros Kowaad 4:16

[226] Falimaha Rasuullada 5:41 *"...iyagoo ku faraxsan in lagu tiriyey inay istaahilaan in Magaca aawadiis loo maamuus jebiyo."* Butros oo la xabisay lana jidh diley: Falimaha Rasuullada 5; sidoo kale eeg Falimaha Rasuullada 12. Ciise wuxuu hore u sii sheegay inuu Butros ku dhimanayo shahiidnimo: Yooxanaa 21:18-19.

[227] Qaar baa soo xigta inuu Ciise haweeneydii aan Yuhuudda ahayn ku yidhi, *"La iima soo dirin, idaha lunsan oo reer binu Israa'iil maahee."* (Matayos 15:24), laakiinse ma sii sheegaan inuu Ciise sii waday oo bogsiiyey haweeneydaa gabadheedii! (Tusaalayaal dheeraad ah oo ku saabsan adeeggii iyo naxariisashadii Ciise ee dadkii aan Yuhuudda ahayn dhexdooda, eeg Matayos 12:41-42; 21:33-43; Luukos 9:51-55; 10:30-36;17:11-19; Yooxanaa 4; 1 Yooxanaa 2:1-2; Luukos 24:45-48.)

[228] Sabuurradii 68:18; 110:1; Sabuurradii 24

[229] Ciise *"wuxuu **fadhiistay** Weynaha xagga sare midigtiisa"* waayo *"Isaga Laftiisa ayaa sameeyey daahirinta dadka dembiyadooda sameeyey."* (Cibraaniyada 1:3) *"Wadaad waluba maalin kastuu **istaagaa** isagoo adeegaya oo marar badan bixinaya allabaryo isku mid ah, kuwa aan marnaba dembiyo qaadi karin, laakiin isagu kolkuu allabari keliya mar keliya dembiyo u bixiyey ayuu **fadhiistay** midigta Ilaah."* (Cibraaniyada 10:11-12) Sidoo kale eeg Cibraaniyada 8:1; 12:2; Muujintii 3:21.

**CUTUBKA 26: EHLU-DIIN ILAAHAY KA FOG**

[230] Yacquub 2:18; Matayos 5:13-16; Cibraaniyada 11

[231] Iyada oo uu Ilaahay dowladaha u oggolaaday inay dadkooda difaacaan, oo uu faray inay si mas'uuliyad leh u isticmaalaan *"seefta"* sida *"midiidinka Ilaah, oo waa mid cadho kaga aarsada kii xumaan sameeya."* (Rooma 13:1-4; Bilowgii 9:6), in dagaal iyo dirir loo isticmaalo si runta Ilaahay waxay si toos ah uga soo hor jeeddaa tusaalihii iyo waxbariddii Ciise, oo yidhi, *"Waad maqasheen in la yidhi, 'Waa inaad deriskaaga jeclaatid oo cadowgaaga necbaatid', laakiin waxaan idinku leeyahay, **Cadowyadiinna jeclaada, u duceeya kuwa idin habaara, wax wanaagsan u sameeya kuwa idin neceb, oo Ilaah u barya kuwa idin caaya oo idin silciya**, si aad u ahaataan wiilashii Aabbihiinna jannada ku jira, waayo, qorraxdiisa wuxuu u soo bixiya kuwa xun iyo kuwa wanaagsan, roobna wuu u di'iyaa kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahaynba. Waayo, haddaad jeceshihiin kuwa idin jecel, abaalkee baad leedihiin? Cashuurqaadayaashu miyaanay sidaas oo kale samayn? Haddaad salaantaan walaalihiin oo keliya, maxaa dheeraad ah oo aad samaysaan? Dadka kale miyaanay sidaas oo kale samayn?"* (Matayos 5:43-47) Taas bil-caksigeeda Quraanku wuxuu odhanayaa, *"La dagaallama kuwa aan Ilaahay iyo yowmal-qiyaamaha rumaysnayn, oo aan xaaraamayn wixii ay Ilaahay iyo nebigiisu xaaraameeyeen, oo aan Diinta Runta ah rumaynin, xataa haddii ay kuwaasi yihiin Ehlu-Kitaabka, ilaa ay ka bixiyaan Jisyada* [cashuur khaas ah oo laga qaado dadka aan Muslimiinta ahayn] *si khasab ah iyaga oo laga adkaaday,"* (Quraanka, Suuradda 9:29)

[232] *"Oo kanu waa warkii aad tan iyo bilowgii maqlayseen, kaasoo ah **inaynu isjeclaanno**, oo aynaan ahaanin sida **Qaabiil** oo ahaa kan sharka leh oo walaalkii dilay. **Oo muxuu u dilay? Waayo, shuqulladiisu waxay ahaayeen shar, oo kuwii walaalkiisna xaq bay ahaayeen**."* (1 Yooxanaa 3:11-12) Labada arrimood ee ugu waaweynaa ee horseedka u ahaa inuu Qaabiil dilo Haabiil waxay ahaayeen ibliiska iyo xaasidnimo (Barbardhig Matayos 27:18).

[233] Sidee ayaynu uga jawaabi karnaa su'aasha caanka ah ee kuwa shakisani ay weydiiyaan, "Xaggee ayuu Qaabiil xaaskiisa ka helay?" Bilowgii 5 ayaa jawaabta bixinaya. Aadan iyo Xaawa waxay lahaayene *"wiilal iyo gabdho kale."* (Bilowgii 5:4) Markaa, way iska caddahay inuu Qaabiil guursadey mid ka mid ah gabdhihii walaalihiis. Taasi weli may sababi karin dhibaato caafimaad oo xagga jismiga ah. Markii dambese, Ilaahay guurka noocaas oo kale ah wuu xaaraameeyey. Iyo maxaa ku dhacay Haabiil kaddib markii isaga la diley? Jidhkii Haabiil ciidda ayuu dib ugu laabtay, laakiinse naftiisii iyo ruuxiisii Jannada ayaya aadeen, maadaama uu Ilaahay dembiyadiisii saamaxay, oo uu isaga ka dhigay mid xaq ah rumaysigiisii daraaddiis. Cibraaniyada 11:4.

[234] Muuse iyo nebiyadii kale waxay qeexayaan daad caam ahaa iyo aafo dabiiciyan ah oo dhacday waagii Nuux: Bilowgii 7–8; Sabuurradii 104:6-8; Ayuub 22:16; Matayos 24:37-39; Butros Labaad 2:5-6.

**CUTUBKA 27: HEERKA 1-AAD: QORSHIHII HORE EE ILAAHAY**

[235] Siday rabto ha ku dhacdee, qayb kasta oo Baybalka ahi waxay la xidhiidhaa saddex mowduuc midkood: Wixii uu Ilaahay sameeyey, Waxa uu Ilaahay hadda samaynayo, Waxa uu Ilaahay samayn doono. Haddii hab diiniyan saddexdan mowduuc ee Qorniinka ku jira loo fasirona waxaa loo kala qaybiyaa: *Saamaxaad* = Marka aad Injiilka rumaysid, wuxuu Ilaahay kaa dhigayaa mid ku **sugan** xaqnimo buuxda. (Rooma 3-5) *Doorasho* = maadaama hadda lagu doortay, Ilaahay ayaa noloshaada ka dhex shaqaynaya si uu adiga kaaga caawiyo inaad **ficil** ahaan ugu noolaan kartid nolol xaqnima ah. (Rooma 6-8 iyo 12-15) *Ammaanid* = Jannada waxaad boos ahaan iyo ficil ahaanba ku ahaanaysaa mid leh **xaqnimo kaamil** ah. (Muujintii 21-22)

[236] Richardson, Don. *Lords of the Earth.* Oxnard, CA: Regal Books; 1977, pp. 354. (Sidoo kale qiso ku saabsan dad dadka qalan jirey oo Masiixi noqday akhri: Don Richardson: *Peace Child*. Oxnard, CA: Regal Books, 1975.)

[237] Falimaha Rasuullada 26:9-11; 7:58-60; 8:1-3; 9:1-2

[238] Falimaha Rasuullada 9:1-31; sidoo kale Falimaha Rasuullada, cutubbada 11; 13-14; 16-28. Falimaha Rasuullada, cutubbada 22 iyo 26, Bawlos wuxuu kaga hadlayaa sidii uu Masiixiga ku noqday. Sidoo kale eeg Galatiya 1:13,23; Filiboy 3:6; Korintos Kowaad 15:9; iwm.

[239] "Awliyo" waa marka Baybal ahaan laga hadlayo waa mid Ilaahay *gaar looga dhigay*; mid uu Ilaahay ku *tilmaamay* quduus rumaysigiisa dartii jidhkiisa saamaxaada iyo xaqnimada. Caadada ay dadku sameeyeen ee ay dadku shakhsiyaad dhintay kaga dhigayaan "awliyo" waa mid si toos ah uga

soo horjeedda waa uu Baybalku ina barayo (eeg Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 33:2-3; Sabuurradii 30:4; Maahmaahyadii 2:8; Daanyeel 7:21-27; Matayos 27:52; Falimaha Rasuullada 26:10; Efesos 1:1, 2:19, iwm.).

**CUTUBKA 28: HEERKA 2-AAD: QORSHAHA HADDA EE ILAAHAY**

[240] Midda aanay dadka badankoodu garowsan waa inay marka ay cadowga la jaal noqanayaan marka ay isticmaalayaan hababka is difaaca ah ee noocaas ah. Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 18:10-14; Ishacyaah 47:13; Falimaha Rasuullada 19:19; Galatiya 5:19-21

[241] Yooxanaa Kowaad 2:1; Yooxanaa 14–16

[242] Cutubka 1, waxaynu ku soo xiganey e-mail uu soo diray Axmed oo soo qoray: "… Baybalkiina, kii saxada ahaa ee hore, iyo Axdiga Hore waxaa ku jira meelo hore loogu sii sheegay Maxamed (scw), xataa hadda." Aayadaha ugu muhiimsan ee uu Axmed ula jeedaa waa Yooxanaa 14 iyo 16.

[243] Macnaha Bentekoste waa *Kontonaad*. Waxay ahady iid Axdigii Hore ah oo ay Israa'iiliyiintu Ilaahay ugaga mahadniqi jireen barakooyinkiisa (Laawiyiintii 23:16). Ilaahay wuxuu qorsheeyey inuu barakadiisa kama dambaysta ah soo diro maalintan: Ruuxiisa Quduuska ah.

[244] Korintos Kowaad 12:27; Efesos 4:21; 5:25-32; Muujintii 19:7-9; 22:17; Yooxanaa 3:29

[245] Yooxanaa Kowaad 1:8-10; 2:1-2; Rooma 6–8

[246] Isla marka aad ka toobadkeento fikirkaaga qaldan oo aad rumaysatid Rabbi Ciise Masiix oo u dhintay dembiyadaada oo ka soo sarakacay, waxaa lagugu *"baabtiisay Masiixa"* (Rooma 6: 3), maaha biyo (hadhow ayay taasi dhici doontaa), laakiin Ruuxa Quduuska ah (Rooma 6:1-5; Falimaha Rasuullada 1:5; Korintos Kowaad 12:13). *"Lagu Baabtiisay"* waxaa loola jeedaa "la mideeyey, lala aqoonsaday." Markaad rumaysato, waxaad ka mid noqotaa qoyska Ilaah, oo ka kooban dhammaan kuwa *"ku midoobay"* Wiilkiisa aan dembiga lahayn (Rooma 6:5). Jagadaada cusub ee weligeed ah waa *"Masiixa."*

[247] Falimaha Rasuullada 24:15; Luukos 14:14; Yooxanaa 5:28-29; Daanyeel 12:2; Muujintii 20:6, 11-15; Muujintii 22:12

[248] 2 Korintos 5:10. Qorniinku wuxuu ka hadlayaa ugu yaraan shan taaj oo gaar ah (koobab/abaalmarino) oo ay muuminiintu hel karaan: 1 Korintos 9:25; 1 Butros 5:4; Yacquub 1:12; 1 Tesaloniika 2:19-20; 2 Timoteyos 4:8. Taajajyadani ma noqon doonaan innaga la inagu sharfayo, laakiinse waa Isaga sharaftiisa (Muujintii 4:10). Sayidku ma illoobi doono shaqo kasta oo wanaagsan oo dadkiisii la badbaadiyey ay ku qabteen magiciisa iyo amaantiisa (Matayos 10:41-42; Cibraaniyada 6:10).

[249] Sheikh, Bilquis. *I Dared to Call Him Father.* New York: Fleming H.

Revell Company, 1978; p. 53.
[250] 1 Yooxanaa 2:27; Yooxanaa 4:14; 14:26; 16:13; Yeremyaah 31:33-34; Efesos 4:21
[251] Waxaa jira farqi xasaasi ah oo u dhaxeeya sida robot-ka oo kale u akhrinta salaadda iyo runta Ilaahay oo si dhab ah loo fahmo iyo Ilaahay oo ducooyinkeena ka jawaaba. Rooma 8:26-27; Efesos 6:18; 1 Yooxanaa 5:14-15; Yooxanaa 14:13-14; 15: 7; Filiboy 4:6-9
[252] Rooma 12; 1 Korintos 12; Efesos 4
[253] 2 Korintos 3:18; Filiboy 1:6; 3:20-21

**CUTUBKA 29: HEERKA 3-AAD: QORSHAHA MUSTAQBALKA EE ILAAHAY**
[254] Dhowr bog hadda kaddib waxaynu Axdigii Hore ka akhrin doonaa dhowr aayadood oo nebiyadii ka sii waxyoodeen imaatinka labaad ee Masiixa oo ay qeexayaan calaamamada la socon doona soo laabashadiisa. Qaar ka mid ah aayadaha aynu eegi doono waa Sekaryaah, cutubka 14, Daanyeel 7:13-14, Sabuurradii 72, iyo Ishacyaah 9:6-7.
[255] 1 Tesaloniika 4:13-18; 1 Korintos 15:51-58
[256] Eeg cutubka 28, cinwaan hoosaadka: LABA JEER OO XUKUN AH.
[257] Akhri Efesos 5:27 iyo aayadaha ku xeeran. Mawduucan yaabka leh ayaa lagu taabtay cutubka 10 ee *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*. Qorniinku wuxuu si is dabajoog ah u tilmaamayaa Sayidku inuu yahay *"Arooska"* dadkiisuna yihiin *"Aroosadda"*. Guurku, kiisa ugu fiican, waxaa loogu talagalay inuu fikrad yar inaga siiyo, xidhiidhka dhow, ee ruuxiyanka ah ee Ilaahay qorsheynayo inuu dadkiisa abadiyan la yeesho (Ishacyaah 54: 5; 62:5; Sabuurradii 45; Gabaygii Sulaymaan; Hoosheeca 2:16,19,20; Matayos 9:15; 25:1-13; Yooxanaa 3:29; 2 Korintos 11:2-3; Efesos 5:22-33; Muujintii 21:2,9; 22:17) .
[258] Matayos 24:21; Muujintii 7:14; Qeexidda ugu dhammaystiran ee Wakhtiga Dhibaatada (Fitnada) Badan jireyso waxaa laga helayaa Muujintii, cutubbada 6 ilaa 19.
[259] Rooma 11:26-27. **U fiirso**: Dhacdadani waxaa hore loogu sawiray qisada Yuusuf ee Bilowgii 37-45. Isu ekaansho yaab leh!
[260] 1 Korintos 15:45-47; Rooma 5:12-21. Erayada sida *"Aadankii Koowaad"* iyo *"Aadanka Dambe"* ayaa sidoo kale lagu sheegay cutubka 16 ee *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*. Sida dembigii Aadan u sababay dadka oo dhan inay u dhintaan, ayaa Ciise xaqnimadiisa iyo dhiiggiisii uu daadiyey waxay nolosha weligeed ah ugu soo celinaysaa dhammaan kuwa rumaysan.
[261] 2 Tesaloniika 1:7-10; Muujintii 19:6-14; Yuudas 14; Sekaryaah 14:5
[262] Ishacyaah 53:7; Yooxanaa 1:29; Muujintii 5:5; 2 Tesaloniika 1:5-10;

Yooxanaa 3:17-18; 12:47; Daanyeel 9:24-27; Is barbardhig Ishacyaah 53 iyo Sekaryaah 14. Sidoo kale u fiirso kala duwanaanshaha u dhexeeya *"silica"* iyo *"ammaanta"* ee aayadahaas: Luukos 24:25-26; 1 Butros 1:10-12; Cibraaniyada 2:9; Filiboy 2:5-11; Sabuurradii 22; iwm

[263] Sabuurradii 72 waxaa cinwaan looga dhigay: *"Sabuur Sulaymaan."* Waxay u muuqataa in Sulaymaan qoray Sabuurkan, in kastoo uu ku soo gabagaboobayo hadalkan: *"Baryayooyinkii Daa'uud ina Yesay way dhammaadeen."* (Sabuurrada 72:20) Aayaddani waxay tilmaamaysaa dhammaadka qaybta labaad ee shanta qaybood ee ku dhex jira Buugga Kitaabka Sabuurrada. Daa`uud wuxuu ahaa qoraaga ugu muhiisan ee qaybtan labaad.

[264] Yaa abadiyan la xukumayaa? *"**fulayaasha** [iyo kuwa] **aan rumaysadka lahayn**,"* taas macnaheedu waaam kuwa aan weligood akhbaarka Ilaahay rumayn waayo waxay waxay ka baqayaan waxa ay reerkooda iyo saaxiibbadooda odhan doonaan. *"Ha ka baqina kuwa jidhka dila, laakiin aan karin inay nafta dilaan, waxaadse ka baqdaan kan jahannamada ku hallayn kara nafta iyo jidhkaba. ... Ha u malaynina inaan u imid inaan nabad dhulka u keeno; uma aan iman inaan nabad keeno, laakiin inaan seef keeno. Waxaanse u imid inaan nin cadow kaga dhigo aabbihiis, gabadhna hooyadeed, naagna soddohdeed. Nin cadowgiisu waa dadka gurigiisa. Kan aabbihiis iyo hooyadiis iga jecel, ima istaahilo, oo kan wiilkiisa iyo gabadhdiisa iga jecel, ima istaahilo."* (Matayos 10:28,34-37)

**CUTUBKA 30: SII QOORAANSIGA JANNADA**

[265] Matayos 13:24-30. Masaalkan Ciise wuxuu caddeynayaa isku darka wanaagga iyo xumaanta inay jiri doonaan waqti xaddidan oo keliya.

[266] Qaybta ugu soo hartay cutubka koowaad ee Muujintii waxay bixisaa sharaxaad laga naxo oo ku saabsan Sayid Ciise, sawir isaga ka duwan oo ka duwan kan lagu arko buugaagta, filimada, iyo diimaha badankood.

[267] Markos 3:14-19; Yooxanaa 19:26-27; Yooxanaa wuxuu qoray kutubta soo socda ee Kitaabka Quduuska ah: *Injiilka Yooxanaa; 1 Yooxanaa; 2 Yooxanaa; 3 Yooxanaa* iyo *Muujintii*.

[268] Dhagaxa yasbid wuxuu leeyahay midabyo badan. Dhagaxa sardiyos guud ahaan waa casaan. Midabkiisu wuu qoto dheeraadaa marka iftiinka loo bandhigo.

[269] Bal eega kan carshiga ku fadhiya. Is Barbardhig Ishacyaah 6 (Waxyigii uu Ishacyaah arkay, oo sidoo kale lagu sheegay cutubka 15 ee buuggan *Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*) iyo Yooxanaa 12:36-41.

[270] Bilowgii 12:2-3; Matayos 1. (Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ballanqaadyadii Ilaah ee Ibraahim, dib u eeg cutubka 20 ee buuggan

*Ilaah Keliya iyo Kitaab Keliya*.)

[271] Tusaale ahaan, sheeko xariirooyinka caanka ah ee Cinderella, oo markii ugu horreysay looga sheekeeyay Shiinaha, waxay sidoo kale ku timid noocyo loogu talagalay Yurub, Ameerika, Faaris, Ciraaq, Masar, Kuuriya, Hindiya, iwm. Hilowga madaxfurashada iyo nolosha weligeed ah waxay ku xirantahay quluubta dadka adduunka. Sulaymaan baa qoray: *"Wax kastuu* [Ilaahay] *ka dhigay inay wakhtigooda quruxsanaadaan, oo haddana daa'imnimadii ayuu qalbigooda ku beeray, hase ahaatee binu-aadmigu ma uu garto shuqulkii Ilaah sameeyey* ***tan iyo bilowgii ilaa ugudambaysta****."* (Wacdiyahii 3:11)

# DIB UGA FEKERKA SOCDAALKEENII

## TUSMAYN KA WADA HADALKA BUUGGAN

### SU'AALO NAKHTIIN U AH CUTUBBADA



**Su'aalaha qaybtaan waxaa loogu talagalay inay kaa caawiyaan inaad ka hesho faa'iidada ugu badan safarkaaga adoo adeegsanaya Qorniinka. Ma fahantay farriinta ugu muhiimsan ee nebiyada? Miyaad rumaysan tahay farriintaas? Diyaar ma u tahay inaad dib dadka kale ugaga sheekeyso qisada Ilaahay laahay? Ka fikirida qaybtaan ugu dambeysa waxay kugu caawin kartaa inaad uga jawaabto su'aalahan si hufan iyo kalsooni leh.**

**Waxaad si xor ah nuqul uga sameeysan kartaa su'aalaha nakhtiinka cutubbada. Waxaa loo isticmaali karaa barasho shakhsiyeed ama daraasadaha koox-kooxeedyada yar yar, fasallada, xabsiyada, guryaha, ama koorsada waraaqaha.**

***"Ilaahow, i baadh, oo qalbigayga garo… Oo igu hoggaami jidka weligiis ah."*** — Nebi Daa'uud (Sabuurradii 139:23-24)



# 1

# Iibso Runta

1. Iyada oo adduunka oo dhan laga haysto 10,000 oo diimood, suurta gal ma tahay in la kala saaro runta iyo qaladka? Sheeg aragtidaada shakhsiyeed. (Bogagga 7-8)

2. Kitaabka Quduuska ahi waa kitaabka adduunka abid loogu iibsasho badan yahay, luuqadaha ugu badana lagu turjumey. Aragtidaada, muxuu sidaas caan ugu noqday? (Bogagga 8)

3. Sheeg saddex waxyaalood oo Quraanku ka sheegay Qorniinka Baybalka. (Bogagga 11)

4. Maxaad u baahan tahay inaad ka ogaato qof, ka hor intaadan kaas si dhab ah u aaminin? Maxaad u baahan tahay inaad ka ogaato Ilaah ka hor intaadan isaga isku hallayn? (Bogagga 11)

5. Ma u malaynaysaa inay suurtagal tahay inaad si hubaal ah u ogaato meesha aad aakhiro dambayn doonto? Sharax jawaabtaada. (Bogagga 17-18)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Maahmaahyadii 23:23 *"Runta soo iibso, oo ha sii iibin, Oo weliba waxaad ku sii darsataa xigmadda iyo edbinta iyo waxgarashada."* (Bogagga 7,18)



# 2

# Ka Guuleysiga Caqabadaha

1. “Waad aragtaa, laakiinse uma fiirsatid” ayuu Sherlock Holmes ku yidhi Dr. Watson. Waa maxay farqiga u dhexeeya “aragga” iyo “u fiirsashada”? (20)

2. Qor saddex cudurdaar oo dadka aqoonta lihi ay ka bixin karaan inaanay wakhti u hayn inay akhriyaan kitaabka adduunka ugu caansan. Ma u malaynaysaa in cudurdaarradan midkoodna ansax yahay? (20-34)

3. Ma xigmad baa in loo diido farriinta Kitaabka Quduuska ah qaab nololeedka ceebta ah ee ay ku nool yihiin dadka ku andacooda inay kaas rumaysan yihiin daraadeed? Sharax mowqifkaaga. (21-22)

4. Waxaad sheegtaa saddex arrimood oo muhiim ah dadka ka caawin kara inay fahmaan Baybalka. (31)

5. Sheeg hal ama laba sababood oo ah sababta uu Baybalku uga kooban yahay Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub. (32-34)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Hoosheeca 4:6: *“Dadkaygu waxay u baabba’aan aqoondarro daraadeed.”* (19)



# 3

# Beddelaad mise Xafidaad?

1. Sida uu Qur'aanku sheegayo, waa maxay ulajeeddada uu Ilaahay bini'aadanka ugu muujiyey Qorniinka Baybalka (Towreedda, Sabuurrada, Injiilka)? (36)

2. Waa maxay saddexda su'aalood ee qotoda dheer ee aad weydiin kartid qof kasta oo sheegta in Kitaabka Quduuska ah laga been abuurtay? (37-39)

3. Aqoonyahanno badan ayaa u haysta in Kitaabka Quduusku yahay qoraalka ugu fiican ee taariikhda la diiwaangeliyey. Fikraddaada arrintan ku saabsan sharax. (41-43)

4. Waa maxay farqiga u dhexeeya *qoraal gacmeedka qadiimka* ah Baybalka iyo *tarjumaadda* Baybalka? (44)

5. Waxaad sheegtaa laba ama saddex sababood oo dhab ah dad badani isaga indho tiraan Kitaabka Quduuska ah. (46-48)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Luukos 16:31: *"Haddii ay maqli waayaan Muuse iyo nebiyada, in kastoo qof kuwii dhintay ka soo sara kaco, la oggolaysiin kari maayo inay rumaystaan."* (47-48)



# 4

# Sayniska iyo Baybalka

1. Waxaad sheegtaa saddex xaqiiqo cilmiyeed oo kumanaan sanno ka hor lagu shaaciyay Kitaabka Quduuska ah, kuwaas oo uu sayniska casriga ahi qiray qarniyadii u dambeeyay. (51-53)

2. Kitaabka Quduuska ahi ma wuxuu u baahan yahay iimaan bilaa fahan ah ama rumaysi caqliyan ah? Sharax jawaabtaada. (53-54)

3. Sidee ayay taariikhda iyo cilmiga waxyaalaha dhulka korkiisa/hoostiisa laga helay u xaqiijinayaan saxnaanta Kitaabka Quduuska ah? (54-57)

4. Waa maxay caddaynaysaa caraynta Quraanka ee ku qoran suuradda 2:23? Sharax. (58-57)

5. Sayniska, cilmiga waxyaalaha dhulka korkiisa/hoostiisa laga helay ee qadiimiga, iyo gabayadu miyay keligood caddayn karaan "kitaab quduus" ku-sheeg ah inuu yahay Eraygii Ilaah waxyooday? Difaac fikraddaada. (57-59)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Ayuub 38:4: *"Markaan dunida aasaaskeeda dhigay xaggee baad joogtay? Haddaad waxgarad tahay, taas ii sheeg."* (49)



# 5

# Saxiixa Ilaahay

1. Miyaynu ku kalsoonaan karnaa in waxa Kitaabka Quduuska ahi ka sheegayo waagii hore, hadda, iyo mustaqbalka ay sax yihiin? Sharax. (60-61, 70)

2. Waa maxay farqiga u dhexeeya saadaasha laga helayo Kitaabka Quduuska ah iyo saadaasha ay sameeyeen dhakhaatiirta, saaxiriinta, faalallowga, iyo kuwa wax sii sheegaa? (61)

3. Sheeg wax sii sheegid kitaabi ah oo taariikhda cilmaaniyadu xaqiijinayso in si hufan loo dhammaystiray. (62-69)

4. Waa maxay ujeeddada wax sii sheegidda ee Kitaabka Quduuska ah? (70)

5. Qaabkee ayaa loo fuliyaa waxsii sheegista “Saxiix Ilaah”? (60-61, 70-72)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Yooxanaa 13:19: *“Hadda dabadeed waxaas ayaan idiin sheegayaa intaanay dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan inaan ahay Isagii.”* (70)



# 6

# Markhaatifur Aamin ah

1. Aragtidaada, maxaa hal markhaati oo aadane ah ugu filnayn xaqiijinta runta? (74)

2. Maxay yihiin labada "markhaati" ee ku saabsan Ilaah la siiyay dhammaan dadka meel kasta oo ay joogaan? (74)

3. Sheeg toban qof oo Ilaah u qoray inuu farriintiisa ugu qoro aadanaha. (75)

4. Sidee loo tijaabin karaa aaminnimada markhaatiga? (77)

5. Sideen ku kala sooci karnaa nebi dhab ah iyo nebi been ah? (78-83)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Ka hadal Matayos 7:15-17: *"Iska jira nebiyada beenta ah, kuwa idiinku imanaya iyagoo qaba dharka idaad, laakiin hoosta ka ah yeey wax boobaysa. Midhahooda ayaad ku garan doontaan. ... geed kasta oo wanaagsanu midho wanaagsan u dhalaa, geedkii xumina midho xun u dhalaa."* (79)



# 7

# Aasaaska

1. Wacdigii Ciise ee Buurta, maxay ku kala duwanaayeen ninka caqliga badan iyo ninka nacaska ah? Maxay aasaasyadu muhiim ugu yihiin dhismayaasha — iyo caqiidooyinka? (84-85)

2. Kitaabka Bilowgii (macnihiisu waa *asal*) wuxuu jawaabo ka bixinayaa waxyaabo badan oo ka mid ah waxyaalaha qarsoon ee waaweyn ee nolosha. Maxay yihiin qaar ka mid ah su'aalaha nolosha ugu waaweyn? (85)


3. Markaan sheeko sheegayno, halkee ayaan ka bilaabaynaa Sababta? (86)

4. Qaab noocee ah ayaa runta Ilaahay muujiyey loogu barbardhigayaa dhirta iyo uurjiifka? (86-88)

5. Muxuu qoraaga saaxiibkiis ku yeeshay Lubnaan markuu ogaaday inuu isagu bartay Kitaabka Quduuska ah? (88-89)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Soo koob waxa uu Ilaahay ku sheegayo Ishacyaah 55:9: *"Maxaa yeelay, sida samooyinku ay dhulka uga sarreeyaan ayay jidadkaygu jidadkiinna uga sarreeyaan, oo ay fikirradayduna fikirradiinna uga sarreeyaan."* (90)



# 8

# Waa Kuma Ilaahay?

1. Aragtidaada, maxaa sababay, in cutubka koowaad ee kitaabkiisa, Ilaah aanu isku dayin inuu caddeeyo jiritaankiisa? (93-96)

2. Maxay yihiin malaa’igahu muxuu Ilaahay u abuuray? (97)

3. Sidee baa Ilaah hal u noqon karaa, haddana joogi karaa wax ka badan hal meel markiiba? (96, 99-100)

4. Maxay muhiim noogu tahay inaan wax ka ogaanno shakhsiyadda iyo dabeecadda Ilaahay? (101)

5. Qor liistada dabeecadaha (astaamaha) Eebbe ee uu ku muujiyey lixda maalmood ee abuurka. (101-109) Lixdaas sifo, ma jirtaa mid aad maanta si gaar ah ugu mahadnaqdo? Sababta?

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Sabuurradii 33;9: *“Isagu wuu hadlay, wayna noqotay, Oo wuu amray, wayna adkaatay.”* (104)



# 9

# Mid La Mid Ahi Ma jiro

1. Cutubka ugu horreeya ee Bilowgii, Ilaah, oo ah mid keliya, ayaa iskiis isugu baraya magac u yaal badan oo ah "Annaga" iyo "Keenna". Maxaad u aragtaa inay tahay sharaxaadda ugu wanaagsan ee tan? (110-114)

2. Mideeyaha saddex-ka-mid ah nolol maalmeedka ma naga caawin karaan inaan si fiican u fahanno dabeecadda isku dhafan ee Abuurahayaga? Sharax. (114-116)

3. Muxuu erayga "Wiilka Ilaah" ka dhiganayn? (118-120)

4. Sheeg saddex waxyaalood oo Qorniinku ka sheegayo oo ku saabsan Ruuxa Quduuska ah. (120-121)

5. Sidee bay Baybalka qeexitaankiisa Eebbe uga duwan yahay fikradda caanka ah ee ah in Ilaah yahay xoog aan la garan karin? (122-125)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Sabuurradii 9:10: *"Oo kuwa magacaaga yaqaanna way isku kaa hallayn doonaan, Waayo, adigu RABBIYOW, ma aad dayrisid kuwa ku doondoona."* (122)



# 10

# ABUURITAAN KHAAS AH

1. Ninkii ugu horreeyey iyo naagtii ugu horreysay waxaa la abuuray “aragga Ilaah.” Sheeg saddex astaamood oo aadamigu leeyahay oo taas xaqiijinaya. (126-127)

2. Qalabkee ayuu Eebbe ku abuuray samooyinka iyo dhulka? Muxuu ku abuuray aadanahii ugu horreeyey? (127)

3. Sheeg laba ujeeddo oo waaweyn oo Eebbe u abuuray aadanaha. (130, 135-138)

4. Maxay yihiin laba dabeecadood oo xad-dhaaf ah oo dumarka duleeya kana soo horjeedda qorshaha Eebbe ee aadanaha? (132)

5. Waa maxay muhiimadda maalinta toddobaad ee abuurku? (138)

ADIGA OO ERAYADAADA ISTICMAALAYA

Sharax Yooxanaa 8:35: *“Oo addoonkuna guriga kuma sii jiro, wiilkuse waa ku sii jiraa weligiis.”* (136)



# 11

# Bilowgii Sharka

1. Wax kasta oo Eebbe abuuray waxay ahaayeen kuwo wanaagsan oo kaamil ah. Haddaba Shayddaanka iyo dembigu xaggee bay ka yimaadeen? (140-141)

2. Nebiyada Eebbe waxay bixiyaan qeexitaanno badan oo cad oo dembiga ah. Sheeg mid ka mid ah qeexitaannadaas ka dibna ku muuji sheeko shaqsiyeed. (141-143)


3. Muxuu yahay eray-sawir Kitaabka Quduuska ah oo lagu muujiyo cadaabta? (143)

4. Waa maxay mid ka mid ah ujeeddooyinka Shaydaanku? (144-145)

5. Muxuu RABBIGU ku yidhi waxay ku dhici doonaan dadka hadduu cuno midhaha geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta? (145) Shaydaanku muxuu yidhi inuu dhici doono? (147)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Yacquub 2:19: *"Waad rumaysan tahay in Ilaah yahay mid keliya. Taas waad ku wanaagsan tahay. Xataa jinniyaduna sidaas way rumaysan yihiin—wayna gariiraan!"* (149)



# 12

# Qaynuunka Dembiga iyo Dhimashada

1. Waa maxay eraygu sida ugu fiican u qeexayo dhimashada? Sidee laan jaban u muujineysaa tan? (152)

2. Ilaah wuxuu Aadan ku yidhi, "Maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa." (Bilowgii 2:17) Qaabkee buu Aadan u dhintay maalintii uu cunay midhihii laga reebay? (153, 155)

3. Sidee dembiga Aadan adiga iyo qoyskaaga saameyn ugu yeeshay? (153-155)

4. Sheeg saddexda nooc ee dhimashada ee ku faafay bini-aadamka natiijada ka dhalatay hal dembi oo uu galay Aadan. Waa noocee dhimashada ugu naxdinta badan? (153-157)

5. Qaabkee ayuu dembigu u soo saaraa ceeb? (157-158)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax qaynuunka dembiga iyo dhimashada ee lagaga hadlay Yexesqeel 18:20: *"Nafta dembaabtaa way dhiman doontaa."* (160)



# 13

# Naxariis iyo Caddaalad

1. Muxuu samayn karaa nin uusan Ilaah sameyn karin? (161)

2. Arrintii ka dhacday maxkamaddii mala-awaalka ahayd, sidee naxariista garsooraha uga hor timid caddaaladda? (162-163)

3. Muxuu Ilaahay u indho tiri karin caddaaladda si uu naxariis ugu muujiyo? (163-165)

4. Muxuu Eebbe u waydiiyey Aadam iyo Xaawa markuu ogaa wixii ay sameeyeen? (167)

5. Muxuu Ilaah ugu eedeeyey Aadam mas'uul ka ahaanshaha hoggaaminta aadanaha oo dhan jidka dembiga iyo dhimashada? (167-168)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Sabuurradii 89:14: *"Carshigaaga aasaaskiisu waxa weeye xaq iyo caddaalad, Oo naxariista iyo runtuna way ku hor socdaan."* (163)



# 14

# Habaarkii

1. Waa maxay muhiimadda “abeesadu”? Muxuu Eebbe u habaaray? (169-171)

2. Waa kuma “Balanqaadka naagta”? Muxuu ku gaar yahay ereygan? (171)

3. Sheeg qaar ka mid ah siyaababaha inkaartu u saamaysay adduunkeena. (172-174)

4. Murugada, silica, iyo geeridu ma qayb caadi ah oo ka mid ah naqshaddii hore ee Eebbe u abuuray? Sharax. (173-175)

5. Aadan iyo Xaawo markay dembaabeen kadib, waxay dareemeen ceeb waxayna samaysteen caleemo berde oo ay iyagu iska dhigtaan. Ilaah miyuu aqbalay isku-daygooda? Muxuu Eebbe u fidiyay si ay ceebtooda u daboolaan? (175)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax micnaha “nimcada” lagu tusay Bilowgii 3:21: *“RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisii u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay iyagii.”* (175-176)



# 15

# Dhibaato Laba-Jibbaaran

1. Maxay muhiim u tahay inaan aragti sax ah ka leenahay nafteena? (180)

2. Maxay muhiim u tahay inaan aragtida saxda ah ka qabno Ilaah? (181-183)

3. Immisa ka mid ah Tobanka Amar ayaad si dhammaystiran u addeecday? (184-186)

4. Adeegsiga muraayad si loo muujiyo, sharax ujeedka koowaad ee Tobanka Amar. (187-188)

5. Waa maxay binu-aadmiga "laba jibbaarka" Ilaah hortiisa? (190)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Yacquub 2:10: *"Ku alla kii sharciga oo dhan xajiya oo qaynuun keliya ku gafa, kulli wuu ku eedaysan yahay."* (186)



# 16

# Farcanka Naagta

1. Maxay muhiim u ahayd inuu Masiixu ka dhasho naagta, laakiin aanu ka dhalanin nin? (192-194)

2. Sharax sababta Qorniinku ugu tilmaamayo Masiixa "Aadankii ugu dambeeyay" iyo "Ninka labaad." (196)

3. Sheeg ugu yaraan shan waxyaalood oo nebiyadu sii sheegeen oo ku saabsan Masiixa soo socda. (196; Sidoo kale eeg bogagga 67-69)

4. Jibriil wuxuu u sheegay Maryan in cunugga ay dhashay loogu yeeri doono "Wiilka Ilaah." Dib u akhri Luukos 1: 26-37 (bogga 198), dib u eeg boggaga 118 iyo 120 (Cutubka 9aad), ka dibna sharaxaad kooban ka bixi oo ku saabsan sababta Ciise loogu magacaabay Wiilka Ilaah.

5. Waa maxay macnaha tooska ah ee magaca "Ciise"? (199)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Luukos 2:10-11: *"Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah."* (201-202)



# 17

# Waa Kuma Kani?

1. Muxuu Masiixu gabi ahaanba uga duwanaa aadanaha oo dhan? (203-204)

2. Maxay hoggaamiyeyaasha diinta ee Yuhuuddu isku dayeen inay dhagxiyaan Ciise? (211, 216, 219)

3. Miyaad ku raacsan tahay kuwa yiraahda Ciise "nebi kama badin"? Sabab? (209, 218)

4. Qaab noocee ah ayuu shaqooyinka Ciise u ansaxiyay ereyadiisii? (221)

5. Miyaad ku raacsan tahay in jinniyada ay muujiyeen ixtiraam ka weyn Ciise marka loo eego hoggaamiyeyaasha diinta? Difaac booskaaga. (222-223)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Ka jawaab su'aasha Ciise ee Matayos 22:42: *"Yuu idinla yahay Masiixu? Waa Ina ayo?"* (207-211)

# 18

# Qorshaha Abadiyanka ah ee Ilaahay

1. Qaabkee ayaad uga neceb tahay nebiyada? (224)

2. Sideed ugu sharaxi lahayd ilmaha waxa loola jeedo “wax furashada” wax ama qof? (226-227)

3. Sheeg laba dhacdo oo waawayn oo nebi Daa’uud ka sheegay Masiixa. (228)

4. Waa maxay casharka muhiimka ah ee aan ka baran karno maahmaahdii Wolofiga ahayd, “Ma aha inay ukuni la legdanto dhagax”? (230)

5. Waa maxay qayb ka mid ah qorshihii Ilaah ee madax furashada ee Butros uu fahmi waayey? (231-232)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Galatiya 4:4-5: *“Markii wakhtigii buuxsamay, Ilaah wuxuu soo diray Wiilkiisii, isagoo naag ka dhashay oo sharciga ku hoos dhashay, inuu furto kuwii sharciga ku hoos jiray inuu carruurtiis inaga dhigo.”* (226)



# 19

# Qaynuunka Allabariga

1. Xaqiiqda dhabta ah ee aan fiicnayn ee ay Aadan iyo Xaawo ogaadeen wax yar uun ka dib dhalashadii ugu horreysay ee dhalashadooda. (233-235)

2. Sheeg labada sababood ee ugu muhiimsan ee Ilaah u aqbalay Haabiil iyo qurbaankiisa. Sheeg labada sababood ee ugu muhiimsan ee Ilaah u diiday Qaabiil iyo qurbaankiisa. (237-239)

3. Ma ogtahay wax kasta oo aad samayn karto si aad u tirtirto dunuubtaada? Maxay macquul u aheyn in deyn dembi lagu bixiyo duco iyo shuqullo wanaagsan? (239)

4. Ilaah waa inuu ciqaabaa dembiga oo dhan. Ma jirtey waddo uu Eebbe ku ciqaabo dembiga isagoon ciqaabin dembiilaha? (240-242)

5. Sharax sida sharciga allabarigu u "uumeeyey" sharciga dembiga iyo dhimashada. (240-243)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Qeex "Kafaaro gudka" oo sharax Erayada uu Ilaahay Muuse ku yidhi Laawiyiintii 17:11: *"Waayo, jiidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa dhiigga; oo anna waxaan meesha allabariga dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu kafaaro gudo, waayo, waa dhiigga waxa loogu kafaaro gudaa nolosha daraadeed."* (237-239)



# 20

# Allabari Muhiim ah

1. Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Ibraahim ka dhigi doono quruun weyn oo farcankiisana siin doono dalka Kancaan. Maxay yihiin waxyaabaha ka jira xaaladda Ibraahim labadan ballan ka dhigay kuwo u muuqda kuwo aan macquul ahayn? (245)

2. Muxuu Ilaah ugu caddeeyey Ibraahim xaq? Waa maxay macnaha "in Ilaah la rumeeyo"? (246)

3. Waxaad sheegtaa saddex dariiqo oo uu Ilaah runtiisa iyo barakadiisa ummadaha oo dhan ugaga sheekeeyay ummaddii hore ee Israa'iil. (249)

4. Ilaah wuxuu Ibraahim u sheegay inuu wiilkiisa Isxaaq u bixiyo allabari la gubo. Miyuu Ibraahim dhammeeyey inuu Ilaah baajiyay ballanqaadkiisii (inuu ka soo bixiyo umad weyn farcanka Isxaaq)? Sharax. (252; Sidoo kale eeg Dhammaadka #188)

5. Muxuu ina Ibraahim ugu dhiman waayey meeshii allabariga? (243-255)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Muuji fahankaaga Bilowgii 22:14: *"Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey Yehowah Yireh; xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, Buurta Rabbiga ayaa lagu arki doonaa."* (254)



# 21

# Dhiig Dheeraad ah oo la Daadiyey

1. Qisada Iidda Kormaridda, qaab noocee ah ayaa qoys walba oo ku nool dhulka Masar oo dhan markhaati ugu noqday dhimasho? (258)

2. Waxaad sheegtaa laba cashar oo muhiim ah oo Eebbe ugu talagalay dadka inay wax ka bartaan taambuugga. (259)

3. Maxuu sanduuqa axdigu astaan u ahaa? (261)

4. Markii taambuuggii la dhammaystiray, muxuu Ilaah samada ka soo dejiyey? (263)

5. Maxay ahayd ujeeddada xijaabku? (262) Ma jirtaa waddo uu dadku uga tago xijaabka una galo xurunta (Qaddarta). Sharax. (265)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Cibraaniyada 9:22: *"Dhiig daadin la'aan dembidhaaf ma jiro."* (256)



# 22

# Wanka

1. Waa maxay dulucda dhexe ee Buugga Eebbe? (268)

2. Magacow ugu yaraan laba siyaabood oo uu Masiixu u kaamilay calaamadihii hore loogu muujiyey taambuuggii. (269-272)

3. Adoo adeegsanaya sawir nolol maalmeedka ka mid ah, sharax waxa ay ka dhigan tahay “towbad keenka.” (272-274)

4. Muxuu Ilaah ka yiri Ciise oo uusan ka sheegi karin qof kale? (275)

5. Qaabkee bay baraarku allabaryo u bixiyay hooska iyo astaamaha qorshaha Ilaah ee bixinta deynta dembiga ee aadanaha? (277-280)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax Yooxanaa 1:29: *“Yooxanaa wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya.”* (276)



# 23

# Kaamilaadda Qorniinka

1. “Ballanku waa daruur; fulintu waa roob.” Sharax sida maahmaahdan Carbeed loogu adeegsan karo in lagu muujiyo qorshaha Ilaah ee Badbaadiyaha ugu soo dirayo dhulka. (281)

2. Ciise wuxuu xertiisii u sheegay in la dili doono inta lagu jiro Iidda Kormaridda. Maxaad ugu maleyneysaa inuu Eebbe u qorsheeyay Wiilkiisa inuu dhinto xilligan gaarka ah? (284-285; Sidoo kale eeg bogagga 257-258)

3. Iiddii Kormaridda isaga iyo xertiisii, Ciise wuxuu kala jejebiyay kibis wuxuuna u gudbay koob. Muxuu rootigu matalayay? Koobku muxuu matalayay? (285)

4. Muxuu Ciise isku difaaci waayey markay askartu u yimaadeen inay qabtaan? (286-287)

5. Muxuu wadaadka sare ugu eedeeyay Ciise caytanka? (288-289)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax labada waxyi ee Ibraahim ee Bilowgii 22, aayadaha 8 iyo 14: *“Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa ... Buurta RABBIGA ayaa lagu arki doonaa.”* (290)



# 24

# Waa La Wada Bixiyey

1. Maxaad u malaynaysaa inay tahay tii ugu xumayd ee dawladdu maalgeliso ee fulin weligeed la qorsheeyey? Qaabkee xukun dil ah ayay hoggaamiyaasha diinta iyo kuwa siyaasaddu u doorteen Ciise? (292)

2. Maxay yihiin saddexda heer ee kala-tagga ah ee dembigu keenay? Sideed u aragtaa fikradda ah, iskutallaabta dusheeda, inuu Ciise la kulmay dhammaan saddexda heer? (296 [Si aad dib ugu eegto dhimashada kala-goyskeeda oo saddex laab ah, eeg bogagga 152-157])


3. Maxay muhiim ugu ahayd Ciise inuu iskutallaabta ku dhinto? (294-300)

4. Sidee Sayid Ciise ugu xanuunsan doonaa ciqaab waara dembiilayaasha saacado yar gudahood? (297-298)

5. Maxay ahayd muhiimadda xijaabka macbudka oo kor ilaa hoos laga jeexjeexay? (300-301)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharrax Yooxanaa 19:30: *"Haddaba markii Ciise khalkii qaatay ayuu yidhi, Waa dhammaatay, markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey."* (298-300)



# 25

# Dhimashada oo laga Adkaaday

1. Kumaa bilaabay warka sheegaya in xertu xaday maydka Ciise xabaashii? Maxay u sameeyeen sheekadan? (307-307)

2. Qaab noocee ah ayay ahayd dhacdadii Ciise dhimashadiisii, aasidiisii, iyo sarakicistiisii oo u noqotay guuldaro Shaydaanka? (309-310)

3. Caddayn noocee ah ayaad soo bandhigi kartaa si aad u caddeyso inuu Ciise soo noolaaday? (310-312)

4. Bilowgii safarkii aan ku dhex marnay Qorniinka, waxaynu aragnay in Eebbe "nastay" markuu dhammeeyay shaqadiisii abuurista. Waa maxay casharka muhiimka ah ee aan ka baran karnaa tan ku saabsan shaqada Ilaah ee madaxfurashada? (315)

5. Muxuu qabtay Ciise afartan maalmood ka dib markuu soo noolaaday? Maxaa, haddii wax jiraan, aad ku aragtaa waxa ugu xiisaha badan arrintan? (316-318)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax muhiimadda 1 Korintos 15:3-4: *"Masiixu wuxuu u dhintay dembiyadeena sida Qorniinku leeyahay, waa la aasay isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sara kiciyey, sida Qorniinku leeyahay."* (309)



# 26

# Ehlu-Diin Ilaahay Ka Fog

1. Sidee Ilaah u cafiyey dembiyada ka hor dhimashadii Ciise iyo sarakicistiisa? Sidee Ilaahay maanta u dhaafa dembiyada? Ku dar sharaxaad kooban oo ku saabsan farqiga u dhexeeya dembiyada la daboolay iyo dembiyada la joojiyay. (320-323; Sidoo kale eeg bogagga 276-280)

2. Maxay sheyga iimaankeennu uga muhiimsan yahay xoogga (ama inta) iimaankeenna? (322-323)

3. Miyaad u malaynaysaa inuu Eebbe dadka u oggolaan doono gurigiisa jannada haddii camalkooda wanaagsan uu ka weynaado xumaantooda? Sharax mawqifkaaga ku saabsan "fikradda miisaanka" ee badbaadada. (323-324)

4. Sida ku xusan Kitaabka Quduuska ah, sidee dambiile uga badbaadi karaa xukunka weligiis ah oo uu ugu qalmaa inuu weligiis ku noolaado joogitaanka Ilaah oo saafi ah oo kaamil ah? (325-327)

5. Maxay shuqullada wanaagsan u yihiin natiijada badbaadada halkii looga baahnaa badbaadada? (326-328)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax Falimaha Rasuullada 16:31: *"Rumayso Rabbi Ciise, waadna badbaadi doontaa."* (337)



# 27

# Heerka 1-aad: Qorshihii Hore ee Ilaahay

1. Cutubka 27 wuxuu ka kooban yahay sheekooyin isbadal ku saabsan musaafir run doon doonaya (341-346), dambiile iskutallaabta lagu qodbay (348-350), qabiil dad cun (350-350), gabar isku dayday inay is disho (351-352), qiiro diineed (352-353), iyo nin dhalinyaro Muslim ah oo cibaado badan (360-362). Sheeko noocee ah ayaad sida ugu fiican ku aqoonsaneysaa iyo sababta?

2. Dembiilaha iskutallaabta dusheeda, Ciise wuxuu ku yidhi, "Maanta waxaad ila joogi doontaa Jannada!" Muxuu dambiilehan toobadkeenka ah weligiis kaga badbaadiyey? Sidoo kale, iyada oo lagu saleynayo ballanqaadkii Ciise, goobtee ayuu dambiilaha la badbaadiyey isku helay daqiiqaddii uu dhintay? (348-350)

3. Sideed ugu sharxi lahayd ilmaha fikradaha caddaaladda, naxariista, iyo nimcada? (355)

4. Waa maxay ninka "laba-jibbaar"? Muxuu yahay "daaweynta laba-geesoodka ah" ee Ilaah? (357-358)

5. Sida laga soo xigtay Kitaabka Quduuska ah, dadku ma ogaan karaan halka ay weligood ku qaadan doonaan? Ma ogtahay halkaad aadi doontid markaad dhimato ka dib? Sharax jawaabtaada. (360-363)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharax 2 Korintos 5:21 *"Wuxuu isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta Isaga."* (358-359)

# 28

# Heerka 2-aad: Qorshaha Hadda ee Ilaahay

1. Maxay dadka intooda badani maanta ugu nool yihiin cabsida? (364)

2. Sida ku xusan Qorniinka, waa kuma Ruuxa Quduuska ahi muxuuuse u qabtaa kuwa kuwa Masiixa isku halleeyey? (365-366)

3. Miyuu jiraa qof mar kale ku dhashay Ruuxa Ilaah inuu doonayo inuu sii wado dembiga oo uu Ilaah ka xumaado? Adoo adeegsanaya sawirka "Liisaska ama Jacaylka", sharax farqiga u dhexeeya qofka diin uun raacaya iyo qof run ahaantii ku raaxeysta xiriir dhab ah oo lala yeesho Ilaah. (374-376)

4. Waa maxay macnaha dhabta ah ee baabtiiska biyaha? (376-377)

5. Waxa jira farqi muhiim ah oo u dhexeeya booska rumaystaha iyo xaaladda rumaystaha. Adoo adeegsanaya tusaalaha aabbaha/ wiilka, sharax farqiga u dhexeeya. (380-382)

**Adiga oo erayadaada isticmaalaya**

Sharax 1 Butros 1:16: *"Waa inaad quduus ahaataan, waayo, aniguba quduus baan ahay."* (382)

# 29

# Heerka 3-aad: Qorshaha Mustaqbalka ee Ilaahay

1. Sharax saddexda marxaladood ee qorshaha Ilaah ee ah inuu burburiyo Shaydaanka oo uu dembiga iska fogeeyo. (386; sidoo kale eeg bogga 346)

2. Sheeg sida imaatinka labaad ee Masiixu uu si weyn uga duwanaan doono imaatinkiisa koowaad. (394)

3. Dib u aqriso Sabuurka 72: 7-19, ka dibna qor qaar ka mid ah siyaabaha ay taliyayaasha adduunku iyo dadyowguba u muujin doonaan u hoggaansamiddooda Ciise Masiix-Boqorka. (396-398)

4. Inta lagu jiro kunka sano ee xukunka Ciise Masiix, habaarka uu keenay dembiga Aada inta badan waa la qaadi doonaa. Saamayn noocee ah ayey ku yeelan doontaa meeraha dunidan? (401-402)

5. Miyaad ku raacsan tahay in Muujintii 20: 10-15 ay sharaxayso dhacdada ugu weyn taariikhda? Sharax jawaabtaada. (404-405)

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sharaxa waxa aad ku aragtid 1 Yooxanaa 3:2: *"Weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale, waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay."* (407)

# 30

# Sii Qooraansiga Jannada

1. Qaab noocee ah ayay aragtida adduunka ee "yin-yang" uga soo horjeeddaa Kitaabka Quduuska ah? (409-410)

2. Sheeg labo aragti oo qaldan oo dadku ka qabaan Jannada. Waa maxay diiradda dhabta ah ee guriga jannada ee Ilaah? (413)

3. Sheekada cajiibka ah ee madaxfurashada ee ka bilaabatay Bilowgii waxay ku dhammaatay Muujintii. Qaadashada wax aan ka badnayn daqiiqad ama laba (ama, haddii la qoro, 300 oo erey ugu badnaan), soo koobo sheekada ku saabsan sida Eebbe uga badbaadiyay ciirsi la'aan, dembiilayaasha rumaystay Shaydaanka, dembiga, iyo dhimashada weligeed ah. (410, 419-423)

4. Maxaad ugu malaynaysaa inay dadku ugu raaxaystaan sheegista sheekooyinka "farxad-weligood-kadib"? Weligaa farxad kadib miyaa ku noolaan doontaa? Muxuu salka ku hayaa jawaabtaadu? (421-425)

5. Sidee ayuu safarkan degdegga ah ee ku dhex marayaa Qorniinka kuu anfacay adiga?

### Adiga oo erayadaada isticmaalaya

Sheeg meesha aad kaga habboon tahay sawirka lagu bixiyey Muujintii 21:27: *"Oo gudaheedana sinaba uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been; laakiinse waxaa keliyahoo geli doona kuwa ku qoran kitaabka nolosha ee Wanka."* (425)

# Xusuus qor

# Xusuus qor

# XUSUUS QOR

ROCK INTERNATIONAL

# BOQORKA AMMAANTA FILINKA

Dhegeysi-Arag Buuggan, Oo Ku Soo Jiidanayaa, Fahankaagana Furaya





## Boqorka Ammaanta


Safarkan lagu lagu dhex marayo Qoraallada Nebiyadu wuxuu kuugu yeedhayaa inaad la kulanto Ilaaha keliya ee runta ah, oo fahanto qorshihiisa uu kaaga badbaadinayo mugdiga iyo caasinimada, oo kaaga dhigayo mid u qalma inuu abidkiis Isaga kula noolaado Boqortooyadiisa iftiinka ah. Filinkan sheegaya qisadan xiisaha iyo qiirada leh, waxaa loogu talogalay da' kasta waddankay rabaan ha joogaane.

**www.rockintl.org/rock-video/boqorka-ammaanta-somali-king-of-glory**


**www.rockintl.org/rock-document/sheekadaada-your-story-somali**




**www.rockintl.org/rock-audio/the-way-of-righteousness-somali**




**99 Raadiyaha Barnaamijyada**



**www.rockintl.org/resources**

**www.king-of-glory.com**

# ILAAH KELIYA
# IYO KITAAB KELIYA



## DADKA LA SII WADAAG!

Si cad oo faseex ah, ayuu socdaalkan martiqaadka iyo waxbarrida leh ee Qorniinka nebiyada lagu dhex marayaa u bixinayaa rajo adduunka iyo aakhiroba ah. Waxaa lagu heli karaa luuqado badan.




**www.One-God-One-Message.com**

*"Markii aan akhriyay buuggan, caqliga ku jira Kitaabka Quduuska ahi macno buu samaynayaa oo waan fahmayaa. Wuxuu igu abuuray inaan xiiseeyo akhrinta Kitaabka Quduuska ah."* — Mohammed, Bariga Dhexe

*"Buuggu waa run miidhan; qaabka qoraalku waa mid aad u wanaagsan; wax aadanaha dan u ah baa ka buuxa."*
— William MacDonald, Qoraaga Sharraxaadda Baybalka Muuminiinta

Relief Opportunity & Care for Kids

ROCK INTERNATIONAL

Resources Of Crucial Knowledge

**www.rockintl.org**

ROCK International waa urur aan macaash-doon ahayn oo doonaya in duni dhaawacan loo muujiyo jacaylka Ciise; meel carruurtu ka helaan gargaar, fursad, oo kaga badbaadaan qatarta, xadgudubka, iyo dayaca; meel ay yar iyo weynba si isku mid ah uga helaan ilo u horseeda faham cad oo ku saabsan qisada iyo farriinta ugu wanaagsan ee abid loo sheegay.

noloshacusub@gmail.com
Facebook address: https://www.facebook.com/BishaaroWeyn